NOOLOL GUUL LEH
Ulf Ekman
Waa daabacadda Word of Life Publications

NOOLOL GUUL LEH
A life of victory,
English edition, Copyright 1993 Ulf Ekman
Somali translation, Copyright 2013 Ulf Ekman
Word of Life Publications, Box 17, S-751 03 Uppsala, Sweden
www.ulfekman.org

ISBN 978-91-7866-902-8

All rights reserved.

Noolol Guul Leh,
Daabacadda Ingiriiska, Xaqdhawrkiisa 1993 Ulf Ekman
Turjumaadda Afka Soomaaliga, Xaqdhawrkiisa 2013 Ulf Ekman
Xarunta Word of Life Publications, Box 17, S-751 03 Uppsala, Sweden
www.ulfekman.org

ISBN 978-91-7866-902-8

Xaq kasta waa la dhawray.

Aayadaha Baybalka waxaa laga soo xigtay Kitaabka Quduuska ah © Society for International Ministries, 2008

Printed by
Africa Real Adventures 2013

Aqoonsi
Aayadaha Baybalka waxaa dhammaan laga soo wada xigtay Qoraalada *Kitaabka Quduuska ah*, Xadhawrka © Society for International Ministries, 2008.

Badbaado

Ilaah intuu dunidu jacayl u qabay ayuu siiyey Wiilkiisa keliya oo dhashay in mid kastoo isaga rumaystaa uusan lumin laakiinse uu lahaado nolosha weligeed ah. Yooxanaa *3:16*

1
Miyaa lagu badbaadiyey?

Waxaan rabaa inaan ku baro Qofka ah tiirka Injiilka, wuxuu ahaan kara mid aad marar badan iska reebtay si aanad ula kulmin: Ciise Masiix.

Si joogta ah ayuu isku deyay inuu ku booqdo oo ku barakeeyo oo noloshaada bedelo, laakiin waad iska fogeysay xidhiidhkaas. Fahan darro ayaa xidhiidhkaas kaa reebtay oo marar badan ayaa waxaad ku dadaashay inaad mawduuca bedesho. Laakiin hadda sidaa ha sameynin! Waxaa jiraan waxyaala badan oo ay dadka soo jeediyaan oo ay ku diidayaan xidhiidhka ay Ciise la yeelanayan, saa ay tahayna cudurdaradaas ma jirto mid ka mid ah oo kaa farxinayaan. Hadduu Ciise hadda soo geli lahaa qolka aad ku jirtid, waad xishooneysa oo cudurdaaradaada oo dhan dhulka ayaad ku tuureysa, sida caleenta geedka ka soo dhaceysa xiliyada jiilaalka. Ugu horeynta u ogolaw inuu ku fahansiyo kan uu yahay iyo waxa uu kula rabo. Qof kasta qalbigiisa oo dhan ayuu ku fahansan yahay inuu Ilaah jiro oo taasi wax shaki ah kama jiraan. Saa ay tahayna, in la rumeysto inuu Ilaah jiro la mid ma ahan in la fahmo kan uu yahay. Waa inaad Ilaah shaqsi ahaantaada si gaar ah u fahantid. Isagu ma qarsoona! Wuxuu u riyaaqaya fursad uu iskukaya muujiyo kuna fahansiyo kan uu yahay.

Qof kasta wuu og yahay inuu Ilaah jiro waxayna aqoonsanyihiin inuusan uunkan u aalin sida uu asalkiisi hore ahaa amaba uu ahaan lahaa. Qof kasta way u caddahay inay wax caadi ahayn. Qof walba wuu dhiban yahay. Malaayiin dad ah ayaa ku nool noolol uu walwal ka buuxo, noloshooda ma qanacsano oo weliba waxay dareensan yihiin inaysan ku nooleyn nolosha sida uu Ilaah uga baahan yahay inay ku nooladaan.

Qof waliba waxaa jirta marxalad noloshiisa khilaaf ku dhalineysa oo ka dhigeysa inuu yahay mid gef ku nool. Kuwa ku takhsuusay maanka baniaadanka waxay ku dadaalayaan inay dadka ka nasiyaan niyaddaas dareensineysa inay gef ku nool yihiin laakiin sidee bay taasi xal u ahaan karta marba haddii lala nool yahay asalka gefta ama uu qalbiyadooda ku jiro? Waa inuu qof wax ka qabtaa dareenka gefka e qofka ku beeran!

Baniaadmiga wuxuu ka dhintay gudaha

Kitaabka Quduuska ah wuxuu si bayaan ah ku sheegaya inaadan adduunka nasiib ku joogin. Ma ahid dhagaxda carada, ee si macno darro ah meel kastoo dunida ka tirsan lagu daadiyey. Waxaa ku uumay Ilaah. Wuu ku jacayl yahay oo sabab weyn oo muhiim ah ayuu kuu uumay. Qorsha la

yaab leh ayuu noloshaada u leeyahay oo wuxuu rabaa inaad noloshaada kaga faa'ideysatid Isaga. Kitaabka wuxuu noo sheegaya in kastoo baniaadmiga yahay uunka Ilaah, wuu ku caasiyey Ilaah oo wuxuu noqday dembiile. Wuxuu qaaday waddada la quman, Ilaah wuu ka dheraaday oo wuxuu noqday mid maskaxdiisa oo keliya ku socda.

Baniaadmiga markuu dembaabay, wuxuu nacaladeyey Erayga Ilaah. Ilaah wuxuu horey u sheegay inay natiijada dembiga tahay dhimasho. Baniaadmigu wuu dembaabay oo wuu dhintay. Marka ugu horeysa wuxuu ka dhintay gudaha. Markuu xidhiidh jaalnimo la lahaa Ilaah, wuxuu ku faraxsanaa noolol awood leh oo ay waxba ka maqneyn, oo weliba nabad iyo deganaansho leh iyo cafimaad iyo raynrayn. Waxyaalahan oo dhan waxay burbureen markuu Ilaah ku caasiyey oo waddadiisa qaaday dadeetana ku dhex dhiimbaday mugdiga. Markuu mugdiga noloshiisa guaha ah ka buuxsamay, xagga ruuxiyanka ayuu ka geeriyooday. Guud ahaan si caadi ah ayuu u shaqeynayey e laakiin gudahiisa, kaasi uu ka buuxsami lahaa jiritaanka Ilaah iyo sharafta Ilaah, wuu ka geeriyooday.

Silaca ugu weyn e aadanaha soo gaaray halkaasi ayaa lagu tilmaami kara ee dhicitaanka ugu weyn loo yaqaano haddii laga fasiro sida uu afka Ingiriiska ku dhigan yahay. Dhibka ugu weyn ma ahan waxyaalaha sida, istecmaalka maandooriyaasha, dhaarta, la dagaalanka dadka, been sheegidda, tuugnimada iyo wixii la midka ah. Amaba welwelka maskaxda qabsanayo iyo cabsida. Dhibaatada ugu weyn waxay tahay qofka oo ka dhintay gudaha oo aan isku kalsooneyn. Nolosha Ilaah meel kale ayey ku sugan tahay e ma ahan wax aad sameysan kartid ama aad garadkaaga ku heli kartid. Waa inay kaaga timaado xagga Ilaah. Waa inaad noloshaada dembiga leh ka soo laabatid oo aad nolosha cusub u hogaansantid!

Tani waa isla arinta uu Ciise ku yidhi nin madaxda diinta ka tirsanaa oo caan ahaa wakhtiyadii uu Ciise adduunka ku noolaa, sida qoran, *Nikodemos, waa inaad mar labaad dhalataa!* In qof diini ah la ahaado kuma filno nolosha iyo xidhiidhka Ilaah lala leeyahay. Dadaalka qofka wax lagu kasban karo ma ahan. Xataa ficilada wanaagsan iyo anshax wanaaga kuma filno. Waa inaad hesho nolosha Ilaah laga helo ee xaga sare nooga imaneyso oo waa inaad cusboonaatid mar kale. Waa inaad lahaatid noolol cusub e Ilaah kugu dhex beerayo!

Waa isla sababtan tan uu Ilaah Ciise adduunka ugu soo diray. Wuxuu u yimid inuu adduunka ka tirtiro waxyaalaha gumudka ku ah rumeysadka Ilaah la rumeysanayo oo la addeecayo. Sababtuna waxay ahayd inaad adigu lahaatid noloshaasi cusub uu Ilaah kula rabo si aad dib u heshid jaalnimada iyo xidhiidhka wanaagsan e aan ku luminay awowayaasheen Aadan iyo Xaawa. Waana Sababta uu Ciise iskutallaabta ugu dhintay meel magaalada Yerusaalem ka mid ah 2000 oo sanadoo ka badan oo la soo dhaafay hadda ka hore. Uma dhimanin sida nin dagaal namad ku doonayo ama sida nebi la yasay. Uma dhimanin sida nebi la silciyey sida loo silciyey kuwa qaarkood ee diimaha qaarkood aasaaseen. Ma ahayn mid iimaankiisa loo silciyey amaba nooca waxbariddiisa. Adiga ayuu kuu dhintay!

Ciise ayaa bixiyey Deentaada

Markuu adduunka imanayey, Ciise horey ayuu u fahansanaa inuu u imaaday inuu dhiman doonto. Ka bilaabata bilawgii wuu ogaa inuu yahay Wanka Ilaah e aan gefka lahayn, oo u imaaday inuu qaado dembiga dunida. Wuu ogaa inuu naga badbaadin doono inkaarta aadanaha ku dhacday e dembiga inoogu timid. Waxay ahayd inuu xaliyo natiijooyinka dembiga – taasi uu ku xalin lahaa oo keliya dhimashada ruuxiyanka ah. Ilaah wuu ina jacayl yahay dhammaanteenba, Kitaabka

wuxuu sheegaya in uu Ilaah ina siiyey Wiilkiisa keliya inuu inoo dhinto.

Ciise wuu ku waajibana inuu dhinto maxaa yeelay natiijada dembigu waa dhimasho. Edbinta dembiyadeena ayaa dushiisa ku dhacday oo xukunkii laguugu xukumi lahaa ayuu bedelkaaga qaatay. *Ciise ayaa dhintay bedelkii aad adigu dhiman lahayd*. Wuxuu bixiyey deentii aniga iyo adiga nagula lahaa, taasi uu ku bixiyey dhimashada uu iskutallaabta ku dhintay, si aan u badbaadno oo aan xor u ahaano.

Ciise noloshiisa ayuu bixiyey si aad u badbaaddo. Wuxuu xambaartay dembiyada qof kasta, qaladaadka qof kasta, kelinimada qof kasta, maskiinimada qof kasta, welwelka qof kasta, xanuunada qof kasta iyo adoonsiga. Waxyaalahan oo dhan jidhkiisa ayuu ku xambaartay. Markuu iskutallaabta ku dhintay, waxyaalahaas oo dhan Isagay la dhinteen. Maalinta saddexaad, kaddib markuu ka sara kacay dhimashada, wuxuu ahaaday kan dhimashada ka guuleystay, dhimashada iyo natiijadeeda oo dhan ayuu burburiyey.

Dhimashadiisa iyo sara kaciisa ayuu dadka uga dhigay furaha uu ku furay waddada ay kuwa Isaga rumeysteen inay mar kale ka qayb qataan nolosha Ilaah. Ilaah la'aantis qof kasta wuxuu ahaanaya mid ku nool noolol ay ka buuxdo isku kalsoonaan la'aan uu qofka xukun isku furayo. Haddaba waxyaalahaas oo dhan meel ugama banaano kuwa Ciise rumeysteen oo nagama taan badin karaan. Waxyaalahaas oo dhan waxaa la tirtiray markuu Ciise deenteena guday.

Ciise wuu ka sarakacay dhimashada si aan xaq u ahaano. Haddaba, waqdhaca uu Ciise noo bixiyey darted, wan u imaan karna Ilaah, Aabbaha, annagoo aan wax kalsooni la'aan ah ama welwel qabin. Ciise wuxuu qaatay xaqnimada Ilaah, wuxuu muujiyey noloshiisa iyo geesinimadiisa iyo sugnaanta uu ku hor muujiyey Aabbaha, oo noloshiisa ayuu ina siiyey. Waxaa xaq ku ahaanay xaqnimada Ciise e ku timid dhimashada iyo sara kaciisa.

Ciise Masiix ayaan Ilaah Aabbaha ah hortiisa kaga helnay meel aad u cuseb e ka duwan nolosheeni hore e xaqdarroda ahayd. Badbaadada aan Ciise ku helnay waxay naga dhigeysa mid naloo arkayo sida qof aanan weligiis dembaabin. Wuu I jacaylyahay maxaa yeelay waxaan ahay cunuggiisa. Wuu ka jawabaya ducooyinkeyga iyo baahideyda oo dhanna wuxuu igaga dherjiya taajirnimadiisa sharafta leh. Tani waa isbedel aad u weyn. Tani waxay tahay macnaha guud e lagu macnayn karo dhallashada labaad. Waana tan macneyneyso waxa ay tahay Masiixinimada!

Markaad fahanto inay awooddaada waxba kuu tareynin, oo aadan waxba isugu kordhin Karin in kastoo aad dadaaleysid; markaad fahmeysid in go'aamada aad sanadka cusub u qorsheysatay aanay shaqeyneynin xataa toddoba maalmood, oo aad fahantid inaadan xataa maamuli Karin noloshaada caadiga ah (waxaa suurtagal ah inaad iska nooshahay uun, laakiin kuma noolid heerka aad rabi lahayd inaad ku noolaato); markaad fahmeysid inuu shey muhim ah noloshaada ka maqan yahay – markaasi waxaad diyaar u tahay inaad macaawino meel kale ka heshid. Markaasi diyaar baad u tahay inaad badbaadada dhabta ah heshid.

Albaabka Ilaah loogu tago wuu furan yahay

Marka lagu badbaadinayo micnaheedu "waxaad heshay macaawino," "taas oo la mid ah in lagaa soo saaray khatar ku baabi'in lahayd." Wax aadan sameysan Karin ayuu kuu sameynaya Ciise. Markaad leedahay, "Waxaan ogahay inaanan Ilaah hortiisa xaq ku ahayn, waan ka leexday doonistiisa," Xusuuso haddaba inuu Ciise isku kalsooni la'aantaada iyo welwelkaaga garbaha

saartay. Markaad fahantid Ciise inuu kuu dhintay oo aad ku badbaadday dhimashadiisa, markaasi durbaba wax weyn ayaa noloshaada iska bedelaya! Markaad fahantid inuu Ciise ka soo sara kacay dhimashada si aad xidhiidhka aad Ilaah la leedahay u cusbooneysisid, badbaadadu waxay kuu ahaaneysa wax dhab ah oo noloshaada bedelaya rajana ku siinayo. Dhimashada Ciise iyio sara kaciisa ayuu albaabaka Ilaah loogu tegi karo ku furmay – Deentii waa la bixiyey, inkaarti waa la burburiyey oo dembigiina xalka dhabta ah ayaa loo helay e lagu nadiifiyey. Tani ma ahan wax aad adigu sameysan kartid, laakiin waad ogolan karta oo iimaan ayaad kaga faa'ideysan karta wuxuu Ciise kuu sameeyey.

Markaad ogolaatid dhimashada uu Ciise iskutallaabta ku dhintay inay tahay mid uu Ilaah kugu talagalay, wax farxad leh ayaa dhacaya. Ilaah wuxuu arkaya inaad ogolaneysid waaqdhaca uu Ciise kuu bixinayo kaasi oo ah badbaadadaada! Sababtaas awgeed, Ciise darraaddiis oo keliya ee ma ahan wax haba yaraate e aad ku sameyn kartid awooddaada, Ruuxa Quduuska ah e Ilaah ayaa noloshaada la wareegaya, oo waxaad ahaaneysa qof noolol cuseb bilaabay amaba mar labaad dhashay.

Ilaah noloshaada ayuu ka shaqeynaya oo qalbigaaga ayuu bedelaya. Muucjiso ayaad heleysa oo waxaad ahaaneysa uun cuseb. Gudahaaga wax weyn ayaa iska bedelaya oo adigii ma ahaaneysid. Awoodda sare e Ilaah ayaa noloshaada ka dhex shaqeyneysa oo barakooyinkiisa ayaa kaa dhex shaqeynayaa. Waxaa bilabeysa inaad dareentid inuu Ilaah kuu cafiyey dembiyadaada oo aad waddo cuseb ku socotid. Waxaad arkeysa si uu hadal cuseb kugu la bilabayo, uu kuu hogaaminayo oo waxyaalaha la yaab leh noloshaada uga dhex sameynayo – waxyaalahaasi oo dhan waxaa ka dabmeysa awoodda Ciise Masiix!

Tani waa waxa lagu macneyn karo nolosha qofka Masiixa raacsan. Ma ahan inuu qofka ku noolyahay noolol uu ku xiiseynayo shuqulada diininiga ah e noolol maalmeedka lagala kulmayo. Waa awoodda Ilaah e bedeleysa waxa aad tahay oo dhan oo lagaaga dhigayo inaad ahaatid qalabka ay dadka kale ku helayaan barakooyinka Ilaah – waxaad ahaaneysa mid Ilaah u adeego oo wuxuu helay dadka ku barakeeyo.

Ilaah wuxuu rabaa inuu baahidaada oo dhan buuxiyo. Ma jirto qayb noloshaada ka tirsan uusan muucjiso ku sameyneyno oo isbedel ku dhalineynin amaba ku barakeyneynin. Markuu Ciise ku dulsocday adduunkan, si joogta ah ayuu muucjisooyin ku sameynayey. Wuxuu bogsiiyey kuwa buka, wuxuu xoreyey kuwa jiniyada ay guumeysanayeen oo wuxuu ilaa iyo 5,000 oo dad ah ku quudiyey oo dhertjiyey shan xaboo kibis ah iyo laba kaluun. Wuxuu xigsanayey maqsiinada samada oo wuxuu baahida aadanaha ku xaliyey taajirnimadiisa ay jirin wax lala barbardhigi karo. Ciise isla sida uu wagaas u ficiltamayey ayuu ilaa maanta u shaqeynaya. Isagu weligiis isma bedelin. Isagu waa badbaadiye nool, kaasi oo noloshaada dib u habeyn doono oo kugu barakeyn doono baraka kasta oo wuxuu ku siinaya noolol tii hore aad uga duwan e cuseb.

Wuu ku jacayl yahay oo wuxuu kuu caawin kara hab aanay jirin cid kale oo kuu caawin karto. Boqolaal kun e dad ah ayaa shaqsi ahaan u fahansan arintan Ilaahna wuxuu rabaa inaad adiguna fahantid arintan muhimka ah. Haddaba arintan mar dambe haka cararin! Ogolow Ciise Masiix oo u soo dhowee Isaga sida Badbaadiyahaaga iyo Rabbigaaga.

2
Inkaarta waa la Burburiyey

Runti ma jiro qof fahmi karo sawirka dhabta ah e ku saabsan sida ay wax u dheceen Dhicitaanka (Dembaabidda) ugu horeyey e ka dhex dhacay Beerta Ceeden. Dembigu wuxuu sida masiibo u faafiyey dhimashada taasi oo ku faaftay facba ka fac. Qof kasta firdhiskaasi wuu gaaray. Ma jiro

qof ka fakaday.
Ilaah wuxuu qofkii hore ku neefsaday neefta nolosha sida ku dhigan Bilawgii 2:7 oo qofkiina wuxuu noqday mid xaga ruuxiga, nafta iyo jidhka. Nolosha aan idlaaneynin ee Ilaah ayaa ka buuxsantay isaga wuxuuna ahaaday mid Ilaah xidhiidh la leh oo wax la qaybsada. Laakiin kheyrkan oo dhan wuu burburay kaddib markuu Ilaah ku caasiyey. Ilaah wuu uga digay isaga in hadduu wax ka cuno geedka aqoonta iyo garashada uu runtii dhiman doono sida ku dhigan Bilawgii 2:17.
Aadan markuu dembaabay wuu dhintay. Ruuxiisa waa dhintay, naftiisana way way ka fogaatay Ilaah, jidhkiisuna wuxuu noqday mid u addoonsama sharciyada faasuqa, oo mar uun dhimasho weligeed ah dhiman doono. Dhimashado waxay gashay qayb kastoo wuxuu Aadan ahaa ka tirsan. Meesha ay mar noolol ka jirtay, hadda waxaa bedeshay dhimasho. Meesha ay baahi ka jiri jirin waxaa bedeshay baahi. Meesha ay mar barakooyinka ka buuxeen waxaa bedelay inkaar.
Dembi ayaa soo galay dunida oo sababay dhibatooyinka uu maanta dadka adduunka kala kulmayo. Rooma 5:18 waxaan ka akhrineyna in gefka uu hal qof ah galay ahaaday mid aadanaha oo dhan ka dhigay kuwa eedeysan.
Dembiga wuxuu ku faafay adduunka oo dhan oo fac kasta wuu gaaray. Ma jiro mid ka fakaday inkaartaas. Waa sababtaas waxa aan Rooma 3:10, 11 uga akhrineyno, Sida qoran, *Sida qoran, Mid xaq ahu ma jiro, midnaba; 11 Mid wax garanayaa ma jiro; Mid Ilaah doondoonaa ma jiro. Maxaa yeelay, dhammaan way wada dembaabeen oo gaadhi waayeen ammaanta Ilaah.* (Rooma 3:23). Sharafta Ilaah, muuqaalkiisa iyo barakooyinkiisa way ka fogadeen aadanaha oo dunida oo dhan waxay noqotay mid hortiisa ku eedeysan sida ku dhigan Rooma 3:19.
Si kastoo udadaalay, aadanaha wuu kari wayey inuu gaaro heerka wuxuu Ilaah horaantii ugu talagalay inuu ahaado. Xagga ruuxiyanka ayuu ka dhintay, oo intuu ku sii socday dhimashada jidhka, taasi oo ahayd inuu dhinto dhimasho weligeed ah taasi uu noloshiisa dambe oo dhan Ilaah ka soocnaan doono, naarta ayuu ku jiri doonaa ebedan. Wuxuu aadanaha ku dambeyn lahaa waxay noqotay mid sida ugu degdegta badan falkeeda lagu helo. Marka hore e la uumayey waxaa loo uumay inuu ahaado uun ansha wanaagsan ku nool oo Alle cabsasho le si uu weligiisba Ilaah ula noolaado, u sharfo Ilaah uguna adeego noloshiisa oo dhan. Saa ay tahayna wuu ku caasiyey Ilaah, Isagoo og ayuu dembaabay oo dhintay. Dabadeetana wuxuu helay rabbi kale oo noloshiisa halawsan ku faraxsan oo hogaamiyo – rabbigaasi cusub uu xidhiidhka la yeeshay waa Sheeddaanka waana sida uunka dembiga leh dadka ku soo galay.

Baniaadanka waa is badbaadin wayey
Efesos 2:1,2 waxay qoreysa, *"Idinku waxaad ku dhimateen xadgudubyadiinna iyo dembiyadiinna, kuwaas oo aad markii hore ugu socon jirteen sida socodka wakhtigan iyo sida madaxda xoogga hawada oo ah ruuxa haatan ka dhex shaqaynaya carruurta caasinimada."* Si kale haddii loo macneeyo waxay u dhigmeysa inaan sheeddaanka raacnay. Waxaan ahaanay kuwa mid ah boqortooyadiisa oo waxaan u ahaanay addoomo.
Yooxanaa 10:10 waxay dhigeysa inuu Ciise yidhi, *Tuuggu wax kale uma yimaado inuu wax xado oo dilo oo halleeyo mooyaane, aniguse waxaan u imid inay nolosha haystaan oo ay badnaan u haystaan."* Sheeddaanka wax buu xadaa, dila oo burburiyaa. Waxaa uu dadka ku siyaadinayo ma jiraan oo aan ka ahayn dhimasho – waxaa dhaxalka keliya ee sheeddaanka laga heli karo. Ciise Masiix wuxuu u yimid inuu naga badbaadiyo addoonsiga iyo dhimashada.
Ma jiro qof tabartiisa isku badbaadin karo midnaba. Ma jiraan waxay ahaataba wax ka mid ah dadaalka baniaadmiga ee xalin karaan dhibatooyinka uu dadka kala xarbinayo qalbigiisa. Xagga ruuxiyanka ayey ka geeriyodeen oo waxay ku geeriyodeen inkaarta dembiga taasi oo haysata qof kasta fac kastoo ay yihiinba. Inkaartan waa in la burburiyo si ay nolosha ugu dhex qulqusho mar

kale, qulqulka noloshaas waxa keliya ee laga heli karaa awood dibadda ka timaaddo.
Isla sida aan horey u sheegnayba, ma jiro qof noloshan cuseb isku siin karo awooddiisa – nin dhintay isma soo sara kicin karo. Waa inuu qof kale jebiya inkaartaasi. Ma jiro qof addunkan ku nool oo saa sameyn kara maxaa yeelay dhammaanteen waan dembaabnay oo gaari waynay xaqnimada Ilaah. Sababtaas awgeed Ilaah wuxuu soo diray Wiilkiisa keliya, Ciise Masiix.
Cibraaniyada 2:14 waxaa qoran, *Carruurtu waxay qayb ka heleen jidh iyo dhiig, taas aawadeed isaguna sidaas oo kale ayuu uga qayb qaatay, inuu dhimasho ku baabi'iyo kii xoogga dhimashada lahaa, oo ah Ibliiska.*
Haddaba maxay tahay dhabta dhacday markuu Ciise geeriyoday? Galatiya 3:13, 14 waxay dhigeysa, *Masiix wuxuu inaga furtay inkaartii sharciga, isagoo inkaar inoo noqday, waayo, waxaa qoran, mid kasta oo geed ka soo deldelanu wuu inkaaran yahay, inay barakadii Ibraahim quruumaha ugu timaado Ciise Masiix; inaynu ballankii Ruuxa ku helno rumaysad.*
Markuu dhimanayey Ciise wuxuu dushiisay ku xambaartay inkaarta oo dhan e banaadmiga haysatay e uga timid dembiga, oo Isagu waxaa laga dhigay mid inkaaran daraaddeen.
Haddaba inkaarta maxaa lagu macneyn kara? Asalka erayga waxaa weyaan, "ka soocid, laga tegay, dhinac looga dhigay, loogu talagalay in la burburiyo." Baybalka oo dhan waxaan ka dhex arkeyna in addeecista Ilaah barako lagu helo oo laakiin ku caasinta Ilaah lagu helayo dembi iyo kaasi ay natiijadiisa tahay inkaa; amaba haddii aan si kale ku sheegno inuu baniaadmiga iska xirayo qulqulka nolosha Ilaah oo keliya laga helo.
Inkaarta inta badan waxaa lagu fasira dhimasho. Inkaarta sharciga waxaa lagu macneynayey inay natiijadeeda tahay in kuwa sharciga jebiya ay dhimanayaan. Sharciga Kunoqoshadiisa 28:15 waxay qoreysa, *Laakiinse haddaydnan dhegaysan codka Rabbiga Ilaahiinna ah, inaad xajisaan oo aad wada yeeshaan amarradiisa iyo qaynuunnadiisa aan maanta idinku amrayo, markaas inkaarahan oo dhammu way idinku soo degi doonaan oo idin soo gaadhi doonaan.*
Sida keliya ee ay dadka inkaarta Ilaah isaga leexin lahaayeen waxay ahayd iyagoo si buuxda ugu dhaqma axdiga uu hadda ka hore Ilaah la galay nebi Ibraahim. Marba haddii ay xajinayeen axdigaasi Ibraahim lala galay way ka dawrsanayeen inkaar kasta, laakiin haddii ay dhacdo inay in yar uun ka baxaan axdigaas, inkaarta xooggeeda ayaa la dareemayey.

Guusha Ilaah ee xoogga badneyd e Iskutallaabta ka dhacday

Xagga Axdiga Hore, dadka waxaa laasim ku ahayd inay xajiyaan sharciga u yaalay. Qofka ku xadgudba waxay ahayd inuu bixiyo sadaqo uu gefkaasi isaga badbaadinayo. Saa ay tahayna, mar kastaba waxay qalbiga ku wateen iskufilnaansho la'aan iyo kalsooni darro shaqsiga ku jirta uu iisu haysto inuusan sharciga si buuxda u qancinin maxaa yeelay waxay iisu arkayeen inay yihiin xadgudubayaal, laakiin waxay u haysteen inay neefka waaqdhaca ah ee ay bixiyeen mudda gaaban kaga badbaadi doonaan iinta ay faleen. Saa ay tahayna habkan ma ahayn mid xalinayey dhibaatada uu dembiga keenay. Sadaqada lagu bixinayey gawricidda weesha ama ariga inaba xal uma ahayn dhibatooyinka uu baniaadmiga ku jiray; ficilkaas ma uusan burburineynin inkaarta oo wax deganaansho ah ama noolol cuseb uu qofka ka helayey ma jirin. Sababtan awgeed ayuu Ciise iskutallaabta ugu dhintay si uu u xambaarto inkaarta iyo natiijadeeda oo dhan. Markuu Ciise dhintay, inkaarta way awood beeshay oo dhibka ay aadanaha ku haysay waa la af jaray. Madaama uu Ciise naftiisa ahayn mid weligiis dembaabay ama inkaarta hoos imaaday, wuu awooday inuu wada xambaarto si uu aadanaha uga xoroobo inkaarta oo dhan. Ciise wuxuu ahaa mid iin la'aan ah oo sababtaas awgeed Ilaah wuu awooday inuu dunida ku mideysiyo Masiixa.

Kolosay 2:14,15 waxay dhigeysa, *Wuxuu baabbi'iyey dacwadii inoogu qornayd qaynuunnada oo inaga geesta ahayd (*eedeyntii sharciga e inkaarta nagu rideysay), *oo weliba intuu fogeeyey ayuu*

ku qodbay iskutallaabta. Isagu hubkuu ka qaaday taliyayaasha iyo kuwa amarka leh, oo bayaan ayuu u ceebeeyey, Isagoo iyaga kaga guulaysanaya.
Dhimashadiisa iyo sara kiciisa ayuu Ciise kaga guuleystay kuna burburiyey awoodda dembiga iyo dhimashada. Inkaartii waa la masaxay sheeddaankuna hubka waa laga dhigay lagana guuleystay. Ciise guul aad u weyn ayuu kaga guuleystay Sheeddaanka, taasina wuxuu ku sameeyey dhimashadiisa iyo sara kaca uu ka sara kacay dhimashada. Ma jiro eray kale oo macna leh oo afkaada ka soo bixi karo oo ka weyn erayga *guul!* Ilaah Ciise Masiix ayuu istecmaalay oo si weyn uga guuleystay Sheeddaanka iyo inkaarta aadanaha haysatayna si buuxda ayaa looga guuleystay oo mar dambe laguma noqon doono. Waa in la fahmo inay jiraan oo keliya laba marxaladood uu midkood baniaadmigu ku noolan karo, Noolol ama dhimasho. *Maanta waxaa u yeedhayaa samada iyoo dhulka inay idiinku markhaati furan, inaan idin hor dhigay nolo iyo geeri, iyo barako iyo inkaar, haddaba sidaas daraaddeed nolosha doorta idinka iyo farcankiinnuba aad noolaateene* (Sharciga Kunoqoshadiisa 30:19).
Ilaah wuxuu rabaa inaad nolaatid. Wuxuu rabaa inaad ka qayb qaadatid Noloshiisa weligeed jireysa ee aan waxba ka dhineyn! Ciise wuxuu u yimid inuu ku siiyo noolol buuxda. Ciise Masiix ayuu Ilaah ku burburiyey inkaarta na cadaadineysay oo wuxuu nagu butaaciyey barakadiisa.

Barakada adigaa iska leh – Noolol buuxda
Markaad aragtid wuxuu Ciise iskutallaabta kugu sameeyey oo aad qiratid Isaga inuu yahay badbaadiyahaaga iyo Rabbigaada, waxaad ahaaneysa mid noolol cuseb bilaabay oo nolosha Ilaah ayaa kugu soo butaaceysa Ruuxiisa. Galatiya 3:14, waxaa qoran in nala barakeynayo oo aan Ruuxa Quduuska ah ku heleyno iimaan. Markaad nolosha cuseb bilawdo, waxaad heleysa Ruuxa Quduuska ah e Ilaah kaasi oo ku siinayo nolosha weligeed ah, noolol buuxda – noloshaasi oo ah tan Ilaah. Noloshan Ilaah laga helayo waa mid si kastaba kuu barakeyneyso. Sharciga Kunoqoshadiisa 28:1-14, waxaan arkeyna inay barakada Ilaah dadka ka badatay oo ku soo duldegtay. Waxaa “jug” ku soo yidhi barakooyinka Ilaah oo qayb kastoo noloshooda ka mid ahay waa laga dareemay.

Efesos 1:3 waxaan akhrineyna Erayadan, *Ammaanu ha u ahaato Ilaaha ah Aabbaha Rabbigeenna Ciise Masiix. Wuxuu Masiix inagu siiyey* ***barako kasta oo Ruuxa ka timid eek u jirta meelaha jannada****.* Wanaag kastoo uu Ilaah no ohayo, wuxuu nagu siiyey Ciise Masiix. Ma jiraan wax wanaag ah uu Ilaah naga ceshtay. Oo waxaa qoran, *Kii aan xataa Wiilkiisa lexejeclaysan, laakiinse innaga dhammaanteen u bixiyey, sidee buusan wax walbana inoola siin doonin Isaga* (Rooma 8:32).
Ilaah wuxuu ogolaaday inuu Ciise maro wax kastoo dhib iyo ceeb ah si aan dhammaanteenba ugala qayb qaadano wax kasta Isaga. *Wax kastuu* bilaash nagu siiyey Ciise Masiix. “*Wax kasta”* waa maxay micnaheedu? Micnaheedu waxaa weyaan in Ciise naloo soo mariyey nolosha Ilaah, barakooyinka, macaawinadiisa iyo taajirnimadiisaba inay nooga soo degaan samadda oo way wax kastoo nolosheena ka tirsan ayey taabanayaan. Meesha ay hadda ka hore dhimashada ka guuxeysay, hadda noolol ayaa ka guuxeysa!
Rooma 5:20,21 waxaa qoran, *Sharciguna wuxuu u yimid inuu dembigu bato, laakiinse meeshii dembigu ku batay, nimcaduna way ka sii badatay aad iyo aad; in sida dembigu dhimashada ugu taliyey, sidaas oo kalena ay nimcadu ugu taliso xaqnimo ilaa nolosha weligeed ah ee xagga Rabbigeenna Ciise Masiix.*
Meesha uu waagii hore dembiga maamulanayey uu dhimashada ka keenayey hadda waxaa ku bedelmay xaqnimada Ilaah oo waxay dhalineysa nolosha weligeed ah e Ilaah taasi oo wada saameyneyso qayb kastoo nolosha baniaadmiga ka tirsan. Ciise wuxuu iskutallaabta hab wada

siistay qayb kastoo nolosha baniaadmiga ka tirsan. Wuxuu qaatay dembiyadeena, xanuunadeena, kelinimadeena, welwelkeena iyo maskiinimadeena. Waxyaalahan oo dhan waa kuwii inkaar ahaan wuu Ciise ku qaatay iskuktallaabta. Waana sababta aan maanta Ciise u haysano inuu barako nooga yahay qayb kastoo waxyaalahan taabaneyso!
Barakada laga hadlayo waa mid ka sara weyn garabka oo lagaa taabto oo la yidhaahdo awguuriyo. Waa barakooyinka samada kuwa kugu dhex butaacayaan si hormar iyo guul ay kuu ahadaan wax aad noolol maalmeedkaaga kaga dhaqantid. Meelaha ay mar abaar iyo dhimasho ka jireen, hadda naruuro ayaa ka muuqata - beero wada nuurayaan e waraabsan. Xusuuso in lagu barakeeyey! Ilaah ugu mahad celi oo maalin waliba ku noolaw noloshaasi deeqda badan leh. Ciise ayaa bixiyey beeca kan ugu qaalisan si aad barakadaas ku heshid!
Kitaabka Masixiinta ma ahan buug ay sharciyo ka buuxaan oo dadka lagu addoonsanayo si loo raaco. Waa noolol heerka ugu sareysa looga noolyahay – waa noolol ka soo butaaceysa xagga samada. Ma ahan mid lagu cabirayo kumaan hawl uu qofka raba Ilaah kaga farxinayo. Waa xidhiidh lala leeyahay Aabbaha kan si qaas ah Ciise Masiix kugu badbaadiyey, haddaba waxaad haysata nagagelyada ugu heerka sareysa madaama aad tahay cunuga Ilaah. Noolol ayaad Isaga ku leedahay, oo noloshiisa ayaa kugu dhex butaaceysa.
Noloshiisa waa mid aan caadi ahayn e noolol kasta ka sareysa, noloshaaduna isla sidaas ayey mid heer sare ah ahaaneysa. Noloshiisa waa awooddiisa, sababtaas awgeed noloshaaduna isla sidaas ayey taagero uga heleysa awooddiisa. Markay noloshiisa ku jirto dadka, calamooyin iyo yaabab iyo dhacdooyin waweyn ayaa muuqdaan. Waa sida ay muucjusooyinka uga dhex muuqdaan nolosha kuwa Masiixa rumeysan e addeeca kuwaasi ay ka buuxdo nolosha Ilaah.
Noloshaada Masiixinimo ma ahan oo keliya u riyaaqidda addeecista Ilaah. Waxay ku sii fideysa inaad xidhiidh hoose la lahaatid Ilaah oo aad ogolaatid inaad Ilaah u ahaatid qalab ama waddo uu Ilaah barakadiisa dadka kale u marinayo. Awooddiisa adigay kaa dhacaameysa oo waxay gaareysa dadka kale e u baahan noloshiisa iyo barakooyinkiisa. Waxaad daremeysa Ilaah oo mucjisooyin ku sameynayo nolosha kuwa Isaga aamineen waxay ahanayaan kuwa si sharaf leh u barakoobaan, noloshii hore laga xoreyey oo dib loogu soo celiyey sida doonista Ilaah tahay. Yooxanaa 1:4 waxay dhigeysa sida tan, *Isaga (*Ciise, oo ah Erayga Ilaah) *waxaa ku jirtay noolol, noloshuna waxay ahayd nuurka dadka.* Ciise waa nolosha, oo qof kastana nolosha wuxuu ku heli kara Isaga oo keliya. *Isagu* (Ciise, waa Erayga) *wuxuu ahaa nolosha, noloshaasna waxay ahayd nuurka dadka.* Yooxanaa 14:6 Ciise naftiisa ayaa hadlay oo wuxuu yidhi, *Anigu waxaan ahay jidhka iyo runta iyo nolosha.*
Nolosha laga hadlayo waa tan Masiixinimo. Waxyaalaha kale oo dhan waa uun dhaqan diimeed oo qof ay caawineyso ma jirto. Waa uun awoodda Ilaah tan aadanaha macaawino u ah – awooddaasna diyaar ayey u tahay cid kastoo qaadata oo lahaata ficilka uu Ciise iskutallaabta ku kaamilay. Halkaasi ayuu ku burburiyey inkaartii oo wuxuu aasaasay qaynuun cusub oo nolosha Ilaah iyo barakooyinkiisa ay ka soo butaacayaan dadka Ciise u qirtan inuu yahay Rabbigooda.

3
Iskutallaabta

Qaybtan waa tan ugu muhimsan mawduucyada Injiilka – Iskutallaabta – badanaa waxaa ku hareersan Isfahan la'aan. Haddii aan fahmi wayno wixii ka dhacay halkaasi, ma garaneyno kan uu yahay Ilaah iyo macnaha rumeystaha Ilaah addeecsan waxay tahay. Iskutallaabta awoodda uu Injiilka ku saleysan yahay. Iskutallaabta la'aanteed, injiilka wuxuu ahaanaya mid aanan awood uu nolosha dadka ku badbaadiyo qabin.

Maantadan waxaa jiran dhaqdhaqaaqyo ka hadlaya waxyaalaha ‘ruuxiga’ ah waxayna istecmaalayaan erayo kala duwan e culus oo ay dadka ku wareerinayaan erayadaasi oo loo ekeysiyey kuwa Kitaabka ama Baybalka ku dhigan. Waxay ka hadlayan “dhalasho cusub,” oo ku saabsan “ruuxa oo ka buuxsama,” “qalbiga dadka,” oo ku saleysan “muujinta,” iyo weliba hogaaminta.” Erayadan oo dhan waa kuwa aan Baybalka ka akhrineyno waana khatar haddii aan cabsi ka qabno istecmaalidda erayadan sababtoo ah dhaqdhaqaaqyo ‘ruuxiyan ah’ ayaa istecmaalayaan.

Tani waa habka uu sheeddaanka adeegsado si aan uga cabsano wayaalaha uu Ilaah wanaag ugu talagalay e ku jiraan Injiilka. Sheeddaanka wuxuu raba inaan ka joogsano ku dhaqashada Injiilka. Habkan waa mid aan Ilaahiyan ahayn oo dhaqdhaqaaqyadan waxay iskudeyayan inay xadaan qoraalada kheyrka qaba ee Baybalka oo sheeddaanka wuxuu rabaa inuu macnaha kale u yeelo oo ka duwan wuxuu Ilaah ugu talagalay. Saa ay tahayna kama raja dhigi doonno ka hadalka iyo ku hadalka runta jirta! Laakiin waajibka na saaran ayaa wuxuu yahay inaan Injiilka waxba ka dhimin oo aan sida uu yahay aan si xoog leh ku ficilgelina.
Haddii ay kuwa wax baridda qaldan wada ka hadlayaan “bogsiin,” waa inaan si iyaga ka xoog badan ku wacdina isla eraygaasi bogsiinta maxaa yeelay waxaan ognahay in bogsiinta aan ku helnay dhaawayadii la dhaawacay Ciise. Wakhti xaadhirkan ma ahan mid aan cabsi dib uga guran lahayn. Waa inaan Injiilka ku wacdinaa si ka xoog badan sida aan ku wacdin jirnay, si ay dadka u arkaan in Ciise oo keliya kan wax kheyr ah u hayo.

Ururadan dhaqdhaqaaqyada “ruuxa” wadaan dhammaantood way ka soo horjedaan *iskutallaabta Masiixa.* U adkeysan karaan inay maqlaan wax ku saabsan *dhiigga* oo ma fahmayaan waxyaalaha ku saabsan *badbaadada*. Ururada diiniga ah e wax baridda saxda ah aan bareynin uma gegsan karaan nabarada iyo dhiigga Ciise, si xoog leh ayey dagaal ku qaadayaan waxyaalahan dhabta ah e ku saabsan Badbaadada Ciise algu helo. Tan la yaab ma leh maxaa yeelay waa uun dhiigga Ciise Masiix, iskutallaabta iyo dhimashada Ciise tan looga guuleysan karo Sheeddaanka. Sababtaas ayuu sheeddaanka ula dagaalaya dhiiga maxaa yeelay wuxuu og yahay inuu dhiigga yahay hubka isaga burburiyey e ka guuleystay. Sababtaas awgeed wuxuu ku dadaalaya inuu aasaaso diimaha iyo filosofiyiin ku wacdinayaan badbaado ka gees ah midda dhiigga Ciise lagu helayo oo ku saleysan oo keliya “aqoon saren” bedelkii ay ku saleysnaan lahayd hawsha badbaadinta e iskutallaabta Ciise.

Korintooska kowaad 1:17,18, Rasuul Bawlos wuxuu leeyahay, *Waayo, Masiixu iima uu soo dirin inaan dad baabtiiso, laakiin wuxuu ii soo diray inaan dadka injiilka ku wacdiyo, ee ma aha inaan ku hadlo xigmadda hadalka, waaba intaasoo iskutallaabta Masiixa la caaqibo tiraaye. Waayo, hadalka ku saabsa iskutallaabtu waa u nacasnimo kuwa lumaya, laakiiin waa u xogga Ilaah kuweenna badbaadaya.*

Ciise wuxuu u yimid inuu Dhinto!
Farriinta iskutallaabta nacasnimo ayey u tahay ibliiska, laakiin annagu waxay noo tahay awoodda Ilaah e aan ku heleyno badbaadada aan u baahannahay. Xataa Bawlos markuu u yimid reer Korintos wuxuu kula hadlay erayadan, *Waayo, waxaan goostay inaanan waxba dhexdiinna ka ogaan Ciise Masiix oo ah kan iskutallaabta lagu qodbay maahee* (1 Cor 2:2).
Waa maxay ficilka ka dhacay iskutallaabta korkeeda? Waa maxay waxa ficilkaas ka dhigayo mid aad muhiim ah? Qofka caadiga ah wuxuu arkaya oo keliya inuu jiray mid ka mid ah

maclimiinta Yahuudda oo wax dhaqanka iyo diinta ka baxsan ku dhaqmay oo wax barid qaldan baray oo lagu edibiyey dhimasho. Dad badan ayaa hortiisa isla sidaas iskutallaabta lagu qodbay oo kuwa badanna waa lagu qodbi doonaa. Qofka taarikh yaqaanka ah e nolosha caadiga ah ku nool, Ciise wuxuu u yahay uun mid ka mid ah kuwa badan oo hortiisa jireen. Laakiin Ilaah waxyaalahan oo dhan waa uga duwawaa.

Ciise wuxuu dunida u yimid inuu ahaado Wanka waaqdhaca loo bixinayo. Yooxanaa Baabtiisaha ayaa Isaga ku yidhi, *Deya, Wanka Ilaah, kan qaadaya dembiga dunida!* (John 1:29). Ciise wuxuu ku yimid qorshe dhimasho! Waxaa lagu uureystay Ruuxa Quduuska ah oo wuxuu ka dhashay Mariyan oo Bikrad ah. Isagu wuxuu ahaa Erayga jidhka noqday. Wuxuu ahaa boqolkiiba boqol Ilaah iyo boqolkiiba boqol baniaadan. *Isagu wuu ahaa labaduba – wiilka Ilaah iyo wiilka aadanaha.* Ruuxa Quduuska ah e Ilaah ayaa Isaga ugu soo duldegay sida qooley. *Ilaah ayaa Ciisaha reer Naasared ku subkay Ruuxa Quduuska ah iyo xoogga. Isagu waa wareegii jiray, wanaagna wuu fali jiray, oo wuxuu bogsiin jiray kuwii Ibliisku caddibay oo dhan; maxaa yeelay, Ilaah baa la jiray isagii* (Faalimaha Rassuullada 10:38). Wax buu barayey oo wacdiyey. Wuxu sameeyey calaamooyin iyo mucjisooyin. Wuuu bogsiiyey kuwa buka oo ruuxyada wasakhda ah sida ayaanaha iyo mingiska dadka ka saaray.

Isagoo ah Wiilka Ilaah, wuxuu dadka u muujiyey kan uu Ilaah dhabtii yahay – wanaagga Ilaah iyo waxay tahay doonista uu noo qabo. *Oo Isagu waa dhalaalka ammaantiisa iyo u-ekaanta ahaantiisa, oo wax walba wuxuu ku hayaa erayga xooggiisa, oo goortuu daahirinta dadka dembiyadooda sameeyey dabadeeed ayuu wuxuu fadhiistay Weynaha xagga sare midigtiisa* (Cibraaniyada 1:3). Dadkii markay arkeen waxyaalaha la yaabka leh e uu Ciise sameeyey waxaa iyaga u muuqday sawirka Ilaah. Ciise wuxuu weliba ahaa Wiilka aadanaha. Dadku markay arkeen wuxuu sameeyey oo ay maqleen wuxuu ku hadlay waxay fahmeen waxa looga baahan yahay inuu aadanaha ku dhaqmo. Waxay arkeen wuxuu asalkii hore Ilaah dadka ugu talagalay. *Saa ay tahayna, Ciise uma uusan iman oo keliya inuu hawl wanaagsan sameeyo oo dadka tusaala ahaan dhexdooda ku nolaado – wuxuuse kale uu u yimid inuu u dhinto iyaga.*

Aadanaha wuxuu ku caasiyey Ilaah oo dembaabay sida ku dhigan Rooma 3:23. Dembigu ayaa sababay inay dhimasho adduunka soo gasho (Rooma 6:23) caasintaasi ayaa baniaadmiga ka dhigtay mid lumiyey xidhiidhka uu Ilaah la lahaa. Ugu horeyntii wuxuu ka dhintay xagga isku xirnaanshadii uu Ilaah kaga xirnaa qalbiga (Efesos 2:1), tan labaadna wuxuu ka dhintay xagga jidhka, taasi oo sababtay inuu dhinto dhimasho aan dhamaad lahayn. Ilaah la'aantiis wuxuu noqday mid lumay lumis weligeed ah oo asliga dembiga awgiis, naca, kelinimada, beenta, caasinimada, cudurada iyo maskiinimada ayaa u noqday kuwa ku jira noolol maalmeykiisa. Damiirkiisa ayaa ka dhaadhacsiyey inuusan mid iin la'aan ah ahayn uu Ilaah ku dembaabay oo wuxuu iisu arkay inuusan kalsooni lahayn, cabsi iyo welwel ayaa ku batay noloshiisa. Dembiga ayaa xukumayey isaga, wuxuu u addoonsamay ilaaha adduunkan, ibliiska. Way ku adkeyd isaga inuu ibliiska gacmihiisa ka fakado.

Waa maxay ficilka lagu ficiltamay Iskutallaabta korkeeda?

Ma jirin nin qabay awood, xigmad amaba aad u wanaagsanaa oo awooday inuu xaliyo deenta uu Ilaah noo gudayey e Ilaah lagala xaaltamayey. Ma jirin qof awooday inuu iska xoreyo xabsiga uu jiro. Waxay ahayd inuu jiro qof kan xabisan xoreynayo. Waxay ahayd inuu qof bixiyo maalka lagu xoreyn lahaa qofka xabisan.

Dadka maankooda ku shaqeyan, diimaha ku dhaqmaan oo ku ficiltamaa "ruuxyada" aad bay uga soo horjeedan farriintan wanaagsan. Jidhka wuu diidan yahay inuu asmaco dhabta ah inuusan is badbaadin karin. Qofka aan awoodda Ilaah garaneynin wuxuu rabaa inuu iisu ahaado badbaadiye.

Wuxuu isku deyaya inuu istecmaalo kumaan hab uu isku badbaadinayo, wuxuu dhageysanaya muusik iyo heesooyin kala duwan, ku istareexidda galmada xaraanta ah, iska inkiridda waxyaalaha qaarkood, badsashada tacliinta, ku tartanka awoodda iyo maankiisa iwm. Saa ay tahayna inaba kuma guuleysanayo. Baniaadmiga buundadiisa ma hagaagsan karo oo Ilaah xidhiidh kula yeelanayo amaba deenta dembiga iskiisa uma gudan karo waana sababta uu Ilaah u soo diray Inankiisa madiga ah, Ciise, kaasi oo u yimid inuu iskutallaabta inoogu dhinto.
Rooma 6:23 waxay dhigeysa, *Mushaharaadka dembigu waa dhimasho.* Laba waa in mid la qaato, ninka naftiisa waa inuu dhinto dhimasho weligeed ah ama ahayn waa inuu helo qof kale oo isaga u dhinta. Intee buu ugu dhimanaya? Wuxuu ugu dhimanaya iskutallaabta!
Haddii ay ahaan lahayd inuu qof caadi ah dhinto, deentaasi weligeed lama gudi doono maxaa yeelay dembiile deentaasi ma bixin karo, maxaa yeelay waa iinlaawe. Sababtaas awgeed ayuu Ciise u yimid inuu metelo laba sawir, Ilaah iyo aadanaha. Wuxuu ahaa nin kaamil ah oo wuu awooday inuu iskutallaabta ugu dhinto aadanaha kale. Wuxuuna ahaa Ilaah, Isagu weligis wax dembi ah lama kulmin sababtaas awgeed ayuu awood u leeyahay inuu inoo dhinto. Ciise wuxuu bedelkeena ayuu iskutallaabta ugu dhintay. Wuxuu ahaa mid aan inaba iin lahayn, laakiin deentii dembiga e Ilaah laga galay ayuu wada xambaartay. Ciise isagoo ay cidka ku qasbin ayuu ogolaaday inuu xambaarto dembigayada aadanaha oo dhan oo wuxuu inoo ahaaday Wanka waaqdhaca, ee dembiyada dadka loo bixiyey. *Wuxuu Isaga oo aan dembi aqoonin ka dhigay* ***inuu dembi noqdo aawadeen****, inaynu noqonno xaqnimada Ilaah eek* ***ku jirta Isaga*** (2 Kor 5:21). *Oo Isagu* ***dembiyadeennii wuxuu ku qaaday jidhkiisii*** *geedka saarnaa, si innagoo dembi kala dhimannay aynu* ***xaqnimo ugu noolaanno****. Waxaad ku bogsateen xariijimihii karbaashiddisii* (1 Butros 2:24). *Maxaa yeelay, Masiixba mar buu u xanuunsaday dembiyada. Isagoo xaq ah ayuu u xanuunsaday kuwa aan xaqa ahayn aawadood inuu inoo keeno Ilaah . xaggga jidhka waa laga dilay, laakiinse xaga ruuxa waa laga nooleeyey* (1 Butros 3:18).

Annagaa dembiilayaal ahayn oo istaahilnay inaan ku dhimano iskutallaabta laakiin Ciise ayaa iskutallaabta inoogu dhintay oo deenteena inoo guday. Iskutallaabta waxay ahayd meesha uu ficilkan kalabedeliddan *qiimaha badan* lagu ficil geliyey. Miyaad aragtaa arintan? Waa muhim inaad aragtid oo aad fahantid!
Dhiiggiisa waxaa loo daadiyey inuu inoo ahaado waaqdhaca dembiga, oo loo bixiyey dembigaada. Noloshiisa ayuu bixiyey oo dhintay, si aad adigu u noolaatid. *Dhiiggiisa ayaa ah lacagta laguugu badbaadiyey* taasi oo naga badbaadisay suuqii aan ugu xareysneyn ibliiska kaasi oo nagula addoonsanayey (1 Butros 1:18, 19).

Kala bedelidda barakeysan
Ciise markuu Gesamane joogay wuxuu go'aansaday inuu addeecista adkeyo oo ogolaado inuu waaqdhac u ahaado baniaadmiga Ilaah ku caasiyey. Waa la qabtay Isaga oo la xukumay, la saxariiriyey oo iskutallaabta lagu qodbay. Wax kastoo uu Ilaah rabay inuu kaa xoreyo, Isagaa garbaha u dhigtay.
Sida runta ah wuxuu xambaartay xanuunyadeennii, wuxuuna qaatay murugadeennii, laakiinse waxaynu ku tirinnay mid belaayo ku dhacday, oo Ilaah dilay, oo dhibaataysan. Laakiinse waxaa isaga loo dhaawacay xadgudubyadeenna, , waxaana loo nabareeyey xumaantooyinkeenna, edbintii nabaadiinadeennana dushiisay ku dhacday, dildillaaciisiina waynu ku bogsannay (Ishacyaah 53:4-5).
Iskutallaabta waxay tahay meesha sida joogtada ah qashinka lagu qubo: dembiga adduunka oo dhan – waa nacayb, caasinimo, cuqdad, cabsi, welwel, kelinimo, cudurada, maskiinimo, iyo dhimasho iyo wixii la mid ah ayaa dhammaanba lagu qubay Ciise markuu iskutallaabta saarnaa.

Wuu wada xambaartay waxyaalahaas oo dhan oo wuu la dhintay. Halkaasi ayuu Ciise ku bixiyey deentii dembiga ee aan xambaarsaneyn oo mar dambe wax iin ah ma lihin.Dhimashadiisa ayuu waxyaalahaasi na duleysanayo ku burburiyey oo awooddooda iyo xaqooda oo dhan wuxuu ka dhigay kuwa aan jirin oo adduunka xukumi karin laakiin waxaa xaq kasta u leh uu amarkaasi siiyey kuwa uu waxyaalahaas ka badbaadiyey. Sababtaas awgeed iskutallaabtu waa meesha:

Deenta dembigaada lagu bixiyey.
Awoodda dembiga lagu burburiyey.
Awoodda jirrada lagu burburiyey.
Awoodda maskiinimada lagu burburiyey.
Cadawtinimada Ilaah lala lahaa lagu burburiyey.

Ciise markuu iskutallaabta ku dhintay wuxuu wanaajiey xidhiidhka idiin dhaxeeyo adiga iyo Ilaah. Waa dhiigga Ciise kan uu Aabbaha ku daahiriyey aadanaha oo xaq lagaga dhigay. Badbaadinta, dhimashada Ciise uu dhintay iskutallaabta, waa waxa uu Ilaah ku saleysiyey dembi dhaafka adduunka. Hadda wuxuu caddeynaya in la bixiyey deentii dembiga uu baniaadmiga ku rafaadayey! Mid alla kii magaciisa ku dhawaaqa oo dhiigiisa iskutallaabta ku daatay sharfa, wuxuu leeyahay xaq uu kaga mid ahaado carruurta Ilaah. Xaq buu ahaanaya, mar labaad buu dhalanaya oo weliba wuxuu jaalnimo la lahaanaya Ilaaha nool.

Ciise wuxuu u dhintay – *si aad* u heshi nolosha weligeed ah, noolol heer sare ah iyo jaalnimo Aabbaha lagula lahaanayo sida carruurtiisa.
Ciise waxaa laga dhigay dembiile – *si aad* u heshi dembi dhaaf oo xaq lagaaga dhigo (2 Kor 5:21).
Ciise wuxuu xambaartay cudurradaada – *Si aad,* ugu bogsatid nabaradiisa (Isha 53:5; 1 Butros 2:24).
Ciise wuxuu noqday maskiin — *Si aad,* maskiinimadiisa ugu taajirtid (2 Kor 8:9).
Ciise wuxuu xambaartay welwelkaaga — *si aad* nabad u heshid (Isha 53:5).
Ciise waxaa laga dhigay inkaar — *si aad* u barakawdid (Gal 3:13,14).

Ilaah wuxuu rabaa inaad fahantid inuu *Ciise dembiyadaada u dhintay oo u soo sara kacay si xaq ku noqotid.* Xaqnimada uu Ilaah nala rabo waa mid ku kaamilantay dhimashada uu Ciise ku dhintay iskutallaabta. Wuxuu u dhintay inaad adigu noolaatid. Wuxuu bixiyey deentii dembiga e laguu haystay si aad ku xurowdid. Waxaa isaga laga dhigay mid inkaaran si aad adigu u heshid barako kasta oo xagga Eebbe ka timaada ee lagu tiriyo xagga samooyinka (Efe 1:3).
Waa inaad Ilaah ku mahadisaa iskutallaabta oo aad rumeysata awooddeeda, adigoo ogolaanayo waxyaalahaasi laguugu iibiyey dhimashada Ciise Masiix. Kuma noolin xiliyadii Axdiga Hore. Waxaan ku noolnahay xiliyada iskutallaabta wixii ka dambeeyey, waana xiliga Axdiga Cuseb. Waxaan ku noolnahay xili uu dhiigga Ciise yahay kan lagu saleysin karo axdiga ugu muhimsan.

Iskutallaabta – Barakada Nolosha oo dhan
Dhiigga uu Ciise iskutallaabta ku daadshay waa dhiigga axdiga. Waa xaqiiqda la haysto oo caddeyneyso in axdiga dhiiggaasi lagu galo uu yahay mid dhab ah oo lagu dul aasaasay balamada kuwa ugu heerka sareyaan ee lagu helo Ciise Masiix (Cibraaniyada 8:6).
Oo sidaas daraaddeed isagu waa dhexdhexaadiyaha axdiga cusub in kuwii loo yeedhay ay helaan dhaxalka weligiis ah oo la ballanqaaday, waayo, dhimashadu waxay u noqotay ka madaxfurashada xadgudubyada lagu sameeyey axdigii hore. (Cibraaniyada 9:15).

Axdiga Cusub waxaa ku jiraan balamo iyo barakooyin taabanayaan qayb kastoo ka mid ah nolosha. Ciise wuxuu daadiyey dhiigiisa, wuxuu noqday waaqdhaca dhabta ah uu ka guuleystay ibliiska. Sababtaas awgeed, haddaba waxay haysata fursad ay barakooyinka Ilaah ugu soo dul degaan noloshaada. Guul ayaa kuu diyaar ah iyo weliba nolosha ku xidhan Ilaah ayaa ku suganeysa.
Ciise wuxuu u dhintay inaad dareentid barakooyinka Axdiga Cusub. Xataa maantadan, wuxuu fadhiyaa gacanta midigta ah ee Ilaaha Aabbaha ah oo wuxuu kuu duceynaya, oo wuxuu kugu duceynaya inaad heshid waxyaalahaasi uu kula rabo oo dhan oo kugu siiyey dhimashadiisa (Rooma 8:34; Cibraaniyada 7:25).
Wuxuu deenta dembiga kugu guday heerka ugu sareysa e iskutallaabta, wuxuu rabaa inaad faa'idada ugu weyn e badbaadadaasi inay taada ahaato. Wuxuu dusha ku xambaartay xaaladdaasi daran oo aan inaba si buuxda u fahmi karin wuxuu maray. Wuxuu dhedhemiyey heerka uga sareyso e dembiga iyo niyadjabka, si aan aniga iyo adiga uga faa'ideysano barakooyinka kuwa ugu waweyn.
Ha diidin wuxuu kugu deeqayo oo bedelkii aad diidi lahayd ku sharaf isaga adigoo ogolaneysid oo qadaneysid wuxuu dhimashadiisa kugu siiyey. Ciise wuxuu helaya farxadda ugu weyn markaan isaga ku sharfeyno ficilka iskutallaabta, taasi oo aan ku ficilgelineyno ogolaanshaha aan ogolaneyno wuxuu iskutallaabta nagu siiyey. Barakooyinkiisa waa kuwa qiima badan leh – naftiisa ayuu u huray barakooyinkeena. Inaba wuxuu Ciise kuu sameeyey sahal ha u qaadanin, laakiin ku soo dhawey qalbi furan oo mahadnaq leh! Baabtiiska Ruuxa Quduuska ah *Laakiinse waxaad heli doontaan xoog markii Ruuxa Quduuska ahi idinku soo dego; oo markhaatiyaal ayaa iiga noqon doontaan Yeruusaalem, iyo Yahuudiya oo dhan, iyo Samaariya, iyo meesha dunida ugu fog (*Faalimaha Rasuullada 1:8).

4
Awoodda Ruuxa Quduuska ah

Faalimaha Rasuullada 1:8 waxaan ka akhrinay inuu Ciise yidhi, *Laakiinse waxaad heli doontaan xoog markii Ruuxa Quduuska ahi idinku soo dego; oo markhaatiyaal ayaad iiga noqon doontaan Yeruusaalem, iyo Yahuudiya oo dhan, iyo Samaariya, iyo meesha dunida ugu fog (*Faalimaha Rasuullada 1:8).
Ciise wuu ogaa inaynan xertiisa awoodin inay kaamil wuxuu ku amray inay sameyaan haddaanay awood dheraad ah wehlinin. Nolosha uu iyaga ka ballanqaaday iyo tan uu Ilaah diyaar u yahay inuu iyaga siiyo waxay ahayd noolol aanan caadi ahayn, waxay ahayd mid rabaani ah oo xagga samada ka timid. Waana sababta aan Yooxanaa 3:6 uga khrineyno inuu Ciise yidhi: *Waxa jidhka ka dhashaa waa jidh, waxa Ruuxa ka dhashaana waa ruux.* Haddaan si kale ku nidhaahno, qofka markuu noloshiisa isbedel ka helo, wuxuu ahanaya mid mar labaad dhashay; wuxuu ka dhalanaya xaga samada, amaba wuxuu ahanaya mid ka dhashay Ruuxa (Yooxanaa 3:3).
Ciise wuxuu waxyaalahan kaga hadlay Yooxanaa 7:38-39, markuu yidhi: *Kii I rumaysta, calooshiisa waxaa ka duuli doona webiyo biyaha nool ah, sida Qorniinku u yidhi. Waxaas ayuu kaga dhaxlay Ruuxa oo ay kuwii Isaga rumaystay heli doonaan, waayo, Ruuxa weli lama bixin, maxaa yeelay, Ciise weli ma ammaanmin.*

Da'da Ruuxa
Kaddib markuu Ciise dhintay, wuu sara kacay oo wuxuu aaday samada. Wakhtigaasi waxaa

aasaasmay da' cusub; waxaa loogu yeedhay da'da Kiniisadda, da'da nimcada ama da'da Ruuxa. Waxay ahayd xili uu Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah uu ka hawl galay qof kasta oo ka tirsan quruun walba, waxuuna ku shaqeynayey hab cusub oo ka duwan habkii hore ee uu Ruuxa kaga shaqeyn jiray wakhtiyadii Axdiga Hore.
Axdiga hore dhexdiisa, waxaa la fahamsanaa in Ruuxa Ilaah uu ku soo duldegi jiray oo keliya saddexdan cafiis: Boqorka, Wadaadka ama Nebiga. Saddexdan qaybood waxay ahayeen dadka uu Ilaah caleema saaray e Ruuxiisa ayaa ku soo duldegi jiray waxaana oo keliya laga dareemi jiray saddexdan qaybood oo keliya. Maalinta Bentekoteega ayaa bedeshay habkan oo Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah wuxuu noqday mid aan ku soo duldegin oo keliya dad tirro yar oo waddama qaas ah ka tirsan. Wuxuu ahaaday mid deeqdiisa la gaarsiyey quruun waliba oo magaca Rabbiga sareysisa. Wuxuu ahaaday mid aanan ku soo duldegin oo keliya wakhtiya qaas ah laakiin si joogta ah iyaga ugu dhex nool oo noloshooda hogaaminayo, xoojinayo kuna shaqeynao iyaga.
Waa waxa uu Ciise balanqaaday markuu yidhi, *Ilo biyo ah ayaa idinka qulquli doonaan.* Wuxuu macneynayey inuu Ruuxa Quduuska ah si joogta ah uga soo dhex qulqulayo qalbiga qofka. Yooxanaa 14:17 Ciise wuxuu ka sii hadlay wax ku saabsan Ruuxa Quduuska ah, Ruuxa Runta, oo wuxuu yidhi: *waxaa weeye, Ruuxa runta ah oo aanay dunidu qaadan karin, waayo, ma aragto, garanna mayso, idinkuse waad garanaysaan, waayo, wuu idinla jiraa, wuuna idinku jiri doonaa.*
Warka cusub e wanaagsan oo ku saabsan da'dan Axdiga Cusub waa in Ruuxa Ilaah uu cid kasta ku jiro oo ka dhex shaqeynayo wuuna ku dhex noolyahay iyaga. Sidee buu ugu dhex noolyahay? Dhalashada cusub ayuu qofka ugu dhex noolyahay. Marka uu qofka dembiyadiisa qalbigiisa oo dhan kaga toobadkeenayo, dembiyadiisa qiranayo, oo qiranayo inuu Ciise yahay Badbaadiyahiisa iyo Rabbigiisa, wuxuu noqonaya mid mar labaad dhashay. Ruuxa Ilaah wuxuu qofka ka saaraya ruuxii hore e qalbiga qofka Ilaah ka jeedinayey (noloshiisi hore e dembiga lahayd), wuxuu qofka ka dhigaya mid gudaha ka cusub wuxuuna siinaya qalbi cusub e Ilaah u go'an.
Qofkani cusub e go'aansaday inuu Ilaah u go'o, Ilaah ayaa noloshiisa hoy ka dhiganayo. Qof kastoo go'aansaday inuu Ilaah ka cabsado addeecana wuxuu ahanaya meesha ugu quduusan ee uu mar kasta ka dhex muuqanayo. Ilaah kuma dhex noolanayo qalbiga hore e dembiilaha ah, laakiin wuxuu keliya ku dhex nolanaya kan cusub uu isagu isbedelkaasi ku dhaliyey. Qalbigani cusub wuxuu ahanaya meesha uu Ilaah si joogta ah ugu dhaqmi doono – waxyaalahan oo dhanna waxay aasaasmayaan dhalashada cusub kaddib.

Baabtiiska Ruuxa Quduuska ah

Dhalashada cusub waa dareemista nolosha cusub e lagu bedelay tii hore e dembiga lahayd. Saa ay tahayna qofka Masiixa raacsan wax baa u dheer! Ciise wuxuu Faalimaha Rasuullada 1:5 ku yidhi, *…laakiinse waxaa laydiniu baabtiisi doonaa Ruuxa Quduuska ah maalmo aan badnayn dabadood.*
Ciise wuxuu ka hadlayey Baabtiiska Ruuxa Quduuska ah. Wuxu sheegay inay ahayd awood u siyaadin ay kuwa lagu deeqayo ay isaga ugu adeegaya adduunka oo ay awooddiisa waxyaala waweyn oo la yaab leh iyo muucjisooyin ay ku sameynayaan. Tani waa mid ka tan weyn in Ilaah qalbi wanaagsan e laga helo dhalashada cusub lagula noolaado oo keliya. Baabtiiska Ruuxa Quduuska ah waa awoodda Ilaah ee hubeyneyso kuwa mar labaad dhasheen si ay yaabab ugu adegaan Ilaah.
Xertii Ciise way daremeen awooddan markuu Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah iyaga ku soo duldegay maalinta Beentekooteega sida qoran, *Oo waxaa filanla'aan samada ka yimid sanqadh sida dabayl xoog leh oo aad u dhacaysa, oo waxay buuxisay gurigii ay fadhiyeen oo dhan.*

Markaasaa carrabbo u kala qabysamaya sida dab oo kale iyaga u muuqday oo ku dul fadhiistay midkood kasta. Kolkaasaa waxaa kulligood ka wada buuxsamay Ruuxa Quduuska ah, oo waxay bilaabeen inay afaf kale ku hadlaan sidii Ruuxuu iyaga u siiyey hadalka (Faalimaha Rasuullada 2:2-4).
Tani waxay ahayd ficilgelinta ballantii uu Yooxanaa Baabtiisaha sii sheegay markuu yidhi, *IAnigu biyo ayaan idinku baabtiisaa ilaa toobadda, laakiin kan iga daba imanayaa waa iga itaal weyn yahay, kan aanan istaahilin inaan kabihiisa u qaado. Isagu wuxuu idinku baabtiisi doonaa Ruuxa Quduuska ah iyo dab* (Matayos 3:11).
Intay xerta duceysanayeen, dabkii xagga Eebbe ka yimid ayaa ku dul dhacay oo waxaa iyaga baabtiisay Ruuxa Quduuska ah. Taasi oo calaamad u ahayd ishaaro dadka u cad iyo muqaal sbeeshel ah, waxay bilabeen inay ku hadlaan afaf: *Kolkaasaa waxaa kulligood ka wada buuxsamay Ruuxa Quduuska ah, oo waxay bilaabeen inay afaf kale ku hadlaan sidii Ruuxuu iyaga u siiyey hadalka* (Faalimaha Rasuullada 2:4).
Xerta markuu Ruuxa Quduuska ah ka buuxsamay, waxaa bilaabatay in awoodda Ilaah e sbeeshelka ah laga dareemo noloshooda.

Hadiyadaha Rabaaniga ah
Bawlos wuxuu hadiyadaha Rabaaniga ah ku macneynaya 1 Korintos 12:4-11. Waxaa loo qaybin kara saddex qaybood:
1. Hadiyadda aqoonta: Hadalka xigmadda leh iyo aqoonta iyo kala soocidda Ruuxyada.
2. Hadiyadaha awoodda: Hadiyadda rumeysadka, hadiyadda bogsiinta iyo hadiyadda awoodda muucjisooyinka.
3. Hadiyadaha hadalka: Hadiyadda wax sii sheegidda, hadiyadda ku hadlidda afafka kala duwan iyo hadiyadda macnaynta afafka kala duwan.
Mid kastoo ka mid ah sagaalkan hibooyin waa Rabbaani. Dhammaan waa awood Rabbaani ah uu Ilaah nagu deeqay uu siiyey carruurtiisa kuna siiyey Ruuxa Quduuska. Marka xerta lagu baabtiisay Ruuxa Quduuska ah dhammaan hibooyinkan oo dhan way hawl galeen kana dhex shaqeyeen kuna shaqeyeen iyaga.

5
Ku hadlidda afafka
Hadiyadda Ruuxa midda ugu horeysay sagaalka la sheegay waxay ahayd ku hadalka afafka. Ku hadlidda afafka ma ahan iska daldalan sida kan ay ku hadlaan kuwa uu ruuxaaniga ku soo dul dego, laakiin waa luuqad lagu hadlo oo qabta qof fahmayo e ay fahmayaan dadku ama malaa'igaha (1 Korintos 13:1). Waxa ay ku kala duwan yihiin luuqaddan iyo luuqadaha caadiga ah waxaa weyaan macalinka ama wacdiyaha ku hadlayo ma fahmi karo awoodda uu ku hadlo lagu siiyey ama uu ku hadlayo.
Marar badan, dad ayaa ii yimaada oo waxay yidhaahdaan, "Waxaan ku hadashay af Bengali," ama "af Sawaaxili," Xabashi ama luuqado kale. Maalinta Bentekootega, dadka agagaarkaas ayey fadhiyeen oo waxay maqleen waxyaalaha la yaabka leh ee Ilaah oo lagu sheegayo luuqadahooda hooyo in kastoo ay xerta ku hadleysay aanay fahmin micnaha waxa ay ku hadlayeen. Iyagu waxay ku hadlayeen afaf.

Afafka Rumeystayaasha oo dhan

Marka qofka Masiixa rumeystay lagu Baabtiisayo awoodda Ruuxa Quduuska ah, Ilaah wuxuu isaga siinaya awood uu ku hadlo afafka. Awooddan qaaska ah waa mid calaamad u ah in qofka lagu baabtiisay Ruuxa Quduuska.

Ilaah wuxuu rabaa in qof kastoo noloshii hore ka soo laabtay oo Masiixa raacsan lagu baabtiiso Ruuxa Quduuska ah. Bawlos wuxuu 1 Korintos 14:5 ku leeyahay, *Waxaan jeclaan lahaa inaad dhammaantiin afaf ku wada hadashaan, laakiin waxaan ka sii jeclaan lahaa inaad wax sii sheegtaan. Kii afaf ku hadlaa hadduusan fasirin, waxaa ka sii weyn sikii wax sii sheega, si ay kiniisaddu u hesho wax ay ku dhisanto.* Markuu amarka ugu weyn bixinayey Ciise wuxuu yidhi, *Calaamooyinkanna ayaa la socon doona kuwa rumaysta. Magacayga ayay jinniyo ku saari doonaan, afaf cuscusubna ayay ku hadli doonaan* (Markos 16:17).

Baabtiiska Ruuxa quduuska ah ma ahan mid loogu talagalay mutaclimiin qaas ah. Waa mid u siman qof kastoo Masiixa rumeysan oo addeeca. Ilaah wuxuu rabaa inuu qof kastoo Masiixa afaf ku hadlo.

Haddaba fahan intay xertii boqol iyo labaatanka dhameyd qolka sare ku jireen, *waxaa kulligood ka wada buuxsamay Ruuxa Quduuska ah, oo waxay bilaabeen inay afaf kale ku hadlaan sidii Ruuxuu iyaga u siiyey hadalka* (Faalimaha Rasuullada 2:4). Qof waliba oo iyaga ka mid ahaa wuxuu bilaabay inuu afaf ku hadlo!

Ku hadlidda afafka waxay dariiqa u fureysa hadiyadaha kale e uu nagu deeqayo Ruuxa Quduuska ah. Markii iridda loo furo sida biyo meel ku xidhnaa, webiyo ah biyaha nool ayaa bilaabanayaan inay nolosheena ka soo butacaan, oo awooda kale oo kheyr ah ayaa ku dhex butaaci doonaan qulqulkaasi. Webiyada bogsiinta, xigmad Rabbaani ah iyo awood Rabbaani ah ayaa muuqanayaan.

Qoraalada Faalimaha Rasuullada oo dhan waxaan ka arkeyna tusaalooyin ku saabsan awoodo Rabbaani ah oo nolosha dadka laga arkayo kuwaasi oo ka soo butaceen nolosha xerta. Intay Baabtiiska Ruuxa Quduuska ah ku hawlanayeen waxaa iyaga lagu *huwiyey awood xagga sare kaga timid* (Luukos 24:49), oo isla markiiba waxaa si xoog leh u bilawday hadiyadaha Ruuxa Quduuska ah oo ku muuqday ficilada noloshooda.

Marxaladaha kala duwan e afafka looga hadlo

Saa ay tahayna ku hadalka afafka ma ahan mid ku kooban hal shey. Afafka waxay leeyahay sababo kala duwan. 1 Korintos 14:4 waxaan ka akhrineyna inay noo sheegeyso in sababta afafka nagula deeqayo ay tahay inaan ku barbaarno. Markaad afafka ku duceysaneysid, waa nafsaddaada tan duceysaneyso (1 Kor 14:14). Qalbigaaguna wuu dhismaya ama dhiiranaan ayaad u heleysa iimaanka cusub, waad xoogeysaneysa, waxaa lagaa dhigaya qof fiiro dheer leh oo nadiif ah intaad afafka ku hadleysid.

Markaad afafka ku hadleysid, waxaad la hadleysa Ilaah. Waa hab hababka ugu qaalisan e Isaga lagula hadlo lagu sareysiyo oo lagu amaano Isaga. Waxyaalaha la yaab leh ayaad Ilaah kula hadli karta oo fahankaaga caadiga ah aad ku dareemi karin (1 Kor 14:2). Qalbigaaga iyo nafsaddaada ayaa Rabbiga heer sare ku amaanayaan oo ku mahadinayaan wuxuu kugu deeqay iyo kan uu yahay. Haddaad ahaato qof afafka ku hadla waxaa kale oo kuu dheeraad ah inaad dadka kale u duceysid. Rooma 8:26 waxay leedahay, *Sidaasoo kalena Ruuxu wuxuu inaga caawimaa itaaldarradeenna, waayo, garan mayno wax inoo eg oo aynu ku taknno, laakiin Ruuxa qudhiisu waa inoo duceeyaa isagoo ku taahaya taah aan sanqaadhayn.*

Ruuxa Quduuska ah ayaa qalbigaaga iyo naftaada la wareegaya oo xukumaya, wuxuu kugu dhalinaya inaad rabootid alla amaanka, wuxuu awood kugu siinaya inaad waxyaalaha aad qalbigaaga ka dareensan tahay aad afka ku soo butaacisid oo ku hadashid “xaraarug aan erayada caadiga ah lagu fasiri karin ayaad ku xaraarugeysa.”

Waxaa jiraan waxyaala aad maankaaga ku fahmi karin, laakiin Ilaah wuu fahansan yahay arimahaas oo Ruuxa Quduuska ah wuxuu kugu hogaaminaya inaad ka duceysatid. Haddaba doonista Ilaah waxay kuu soo raaceysa ducada Ruuxaaga ka soo baxday ee aad ku hadashay afafka. Maankaaga gumud kuguma noqonayo amaba yareynayo ducooyinka aad duceysaneysid maxaa yeelay waxaad toos uga duceysaneysa Ruuxaaga. Ruuxa Quduuska ahna markaasi wuu kugu hogaaminaya inaad ku duceysatid habab kala duwan e afafka ah bedelkii aad hal ha boo keliya ku duceysan lahayd. Waxaa jiraan habab aad u kala duwan oo la yaab leh oo ay ducada ruuxa baahida kala duwan iyo marxaladaha aadanaha aysato lagu xalinayo.

Ku farax oo Istecmaal afafka

Ha u ogolaanin inuu qofna kugu yaso hadiyaddaasi qiimaha badan leh. 1 Korintos 14:39 waxay na leedahay, *Taa aawadeed, walaalayahayow, ku dadaala inaad wax sii sheegtaan, hana diidina in afaf lagu hadlo.*

Ibliiska runtii ma jeclo in dadka lagu baabtiiso Ruuxa Quduuska ah, amaba inaba ma jeclo inay dadka helaan oo ficilgeliyaan hadiyadaha Ruuxa Quduuska lagu helo. Wuxuu isku deyaya inuu xaqiraad geliyo qulqulka awoodda Ilaah, xigmaddiisa iyo iyo weliba sida uu noola joogo hareeraheena iyo qalbigeenuba u ilaalinayo. Sababtaas awgeed badanaa wuxuu ku dadaalaya inuu kajan geliya afafka oo ku jesjeeso kuwa ku hadlaan si uu u xakiyo amaba u joojiyo istecmaalka hadiyaddan muhiimka ah.

Dadka waxay ku xadgudbi karaan wax kasta laakiin inaba cabsidaasi yaanay kaa dhigin mid kaa hakisa ku hadalka afafka marar badan mar alla markuu Ruuxa kugu hogaamiyo. Bawlos wuxuu rumeystayaasha Korintos ku yidhi, *Waxaan Ilaah ugu mahadnaqayaa inaan afaf ku hadlo intaad dhammaantiin ku hadashaan in ka badan* (1 Kor 14:18). Marka way caddahay inuu Rassuul Bawlos marar badan ku hadlayey afafka! Isla sidaas ayuu ku dhaqmayey Butros. Isla sidaas ayey u ahayd Ciise hooyadiis, Mariyan, taasi oo ka tirsaneyd dadka qolka sare ku jireen oo lagu baabtiisay Ruuxa Quduuska ah iyada iyo xertuba (Faalimaha Rasuullada 1:14).

Marnaba ha ogolaanin inay cidna kaa reebto ku hadalka ama ay yareyso inta goor ee aad ku hadli lahayd afafka taasi oo ah ahdiyadda uu Ilaah kugu siiyey Ruuxiisa Quduuska ah. Waa inaan fahantid, sida aad u istecmaali lahayd, marka aad istecmaali lahayd iyo sababta aad u istecmaaleysid ku hadalka afafka. 1 Tomoteyos 4:14 waxay leedahay, *Ha dayicin hibada aad haysatid oo lagugu siiyey waxyaalihii laguu sii sheegay markuu waayeelladu gacmahooda ku saareen.* Haddii aan aayado sii akhrino waxaa qoran, *Taas daraaddeed waxaan ku xusuusinayaa inaad kicisid hadiyadda Ilaah ee kugu jirta oo kuugu timid gacmosaariddaydii* (2 Timoteyos 1:6).

Sidee baa Ruuxa Quduuska ah laygu Babtiisi karaa?

1. Waa inaad Ilaah u riyaaqdid. Bawlos wuxuu Korintoska kowaad 14:1 nagu leeyahay, *Doondoona hadiyadaha Ruuxa.* Ku kala duwanaanshaha fikiradaha iyo is hooseysinta xad dhaafka ah waxba Ilaah lagagama helayo.
2. Ha ogolaanin inaad ku ficiltamtid ficil aad ogtahay inuu dembi yahay, ka dheeraw inaad doonista Ilaah gorgortan la gashid oo aad ku bedelatid hab dhaqanka adduunka. Haddii aad wax isku ogtahay ka toobad keen oo Ilaah u qiro si aad ugaga xurowdid dhiigga Ciise Masiix. (1 Yooxanaa 1:9).
3. Qirasho rasmi ah oo qalbigaaga ka soo go'day ku qiro inuu Ciise Rabbigaaga iyo Badbaadiyahaaga yahay. U sheeg Isaga inaad noloshaada oo dhan Isaga oo keliya u u hogaansami doontid una adeegi doontid laakiin u sheeg inaad u baahantahay awooddiisa si aad ku hergeliso waxyaalahaasi aad u riyaaqeysid oo dhan (Faalimaha Rasuullada 1:8).

4. Weydiso Rabbiga inuu kugu baabtiiso Ruuxa Quduuska ah, sida uu kaga ballanqaadayba. Waxba ha isku welwelinin inuu kuu sameyn doono iyo in kale. Luukos 11:13 waxaa qoran, *Haddaba idinka oo shar leh haddaad garanaysaan inaad hadiyado wanaagsan carruurtiinna siisaan, intee ka badan ayaa Aabbihiinna jannada ku jira Ruuxa Quduuska ah uu siin doonaa kuwa isaga weyddiista?* Ilaah aad iyo aad ayuu u rabaa inuu ku siiyo Ruuxiisa Quduuska ah.
5. Haddaba Baabtiiska Ruuxa Quduuska ah ku qaado iimaan. Baabtiiska Ruuxa Quduuska ah lagu baabtiismayo waa wax ka balaaran fikiradda ay dad badan qabaan ee ah inay ku xiran tahay dareenka. Asalka waa shey lagu fami karo oo keliya hogaanka Ruuxa ee ma ahan wax aan dareenka maankeyga ku ogolaan karo ama ku diidi karo. Dad badan ayaa jira oo lagu baabtiisay Ruuxa quduuska ah iyagoo aan helin dareensigaasi sbeeshelka ah e Ruuxa Ilaah ka imanayo. Sidaa ay tahayna, gadaal dambe waxaa ka suurtagal ah in waxyaalahaasi aad dareentay ay qalbigaaga ku barbaraan oo ay isku bedelaan afafka oo caddeynayaan hadiyadda aad heshay qaybteeda.
6. Afkaaga fur oo hadal. Haddaba xusuuso waxaan ka akhrinay Faalimaha Rasuullada 2:4 oo leh, *waxaa kulligood ka wada buuxsamay Ruuxa Quduuska ah, oo waxay bilaabeen inay afaf kale ku hadlaan sidii Ruuxuu iyaga u siiyey hadalka.* Xertii waxaa ka buuxsamay Ruuxa Quduuska ah laakiin go'aanka lagu hadlayo iyaguu ka yimid. Ruuxa Quduuska ah wuxuu iyaga siiyey luuqadda iyo erayada laakiin waxay ahayd inay go'aansadaan inay afka kala fedaan faruurahooda dhaqaajiyaan oo ay u ogoladaan inuu codka ka soo baxo qaybta jidhka baniaadmiga u qaabilsan cod soo saaridda e dhuunta ku jira!
Waa inaad isla sidaas sameysid! Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah ayaa wax kasta kuu iftiiminaya, laakiin masuuliyaddaada ma qaadayo – waxaad adiga ku hadli lahayd kuma hadlayo. Wuxuu ku siinaya luuqad ka duwan afkaaga hooyo, amaba erayada ugu waweyn e diinta istecmaasho, laakiin wuxuu ku siinaya erayo kaga yimid Ruuxa Ilaah, kuwasi oo ka soo butaacayaan gudahaaga. Dabadeena, adiga ayaa isla leh masuuliyadda lagu hadlayo erayadaas. Maraha qaarkood, marka dadka lagu baabtiiso Ruuxa Quduuska ah, webiyo ayaa aasaasmayaan oo ay ka soo butaacayaan afafka.
Dadka qaarkood waxay ku bilabayaan waxyaala yar yar. Afafka way kala duwan yihiin oo habka aad ku bilabeyso muujinta hadiyaddaasi uu Ruuxa Ilaah kugu deeqayo culeys ma lahan. Muhimadda ugu wayn waxay tahay inaad tallaabada kowaad qaaddid. Dabadeetana, luuqaddu si tartiib ah ayey ku weynaneysa. Aasaaska yar wuxuu u bedelmi doonaa webi qulqulkiisa balaaranayo ugu dambeystana webi weyn oo afaf kala duwan ay ka soo butaacayaan.

Hibo qaali ah oo ka timid Ilaah

Baabtiiska Ruuxa Quduuska waa hibo qaali ah oo ka timaaddo Ilaah. Markay afafka bilawdaan inay kaa soo butaacaan, waxaad fahmeysa inaad heshay qalab awood badan uu Ilaah rabo inuu habab kala duwan ku adeegsado. Ilaali hibada uu Ilaah kugu aaminayo, oo Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah u ogolaw inuu kuu istecmaalo hibooyinkiisa kale. Isla sida aan hadda ka hore aragnayba, hibooyinka waxaa ka mid ah macneynta afafka, wax sii sheegidda, hadal xigmad leh, hibada bogsiinta iyo wixii la midka ah.
Waxaad arkeysa sida uu Ruuxa Quduuska ah kugu dhex butaacayo wakhtiba ka ku higa ayaa kii hore ka badan barakooyinka, dib u dhisidda baniaadminimadaada iyo xidhiidhka aad Ilaah la leedahay, bogsiinta, xornimada ku fideyso rag iyo dumar fara badan. Isla Ruuxii Ciise ku soo degay ayaa hadda adiga kugu dedan. Isla sida Isaga loo subkay ayaa adna laguu subkay si aad u awooddid inaad sameysid isla hawlihii uu sameeyey Ciise (Yooxanaa 14:12-13).

Fidi Injiilka!

Markaasuu wuxuu iyaga ku yidhi, Dunida oo dhan taga, oo uunka oo dhan injiilka ku wacdiya. Markos 16:15

6
Injiilka xoogga leh

Adduunka oo dhan waxaa laga arkaya dad fara badan oo ay si joogta ah tiradooda u si badaneyso ayaa fahmayaan inuu Ilaah yahay mid jira waayo wuxuu muujiyey nabaddiisa, jacaylkiisa iyo awooddiisa. Sharaftiisa ayaa aad iyo aad u muuqaneysa kuwa badan si ka balaaran sida ay hadda ka hore ahaan jirtay. Wuxuu kan uu yahay ummadda ugu muujinaya calamooyinka iyo yaababka kala duwan. Erayadiisa lama soo xigto oo keliya ee waxaa sii xoojinayaan muucjisooyinkiisa awoodda leh. Kuwa badan oo Ciise raacsan ayaa fahmayaan awoodda Ruuxa Quduuska oo raacsan waxayna iyaga u tahay nidaamka nolosha Ilaahna si joogta ah ayuu isukeen muujinaya! Xertii ugu horeysay waxay yidhaahdeen, *Waan aragnay sharaftiisa* (Yooxanaa 1:14). Waxay arkeen Sharafta Ilaah oo lagu muujiyey nolosha Ciise, wuxuu ku hadlay iyo waxyaalaha uu sameeyey. Isla sharaftan waxaa si aad ah looga arkaya nolosha Masixiinta Isaga raacsan ee loogu yeedho jidhka Masiixa. Ilaah wuxuu rabaa inuu dunida isukaya muujiyo oo maalin waliba ayuu ku hawlan yahay taasi. Aad iyo aad ayuu u rabaa inuu muujiyo jacaylkiisa iyo awooddiisa si ay dunidu u rumeysato una addeecdo Isaga.

Markuu Ruuxa Ilaah shaqeynayo oo dad ku sugan afarta daraf ee adduunka ay xerta Ciise ku darsamayaan, ibliiska si joogta ah ayuu u hawlan yahay isaguna si uu dadka uga reebo fahanka iyo addeecista Ilaah. Ibliiska wuxuu ku talajira inuu tirada ugu badan ee dadka ka reebo maqlidda Iniilka, rumeysadka iyo ficilgelinta qoraaladaasi iyo weliba si aanay u ahaanin ku badbaado. Wuxuu ku dadaalaya inuu xaqiraad geliyo fidista Injiilka, si aanay dadka weligoodba u arkin sharafta Ilaah. Wuxuu istecmaalaya habab badan uu ku hergelinayo ujeeddadiisa – hababka uu ku shaqeyo waa inaan fahansannahay si aan u awoodno inaan ka hortagno si uusan ugu guuleysanin kutalagalkiisa. Rasuul Bawlos wuu ka hadlay arintan markuu yidhi …*inaan shayddaan inaga faa'iidaysan, waayo innagu ma nihin kuwo jaahil ka ah xeeladdiisa.* 2 Korintos 2:11.

Rooma 1:16 waxaa ku cad in Injiilka uu yahay awoodda Ilaah ee ay dhammaan dadka oo dhan ku helayaan badbaado. Awoodda Ilaah waxaa lagu muujinaya "warkiisa wanaagsan". Korintoska 1aad 1:17, Bawlos wuxuu leeyahay, *Waayo, Masiixu iima uu soo dirin inaan dad baabtiiso, laakiin wuxuu ii soo diray inaan dadka injiilka ku wacdiyo, ee ma aha inaan ku hadlo xigmadda hadalka, waaba intaasoo iskutallaabta Masiixa la caaqibo tiraaye.* Haddana Bawlos wuxuu sii leeyahay *Laakiin hadalkkayga iyo wacdiigayga kuma aan hadlin hadalllo sasabasho iyo xigmad ah, laakiin waxaan hadlay tusidda Ruuxa iyo xoogga, inaan rumaysadkiinu ku tiirsanaan xigmadda dadka, laakiin inu xoogga Ilaah ku tiirsanaado* (1 Kor 2:4,5).

Cadawga wuxuu rabaa inuu Injiilka ka xoogo awoodda ku jirta, hababka midkood uu ibliiska sidaas ku ficilgelinayo waa xigmadaha badan uu ku khasayo fikiradaha cilmi adduunka taasi oo inta badan xoogga la sarayo. Cilmiga adduunka iyo fikiradaha adduunka si xoog leh ayey uga soo horjedaan muujinta iyo aqoonta Injiilka. Saa ay tahayna shaki kuma jiro awoodda dhabta ah waxay ku jirta Injiilka. Sababtaas awgeed, hadduu ibliiska awoodo inuu dib u qoro, sharaxo, saxo oo dib u qiimeyso Erayga Ilaah, inuu ka dhigo mid "fikiradda baniaadmiga" ku tiirsan, durbaba wuu beelaya wanaagga uu lahaa oo waxaa soo harayaan oo keliya qoraalo dadka ku hogaaminayo habka guud e ay ku noolan lahaayeen iyo ku noolanshaha anshax wanaagga. Hadduu intaas ku guuleysto natiijada waxay ahaaneysa inuu injiilka ahaado mid berxan oo laga dhacaamiyey

dhedhenkiisa oo dhan iyo awoodda ku jirtay.
Sheddaanka wuxuu isa saaray masuuliyadda burburiska injiilka taasi uu kaga dhex shaqaynayo dadka oo dhan xili kastoo ay ku noolyihiinba oo midda ugu murugada badan waxay tahay marar badan ayuu meela kala duwan dad kala duwan kaga guuleystay. Laakiin amaan iyo sharaf waxaa mudan Rabbiga, Ilaah ayaa burburinaya guulaha uu sheeddaanka ku faanayo fursad dambena uma helayo inuu kutalagalka Ilaah dariiqa ka leexiyo!

Muucjiso ma jireyso haddaanay Quduusnimo jirin

Ruuxa Quduuska ah sida dabeel weyn ayuu ayaa maanta laga dareemaya inuu xaaqaya adduunka oo dhan taasi oo kusaleysan qoraalka Ilaah. Boqolaal kun ayaa fursad u helaya inay helaan Erayga Ilaah, rumeysanayaan, oo ficilgelinayaa si ka badan sida ay waagi hore wax ahaan jireen. Adduunka oo dhan waxaa laga dareemaya dhaqdhaqaaq ah inay dadka aaminayaan qoraalka Baybalka iyo Injiilka oo si buuxda loo qadanayo. Dadka ay isugu jiran rag iyo dumar way ka daleen maqlidda qoraalka Ilaah oo looga fasirayo meela kala duwan iyadoo aan laga daremeymin sharafta iyo awoodda Ilaah. Dadka waxay ku darsamayaan xerta Ciise isla marka la siiyo qoraalo dhab ah - oo injiilka asliga ah ku saleysan – ma ahan mid la berxay ama loo ekeysiyey. Adduunka oo dhan ayey dadka ka fahmeen inuu Ciise ku dhaqamyo wuxuu ku hadlo wuxuu yidhaahdana kama leexdo Isagu.
Natiijada haddaba shaki kuma jiro oo waxay ahaaneysa inay doodo badan ka furmayaan adduunka ruuxyaha taasi uu boqorka adduunkan – sheeddaanka lagula murmayo. Laakiin tani ma ahan mid cusub weligeed ayey jirtay. Xerta sida aan uga akhrineyno Faalimaha Rasuullada si joogta ah ayey ula kulmeen muramada noocaas ah meel alla meeshay u safreen oo dhan.Xataa Rasuul Bawlos meel alla meeshuu tagay wuxuu kala kulmay dad si xoog leh uga soo horjedaan wacdinta Injiilka. Meel waliba dhib ayaa ka tagnaa. Faalimaha Rasuullada 16:20 waxay noo sheegeysan waxay dadkii halkaas ku sugnaa ka shegeen xerta uu Ruuxa Quduuska ah ku soo dul degay oo waxay yidhaahdeen, *Dadkan magaaladeenay af gembiyeen.* Maxay tahay sababta ay sidaa ugu dhawaqeen? Sababta waxay ahayd Rasuul Bawlos ayaa ku wacdiyey Ciisaha badbaadada oo wuxuu ruuxya wasakh ah ka saaray nin bukay, wuxuu wareeriyey xarada sheeddaanka. Simidda awoodda e xagga ruuxyada waa la bedelay oo boqortooyada Ilaah ayaa heleysa guusha tan ugu sareysa.
Habka kale uu cadawga adeegsado uu ku burburinayo sharafta Ilaah – ama habka uu Ilaah isku muujinayo inaanan adduunka laga fahmin uusan faafin waa tan uu ku jarrabayo xerta Ciise inay ku dhaqmaan nolosha caadiga ah e addunka laga soo dhaweynayo. Suurtagal ma ahan inaad hal lug ku haysid boqortooyada ibliiska oo tan kalena aad ku haysid boqortooyada Ilaah. Soomaali waxay tidhi, ‘hasha labada geed jacayl…’ ama ‘labada fardda ninkii fuulo…’. Runtii sida ay Kitaabkuba ku dhigantahay, Laba sayid hal mar uma wada adeegi kartid. Suurtagal ma ahan inaad xibnaha jidhkaada ka tirsan aad u istecmaasho sida hub dagaal kula jiro xumaanta iyo wanaagga.
Markuu Ilaah rabbo inuu muucjisooyin u sameeyo dadkiisa uuna ogolanayo inuu macaarad lahaado, wuxuu ku bilabaya inuu dib u wacyo geliyo oo nadiifiyo dadkiisa si ay Isaga ku aaminaan oo u addeecaan Isaga. Markuu Ilaah rabay inuu wax cusub sameeyo oo uu carruurta reer binu Israa’iil u kaxeynayey dhulka uu ka balan qaaday wuxuu iyaga ku yidhi, *Oo Yashuuca wuxuu ku yidhi iyagii, ka hor gudba sanduuqa Rabbiga Ilaahiinna ah, oo waxaad tagtaan Webi Urdun dhexdiisa, oo midkiin waluba dhagax garabka ha ku qaado, inta reer binu Israa’iil qabiilooynkooda tiradoodu tahay* (Yashuuca 3:5).

Ololaha guud e dadka lagu Daahirinayo

Markuu Ilaah rabo inuu muucjisooyin sameeyo oo isukey muujiyo dadkiisa iyo awooddiisa, waa horta inay dadkaasi ay ahadaan kuwa daahirsan oo iisu diyaariyey inay u adeegaan isaga. Ilaah ma istecmaalayo dad ku kala qaybsan addeecistooda, oo aan daahirsanayn oo ku nijasoobeen dembiga, amaba u hogaansan ruuxyada iyo awoodaha adduunkan. Hadduu dembi xarada ku xareysan yahay waxuu mar kasta daboolaya awoodda Ilaah. Markay xerta Ciise ku liqmayaan badda fikiradaha adduunkan iyo heerka anshaha nooleydka dunida, awoodda Ilaah kama dhex muuqan doonto dadka noocaas ah. *Dhillayo iyo dhillooyin yahow, miyeydnaan garanayn inay saaxiibnimada dunidu Ilaah la col tahay? Sidaas daraaddeed kii kasta oo doonaya inuu saaxiib la ahaado dunida, Ilaah buu la col noqdaa* (Yacquub 4:4). Danbigan ma ahan keliya waxyaalaha jidhkeena aan ku sameyn karno sida galmada ay galaan dumar iyo rag aanan isqabin, tuugnimada, dilka, jacaylka lacagta, laakiin waxaa kaloo ka tirsanaan karaan dembiyada "xushmadda leh" sida xinaaska, rajeynta waxyaala aanan suurtagal ahayn, gunuunaca, xamashada iyo ruuxyada ku fikiraan sharka iyo maanka dadka xukuma. Haddaannu nahay Xeerta Ciise waa inaan ogaano inaanan adduunkan isku heer ahaaneynin. Markay dunidu si xun wax uga hadleyso, annagu waa inaan ka duwanaano. Meelaha ay dadka dunida raacsan qaladaad ka arkayan oo calaancalayaan, waa inaan wanaag ka hadalnaa oo niyadda u dhisnaa dadka. Isla sida uu Bawlos yidhayba sida aan uga akhrineyno1 Korintos 4:12, 13, *Waana hawshoonnaa annagoo gacmahayaga ku ku shaqayna; markii lana caayona waan ducaynaa; markii lana silciyona waan dulqaadannaa. Markii lana xantona, **si qabow ayaannu u hadallaa**, waxaannu noqonnay uskagga dunida iyo waxa ugu wasakhsan wax kasta tan iyo haatan.* Bawlos heer kale ayuu ku shaqeynayey – si degan ayuu ku jawabayey qalbi dejin leh. Wuxuu ku hadlayey erayo ka soo butaacayaan Ilaah nool, oo ma istecmaaleynin fikiradha addunka e ay dadka badankood ka siman yihiin.

Awood heer sare ah ayaa ku jirta Erayga Ilaah. Wakhtiyada nagala hadlayo ama nala xamanayo, waa inaad ku dadaashid inaadan xoogaaga iyo qalbigaaga saarin waxyaalaha xun xun oo dhan ee agagaarkaaga ka dhacayaan. Bedelkeeda akhri oo waxyaalahaasi oo dhan ku fasir qoraalka Eebbe. Markaad ku hadleysid Erayga Eebbe Isaga ayaa Eraygiisa kugula hadlaya awooddiisa oo dhan oo bedelayo marxaladda ku haysato. Sababtaas awgeed carabkaaga wuxuu ahanaya qalabka uu Ilaah istecmalayo ficiladiisa uu isukayamuujinayo sharaftiisa ku hergelinayo doonistiisa si aad u barakowdid. Wuxuu rabaa inuu maankaaga iyo iyo carabkaaga noqdaan kuwa u wada siman Injiilka oo ah qalabka lagu fidinayo injiilka, kaasi oo ah awoodda Ilaah e lagu helo badbaadada – ee ma ahan mareenka wasakhda mushqusha qaada.

Waxaa maanta kiniisadda ka dhex socda ololaha guud ee lagu daahirinayo dadka. Qoraalada aan Kitaabka Eebbe ku jirin iyo habka ay diimaha u fikiraan iyo dhaqamada adduunka dariiqa ayey u baneynayaan daahirinta soo degeysa, quduusnimada iyo rumeysadka lagu noqonayo xerta Ciise si loo muujiyo sharafta Rabbiga.

Baybalka wuxuu kiniisadda ku sheegaya inay tahay ciidanka Rabbiga laakiin waa ciidaan dhar la'aan ah, biyo la'aan ah oo aan hubkooda dib loo habeyneynin. Ciidanka gaajo u dhimanayaa, dhaxanta ay ligligeyso oo aan istaahilin inuu hayo kaalinta. Ciidan uu khilaaf kudaha ah burburinayo, oo aan lahayn hawl u go'an oo aan weliba hawsha loo xilsaaray si buuxda masuuliyadda u qaadaneynin waa mid aan macna lahayn.

Ilaah waa hore ayuu ka shaqeeyey ciidankiisa Isagoo ku talagalsanaa inuu u diyaariyo iyaga xarbiga guud ee awoodda Ilaah iyo sharaftiisa ee hortaala iyaga. *Waayo, innagu lama legdanno bini-aadan, laakiinse waxaynu la legdannaa kuwa madaxda ah iyo kuwa amarka leh iyo taliyayaasha dunida gudcurka ah iyo ruuxyada shara ah oo samooyinka ku jira* (Efesos 6:12). Waa inuu Rabbiga ina qalabeyo oo ina hubeyo si aan u awooddno inaan kuwa badan gaarsino Injiilka si ay u badbadaan.

Ilaah wuxuu kiniisaddeena Word of Life Church iyo skoolka Baybalka nagula hadlay oo noo sheegay inay shaqadeenu tahay, *"Ku hubeyo dadka Ilaah Eraygiisa rumaysadka, u tabara iyaga sida ay ku hawl gelin lahayeen hubabka ay ku heleen hibooyink Ruuxa Quduuska ah ka heleen oo loogu talagalay inay istecmalaan kuna guuleystaan ugu adeegidda Rabbiga."* Taasi ayaa ah hawsha uu Ilaah nagu caleemo saaray waanna ku mahadineyna maxaa yeelay tani waan ka aragnay waddanka Swiden, kuwa Erayga Rabbiga qateen waxay si aad ah u addeecayaan uguna dhaqmayaan si aan hadda ka hore la arkin. Masixiinta meel kastoo ay ku sugan yihiinba waxay fahmeen awoodda ku jirta magaca Ciise, iyo weliba dhiigiisa, Erayga Ilaah, ducooyinka iyo sareysinta iyo amaanta Eebbe.

Xerta Ciise ee ku hareersan adduunka waxay fahmayaan kaalinta ay ka ciyarayaan xidhiidhka ay Ciise la leeyihiin oo weliba waxay sii fahmayaan awoodda ay u leeyihiin inay ku burburiyaan cadawga. Si culus oo aan hadda ka hore la arkin ayey xerta Ciise u dareemayaan hawlgalka biyoonka Ruuxa Quduuska ah iyo sida uu noloshooda uga muuqanayaan oo si dhiiranaan leh ayay u marag furayaan Ciise. Natiijadeeda waxay ahayd inay dad fara badan xerta Ciise ku darsamaan oo injiilka si xoog leh ayuu bulshadeena uga dhex shaqeynaya si ka xoog badan sida ay hadda ka hore ahaan jirtay mudda dheer oo la soo dhaafay.

Ilaah ayaan aad ugu mahadineyna hawlaha waweyn ee uu ka wado waddanka Swiden iyo adduun weynaha guud ahaan maanta. Ololahan guud iyo ka hor imaadka aan dareemeyno waxaan u aragnaa inay tahay wax muujinayaan inuu cadawga rafanayo oo sida uu qof yidhayba tahay 'xaaladdiisu barigga dhexe' markuu arkayo inay tirade xerta Ciise sii badaneyso waayo xerta waxay fahmeen inaysan inaba wax faa'ido ah ku haysanin ibliiska. Iyagoo iimaan ku ficiltamayaan oo Erayga Eebbe ficilgelinayaan oo horey uga sii barbaarayan iimaankooda cusub iyo xornimada ay ku heleen Ciise.

7
Beer goysku waa diyaar

Haddii aad raacdaan wax bariddeyda, runtii waxaad ahaaneysaan xerteyda. Waxaadna oganeysaan Runta, oo runta ayaa idin xoreyn doonaa (Yooxanaa 8:31,32). Ilaah wuxuu rabaa inay carruurtiisa xor ahaato, saa ay tahayna ma jirro dariiq gaaban oo lagu heli karo xornimada. Kuma xuroobi karno Erayga oo la **maqlo** oo keliya. Waa inaan maqlo erayga waana inaan u arko inuu nolosheyda ku hadlayo oo aan lahaado farriinta qoran, sida iyadoo ay ballamada oo dhanba aniga laygu talagalay shaqsi ahaan. Waayaragnimada carruurta reer binu Israa'iil waxay noo tahay susaalaha ugu weyn. Way maqleen Erayga ee laakiin inaba isuma aanay qaadanin oo qalbiyadooda kagama dhaqmi (Cibraaniyada 4:2), sababtaas awgeed Eraygu qalbiyadooda mudda dheer kuma jirin.

Erayga Ilaah waa noolyahay, waa awood badan yahay wuuna shaqaynaya. Laakiin waxuu nagu hogaaminaya oo keliya waxyaalaha uu Ciise hadda ka hore sheegay taasi oo aan ku waajibannahay inuu Erayga qalbigeena galo kuna barbaaro oo si joogta ah ugu jiro macnaha nolosha lagala hawlgalo. Dabadeetana waxaan fahmeyna runta oo runtana way na xoreyn doontaa. Dadka Ilaah meel kastoo ay joogaanba awoodda ruuxaaniga ayaa ku soo degaa isagoo isku deyaya inuu adduunka ka hor istaago inay bedelaan dadka u jilecsan inay xerta Ciise ka mid ahadaan. Markay maqlaan farriintan, ayaanahan iyo ruuxaaniga ayaa qalbiyadooda xirayaan oo kama qayb qaadanayan barakooyinkaasi uu Ilaah u fidiyey mid kastoo rumeysta Ciise si uusan u lumin ee u lahaado nolosha weligeed ah. Laakiin Baybalka wuxuu caddeynaya uu leeyahay, Kan inagu jira ayaa ka weyn kan adduunka ku jira! Caawiyahay, Ruuxa Quduuska ah ayaa inagu dhex

nool oo nabarayo “runta oo dhan.”
Maanta caleema saar weyn ayuu adduunka kaga sugan yahay Erayga Ilaah, oo aad baa loo dareemaya maanta ka badan sida loo dareemi jiray tobnaan sanadood e la soo dhaafay. Ruuxa Quduuska ah, ee ah macalinka, wuxuu hogaaminaya kuwa hawlaha fidinka injiilka ku jiraan oo si aanay hadda ka hore farriinta u gudbinin ayey hadda u gudbinayaan. Dadka way ogoladeen oo ku ficiltamayaan Erayga Ilaah oo waxay gareen heer ay fahmaan dhaxalka Erayga Eebbe ee ay ka haystaan Ciise Masiix oo weliba waxay go’aansadeen inaysan Erayga Eebbe mooyaane aanay wax kale go’aamadooda ku saleysinin waana aasaaska noloshooda.
Waana sababta ay inoogu caddahay inay dad badan xornimada dhabta ah helayaan, madaama ay ku saleysan yihiin kuna adkeysteen Erayga Ilaah oo subkid heer sare ah ayaa ku subkan noloshooda iyo hawlaha ay Rabbiga ugu adeegayaan. Hawlaha sanado yar oo la soo dhaafay meelo yar ku koobnayeen oo aan muuqan jirin ayaa maanta wadama kala duwan ku fidayaan oo hawlaha Rabbiga gaarsinayaan oo dad badan oo quruuma kala duwan jooga ayaa xornimada dhabta ah Rabbiga kaga helayaan. Kulamada allabariga iyo ururada jaalnimada ay xerta Ciise isugu imaan jireen oo iska nuglayeen maanta aad bey u sii balaarinayaan hawlahooda, tirade dadka ka tirsanna way sii kordheysa oo cabsi la’aan ayey ugu maragfurayaan Ciise iyo hawlahiisa badbaadada leh.

Diyaar u ahaw inaad ka qayb qaadatid Beer goyska

Waxaan ku noolnahay xili ay hamaasiyadda khasan tahay – waa fursad haddii ay maanta naga fakato aan dib u heli karin. Suurtagal mahan in qalabka la diyaariyo mar uu beergoyska diyaar noqday. Waa inuu qalabkeena beergoyska diyaar ahaado ka hore intuusan beer goyska diyaar ahaanin. Markuu beer goyska diyaar yahayna waa inaan hubno waxa aan ku dhaqaaqi lahayn iyo sida aan ugu dhaqaaqi lahayn. Qofka beerta goynayo oo si joogta ah inta iyo xagga u ordayo oo kuwa kale weydinayo hawsha uu ku dhaqaaqi lahaa, wuxuu kuwa beer goyska ka qayb qadanayo iyo hawsha guu ku yahay culaab. Askariga aan hubkiisa hawl gelin karin ee u haysta uu inay kuwa kale hawl gelinayaan wuxu faa’ido u yahay cadawga ee wax faa’ido ah uma ahan kan soo hawl geliyey.
Markuu beer goyska hawlaha Ilaah ku saabsan bislaado, waxaa lagu garanaya hawla badan iyo ka hor imaadyo badan oo hawlahaasi gumud ku ah. Cadawga iskama fadhinayo isagoo arkayo inay dad badan ku aruurayaan boqortooyada Eebbe. Wuxuu kaga hor imanaya roobab culus, daad xoog leh iyo duufaan (Matayos 7:25). Wuu weeraraya oo ka hor imaadyo badan ayuu aasaasaya. Laakiin haddii ay kuwa beer goyska ku hawlan ay ku adkeystaan hawshooda, isla sida guriga lagu dul dhisay dhagax weyn, wey ku guuleysan doonaan hawshaasi.
Isla sida uu guriga salkiisa sugan yahay u taagnaanayo shug kasto ku dhacdo, noloshaaduna wax kastoo lagu ligligo lama dhaqaajin doono, waa haddii uu salka lagu dul dhisay yahay mid sugan. Waa hadda wakhtiga ay ugu habboontahay inaad saldhig sugan u yeeshid noloshaada oo aad u guda gashid tiirarka wax baridda saxda ah ee Masiixa. Waa hadda wakhtiga ay ugu habboontahay inaadan inaba ka xishoonin sahlanaanta nolosha ku jirta kuwa ka midka ah xerta Ciise oo waa inaad u ogolaatid Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah inuu saldhigga wanaagsan oo ahaado oo nagu duldhiso. Waa hadda wakhtiga ay ugu habboontahay ee sida ugu heerka sareyso nagula qalabeyn lahaa oo weliba nagula hubeyn lahaa si mar alla markaan hadleyno, uu ruuxeena la soo butaaco erayga afkeena sida seef laba af le.
Markuu Ruuxa Quduuska ah ruuxyadeena Erayga Eebbe ku butaaciyo waxaan ku fidineyna iimaan iyo dhiiranaan, tani waxay burburineysa ka hor imaadyada Sheeddaanka Eraygaasi awoodda leh oo burburkaasi ku sameynayo sida wax ay jexeyso seef ololeysa oo laba af leh oo waxaa noolol ku helayaan oo ku xuroobayaan rag iyo dumarba. Haddaba waa inaan huwano

Erayga Ilaah si qayb kastoo nolosheena ka tirsan looga dareemo oo ruuxyadeena si joogta ah ugu riyaqaan ku dhaqashada doonista Eebbe. Isdiyaarinta ma ahan wakhti lumis. Ha u ogolaanin inay dulqaadasho la'aan ku habsaamiso ama ku welweliso. Waxaa jiraan dad badan oo rabaan inay ka midho goostaan meel aanay waxba ku beerin – dabadeedtana niyadjab ayaa ku dhacaya markay ku guuleysan wayaan hergelinta balamada ay rajeynayeen. Ilaah si joogta ah ayuu u xajiya ballamadiisa – waa haddii aan xajino ama aan ku dhaqanno sharudooyinkiisa. Wakhtiga u dhaxeyo beeridda iyo beer goosashada waa mid aad muhiim ah. Haddaan ku jirtid ama aad ku dhaqmeysid Erayga, u ogolaw inuu Erayga kugu jiro, midho goosashada daahis la'aan ayey kugu hergeli doontaa e – waadna ka beer goosan doonta.
Waddanka Swiden waxaa lagaga sugan yahay xili ay midhaha kareen dhulka oo dhan ka buuxaan. Sharafta Ilaah ayaa si xoog leh uga dul ololaya korkeena oo waxyaalaha daran e hakatka ku ahna waa laga guuleystay. Inta uu Ruuxa Ilaah waddankaaga ku dul heebeynayo sida daadka, midhta uu Ruuxa Ilaah kugu dhex beeray waa la waraabinaya oo wuu nuuri doonaa oo bixi doonaa. Laakiin tani waxay noloshaada ka muuqan doontaa oo keliya haddii aad wakhti u qoondeysay oo aad kaga ficiltantay ku beerista qalbigaaga. Natiijada waxay ahaaneysa midho badan oo lagu garan doono calamooyin iyo mucjisooyin sida bogsiinta iyo ficilada waweyn e aan ku suurtoobin awood caadi ah sida ruuxaaniyada dadka laga saarayo ibliiska dadka addoonsanayo oo dad badan ayaa noloshoodi hore ee dembiga lahayd ka soo laabanayaan. Hawla badan ayaa barbaari doonaan oo sida Rabbiga uu ka rabbay ku hawl geli doonaan. Ruuxa Ilaah iyo sharaftiisa ayaa si cusub ugu soo dul degi doonaan ururada Erayga Eebbe fidinayaan iyo shaqsiyaalkaba. Dadka waxay arki doonaan inuu Ciise noloshooda ku dhex noolyahay maanta markay arkaan sida ay sharafta Ilaah ugu dul heebaneyso macbudkiisa, kiniisaddisa.
Midabka madawga wuxuu ahaan doonaa hab kii hore ka madaw oo kan cadna wuxuu ahaan doonaa mid sidii hore ka cad oo asli ah. Kala duwanaanshada dhimashada iyo nolosha aad bey u weynaan doontaa, oo ruuxa iyo jidhkuna aad bey u kala duwanaan doonaan oo haddaba waa la dareemi karaa, damaca jidhkuna hadda wax sal ah uu leeyahay majirto.
Fikirado badan oo ka soo aasaasmeen qalbiga baniaadmiga maalinba tan ku xigta ayey ka sii liidanayaan oo dib u gurasho ayey wadaan oo xerta Ciise ayaa sida buur aan la dhaqaajin karin oo xor bey ka yihiin silsiladaha sheeddaanka. Ciidanka Ilaah horey ayey u sii socdaa oo guushooda ay cadawga ka guuleysanayaan aad bey u sii balaaraneysa, shaki ugama jiro inay guulba mid ka weyn uga sii gudbayaan wax kastoo ay ku dhaqaqaanba. Isla sidaasna, kuwa beer goyska diyaar u ah way garanayaan waxay ku dhaqaaqi lahayeen. Wakhti kuma luminayaan wadahadal aan macna lahayn iyo iswareysi waayo horey ayey iisu soo diyaariyeen. Toos ayey u hawl gelayaan. Beergoyska waa diyaar. Waxaa la joogaa xiliga loo diyaagaroobi lahaa wax alla wuxuu Rabbiga nagu amray inaan sameyno!

8
Waad ahaan karta marag fure midho dhal leh!

Kuwa badan oo xerta Ciise ka mid ah ayaa waxay ku noolyihiin noolol ay iskuxukumayaan sida daran ee ay uga liteen xagga midho dhalkooda. Madaama ay fahansan yihiin in laga doonayey inay ku marag furan hawsha Ciise, waxay iisu arkayaan inaynan gaarin heerka laga rabo amaba aanay addeecin maxaa yeelay, waxay arkayaan fursado badan oo noloshooda soo martay ee ay hawl gelinin. Fursadahaasi waxay ahaayeen kuwa ay dad badan oo saaxibadooda ah oo aan xerta Ciise ka tirsanayn inay fahansiyaan Ciise kan uu yahay inay fahsnsiyan. Ku marag furidda Ciise

waxay noqotay hawl sida hawlaha aan maalin kasta la tacaaleyno sababtaas awgeed ayey dadka u dareemayaan inay dhinac kaga dhaceen waajibkooda amaba ay duruftaasi ku sababeyso iyaga inay cudurdaar sameystaan sida, "…weli ma aanan qaan gaarin."
Ilaah nagama doonayo inaan sawirka noocaas ah haysanose wuxuu inoo haya hab layaab leh oo aan kaga xuroobi karno fikiraddaasi si ay farxaddeena u sugnaato oo aan dhiiranaan ugu maragfurno Rabbiga. Sheyga ugu horeyey uu Ciise xertiisa ku yidhi waxay ahayd, "*I soo raaca waxaan idinka dhigayaa kuwa dadka jillaabta* (Matayos 4:19). Haddii ay qiratid inuu Ciise yahay Rabbigaaga oo aad rabtid inaad Isaga si toos ah ugu adeegtid oo u addeecdid, wuxuu kaa balan qaaday inuu kaa dhigi doono mid dadka jillaabta. Kalumeystaha waa qof kaluunka daba. Iskama fadhinayo markay dadka kale kalumeysanayaan isaguna waa inuu shabaqiisa ku tuuro moolka badda si uu isna wax u helo. Iskuma haleynayo waxay kaluumeystayaasha kale soo saarayaan. Waa maxay sababta? Maxaa yeelay isaguba waa kaluumeyste caan ah.
Hawlgalkaaguna waa isla sidaas adiga xerta Ciise kamid ah. Waxaad tahay mid dadka dabaa, oo tani ma ahan mid ku xiran asalkaagi hore, ama shaqada aad ku taqsuustay amaba xaaladdaadi hore. Rabbiga wuxuu rabaa inuu marxaladdoo kaa bedelo sida qaladaadkaagi hore ama caasinimadaadi oo wuxuu rabaa inuu kaa dhigo mid midho dhal leh. Waa ibliiska kan jacal inuu cadaadiyo xerta Ciise, oo ku xukumayo fursadaha ay noloshooda kaga faa'ideysan wayeen amaba sida daran ee ay geesi kaga noqon wayeen marxaladaha soo maray. Laakiin xataa haddii aadan weligaa hal qofna wax u sheegin oo aan ku hogaaminin qirashada uu qofkaasi qirtay inuu xerta Ciise ka mid ahaado, inaba ha niyad jebin oo si dhiiranaan ah qalbigaada adkee oo isku dhiiri geli qoraalka Erayga Eebbe oo waxaad tiraahdaa, "Waxaan raacaya Ciise. Wuxuu iigu yeedhay inaan Isaga u ahaado mid dadka u daba. Mar kastaba Isagu wuu ficil geliyaa wuxuu ku dhawaaqo, oo haddaba magaca Ciise Masiix ayaan ku ahay mid dadka daba waanna dabi doonaa kaluumada uu igu hogaamin doono. Dadka way badbaadi doonaan inta aan u sheegayo badbaadada Ciise maxaa yeelay Erayga Ilaah isagoo eber ah kuma laaban doono Ilaah laakiin wuu midho dhallaya. Marnaba isla sidii kuma noqonayo Erayga Ilaah laakiin wuu hawlgelaya oo wixii loo diray wuu so af jaraya." Inta ay xerta saluugayan awoodda la siiyey, ayuu Ciise iyaga ku yidhi sida ku dhigan Lukos 24:48, *Idinkuna waxyaalahaas ayaad markhaati ka tihiin.*

Baxa oo dadka la qaybso Warka Wanaagsan

Marka ugu horeysay Ciise wuxuu xertiisa u sheegay inay ahaan doonaan kuwa dadka daba. Midda ugu dambeysay ee uu iyaga ku yidhayna waxay ahayd sida ku dhigan Markos 16:15, *Markaasuu wuxuu iyaga ku yidhi, Dunida oo dhan taga, oo uunka oo dhan injiilka ku wacdiya*. Erayada ugu horeyeen iyo kuwa ugu dambeyeen uu Ciise ku hadlay aad bay muhiim u yihiin. "Baxa oo dadka la qaybsado Warka Wanaagsan eek u saabsan nolosha aan dhamaadka lahayn, oo dad u soo daba boqortooyadeyda." Markaad hawshaas ku dhaqaaqdid Ilaah ayaa Eraygiisa hawl gelinaya oo hawlgalkaasi ku cadeynaya calaamooyin la yaab leh. Mar alla markuu Ciise hawl kuu dirayo waxaa ogataa inuu si joogta ah kuu garab taagan yahay oo macaawino la'aan ma tihid oo ma hawl gelin wayneysid wixii laguu diray. Faalimaha Rasuullada 1:8 waxaa ku dhigan, *Laakiinse waxaad heli doontaan xog markii Ruxa Quduuska ahi idinku soo dego; oo markhaatiyaal ayaad iiga noqon doontaan Yerusaalem, iyo Yahuudiya oo dhan iyo Samaariya.*
Madaama aad xerta Ciise ka mid tahay, waxaad noqotay mid uu ruuxa cusub ee Ilaah ku dhex aasaasmay oo weliba waxaad noqotay mid uu ku jiro ruuxa ku soo korsanayo. Saa ay tahayna, adigu naftaada waxaad u baahan tahay in laguugu baabtiiso Ruuxa Quduuska ah, isla sida ay xerta Ciise u ahayd kuwaasi oo awooday inay ku hadlaan afaf kaddib markuu Ruuxa Quduuska ah ku soo duldegay iyaga uu siiyey awooddaasi sida ku dhigan Faalimaha Rasuullada 2:4).
Ciise horey ayuu ugu sheegay xerta inay magaciisa ku wacdin doonaan (isaga ay u daneyaan),

waxay ahayd inay xerta wacdiyan, sheeddaanka dadka ka saraan, ku hadlaan afaf cusub oo kuwa buka gacanta saraan oo u duceyaan si ay u bogsadaan sida ku dhigan (Mark 16:15-20).
Markuu Ruuxa Quduuska ah kugu duldegay, waxaad heshay awood xagga samada ka timid si aad u ahaatid qof ku shaqeya awood aanan caadi ahayn kuna marag fura. Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah wuxuu kugu hogaaminaya "biyooyinka." Wuxuu ku siinaya awood iyo muucjiso aad kaga jawaabtid su'aalada lagu weydin doono oo aad weliba hadaladaada nolosha dadka ku geddisid si ay u fahmaan inuu Ilaah iyaga toos ula hadlayo. Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah waxaa lagu caddeynaya calaamooyinka iyo dhacdooyinka la yaabka leh oo xoojinayaan erayada aad ku hadli doontid. Runtii shaki kuma jiro oo ibliiska wuu fahansan yahay waxyaalahan oo dhan oo wuxuu isku deyi doonaan inuu kaa hor istaago maragfurka aad sameyn doontid – saa ay tahayna ibliiska iyo awooddiisa ma ahan inay ku hakiyaan waayo kan aad u adegeysid ee kugu jira ayaa ka awood badan ibliiska iyo hawlihiisa sharka ah!
"Haddaba, waxaad ku dhawaaqi karta, durbaba anigu Ruuxa wuu I hogaaminaya, laakiin ma dareensani inaan qabo wax awood ah oo aan ku wacdiyo ama ku maragfuro." Waa inaad ogaatid in Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah uusan ahayn wax dareemadeena jidhka aan ku dareemeyno. Erayga wuxuu qoraya oo na ogeysinaya inay awoodda nagu jirto. Markaad taasi rumeysatid oo aad ku ficiltamtid, oo aad baxdid oo aad afkaaga furtid oo dadka kula hadashid wax ku saabsan Masiixa, waxaad ahaaneysa qof ficilgelinayo awoodda Ilaah oo Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah ayaa ahaanaya "Caawiyahaaga" (Yooxanaa 14:16). Haba ahaatee, Isagu kuma dhaqaaqayo ku caawinta adigoo aan tallaabada ugu horeysa qaadin ee ah inaad afkaaga kala qaaddid! Qofka kan kale caawiya waa mid awood dheraad ah kugu siinaya markaad adigu bilawdid oo aad tabar yaraatid. Waa inaan wac ku dhaqaaqdid si ay macaawinada uga muuqato noloshaada.

Sidee baad ku marag fureysa?
Sideed haddaba ku bilabeysa?
1. Waxaad ku bilaabeysa inaad qiratid inaad tahay mid u marag furayo Masiixinimada oo aad diyaar u tahay inuu Ilaah ku istecmaalo. Iska xijaab fikirad kastoo kugu dhalineyso inaadan awoodin. Waxaa dhici karta inuu fahankaaga Kitaabka uusan ahayn mid weyn, laakiin waxyaala badan ayaad fahansan tahay oo ay garaneynin kuwa aan xerta Ciise ahayn, oo inta yare ee aad garaneysa way ku filantahay inaad ku hawl gashid.
2. Xusuuso adigu waxaad tahay maragfure e ma ihid qof ka tirsan guddi loo xilsaaray difaacidda runta. Ilaah kuuma hawlgelinin inaad difaacdid Baybalka oo dhan, amaba laguuma xilsaarin inaad ka jawaabtid su'aal kastoo laguu soo jeediyo amaba laguuma adeejinin inaad ka war bixisid dabiicad kastoo qofka xerta Ciise ka tirsan oo ka tirsan taarikhda masiixinimo oo dhan! Waxaa laguu adeejiyey oo keliya inaad ku marag furtid kan uu yahay Ciise.
3. Ku duceyso inuu Ilaah kugu toosiyo marxalado caadi ahaanba awooddid inaad noloshaada kaga ficiltamtid, markaad fursado iyo marxalado noocaas ah heshidna ka wada faa'ideyso.
4. Dadka la qaybso wuxuu Ciise adiga shaqsi ahaan noloshaada kugu barakeyey iyo sida uu noloshaada u bedelay, bedelkii aad la xarbin lahayd waxyaala aad buugag ka akhrisay. Ha isku deyin inaad difaacdid ururada kiniisadda amaba ha u guda gelin inaad arimaha uu muranka ka taagan yahay e diimaha ku doodaan.
5. Haddii aad kaga marag fureysid shaqadaada, xusuuso in shaqadaas laguu siiyey si aad u shaqeysid, e ma ahan inaad toos u sameysid arimaha maragfurka. Waa inay noloshaada kaga wacdisid ama kaga maragfurtid meesha aad ka shaqeyneysid. Farxadda, daacadnimada iyo furfurnaanshaha noloshaada ayaa kuu maragfurayan adigoo aanba afkaaga furin oo aan sameynin wax ka gooni ah shaqada lagaa rabo inaad qabatid. Haddii aad ku cusub tahay meesha shaqada, waa inaad marka horeba aad dadka u caddeysid inaad tahay qof ka mid ah xerta Ciise.

Dabadeetana noloshaada ayaa u caddeyn doontaa in waxaad qiratay iyo ay isleeyihiin waxaad ku dhaqmeysid, way xusuusan doonaan oo waxay kugu tilmaami doonaan qof addeecsan Ilaah. Su'aalo ayey ku dhalineysa iyaga oo durbaba ama mudda kaddib su'aaladaasi ayey ku weydin doonaan. Markaasna fursad ayaad u haysataa oo aad ugu sheegtid awoodda, nabadda iyo farxadda Ilaah e noloshaada ku jirta.

6. Xusuuso, awoodda Ilaah adduunka oo dhan way ka jirta waana xalka keliya e lagu xalin karo dhibatooyinka adduunka ka jira. Ku dhiiranaw inaad kala duceysatid kuwa aan Xerta Ciise ka tirsanayn dhibatooyinka ay ku jiraan. Si aad ah ayey badanaa ugu qalbi jilcaan markay arkaan inuu qof isku taxluujinayo inuu iyaga kala qayb qaato welwelkooda.

7. Fahan sida aad qof u marin lahayd tallaabooyinka oo dhan ilaa uu qofka ka qaato kana qirto Rabbiga. Sida ugu sahlan uguna gaaban ku same. Markay duceystaan oo ay ogoladaan inay Masiixa kaga deyanayaan nolosha, waa inaad ku degdegtid inaad ku sameyso dabagal si aad u barbaarisid mirta aad beertay. Afar iyo labaatanka saacadood kudahooda u tag oo aayadaha Kitaabka ku deeq kuwaasi oo ugu horeynta ay ka mid ahaan karaan (aayadaha sida 2 Korintos 5:17, 1 Yooxanaa 1:9, 1 Yooxanaa 5:11-13, Yooxanaa 5:24, 1 Korintos 10:13, Yooxanaa 16:24). Sii qofka Kitaabka Quduuska ah oo ku qoran luuqad uu fahmi karo hadduu yaqaano akhriska farta amaba qayb Baybalka ka tirsan. La akhri iyaga marka ugu horeyso oo ku caawi sida ay magaca Ciise ugu duceysan lahaayeen. Ku dhiirigeli iyaga inay dadka la qaybsadaan wuxuu Ciise noloshooda ku dhaliyey.

Waa mid aad u farxad badan markaan arkeyno inuu Qof go'aansanayo inuu ogolaado Ciise Masiix kana dhigto hogaamiyaha noloshooda oo dhan iyo weliba badbaadiyahooda oo weliba aan arkeyno inay ku noolyihiin noolol ay ka muuqato isbedel! Ilaah wuxuu rabaa inuu ku adeegsado si aad dad badan u gaarsisid Eraygiisa, laakiin yaanay kaa fakanin tan, adoon gaarsinin hal qof, kuwa badan ma gaarsin kartid. Halkani ee kiniisadda Word of Life, waxaan arkeyna dad fara badan oo toddobaad waliba go'aansanayaan inuu Ciise ahaado hogaamiyaha noloshooda, mar dhawna sidaas si ka balaaran ayaan u arkeyna inay dadka xerta Ciise ku biirayaan ay tiradooda badaneyso. Waa maxay sababta? Maxaa yeelay kuwa xerta ka mid ah ayaa naftoodu inay baxaan dadka kale hal hal qof ugu sheegayaan. U ogolaw inay awoodda Ilaah kugu hogaamiso si aad u taabatid hal qof, oo halkaasi kaga sii gudubtid inaad kuwa badan taabatid. Laakiin waxaa dhici karta inaad tidhaahdo, "Waxa aad ku hadleysid maaquul ma ahan," Ilaah wuxuu leeyahay sida aan uga akhrineyno Ishacyah 60:22, *Mid yarba wuxuu noqon doonaa kun, oo mid yarna wuxuu noqon doonaa quruun xoog badan.* Axdigaas lahaaw oo "Yerusaalemtaada" aasaas adigoo hal qof u ku soo kordhineysa xerta Ciise.

Markuu qof diyaar u yahay inuu ka mid ahaado xerta Ciise, waxaad qofkaasi kula duceysan kartaa erayada ducadan: *"Aabbo, waxaan qiranaya inuu Ciise yahay Badbaadiyahayga iyo Rabbigeyga. Waxaan rumeysannahay inuu u dhintay dembiyadeyda, oo wuu ka sara kacay dhimashada si aan u helo nolosha aan dhamaadka lahayn. Ciisow, haddadan qalbigeyga la wareeg. Waad ku mahadsan tahay Aabbo, Ruuxaaga Quduuska ah ee hadda iga dhigay uun cusub. Waad ku mahadsan tahay sida aad iiga dhigtay cunugaaga ka soo leexday noloshii hore oo hadda noolol aad adiga boqor ka tahay ku nool. Waad ku mahadsan tahay Ciise oo ii ah Badbaadiyahayga, Rabbigeyga, arijirkayga iyo weliba bogsiiyahayga. Magaca Ciise ayaan ayaan tiirsanaya oo isagaan la jiraya nolosheyda oo dhan. Aamiin.*

Haddaba waxaad ahaatay mid Masiixa ugu marag furaa dadka. Waxaad u hogaansan tahay awoodda Ilaah oo Ilaahna wuxuu rabaa inaad dadka u fidisid wuxuu kuu sameeyey. Ciise wuxuu haya kaluun uu rabo inuu adiga dabanka kaa dhigo si aad u soo dabtid. Haddaba u bax biyooyinka oo soo qabo kaluumada!

9
Iimaan ku Bax oo ku adeeg!

Ma jirto arin ka farxad badan qofka oo noloshiisa Ilaah ku addeeca oo ku dhaqma wax alla wixii loo adeejiyey. Markuu qofka daacad yahay uu Ilaah u hogaansan yahay uuna arko natijada falka Ilaah, wuu amaanaya Ilaaha Nool.

Waxaan ku noolnahay xiliyada loogu yeedhay yawmin aakhir marka aan arkeyno xerta Ciise oo maalinba maalinta ku xigta ay tiradoodu sii tarmeyso, waa sida nin xoog badan oo awood badan oo hurdayey. Kiniisadda muraadkeeda way gudaneysa oo si xoog leh ayey Erayga Ilaah ugu fidineysa adduunka. Saa ay tahayna, jidhka markuusan lahayn qaybo kala duwan e hawla kala duwan hergelinayo, isla sida ciidan uusan ku jirin hal qof oo tababaran, waa mid aan micna lahayn. Isla sida aan guri loo dhisi karin qalabka dhismada oo la istecmaalo mooyaane, geedka canabkana midho ma dhali karo laamanka la'aantood. Marka in kastoo uu Rabbigga si xoog leh dad badan badbaadinayo maanta oo ay si dhiiranaan ah u fejigan yihiin, hal qof oo keliya ma awoodo mana awoodi doono inuu wax kasta keligiis sameeyo. Saa ay tahayna dhinaca kale ee shillinka waa run oo ah - hadduu qof kastoo xerta ka mid ah uusan masuuliyad qaadin wax samaan doonaan ma jiraan.

Markaan adiga iyo aniga iskaashano oo ay shaqsinimadeena xoogeysaneysato, oo aan masuuliyaddeena ka soo baxno aan iimaankeena xajino oo ku ficiltanno, markaasi xadad ma lahaaneyso waxyaalaha uu Ilaah nagu fulin karo. Xaddadka wuxuu u jira oo sabab ah dadka kale ayaa nabareen inaanan awood buuxda lahayn, oo wax yar unbaan sameyn karnaa oo waa inaan mar kastaba dadka ka ka sugnaa inay noo sheegaan in waxa aan sameynay ay tahay wax wanaagsan intaanan isku deyin inaan tallaabo labaad qaadin. Maanta laakiin Rabbigga waxyaala badan ayuu fikiradihii hore ka bedelayan!

Adiga marba haddii aad ka mid tahay xerta Ciise ma ahid mid meel aanan istaahilin taagan! Ciise ayaa kugu dhex nool oo noloshaada si buuxda u hogaaminaya. Waad maqli karta codka Ilaah. Rabbiga toos ayuu kugula hadla. Ruuxiisa Quduuska ah shaqsi ahaan ayuu kugula hadlaya. Adigu waxaad tahay mid aad u qiima badan uu Ciise adeegsan karo. Caleema saarka Ruuxa Quduuska ah waa mid aad xaq u leedahay! Kuwa aanan weli xerta Ciise ka tirsanayn adigay kugu garan doonaan kuna raaci doonaan Ciise. Kuwa buka waxay sugayaan inay bogsiin kugu helaan. Kuwa uu ibliiska addoonsanayo ayaa xornimo kugu helayaan. Ilaah waxyaala badan oo qiima badan ayuu kuu haya maxaa yeelay waxaad tahay cunugiisa, waxaad tahay midka Ciise kala dhaxlayo wanaaga uu ugu talagalay oo dhan. Haddaba sara kaca oo soco adigoo kalsooni leh oo og inuu Ilaah dan kugu yeedhay ama kuu badbaadiyey inaad u hawl gashid. Runtii waad leedahay hawl uu Rabbiga kuu qondeeyey inaad ugu hawl gasho Isaga – in kastoo aadan si durba ah ku fahmi karin wuxuu Ilaah kugu talagalay.

Ku riyow riyooyinka Ilaaha ku riyoodo

Xornimada Ilaah waa mid aad adiguna xaq u leedahay, ha umaleynin inay tahay uun mid loogu talagalay dadka kale. Adigu keligaa ma tihid. Ilaah iyo adiga Ilaah u adeegeysaan waxaad wada tihin koox aan laga adkaan karin. Iisu arag isla sida uu Ilaah kuu arko oo wuxuu kugu amro inaad ku ficiltantidna, ku ficilqaad. Hadduu Ilaah kula koox yahay waad guuleysaneysa! Xataa haddii aad boqolaal marxaladood oo guuldarro ah hadda ka hore soo martay, taasi Ilaah kama hor istaagi karto inuu ku adeegsado oo guul kugu dhaliyo waa haddii aad rumeysan tahay oo aad dhiiranaan hore ugu dhaqaaqdid.

Ilaah wuxuu kugu dhex beeray riyooyin, rabitaan qalbiga, wacyoon iyo fikirado. Waxyaalahaas

oo dhan dib uga fikir. Ka dhig kuwa aad ku riyootid jiritaankooda! Kuwa badan oo waxaa jiraan waxyaalaha badan wanaagsan ee ay nolosha ka damacsan yihiin inaynan ahaan karin kuwa xagga Ilaah ka imaan karaan, laakiin ogow waxyaalahaasi wanaagsan ee aad damacsan tahay oo dhan waxay ka yimideen Ilaah! Ilaah waa mid mar kastaba wanaag lagu tilmaami karo. Qorshooyin waweyn oo kheyr ah ayuu kuu rajeynaya. Wuxuu aad ugu riyaaqsan yahay inaad rumeysatid oo aad ficilgelisid waxyaalaha uu shaqsinimadaada kugula hadlayo si ay u ahaadaan waxyaala aad ka dareemi kartid oo aad kaga dhaqmi kartid noolol maalmeydkaaga.

Ilaah wuxuu dadka siyaa qorshooyin iyo aqoon ay qorshooyinkaasi ku hergeliyaan. Waxaa laga yabaa inaad damacsan tahay inaan hogaamisid urur duco isugu imanayo, aad rabtid inaad dadka agagaarkaaga degan aad la qaybsatid waxaad Ciise kala kulantay e bedelay noloshaada amaba aad damacsan tahay inaad dadka gacan saartid oo aad ugu duceysid bogsiin. Waxaa kaloo dhici karta inaad aad ugu riyaaqeysid inaad Erayga Eebbe wacdisid, ahaatid qof waddamo kale iyo meelo kale aado oo Rabbiga uga adeego oo Erayga Ilaah fidisid. Taasi waa mid uu Rabbiga kugu dhaliyey amaba qalbigaada geliyey. Ogolow oo rumeyso waxyaalahaasi qalbigaada ku soo dheceen maxaa yeelay Ilaah wax kastuu kugu awood siini karaa oo aad fulin karta oo weliba meel kasta ayaad aadi karta. Waxyaalaha loo haysto inaysan suurtagal ahayn ayuu kuu diyaariyey inuu kugu fuliyo.

Dad badan ayaa si toos ah uga hadleen waxyaalaha ay ku wacyoonayaan. Iska ilaali inaadan waxyaalahaasi ka hadlin uun. Ka dhig waxyaalahaasi inay ahadaan kuwa aad noloshaada kaga dhaqmeysid. Diyaar u ahaw inaad heshid wacyooyinkaasi Ilaah wac kugu caddeynayo. Ka shaqee barbaarista iimaankaaga iyo xidhiidhka aad Ilaah la leedahay si aad u hergelisid waxyaalahaas oo dhan. Waa inaad ahaatid mid ku ficiltama Erayga Eebbe!

Markaad noloshaada ku fulisid waxyaalahan hogaanka kuu ah, waxaad fahmeysa inuu heerka subkintaada ay weynaaneyso oo noloshaada iyo hawlaha aad Rabbiga ugu adegeysidba si aad u awooddid inaad fulisid wuxuu Eebbe kuu subkay inaad sameysid. Waxaa laga yabaa inaad iisu aragtid inaad da’ yartahay, laakiin taasi ma ahan inay ku lurto – Yeremyaah isla sidaas ayuu ahaa. Mise miyey macna caannimadaada? Kuwa ka mid ah nebiyada Axdiga Hore badankood xataa magacdooda lama sheegin. Waxa ugu muhimsan waxay tahay inaad fahansan tahay oo aad ficilgelineysid waxyaalaha uu Ilaah kugu subkay iyo riyooyinkiisa. Markaasna subkintiisa ayaad ku heleysa guusha.

Haddaba istaag! Shaki kuma jiro qiima weyn ayaad leedahay Ilaah Ciise dartiis. Tag haddaba! Ilaah wuxuu ku siiyey Eray aad kaga shaqeysineysid iimaanka uu Eebbe kugu beeray. Isagu si joogta ah ayuu kuu wehlinaya. Adduunka oo dhan ayaa u fejigan oo sugeysa shaqsi la xoreyey oo ku biiray xerta Ciise, uu Ruuxa Quduuska ah hogaaminayo, ficilgelinayaan waxyaalaha uu Ilaah ku amray.

Inta aad ku socotid doonista Ilaah oo aad ku ficilgelineysid wuxuu kuu diray, inaad xerta kale jaalnimo la yeelatid dhib kuguma ahaneyso. Waxaad ka wada midoobi doontaan xagga maanka iyo qalbiguba oo waxaad u dagaalgaleysan wada fidinta Injiilka. Waxaad tahay sida midhta sareenta oo dhulka lagu beeray oo dhaleysa boqolaal kale. Markaad maqsiinka ka tagtid oo aad adduun weynaha kale aaddo, awoodda Ilaah ayaa ku garab galeysa oo si xoog leh ayuu kuu istecmalaya si aad midho badan u dhashid. Noloshiisa kugu jirta waxay u riyaqeysa inay kugu dhex qulqusho oo ay kuwa kaloo badan aad ku butaacisid wixii lagugu deeqay. Ruuxa Quduuska ah ee kugu jira aad buu u xoog badan yahay oo nolosha midda ugu heerka sareyso ayuu ku dhaqdhaqaaqaya. Awooddiisa ayaa burburineysa naafanimada, cabsida, fahan la’aanta aan Ilaah la fahansaneyn, maskaxda aan balaarneyn waxyaalahaasi oo xerta Ciise ka hortaagan inay ahaadan geesiyiinta ugu xoogga badan e adduunka ku faafineysa Injiilka.

Markaad hawlahaaga dhiiranaanta iyo iimaanka Ilaah aad ku waddid keligaa kuma ahaaneysid oo

Rabbiga ayaa garabkaaga ah, dadeetana waad hergelin doonta riyaaqa uu qalbigaaga ku dhaliyey, markaasna waxaad fahmeysa micnaheeda marka la leeyahay in iimaanka tallaababa mid kale lagaga gudbayo. Jidhkaaga oo dhan wuxuu la bodboodaya noolol heer sare ah e Ilaah ku xidhan. Marxaladda eedeynta, naxariisdarro iyo addoonsinimada dadka kale kaaga imaneyso ma awoodi doonaan inay burburiyaan barakada laguugu subkay e noloshaada ka soo butaaceyso. Way buux dhaafeysa! Haddaba rumeyso inuu Erayga Ilaah yahay mid aad adiguna ku barakoobeysid! Kuwa kale e xerta ka tirsan oo ka ficilgeliyaan Erayga Ilaah wax wada qaybsada oo hawlgalkooda kala qaybqaado dib u soo celinta lagu subkayo. Dadka kale u subag inay tagaan oo ay hawlgal sameyaan oo ay markaasna Rabbiga ugu adegaan heerka ugu sareyo ee noloshooda.
Ma jiraan wax qalbiga dejinayo ka badan inta aan qalbi dejin ka helno markaan arkeyno inuu qof soo badbaadayo, ujeeddada Ilaah oo la hergeliyo sida wanaaggiisa iyo sharaftiisa ay laga arkayo nolosha dumarka iyo ragga xerta Ciise ka tirsan.

10
Dadka Waad tumi karta Ruuxaanta wasakhda ah

Waayo, innagu lama legdanno bini-aadan, laakiinse waxaynu la legdannaa kuwa madaxda ah iyo kuwa amar leh iyo taliyayaasha dunida gudcurka ah iyo ruuxyada sharka ah oo samooyinka ku jira (Eph 6:12).
Korintooska 2aad 2:11, Bawlos wuxuu nooga digaya inaanan marnaba ka war la'aanin khiyaanada iyo hababka uu sheeddaanka ku shaqeysto. Waa inaanan iska indha tiring jiritaankiisa si aanan u gelin khatarta aan ugu xarooneyno boqortooyadiisa. Ilaah marnaba ma rabo inaanan ka war la'aano waxyaalaha nagu hareersan e hareeraheena ka dhacayaan ee xagga adduunka ruuxaaniga. Ilaah wuxuu rabaa inaan ogaano cadawyadeena iyo sida aan uga guuleysan lahayn. Waxaa jiraan kuwa badan oo madhabyada ama ururada xerta Ciise ka mid ah oo iska mamnuuceen inay soo hadal qadaan ibliiska. Jiritaankiisa aad baa loo inkiray oo marxaladaha qaarkood, xerta Ciise way inkiraan inuu jiro. Waxaa kaloo ay xoogga saarayaan in haddii lacallah lagu dhawaaqo aanan inaba la sii bunbuunin wax isaga ku saabsan maxaa yeelay waxay leeyihiin haddii isaga aad loo magacaabo oo hawlihiisa aad looga hadlo inuu helayo sharaf mar kastoo la soo xigsanayo magaciisa. Tani waa qalad midka ugu weyn.
Haddaba sidee baad ku geli karta dagaalka wanaagsan e ibliiska lagula legdamayo xoogga Ilaah (1 Timoteyos 6:12) marba haddii aad ogeyn kan uu yahay cadawgaaga? Waa in laguu sheeko wax isaga ku saabsan si aad u fahantid oo aad u ogaatid sida uu ku hergeliyo falalkiisa sharka ah. Waa inaan ogaatid dooqa aad ka ciyaari lahayd waxyaalaha isaga ku saabsan. Haddii aad iska indha tirtid jiritaankiisa wuu ku duufsanaya (2 Kor 2:11).
Ciise wuxuu ibliiska ugu yeedhaya: Cadawga (Matayos 13:39), kan sharka leh mise ibliiska (Matayos 13:19), beenaale iyo qudhsade (Yooxanaa 8:44), tuug (Yooxanaa 10:10), boqorka adduunkan (Yooxanaa 12:31), iyo Be'elsebul (Matayos 10:25). Ciise ma inkirin jiritaanka cadawgan, adiguna isla sidaas suurtagal kuuma ahan inaad inkirtid jiritaanka ibliiska. Saa ay tahayna isaga waxba haka cabsanin, maxaa yeelay Ciise ayaa ka guuleystay isaga, oo ka qaaday hubkiisii oo ceebeyey (Kolosay 2:15). Guusha laga guuleystay ma baabi'ineyso inuu weli jiro oo dadka jarrabayo, been sheegayo, wax xadayo oo weliba wax burburinayo. Wuxuu xerta Ciise ku haya weerar xun si uu uga gacan maroojiyo guusha ay Ciise ku heleen, oo wuxuu sii damacsan yahay inuu xerta ka joojiyo fidinta ay adduunka oo dhan kaga fidinayaan sharafta Ilaah. Saa ay tahayna, Qoraalka Eebbe wuxuu noo caddeynaya in haddii aan iska reebno uu naga cararayo! (Yacquub 4:7).

Magacda midkood ee Ciise u istecmaalay sheeddaanka waxaa ka mid ah Be'elsebul (Matayos 10:25), taasi uu micnaheedu yahay "rabbiga tiqsiyaha." Matayos 12:24 waxaa ku qoran uu Ciise sheegay inuu sheeddaanka ugu yeedhay *Be'elsebul boqoradda ibliiska.* Haddii aan si kale u sheegno, sheeddaanka waa boqorka ruuxaaniga wasakhda ah e isaga u hogaansan. Haddii aan rumeysano Baybalka oo aan fahanno sheeddaanka inuu jiro, waa inaan aqoonsanno jiritaanka ruuxyada wasakhda ah. Ciise sidaa ayuu sameeyey, wuu canaantay ruuxyadaasi oo fiijiyey.

Laba boqortooyo oo macaarad isku ah

Baybalka wuxuu noo sheegaya inay laba boqortooyo oo midba midka kale macaarad ku yahay. Mid waa "boqortooyada Wiilka uu Ilaah jacaylyahay," kaasi uu Rabbigiisa iyo boqorkiisa yahay Ciise Masiix, boqortooyada kalena waa tan "uu mugdiga ama sharka uu ka qooqan yahay" (Kolosay 1:13) meeshaasi oo lagu sheegay inuu sheeddaanka ka yahay Rabbiga "boqortooyada hawada," Efesos 2:2).

Labadan boqortooyo ma ahan kuwa weynankooda isku mid yahay. Ilaah iyo sheeddaanka ma ahan laba isku si wax u wada wadaaga, ama awood isdhan qabaan. Ilaah waa kan ugu awoodda badan wax kasta oo meel kastana jooga e laakiin sheeddaanku waa malaa'ig falaagowday oo xagga samada laga soo eryay, waxaana si aad ah loo aaminsan yahay inuu la soo ruqay ku dhawaan malaa'igaha inta samada ku sugnaa markii saddex loo qaybiyo hal meel oo la soo falaagoobeen isaga (Muujintii 12:4).

Dhimashadiisa iyo sara kaciisa ayuu Ciise ku helay furaha naarta iyo kan jannada. Awood kasta ayuu leeyahay e ka jirto inta u dhexeysa samada iyo dhulka. Isagu waa hogaamiyaha Kiniisadda, oo jidhkiisa ayuu noo quuray oo aan xertiisa ku ahaanay oo tanna annaga xertiisa ah waxay na siineysa dhiiranaan aan kaga xoog badino sheeddaanka – waa haddii aan awooddaasi si wanaagsan u istecmaalno.

In kastoo ay xoog isku deyashada ugu weynayde ku dhacday isku tallaabta korkeeda, guusha uu Ciise guuleystay waa mid loo baahan yahay inuu qof kasta xigsado oo lagu tiirsado, waana in laga dhigto saldhigga nolosheena oo dhan. Mar kastoo ay Kiniisadda sidaa yeesho, waxay ka guuleysaneysa awoodaha sharka ah oo dhan iyo weliba silcinta aan iimaankeena u silceyno waan ku sii dhiirananeyna. Sababtaas awgeed waa inaan ogaano inaan ku jirno dagaal ruuxiyan ah oo ay nagu waajib tahay inaan ku guuleysano, saa ay tahayna dagaalkan waa in la ogaado inuusan ahayn mid xagga jidhka ah. Dagaalada aan dagaaleyno waa mid ruuxiyan ah oo aan jinniyada hawada ku jira la dagaaltameyno kuna dagaaltameyno awood sare ee aan teena ahay (Efos 6:12). Ibliiska iyo kuwa isaga soo dhaweyeen waxaa leeyihiin hab dhismeedka ciidanka. Ruuxaaniyada wasakhda ah ee jagooyin kala duwan leh ayaa ah kuwa hawlaha u hayaan, laga amar qadanayo, awoodaha adduunka iyo falalka ibliiska. Waxaa jiraan ruuxaaniyo si qaas ah loo xilsaaray inay ka shaqeyaan gobolo qaas ah iyo dhul qaas ah sid ay ku dhigan tahay Danyeel 10:13,20, iyo weliba magalooyinka waweyn e magaca leh sida ku dhigan Muujintii 2:12,13. Waxaa jiraan awoodo si qaas ah ugu takhsuseen dembiyada qaarkood. Awoodahan waxaa ka tirsan xataa ibliisyada jagooyinka hoose hayaan.

Tusaalooyinka lagu meteli karo waxaa ka mid ah "ruuxaaniyada dadka ku addoonsadaan cudurada" (Lukos 13:11), "jiniyada wasakhda ah e dadka dhego tirta oo carab cusleysisa" (Markos 9:25), "ruuxa wasakhda ah" (Matayos 12:43,), a "ruuxa khiyaanada" (1 Tim 4:1), "ruuxa adduunkan hogaaminayo" (1 Korintos 2:12) iyo "ruuxa wacyoonta" (Faalimaha Rasuullada 16:16).

Waxaa jiraan iblisyo kaloo shaqadooda ay kala tahay, addoonsiga dadka, ka hor istaaga kheyrka ay dadka sameyn rabaan, burburinta nafsadda shaqsiga, tuugnimada, iyo weliba inay nafta ka bixiyaan rag iyo dumarba. Markuu Ciise xerta u xilsaaray u hawlgalka Hawsha Ugu weyneyd eek

u dhigan Markos Mark 16:17-18, wuu u caddeeyey iyaga oo wuxuu u sheegay in kuwa Isaga rumeystaan ay jiniyo saari doonaan. Isla sida uu Ciise naftiisa jiniyada u saarayey, wuxuu ku amar bixiyey, awoodna ku siiyey annaga xerta Ciise ka tirsan inaan isla sidaa ku ficiltanno: Ciise wuxuu yidhi,
Bal ogaada, waxaanidin siiyey amar aad kula tumataan abeesooyin iyo dabaqalloocyo iyo xoogga oo dhan ee cadawga: innaba waxba idinma yeeli doono (Luukos 10:19). Waxaan amar ka haysannaa Ciise naftiisa inaan jiniyada saarno.
Murugta ugu weyn ayaa laakiin waxay tahay inaanan fahansaneyn awooddan iyo amarka uu Ciise nooga tegay e ah inaan hawl gelino. Awooddan waxaa naloo siiyey inaan cadawga degaankiisa ka rujino si ay nimanka iyo dumarka xor u ahadaan. Ka hadalka ibliiska iyo sharkiisa mudda dheer waxay ahayd mid laga cabsado. Ka cabsashada dadka ayaa naga dhigtay inaanan sida ay wax yihiin ku ficiltamin. Waxaan inkirnay oo aan ficilgelin waynay hubka ugu awoodda badan e aan adeegsan lahayn taasina waxay dhalisay inaan kumanaan dad ah addoonsiga sheeddaanka ku daynay.
Ibliisyada way jiraan oo haddaad inkirto waxaad u sahalsineysa inay hawlahooda sii xoogeystaan. Saa ay tahayna waxaa looga guuleysanay guusha Ciise Masiix iyo magaciisa magacda ka sareyo. Waxaa lagugu amraya inaad istecmaashid awoodda lagu siiyey e laguugu amray inaad hawl geliso si aad dadka u xoreysid. Ciise wuxuu istecmaalay wax hal qayboo saddex meeloodka hawlihiisa inuu ku bixiyo jinniyada wasakhda e dadka cadaadinayaan. Isla shaqooyinka uu qabtay waa inaan annaguna aan qabanaa (John 14:12).

Aasaaska jirrooyinka oo dhan
Badanaa markii la sheego jinniyada wasakhda ah iyo xaaladda jirroda, waxaa jiraan laba su'aalood oo soo shac baxayaa: 1. Jinniyada miyaa ka dambeyaa jirrooyinka oo dhan? iyo Suurtagal miyaa inuu qof xerta Ciise ka mid ah xanuunsado?
Kusaabsan su'aasha kowaad waxaan ku jawaabi lahaa in marxalad kastoo dadka dhibta aysan ahayn mid jinni keenay. Saa ay tahayna, marxaladdan ma ahan arinta ugu weyn e badanaa dadka haysata. Waxaa jiraan cudurro kala nooc ah oo ay dadka ku waqlaleen kuwa uu jinniga keenay ama ay ruuxaaniga ibliiska sababay. Dadka waxaysan ka fiirsanin in dhibatooyinka qaarkood ku yimideen marxalad uu ibliiska aasaas u ahaa.
Baybalka wuxuu ka hadlaya labada dhibka gaaro badanaa oo kala ah jidhka iyo ruuxa. Markuu Ciise wax barayey dumarka iyo ragga, xagga jidhkana wuu ka bogsinayey qalbigooduna culeyska ku jira wuu ka sarayey. Wax kastoo uu Ciise sameeyey ma ahayn oo keliya jinniyada la saarayey oo weliba ma ahayn oo keliya bogsiin laakiin waa si ajaacib ah sida ay labadan hawl iisu garab socdenn. Sida aan uga akhrineyno Matayos 4:24, Ciise wuxuu bogsiiyey dhamaan kuwa bukay iyo kuwa ay jinniyada guumeysanayeen. Cutubka 12 aayadda 22 waxaan arkhrineyna inuu bogsiiyey nin ay jinniyada ka buuxeen, indho la'aa oo weliba carab cuslaa. Cutubka 17 aayadda 18aad, wuxuu wiil ka saaray ruuxyo wasakh ah, wiilkiina wuu bogsaday. Oo haddaba erayaga "bogsiin" waa mid loo istecmaalay ficilkii uu Ciise ku sameeyey dadka jiranayeen in kastoo aan bogsiin kasta lagu fasireynin midda jiniyada dadka lagaga saaray. Aasaaska ugu weyn ee cudurada dadka ku dhacaan waxaa sal u ah sheeddaanka ee ma ahan Ilaah. Jirooyinka waxay adduunka soo galeen kaddib markuu baniaadmiga Ilaah ku caasiyey. Caasintaas kaddib, dembi, jirooyin, kelinimo, nacayb, dagaalo, saboolnimo iwm ayaa ku soo butaceen aadanaha.
Saa ay tahayna, madaama uu sheeddaanka ka dambeeyey gefkii ay Aadan iyo Xaawo ku caasiyeen Ilaah, sabab uma ahaan karto in cudur kastoo dadka ku dhaco loo fasiro inuu qofka ku bukooday dembiga uu shaqsi ahaan sameeyey darted.
Dhinac kale haddii laga eego, Ciise wuu diiday fikiraddaasi markuu xertiisa la hadlayey isagoo

kaga jawabayo markay weydiyeen su'aasha ku rabeen inay fahmaan yaa dembaabay oo uu ninka indhoola u ahaa. Xerta waxay yidhaahdeen, *Rabbiyow, yaa dembaabay, ma ninkanbaa mise waalidkiisa?"* Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, *"Ninkan ama waalidkiisa midna ma dembaabin…laakiin waxay arintan ku dhacday in hawlaha kheyrka ah ee Ilaah lagu muujiyo noloshiisa"* (Yooxanaa 9:2,3).

Cudurada lid ayey ku noqdeen dunida maxaa yeelay aadanaha ayaa ogolaaday inay u hogaansamaan sheeddaanka taasi oo ahayd taarikhda uu sheeddaanka dunida ku soo galay. Inta aan adduunka ku noolnahay, macaarad waan lahaneyna, laakiin Ciise wuxuu u yimid inuu naga xoreyo nooc kastoo addoonsi ah. Waana sababta aan Faalimaha Rasuullada 10:38 oo leh, *Ilaah wuxuu Ciisihii reer Naasareed ku subkay Ruuxa Quduuska ah iyo awood xagga Ilaah ka timaadday, oo meel kastoo uu aaday kheyr buu sameeyey oo wuu bogsiiyey dhammaan kuwa uu sheeddaanka ku addoonsanayey awoodda sharka ah e ibliiska, maxaa yeelay Ilaah ayaa wehelkiisa ahaa.*

Cadawga habab kala duwan ayuu ku addoonsadaa dadka, hababkaasi waxaa ka mid ah cudurada; laakiin Ciise waxaan ku heleyna oo keliya bogsiin, ka badbaadinta jiniyada wasakhda ah ama addoonsiga uu ruuxaaniga dadka addoonsanayo oo wuxuu nagu soo celiya doogta qooyan e kheyrkiisa ah. Waana sababta uu u yimid. Isla sida aan horey u sheegnay, ma ahan in cudur kasta uu yahay mid uu sababay sheeddaanka ama ruuxaaniga wasakhda ah. Haba ahaatee, waa nooc cadaadin uu ka timid xagga sheeddaanka, mana ahan wax uu Ilaah nagu edbinayo amaba aan ku heleyno quduusnimada aan rajeyneyno.

Ka bogsiinta sheeddaanka waa kibista carruurta

Su'aashan kale ee ay dadka inta badan is weydiyaan waxay tahay: Xerta Ciise miyey noqon karaan kuwa uu sheeddaanka ku hooyanayo? Jawaabta waxay ku xiran tahay macnaha uu qofka ka leeyahay erayga ku "hooyataanka". Haddii fasiraadda ay tahay in jidhka, iyo nafta qofka uu sheeddaanka wada qabsanayo oo ku hooyanayo, anigu ma aaminsani inuu qofka xerta Ciise noqday inuu ahaan karo hoyga sheeddaanka. Laakiin hadduu micnahaasi yahay in qalbiga qofka la weerari karo, niyadda la bedeli karo, la cadaadin karo uuna ahaan karo hoyga ibliiska, de markaasi waan ku raacsanahay. Qofka xerta Ciise noqday wuu ahaan kara hoyga ibliiska isla sida uu u jirran karo.

Marka ugu horeysay ee aad ka toobad keentay dembiyadaada ayaad heshay Ruuxa Quduuska ah ee cusub. Ruuxii dembiilaha ahaa ee adduunka wuu kaa baxay oo waxaa hogaan cusub kuu ahaaday Ruuxa asliga ah e quduuska ah ee Ilaah. Waxaad ahaatay uun cusub ee ku jira Ciise Masiix, laakiin maankaaga isla sidaas caadi ahaan looma bedelin amaba looma cusbooneysinin iyo weliba jidhkaaga isla sida qalbigaaga loo bedelay looma cusbooneysinin isaguna. Haba ahaato ee, hawsha uu Ciise Masiix daraaddaa u sameeyey awgeed, waxaag gaartay heer aad ku dalban kartid kuna heli kartid xornimo taasi oo kuu ah barakada axdi uu Ilaah horey kaa ballanqaaday ee aad kaga barakoobeysid marxalad kastoo noloshaada ka tirsan.

Lukos 13:10-16 waxay sharaxaad ka bixineysa naaga mudda dheer ku nooleyd cudur iyaga aad u dhibay oo Ciise ayaa ka badbaadiyey oo bogsiiyey iyada. Waxaa marar badan aayaddan nagala baray in bogsiintu ay ka tirsan tahay waxyaala uu ku barakoobi lahaa nebi Ibraahim ee laga ballanqaaday isaga.

Markos 7:25-30 waxaan akhrineyna naag bogsiin u codsaneyso gabadheeda. Mar kale waxaan nala baray in "bogsiintu ay tahay kibista carruurta," bogsiintaasi waxay barako u tahay oo keliya xerta Ciise oo keliya, naagtanna iimaan ayey Ciise kaga codsatay bogsiintaasi. Codsiga noocan ah ma xumo, laakiin haddii aan iskugarab akhrino labadan dhacdooyin waxaan arkeyna inay ka wada hadlayaan bogsiinta cudurka laga bogsanayo ee waxay ka hadlayaan bogsiinta laga

bogsanayo ama laga xuroobayo addoonsiga sheeddaanka.
Naagta aan sheekadeeda ka akhrineyno Lukos 13 waxaa muddo dheer sheeddaanka ku addoonsaday jirro oo Ciise wuxuu aayadda 16aad ka leeyahay, *Miyeysan wanaagsaneyn in naagtan ah gabadha Ibraahim oo uu sheeddaanka sanado badan guumeysanayey ka bogsato kana xurowdo cudurkan maalin Sabdi ah maxaa ka hor istaagaya?* Muxuu ula jedaa hadalkan? Wuxuu ula jeedo waxay tahay inay gabadhani xaq u leedahay ka bogsashada jirrooyinka iyo weliba ay ka xurowdo addoonsiga sheeddaanka waayo waxay xaqaasi xidhiidh kula yeelatay nebi Ibraahim ballanqaadka la siiyey. Si kastoo loo eegaba iyadu waa gabadha Ibraahim! Maanta aniga iyo adiga oo ah xerta Ciise, waxaan nahay wiilasha iyo gabdhaha Ibraahim. Galatiya 3:29 waxaa ku qoran, *Haddii aad tahay xerta Ciise, waxaad xaq u leedahay inaad ahaato dhasha Ibraahim iyo kuwa wax ka dhaxla barakooyinka la ballanqaaday.* Barakooyinka axdiga oo hadda lagu fasiri karo ka badbaadidda addoonsiga ibliiska, naagtaas oo keliya iskama lahan ee iimaan ahaan Ciise kaga dhaxleyna annaga ahaanay kuwa ka tirsan kuwa ka faa'ideysanayaan axdigaasi.

Ka badbaadidda addoonsiga sheeddaanka maantaba waa u diyaar kuwa xerta Ciise ah. Naagtaasi waxay fahantay in ka badbaadidda addoonsiga sheeddaanka ay tahay "kibista carruurta." Waxaan nahay carruurta Ilaah oo sababtaas awgeed badbaadadadu xaq baannu u leenahay anaguba. Haddii aan nidhaahno ka badbaadidda addoonsiga sheeddaanka looguma talagelin xerta Ciise, isla sidaasna ka bogsashada cudurada looguma talagelin iyaga.
"Laakiin," waad ka hortegi karta waayo qoraalka ma sheegayo in xerta laga badbaadin doono addoonsiga sheeddaanka." Mana sheegeyso inaysan badbaadadaasi heli doonin! Mana jirto meel qoraalka qoduuska ku dhigan tahay baxa oo wacdiya! Saa ay tahayna waxaan ognahay inaan ku waajibannahay wacdinta! Waa maxay sababta? Maxaa yeelay Ciise ayaa nagu amray. Waxaan horey u maqalnay wax barid fara badan oo ka hadleyso waanna aragnay natiijadeeda. Ciise wuxuu haddana sheegay inaan jinniyada dadka ka saari doonno. Ciise ma dhihin, "jinniyada wasakhda ah ka saara kuwa aan xerta ahayn." Laakiin wuxuu yidhi, "Kuwa rumeysan doonaan jinniyada ayey dadka ka saari doonaan" (Mark 16:17). Yaa laga saaraya jinniyada? Waxaa laga saaraya mid kastoo u baahan in laga saaro, iyo meel kastoo aan dadkaasi kula kulanno ayaa ficilkaasi ku hergelineyna!
Ciise wuxuu na siiyey amar ka sareyo awoodaha cadawga (Lukos 10:19) si ay dumar iyo ragba u daremaan xornimada la yaabka leh ee ah tan uu Ciise iskutallaabta inoogu wada dhintay. Waana sababta ay sharaf darro isaga ugu tahay markaan inkireyno ama aan hab u eg u sheegeyno oo aan runta qaawan ku faafineyno farriintiisa taasi oo dadka oo dhan u ah nolosha weligeed ah. Markuu qofka xornimada soo galo, waxyaalihii hore ee ka hor imaadka sameyn jireen oo dhan waa la duduubaya oo dhinac loo dhigaya oo sharafta Ilaah ayaa qofkaasi ku dhex qulquleyso oo wuxuu noqonaya mid ay barakadaasi u sii marto dadka kale si ay iyaguna u barakoobaan. Oo sida ay wax u arki jireen si ka sii nuureysa ayey wax u arki doonaan, nuurkaasi oo ay u fahmi doonaan inuu Ciise noolyahay kan keliya ee looga badbaadi karo dhibatooyinka uu aadanaha adduunka kala kulmo.

Daahirin
Sida deeradu biyaha durdurka ugu harraaddo, Ayay naftaydu kuugu harraaddaa, Ilaahawyo.
Sabuurradii 42:1

11

Isku tilmaamidda Masiixa

Waxaa jiraan saddex shey oo haddii aad fahantid aad iimaankaaga xoojin kartid. Midda ugu horeyso waxaa weyaan: *Kan uu yahay Ilaah.* Tan waxaa ka tirsan laba arimood oo ugu waweyn – Wuxuu Ilaah haysto iyo wuxuu Ilaah sameyn karo. Sheyga labaad wuxuu yahay: *Kan aad adigu tahay* – Waxaad haysato iyo waxaad sameyn kartid. Ugu dambeystii, waxaa kuugu waajib ah inaad ogaatid: *Kan uu cadawgaaga yahay* – Wuxuu haysto, wuxuu awood u leeyahay inuu sameyo, iyo weliba midda ugu muhimsan, waxyaalaha uusan sameyn karin markaad Erayga Ilaah adeegsatid. Haddaad haysatid saddexdan shey e ugu waweyn oo aad noloshaada kaga dhaqantid, waxaad ku socon karta kuna noolaan karta noolol guul leh iyo weliba dhiiranaan oo waxaad u gegsan karta falaaraha uu sheeddaanka kuugu soo gemayo.

Cutubkan 11aad waxaan xoogga ka saareyna sheyga labaad: *Kan aad adigu ka tahay xernimada Masiixa.* Gudniin iyo gudniin la'aanba wax macna ah ee ay leeyihiin ma leh; midda ugu muhimsan waxay tahay inaad noqotay uun cusub (Galatiya 6:15).

Wax kastoo xernimada Ciise ku saabsan ama nolosha masiixinimada waxay ku xirantahay ee ay ku dhismeysa ama ku dumeysa inaad tahay ama aadan ahayn uun cusub. Aad ayey muhiim u tahay inaad isku tilmaantid kan ah aasaaska cusboonaanta si uu Isaguna kugu dhex beermo oo uu waddooyinkaaga u toosiyo. *Haddaba uunka cusub ku jira* dhab ayey ka ahaanayaan noloshaada oo dhan oo waxaad Ilaah ugu adeegi doontaa habka uu raali ka yahay.

Baybalka wuxuu ka hadlaya uunka cusub maxaa yeelay waxaa jira uun hore. Aadan markuu dembaabay ee sharafta Ilaah mugdi ka galay, xidhiidhkiisa iyo kan Ilaah wuu burburay. Isla markaas waxaa yimid, saboolnimo, cudurro iyo dembi. Waxyaalahan oo dhan ayaa lagu sii dayey adduunka oo dhimasho ayaa aasaasantay, tan nafta dadka ka baxeyso iyo weliba qofka iyo Ilaah oo xidhiidhkooda burburo. Baniaadmiga wuu ka soocmay Ilaah ilaa iyo wakhtigii uu Ciise iskutallaabta ku dhintay isagoo ah Aadanka ugu dambeeyey ee ahaa inuu baniaadmiga iyo Ilaah dib u xidhiidhiyo. Ciise ayaa ahaa tusaalaha ugu horeyey ee uunka cusub, ama ninka cusub.

Isagaa noo ah kan keliya ee nolosha looga deyan karo nolosha oo dhan iyo sida uu baniaadmiga iisu habeyn lahaa marxalad kastoo ku jiroba. Ciise ma ahayn oo keliya mid u yimid inuu dembiga naga badbaadiyo ee wuxuu kaloo u yimid inuu noogu muuqdo isla sida uu Ilaah u yaalo. Weligiis ma dembaabin. Haddaba yaa kale oo lagu sheegi karaa inuusan weligiis dembaabin oo aan ka ahayn Ilaah? *Adduunkan aan ku noolnahay waxaan ku nahay sidiisa* (1 Yooxanaa 4:17). Ninkan lumiyey xidhiidhka uu Ilaah la lahaa taasi oo lagu macneyey dhimasho ruuxiyan ah oo waxaa timid cadawtinimo dhexdiisa iyo Ilaah, wuxuu helay dembidhaaf iyo uun cusub oo qalbigiisa ku beermay taasi uu ku helay Ruuxa Quduuska ah, taasi natiijadeeda waxay noqotay dhimashada iyo sara kaca Ciise.

Ma ahi "dembiile" duq ah oo nimco ku badbaaday. Waxaan ahay qof mar dembiila ahaa oo hadda nimcada Rabbiga ku badbaaday, laakiin waxaan noqday uun cusub. Ilaah ayaa hoy iga dhigtay oo nolosheyda oo dhan aan u xilsaaray. Dhabtan laga hadlayo waa mid jirta oo waxay kugu dhex beereysa inaad si xoog leh ku amaantid subax iyo galab kasta maalin waliba! Dib ayuu kuu uumay! Hadda waxaad tahay qof doonista Rabbiga ku dhaqmaya!

Ilaah ma ahan oo keliya inuu dembiyadaada kuu cafiyey, wuxuuse kugu dhex aasaasay qof cusub oo marka hore aan noloshaada nafas ka qabin. Waxa aad ahaan jirtay ma ahan inay isbedelka laguu soo bandhigay kaa hor istaagto. Xataa haddii aad soo martay waxyaala badan oo ku niyad jebiyeen amaba niyadjabka iyo guul darroda aad kala kulantay dhaqamada Masiixinimada, waxyaalahaas oo dhan gadaal iska mari oo waxa ku hor yaala xoogga saar. Waxyaalahaas inaba wax khilaaf ah ma ahan inay u geystaan uunka cusub ee ay tahay hadda. Haddii aad uun cusub

tahay, haddaba wax kasta way cusbonadeen. *Waxyaalihii hore waa laga soo tegay* ((2 Korintos 5:17), oo wax aad u cuseb ayaa bedelay waxyaalahaas hore. Micnaheedu waxaa hadda kugu dhex jirta miino qaraxeedu heer sare yahay, waxaa ku jirta miinadaasi xoogga Ilaaha sare! Adiga ayaa laguugu dhex beeray! Ilaah naftiisa ayaa si buuxda kuu hogaaminayo oo xaq ayaad u leedahay inaad ka faa'ideysatid awoodda uu leeyahay, iyo weliba xigmaddiisa oo dhan, xoogga iyo jacaylka uu kuugu deeqayo. Ilaah wuxuu rabaa inuu ku caawiyo, si waxyaalaha laguugu deeqay noloshaada looga arko oo dadka kale lagu butaaciyo adigoo ah qalabka lagu adeejinayo!

Noolol Ilaahiyan ah

Tilmaantaada mar dambe kuma jiri doonto uunkii hore, jidhkaaga, guul darrooyinkaaga amaba dabiicadahaagi aad ku dhaqmi jirtay, laakiin waxaa laguugu tilmamaya waxyaalaha uu Ilaah Ruuxa Quduuska ah kugu beeray. Markuu isbedelkan qayb noloshaada ka tirsan ahaado, hab nooleyd cusub ayaad bilabeysa. Ilaah nooguma yeedhin inaan ahaano dad isaga dhaqmayo uun dhaqamada diinta ee laakiin wuxuu naga doonaya inaan lahaano noolol Ilaahiyan ah!

Halka aad noloshan Ilaahiyanka ah ka bilabeysid waa midda ugu muhimsan e ugu farxadda badan! Xaaladdan waa inaad fahantid haddii kale ma awoodi kartid inaad ku dhaqantid wuxuu Ilaah kaa doonayo. Tilmaantaada waa inay bayaan kuu ahaato. Ilaah kuguma hogaaminayo Ruuxiisa Quduuska ah marba haddii aad ku mushquulsan tahay noloshaadi hore sida la yidhaahdo 'eyga matagiisa ku laabta'. Taasi waxay kaa dhigeysa inaad u nuglaatid awoodda sheeddaanka. Waa inaad ku dhiiranaatid iskuna tilmaatid xidhiidhka cusub ee aad la leedahay Ciise Masiix iyo waxyaalaha aad awooddiisa ku sameyn kartid.

Faalimaha Rasuullada 10:38 waxaa ku qoran, *Sida uu Ilaah Ruuxa Quduuska ah iyo awoodda ugu caleemo saaray Ciisihii reer Naasareed iyo sida uu meelo u aaday una bogsiiyey kuwa badan oo sheeddaanka adoonsanayey.* Waa kan Ciisaha kugu dhex nool ee noloshaada ay u hogaansameyso! Wax kastoo uu Ciise dunida ku sameeyey, wuxuu rabaa inaad adiga wakiil uga ahaatid ee laguugu fuliyo waxyaalahaasi oo dhan. Wax kastoo uu wagaas yidhi wuxuu rabaa inaad cod uga ahaatid maanta. Wax kastoo uu ahaa adiguu kuugu dhex yahay maanta. "Laakiin," waxaad dhihi karta, "Wax ku saabsan waxyaalahan aad sheegeysid weligey ma dareemin." Taasi waa wax aan maskax gal ahayn. Kama hadleyno "sida" aad tahay, laakiin waxaan ka hadleyna "kan" aad tahay. Waxaaba suurtagal ah inaad aad ugu qanacsan tahay fursooyinka aad haysatid, sida gabahd uu dhalay boqorka oo dhul qalaad ka tuuktameyso. Laakiin markaad bilawdid inaad ogolaatid oo aad qiratid qofka aad runtii tahay, noloshu waxay noqoneysa waxa aad weligaaba rajeyneysay. Marka ugu horeysay ee aan arkay inuu qof ku bogsaday duca aan u duceyey waxay ahayd mar aan la hadlayey profeesar jaamacadda barayey ee aan xerta Ciise kamid ahayn. Waxaan qoray imtixaan mawduuciisa ahaa bogsiinta. Markuu akhriyey waxaan qoray ayuu ii yimid oo maskaxdiisa su'aalo badan ayaa ka buuxeen wuxuuna igu bilaabay su'aashan ah, "Haddaba arintaas maxaad iiga sheegi karta, mar dhaw ma jiraa qof aad u duceysay e bogsaday?" Waxaan dareemay inuu xanaaq xaqnimo ah igu soo dul degay oo aan u jeednayey rumeysad la'aantiisa. Waan u jawaabay oo waxaan ku idhi, "Markaan kuwa bukaan gacanta saaro oo aan u duceyo way bogsadaan. Markos 16 waxay sheegeysa inay kuwa xerta Ciise ah kuwa bukaan ayey gacanta saari doonaan – aniguna hadda waxaan ahay mid ka tirsan xerta Ciise – wayna bogsan doonaan! Haddaba markaan gacanteyda saarayo iyaga, way bogsanayaan". Weligey allaheyna qof buka gacanta inaan saaro uma duceynin! Waxa dhacay ayaa waxay ahayd in iimaan laygu dhex butaaciyey. Inta aan ka welweli lahaa waxaan ku jawabayo ama aan dhihi lahaa "wax kasta way suurtoobaan," isla markiiba dhiiranaan ayaan ula macaamiltamay oo waxaan ku idhi, "Erayga Ilaah ayaa sheegay waxyaalahan!" Markaan tixgeliyey qoraalka Eebbe isla waxyaalahaasi ficil bey noqdeen. Laba toddobaad kaddib waxaan qabanqaabiney kulan weyn oo

Erayga Ilaah dadka lagu barayo kuwa bukana way bogsadeen. Aad bey arin farax badan u ahayd natiijadaasi. Waxay ahayd marka ugu horeyso oo aan ku ficilgalo habkaasi. Ilaah wuu difaacaya Eraygiisa wuuna ficilgelinaya!

Qiro waxyaalaha uu Ilaah noloshaada kaaga muujiyey

Haddii ay tani kula tahay wax aan caadi ahayn oo aan suurtagal ahayn, haddaba waa inaad ogaatid in waxa lagaaga baahan yahay aysan ahayn oo keliya inaad xafiddid oo ku dhawaaqdid aayadaha Baybalka, laakiin waa inaadan inkirin oo aad ogolaatid dembiyada uu Ilaah nolshaada kaaga muujinayo. Hadduu Ilaah yidhi waxaad tahay uun cusub, ogolaw inaad tahay uun cusub. Hadduu Ilaah kuu caddeyey inaad tahay guuleyste, haddaba ogolaw inaad tahay guuleyste. Hadduu kuugu yeedho saaxibkiisa, adeegahiisa, iyo weliba kiisa is hooseysiya, haddaba waxyaalahaasi ayaad tahay. Waxba yaysan ku welwelinin waxyaalaha ay dadka kale kaa sheegayaa iyo wuxuu jidhkaaga kuu muujinayo. Waxaad tahay wuxuu Ilaah kuu caddeyo inaad tahay. Ilaah wuxuu rabaa inuu ku adeegsado awood oo dhan ayuu u leeyahay inuu sida uu rabo kuu istecmaalo.

Haddaba iftiinkaas hogaan hakuu ahaado. Ciisaha aan ka hadleyno ma ahan mid meel iska fadhiyo oo neylo ama ilmo ido jilbaha u saaran yihiin. Waa Ciise kan ah Libaaxa qabiilka Yuuddah! Waa Ciisaha aan is bedelin ee sida uu shallay ahaa ayuu maanta yahay oo weliba beritona yahay oo welibiis isma bedelayo – kaasi oo hawshiisa ahayd inuu cid kasta bogsiiyo. Kaasi ayaa ah Ciisaha aan ka hadleyno ee noloshaada ka dhex shaqeynayo. *Isaga ayaa fulinaya hawsha!* Taasi macnaheedu waxay tahay adigu waad iska fadhiisaneysa oo nasaneysa maxaa yeelay labagooraba adiga qofka hawsha fullin lahaa.

Ilaah ma dhihin waa inaan *tijaabina.* Wuxuu nagu amray inaan *sameyno hawsha.* Dareenka ay dadka badanaa qabaan ee ah “waa yahay, ee in hal toddobaad ah ayaan isku deyeyna fikiradda cusub ee ah inaan qiranno Erayga Ilaah” ma ahan mid inaba shaqeyneysa. Ha ahaato wax qalbigaada ku jira ee aad naftaada oo dhan u hureysid, si markuu Erayga Ilaah dhex galo oo hogaamiyo uunka cusub ee aad tahay, uu shaqada u fuliyo. Marba haddii aad afkaaga ka sheegtid ama kaga dhawaaqdid, waa lama huraan natiijo ayaa ka soo baxeysa oo isbedel ayaa ka dareemeysa noloshaada iyo wax kastoo agagaarkaaga ahba. Bedelkii aad inaad hal qof oo buka u duceyn lahayd oo u rajo dhigi lahayd waxaa wanaagsan inaad qof kale ee buka u sii gudubtid oo u duceysid, oo halkaas ha ku ekaanin ee dad kale ugu sii gudub mid mid, waadna arki doontaa sida uu Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah ku ficiltami doono. Durbaba waxaad arkeysa calaamooyin iyo muucjisooyin la yaab leh waayo Ilaah ayaa Eraygiisa ka ficilgelinaya hawsha aad Rabbiga ugu adegeysid. Tan si kastaba waad u daremeysa haddii aad leedahay mid ka mid ah shanta hibbo e Rabbigu nagu adeegsado iyo haddii aad waddid hawl caadi ah oo aad Masiixa ugu adegeysid. Isbedellada waweyn ee aan arki doono ee ku faafayo meelo badan waxaa sameynayaa dad “caadi” ee ka mid ah xerta Ciise oo hubsadeen inay yihiin uun cusub – oo markay kuwa bukaan gacanta saraan way bogsanayaan. Ciise Masiix wuu kuugu dhex noolyahay! Isla marka aad dembiyadaada ka toobadkeentay ee uun cusub noqotay ayaad ahaatay mid ka mid ah qorshahiisa ilaahiyanka ah. Taasi waxaa lagu macnnayn kara inuu Ilaah naftiisu kuugu beeray dabiicadahiisa. Butroska labaad 1:4 waxaan ka akhrineyna inuu dhabtii kuugu beeray waxyaalaha Isaga lagu tilmaamo oo dhan ee ah dabiicadahiisa. Waa hab uunkan kan bedelayo oo laga dareemayo noloshaada. Markuu Ilaah ku siiyey noolol, wuxuu ku siiyey wax kastoo uu yahay iyo wuxuu haysto. Wuxuu ku siiyey caafimaadkiisa – kaasi oo lagu keediyey uunka cusub ee uu helayo qof kastoo ka tirsanaado xerta Ciise. Ilaah wuxuu kuugu deeqay deeqdiisa oo dhan keed ayuuna kugu dhex sameeyey deeqdiisa. Ilaah wuxuu ku siiyey xigmaddiisa iyo subkintiisa qalbi qaboojinta leh waana kuugu dhex beeran yihiin. Sababtaas awgeed, mar allah markaad marxalad geleysid Ilaah

naftiisa ayaa kuugula dhex jira marxaladdaasi. Sida ay ku dhigan tahay Filiboy 2:15, waxaad tahay nuur ka dhex nuurayo dunida. Marxalad kastoo ay geleysidba barako ayaad ku tahay. “Ishooseysinta” dheheysa, “Anigu waxba ma ahi oo waxba ma sameyn kari,” waa kibir hab kale loo ficilgelinayo. Ishooseysinta runta ah waa tan aad waxyaalaha aad ku fikireysid ku beerineysid wuxuu Ilaah maskaxdiisa kugu hayo. Waxaan u jilba joogsanaya Rabbiga waanna asmacayaa markuu ii sheegayo inaan dembaabay. Waxaanna ku jawaabaya “Haah iyo aamiin ama sidaas ha ahaato” oo wax kastoo dhan isla sidaas ayuu ugu jawaabaya.
Kibirku wuxuu leeyahay, “Arintan ma ahan mid isla aad umaleyneyso u sahlan. Baybalka isla sidaas toos uma tafsiiri karno, miyeysan ahayn?” Damiirka noocaas ah wuxuu u egyahay mid ku jira qof ishooseysin leh laakiin Ilaah wuxuu rabaa inuu kaa badbaadiyo kibirkaas.
Waa inaad ku jawaabtid “Haah” maxaa yeelay dhabta jirta ayaa waxay tahay inay balamada oo dhan “Haah” ka yihiin xagga Ciise Masiix: “Haah” ma jirto silcin si nasiib ah kugu soo gareyso, “Haah” Ilaah ayaa gacanta ku haya oo xalinaya dhibatooyinkaaga oo dhan, “Haah” ducooyinkaaga waa laga jawaabaya, “Haah” awood ayaad leedahay oo aad ku fulin kartid wixii laguu subkay inaad ku ficiltantid. Culeys weyn ayaa garbahaaga ka degayaan oo cagahaaga hoostooda ku dhimanayaa haddaad sameysid sida lagula talinayo.
Haddaad Ilaah u ogolaatid inuu uunka cusub kuugu dhex barbaariyo, indhahaaga way furmayaan oo waxaad Isaga u arkeysa isla sida uu yahay. Waad arki doontaa markaad farriinta Ilaaha nool iyo Ciise Masiix dunida ku fidisid – waana waxa uu noogu yeedhay inaan sameyno. Markaan sameyno, Ilaah mucjisooyin ayuu ku sameyn doonaa kana dhex sameyn doonaa nolosheena.

12
Qofka Ilaah toos u adeeca

Waxa ay ku kala duwan yihiin xerta Ciise iyo dadka kale waa hibada Ruuxa Quduuska ah. Ruuxa Quduuska ah la’aantiis waxba ma nihin. Markuu Ilaah kuu yeedhay kuna badbaadiyey, ma ahan inuu dib u habeyey jidhkii hore ee dembiilaha ahaa. Wuxuu dhisay guri cusub amaba jidhkaaga wuxuu ka dhigay mid dib loo dhisay oo cusub.
Inta badan annaga baniaadmiga ah waxaan aragnaa uun xukumaadbna ku qaadnaa waxyaalaha aan dareemadeena ku misaami karno sida aragga iyo taabashada waxaanna garab mareyna waxyaalaha qalbiga qofka ka dhex dhacayaan. Ilaah markuu wax sameynayo kama soo bilaabo dibadda ee laakiin wuxuu ka bilaabaya gudaha ama qalbiga qofka. Wuxuu ku bilaabaya gudaha ee ay ku jiraan waxyaalaha aan la arki karin. Sadaas daraaddeed haddaba waa inaan aad xoogga u saarno waxyaalaha aan la arki karin bedelkii aan waxyaalaha la arki karo ku mushquuli lahayn isla sida aan uga arkeyno 2 Korintos 4:18.
Marka aad ka soo laabatay noloshaadii hore ee dembiga lahayd, Ilaah wuxuu kuugu dhex beeray wax aad u cusub. Wuxuu kuugu dhex beeray qofnimo cusub ee aan weligeed jirin. Qofnimadaasi wax kastay ka horeysay, ilaa haddana wuu jira, waana wax aad u cusub (2 Korintos 5:17).
Ilaah sidee buu ku uumay qofnimada cusub? Wuxuu ku uumay Ruuxa Quduuska ah! Rooma 8:16 *Ruuxa naftiisa ayaa ruuxeena la hadlaya* (kaasi oo ah qofnimada cusub e nagu jirta) *waxaannu nahay carruurta Ilaah.* Baybalka wuxuu istecmaalaya masaalo fara badan oo tilmaamayaan masixiinta. Waxaan nahay macbudka Ilaah: *Miyaanad ogeyn inuu jidhkaaga yahay macbudka Ruuxa Quduuska ah, kan kugu jira, kan uu Ilaah kugu deeqay? Adiga isma lihid* (1 Korintos 6:19)

Macnaha jidhkeenu waa macbud, Ruuxa Quduuska ahna waa kan ku muuqda sharaftiisa, kan

loogu yeedhay “shekinah”, Isaga ayaa macbudkaas ku buuxinaya quduusnimada midda ugu heerka sareysa. Quduusnimada midda ugu heerka sareyso waa qofnimada quduuska ah ee kuugu jirta oo halkas ayuu Ruuxa Quduuska ah hoy ka dhigtay.

Ruuxa ku soco oo noolol guul leh ku noolaw

Qof kastoo uun cusub laga dhigay wuxuu hoy u yahay Ruuxa Quduuska ah. Dhalashada cusub waxay ku timid Ruuxa Quduuska ah. Isagu wuxuu maanta ku jira Ciise Masiix, maxaa yeelay wuxuu Ruuxa Quduuska ah ku noqday qofkaasi xerta Ciise. Madaama aan ku bedelannay Ruuxa Quduuska ah waa inaan ku dhaqanno hogaanka Ruuxa Quduuska ah. Tan macnaheedu waxaa weeye in nolosha buuxda nagula dhex beeray wuxuuna ka dhex adeegi doonaa gudaheena. Rooma 8:2 waxaa ku qoran, *Waayo, qaynuunka Ruuxa nolosha eek u dhex jira Cisie Masiix ayaa iga xoreeyey qaynuunka dembiga iyo dhimashada.* Ruuxa Ilaah wuxuu igu deqaa noolol, oo markaan Ruuxa ku socdo, waxaan ku socda nolosha iyo barakooyinkiisa. Waan ka samata baxay maasuqa oo waxaan ku noolahay noolol ka guuleysatay dembiga.

Ruuxa Ilaah ayaa noolol igaga deeqaya Samada. Waana sababta uu Ciise Nikodemus ku yihdi sida ku dhigan Yooxanaa 3:3, oo ahayd inuu ku waajibanaa inuu mar labaad dhasho, ama “inuu ka dhasho xagga samada,” isla sida ay Griigta yidhaahdaanba. Baybalka wuxuu ka hadlaya saddex nooc oo *noolol* ah: Tan ugu horeysa waxaa la yidhaahdaa “*bios”* waana nolosha caadiga ah ee jidhkaaga ka dhigeyso mid dhaqaaqa oo hawl gala. Tan labaad waxaa la yidhaahdaa “*syche,*” mise nolosha nafsadda waxay isku tilmaanta maankaaga, doonista iyo dareemada. Ugu dambeysta tan saddexaad waxaa la yidhaahdaa “*zoe,”* ama nolosha tan Ilaah xidhiidh lagula leeyahay – nolosha barakooyinka oo dhan la butaaceysa, waana nolosha ka imaneysa Ilaah. Korintoska 1aad 2:14 waxay ka hadleysa “ninka caadiga ah.” Fasiraado kalena waxay ku macneynayaan “ninka nafsiyanka ah” amaba “ninka aan Ruuxa ku shaqeynin.” Kani waa ninkan aan dib loo cusbooneysinin ee ku socda oo keliya wixii aan horey ugu yeedhnay “*bios”* iyo “*syche”* ee aan laakiin qabin “*soe.”* Baybalka wuxuu sheegaya in *ninka sidaas ah uusan ogolaneynin waxyaalaha Ruuxa Ilaah ku yimadaan, macaa yeelay nacasnimo ayey u yihiin isaga, mana fahmi karo waxyaalahaas, maxaa yeelay waxyaalahaas waxaa lagu fahmaa oo keliya Ruuxa Ilaah* (1 Korintos 2:14). Taasi waa maxay micnaheedu? Waxay ka macna tahay in nolosha Ilaah ka timaado ay aad uga duwan tahay nolosha caadiga ah oo si caadi ah laguma fahmi karo amaba laguma noolaan karo. Waana sababta ay ku waajibannahay inaan mar labaad dhalano! Qofka aan noloshiisa la bedelin kuma noolaan karo nolosha looga deyanayo Masiixa. Kuwa badan ayaa isku deyeen laakiin way ku guuleysan wayeen. Kuma filno oo keliya in laysku deyo in lagu nolaado farriinta uu Ciise wax ku baray buurta. Amaba miyey ku filan tahay in la ahaado nin qaynuunadiisa ay sugan yihiin oo aad u xajiya waxyaalaha dhaqamada tiirka u ah. Waa suurtagal in la lahaado fikirado ku tiirsan wax baridda ku jiraan Baybalka saa ay tahayna waxaaba haddana suurtagal sii ah in qofkaasi uu ku hirto naarta.

Isbedelka taabanayo dhuuxa

Dumar iyo ragba waa inay mar labaad dhashaan oo ay helaan nolsha Ilaah oo si toos ah u hogaamineysa noloshooda oo dhan. Kuma filno oo keliya inuu qofka qaynuunada Baybalka qalbigiisa ku hayo. Kuwa badan ayaa qaladkan ku dhaqmaan. Haddii aanay wacdiyayaashu ku wacdineynin isbedelka iyo dhalashada cusub, waxay uun maqaar ido ku dedadaan dawaaco. Markay dhibatooyin iyo filnaansho la’aan timaaddo, maqaarkii dhinac ayuu u dhacaya oo uunkii hore ee aan la bedelin eek u saleysan Aadan ayaa muuqanaya. Uunkan wuu ku caasinayaa Ilaah, wuu diidaya inuu Ilaah mana fahmayo waxyaalaha Ilaah inaba.

La yaab male isbedelka dadka ay noloshodii hore ka soo noqonayaan oo Ilaah u adeegayaan

mudda dheer ayey wareer ku jirtay. Kuwa badan oo hogaanka ka hayaan kiniisadaha ama go'aanada kama dameysta ah bixiyaan naftooduba ma ahan kuwa uu qalbigoodu isbedel ku dhacay ama mar labaad dhasheen! Kuwan waa kuwa noloshoodu ay ku socoto sida tan aan ugu yeedhnay nafsiyan kuwaasi oo ku nool noolol si weyn loo raacsan yahay ee ah sida ha I taabanin kuma taabanayi e – anshax wanaag unbay baran laakiin qalbiga waxba kama bedelaan. Aad bey uga anshax wanaagsan yihiin ninka baarka ku jira ee biirka dejinayo, kan qaadka cunayo, sigaarka dhuuqayo ama tubaakada afka gashanayo. Sababtaas awgeed way iisu arkayaan inay iyagu ka heer wanaagsan yihiin kana sareyaan kuwa ficiladaas aan sheegnay ku dhaqmaan. Laakiin weli noloshoodu waxaa ka buuxa oo hogaaminaya qalbigaasi aan dib loo cusbooneysinin ee uu Baybalka ugu yeedhayo "ninkii hore.".

Markay ugu dambeystii cusbooneysin imaato, oo ay dadka badbadaan oo ay weliba bogsadaan, waxay la ahaaneysa wax la yaab leh. Mar dambe ma dareemi doonaan inay la qabsanayaan noloshii hore ee kiniisadda. Marka la sacbinayo, la ciyarayo, laguna heesayo awoodda Ruuxa Quduuska ah oo dadka lagu wada kicinayo Ruuxa Ilaah, mise qosol ama oohin, si daran oo xanaaq ku jiro ayey ku ficiltamayaan. Mana fahmi karaan maxaa yeelay *ninka sidaas ah uusan ogolaneynin waxyaalaha Ruuxa Ilaah ku yimadaan, macaa yeelay nacasnimo ayey u yihiin isaga, mana fahmi karo waxyaalahaas, maxaa yeelay waxyaalahaas waxaa lagu fahmaa oo keliya Ruuxa Ilaah* (1 Kor 2:14).

La yaab maleh maanta dhibatooyin fara badan ayaa jiraan. Waxyaalaha Ilaah laguma helayo maskaxda baniaadmiga ama qofka nafsiyanka ah. Nafsaddaas isku filan waa inay horta dhimato si ay noolol cusub u dhalato. Waa inaad ka jeesatid noloshaadii hore oo aan heshid hamiga ah inaand u baahantahay iskutallaabta iyo dhiigga laguugu iibsanayo badbaadada Ciise Masiix. Ma haysatid wax aad Ilaah ku deeqi kartid, laakiin wuxuu qaba Isagu wax la yaab leh uu ku deeqayo baniaadmiga oo dhan – Noolol kaamil ah ee cusub oo lagu helayo Ciise Masiix, nolosha Ruuxa. Dadka qaarkiis way isaga boodaan uun baabuurka ah hawlaha Rabbiga, laakiin sharuudooyinkooda ayey ku raacayaan iyo weliba iyagoo natiija iyaga u gaar ah rajeynayaa ama niyeysan waxyaalaha ka baxsan waxa dhabta ah. Damacyadan oo dhan waxay mar kasta ku lifaaqan yihiin nafsinimada qofka. Qofka waxaa laga yabaa inuu magac ku yeesho hawsha Rabbiga loogu adeegayo, mid kalena wuxuu rabaa inuu sharaf, magac, jago iyo maal ku yeesho oo weliba mid kale ayaa jira oo rabbo in loo arko inuu isagu yahay kan keliya oo wax kasta yaqaana. Ilaah ma jeclo damacyadaas midkoodna hawlihiisana inaba uma istecmalayo qofka noocaas ah.

Waa yaab sida nafsinimadu, qalbiga aan la bedelin, qofka xerta Ciise dantiisa uun uga tirsan waxay si qumaati ah u muuqanayaan markay marxaladda halawdo oo ay waxba u hagaagi wayaan. Inta badan waxay ku ficilcelinyaan hab xanaaq ku jiro. Haddii nafsinimadoodu Ruuxa Ilaah muujiyo, natijooyinka ka soo baxayaan si dhaqso ah ayaa lagu fahmi karaa. Waa sida cunug yar oo wax ka xanaajiya lagula ficiltamay. Wax kastaba waxay qumanaanayaan uun markay dantooda u fuleyso – laakiin hadduu qof uun iyaga canaanto, isla waxa dhabta ah ee qalbigooda ku jira ayaa soo shac baxaya. Shalayn – uqdad, xanaaqa, islaweynida, cayda iyo wax kastoo af xumo lagu tilmaami karo ayaa ka soo baxayaan. Waa maxay sababta? Maxaa yeelay qofka uqdad naftiga ah ama talada maankiisa oo keliya ku socda ee aan Ilaah talo saaranin ayuu ahaa oo uun maqaar ido isku deday isagoo shabeel ah ama duwaaca ah. Waxyaalahaas waxaa lagu hergeliyey sida hadalada wanaagsan ee diiniga ah iyo wixii la midka ah. Qofka markuu noloshiisi hore ka soo laabto oo ka toobadkeeno ama mar labaad dhasho, isla markiiba kaamil ma noqonayo oo oofo ayaa noloshiisa ka muuqan doonaan. Weli wuxuu ku shaqeynaya isla jidhkiisi caadiga ahaa. Saa ay tahayna, Rooma 8:12 waxay sheegeysa inaanan inaba jirin sharci nagu xirayo inaan u hogaansanno jidhka. Waxaan ku waajibannahay inaan u hogaansannaano kuna ficiltanno

hogaanka Ruuxa.
Qofka cusoonaanta Ruuxa ku cusub waa inuu lahaado maan habkii hore hab ka duwan ku shaqeynayo. Mirirkii hore ee waxyaalihii uu maankiisa ku shaqeyn jiray weli way ka muuqan doonaan, intaasna Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah wuu ka sii shaqeynaya maankiisa si uu uga dhex xambaaro maankii hore ugana dhigo mid waxyaalaha cusub ee Ilaah ku dhaqmayo oo noloshiisa heer kale ka gaaro. Waana sababta aan inta badan u aragno arinta sida carruurta da'da ilka ridashada joogaan marka ay dadka ku cusub yihiin xernimada Ciise iyo marxaladaha cusub ee uu Ilaah ka hawl wado.

Ilaah wuxuu daneynaya rabitaanka iyo sababaha loo rabo
Way wanaagsan tahay in mar kastaba la eego qalbiga. Hadduu qalbiga qofka daahir yahay, rabitaanka Ilaahna kama maqno halkaasi, in kastoo xoogahaa oo rabitaanka jidhka ah ay ka muuqaadan qofkaas. Ilaah ayaa ka shaqeynaya oo baabi'inaya rabitaanka jidhka inta uu qofkaasi waxyaalaha Ilaah ku sii barbaarayo, wuxuuna qofkaasi sii fahmaya waxyaalaha damaca jidhka ah iyo ama kuwa reer adduunka ah amaba kuwa uu ibliiska ka dambeeyo oo isla markiiba wuu ka leexan donaa.
"Laakiin," waxaa laga yabaa inaad is leedahay, "ma jira hab nooceyd lagu sameyn karo?" Haah! Iska naar sheeddaanka kan ku burburinayo oo si xoog leh iimaanka ku ficiltan. La yaab ma leh markuu nacayo erayga iimaan oo uu rabo inuu wax kasta tabartiisa ku sameyo si uu uga hortago qofka xerta Ciise ku biiray si uusan iimaanka ugu adkeysanin oo u ficilgelinin!
Ilaah wuxuu eegaa qalbiga. Wuxuu eegaya sida uu qalbiga qofka ugu riyaaqayo inuu isku hooseysiyo addeecidda iyo u adeegidda Ciise oo diyaar u ah inuu ka faa'ideysto nolosha ka soo butaaceysa ruuxa cusub ee uu nagu beerayo Ciise. Qaybta nolosheena ee lagu magacaabay "*psyche"* (nolosha nafsadda) waa inay iisu dhiibto qaybta la yidhaahdo "*soe"* (Nolosha toos Ilaah u addeecsan) si xidhiidhka Ilaah lala leeyahay ula socoto ugana faa'ido jacyalka Ilaah, jiritaanka Ilaah, xigmadda Ilaah iyo weliba awooddiisa. Ciise waa inuu ahaado Rabbiga doonista qofkaasi iyo wax kastoo uu qofkaasi damacsan yahay oo dhan iyo weliba nolosha guud ee uu Ilaah kula leeyahay. Dhabtii hadduu Ciise Rabbiga yahay, wuxuu ballanqaaday wuu kaga dhex shaqeynaya nolosheyda maxaa yeelay noloshii hore ee aan maankayga isku hogaamin jiray waa ka tegay oo isagaan si buuxda isugu dhiibay si uu ii hogaamiyo. Waa halkan meesha nolosha ugu culus ee ay dagaalka ugu weyn kaga jiraan xerta Ciise.
Galatiya 5:17 waxay leedahay, ***jidhka wuxuu hinaasaya Ruuxa, oo Ruuxana wuxuu hinaasaya jidhka;*** *oo labadan cadaw (*dagaal ku jira) bey isku yihiin, *si aadan u sameynin waxyaalaha aad damacsan tahay.* Waa suurtagal inay maskaxda iyo qalbiga khiyaneyaan dadka. Haddii aanan si toos ah maankeyga iyo waxaan ahay oo dhan ugu ogaansamin Ciise, haddaba isla sidii Ananiyas iyo Safiira ee aan ka akhrineyno Faalimaha Rasuullada 5, waxaan ahaanaya qof si khiyaano ah wax ku reebtay. Waxaan lahaanaya damaca jidhka iyo waxyaala ii qarsoon oo aan doonista Ilaah ahayn taasi oo iga dhigeyso mid Ilaah macaarad ku ah, oo tan ila qumaan ayaan ku soconaya ee ma ahan tan uu Ruuxa Quduuska ah ee Ciise ila rabo.
Haddaba taasi waa maxay micnaheedu? Macnaha waxaa jiraan qaybo qalbigeyga ka tirsan ee aan ku keedsaday waxyaalaha aan anigu jeclahay oo aan diyaar u ahayn inaan ka toobadkeeno si aan uunka cusub u hiwado. Bedelkii aan ka soo noqon lahaa waxaan ku qarinaya falalka iyo anshax wanaagga diinta sida hadalada wanaagsan si ay kuwa agagaarkeyga joogan ee I garanayo aanay u fahmin waxa aan dhabtii ahay. Dadka noocan ah hadalo fiican ayey ku hadlaan oo weliba aayadaha Baybalka ay kuu soo xigsanayaan, laakiin waxaa waxyaalahaas oo dhan dhan ka dambeyaan waxyaala badan oo shar ah uu qofka ku keedsanayo qalbigiisa oo weli sheeddaanka ayuu u hogaansan yahay. Dadka noocaas ah weli si run ah ugama toobadkeenin amaba ma

yeelanin dulqaadka loo baahan yahay ee lagu helo waxyaalaha kheyrka ah uu Ilaah noogu talagalay. Dadkaasi weliba ma jeclo inay Ilaah u hogaansamaan oo ku toosaan dariiqa uu rabo inay maraan. Waxay rabaan inay helaan barakooyinka Ilaah iyagoo aanan addeecin oo aan u hogaansamin Isaga. Waa inay qalbigooda oo dhan isugu dhiibaan Ilaah oo ka jecladaan qalbigooda oo dhan waana inay asmacaan habka uu Ilaah rabo inay wax u sameyaan. Tani waa dhibka ugu weyn ee maantadan Kiniisadaha ay ka dhex muuqdaan hawlaha kuwa ugu waweyn ee uu Ilaah sameynayo. Mar alla markuu Ilaah wax cusub sameynayo, dadka u ooman inay Erayga Ilaah maqlaan ee ay noloshoodu kaamilneyn way ku soo biiraan. Ciise wuu jacayl yahay arintaas. Weligiisba wuxuu ahaa mid nolosha aan kaamilka ahayn ka shaqeeyo oo kheyrkiisa ku deeqo. Saa ay tahayna waxaa kaloo haddana jiraan dad qalbiyada wax shar ah ku hayaan kana shakinayaa hawsha Rabbiga, iyo kuwa kale oo waxa ay ku fikirayaan ay aad uga duwan yihiin sida ay xaaladda tahay ayaa ku soo biirayan meelaha Erayga Ilaah lagaga wacdinayo.
Markuu Bawlos dadka uga digayo inaysan waxyaalaha ama u adeegidda Ilaah aanay u istecmaalin inay isku faa'ideyaan sida ku dhigan Tomoteyoska 1aad 6:5, kama hadlayo oo keliya lacagta, laakiin waxaa kaloo haslkaas ku jiraan in layska dhawro maanka waxyaalaha qaldan ku fikirayo iyo damaca loo qabo in jagooyin la qabsado.
Ilaah wuxuu dhisaa oo kaamila hawlahiisana ku fushadaa dadka aan kaamilka ahayn ee laakiin diyaar u ah in noloshooda laga shaqeeyo oo diyaar u ah inay u hogaansamaan Isaga. Addeecista macnaheedu waxaa weyaan inuu qofka u go'ayo Ilaah iyo doonistiisa ee mar dambe ma ahan doonisteyda si uu Rabbiga iiga dhex ifo. Waa in Ilaah loo ogolaado inuu ku dhaqaaqo kagana shaqeeyo nolosheena sida uu nala rabo Isaga. Isagaa go'aan garayo maxaa yeelay Isaga ayaa ah Rabbiga rabbiyada ma ahan aniga kan hogaanka haya.
Dareenka noocan ah ee diyaarka u ah inuu Ilaah u hogaansamo wuxuu iga dhigaya qof aanan u dhaqmin sida Naaman ee aan ka akhrineyno Kitaabka. Naaman wuxuu ahaa nin juudaan qabay oo laakiin rabay inuu ku bogsado habka isaga la quman. Markuu fahmay inaysan xaaladdu ku soconin sida uu rabay inay wax u socdaan, wuu xanaaqay oo wuxuu damcay inuu isagoo cudurkiisa qaba guriga ku noqdo. Haba ahaate ee, markuu is hooseysiyey, waa la bogsiiyey. Wuxuu barakoobay oo keliya markuu iska xooray kibirkii qalbikiisa ku jiray e uu rabay inuu noloshiisa oo dhan ku ficilgeliyo. Laakiin way u socon waysay oo markuu fahmay kana soo noqday wuu ishooseysiyey.

Erayga Ilaah wuxuu kala soocaa Nafta iyo Ruuxa

Diwaan gelinta noocan ah waxay waddada u baneyneysa inuu Ruuxa Ilaah nimanka iyo dumarka ku hogaamiyo waxyaalaha kheyrka ah uu Ilaah la damacsan yahay iyaga. Macaaradnimo, niyadjab, iyo xamasho mar dambe kama dhex muuqan doonaan nolosha sida kuwa aan uun cusub laga dhigin sida xanaaqa, uqdadda iyo shaleynta. Bedelkeeda nolosha cusub ee Ruuxa Ilaah ku timid ayaa soo butaaceysa Ilaahna wuu fulinaya hawsha uu ugu danlahaa. In kastoo uu qofka go'aanka cusub qaatay uusan kaamil ahayn, qofkaasi waxaa ku dhex beerantay xaqnimo waana asli. Dareemada iyo damacyada waa wax ku jira jidhka baniaadmiga oo dhan laakiin waa laga daahirinaya waxyaalahan oo dhan.
Maanta tan ma ahan arin aad u muuqata maxaa yeelay, Ilaah dad fara badan oo u go'an inay u adegaan ayuu ku toosiyey inay qataan jagooyinka hogaanka. Dad badan ayaa dhib ku qabaan hawlaha kuwa hogaanka hayaan. Waxay u arkayan inay tahay mid aan sax ahayn inay hogaanka hayaan iyagoo aan qumaati isugu dhiibin hogaanka Ilaah. Waxay ka cabsanayeen in loo arko inay yihiin kuwa baahi weyn u qabaan jagooyinkaas. Cadawga fursaddan ayuu ku faa'ideystay oo wuxuu ku beeray cabsi, shakin iyo dhiiranaan la'aan oo maanta haysata kuwa jagooyinka hogaanka hayaa, taasi oo ka hor taagan inay ficil geliyaan waxyaalaha uu Ilaah iyaga u subkay.

Sababtaas awgeed, wacdiyayaal badan ayaa jira oo dhibanayaal ah, damiirkoodu uusan deganeyn, dibna uga guranayo hawlaha kiniisadda uu waajibka ka saaran yahay inay fuliyaan oo bedelkeeda waxay garab ka rabaan dad kale. Ilaah inaba uma qorsheysano inuu baabi'iyo kuwa hogaanka hayaan. Bedelkeeda wuxuu rabaa inuu kuwa hogaanka hayaan uu ka dhigo kuwa fahmaan kuna dhiiranadaan hawsha ay Rabbiga ugu adeegayaan. Sababtaas awgeed haddaba damiirkeena waa inuu nadiif ahaado. Waa inaanan mar dambe dhageysanin beenta sheeddaanka oo ah hub uu ugu talagalay inuu nagu beero qalbi si joogta ah iisu haysto inuusan waxba awoodin ee uu dembiile yahay. Sheeddaanka wuxuu rabaa inaan dabageddino hawlaha uu Ilaah nagu aaminay inaan hergelino maxaa yeelay wuxuu rabaa inuu naga qaado awoodda nagula siiyey Ruuxa Ilaah. Haddii uu damiirkeena quman yahay, qalbigeena oo dhan ayaan Ilaah ugu adegeyna, dabadeetada wuu na barakeynaya. Waxaan Ilaah horgeynay sadaqo Ilaah hortiisa laga ogol yahay oo dabkiisa ayaa ka soo degaya xagga samada. Laakiinse haddii uu qalbigeena yahay mid ay ka buuxaan damacyada jirka iyo inaan waxyaalaha adduunka isku faa'ideyno barakooyinka Ilaah ma heleyno. Erayada dadka way iisu ekaan karaan waxayna lahaan karaan isku fikirado; laakiin mid baa muujin qaas ah looga wacyoon karaa, Eray xagga Ilaah uga yimid, oo kuwa kalena waxay lahaan karaan oo keliya waxyaalaha anshaxa diinta ku saleysan, fikirad haddii qumaati loo eego aan xumeyn oo sax ah, laakiin waxaa ku jiraan waxyaalaha qarsoon oo qalbiga lagaga damacsan yahay.

Sidee baan ku kala fahmi karnaa nafta iyo ruuxa? Cibraaniyada 4:12 waxay sheegeysa in Erayga Ilaah kala sarayo labadan shey wuuna xukumaya waxyaalaha maanka qofka ku jiraan iyo sababta loo damacsan yahay ee qalbiga lagu hayo. Cibraaniyada 5:14 waxay noo sheegeysa in Erayga xaqnimada nagula tababaro dareemadeenana hogaan cusub u lahadaan si loo kala fahmo lana kala saaro sharka iyo wanaagga, oo Korintooska 1aad 2:15 waxay qoreysa in qofka hogaanka Ilaah ku socda uu xukumayo wax kasta.

Ruuxa Quduuska ah wuxuu na siinaya awood aan kaga guuleysano damacyada jidhka. Wuxuu la shaqeynaya Erayga Ilaah si uu kuu awoodsiyo inaad kala garatid damacyada saxda ah uu Ilaah raali ka yahay iyo kuwa sharka ah waa haddii aad runtii Ciise si dhab ah u raaceysid amaradiisana xajineysid. Haddii aad sidan ku socotid, si fiican ayaa laguu hogaaminaya oo waxyaalihii marka hore ku wareerin jireen way kuu iftiimayaan. Waxaa kaloo aad kala garan doontaa waxyaalaha ruuxa iyo kuwa maankaaga ka soo askunmeen. Ruuxa Ilaah wuxuu ku gaarsinaya heer sare heerkaasi aad kaga ficiltami doontid sida uu Ilaah kula rabo uguna adeegtid!

13
Dahabkaaga busta ku jira!

Ogolaw Erayada afkiisa ka soo baxayaan oo qalbigaaga ku asturo. Haddaad ku laabatid Ilaaha ku uuntay, dib ayaa ugu laaban doontaa wuxuu kugu talagalay bilawgii adduunka: Haddaba waan ku baryayaaye, sharciga afkiisa ka aqbal, oo erayadiisana qalbigaaga geli. Waa lagu dhisi doonaa haddaad Ilaaha Qaadirka ah u noqotid, oo aad xaqdarrada teendhooyinkaaga ka fogaysid. Khasnaddaada waxaad ku xoortaa ciidda, oo dahabka oofirna waxaad ku dhex tuurtaa dhagaxyada durdurka, oo Ilaaha Qaadirka ahuna wuxuu kuu noqon doonaa khasnad, iyo lacag qiime badan. (Ayuub 22:22-25).

Ilaah wuxuu rabaa inuui noloshaada ka baabi'iyo wax alla wixii kaa hortaaga inaad raacdid Ciise. Macnaheedu waxay tahay waa inaad go'aansatid kan aad maanta dooneysid inuu ahaado Rabbiga ama hogaamiyaha noloshaada. Tusaale ahaan, kuwa u silcayaan cabsida ay baniaadmiga ka qabaan waxay u hogaansan yihiin dad kale oo ahadeen rabigooda. Dadku waxay qabi karaan

madhab kiniisad oo ay iyagyu aasaaseen, waxaana ka tirsan hogaamiyaalka iyo culumada diinta - iyo weliba waxyaala kaloo fara badan oo u ficiltamaan sida rabbigooda. Ilaah wuxuu kugu leeyahay iska leexi wax kasta iyo qof kasta xataa haddii ay aad kuula qiima badan yihiin ama kula qurux badan yihiin sida dahabka. Waa inaad iska maamnuucdid, marba haddii ay yihiin wax adiga iyo Ciise laba dhexdiida gelayaan, haddii kale, ma sameyn kari doontid wuxuu rabo inaad sameysid. Sababtaas awgeed, *waxyaalaha kala daadsan ee aad qiimeyneysid oo dhan ku dhex tub busta…Ilaaha samada ku jirana wuxuu kuu ahaan doonaa dahab.* Dabadeetana, aayadda 26aad waxay dhigeysa inaad ku faraxsanaan doontid Rabbiga ah kan uumay samada iyo dhulka oo isagaad indhagaaga ku taagi doontaa oo waxaad ku dhawaaqi doonta inuu Isagu yahay kan noloshaada toosin kara adigoo leh, "Waxaan go'aansaday inaan Ciise raaco, ma jiro qof kale ama wax kale oo aan ka sareysinayo Isaga. Waxaan ku dhaqaqaya inaan ku dhaqmo waxyaalaha uu igu amri doono, inaba ma sameyn dooni waxyaalaha ay dadka kale ama waxyaalaha kale igu amrayaan inaan sameyo. Isaga oo keliya ayaan u adeegaya oo ka amar qaadanaya. Isagu waa Rabbigeyga iyo Badbaadiyaheyga. Aniga iyo nafsaddeyda oo Isagaan ku daahiriyey uguna adeegaya."
Qoraalka Quduuska ahu wuxuu sheegaya in indhaha Ilaah ay adduunka oo dhan ka doondoonayaan dadka u baahan inay qalbiyadooda awoodda ku xoojiyan kuwaasi oo ah kuwa Ilaah u go'ay doonayaanna inay noloshooda oo dhan Isaga oo keliya ugu adegaan. Ma jirto meel uu Qoraalka Quduuska ah inaba nooma sheegayo in madaama aad Axaddii Kiniisadda aaddid, oo aad marmar Qoraalka Quduuska ah akhrisid, inuu ku maqli doono, kana jawaabi doono waxyaalaha aad duco kaga codsaneysid oo uu kuu sameynayo isla sida aad rabtid! Maya sidaa ma ahan! Kitaabka wuxuu sheegaya oo keliya in markaad noloshaada iyo nafsaddaada u daahirisid Isaga, raacdid Isaga, oo aad u ogolaatid inuu kaa nadiifiyo wax alla wixii midabyo qaldan ah oo noloshaada ku jira ee xidhiidhka aad Isaga la leedahay burburinayo. Waxyaalahaasi waa kuwa kaa dhigayaan qof aan ku soconin edbinta heerka sare ee ah tan uu Ilaah kaa doonayo *dabadeetana waad duceysan doontaa, Ilaahna wuu ku maqli doonaa* (Ayuub 22:27).

Sadaqa Nool

Sababtaas awgeed, *Wax alla waxaad ku go'aansato way ficilgelayaan* (Ayuub 22:28), maxaa yeelay waxaad ahaaneysa qof Ilaah la yeeshay xidhiidh cusub oo doonistiisa raacsan. Noloshaaduna waa laga tirtirayaa waxyaalaha aan kugu hogaamineynid doonista Ilaah oo waxaad ahaaneysa mid xaq ah, oo sida ay ku dhigan tahayba Rooma 12:1, waxaad ahaaneysa qof jidhkiisa u bixiyey sida waaqdhac nool oo Ilaah ku faraxsan yahay. Dabadeetana waxaad awoodda inaad tidhaahdid, "Uma ogolaneyi aqoonteyda (taasi oo inta badan lagu metelay dahab) inay Ilaah iga hor istaagto. Uma ogolaan dooni inay waaya aragnimadeyda, cilmigeyga, dareenkeyga, saaxibadeyda, hormarkeyga, guuldarrodeyda iyo wixii la mid ah iga leexiyaan xidhiidhka aan Ilaah la eeyahay. Ma jiraan wax aan u ogolaan doono inay dhexdaas soo galaan. Nolosheyda oo dhan Isagaan u daahiriyey. Ma jiraan wax aan ka qiimabadinayo Isaga oo Isaga oo keliya ayaan diyaar u ahaanaya una adeegaya. Haddii ay noqoto inaan saacado taagnaado oo Isaga muusig ku amaano waan yeelaya marba haddii ay doonistiisa tahay. Diyaar ayaan u ahay inaan wax kasta u sameeyo Ciise!"
Isla weyni dabadeetana lumis iyo wax alla wixii ku saleysan ruuxyada diimaha ee igu hareersanaan karaan, waxay ahaan doonaan kuwa ay cabsi heer sare ah ku dhalato, maxaa yeelay salkooda wuu nuglaaday oo wax ay xigsan karaan oo noloshaada ku amri karaan ma jiraan. Ibliiska waxaa xaqiiq u ah inaad tallaabo kasta qaadi doontid awoodna u leedahay inaad sameysid doonista Ilaah oo dhan, meel alla meeshaad joogtid iyo weliba sida uu rabo inaad u sameysid wuxuu kugu amrayo – fasiraad kastoo ay dadka ka qabaanba. Marxaladdan ma ahan mid ku xiran

waxay dadka ku fikirayaan ama ay dareensan yihiin – sababtoo ah Ilaaha awoodda leh ayaad ka dhibatay hogaamiyahaaga iyo dahabkaaga. Farxaddaada waxay ku jirta Isaga. Isagaad si buuxda ugu faraxsan tahay. Isagu waa arijirkaaga jira oo wax aad u baahnaan doontid ma jiraan. Isagaa ku deeqsinaya. Xataa markaad ku dhex socotid dooxada hooska dhimashada, Wuu kula jira, waana gargaarkaaga, ushiisa iyo hankoolkiisa ayaa kula jiraan, wuxuu miis kuga diyaariyaa cadawgaaga hortiisa oo koobkaaguna wuu buuxdhafaa (Sabuurrada 23). Markuu Ruuxa Quduuska a ku caawiyo kuna taba baro si aad u ahaatid wuxuu Qoraalka Quduuska ah ugu yeedhayo "Masaakiinta ka ah Ruuxa" (Matayos 5:3) waxaad ahaaneysa mid Rabbiga u nugul, qalbiga oo dhanna Rabbiga ugu adeega oo ah *hal* shey ayaa aad muhim ahaan doona. Markaas ka dambana wuu ku maqli doonaa oo adiguna waxaad ahaan doontaa qof ducada aad qalbiga oo dhan uga duceysta oo waxaad ku duceysan doontaa ducooyinka uu Ruuxa Quduuska ah qalbigaaga ku soo dejinayo.
Waxaad go'aansato waa la sameyn doonaa, oo iftiin ayaa ku ifi doonaa waddooyinkaaga. Mar dadka kale la hooseysin doono oo aad dhihi doonti 'sareysiya!' dabadeetana wuu badbaadin doona kuwa niyadjabsan (Ayuub 22:28,29). Duceynta dhabta ah ee dadka kale iyo marxaladaha kale loo duceynayo waxaa laga arkaya aayadda 30aad, *Wuu badbaadin doonaa xataa kan aanan xaqa ahayn, kan lagu badbaadin doono xaqnimada gacmahaaga.* Waaya aragnimada nebi Ibraahim isla sidan ayey ahayd. Loot xaq ma ahayn markuu ku noolaa Sodoom, laakiin wuxuu ku badbaaday ducooyinkii uu duceystay Ibraahim oo nin xaq ah ahaa. Markuu Ruuxa Quduuska ah kugu hogaamiyo inaad marxalad kale ama dadka kale u duceysid ku dadaal oo haka daalin ilaa ay jawaab ka soo dhalato, waxaadna arki doontaa inay kuwa badan oo aan xaq ahayn badbaadayaan. Markaad ooyneysid oo aad duceysaneysid, dadka noocaas ah "ducadaada ku xusuuso!" Wuxuu ku badbaadin doonaa kuwa ku sii hoobanayaan cadaabta weligeed ah oo hoyga uu ugu talagalay ayuu ku soo dhaweynaya. Wax ayaa ka dhex dhacaya noloshooda si ay ku fahmaan kuna ogoladaan Ciise Masiix. Waxyaalahaas oo dhan waxaa saldhig u ahaa ducadaada daacadda uu Ruuxa Quduuska ah kugu hogaamiyey inaad duceysatid iyo gacmahaaga xaqa fala.

Waa inuu qof duceyaa si midho loo helo
Gacantaada ficil geli xerta Ciise Maiixaw! Haddaba kor u istaag inanta Sayoonow! Kor u istaag oo qofka aad dhabtii tahay noloshaada ha laga arko! Waxaa dhici karta inaan joogno bartamaha dhacdo aanan inaba ka war qabin. Haddaba joogsi la'aan ku duceyso, uu rumeyso sida uu Danyeel u rumeystay, markuu qoraallada ka fahmay inay toddobaatanka sanno ee ay reer Binu Israa'iil xabsiga ku jiri lahayeen dhamaad ku dhawyahay. Saa ay tahayna ma jirin wax muujinayey isbedel ama wanaag. Wacdiyayaalka oo dhan waxay sii wateen isla habkoodi iyo caadadoodi ay ku wacdin jireen, laakiin Danyeel wuxuu fahmay wuxuu Qoraalka Quduuska ah yidhi oo wuxuu bilaabay inuu duceysto. Ducada uu hal qof oo xaq ah duceysanayo waxay keeneysa isbedel aad u heer sareyo sida ay ku dhigan tahay Yacquub 5:16. Haddii ay ducada uu hal qof oo xaq ah duceysto isbedel weyn dhalineyso, haddaba maxaa dhici doonaan haddii ay duceystaan saddex nin oo xaq ah, boqol nin oo xaq ah, ama tobban kun oo qof oo xaq ah! Sida uu Ciise yidhi, waa inaan si taxadir leh ku dhaqanno oo aan calamooyinka xiliga aan ku noolnahay fasirnaa (Matayos 24:32,33), si aan ku ogaano sida iyo waxyaalaha aan ku duceysan lahayn. Markuu nebi Ibraahim la kulmay Rabbiga isaga ku yidhi, "waxaan ku socda Sodoom si aan u xukumo," wax jawaab ah kama bixinin, "Oo bal sug, Rabbiyow, dhib yar ayaan ku qabaa xoolaheyda. Miyaadan dhanacan imaan karin oo gacmahaaga saari karin si ay u bogsadaan? Cudurada noocaas ah ayaan mar dhaw kala kulmay xoolaheyda" Ma ahayn inuu marxaladahiisa soo hor mariyo. Waxyaalahaas waxay isag ka indha tireen kana dhego tireen inuu maqlo macnahana fahmi waayo wuxuu Ilaah kula hadlayey ee muhiimka ahaayeen. Aad buu uga calool

xumaaday oo wuxuu bilaabay inuu u duceyo Soodom.
Markuu Erayga Ilaah leeyahay, *Rabbiga weydista roob xiliga jiilaalka (*Sakariya 10:1), haddaba bilaw inaad duceysatid! Ilaah wuu soo dejin doonaa roob. Xiliyada roobka jiilaalka ayaa lagu soo dhawyahay oo wakhtiyada dambe ee samin aakhirka loo yaqaano ayaa foodda nagu soo hayan, waana xiliga uu soo dhawyahay soo noqotka Ciise. Qoraalka wuxuu noo sheegaya in intuusan imaanin ay jiri doonaan midho badan oo beer goys diyaar u ah oo laga arki doono addunka oo dhan, ee haddaba waa inuu jiro *qof duceeya si ay midhahaasi u jiraan una bataan*. Waa inaan weliba u duceyna inay jiraan kuwa badan oo beerta ka shaqeyan si ay midhaha diyaarka ah u gooyaan.
Markuu roobka da'o, dhulka wuu nuglaanaya oo midhahuna way karayan. Midhta waa Erayga nool ee Ilaah, ee ay awood ka buuxdo. Saa ay tahayna, haddii uu dhulka noloshaada ay dildilaacyo iyo maqaar adag saaran yihiin, awoodda Erayga nool ee Ilaah kaama dhex muuqaneyso, si kasto aad marar badan u maqashid. Waayihii hore Ilaah kama shaqeyneynin dadka noocaas ah laakiin waayahan dambe, wuxuu bilabaya in si xoog badan uga shaqeyo dadkan, ma ahan keliya inuu qalbiyadaasi kaga shaqeeyo muucjisooyinka jidadka lagu arkayo oo keliya laakiin xataa calaamada sida kuwa ku dheceen Ananiyas iyo Safiira iyagoo ku jira bartamaha kiniisadda. Seefta si xoog badan ayaa loogu shaeynaya maalinta xukunka!
Waa inaan u hogaansano addeecanana Erayga Ilaah. Waxaa jiraan kuwa muujinayaan addeecista Erayga Ilaah oo laakiin inkirayaan awoodda uu Erayga leeyahay iyo wuxuu noloshooda ka qaban karo iyagoo leh, "Dhabtii haah waan wada aaminsanahay Erayga oo dhan laakiin ficil geli ha igu odhanin." Dareenka noocaas ah runtii wuu na kala fogeynaya annaga iyo Ilaah mana dareemi doonno sida heerka sare ee uu Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah isukey muujinayo. Markuu Ciise dib u sara kacay, dareenka ugu horeyo ee ay xertiisa dareemeen wuxuu ahaa kan cabsida. Saa ay tahayna, markuu bilaabay inuu waxbarid uga bilaariyo qoraalada, waxay fahmeen inay dhacdooyinka oo dhan u dheceen isla sida uu horey ugu sheegay iyaga, oo waxay bilabeen inay iimaankooda ku rumeystaan Isaga. Isla sidaas ayey ahaan doontaa markuu Ruuxa Quduuska ah noo muujin doono waxyaala aan caadi ahayn oo ka duwan waxyaalihii aan u baranay. Si tartiib ah ayuu kuula bilaabaya, wakhti fiican ayuu kula yeelanaya. Waxaad lahaaneysa wakhti badan oo aad waxyaalaha badan ka fahantaid qoraalada, intaanan lagu siinin xulashada ah inaad dooratid ama aad inkirtid waxyaalahaasi. Isla marka uu roobka bilaabanayo waxaad ka tirsanaan doontaa kuwa ugu horeya ee odhan doonaan, "waxaan ahaanaya kuwa ka tirsan kuwa ka ficilqaadanayan dhacdadan, waxaan ahaanaya kuwa dadka hareerahooda jooga ay ku barakoobaan." Sabab? Maxaa yeelay waxaad ka qayb qaadatay aasaaska dhacdada taasi oo aad ku bilawday ducadii aad duceysatay markuu Ruuxa Quduuska ah kuugu hogaamiyey. Dadka uu Ilaah u istecmaali doono isbedelka weyn ee ruuxiyanka ah ee na hor yaala, waa kuwa muhimadda ugu weyn saareen ee ducada ku bilaabay oo si joogta ahna ku duceyeen ilaa ay arintan ka bilaabatay ama ka dhalatay! Kuwan waa kuwa Ilaah kula kulmeen Eraygiisa oona fahansan "calaamadaha wakhtiyadan dambe." Kuwan ayaa ah dadka ugu habboon ee u qalabeysan inay hawlaha Rabbiga horey uga sii wadaan sida uu ugu talagalay.

14
U Riyaaq inaad fahantid

Filiboy 3:10-14 waxaan ka akhrineyna inuu Bawlos ku hadlay arimo badan oo muhiim ah. Qalbigiisa iyo nafsaddiisa waxay u riyaaqeysa oo keliya hal shey waana kan uu ku dhawaaqay markuu yidhi: *Waxaan rabaa inaan fahmo Masiixa iyo awoodda sara kaciisa.* Maalinta uu jidka

Damaskas u socday joogay iyo ilaa maalinta uu hawshiisay bogay, Bawlos hal shey oo keliya ayuu u riyaaqayey – inuu Masiixa qumaati u fahmo. Noloshiisa oo dhan waxay ku saabsaneyd oon uu u qabay Ilaaha nool iyo inuu wax dheeraad ah ka sii ogaado Masiixa iyo awoodda sara kaciisa. Faalimaha Rasuullada 20:24 waxaan arkeyna inuu hadlay oo wuxuu yidhi, *Laakiin naftayda uma xisaabo sidii mid qiimo ila leh, si aan u dhammeeyo tartankayga iyo shuqulkii aan Rabbi Ciise ka helay inaa n u markhaati furo injiilkii nimcadii Ilaah.* Bawlos hal gool oo keliya ayuu gaari rabi, hal dan ah unbuu lahaa: inuu kaamilo hawsha uu Ilaah xilka uga saaray, oo uu weliba sida ugu weyn u fahmo awooddiisa heerka sare ah.

Nolosha uu Bawlos ku noolaa ma ahayn mid caadi ah, mid laga daalo, aan ujeedo lahayn. Laakiin noloshiisa waxay ahayd mid calaamad weyn ee loo riyaaqo in lagu deydo ka tagtay. Noloshiisa waxay ka tagtay calaamad taarikhi ah, ma ahan oo keliya mid qarnigiisa laga damacsanaa ee laakiin xataa maantadan aan noolnahay. Markuu magaalo galo waxay ahayd mid laga garanayey isaga iyo asxaabtiisaba: *Nimankan adduunka oo dhan dhib ka kiciyeen intana way yimideen (*Faalimaha Rasuullada 17:6).

Noloshiisa waxaa ku bedelantay dunida. Sabab? Sababtoo ah *isaga* waxaa bedelay Ciise. Markaan akhrineyno wax ku saabsan Ciise, Butros, Bawlos ama kuwa kale kale oo Ilaah u adeegi jireen ee taarikhda ku jiraan, waxaa niyaddeena ku soo dheceysa, “Ar fiicneeda sida uu Ilaah iyag au doortay una adeegsaday iyaga! Ar maxay fursad wanaagsan heleen! Waxay ahaaneysa mid cabsi badan in naloo istecmaalo sida kuwan midkood.” Halkaas ayaanna ku joojineyna xarbiga maskaxdeena, sababtoo ah waxaan u haysana inay arin iyaga oo keliya ku ekeyd oo aan maanta isla sidaas naloo istecmaali karin amaba ay marxaladaha sidaas u dheceynin. Daqiiqad ama labo ayaan qalbiyadeena kaga fikireyna tusalooyinka dadka Ilaah u adegeen ee aan Qoraarlka ka akhrineyno, mudda gaaban gudaheedana waan ilawbeyna oo hamaasiyaddaas way naga degeysa oo isla markiiba adduunyada ayaan la qabsaneysa iyo ku dhaqashadeeda taasi oo si daran Erayga Ilaah qalbiyadeena ku ceejineysa.

Xagga tan cabsida waxaan wax ka akhrinaya Yooxanaa 14:12 markuu Ciise yidhi, *“Mid alla kii aniga u rumeysta wuu sameyn doonaa wax alla waxaan sameeyey. Oo weliba wuu sameyn doonaa waxyaala ka waweyn waxyaalahan.”* Ku dhawaan mar kastoo aan aayaddaan akhriyey waxaan ku fikiri jiray, “Haah, laakiin anigu sida kaasi ma ahi oo marnaba sidaas ma ahaan kari.” Sababtaas awgeed sheeddaanka ayaa ka beer goosanaya wuxuu Ilaah beeray, oo dareenkeyga oo dhan isla markiiba waxaa lagu hooseysiyey marxaladaha igu hareersanaa, wax la’aan iyo guuldarro aan nolosha kala kulmay. Laakiin mahad, Ciso iyo sharafba Ilaah baa iska leh oo nagu dhiirigelinayo Ruuxa Quduuska ah wakhtiyadan! Isagaa mahad iska leh maxaa yeelay wuxuu na fahansiyey kuwa uu Ilaah naga dhigay iyo kheyrka uu noo niyeysan yahay iyo waxyaalaha aan awooddiisa ku sameyn karno. Ilaah ayaa haddana mahad mudan oo nagu qanciyey deeqda aan ku helnay Injiilka ee maalin kasta diyaar noo ah, haddadan iyo meel alla meeshaan ku sugannahayba – ma ahan mid iyaga oo keliya gooni u ahaa wakhtigaas iyo meelaha ay jogeen!

Shaqooyinkaaga inaba ma burburinayaan Nimcada Ilaah

Shaqooyinka aad ku mushquulsan tahay kuma burburin kartid nimcada Ilaah. Bawlos markuu badbaaday kaddib, waxaa jirtay wax qarsoodi ah oo uu Ciise isaga u muujiyey, sheygaasi wuxuu ahaa mid qarsoonaa ka bilaabato uumista adduunka ilaa wakhtigaas. Sheygaasna wuxuu ahaa Injiilka Ciise Masiix. Kolosay 1:27 waxaa ku dhigan inuu sheygaasi yahay, *Masiixa kugu jira, rajada sharafta leh.* Ciisaha nagu jira waa awoodda Ilaah. Ma ahan wax aad iyo aad nooga fog o oaanan ka faa’idi karin ee la yaab leh. Waa la heli kara wuxuuna kugu dhex jira awoodda Ruuxa Quduuska ah.

In kastoo ay awoodda Ilaah kugu jirto lana heli karo, way caddahay inay awooddaasi dadka

qaarkiis aad uga dhex shaqeyneyso ka badan kuwa kale. Waa maxay sababta? Jawaabta waxaa laga helaya wuxuu Rasuul Bawlos ku sheegayo Filiboy 3:10-14. Waxaan ognahay *in nimcada Ilaah,* Ciise, awooddiisa iyo nalajiritaankiisa, lagaga dhigay mid si joogta kaga nicmeysaneyno. Nimcada waa wuxuu Ilaah noo sameeyey.

Waxaa suurtagal ah inaan ka cabsi qabno inaan hawlaha aan ku mushquulsannahay aan nimcada Ilaah qalqal ku gelino. Si fiican ayaan u fahansannahay inaan hawlaha aan sameyneyno isku badbaadin karin, maxaa yeelay Ciise ayaa badbaadada noo iibiyey. Taas macnaheedu ma ahan inaanan wax hawl ah sameyneynin. Madaama aan nimco ku badbaadnay, waa inaan sida hore si ka balaaran ku hawloonaa. Inta aad sii fahmeysid nimcada Ilaah iyo wuxuu Ilaah kuu sameeyey, ayey hawshaadu sii badaneysa, taasi macnaheedu ma ahan inaad hawlaha aad sameyneysid aad Ilaah ku laalusheysid ama ay tahay wax uu Ilaah kugu ogolanayo. Macnaha waxaa weyaan inaad Ilaah noloshaada oo dhan ugu adegeysid madaama uu Isagu noloshiisa kuu huray. Aad iyo aad ayaad u rabooneysa inaad saa'id u fahantid Badbaadiyahan ku badbaadiyey ee aad badbaadadiisa nolosha weligeed ah ku haysatid. Markaad fahantid arinta qaaliga ah uu Ciise kuugu hawshooday iskutallaabta, waxaad Bawlos kala simanaaneysa hadalada uu ku hadlay markuu yidhi, "Nolosheyda wax ay tahay ma jirto markay iskeeda taagan tahay. Waxaan u riyaaqaya kuna dadaalaya inaan ku ordo nimcadiisa oo aan sameyo wax alla wuxuu Ilaah iigu yeedhay inaan sameyo."

Filiboy 3:10 waxaan arkeyna Bawlos inuu yidhi, *Waxaan **rabaa** inaan fahmo Masiixa iyo awoodda sara kaciisa.* Taasi waa mid ka weyn damaca caadiga ah. Waa doonista nool ee lagu rabo loona dhiiranyahay wax ficilgal ah – waa go'aan kama dameys ah uu qofka ku dhaqaaqayo aad uga fiirsaday intuusan ku dhaqaaqin diyaarna u yahay natiijada ka soo baxeysa. Waa mid kama dambeys ah, waa go'aan aan la bedeleynin amaba laga soo laaban karin. Wax kastoo kaa hor yimaado dib ugama soo laabaneysid. Wax kastoo isku deyayaan inay burburiyaan go'aankan waa kuwa aan waxba xoog lahayn amaba go'aan lahayn, waayo, go'aankan la gaaray waa mid siiwaarayo oo wax kasta burburinayo ilaa iyo awoodda sara kaciisa. Maxaa kale uu Bawlos ku hadlaya haddaba? Wuu sii hadlaya oo wuxuu leeyahay, *Waan ku sii adkeysanaya…toos ayaan ugu soconaya waxa iga horeya. Waxaan ku adkeysanaya inaan gaaro goolka (*aayadda 12-14). Waxyaalahan oo dhan waa maxay macnahooda? Macnaha waxaa weye noloshiisa oo dhan wuxuu ku adkeysanaya inuu ku dadaalo inuu helo waxa uu ogyahay inay xaqiisa tahay inuu helo. Ibliiska wuu sameynaya wax kastoo awooddiisa ah si uu uga hor tago fahan kastoo aad heli kartid. Haddii aad fahansaneyn waxyaalaha aad xaqa u leedahay ee ay waajibka kugu tahay inaad lahaatid, ma rajeyneysid kumana dadaaleysid inaad hesho. Markaad fahan ku heshid Erayga Nool ee Ilaah, wuxuu ku dadaalaya inaadan awoodin inaad noloshaada ka ficilgelisid waxyaalihii aad fahantay oo ay kuugu caddaanin inay waxyaalahaasi yihiin dhabta jirta oo aad u sii fidinin. Hababka Ibliiska waxaa ka mid ah inaad xagga maanka ka fahantid baratidna oo aad ogolaatid noocya ka mid ah wax baridda kuwaasi aad dhawri doontid adigoo u haysta inay run yihiin. Aad ayaad ugu faraxsananeysa markaad maqleysid waxbariddaasi oo la wacdinayo, laakiin weligaa iskuma deyeysid inaad qalbigaada oo dhan ku baadi doontid dhabta qarsoon ee ku saabsan waxbariddaasi. Kama dhaqaaqayan heerka garadka maskaxda, ma gaarayaan heerka aad ugu riyaaqeysid ruuxaada inuu fahmo kan uu yahay Ciise iyo awoodda sara kaciisa.

Ilaah wuxuu Xoojiya kuwa Qumaati Isaga adeegaan

Markaad xusuusatid jawaabta aad u heshay ducooyin aad hadda ka hore duceysatay, inta badan waxaad heleysa xidhiidhka u dhexeyo jawaabahaasi iyo marar aad xaaladda xun ku jirtay oo aad laakiin ku adkeysatay balamada Erayga Eebbe. Waa maxay sababta? Maxaa yeelay waxaad qalbigaada oo dhan kaga leexatay wax alla wixii kaa hor staagi karaan ku adkeysashada xaqa.

Aad ayaad ugu sii adkeysatay inaad horey uun u socotid wax kastoo aad la kulantidba ilaa aad ka gaartid goolkaaga. Dabadeetana waxaad gaartay mar ay waxyaalahaasi aad rajeyneysay ficil ku ku soo baxeen oo noloshaada ka muuqdeen. Haddii aan ka akhrino Taarikhdii 2aad 16:9 waxaa qoran,
In Second Chronicles 16:9, it says, *Sababtoo ah indhaha Ilaah waxay firfiirinayaan adduunka oo dhan si uu u xoojiyo kuwa ay qalbiyadooda si toos ah Rabbiga ugu dhiiran yihiin.* Waa kuwee kuwa uu xoojinayo, ama uu si xoog leh u garab qabanayo? Waa kuwa kuwa awoodda sara kaciisa loo muujinayo? Waa kuwa ay qalbiyadooda si qumaati ah ugu adeegayaan Isaga! Kuwa doondoonayaan kuna adkeysanayaan falidda doonistiisa ilaa ay goolka ka gaaraan! Waxay ku dhaqmayaan hab kuwa reer adduunka ah ka yaabinayaa iyo ku dhaqashada sharudooyinka diimaha. Ma ahan oo keliya inay maskaxdooda Ilaah ugu adeegayaan ee laakiin waxay Rabbiga isugu dhiibeen si buuxda. Isla sida uu Daa'uud xooggiisa oo dhan Ilaah ugu heesay, isla sidaas ayey Hortiisa ku heeseen. Markay maskaxda leedahay "hadda ha heesin, afafka si bayaan ah ha ugu hadlin, ha sacbinin, cod aad u dheer ha ku heesin, dadka hortooda ha ku farxin markaad aragto ibliiska oo laga guuleystay…" ruuxooda wuxuu u riyaaqaya inay waxyaalahaas oo dhan qumaati u fahmaan! Ma jiraan wax ibliiska cabsi gelin karaan ka badan inta uu ibliiska ka cabsi qabo qof ku soo biiray xerta Ciise oo dhiiran oo aan af qalalan lagaga cabsi gelin karin amaba caga jugleyn iyo kan aan ogolaaneynin in xornimadiisa iyo barakadiisa laga xayuubo. Waa kuwan kuwa uu Ilaah dhinacooda jiri doono kana ballanqaaday inuu xoojin doono. Waa maxay sababta uu Bawlos ugu adkeysanayey inuu si aad iyo aad ah u fahmo Ciise? Sababta waxay ahayd wuu arkay Ciise! Markaad dhabtii *aragtid* kan uu Ciise yahay, wuxuu kuu hayo iyo wuxuu kuu sameeyey, haddaba *waxaad ku dadaaleysa inaad waxyaala dheeraad ah ka fahantid Isaga*. Waa inaan wax ka barana wuxuu Rabbiga nebi Ibraahim kula hadlay markuu ku yidhi, *Indhahaaga kor uga taag meesha aad taagan taagan tahay oo Woqooyiga, Koofurta, bariga iyo galbeedka. Dhulkaasi aad arkeysid oo dhan waxaan siinaya adiga iyo farcankaaga oo weligiinba waad lahaan doontaan (*Bilawgii 13:14,15).
Efesos 1:18-19 waxaan ka arkeyna in Bawlos Ruuxa Quduuska ah hogaamiyey, isagoo ku duceysanayo in indhahiisa ruuxiyanka ah ay furmaan oo ay arkaan dhaxalka aad ku leedahay Ciise, si aad ugu adkeysatid inaad si aad ah u doondoontid Isaga. Markaad fahantid inay suurtagal tahay inaad ku noolaatid noolol guul leh, iyo weliba aad fahantid in bogsiinta ay tahay mid aad xag u leedahay; markaad fahantid inaad ka xuroobi kartid waxyaalaha ku indho tirayaan oo wanaagga Eebbe kaa hortaagan, waa uun marka iyaga ah markaad bilaabeysid inaad si dheeraad ah u doondoontid.

Ku Adkeyso inaad Gaartid Goolka – Ha Rajo Dhigin!
Waxaa suurtagal ah inaad heshid farriin ama wacyoon ku saabsan waxyaalaha aad xaqa u leedahay ee aad ka dhaxleysid Masiixa ee laguugu iibiyey dhiiga qaaliga ah ee Ciise Masiix, laakiin taasi kuma filno. Waa inaad ku ficilqaaddid waxa aad fahansan tahay. Qofka xabsiga ku jira oo arkayo iridda xabsiga oo furan oo aan baxeynin, mar dambe xornimo ma heli doono. – si kastoo uu u fahansan yahay cafiska lo ohayo. Waana sababta uu Bawlos u yidhi, "Waan ku dadaalaya." Wuu go'aansaday. Doonistiisa ayuu ficilgeliyey. Awood kastoo uu lahaa ayuu ficilgeliyey. Isagoo maankiisa saxsan yahay ayuu ficil geliyey go'aankiisa, ku dadaalayo inuu gaaro goolka. Ma uusan rajo dhigin weligiis.
Dadka qaarkood waxay leeyihiin, "waan isku deyey wax bariddaas ku saabsan iimaanka iyo guusha, laakiin waxba natiijo I qancisa kama helin." Kuma filno oo keliya in "laysku deyo." Kuma filno oo keliya inaad fartaada yar biyaha dhex gelisid ee waxaa lagaa rabaa inaad biya isku dhex gantid oo aad dabaalatid. Ilaah wuxuu rabaa inaad qalbigaada oo dhan Isaga isugu dhiibtid

uguna adeegtid, waana inaad inaba ogolaanin inaad dib uga laabatid go'aankaas marxalad kastoo aad la kulantidba.
Go'aan kastoo aad qaadatid iyo tallaaba kastoo aad Ilaah xaggiisa u qaaddidba, ibliiska wuxuu ku dadaalaya inuu ka hor imaado, waa haddii uu awoodo, adiguna waxaad ku ekaan doontaa marxaladahaasi oo aad ku mushquulsanaan doontaa oo waxba guul ma heleysid. Imtaxaan, jarrabaad, iyo dhibaataba sida dab ololayo ayey kugu soo haligmi doonaan si aadan ugu sii soconin nolosha guusha leh. Sababtaas awgeed haddaba, Ilaah wuxuu kugu dhiirigelinaya inaad *dagaashid dagaalka wanaagsan ee iimaanka* (Timoteyoska 1aad 6:12). Waana sababta uu kuu siiyey hub iyo *gaashaanka iimaanka, kaasi oo aad ku demineysid falaaraha kan sharka leh* (Efesos 6:16).
"saddexdii nin ee ku jireen dadbka ololayi" (Danyeel cutubka 3aad) iimaankooda ayaa imtaxaan la geliyey, laakiin inaba uma jilcin marxaladaha banaanka ka haysteen ee iimaankooda khalkhal gelin lahayeen. Markay diideen inay u jilba joogsadaan, ma ahayn inay qalmeen inay dabka ku gubtaan. Waa maxay sababta? Maxaa yeelay qof afraad ayaa u wehliyey, *oo muuqaalka qofka afraadna wuxuu ahaa sida kan Wiilka Ilaah* (Daanyeel 3:25). Go'aankaaga waa laga hor imaanaya, waa la dhibaya, waana la jarrabaya. Ibliiska wuxuu isku deyaya inuu kugu soo gemo wax alla wuxuu haysto oo dhan si uu kaaga leexiyo nolosha aad Ilaah xidhiidh kula leedahay iyo xaqnimada aad ku socotid si aad ugu dhaqantid oo keliya nolosha aad awooddaada ku hogaamineysid ama nolosha jidhka. Marba haddii aad sidaas iisu dhiibtid, waxaad gashay tabankiisa sida ugu sahlanna waa lagaaga guuleysan doonaa. Ha u ogolaanin inuu maskaxda kaaga qabsado hadalo aan macna lahayn. Waxaad tahay qalab aad muhiim ah oo uu Ilaah rabo inuu boqortooyadiisa kaaga adeegsado waana laga wanaagsan yahay inuu ibliiska xabsi kugu adoonsado isagoo been kuugu sasabanayo. Haddaba go'aankaaga gaar oo wax kasta sida ay u kala muhiimsan yihiin u kala qaad. Fahan Ciise iyo awoodda sara kaciisa. Ilaah wuxuu rabaa inaan la qabsano kuna shaqeyno awooddiisa. Awoodda Ilaah oo ay raacsan yihiin calaamooyinka iyo muucjisooyinka layaabka leh, waa kuwa aan caan ka ahayn nolosha dadka intooda badan – laakiin Ilaah ayaa amaan mudan sababtoo ah taasi hadda waa taarikh laga soo tegay. Adduunka oo dhan waxaa ka cad in xerta Ciise ay xoogeysanayaan oo waxay arkayaan *taajirnimada ku jirta dhaxalkiisa sharafta leh ee ka muuqata awliyadiisa iyo awooddiisa ay jirin wax lala barbardhigi karo ee noogula talagalay annaga nool ee xerta ka mid ah* (Efesos 1:18-19). Waxaan fahmeyna waxa ay tahay ku dhaqashada awoodda Ilaah. Waxaan arkeyna sida ay awoodda Ilaah qofka xerta ka tirsan uga dhex shaqeyneyso oo baahida dunida oo dherjinayo. Waxaan fahmeyna kan uu Ciise runtii yahay iyo oo waxaan fahmeyna inuu yahay *isla kii shallay iyo maanta iyo weligeedba* (Cibraaniyada 13:8).
Si aad tan u dhawrtid, waa sida adoo saaran buurta meesha ugu sareyso ee noloshaada, waa inaad go'aansatid inaad rabtid inaad "Ciise si dheeraad ah u sii fahantid iyo weliba awoodda sara kaciisa." Wuxuu Ciise guushiisa kuugu siiyey adigaa iska leh weligaa. Adigaa iska leh, sababtaas awgeed waa inaad u riyaaqdid si aad u heshid, waana inaadan ka niyad jebin haddii ay jiri doonaan marxalado adag oo aad dadaalkaas kala kulantid. Ma jiraan wax kale oo ka muhiimsan waxa aad dooneysid. Adiga iisuma noolid. Waad u baahantahay wuxuu Ilaah kuu hayo si aad u tidhaahdid isla sida uu Butros yidhi ee aan ka akhrineyno Faalimaha Rasuullada 3:6, *Waxaan hayo ayaan ku siinaya. Magaca Ciise Masiix ee reer Naasared, soco.*

15
Ma Garaneysa Aabbahaa?

Ilaah waa jacayl. Xerta Ciise intooda badan, tan waa arin ay aad u fahansan yihiin, laakiin su'aasha waxay tahay, miyaan fahansan nahay arintan? Wacyoonta ku saabsan inuu Ilaah jacayl yahay, inuu jacayl ku ficiltamo iyo inuu igula ficiltamo jacayl, shaqsi ahaan, waana arin aad u muhiimsan. Runtan waa inay si buuxda nooga dhaadhacdo waxaana sida quman noogu muujinaya Ruuxa Quduuska ah ee qalbigeena ku jira, si uu si joogta ah u hogaamiyo nolosheena. Markaan habkan ku fahanno Ilaaha Aabbaheena ah oo aan aragno jacaylka uu noo qabo, nolosheena way isbedeleysa.

Cabsi, welwel, kelinimo, nacayb, qalbi adeeg, islaweyni, iyo muran nafaas kama qabaan meel uu jacaylka Ilaah ku hoydo. Sababtan awgeed, kuma filno oo keliya inaan maskaxdeena ka ogolaano inuu "Ilaah jacayl yahay." Waxaan u baahannahay inaan runtan ku beerno gudaheena ahaatana waxa ina dhiiri gelinayaan oo nolosha nagu hogaaminayaan. Waxa ugu weyn ee aan u baahannahay ayaa waxay tahay inaan helno muujinta ku saabsan kan uu Aabbaheen yahay. Miyaad garaneysa kan uu yahay Ilaah? Aan soo xigsanno waxyaalaha qaarkood uu Kitaabka Quduuska ah ka sheegayo Ilaah:

1. *Ilaah waa kan ay jirin wax ka sareyaan!* Tan waa maxay micnaheedu? Mar alla markaan maqalno Erayada noocaas ah waxaa isla markiiba maskaxdeena ku soo dhacayaan macnayha kala duwan ee lagu fasirayo erayga "Wax kasta ka sareya ama wax kasta awooda" taasi oo micnaheedu yahay inuu uumay samada iyo dhulka. Tan waa run, laakiin macnahan wax ka weyn ayey ka hadleysa. Waxay bayaan ka dhigeysa inuu xagaaduna ka yahay kan wax kasta ka awooda. Macnaha ma jiraan wax isaga la adag (Yeremyaah 32:17). Ma jiraan wax Ilaah ka xoog badin karaan. Ma jiraan wax nolohsaada kaa hor istaagi karaan ama dhib, ama marxalad Ilaah ka xoog badin karta. Waana waxa ay sharaxeyso marka laga hadlayo inuu Ilaah mid wax kasta iyo qof kasta ka awood badan.

2. *Ilaah waa jacayl.* Tan macnaheedu waxay tahay inuu Ilaah wax kasta awoodo diyaarna u yahay inuu wax kasta sameyo. Mid ka mid ah calaamadaha lagu garanayo inuu Ilaah jacayl yahay waxaa ka mid ah inuu diyaar u yahay inuu awooddiisa sare u istecmaalo barakadeena. Dhib weyn kama taagno inuu Ilaah yahay awoodle sare – laakiin inuu rabo inuu aniga wax weyn ii sameynayo ayaa ah sheyga ugu adag in la ogolado lana rumeysto. Dhabtii aad ayaan uga shakina jacaylka Ilaah ka badan inta aan awooddiisa ka shakino. Waana sababta ay u tahay mid aad u yaab badan markuu baraslaha aan ka akhrineyno Matayos 8:2 ooyey oo yidhi, *Rabbiyow, haddii aad rabtid waad I daahirin karta*, markaan arkeyno Ciise oo ku jawaabayo, *Waan rabaa inaan ku daahiriyo,* daahirsanaw." Jacaylka Ilaah waxuu isku muujiyey inuu rabitaankiisa ku istecmaalo awooddiisa kuna bogsiiyo baraslaha.

Ilaah waa jacayl. Taasi micnaheedu waxay tahay inuu jacayl yahay qof kasta. Isagu dadka uma kala eexdo. Saa ay tahayna waxaan inta badan aaminsannahay inuu qabo kuwa uu si qaas ah ula macaamiltamo kuwaasi uu si qaas ah oo kuwa kale ka duwan u daahiriyo oo uu weliba ku deeqo hibooyin badan iyo nimcooyin fara badan. Laakiin fikiraddan waa mid qaldan. Haddii aan sidaas ku fikireyno, waxaan noqoneyna kuwa diima Ilaah ku caasinayaan suubsanayaan oo baniaadmiga caabudayaan bedelkii ay Ilaah caabudi lahayeen. Tan waxay ahaan karta ama ay la mid tahay qofka oo wax uu caabudo sameysto ama is yasid iyo nacayb uu qofka shaqsiga ah iisu qabo kuna caasinayo kan hibooyinka dadka ku deeqa ee ah xaq sooraha aan weligiis la saxin oo ah Ilaaheena ina uuntay ee aan cidna u eexanin ee jacaylkiisa qof kasta u fidiyey. Dareenkan ama habkan loo fikirayo waa inaan ka tirtirno qalbiyadeena – xataa nafsaddeena meesha ugu

bartamaha ah waa inaan ka nadiifino fikiraddan waayo dembi weyn ayey na gelinaysa.

Isku Tilmaan Kan aad tahay

Dareenka qaldan ee ku saabsan jacaylka Ilaah sida inuu Ilaah dadka u kala eexdo, waxay ahaan karta fikirad si daran noo burburin karto. Waxay qofkaasi ku hogaamin karta inuu Ilaah u qabo uqdad qarsoodi ah isagoo rumeysan "Ilaah wuu I xooray oo qofkaas kael ayuu jeclaaday." Waxay taasi aasaasi karta shuuc shuuc iyo hinaas si macno darro ah loo hinaaso qof kale uu Ilaah hawlihiisa ku fushanayo si sax ahna ku xushay adeegsanayana inuu dadka kale boqortooyada Ilaah ku soo xareeyo. Waa bedelkii uu qofkaasi niyadda u dhisi lahaa. Waxaa kaloo ay nagu sababeysa *inaan ilawno inaan ku tilmaamanahay kan qofka aan nahay*, ee ma ahan waxyaalaha aan ku ficiltanno. Waxaan *ahay* ilmaha Ilaah, jacaylka uu I jeclaaday iyo sida uu ii ogolaaday inaan ka tirsanaado kuwa uu nimcadiisa ku huwiyey. Waxa aan sameynayo ama aan sameynin waxba lur inaguma ahan. Mar alla markaan ogahay in lay jacaylyahay, waxaan hubaa inaan fursad kale leeyahay. Uma baahni inaan mar kastaba wax alla waxaan sameynayo aan dadka kaga farxiyo. Uma baahni inaan dadka u bandhigo heerka aan xidhiidhka aan Ilaah la leeyahay ka joogo, amaba inaan dadka u caddeeyo inaan waxbaridda saxda ah ee Kitaabka Quduuska ah ku dhaqmayo. Qofka aan ahay ama laygu tilmaamayo waxyaalahan kuma dhisno. Waan sareysiin kara dadka kale oo ka farxin kara oo waan u ogolahay inay Masixiinta kale heerkeyga mid ka sareyo nolosha ka joogaan. Annaug ma wada tartameyno. Qof walibaba wuxuu haysta dariiqiisa uu ku ordayo.

Markaan arkayo inuu Ilaah jacayl yahay oo aan fahmo inuu I jacayl yahay, marxaladda oo dhan ayaa isbedeleysa. Mar dambe kuma degdegayi inaan doondoono farxadda iyo ogolaanshaha dadka. Jacaylka Ilaah wuu igu filan yahay, iyo weliba inaan ahay mid haysta nasashada weligeed ah.

Isagoo Ilaaha Aabbaha ah ku duceysanayo Ciise wuxuu yidhi: *"Waad jeclaatay iyaga **xataa** isla sida aad ii jeclaatay ayaad u jeclaatay iyaga"* (Yooxanaa 17:23). Ilaah dadka uma kala eexdo. Xataa jacaylka uu Ciise u qabay ma ahayn mid ka weyn kan uu ii qabo! Wuxuu ii jacaylyahay isla sida uu Ciise u jacaylyahay. Tani waa runta dhabta ah! Waa mid la yaab leh! Aabbaha jacayl heer sare ah ayuu igu jacayl yahay.

Markay dhabta arinta qalbigaaga gasho, isbedel heer sare ah ayaa ka dhex dhacaya noloshaada. Waxaad fahmeysa in jacaylka uu Ilaah kuu qabo uusan ahayn sharci lagu bedeli karo laakiin haddii lagu fasiro xidhiidhka reerka kani waa mid aad weligaa ka shaleyneynin imaatanka aad Ilaah u hogaansameysid.

Cibraaniyada 10:22, waxay leedahay, *Taas daraaddeed aynu ugu soo dhowaanno qalbi run ah iyo hubaal rumaysad, **iyadoo qalbiyadeenna laga nadiifiyey niyo shar leh, jidhkeennana lagu maydhay biyo daahir ah.*** Waxaannu leenahay wadaad sharafta ugu sareysa mudan, wakiil, mid inoo duceya. Qalbiyadeena waxaa lagu firdhiyey oo lagu nadiifiyey dhiiba barakeysan ee Ciise Masiix oo naga wada miidhayo shar kasta iyo dembi kastoo aan isku tuhunsannahay. Markaad ku nooshahay noolol dembidhaaf leh ogolaatayna inuu Ilaah jacayl heer sare ah kuu qabo kuguna cafinayo isla jacaylkaas, Aabbahaa waxaad ugu imaaneysa dhiiranaan, adigoo dareensan xaqnimada laguugu meydhay oo xor ka ah nooc kastoo ceeb ah iyo gef kasta, maxaa yeelay waa lagu daahiriyey. Nadiif ayaa lagaa dhigay oo hadda Ilaah waa Aabbahaaga samada ku jira kaasi ee aad marxalad kastoo aad ku jirtidba tallo saaran kartid, waana Isaga kan aad ka heleysid wax kastoo wanaag ah. Muujinta kuu muuqatay eek u salaysan jacaylka Ilaah waxay kaa durjineysa dareen kastoo aad isku dareemeysid inaad dembiile tahay, kaasi uu ibliiska, kan ah eedeyaha, jacayl yahay inuu kaaga hor istaago xidhiidhka aad Ilaah la yeelanayesid.

Dhiiranaan ayaad ku dhaqmi kartaa markaad Ilaahaaga ku uuntay xidhiidhkan sare ee loo

ekeysiyey kan uu aabbaha carruurtiisa la leeyahay. Mar dambe kama cabsan doontid amaba kama shakin doontid Ilaah.

Ilaah wuu ku adkeystaa Eraygiisa

Dad badan ayaa jira oo aad uga cabsadaan Ilaah, waxay kaga cabsi qabaan oo ay la yaaban yihiin inuu iyaga baabi'in doono, edbin doono ama uu farxaddooda ka bixin doono noloshooda. Muuqaalka Aabbanimada Ilaah wuu lumaya isla marka markii jacaylka Ilaah naloo muujiyo. Dabadeetana way sahlanaaneysa inaan nolosheena oo dhan si buuxda Isaga u xil saarno si uu inoo hogaamiyo. Waanna ka fogaaneyna cabsida iyo dadaalka aan ku jirno ee ah inaan nolosheena tabarteen aku difaaceyno. Waan sii dayneyna wax kastoo nolosheena ku jira ee xidhiidhka aan Ilaah la leenahay nugleynayo si uu Ilaah u lahaado fursadda oo dhan ee uu xornimo nagu hogaaminayo.

3. *Ilaah waa aamin.* Tani waa arin aad muhiim inoo ah. Macnaheedu waxaa weyaan inuu si joogta ah ugu adkeysto Eraygiisa oo weliba wuu oofinaya wax alla wuxuu ballanqaado. (Tirintii 23:19). Tani waxay macna ka tahay in Ilaaha Aabbaha ah ee Erayadan kugula hadlay, wuu ku adkeysanaya awooddiisa oo dhan oo wuu oofinaya wax alla wuxuu kaa ballanqaaday. Ballamada Ilaah waa run, oo adiga shaqsi ahaan ayaa laguu oofinaya. Wax alla wuxuu ku hadlay, adiga ayuu kugula hadlay.

Ilaah wuxuu rabaa inaan u aaminno isla sida hadalka uu ku dhawaaqo u dhigan yahay oo aan rumeysanno wax alla wuxuu ku hadlayo. Tan laakiin badanaa waa arin xarbi ku ah Xerta Ciise. Dunida, jidhkeena iyo ibliiska waxay isku deyayaan wax kastoo ay awoodaan si ay nooga leexiyaan waddada xaqa ah oo aan dareemadeena, waaya aragnimadeenii xumeyd ee hore, marxaladaha nagu hareersan iyo dadka oo keliya ugu tiirsano bedelkii aan ku tiirsan lahayn wuxuu Ilaah nagula hadlay iyo Eraygiisa.

Haddaba heerkan aad joogtid eedeyaha wuxuu isku deyaya inuu soo xaluusho burburiyana wejiga cusub ee aad Ilaah Aabbaha ah hortiisa tilmaan uga leedahay. "Waxyaalahan la sheegayo adiga kama tirsanid kuwa ka faa'ideysanayaan" ayuu kugu leeyahay iyo waxyaala la mid ah. "Qaladaad badan iyo dembiyo badan ayaad sameysay oo ma istaahishid in waxyaalahas wanaagsan ee Ilaah laga helayo aad ka faa'iddid" iyo waxyaala la mid ahba waa kuwa uu kugu niyad jebinayo. Laakiin waxa uu sheegayo run ma aha nee sida kale ayaa dhabta jirta ah! Macnaha dhabta ah ee halkan ku jirta waxay tahay in adiga aad ka mid tahay kuwa kheyrkan Ilaah loogu talagalay, waxayna u dhawdahay inaad dembiyo badan oo xun xun sameystay oo sababtaas awgeed waad istaahisha inaad nimcada Ilaah kaga bedelantid noloshaas hore oo aad qaadatid ballamada Ilaah. Dhabtii, is hooseysinta micnaheedu waxaa weyaan inaad si heer sare ah ku rumeysatid Erayga Ilaah, ka badan inta aad dareemadaada aamineysid, fikiraaduna ha isku haleynin. Is hooseysinta waa isku deyidda waxyaalaha aan maskaxgalka ahayn iyo dhiiranaanta, kuna faraxdid diyaarna u ahaatid inaad ogolaatid waxyaalahaas oo dhan uu Ilaah kaa ballanqaaday – madaama uu kaa ballanqaaday! Ilaah ayaa sharaf ku helaya markaan Eraygiisa rumeysaneyno oo aan ballamadiisa si buuxda ku aamineyno. Waana waxa uu nebi Ibraahim sameyey sida aan uga akhrineyno Rooma 4:20, 21 oo leh, *Ballankii Ilaah rumaysaddarro kagama uu shakiyin, laakiinse rumaysad buu ku xoogaystay, isagoo Ilaah ammaanaya oo aad u huba in wixii uu u ballanqaaday uu samayn karo.*

Ilaah waa aamin. Wuxuu rabaa inaad aamintid rumeysatidna inuu ku siin doono ama kuu yeeli doono wax alla wuxuu kaa ballanqaaday oo dhan. Eraygiisa waa run! Haddaba ku dadaal inaad ogaatid wuxuu Eraygiisa leeyahay si aad u lahaatid ballan aad dabagal ku sameyneysid ilaa ay runta kuu muuqato, ee iimaankaaga ha saaranin dareemadaada sida carada webiga u guurayaan. Ilaah wax kasta uu ballanqaaday wuu oofin doonaa. Isagu macaarad kuguma ahan ee adiguu kula

jira kulana raba wax kastoo khery ah. Wax kastoo ugu wanaagsan ayuu kula rabaa Ilaah, oo weliba xaatadanba wuu kugu deeqay waxyaala fara badan oo aan tiring karin. Muujinta jacaylka Ilaah ee kuu muuqatay ayaa run kaaga dhigi doonta waxyaalaha uu kaa ballanqaaday oo dhan oo aad noloshaada ka rajeyneysid si xidhiidhka aad Ilaah la leedahay u ahaado mid dhab ah, mid nool awoodna leh!

16
Waad fahmi karta Doonista Ilaah

Dadka inta badan way ku wareeraan oo welwelaan markay nolosha go'aan ka gaarayaan. Markii go'aamo muhiim ah la sameynayo amaba qorshooyinka noolol maalmeydka ku saleysan, waxaa jirta kalsooni darro culus oo qalbiga dadka ku jirta, iyadoo kalsooni darrodaas wehelsaneyso cabsi. Sidee baan ku ogaan kara inaan go'aanka saxda ah gaarayo? Sidee baan ku ogaan kara in go'aankeygu uu yahay kan xaqa ah? Welwel iyo shaki ayaa inta badan naga dhigaan kuwa aan tallaabo qaado oo sababtaas awgeed hor u socod ma lihin. Cabsida aan ka qabno inaan qaadno tallaabada ugu xun ayaa inta badan qorshaheena burburiyaan ka badan inta dhibka ah ee ay waxyaalaha kale nagu hayaan. Miyaan xaqiiqsan karna waxa saxda ah iyo waxa qaladka ah? Miyaan la kulmi karnaa doonista Eebbe? Ilaah miyuu ka dan leeyahay tallaabo kastoo aan nolosheyda ka qaadayo maalin waliba? Ilaah miyuu mustaqbal u qorsheyey nolosheyda? Haddaba waa maxay waxyaalaha aan nolosha kala kulmi doono? Ilaah wuxuu rabaa inaad fahantid doonistiisa wanaagsan ee saxda ah, wuxuu rabaa inaad fahantid lana qabsatid si aad ugu ficiltantid noloshaada. Dabadeetana waxaad ku noolaan doontaa nolosha tan ugu farxadda badan e ku qancineysa inta aad adduunka joogtid!

Rooma 12:2 waxay noo sheegeysa inaan awoodno inaan imtaxaanno oo aan diwaan gelin karno waxa ay tahay doonista Ilaah, Wanaagiisa, iyo doonistiisa asliga ah ee farxadda leh, taasi oo aan ku sameyneyno bedelaadda aan maankeena bedeleyno. Bawlos wuxuu ku duceystay Erayada ku dhigan Kolosay 1:9 oo wuxuu u duceyey xerta Ciise oo wuxuu ugu duceyey inuu ka buuxsamo aqoonta Ilaah oo ku imaneysa doonistiisa iyo xigmadda ruuxiyanka iyo weliba fahanka. Ilaah aad buu ugu riyaaqaya inaad fahantid doonistiisa uu kuu qabo. Waa uun marka iyada ah marka aad xaqiiqda heleysid, oo aad awooddid inaad qaaddid tallaabooyinka uu kula rabo inaad qaaddo. Xerta Ciise badankood waxay qabaan fikirado kala duwan oo layaab leh kuna saabsan sida lagu garan lahaa doonista Ilaah. Fikiradahan qaarkood waxay qofka ka dhigayaan inuu ku fikiro inayba suurtagal ahayn in la fahmo doonista Ilaah. Qaarkoodna waxay u arkaan inay ka baxsan yihiin doonista Ilaah oo sida keliya ee ay doonistiisa uga muuqan karaan waa inay hawlo wanaagsan sameyaan si ay uga farxiyaan Ilaah. Qaar kalena waxay haystaan fikiradda ah in hadduu qofka rabo inuu doonista Ilaah ku jiro inuu aad iisu ilaaliyo si uusan u gefin – hadduu qofka sameyo uun qaladka kan ugu yar masiibo darran ayaa kugu furmeysa. Marxalad go'aan qaadasho la'aan, wareer iyo xukumid ayaa dadka qaarkiis cadaadineysa. Ilaah ma rabo inay sidaa ahaato. Ilaah naguma haynayo meel fikiraddeena ay cidlo ka tahay. Isagu dhudhuumashaw naguma ciyaarsinayo, oo weliba tan ugu muhiimsan ayaa waxay tahay, kama baxsanin doonista Ilaah, oo ma nihin dad nasiibsanayo sida ay ku noolaan lahayeen sida qof mugdi ku jira oo raadinayo duleelka furaha! Waxaan nahay carruurta Ilaah. Waxaan ka tirsannahay qoyskiisa. Isla sida uu aabbahaaga ku dhallay uu wax kastoo wanaag ah kaa qarineynin, aadna inaba ka shakineynin qoyska aad ka tirsan tahay, iyo weliba uusan kaa xigsaneynin inaad ogaatid waxyaalaha aad xaq uga leedahay qoyska iyo masuuliyadda aad ka qaadaneysid, isla sidaas Aabbahaaga samada ku jira kuguma daynayo marxalad uu shaki kaa gelayo.

Waxaad mar labaad ku dhalatay Doonista Ilaah

Ma ahan arin adag in la fahmo doonista Aabbaha! Isla marka aad mar labaad dhallatay, waad ku dhalatay. Ciise wuxuu kuu ahaaday Rabbigaada adiguna waxaad raacday Isaga. Ruuxa Ilaah ayaa ruuxaaga soo galay, waxaadna noqotay uun cusub. Rooma 8: 14-16, waxaan ka akhrineyna inaan helnay ruuxa wiilnimada kaasi oo ruuxeena la maragfurayo inaan nahay carruurta Ilaah. Ruuxa Quduuska ah, kan uu Ciise ugu yeedhayo kan niyadda dhisa, caawiyaha, Macalinka, la taliyaha, ayaa ah kan adiga kuu caddeynayo kaagana caddeynayo waxyaalaha aan laga shakin karin ama muran la gelin karin eek u saabsan xidhiidhka carruunimo ee aah la leedahay Ilaah. Uma baahnid inaad ka shakiso badbaadadaada. Yooxanaha 1aad 5:13, waxaad akhrineyna Erayadan, *Waxaan waxyaalahan u qoraya idinka aaminsan magaca Wiilka Ilaah si aad u* ***fahantaan*** *inaad nolosha weligeed ah leedihiin.*

Isla Ruuxa kugu marag furayo inaad tahay wiilka Ilaah ayaa kuu caddeynayo doonista Ilaah waxay ka tahay noloshaada. Masuuliyadda Ruuxa Quduuska ah waa inuu ku hogaamiyo (Rooma 8:14) oo weliba sida xaqa ah kuu hogaamiyo si aad u soo gashid doonista wanaagsan ee Ilaah oo weliba farxadda leh ee asliga ah.

Isla markii aad mar labaad dhallatay, waxaad ku dhallatay doonista Ilaah. Aasaaska aas ku aasaasantay markaad carruurta Ilaah ku soo biireysay waxay ahayd doonistiisa, oo ma aadan ahayn qof ka baxsan doonista Ilaah. Cunuga markuu dhasho wuxuu si buuxda uga tirsan yahay doonista reerka. Waxaa cunugan ku huwan jacaylka iyo xanaaneynta cid kastoo qoyskas ka tirsan, oo inta badan, taxadirka qoyska oo dhan. Isla sidaas ayey u tahay qofka mar labaad dhashaa xagga xidhiidhka Ilaah lala leeyahay. Ilaah uguma talagalin in mid ah carruurtiisa inuu si lama filaan ah dunida. Madaama uu aabbaha yahay, wuu quudinaya cunugaas si uu ku barbaaro, oo tallaabo tallaabo ayaa cunugaasi masuuliyado loogu dhiibaya iyo hawlaha kuwa ugu adag. Haddii shaqooyin loo dhiibo oo uu cunugaasi addeecin, cunugaasi wuxuu ahaanaya mid ka sii dheeraanayo doonista aabbaha. Saa ay tahayna, qof kastoo ahaado cunug cusub oo xagga ruuxa xidhiidh cusub Ilaah kala yeeshay, waxaa wehlinaya caawiyey garab jooga, axdi Ilaah lala galay ayaa jira in cunuga la xananeynayo si uu u addeeco aabbaha raacana doonista aabbaha, isagoo addeecayo Ruuxa Quduuska ah.

Xerta Ciise badankood waxay si joogta ah ugu fikiraan waxyaalaha ay Rabbiga u sameyn lahayeen. Xataa waxaa suurtagal ah inay jiraan qorshooyin uu Ruuxa Ilaah u muujiyey wakhtiga dhacdada la damacsan yahay ka hore, laakiin waa inaan fahanno inaysan jirin wax uu Ilaah raali ka yahay oo iska ahaanayaan. Wax kasta waa inay lahadaan saldhigooda. Xiliga iisu diyaarinta dhacdada inta badan ma ahan mid niyad dhis leh laakiin waa muhiim. In la galo doonista Ilaah ee qaaska ah, waa inaad horta soo gashaa qorshahiisa weyn. Waa maxay qorshaha weyn ee Ilaah? Waa wax kastoo u dhigmaa xerta Ciise oo dhan. Waxaa suurtagal ah inay qorshaha gaarka ah uu kuu leeyahay ay tahay inaad aaddo [Muqdisho] oo aad ka markhaati furtid, laakiin tan ma ahan mid laga wada siman yahay. Haba ahaate ee, dhammaanteen waxaa noogula yeedhay inaan markhaati furno. Haddii aad diyaar u ahayn inaad ka markhaati furtid meesha aad joogti, haddaba Ilaah ma kuugula hadlayo erayada sida, “Muqdisho aad oo ka markhaati fur halkaas.”

Waa doonista Ilaah inaan Ciise ka dhigto Rabbiga qayb kastoo ka tirsan nolosheyda. Shaqadeyda, wax barashadeyda, qoyskeyga, wakhtigeyga, lacagteyda iyo weliba niyadda waa inay jirta, iyadoo aanay jirin waxyaala aan dib uga ceshaneyno Isaga. Ma ahan macnaha inay waxyaalahaas layga mamnuucay ee laakiin waxaan u xilsaaray inuu Ilaah si buuxda doonistiisa iigu hogaamiyo. Ilaah dareen wanaagsan ayuu u leeyahay aadanaha. Haddii aad qoys leedahay, Isagu kaama sugayo inaad saddeed saacadood duca u jilba joogsatid maalin waliba. Wuxuu og yahay inaadan wakhtigaas oo dhan haysanin maxaa yeelay wuxuu kuu xilsaaray xanaaneynta qoyskaasi –

masuuliyad weyn. Ma ahan inaad Ilaah xidhiidhka ugu wanaagsan la leedahay markaad duceysaneysid ka badan markaad reerkaaga dhaqaneysid ama masuuliyado kaloo lamid ah qabaneysid. Markay marxaladda heerkaas joogto, ducada waxaa lagu macnayn kara hab kale oo masuuliyadda ina hortaalo wejiba looga dedanayo oo qofkaasi wuxuu iska dhigaya inuu xidhiidka uu Ilaah la leeyahay ku sugan yahay heer sare. Haba ahaatee, markuu Rabbiga leeyahay, "marxaladdan qaaska ah daraaddeed waxaan rabaa inaad I siisid saddeed saacadood oo duca ah," waa inaad daahis la'aan diyaar ahaatid kuna dhaqaaqdid, maxaa yeelay Ciise ayaa ah Rabbiga, ma ahan shaqadaada ama qoyskaaga. Ilaah wuxuu doonaya sida aad iisu diyaarisay.

Ha ilawbin Aasaaska Xidhiidhkaaga Masiixinimo

Madaama uu hadda Rabbigaada ahaaday, Ciise wuxuu u hawl gelaya inuu afar qaybdood oo ka tirsan noloshaada. Laba afartaas ka mid ah waxay u xilsaaran yihiin xidhiidhka aad la leedahay Asaga, labada kalena waxay aad ugu takhsuusan yihiin xidhiidhka aad dadka kale la leedahay. Qaybta ugu *horeyso* waa tan ku saabsan xidhiidhka aad la leedahay Aabbahaa, kaasi ee aad Asaga kula bilawday *Erayga.* Haddii aan Erayga Ilaah laga dhigin laf dhabarka wax kasta oo noloshaada ku jira laga hor marinayo; haddii aadan ku noolaanin kuna ficiltamin Eraygiisa, ma ogaan doontid runta natiijadeeduna waxay tahay inaadan weligaa xuroobi doonin. Ruuxa Ilaah wuxuu maqlaa kuna ficiltama oo keliya wixii ku saleysan Erayga Ilaah, oo waxyaalaha hadalka ku dhisan ee wax baridda diimaha ku saleysan waxba uma arko. Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah marnaba dhinac qaldan kuuguma leexinayo, wuxuu kuugu hogaaminaya oo keliya Eraygiisa iyo weliba sida ku dhigan Eraygiisa oo keliya. Qalbigaaga waxaa lagu cusbooneysin doonaa Erayga Ilaah, oo waxaad isla markiiba bilaabeysa inaad ku fikirto waxyaalaha Ilaah oo waxyaalaha maanka adduunka ku yimadaan marnaba fursad ma helayaan. Dabadeetana waxaad maqli doontaa codka ari jiraha dhabta ah waadna raaci doontaa Asaga.

Qaybta *labaad* waa *ducada.* Dadka badankiis waxay ka hadlaan wax *kusaabsan* Ilaah laakiin waxay noloshooda kaga ficiltamaan waxyaalaha maanka adduunka ku yimaadaan ee ay isla markaasna diimaha saldhig ka dhigtaan. Hase ahaatee, Ilaah wuxuu rabaa inaad Asaga *la hadashid.* Ma jiraan wax Asaga ka yaabinayaan ama aan qiima la lahayn Asaga. Haddii ay islaanta gurigeeda joogto inay ku dhawaaqdo mashiinteeda dharka lagu dhaqo ee halawsan way hagaagi doonta, waxay Ilaah ula mid tahay waxyaalaha kale ee muhiimka ah. Markuu Ciise leeyahay, ***Wax alla*** *waxaad ku weydisataan duco…*(Markos 11:24), Macnaha wuxuu ka wada wax alla wixii maankeena ku soo dhici karaan ama qalbigeena ku jira ee aan nolosha kala kulmeyno oo dhan! Markaad fahantid in ducada aysan ahayn wax hab qaynuun lagu sameynayo ama mar laga kor dhaco oo keliya Aabbaha wax lagaga weydisanayo, waxaad duceysan kartaa saacado adigoo aan ka daaleynin. Ducada ama barayada la duceysanayo waxay bara kicineysa ibliiska uu wuxuu gelaya dagaal oo hawada uu Muujinta Eebbe u baneynayo nafas ay qalbiyadeena ugu soo degato iyo weliba inuu garadka uu Ilaah na siinayo uu si xornimo ah nagu soo dego. Is af garasho waa iyo fikirado qaldan, oo inta badan saldhigoodu yahay cabsi heer sare ah, ayaa la burburinaya markuu ibliiska dariiqa ka leexdo oo doonista Ilaah ayaa si bayaan ah u muuqanaya.

Qaybta *Saddexaad* waa *jaalnimada* xerta kale lala leeyahay. Ma jiro isku filnaan karo oo wax kasta sameysan karo. Haddii aad mar labaad dhalatay, waxaad leedahay hibo qaas ah ama wax aad xerta kale ku deeqi kartid. Ha rumeysanin beenta ibliiska uu kugu dhego hadlayo inaadan waxba aad dadka ku deeqdid qabin. Erayga Ilaah ayaad la qaybsan karta dadka, waad la duceysan karta iyaga amaba u duceyn karta. Gamcahaad saari karta oo barakooyin ayaad ugu duceyn karta

sida maalka iyo wixii la mid ah adigoo ficil gelineysid ballamada Ilaah.
Khiyaanada kale uu ibliiska istecmaalayo uu maskaxdaada gelinayo waxay tahay inuu kaa dhaadhiciyo inaad sugtid ilaa aad si joogta ah hawsha Rabbiga isugu dhiibi doontid ama ilaa aad ka heshid hibada qaaska ah oo aad xerta kale wax kula qaybsan lahayd. Markaad ahaatid qof ku hawlan nolosha dadka kale, awoodda Ilaah aad ayey kugu dul sabeyneysa oo inaba wakhti uma heleysid ee aad maankaaga ku socotid, amaba wakhti ma heleysid ee aad kaga fikirtid waxyaalaha adiga oo keliya faa'idada kuu ah ama dhibatooyinkaaga. Gudaha qof kastoo xerta ka mid ah waxaa ka buuxaan indho ay ka soo butaacayaan waxtarka uu Ilaah ku dhaliyey. Laakiin ma ahan inaad filatid inuu Ilaah marxalado waweyn kuu istecmaalo ilaa aad horta istecmaashid ama aad ficil gelisid inta yar ee laguugu deeqay oo aad dadka agagaarkaaga jooga ku deeqdid.

Tan *Afraad* waa *maragfuridda.* Qof kastoo xerta ka mid ah oo mar labaad dhashay waxaa loogu yeedhay inay marag furaan oo weliba qof kastoo uu Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah ku jiro waa la siiyey hibadaasi uu dadka kale wax kula qaybsanayo (Faalimaha Rasuullada 1:8). Ciise wuxuu ballanqaaday inuu qof kastoo xertiisa ka mid ah ahaado mid dadka daba (Matayos 4:19). Qof walboo Masiixa raacsan oo mar labaad dhashay, agagaarkiisa waxaa jogaan dad u riyaaqayaan Ilaah kuwaasi oo badbaadi doonaan markuu qofka badbaaday iyaga ugu marag furo waxyaalaha uu Ciise ka helay. Ciise wuxuu rabaa inaad hawsha ka bilawdid "Yerusaalemtaada" macnaha guriga aad ka tirsan tahay iyo dadka aad kugu dhaw sida waalidkaaga, qoyskaaga iyo kuwa kale. Haddii aad agagaarkaas aad kugu dhaw aamin ku ahaatid Ilaah wuxu kuus ii diraya dhamaadka dunida meesha ugu fog. Ilaah ma rabo inaad ku noolaatid duni ku shaqeyneyso imaan la abaabushay, niyadjab iyo guul darro. Wuxuu rabaa inaad ka markhaati furtid isla meeshaas aad ku sugan tahay. Markaad leedahay, "ma markhaati furayi," Ciise wuxuu kugu jawaabaya isla sida uu ku jawaabay Lukos 8:39, "Cidda ku laabo uu sheeg hawsha wanaagsan uu Ilaah kuu sameyey." Waxaad ka hadli karta kheyrka aad heshay ee bedelay noloshaada. Waxaad ka hadli karta muucjiso aad wax ka baratay. Ilaah kaagama baahno inaad ahaatid mid ka tirsan guddiga la taliyaasha ee Isaga difaacayaan, amaba difaacayaan wax kastoo Kitaabka Quduuska ah ku dhigan. Ilaah wuxuu rabaa uun inaad ka hadashid wixii aad maqashay iyo wixii aad aragtay. Iisu diyaari inaad hal qof u sheegtid qorshaha ILaah oo ku soo leexisid waddada Rabbiga. Ha u duceynin oo keliya dadka badan ama qaaradaha – shaqsiyaalkana u ducee. Weydiso Ilaah inuu kugu hogaamiyo qof, waxaadna arki doontaa sida uu Ilaah qorshaha guud kaa dhex tusinayo qorshaha adiga qaaska kuu ah uu ugu talagalay noloshaada. Markaad dhibatooyink ku jirtid, waa inaad ku noqotid aasaaska! Bal dib iisu eeg. Haddaba xidhiidhka aad la leedahay Aabbaha muxuu ku sugan yahay? Waa goormee marka ugu dambeysay ee aad barakeysay qof ka mid ah xerta? Weli miyaad waddaa hawsha dadka kale Erayga Ilaah lagu gaarsinayo? Xaalad sidee ah ayaad kaga sugan tahay xidhiidhka Ilaah lagula xidhiidho ducada? Haddii ay aasaasyadan ka shaqeyneynin noloshaada, haddaba ma jiraan wax kale oo aad xagga xidhiidhka aad Ilaah la leedahay kaga guuleysan kartid. Haddaba dib u laabo oo raadi meesha aad waddada kaga leexatay oo ka soo sax noloshaada halkaas. Ha iisu arkin inaad tahay qof xidhiidhka uu Ilaah la leeyahay aad u wanaagsan yahay oo fikiraddaasi yaanay kaa dhigin qof gefa waxyaalaha aasaaska u ah xidhiidhka Ilaah lala leeyahay. Hawsha ka bilaw halka aad joogtid Ilaahna wuu kuu muujin doonaa waxyaalaha waweyn ee uu kuu qorsheyey.

Rumeysad
Rumaysadku waa hubaasha waxyaalaha la rajeeyo, iyo xaqiiqaynta waxyaalaha aan la arkin.
Cibraaniyada 11:1

17
Rumaysadku waa Fahmidda la fahmo Ilaah

Markos 11:23 waxaan ka akhrineyna Ciise inuu yidhi, *IRuntii waxaanidinku leeyahay, ku alla kii buurtan ku yidhaahda, Ruq, baddana isku tuur,* ***oo aan qalbigiisana ka shakiyin laakiin rumaysta*** *in wuxuu yidhi ay noqonayso, waa ahaan doontaa.*

Ciise wuxuu naagtii dhiig baxaysay ku yidhi, *Gabadhay, rumaysadkaaga ayaa ku bogsiiyey. Nabad ku tag, cudurkaagiina ka bogso* (Markos 5:34).

Markos 10:52, Ciise wuxuu ninkii indhoolaha ahaa ee la odhan jiray Batilmaayo ku yidhi, *Soco rumaysadkaaga ayaa ku bogsiiyey.* Oo weliba Markos Mark 9:23 waxaan arkeyna Ciise inuu aabbaha wiilka ku leeyahay, Haddaad rumaysan karaysid, *wax waluba waa u suurtoobaan ka rumaysan.*

Halkan iyo meelo kale oo Injiilka ka tirsan, Ciise wuxuu noo caddeynaya waxyaalaha uu rumeysadka sameyn karo. Rumeysadku wuxuu dhaqaajin kara buuro, waxaa lagu heli kara bogsiin – wax uusan rumeysadku sameyneynin ma jiraan!

Xad iyo goorba, Ciise wuxuu ku noq noqonaya dhabta ah in rumaysadka uu shaqsiga qabo lagu heli karo natijooyin aan caadi ahayn. Wuxuu caddeynaya in rumeysadku uu buur dhaqaajin karo oo weliba isla sidaas ayuu rumaysadku marxalad rajo la'aan ah u bedeli kara mid rajo weyn leh oo weliba muucjiso ayaa ka dhalaneysa. Rumeysadka qofka shaqsiga ah uu Ilaah rumeysan karo waxaa ku jirta awood heer sare ah oo ay cidna ka hor imaani karin. Yooxanaha 1aad 5:4,5 waxay dhigeysa inaan rumeysadkeena dunida kaga xoog badin karno. Haddaba waa maxay waxyaalaha ku jira dunida? Ciise wuxuu sheegay inay dunida ku jiraan waxyaalaha sida dhibaatada, laakiin Ilaah ayaan ku mahadina, rumeysadka aan Ilaah rumeysannahay ayaan kaga awood badin karna dhib kastoo dunida kala kulmeyno.

Ciise run buu ku hadlay markuu yidhi rumeysadku buur buu dhaqaajin kara oo weliba marxalad kastoo aan u aragno inay adagtahay waxaa lagu bedeli kara rumeysad Ilaah la rumeysto oo kan rumeysadka leh wax kasta wey u suurtoobaan. Rumeysadku waa loogu guuleysanaya dunida ee haddaba ha welwelin markaad arkeysid in rumeysadkaaga khalkhal iyo dhib la gelinayo maxaa yeelay ibliiska ayaan ku faraxsaneyn guusha aad gaareysid. Mana rabo ducada aad magaca Eebbe ku duceysaneysid waayo isagaa ku burburaya boqortooyadiisana ku burbureysa. Ibliiska waa boqorka dunida iyo wax kastoo shar ah iyo wax kastoo adduunka ka muuqdaan. Haddii aan dhinaca kale ka eegno, wuxuu isku deyaya inuu ku ficiltamo wax kastoo u suurtagal ah si uu uga hortago inaysan awoodda Ilaah hawl gelin si aad adigu u ahaanin qof iimaankiisa dhisan yahay oo ku adag addeecista Eebbe si aanan muuqaalka Ilaah looga dareemin noloshaada.

Rooma 1:16 waxay sheegeysa in Ilaah uu yahay ***awoodda Ilaah ee u timid badbaadada*** *qof kastoo rumeysta.* Markaad rumeysatid ballamada Ilaah, awooddiisa ayaa laguugu dul shubaya oo iimaankaaga hogaamineysa ka bilaabato isla daqiiqaddaas. Ibliiska waa nacayb yahay tan, waana sababta uu ugu dadaalayo inuu wax kastoo uu awoodo sameyo si uu u burburiyo guushaasi iimaankaaga cusubna xidid u yeelanin.

Sheeddaanka wuxuu istecmala habab badan uu dadka ku weerarayo. Tusaale ahaan, wuxuu kugu dhego hadlaya inaadan u baahnayn rumeysad inaba, waxaa laga yabaa inuu si kasta Ilaah kuu adeegi doono. Taasi waxay u egtahay fikirad wanaagsan laakiin ma ahan arin run ah. Efesos 2:8 waxay leedahay, *Waxaad ku badbaadday nimco,* ***rumeysad la jirto.*** Rooma 4:16 waxay leedahay, *Haddaba, ballantu waxay ku timaddaa rumeysad si ay u ahaado mid nimco ku timid.* Nimcadu waa hibbo uu Ilaah nagu deeqo, waana ballamo iyo awood lagugu deeqay. Rumeysadkana waa

waxa aad kaga jawabeysid marxaladdan. Markaad rumeysad ku heshid wuxuu Ilaah kaa ballanqaaday, waxay kuu tahay mid kuu xalaatowday adiga shaqsi ahaan. Dabadeetana nimcada, awoodda Ilaah, waxay kuu ahaanayaan wax dhab ah oo shaqaynaya muucjisana waa la arkaya. Habka kale uu ibliiska ku shaqeeyo waxay tahay inuu iimaankaaga fara geliyo khalkhal iyo welwelina kugu dhaliyo oo kaa dhaadhiciyo in rumeysadku yahay mid ka duwan kan uu Kitaabka Quduuska ah sharaxayo. Ciise marar badan ayuu ka hadlay rumeysadka. Wuxuu sheegay inaan dhamaanteenba u baahannahay yahayna kan aan ku dhaqaajin karno buuro. Haddiiba taasi ay tahay wuxuu Ciise ku hadlay, de haddaba waa run. Ma jiro qof kale oo naga dhaadhicin karo inaanan u baahnayn rumeysad, haddii aan ogolaano beenta ibliiska, waxaan noqoneyna dad inkirayaan muucjisooyinka, awoodda iyo xornimada uu Ilaah siiyey dadka.
Ilaah ma rabo inaan ka xishoono rumeysadka ay waajibka nagu tahay inaan lahaano. Hadduu sheegay inaan lahaan karno, haddaba waan lahaan karna. Rooma 12:3 waxay sheegeysa in Ilaah uu qof kasta siiyey khiyaas rumeysad ah, oo haddaba haddii aad mar labaad dhalatay oo aad ka mid tahay xerta Ciise, rumeysad waa leedahay. Ilaah wuxuu ku siiyey khiyaas iimaan ah uu rabo inaad ficilgelisid. Haddii aad rumeysadkaasi dibcisid, muucjisooyin ayaad ku sameyn doontaa maxaa yeelay ma jiraan wax uusan awoodin inuu sameyo.

Rumeysadku ma ahan Hab wax loo sameyo

Haddii aad sawir qaldan ka haysatid rumeysadka, ma istecmaali doontid wuxuu Ilaah ku siiyey maxaa yeelay ma fahansanid amaba waxaa kaaga jirta cabsi. Laakiin ma ahan inaan iska dhigno kuwa gacan siinayaan markaan sharciyada bedeleyno si ay ugu sahlanaato dadka. Taasi waxay ahaaneysa in xarigga tartanka ee laga duulo hoos loo soo dejiyo si ay cid kasta uga duusho! Qof waliba si fiican ayuu uga boodaya laakiin lama helayo natiijo abaal marin mudan. Laakiin waa sidan sida ay dad badan ku dhaqmayaan maanta. Heerka rumeysadka ayey soo dejinayaan iskumana deyayaan inay ka hadlaan wax rumeysadka ku saabsan si aanay dadka qaarkiis u qalbi jebinin. Madaama “heerka dhabta ah ee rumeysadka la soo dejiyey” oo qof kasta iisu haysto inuu xarada ka tirsan yahay, laakiin calaamadaha, waxyaalaha la yaabka leh ee Ilaah, waxyaalaha uu Ciise sheegay meelna agtaas kama muuqdaan.
Ciise ma rabo inaan sidan ahaano. Karti iyo *hibo* ayuu ku dhaliyey kuwa heerka ugu sareyo ka boodi karaan xarigga bootinta lagu tartamayo oo qofkaasi ku guuleysan lahaa inuu ka boodo waa hubaal wuu jira (waa haddii aan mar labaad istecmaalno tusaalahan) wuuna muuqan doonaa wuuna ku guuleysan doonaa tartankaasi. Ilaah wuxuu ku siiyey rumeysad khiyaasan iyo awood uu rabo inaad ficil gelisid. Rumeysadka aad leedahay waxyaala badan oo la yaab leh ayaad ku sameyn karta. Ilaaheena waa wanaagsan yahay waana run. Wax alla wuxuu yidhaahdo way muuqan doonaan. Wax alla wuxuu sheegona waa wax uu wanaageenna ugu talagalay. Ma jiraan wax kheyr ah uu naga ceshanayo. Wuxuu rabaa inuu na siiyo wax alla wixii ugu wanaagsan oo dhan, oo haddii aan amaradiisa raacno, waan heleyna kheyrka iyo wanaagga uu noogu talagalay oo dhan. Saa ay tahayna waxaa mar kasta jira qof dhahayo: “Waxaad rumeysadka ka dhigeysa sida hab wax loo sameyo ama xooggaaga.” Maya! Ma ahan inaan sidaa leeyahay. Iimaanku ma ahan mid lagu adeegsado marxaladda ugu liidato. Iimaanku waa fahmidda aan fahmeyno Aabbaheena oo aan addeeceyno waxuu noo faray oo dhan.
Cutubka 11aad ee Cibraaniyada waxay ka hadleysa geesiyaalka iimaanka ee aan ka akhrin karno Axdiga Hore. Waxay ahayeen dadka waxyaala badan oo waweyn ku hergeliyeen iimaan ay Ilaah aaminsanayeen. Waxay noo yihiin tusaale sugan oo aan nolosha iimaanka kaga deyan karno. Iyagu iimaanka kama hadleynin oo keliya kumana labeynin waxyaalaha adduunka ee cid kasta u sahlan. Inaba iskuma deyin inay daciifnimadooda difacaan. Waxay ahayeen rag iyo dumar kuwaasi oo ku ficiltamayeen Erayga Ilaah kaasi oo ay ku gareen heer sare u adeegidda ay Ilaah u

adeegayeen.
Sidee bey ku guuleysteen? Nuux sidee buu ku dhisay doonidii weyneyd? Sidee buu Muuse quruun dhan uga badbaadiyey addoonsiga Masar? Sidee buu Yaashuuca ku qabsaday dhulkii ballanta? Sidee bey saddexdii nin kaga badbaadeen dabkii lagu riday ee ugu kuleylka badnaa? Sidee buu Danyeel kaga badbaaday libaaxi gaajeysnaa? Sidee bay kuwa ugu tabarta darran ku xoogeysteen ugu awood badnaadeen dagaalka ay galeen oo ay ciidanka macaaradka u dagaal geliyeen? Sababta waxay ahayd waxay garanayeen Ilaahooda!
Markaad Ilaah la socotid doonistiisa addeeceysid, waad fahmeysa kan uu yahay. Waxaad fahmeysa awooddiisa, waad dareemeysa meesha uu ka muuqdo, waad garaneysa raadkiisa iyo codkiisa! Waad arkeysa dabiicaddiisa. Waad fahmeysa wuxuu awoodo. Durbaba waad aamineysa Asaga. Tani waa rumeysad!

Rumaysadku waa La Socoshada Ilaah
Markaad fahantid kan uu yahay Ilaah iyo wuxuu awoodo uu rabo inuu sameyo, waxaad isla markiiba bilabeysa inaad addeecdid Asaga. Waad la soconeysa lana hadleysa Asaga, wuxuuna kuu ahaanaya la taliyahaaga la yaabka leh ee aad kugu naxariisanayo. Addeecista ku jirta xidhiidhka noocaas ah way sahlan tahay oo isla addeecistaasi waa iimaan. Ma ahan hab nooleyd lagu dhaqmayo oo loo maleyn karo in faraha oo la dhadhaqaajiyo ay muucjisooyin aan horey loo arkin ku ahanayaan. Maya! Rumeysadku waa addeecista Erayga Ilaah. Rumaysadku waxaa ka mid ah ku noqoshada Ilaaha ina uumay oo aan si joogta ah natiijaduna waxay ahaaneysa inuu noo muujiyo awooddiisa. Rumeysadku waa u ogolaanshaha aan Ilaah u ogolaaneyno in nala jiritaankiisa iyo Quduusnimadiisu bedelaan noloshaada oo ay aad iyio aad kuu ekeysiyaan Wiilka. Rumeysadku waa doondoonista wejiga Ilaah ee ma ahan uun inaan Asaga ka rabno inuu ka jawaabo ducooyinkeena, laakiin waa inaan Ilaah naftiisa xidhiidh joogta ah la lahaano waana sababta uu noo uumay. Rumaysadku waa caabudid, sharfid, iyo sareysin Ilaah lagu sareysinayo kan uu yahay daraaddeed.
Markaad waxyaalahan sameysid waxaad u sii guda geleysa dhuuxa rumeysadka. Waad fahmeysa kan uu yahay Ilaah waadna dareemeysa la jiritaanka uu kula jiro, jacaylkiisa iyo dabiicaddiisaba. Durbaba waxaad fahmeysa Ilaah inuusan weligiis been sheegeynin, ballamadiisuna wuu oofiya oo waxaa jiraan waxyaalaha qaarkood wuu weligiis sameyneynin. Waxaad fahmeysa waxyaalaha sida jirrooyinka, maskiinimada, welwelka iyo dembiga ma ahan wax xagiisa ka yimadaan. Ma ahan hibo kaga timid xagga Aabbahaaga samada ku jira, laakiin waa weerar dadka uga yimaada xagga ibliiska waayo isagu waa cadawga ugu nacaybka badan ee rabaa in wax kastoo shar ah ku sameeyo dadka fahansan Ilaah si uu uga leexiyo waddada xaqa ah si aanay ugu sii soconin sharafta Aabbahooda samada ku jira oo aanay u helin hadiyadaha la yaabka leh uu ugu talagalay kuwa ilaa daqiiqadda ugu dambeysa addeecaan una adegaan Ilaah.
Rumeysadku sida uu ahaan jiray ama loo maleyn jiray hadda kuma saleysno ficilgal aan rajo lahayn laakiin waxuu caadi ahaan uga aasaasmaya xidhiidhka dhabta ah ee aad la leedahay Aabbahaaga samada ku jira. Waa mid maskaxda si caadiyan ah loogu qaato in Ilaah uu yahay kan uu sheegay inuu yahay oo weliba wuu oofin doonaa wax alla wuxuu sheegay inuu sameyn doono. Aaminaadda noocaan ah aad bey uga farxisaa Ilaah. Rumeysad la’aan suurtagal ma ahan in laga farxiyo Ilaah, sababtoo ah mid kastoo Asaga u yimaada waa inuu rumeysan yahay inuu jiro uuna weliba abaamarinayo kuwa qalbdi daacad ah ku doondoona Asaga (Cibraaniyada 11:6).
Ilaah wuu ku abaal marin doonaa haddii aad wejigiisa doondoontid, wayna ka farxineysa Asaga markaad abaal marinta ka rajeyneysid. Guuleystayaasha iimaanka ee aan ka akhrineyno Cibraaniyada cutubka 11aad ma ahayn dad si dan la’aan ah isaga fadhiyeen. Waxay ahayeen dad dadaalayaan oo iimaankooduna wuxuu dhallay natiijooyin waweyn. Iimaanku ma ahan wax afka

la yidhaahdo oo ka mid ah uun tiirarka rumeysadka. Iimaanku ama rumeysadku wuxuu ka yimadaa qalbiga; waa awood uu Ilaah halkaas geliyey, oo markii la sii daayona wuxuu sameynaya waxyaala waweyn oo la yaab leh. Wuxuu qabaa xoog labu dhaqaajin karo buur oo marxaladaha darran hab kale u bedelayo. Wuxuu xoreynaya awoodda Ilaah eek u jirta Badbaadada iyo bogsiinta.

Markuu iimaanku ka buuxsamo qalbigaada, waxaad ahaaneysa mid hawleysan. Waxaad arkeysa waxyaala ay dadka kale u arkin inay suurtagal yihiin oo adiga kuu suurtagelayaan. Waxaad arki doontaa muucjisooyin meesha ay dadka kale ka arkayaan hor u socod la'aan. Waxaad arkeysa awoodda Ilaah oo midho dhalleysa meesha ay dadka kale ka arkayaan dhibatooyin. Waxaad arkeysa ballamada la oofinayo markay dadka kale ka xunyihiin ballamadii uu ku hadlay Ciise. Ibliiska uu yaaban yahay markuu arko iimaanka xoogga badan ee kugu jira adiga ka tirsan xerta Ciise. Khalkhal ayuu ku jira madaama aad fahantay sida ay u sahlan tahay in iimaan Ilaah lagula socon karo laguna addeeci karo. Wuxuu ka cabsi qabaan inaad iimaanka ku sii barbaartid oo aad ficil gelisid Erayga Eebbe iyo ballamadiisa si ay awooddiisa samada ku jirta ay adduunka u deddo.

Ciise wuxuu yidhi, *Wax kasta waa u suurtagal qofka rumeysadka leh* (Markos 9:23). Waxaad tahay mid ka mid ah xerta Ciise, wax kastana suurtagal ayey kuu yihiin. Ilaah wuxuu rabaa inuu kuu sii daayo awooddiisa muucjisooyinkiisana kaga dhex shaqeysiyo kuguna adeegsado, ee haddaba inaba ha ogolaanin in lagu niyad jebiyo! Ilaah wuxuu yahay kan uu sheegay inuu yahay, wax alla wuxuu ballanqaadayna wuu oofinaya.

18
Sababta uu ibliiska u nacaybyahay Rumeysadka

Ma jiraan wax ibliiska ka cabsiya ka badan inta uu ka cabsado baridda ku saabsan rumeysadka. Wuu ka cabsanaya wuxuuna kaga hor imanaya wax alla wuxuu awoodo. Wuxuu fahansan yahay in *maalinta uu qofkaasi badbaaday fahmo muhimadda rumeysadka, waxay noqoneysa marka ugu dambeyso uu qofkaasi sida uu rabo u hogaaminayo.* Erayga Ilaah ayaa ah hubka ugu xoogga badan ee looga hortegi karo ibliiska, laakiin rumeysad la'aan Erayga wuxuu ahaanaya mid aan awood lahayn. Cibraaniyada 11:6 ayaa noo sheegeysa sababta: *Rumaysad la'aan way adagtahay in laga farxiyo Ilaah.* Ibliiska wuxuu og yahay in haddii aanan ku socon doonin rumeysad, kama farxin doonno Ilaah – waana waxa uu ku dadaalayo inuu ku sameyo xerta Ciise. Wuxuu rabaa inuu abaabulo kuwa badan oo Masixiin ah oo aan laakiin ka farxineynin Ilaah. Markuu sidaa yeelo wuu qaloocinaya fasiraadda Erayga Ilaah wuuna eedeynaya Ilaah, isagoo farta ku fiiqayo kuwa badan oo masixiinta ah ee aan noolol toosan oo Ilaah ka farxineyso ku dhaqmeynin.

Rumaysadku waa hadiyad uu Ilaah nagu deeqay (Rooma 12:3). Qof kastoo xerta Ciise ka mid ah shaqsi ahaan ayaa loogu deeqay khiyaas rumaysad ah, in kastoo uu qof kastoo xerta ka tirsan rumaysadkaasi u ficil gelineynin sida laga rabi. Qaarkoodna kuma noola sida uu rumaysadka ku hogaaminayo. Masixiinta badankood iimaankooda waa mid aan lagu shaqeyneynin oo bedelkeeda cabsi xoog leh ayaa shaqeyneysa iyo aqoonta shaqsiga – waxa la arko, la maqlo, la dareemo lagu fikiro ama waayaaragga lagu helo ayaa badanaa lagu ficiltamaa bedelkii lagu ficiltami lahaa ballamada ku jira Erayga Ilaah.

Ibliiska wuu xoog tiray ama laciifiyey xerta Ciise isagoo been iyo caga jugleyn ku hayo wuxuuna ka faa'ideystay dhiiranaan la'aantooda iyo sida ay xooga u saareen inay noloshooda kaga dhaqmaan marxaladaha ay nolosha kala kulmaan. Markay saa tahay wuxuu iyaga ka hor istaagaya inaynan qabanin hawsha Rabbiga. Markuu Bawlos u qoray Filemon wuxuu ku

duceystay erayadan, *“Oo waxaan baryayaa in wadaagidda iimaankaagu uu socodsiiyo aqoonta wax kasta oo wanaagsan oo inoogu jira Masiixa”* (Filemon 6). Ilaah wuxuu rabaa inuu iimaankaagu ahaado mid ficil gala waxyaalahanna waxay ficil gelayaan markaad ku hadashid Erayga Ilaah, oo aad ogolaatid wax kastoo wanaag ah oo noloshaada ku jira oo aad ka heshay Ciise Masiix. Haddaba ibliiska wuxuu rabaa inuu iimaankaaga dariiqa saxda ah ka leexiyo si aad u fahmin ugana dhago la’aatid waxyaalaha aad xaqa u leedhay ee uu Ilaah kugu talagalay.

Rumaysadku wuxuu fiijiya ibliiska

Ibliiska waa ilaaha dunidan oo in kastoo Ciise isaga kaga guuleystay isku tallaabta, weli wuxuu xaq u leeyahay inuu awooddiisa ku ficilgeliyo dunida. Saa ay tahayna, annagu ma nihin dadka ifkan. Yoxanaha 1aad 5:4,5, waxay qoraysa, *iimaankaagu wuu guuleystay, macnaheedu, wuu ka guuleystay dunida.* Ibliiska wuu fahansan yahay tan, laakiin taasi kama dhigeyso asaga mid niyad jaba oo hawshiisa gama. Inaba diyaar uma ahan asaga inuu si sahal ah ku xoreyo dumarka iyo raga Ilaah. Ma rabo inay dadka Ilaah helaan xornimada, farxadda iyo nabadda ku jirta nolosha kaamilka ah. Sababtaas awgeed muxuu sameynaya? Wuxuu warankiisa ku gemaya *iimaanka* qofka maxaa yeelay waa sida keliya ee uu ku daba gembinayo shaqsiga!

Butroska 1aad 5:8,9, wuxuu noo sheegaya inuu ibliska *sida libaax ciyayo una wareeganayo isagoo dedeyayo qof uu burburiyo.* ***Waxaa nagula talinaya inaan uga guuleysano rumaysadka.*** Yacquub 4:7 way sii hadleysa oo waxay sheegeysa in haddii aan ibliiska iska xijaabno *uu naga cararayo.* Waxaan iskiiga xijaabi karna sida uu Erayga Ilaah nagula talinayo, waana laasim inuu cararo. Ibliiska waa ka cayrin kartaa noloshaada iyo marxaladaha aad ku sugan tahay iyo weliba ururka aad ducada ku wada kulantaan, kiniisadda, meesha shaqada iyo qoyskaaga. Sidee bay tan ku ahaan karta? Waa in asaga layska xijaabo oo *iimaanka qumaati* loogu taagnaado. Sida keliya ee laykiiga fiijin karo waa *iimaanka.* La yaab ma leh waa sababta uu aad uga soo horjeedo isla eraygaas oo uu ku ficiltamayo wax kastoo uu awoodo si uu shaqsiga xerta Ciise ah uusan ugu barbaarin iimaanka.

Ma jiro Masiixi adduunkan joogo oo ku noolaan karo adduun riyo lagu arkay, wax macaarad ah qabin, dhibaato lahayn. Iimaan ku socoshada macnaha ma ahan in layska indho dedo waxyaalaha dhabta ah ee aan nolosha kala kulanno. Adduunkan aan joogno waxyaala badan ayaa lur nagu hayaan oo na dhibayaan. Ibliiska kuma faraxsano markuu arkayo inaad agagaarka xaradiisa ku wareegatid adigoo u ifeyso sida nuur samada ka soo ifayo, adigoo madadaalineysid boqortooyo ka wanaagsan tiisa. Wuu ku wareemaya. Laakiin Efesos 6:16 waxay leedahay, haddii aad qaadatid *gashaanka iimaanka,* waad awoodi doontaa inaad kala daadisid falaaraha ololayaan uu soo gemayo ibliiska. Iimaanka aad ku adkeysaneysid waa gashaanka aad ku burburineysid iskiigana fogeyneysid weerar kasta oo kuugu soo aadan. Iimaanka kama hor istaagayo inaanan lagu weerarin, xataa markaad awood u leedahay inaad iimaanka istecmaashid oo aad ka hor tagi kartid intaanan lagu soo gaarin si aad u guuleysatid, intaanay falaaraha wareemin meesha shiishka loo soo saaray. Iimaanka shaqadiisa ugu horeysa waa inuu ku siiyo awood aad ku dhiiranaatid ku guuleysatid markii lagu soo weeraro. Sheeddaanka isla markiiba wuxuu weeraraya iimaankaaga madaama uu og yahay inuu yahay habka aad kaga guuleysaneysid falaarahiisa ololayaan kuwaasi uu kuugu soo gemayo. Aad buu u carroodaa markuu arkayo inaad guuleysatay – wuuna og yahay in guushaasi aad ku heshay iimaankaaga xooga leh.

Ibliiska wuxuu isku deyaya inuu sameyo wax kastoo uu awood si uu kuwa Ilaah u hegan u daciifiyo ugana dhigo kuwa aan wax tar lahayn. Haba ahaatee, haddii aad mar labaad dhallatay, xoogga Ilaah ayaa kugu dhex jira diyaarna kuu ah mar alla markaad u baahantahay. Waxyaala badan oo aad weligaa ku fikiri lahayn ayaad ku hergelineysa. Markos 9:23 waxay leedahay, *Wax kasta waa u suurtagal kuwa rumeysta.* Ibsliiska wuxuu hubaa in haddii aad fahantid in wuxuu

Ciise ku hadlay ay run yihiin, waad istaagi doontaa oo waxaad hergelin doontaa waxyaalo waweyn oo awoodda baniaadmiga lagu sameyn karin. Ilaa hadda waxaa suurtagal ah inaad aamintay beenta sheeddaanka uu kugu dhego hadlay inaad daciif tahay, iyo sida aad waxba u awoodi karin, sida aad u sameyn kartid uun waxa ugu yar iyo qiimaha ugu hooseya ee aad leedahay. Laakiin marba haddii aad fahantid waxyaalaha wanaagga ah ee uu Ciise kugu dhex beeray, iimaankaagu wuxuu noqonaya mid midho dhala. Erayada ku dhigan Cibraaniyada 11:34 markaas ayey noqonayaan kuwa aad noloshaada ku saleysisid – *Oo itaaldarradii kaga xoogaysteen, oo dagaal ku itaal weynaadeen, oo colalkii shisheeyaha ku eryeen.* Cadawgaaga inaba ma rabo inuu ku deydo xoogga Ilaah mana rabo inuu cararo, sababtaas awgeed wuxuu si joogta ah isugu deyaya inuu weeraro imaankaaga.

U ogolaw inuu Erayga Ilaah kordhiyo Iimaankaaga

Ilaah wuxuu rabaa inay hawlaha wanaagsan uu Ciise sameeyey adduunka ka muuqdaan si loo muujiyo awooddiisa iyo in lagu burburiyo dhimashada ruuxiyanka ah ee ku wajahan aadanaha, addoonsiga dembiga, maskiinimada iyo weliba kelinimada. *Injiilka waa awoodda Ilaah ee loo soo bandhigay qof kasta oo rumeysta.* Ciise wuxuu Yooxanaha 1aad 14:12-13 ku sheegay in qof kastoo Isaga rumeysta uu awoodi doono wax alla wuxuu sameeyey oo dhan. Wuxuu rabaa in hawlihiisa adduunka lagu muujiyo laguna muujiyo kuwa xertiisa ah – Kiniisadda. Saa ay tahayna, haddii aanan rumeysanin wuxuu ku hadlay, awoodda Ilaah ee nagu dhalineysa dhalashada cusub, bogsiinta iyo xoreynta aadanaha, kuma fidi doonaan aduunka. Tani, waa isla waxa uu ibliiska rabay kuna raynraynayo. Ibliiska wuu sameeyey dadaal kasta si uu uga hor tago waddo kasta uu Ilaah awooddiisa dadka kaga shaqeysinayo. Beentiisa ayuu ka iibiyey kiniisadda oo wuu ka xaday hubabka ay ku shaqeyn lahayd. Wuu ka burburiyey awoodda ay lahaan lahayd eek u saleysan awoodda aan caadiga ahayn ee uu Ilaah siiyey iyo xigmadda lagu deeqay, oo wuxuu isku deyey inuu kiniisadda ka dhigay mid cuuriyaan ah oo aan adduunka waxba dhedhen u lahayn.

Waxaad la yaabi karta sida uu sheeddaanka ku awooday tan. Wuxuu sidaa ku sameeyey marka hore wuxuu xerta ku beeray shaki ay kaga shakinayaan ballamada Ilaah iyo amarada Ciise, oo wuxuu kiniisadda ku mushquuliyey inay dhexdeeda ku dooddo arimaha baridda saxda ah ku saabsan taasi oo iyada ka dhigtay mid cabsata oo u hogaansanta maanka baniaadmiga.

Laakiin Ciise wuxuu ku hawl jira inuu arintan bedelo! Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah wuxuu xerta ku soo dul dejiyey nuur qalbiyadooda u ifinayo fahansinayana Erayga Eebbe. Sida qoran, *Oo waxaan Ilaah baryayaa in indhaha qalbigiinna la nuriyo, si aad u ogaatan waxa ay tahay rajada yeeshistiisu, iyo waxa ay tahay hodantinimada ammaanta dhaxalkiisa ee ku jirta quduusiinta, iyo waxa ay tahay weynaanta xooggiisa aan la koobi karin oo uu u hayo kuwenna rumaysan, sida uu u shaqeeyo xoogga itaalkiisa* (Efesos 1:18-19). Intaan tan sii fahmeyno, waxaan bilabeyna inaan addeecno amarada Ciise, *awliyada* waxay ku hawlantahay bixinta ruuxaaniga, waxay ku hadlayaan afaf cusub oo waxay gacma saarayan kuwa bukaan. Injiilka kaamilan ayaa la wacdinaya oo Ilaahna wuxuu Eraygiisa ku xoojinaya dadka ugu cadeynaya inuu hawlan yahay muucjisooyin iyo yaabab (Markos 16:15-20).

La yaab ma leh markaan arkeyno inuu sheedaanka nacaybyahay rumeysadka. Rumeysadka Ilaah la rumeysanayo ayaa burburinaya sheeddaanka oo baabi'inayo awoodda uu dadka kaga jaho wareerinayo waddada xaqa ah wuxuuna dadka ugu bedelaya boqortooyada Ilaah iyo Sharaftiisa. Ciise wuxuu Yooxanaa 11:40 ku yidhi, *Miyaanan idiin sheegin in haddii aad* ***rumeysataan*** *aad arki doontaan sharafta Ilaah?*

Rumeysadka ayaan ku arki doonaa sharafta ilaah oo dhexdeena ka shaqeyneysa. Haddaba iisu diyaari waxyaalaha aad arki doontid. Wakhti kastoo aad awooddid u hur inaad Erayga Ilaah ku

akhrisatid si uu rumeysadkaagu u bato una barbaaro. Daqiiqad kastoo aad haysatid ku doondoon Ilaah. Ducada kula hadal Isaga. Aayadaha aad soo xigsan kartid oo dhan istecmaal si aad u ahaatid qof ficil gelinayo awoodda uu Ilaah ku siiyey oo aad dadka kale ku gaarsisid farriinta Ilaah. Ibliiska kuma farxi doono taas, laakiin Ilaah ayaa ku farxaya arintaas, oo dadkuna rag iyo dumarba waa la xoreyn doonaa!

19
Waxyaalaha Lidka ku ah Rumaysadka

Kitaabka Quduuska ah wuxuu caddeynaya in kuwa xaqa ah ay rumeysad ku noolanayaan oo gashaanka rumeysadka ayaa iyaga ka difaacaya falaaraha ololayaan eek an sharka leh. Ciise wuxuu nagu leeyahay *Wax kasta way u suurtoobaan kan rumeysan* (Markos 9:23). Erayadan waa kuwa xoog badan oo aan xataa lagu khiyaasi karin maanka baniaadmiga, laakiin wuxuu Ciise ku hadlo kuna dhaqmo waa wax ka sareyaan baniaadmiga oo dhan – wuuna saxsan yahay mar kastaba. Wax alla wuxuu ku hadlo kuna ficiltamo kheyr ayaa ku jira!

Rumeysadka Ciise la rumeysanayo iyo awooddiisa waxay waddada u baneyneysa awoodda Ilaah. Waxay Ilaah u baneyneysa inuu boqortooyadiisa halkan ka dhiso si ay sharaftiisa ugu waarto dunida. Markuu Ilaah ballan nagula galay Ciise Masiix, wax alla wuxuu leeyahay ayuu noo soo bandhigay si aan uga faa'idno una istecmaalno. Waxyaalahaas oo dhan waxay noqonayaan kuween isla marka aan Isaga rumeysano. Ilaah naftiisa ayaa ah ka aasaasayo xidhiidhkaasi aan ballantan ku heleyno. Asagoo aan lagu qasbin ayuu noo soo bandhigay wax kasta uu lahaa oo jira. Markaan rumeysano Asaga oo aan ogolaano amarada iyo axdigiisa, waxay Ilaah ka dhigeysa mid ah u leh inuu adduunka nagu deeqo waxyaalaha uu noogu talagalay oo dhan, wuxuuna istecmaalaya xerta Ciise rumeysay. *Rumeysadku wuxuu sii dayaa awoodda Ilaah.* Rumeysadka wuxuu u ficiltamaya sida garoonka dayaaradaha *taasi oo ay ballamada Ilaah ee samada ka imanayaan ay ku soo dul degayaan.* Waana sababta rumeysadku uu weerar weyn ugala kulmayo sheeddaanka. Sheeddaanka wuxuu rabaa inuu burburiyo rumeysadkaasi ay barakooyinka Ilaah samada kaga soo degayaan. Wuu sameynaya wax alla wuxuu awoodo si uu uga hortago rumeysadkaaga si uusan u barbaarin. Hababka uu sidaa ku sameynayo waxaa ka mid ah kuwan:

1. Wacyo gelin la'aan augeed lama fahansana inay haystaan Rumeysadka

Rooma 12:3 waxay caddeyneysa inaan helnay khiyaas rumeysad ah. Ma jiro qof xerta ka mid ah oo dhihi kara, "rumeysad ma lihi." *Mid kastoo xerta ka mid ah waa lagu deeqay rumeysad*, saa ay tahayna xerta oo dhan kama shaqeysiyaan rumeysadka ay qabaan. Filemon aayadda 6aad waxay caddeyneysa in erayada *rumeysadkaada* waa la sheegay. Markaan fahanno inaan rumeysad leenahay, si degdeg ah uguma hoos silceyno eedeynta ibliiska. Baridda wax ku saabsan rumeysadka looguma talagelin inaad ku hoos xiiqdid ama in laguugu eedeyo rumeysad la'aanta. Laakiin Erayga Ilaah ayaa kuugula caawinaya inaad ficilgelisid rumeysadka aad leedahay, kuguna caawinaya inuu rumeysadkaas kugu dhex barbaaro oo weliba sii xoogeysto. Markaasna isla sida ay nebi Ibraahim u ahayd adiguna waad rumeysan karta oo waxaad heli doontaa kheyrka waxyaalaha waweyn ee aan sahalka lagu helin.

2. Aqoon la'aanta loo qabo Ballamada Ilaah

Xoosheeca 4:6 waxaan ka akhrineyna, *Dadkeyga waxay ku baaba'ayaan aqoon la'aan.* Bawlos wuu duceystay oo Efesos 1:17 wuxuu ku duceystay in *Ilaaha Rabbigeenna Ciise Masiix oo ah Aabbaha ammaanta uu ruuxa xigmadda iyo muujinta idinku siiyo aqoonta aad aad isaga*

taqaaniin.
Rumaysadka wuu sara maraya marka la fahmo doonista Ilaah. Waa inaad fahantid wuxuu Erayga Ilaah ka sheegayo baahida aad qabtid iyo dhibatooyinkaaga. Waa inaad garatid wuxuu Ciise kuu sameyey oo aad fahantaa sida uu Aabbahaa diyaar kugu yahay inuu ka jawaabo ducooyinkaaga.
Cibraaniyada 11:1 Waxay sheegeysa in rumeysadku uu yahay "xaqiiq." Markaad xaqiiq u leedhay wuxuu Ilaah ku hadlay, ma adkaaneyso inaad rumeysad heshid. Isla sida aad qof u sii baraneysid ayaad aaminaadda aad qofka aamineysid sii badaneysa; isla sidaas weeye xidhiidhka aad la leedahay Aabbaha. Sida aad maalinba maalinta ku xigta u fahmeysid ballamada Ilaah ayuu rumeysadkaaguna u sii barbaaraya.

3. Addeecis la'aanta Erayga Ilaah
Markuu Erayga Ilaah kuu caddaado, waxaad aad u suurtagal ah in xagga maanka iyo weerarka adduunka ay ka soo horjeystaan Erayga Ilaah. Inta badan, waxaan raadina cudur daar da'ciif ah si aanan u addeecin Erayga Ilaah, maxaa yeelay maankeena iyo waayaragnimadeena ayaan rabin inay ogoladaan Erayga Ilaah una qataan isla sida uu u dhigan yahay. Saa ay tahayna, Erayga Ilaah waa run haddii aad fahantay iyo haddii aad noloshaada ka dareentayba iyo haddii kaleba. Ilaah kuuguma armin inaad maankaaga ku fahantid Eraygiisa iyo wax kastoo uu ku hadlay: wuxuu kaa codsaday inaad addeecdid Asaga. Markaad addeecdid waad fahmid doontaa! (Cibraaniyada 11:3).
4. Erayga Ilaah oo aan lagu Markhaati fureynin
Kuwa badan oo naga mid ah waxay jacayl yihiin inay keligood cidda iska jogaan, anagoo si farxad leh ku akhrisaneyno Erayga oo wax kastoo ku qoran ogolaneyno. Laakiin, maxaa dhacaya isla marka aan buugga xidhno? Waan kaceyna, oo meel kastoo aan aadno waxaan ku dhaqmeyna wax ka soo horjeeda isla waxyaalihii aan horey u akhrinay. In kastoo uu Erayga Ilaah na leeyahay yaanan waxba ka welwelin, isla markiiba waxaan bilabeyna inaan ka welwelno waxyaala badan oo kala duwan. Taas keliya ma ahan, waxaan umaleyneyna inay wanaagsan tahay inaan ka hadalno dhibatooyinkeena oo dhan – In kastoo uu Erayga Ilaah nagula talinayo inaan markhaati furka wanaagsan ku dadaalno – weliba markay marxaladooyinka ay nagu toosinayaan dhinaca kale.
Inta badan waxaan soo xiganeyna marxaladaheena bedelkii aan Erayga Ilaah soo xigan lahayn. Haba ahaatee, waan inaan fahanno inuu Erayga Ilaah uu yahay mid wax aasaasa. Markaan ku markhaati fureyno oo aan caddeyneyno, marxaladaha way is bedelayaan, marka ugu horeyso waxay ka bedelmayaan xagga ruuxa dabadeetana xagga waxay ka bedelmayaan xaaladda caadiga ah uu qof kasta isku tilmaami karo lana arki karo. Ibliiska wuxuu rabaa inuu shaki kuugu beero intaanad natiijada arkin. Markaasaad bilabeysa inaad fasiraad qaldan ka sheegtid meesha aad kheyr kaga fikir lahayd, taasna waa mid ka soo horjeedda wuxuu Erayga Ilaah nagu leeyahay, taasna waxay sii burburineysa awoodda Erayga Ilaah uu noloshaada iyo marxaladdaada kaga shaqayn lahaa.
Ciise wuxuu noo sheegay inaan heleyno waxaan ku hadalno (Markos 11:22-24), tanna labada dhinacba way u shaqeyneysa. Ibliiska hadduu awooday inuu ku mariyo inaad ballamada Ilaah xumaan kaga fikirtid, wuu daahin kara ficilgalka ballamadaasi ee aad ka dareemi lahayd noloshaada. Waana sababta ay muhiimka u tahay in lagu adkeysto wuxuu Erayga Ilaah leeyahay. *Hadduu qof hadlayo, waa inuu u hadlo sida isagoo ku hadlayo isla Erayada Ilaah* (1 Butrooska 1aad 4:11). Ku hadal Erayga buurahana way dhaqaaqi doonaan ee! Cibraaniyada 10:23 waxay dhigeysa, *Aynu aad u xajinno qirashada rajadeenna liicliicashola'aan, maxaa yeelay, kan inoo ballanqaaday waa aamin.*

5. Erayga Ilaah oo aan lagu ficiltamin

Yacquub 1:22 waxay nagula talineysa inaanan ahaanin dad Erayga dhegeysta oo keliya oon nafsaddeena been u sheegeyno, laakiin waa inaan ficilgelina Erayga Ilaah. Macnaha waa suurtagal inuu qofka naftiisa khiyaneyo – xataa marxaladda uu Ilaah naftiisa ka dhex shaqeynayo oo Erayga si daacad ah lagu wacdinayo. In Erayga Ilaah la maqlo oo keliya kuma filno. Waa inaan noloshaada ka ficilgelisa isla marka aad Erayga maqashidba. Ha ogolaanin Erayga aad maqashay inuu ahaado mid aan shaqeyneynin. Sanado badan, dad badan waxaa lagula talinayey inay sugaan oo aanay isku deyin ficilgelinta Erayga ilaa ay ka barbaraan, oo waxaa looga digayey waxyaalaha sida, 'iska ilaaliya inaadan dareenka jidhka ku dhaqaaqin idinkoo isleh waxaad ficilgelinaysaan qoraalka' iyol waxyaala la mid ah. Tani waxay ku guuleysatay inay ka hor istagaan ficilgelinta Erayga amaba hamigooda ayey yareysay. Laakiin Erayga Ilaah waa dhab oo awooddiisa way jirta oo way naga dhex shaqeyneysa *waxaana awoodda Ilaah naloo sii deynana markaad ku ficilqaadno Qoraalka.* Markaad si dhiiranaan ah ku ficilqadeysid Erayga Ilaah waxaad muujineysa inaad Rabbiga aaminsan tahay. Ilaah wuu sharfaa dabiicadda noocaas ah waadna arki doontaa natiijada. Haddii aad u riyaaqeysid inaad inaad Ilaah sareysisid oo aad addeecdid oo aad dooneysid inaad dadka agagaarkaaga jogaan Baraka u ahaatid, haddaba Ilaah wuu kuu caddeynaya Eraygiisa intaad sii addeeceysid.

6. Dulqaad iyo Adkeysasho La'aan

Dadka qaarkiis waxay horey yidhaahdee, "Waa yahay, waan isku deyaya ficilgelinta Erayga Ilaah si aan u tijaabiyo inuu shaqeynayo." Maya! Ilaah noogama jawabayo haddii aan noqono dad "tijaabinayaan." Wuxuu nooga soo jawabaya markaan rumeysano oo ay qumaati nooga dhaadhacsan tahay inaan ficilgelin karno. Markuu qofka beeraleyda ah mirahiisa beerayo ma ahan inuu hab khatar ku jirta uu ku tijaabinayo inay kobci doonaan. Wuu garanaya inta mir oo beertiisa lagu beeri karo wuxuuna rajeynaya natiijo. Ma ahaanayo qof aan dulqaad lahayn, ama mid xanaaqo ama iisu naxariisanayo hadduu arko mirihii oo aan subaxa xigta soo nuurin. Haba ahaato ee, inta badan dabiicaddeena waa sidaas ayaan ku dhaqaaqnaa. Waxaan isku eedeyneyna inaan qalad galnay oo waxaan ka calaancaleyna marxaladaheena, amaba waxaad eedeyneyna Ilaah markaanan helin jawaab degdeg ah. Laakiin waa inaanan sidaas ku dhaqmin. Ciise wuxuu leeyahay sida ku dhigan Markos 4:26-27, Wuxuuna yidhi, *sidaas weeye boqortooyadii Ilaah, sida nin abuur dhulka ku daadsha. Isagu waa hurdaa, waana kacaa maalin iyo habeenba, oo abuurku waa baxaa oo weynaadaa, laakiin si ay tahay isagu garan mayo.* Ma eeg wuxuu sheegaya inay habeen iyo dharaarba imanaya oo ay moodayaan. Beer fali kasta wuu fahansan yahay in mirta ay muddo qaadaneyso intaanan laga miro goosanin. Mirta nolosheena lagu beerayo waa Erayga Ilaah. Isla sida ay muddo u qaadaneyso in mirta dhulka lagu rido inay miro dhasho oo laga beer goosto, isla sidaas ayey u tahay nolosheena. Laakiin inta uu wakhtiga sii gurmayo oo aan wax miro ah arkeynin, badankeen waxaan noqoneyna kuwa rajo dhigeen oo isla markiiba dhulkaan faageyna oo hubineyna inay mirta weli dhulka ku jirto. Sidaa ha sameynin! Erayga naftiisa waxaa ku jirta awoodda nolosha iyo korintaanka. Waa haddii loo ogolaado inay carada ku jirto, maalin unbaa laga miro goosan doonaa. Ma ahan inay jawaabaha maryooyinka oo dhan si degdeg ah ku yimadaan, laakiin taasi macnaheedu ma ahan inaynan jawaabta jidka ku soo jirin. Ha u ogolaanin ibliiska inuu niyad jab kaaga hor istaago rumeysadkaaga.

7. Jacayl la'aan

Galatiya 5:6 waxay noo sheegeysa in *rumeysadku uu isku muujinayo jacayl*. Waxba ma rajayn kartim ama maba rumeysan kartid, haddii uu qalbigaadu jacayl ku jirin. Kitaabka wuxuu noo sheegaya inay saddex shey weligood jiri doonaan; rumeysad, rajo iyo jacayl. Saddexdanba waa inay noloshaada qayb ka ciyaarayaan. Rajadu waa tiirka rumaysadka. Haddii ay dadka

rumeysadka dhib ku qabaan, Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah ayaa durbaba kicinaya rajada. Rajado waa hor u socod, rumeysadkuna waa dareenka naga dhaadhacsan inaan durbaba helnay waxa aan rabno ee aan u riyaaqeyno *hadda*, xataa haddii aanan weli arkin waxaasi. Laakiin xusuuso, rumeysadku ma shaqeynayo haddii uu jacayl jirin.

Meesha uu rumeysad yar ama rumeysad darro ka jirto halkaasi jacaylna kama jiro. Rumeysadka iyo jacaylka waa far iyo faraanti. Rumeysadku waa wax qalbiga ku aasaasma oo midnimada Ruuxa dhala. Rumeysadku ma ahan wax maskaxda lagu miisaami karo oo dhacdooyin la taaban karo ku saleysan. Rumeysadku wuxuu dhaliya midnimo ka sii culus midnimada caadiga ah ee nafsaddeena, in kastoo waxyaala la taaban karo lagu muujin karo. Midnimada maanka iyo wada tashiga ayaa ka mid ah waxyaalaha lagu garan karo meesha uu rumeysadka ka jiro, laakiin kuwa waxyaalahan ka soo jorjeedaan waa lagu jeesjeesaya lana yasaya. Iimaanku waxyaalahaasi sharka ah kuma fikiro. Rumeysadku wuxuu isku muujiya jacayl. Waa dulqaad iyo naxariis, waana ogolanaya doodaha; ujeeddo ayuu leeyahay, waxaa ka muuxa rajo iyo dulqaad. Rumeysadku wuxuu ku iimaan qabaa waxyaalaha wanaagsan oo weliba cidna dusha kama xagto mana damco. Wuxuu arka tilmaamaha wax lagu xukumi karo wuxuuna ka arkaa dhinaca uu wanaagga ka jiro in kastoo ay kuwa aan rumeysadka lahayni ay arkaan uu waxyaalaha sharka ah. Rumeysadku wuu barakadeya ee ma inkaaro.

Markuu qofka xerta ah barto sida loo tarbiyeyo carabkiisa iyo sida jacayl loogu socdo, awood heer sare ah ayaa lagu duldaynaya noloshiisa. Cuqdadda, nacaybka iyo la talinta qaldan oo dhan waa laga gudbaya oo waxaa noloshaasi ku dhex qulqulaya xoogga Ilaah oo la wareegaya noloshaasi. Bedelkii aad aamini lahayd dadka oo ay ku niyad jebin lahayeen, qofkaasi wuxuu isku haleynaya oo si toos ah u tallo saaranaya Ilaah, kan aan weligiis noo gefeynin. Farxaddiisa ma yaraato xataa markaan nolosha kaga sugannahay jarrabaad. Bedelkeeda, waxay soo butaacineysa awoodda Ilaah si Eraygiisa loogu caddeyo calaamooyin iyo yaabab.

Ciise wuxuu Markos 11:25 ka yidhi, *Oo kolkaad tukasho u taagan tihiin, cafiya haddii aad dad wax ku leedihiin, si Aabbihiinna jannada ku jiraa xumaantiinna idiin cafiyo.* Cafis la'aanta iyo ka dembi la garanayo oo aan laga leexaneynin ayaa ka mid ah waxyaalaha inta badan isbaarada u ah rumeysadka oo ka reebayo inuusan helin awoodda Ilaah.

Codka qofka nagu jira ama nafsadda ina hogaamineyso, maankeena iyo qalbigeena haddii aan si kale u nidhaahno waxaa xoojinayaan oo waddada xaqa ah ku hogaaminayaan Ruuxa Quduuska ah oo naga dhaadhicinayaan dembiyada aan u baahan nahay inaan ka toobad keenno. Waa inaan ahaatid qof toobadkeenka ku degdega oo cafiya. Waxba qalbigaada ha ku keydinin wax xaqdarro ah oo inaba waxba cuqdad ha u qaadin kuwa xumaanta kugu sameyeen. Xataa haddii ay qumanayeen iyo haddii ay qaldanayeenba, qalbigaaga inaba fursad ugama haysid aad aargudasho ama cuqdada ku keydisid. Waxyaalahaas ha kaa tageen. Ha ku adkeysanin in cafis lagu weydisto. Adiga naftaada Ilaah hortiisa daahir ku ahaw.

Ka digtoonaw dembi kastoo ka muuqan doono noloshaada. Meesha lagaaga baahan yahay inaad isasaxdid ha inkirin oo isasax – adigoo aan daxadir had dhaaf ah ku dhaqmeynin. Ha u ogolaanin sheeddaanka inuu maankaaga ku beero dareemo aan raad lahayn ama aanay waxba ka jirin. Haddii ay dareemo qaas ah ahayn oo aanay wax cad ahayn oo habkii lagu xalin lahaana uu maskaxdaada ku soo dhicin, ogaw dareemadaasi kaaga ma imaanin xaga Ilaah. Haddii aad wax qalad ah sameysay, waad fahmeysa. Ilaahna wuu kuu sheegaya. Dabadeetana, arinta xali oo noloshaada horey uga sii soco. Haddii uu jirin wax dembi ah oo aad xusuusan tahay, ha u ogolaanin inuu sheeddaanka shaki iyo eedeyn aan sal lahayn wakhtiga kaaga lumiyo. Isku difaac gashaanka xabadka ee metelayo iimaanka, wayna kaa hor qaadi doonaan falaaraha ololayaan ee ibliiska. Marka waxyaalaha iimaanka lidka ku ah oo dhan lagaa hor leexiyo, waxaad arki doontaa awoodda sara kaca ee Ciise oo noloshaada ka dhex shaqeyneysa!

20
Rumaysadka aan idlaaneynin

Haddaba saddexdan shey ayaa waara: rumaysad, rajo iyo jacayl. Laakiin midda saddexdooda ugu wada weyn waa jacayl (1 Kor 13:13).

Markaan aayaddan arkhrineyno, waxaan inta badan ku fikirnaa uun jacaylka oo an mid aan idlaaneynin. Laakiin waxa aan inta badan ilawno ayaa waxay tahay inay rumaysadka iyo rajoda ay labadooduna yihiin kuwa aan idlaaneynin. Macnaha ma ahan oo keliya inuu jacaylka weligiis jirayo ee laakiin waxaa kaloo cad inaan rumaysadka kula noolaan doonno samada nolosheena oo dhan. Rumaysadku waa shey weligiis jirayo. Waxyaalaha ay kugu waajibka tahay inaad samada ka aaddid waa inaad dhisiddooda ku bilawdid intaad adduunka ku nooshahay! Ilaah wuxu rabaa inuu rumeysadkaaga barbaaro – wax xaddad ahna kuuma dhigin!

Korintooska 2aad 4:16 waxay dhigeysa, *Waa inaanan rajo dhigin. In kastoo aan xagga muuqaalka ka daciifeyno, laakiin xaga qalbiga waa nagala cusbooneysiya maalin waliba.*

Haddaba maxaa ku jira qalbigaaga? Ruuxa Ilaah, Noloshiisa iyo rumeysadka uu kugu dhex beeray. Markaad mar labaad dhallatay, Ilaah wuxuu kugu beeray khiyaas rumeysad ah (Rooma 12:3). Ma uusan ku beerid jirkaaga muuqda ama maankaaga, laakiin Ruuxa quduuska ah ayuu ruuxaada kaga beeray waxyaalahaas. *Qof kastoo* xerta Ciise ka tirsan waxaa lagu beeray khiyaas rumaysad ah. Sababtaas awgeed way u sahlan tahay in qalbigaagu rumeyo Ilaah. Uunka cusub ee kugu dhex beermay wuxuu jacayl yahay Ilaah, weliba wuxuu sii jacayl yahay inuu addeeco Isaga. Haddii aad mar labaad dhallatay, waad raboon doontaa inaad toos u addeecdid Isaga. Waxaad jeclaan doontaa inaad qalbigaaga maalin walibaba cusbooneysisid ee ma ahan inaad ku cusbooneysineysid waxyaalaha ama cuntooyinka caadiga ah ama aad ku faraxdid marxaladaha caadiga ah ee nolosha lagaga farxiyo adduunka, ee laakiin waa inaad ku cusbooneysisid “eray kastoo ka soo baxa afka Ilaah” (Matayos 4:4), macnaha waa inay ahaato wax Kitaabka Eebbe ka soo baxa.

Erayga Ilaah waa mir lagu beeray qalbiga dadka oo wuxuu dhallaa miro, ama natiijo ayuu ka leeyahay nolosha. Qalbiga waxaa lagu barbaarinaya Erayga Ilaah iyo Ruuxa Quduuska ah. Rumaysad kastoo ku soo kordha nolosha qofka xerta Ciise ka tirsan waxay calaamad u tahay in uu qofkaasi addeecsan yahay Ciise, oo wuxuu raacsan yahay kuna noolyahay Erayga oo maalin waliba waa la cusbooneysinaya qalbigiisa. Macnaha Erayga Ilaah ayaa ah sheyga ugu muhimsan ee uu noloshiisa qiima weyn ka siinayo. Marxaladaha, dareemada, iyo maanka waxba kama leexin karaan arintan. Xataa haddii ay marxaladdaada ka duwan taha tan uu Ilaah kugu yidhi inay ahaaneyso, oo nafsaddeenana ay u egtaha inay sii rajo dhigeyso, qalbigeena laakiin si xoog leh ayuu u sii dhismaya oo rumeysadkeena maalin kasta uu barbaaraya.

Rumaysadku wuxuu leeyahay Awood Gudaha ah uu ku Guuleysto

Rumaysadku waa mid aan weligiis idlaaneynin. Rooma 10:17 waxay sheegeysa inuu *Rumaysadku ku yimaado maqlidda farriinta, farriintana waxaa lagu maqla erayga Ciise.* Erayga Ilaah waa “mirta aan qurmeynin” (1 Butros 1:23) oo natiijo joogta ah ka dhalinayo nolosha qofka rumaysta ee hela Eraygga.

Masuuliyad ayaa naga saaran istecmaalidda iyo barbaarinta khiyaasta iimaanka uu Ilaah nagu deeqay. Rumaysadku si caadi ah iskiigama barbaarayo. Ilaah wuxuu rabaa iimaankeena, in kastoo ay nagu waajib tahay inaan ku sii adkeysano barbaaristiisa wax kastoo aan nolosha kala kulannaba. Bawlos wuxuu leeyahay sida ku dhigan Tesaloniikaha 2aad 1:3 oo leh, *Waxaa nagu*

waajib ah, walaalayaalow, inaannu mar walba aawadiin Ilaah ugu mahadnaqno, sida noo eg, maxaa yeelay, rumaysadkiinnu aad buu u kordhayaa, jacaylka aad kulligiin isu qabtaanna waa badnaanayaa.
Inta uu Ilaah aad ugu faraxsan yahay rumaysadkeena barbaarayo, sheeddaanka dhinaca kale wuu murugeysan yahay. Wuu nacayb yahay Erayga Ilaah ee lagu beerayo qalbiyada xerta oo miro dhallaya. Marabo inay dadka noolol guul leh ku nooladaan oo ay sida ay sharciyada boqortooyada Ilaah yihiin in lagu noolaado ma jeclo. Wuxuu laakiin si fiican u fahansan yahay in qof kastoo xerta ka tirsan uu awood u leeyahay inuu burburiyo boqortooyadiisa, taasi aad bey qalbigiisa u ligligeysa.
In kastoo sheeddaanka uu yahay mid dhaawacan oo iskutallaabta lagaga guuleystay, lagama baabi'inin dunida. Weli wuxuu awooda inuu dadka dhib u geysto, xado, dilo oo weliba burburiyo. Waana sababta uu Yacquub 4:7 nagula talinayo inaan *iska xijaabno ibliiska, wuuna carari doonaa ee.* Waa inaan si xoog leh isaga celinaa oo aan kaga guuleysana awoodda Ciise Masiix ee asaga kaga adkaatay iskutallaabta.
Yooxanaha 1aad 5:4,5, waxay dhigeysa, *Ku alla kii ka dhashay Ilaah wuxuu ka adkaadaa dunida, oo waxaa libta ka adkaata dunida ah* ***rumaysadkeenna****. Waa ayo kan dunida ka adkaada, kan rumaystaa inuu Ciise yahay Wiilka mooyaane?* Rumaysadka uu Ilaah nagu siiyey dhallashadeena cusub ayaan ku helnay awood aan kaga guuleysano dunidan iyo waxyaalaha ay nagu sasabeyso oo dhan. ilaaha adduunkan waa laga guuleystay. Ku dhiiranaw in laga guuleystay oo inaba ha u sujuudin hana ka ogolaanin inuu kuugu sasabo waxyaalaha dunida ku eeg aan berito jireynin. Inaba fursad ha siinin isaga (Efesos 4:27), waxaana lagu qasbi doonaa inuu kaa cararo, maxaa yeelay awoodda iinkaaga aad leedahay ee kugu jira ayaa ka guuleysan doonaa isaga.

Rumaysad awood labanlaab leh
Rumeysadkaaga laba hab ayuu u shaqeya: Midda ugu *horeysa* wuxuu qaboojinaya awoodda cadawga ee sida falaar ololeysa ku soo food haysa noloshaada. Efesos 6:16 waxay ka hadleysa *gashaanka rumeysadka, kaasi oo aad ku demineysid falaaraha ololayaan ee oo dhan eek an sharka leh*. Midda labaad, rumeyadka wuxuu kuu aasaasaya hirar cusub oo aad Ilaah uga adegeysid ama aad noloshaada kaga muujineysid awoodda Ilaah. Rumaysadka qalbiga wuxuu keedsada wuxuu Ilaah leeyahay wuuna rumeysanaya, xataa haddii ay marxaladaha si doonista Ilaah ka duwan tilmaamayaan oo ay weliba inkirayaan dhabta qalbiga ka jirta. Rumaysadka qalbiga wuu fahansan yahay Ilaah wayna u sahlan tahay inuu aamino Erayga Ilaah. Korintooska 2aad 5:7 waa arin cad in markaan jannada galno, uu iimaankeena indha noo ahaan doono. Macnaheedu wax alla wixii aan aamino oo aan dunida ku ogolaanno, in kastoo aanan arkin, xagga si bayaan ah ayaan u arki doonnaa. Butrooska 1aad 1:8 waxay leedahay, *Isaga ma aydin arkin, waadse jaceshihiin, hadda in kastoo aydnaan arkin, wadse rumaysan tihiin, oo waxaad ku faraxdaan farxad aan la sheegi karin oo ammaan leh.* Markaan Samada galno, rumaysadkeena waxaa lagu bedeli doonaa arag dhab ah oo Ciise waxaan ku arki doonnaa si bayaan ah. Wuxuu noo ahaan doonaa mid aan arki karno oo aan taaban karno. *Rumaysadku waa xaqiiqda loo leeyahay waxyaalaha loo rajo qabo iyo hubniinta waxyaalaha aan arki karin* (Cibraaniyada 11:1); oo weliba waa xigashada la xiganayo Ilaah, Isaga la aamino oo laga rajeeyo wax alla wixii wanaag ah oo aan addeecno. Waxyaalahan oo dhan waxay ka sii socon doonaan xagga samada maxaa yeelay waa heerka rumaysadka.
Markuu Iimaanka Ilaah kugu jiro, ma ahaan doontid wax tar la'. Waa caadi oo rumeysadku wuxuu rabaa inuu helo hirar cusub oo lagu hawl galo. Wuu ogoladaan ballamada Ilaah oo wuxuu u sii riyaaqaya meela cusub. Sharaflayaasha iimaanka ee aan ka akhrineyno Cibraaniyada

cutubka 11aad, ma ahayn kuwa ugu laciifsan oo meel layskuugu aruuriyey. Waxay ahaayeen dad caadi ah oo hawla maalmeedkooda wateen. Bedelkii ay ka fikiri lahaayeen oo aa ku doodi lahaayeen dabar darrodooda, waxay xilka iska sareen awoodda Ilaah si ay ku garaan goolka ay u riyaaqayeen.
Markuu Da'uud ahaa boqorka Israa'iil, dhulkooda waa sii ballaaranayey, mar kastaba dhul cusub ayuu qabsanayey, kama uusan daaleynin inuu cadawyadiisa hawl dagaal geliyo kalana wareego dhulkooda. Rumaysadka xuduud ma yaqaano maxaa yeelay Ilaah xuduud ma leh!
Waxaa jiray boqor taarikhdii hore lagu sheegay oo ku dhigan Axdiga Hore oo nebi u tegay kaasi oo kula taliyey inuu dhawr jeer falaaro badan uu watay uu watay dhulka ku dhufto. Boqorkii saddex jeer oo keliya ayuu falaarihii dhulka ku dhuftay nebigiinna wuu xanaaqay oo wuxuu isaga ku yhidhi haddii aad shan jeer ama lix jeer dhulka ku dhufan lahayd waad ka rayni lahayd cadawgaaga oo baabi'in lahayd iyaga oo raadkooda dambe lama aragteen. Boqorkii wuxuu guushiisa ku belay rumaysad darrodiisa.
Waxaa jiray aabbe weydiyey Ciise inuu diyaar u yahay inuu wiilkiisa bogsiiyo. Ciise ayaa isaga u jawaabay oo wuxuu ku yidhi, *Haddii aad awooddi? …**Wax kasta** way u suurtoobaan kan rumeysta* (Markos 9:23).
Rumaysadka wax xaduud ah ma lahan. Waxyaalaha rumaysadka lagu hergelin karo way tiro badan yihiin. Markuu Ilaah adduunka uummayey wuxuu aadanaha ku amray inuu sii tarmo oo uu dunida qabsado. Qaynuunkan waa mid ku dhigan qalbiga qof kastoo uun cusub ah. Mid kastoo xerta ka mid ah qalbigooda wuxuu damacsan yahay una riyaaqaya inuu wax aasaaso, sii badiyo, sii balaariyo lana wareego. Ma ahan wax xun ee laakiin waa wax lagu tilmaami karo inuu yahay qaynuunka rumaysadka, kaasi uu Ilaah naftiisa dadka ku beeray. Ilaah wuxuu rabaa inaan horey u sii socono, xagga rumaysadka ka barbaarno, qabsano lana wareegno dhul cusub.

Rumaysadku Ma lahan Xuduudyo
Sanadka 1980, Ilaah wuxuu igu hogaamiyey inaan booqdo Tulsa, Oklahoma eek u taala Ameerika. Safarkaas oo dhan bilawgiisa ilaa dhamaadka wuxuu ahaa mid muucjiso ku socday! Arin la yaab leh ayey ahayd sida wakhtiga booqashadan Ilaah u barakeeyey dadkeena kale ee dhinacaasi dunida ku nool iyo weliba anigaba. Mar ayaa jirtay oo aan booqanay jaamacadda la yidhaahdo *Oral Roberts University* oo waxaan eegnay dhismooyinka jaamacaddaasi oo dhan. isla markiiba, Ilaah ayaa igula hadlay ruuxeyda, "dhinac u bax oo eeg Woqooyiga, Bariga, Galbeedka iyo Koofurta." Sidaa ayaan yeelay oo waxaan arkay taaladi baryada eek u taalay dhinaca Woqooyiga, dhismooyinka jaamacadda iyo garoonka ciyaaraha eek u yaalay xagga bariga iyo *Mabee Center* oo lahayd ilaa iyo 10,000 oo kuraas iyo Stuudhiyaha Telefishenka oo ku yaalay Galbeedka. Haddana waan leexday oo waxaan arkay cisbitaalka oo dhan, meel kale oo la yidhaahdo *City of Faith* (magaalada iimaanka), taasi uu weli dhismaheeda socday isla markaasi aan booqaneynay. Waxyaalahaas kaddib Rabbiga wuxuu igu yidhi, "Waxyaalahaas aad arkaysid oo dhan waxaan ku fulin kara hal nin oo I rumeysta."
Anoo maqlaya Rabbiga oo erayadaas igula hadlayo, wax ayaa iga dhex dilaacay. Waxyaala badan oo ka hor imaad ah ama niyadjab ah, waxyaala badan oo fikiraddaas ka soo horjeedaan iyo dad fara badan oo aan ku faraxsaneyn oo ku saleysnayeen waxyaalahaasi uu Ilaah sameyn rabo, sida uu u sameyn rabo iyo wakhtiga uu sameyn rabo waxyaalahaas way iga baraxmeen. Qalbigeyga laakiin waxaa ka buuxsameeyn rajo weyn iyo fikiradda ah inaysan jirin wax aanan suurtagal ahayn ee waa uun annaga kuwa ogolaaneyno inay waxyaalaha niyad jabka keenaan aan u hogaansanno. Wax Ilaah ka hor imaan karo ama iimaanka uu na siiyey ka hor imaan karaan ma jiraan. Waana sababta uu rumaysadk muhiim u yahay. Wuxuu soo dejinaya waxyaalaha aan ku barakoobi lahayn ee samada jiraan oo wuxuu ku soo dejinaya dhulka si aan u aragno una

adeegsano.
Samadda waxaa ka soo butaacayaan samato bixin heer sare ah, caafimaad iyo badbaado. Waxaa ka buuxaan hogaamin, difaac iyo barakooyink . Muucjisooyin iyo ficilo waweyn ayaa diyaar ka ah halkaasi. Xagga samada waxaa ka jiraan kiniisado cusub, hawla cusub iyo hawlgelinno cusub oo loogu tallagay dunida. Wax alla wuxuu baniaadmiga uu baahnaan karo waxay jiraan xagga samadda. Rumaysadku wuxuu arkaya waxyaalahan lama arkaanka ah oo wuu soo dhaweysanaya. Rooma 1:17 waxay leedahay, *Kuwa xaqa ah waxay ku noolanayaan rumaysad,* macnaha ma jiro xadad naloo dhigay. Wax alla wuxuu sheeddaanka sameynayo oo uu doonayo inuu nagu niyad jebiyo hawlaheenana ku joojiyo, rumaysadka wuxuu nagu sii dhiiri gelinaya inaanan niyadjebin oo aan horey u soconno si aan uga butaacno wax kastoo naga hor imanayaan oo aan fursado cusub ugala wareegno sheeddaanka una balaariyo banaanaha aan ku shaqeyneyno.
Ilaah wuu kula jiro mana rabo inaad isla meeshoo taagnaatid wuxuu rabaa inaad sii aamintid oo aad heer kaloo sare uga sii gudubtid doonistiisa awgeed. Si “beero cusub uu Ilaah iska leeyahay” meelo badan uga soo kobcaan, oo mid kastaba loo ekeysin karo jannada, taasi oo ay ka wada buxaan barfuunada, iyo sharaftiisa sare.
Ha rajo dhigin. Ha ogolaanin inay waxyaalaha niyajabka keena hawshaada joojiyan. Ha ogolaanin inay cabsi ku gasho. Xusuuso Erayada Ciise kula hadlay Jayras markay wax kastaba u ekayeen inay rajo jirin inaba, ***Waxba ha cabsanin; ee rumeyso uun*** (Markos 5:36).

21
Rumaysadk Dagaal ku guuleysta

Yaa boqortooyod ku qabsadya rumaysad, yaa xaqnimo ku dhaqmay, oo helay wixii laga ballanqaaday; yaa daboolay afafka libaaxyada, yaa xoog tiray abkii ololayey si uu san u gubin saddexda lagu dhex tuuray, oo ka fakaday afka seefta; oo tabar darrodiisa lagu bedelay tabar jirta; oo yaa ku awood badnaaday dagaal oo waddada ciidanka qalaad bedelay (Cibraaniyada 11:33,34).
Rumaysadku caadi, waana aasaaska, waana dagaaltan fara ciddi leh. Wuu weerara wuuna ku guleysta; wejiguu ka galaa wuuna dhex dusaa. Si joogta ah ayuu ugu sii socdaa meela cusub si uu u dagaaltamo una qabsado.
Isla markaana rumeysadku wuxuu ku saleysan yahay nasasho, iyo nabad, aaminaad iyo dulqaadasho. Kuwa badan oo xerta ka mid ah waxay fahmeen hab qaas ah oo iimaanka ku saabsan oo si qaldan ayey ku fikireen oo waxay umaleynayaan inay wada heleen wax alla wixii laga rabay inay iimaanka ka fahmaan. Dareenka noocan ah wuxuu keenaa muran markuu Ruuxa Quduuska ah uu xoogga saaro fasiraad kaloo ku saabsan rumaysadka ee ay hadda ka hore ka fikirin amaba ay inkireen addeecistiisa. Xagga waddama Scandinaviaka iyo Yurubta, Ruuxa Quduuska ah waxaa loo fasira inuu yahay mid dadka ku hogaaminayo inay ka ficilqadaan markii wax lagu sameyo – waa tilmaanta dagaalanka ee rumeysadka. Waxyaalaha aan maanta kala kulmeyno xaga ruuxiyanka waa wax mudda soo jiray oo aan ka ogolaanay sheeddaanka. Waxyaalihii caadi loo qaadan jiray labaatan sanoo la soo dhaafay, maanta caadi looma qaadan karo. Dadka badankiis, sawirka Ciise waxay u haystaan mid fasiraad badan loo yeeli karo oo weliba midabkeeda sii burburayo. Waxyaalaha lagaga wacdiyo telefishanada iyo raadiyaha waa laga dhuuqay Injiilka iyo dhabtiisa. Hawlaha iyo adeegga ee ay wadaan kiniisadaha badankood waxay ku dhaw yihiin inay si buuxda uga fugadaan Xernimada ku dhigan Axdiga Cusub. Ducooyinka laysugu imanayo waxaa laga dhigay caadi, Barashada Erayga Ilaah dood ayaa la geliyey oo waa la berxay oo nolosha masiixinimana waxaa laga dhigay mid la siman nolosha

adduunka. Marxaladaha badanna waxaa ka muuqata in jacaylka Ciise loo qabo uu qaboobay, maxaa yeelay rumaystayaasha waxay jecladeen oo ay u jilceen habka uu adduunka ku dhaqmayo. Waxay dhex jiifaan oo ay ku istareexayaan nolosha dembiga leh ee ay ka guddoomeen dunida. Waxaa iyaga jiitay hab diimeydka qaba fikiradda ah, “Ha I dhibin, fikiraddeyda ha iga xoogin, ha igu dhihin jooji dembiga, jidhkeyga dhib ha u geysanin.” Waxyaalahan oo dhan way soo galeen Masiixinimada oo waxay keneen addeecista Ilaah oo sii yaraato iyo fikirado kala duwan.
“Waayo, dadkaygii laba waxyaalood oo shar ah ayay sameeyeen, way iga tageen anigoo ah siah biyaha nool, oo waxay qoteen berkedo daldaloola oo aan innaba biyo celin karin” (Yeremyaah 2:13).
Waxyaalahan waa hogagga ay dhaqamada adduunka isku dedayaan. Ceelasha biyo ma qabaan marka idaha waxaa loo keenaya uun inay agagaarka ceelka wareegtaan, iyagoo noolol raadinayaan, iyo nabad iyo dib u xalin. Markay masiixinimada gaarto heerkaas, Ilaah mar kasta wuxuu sameynaya wax cusub. Wuxuu la imanaya nimco, naxariis iyo wanaag. Wuxuu keenaya warka wanaagsan oo wuxuu dadka la qaybsanaya uunka Ciise Masiix iyo guusha la yaabka leh uu noo guuleystay. Farriintan, Injiilka oo kaamilan, waa farriin awood heer sare eh leh. Tani waa Injiilka: rumaysadkaas ku jira hawsha kaamilan ee Ciise uu ku kaamilay iskutallaabta waxaa ku jiraan, cafiga dembiga, bogsiinta jidhka, saaridda jinniyada, guusha laga guuleysanayo dembiga iyo noolol cusub ee ku jirta nolosha caadiga ah ee awoodda Ilaah. Injiilka wuxuu caddeynaya in wanaagga Ilaah uu yahay mid aad u sareya, oo wuxuu awooda diyaarna u yahay inuu guul siiyo qayb kastoo ka tirsan nolosha kuwa ku yimadaan Isaga. Tani waa farriinta wanaagsan! Ciise wuxuu u yimid inuu na siiyo nolosha tan kaamilan. Isaga waxaa laga dhigay mid iskutallaabta ku inkaarma si aan u barakawno. Wuxuu dushiisa ku qaatay dembiyadeena iyo xaqdarrodeena si aan nimcadiisa ugu huwanno hadiyadda xaqnimadiisa. Ciise wuxuu dushiisa ku qaatay cuduradeena iyo niyadjabkeena si aan Isaga ku ahaano kuwa xagga jidhka iyo xaga maskaxdaba ka kaamilan. Nabarradiisa ayaan ku bogsanay.
Tani ayaa ah Farriinta Wanaagan: Ciise wuu ka guuleystay sheeddaanka si aan xornimo uga helno hogaanka beenta ah ee jinniyada. Farriinta Wanaagsan waxay tahay: In Ciise maskiin noo ahaaday, si aan Isaga uga helno barakada dhaqaalaha si aan u dhaqaalo gelino hawlaha wacdinta farriinta Wanaagsan ee Ilaah iyo fidinta Injiilka lagu fidinayo dunida meesha ugu fog. Injiilka wuxuu yahay: In Ilaah uu noo hayo qorshe wanaagsan midkeen walibaba. Wuxuu rabaa inaan ahaano xerta Ciise, raacno waddada uu nagu hogaaminayo, imaan ku socono oo aan aragno muucjisooyinka uu ka sameynayo qaby kastoo ka mid ah nolosheena. Injiilkan kaamilan waa jawaabta lo ohayo kuwa iimaanka ka leexdeen ee horaan runta yaqaaneen oo ay rajo la’aanta dunida habsaamisay. Injiilka waa awoodda Ilaah ee loogu talagalay Badbaadada kuwa rumeysteen oo dhan.

Rumaysadka Dagaalanka wuxuu keenaya Isbedel
Isla sida uu Ciise mucaaradnimo ugala kulmay markuu wacdinayey waxyaalahan runta ah ayaan annaguna ku waajibannahay inaan macaarad u lahaano maanta. Runtii Ciise wuu sheegay inaan macaarad heleyno. Oo sababtaas awgeed tan yaanay ahaanin wax si lama filaan ah nagu qabsaday. Isla Injiilka hal qof siinaya noolol ayaa ahaan kara mid qof kalena geeri u geysan karo 2 Korintos 2:14-16). Waxa dadka qaarkiis la ahaan karo farxad iyo raynrayn ayaa qof kale la ahaan karaan nacayb iyo cuqdad. Isla waxa qof ku hogaamin karaan iftiinka dhabta ah ee badbaadada ku helayo ayaa qof kalena ku hogaamin karaan inay damaca jidhka isu dhiibaan oo ay ku sii noolaadaan nolosha dembiga leh ee mugdi ku socodka ah. Ma jiro qof meel dhexdhexaad ah ka taagnaan karo Injiilka: waa inuu Injiilka ama si buuxda u addeeco ama uu ka soo horjeedo. Waana sababta dib uga noqoshada iimaanka ay ugu dambeysta u ahaato

macaaradnimada Ijiilka lagu inkirayo xaliyada sida ugu xoogga badan lagaga wacdinayo meelaha kulamada banaaan baxa lagu qabto.
Weligoodba way jireen Masixiin inta badan isku deyeen inay ka soo hor jedaan in laga hadlo qalbi adeegga iyo macaaradnimada madaama ay erayadan yihiin kuwa aad u culus. Saa ay tahayna, erayadan ma ahan kuwa si xun loo istecmaalay amaba naftooda xun; Waxyaalahan waa wax ku dhisan qoraalka Eebbe. Ilaah weligiis nagama ballanqaadin wakhtiyo nabad ah iyo aamusnaan ee aan ku faraxno waxyaalaha aan jacaylnahay. Wacdinta banaan baxa lagu sameeyey intooda badan waxay ahayeen xiliyo xil wareejin iyo isbedelaad ay socotay weerar iyo macaaradna lama waynin weligeed. Waa xiliyo is af garashowaa, xarbin iyo qabsasho iyo la wareegid. Waana sababta ay Baybalka uga buuxaan sawirada sida inuu qofka Masiixiga ah uu yahay mid lagu meteli karo askarta Masiixa oo wata hubka ruuxiyanka ah gelayo dagaal ruuxiyan ah. Dagaalka uu qofkaasi gelayo ma ahan mid dhulka ka yimid ee waa mid xagga sare ka imanayo; guushaas waxaa saldhig u ah guusha uu Ciise ku gaaray iskutallaabta.
Qaarkood waxay leeyihiin uma baahnin inaan dagaallanno maxaa yeelay, Ciise ayaa noo dagaaltamay. Waa run Ciise wuu noo dagaaltamay wuuna ku guuleystay. Haddaannu nahay Xerta Ciise, waxaan naloo xilsaaray qayb ah inaan ku guuleysanno oo aan la guuleysaneyno Ciise, oo ka sareysa dagaal kastoo ruuxiyan ah iyo awood kasta (Efesos 6:12). Aayadaha badanaa Kitaabka looga soo xigto waa kuwa si qaldan u fasirayaan dhabta qoraalka, waxaana sida qaldan u istecmalaan Masixiinta heer adduunka ku fikiraan kuna dhaqmaan. Wax barid kasta waa loo qaadi kara heer ka sareysa xadadkeeda. Habka loo baro inta badan waxaad ka daremeysa inay hal shey xoogga sareyso, sababtoo ah waxaa la rabaa in wax laga barto. Haddii la barayo hadiyadda Ruuxa Quduuska ah, way adagtahay in isla markaasna la baro wax ku saabsan tambuuga, dhamaadka wakhtiga, saddexnimada Ilaah lagu sharaxi karo sida Ruuxa, Wiilka iyo Aabbaha, Biyo gelinta ama baabtiiska.
Haba ahaato ee, madaama uu hal qof si aad ah u sii dhex galay markuu barayey hadiyadaha Ruuxa Quduuska ah, macnaheedu ma ahan inay xooreen rumaysadka la rumeysan yahay waxyaalaha kale madaama aanay waxba ka sheegin markay waxbariddaas wadeen. Waa isla sidaas marka laga hadlayo wax ku saabsan baridda rumaysadka dagaalka iyo dagaalada ruuxiyanka ah. Marka arinta wax ku saabsan la barayo ma ahan inaan la qiimeyneynin waxyaalaha kale sida bogsiinta, toobadkeenidda dadka, amaba magaca Ciise ma ahan in la ilawbay. Haba ahaato ee, maanta waxaa cad inay jirto baahi ah in xerta Ciise meel kastoo ay joogaanba la fahansiyo hubka ay haystaan iyo sida ay u ficilgelin lahaayeen. Haddii uu qofka diyaar u ahayn inuu wada hadal kala galo waxyaalaha ku saabsan dagaalka ruuxiyanka ah iyo waxyaalaha kale uu qofka diyaar u ahayn waxyaalahaasi oo baabi'in lahaayeen damaca jirka.

Dagaalka Rumaysadka wuxuu keena Midnimo

Ilaah wuxuu ciidankiisa u diyaarinaya maalmaha ugu dambeeya. Maalmahan waxay noqonayaan kuwa la sameyn doono banaan baxyo wax barid lagu fidinayo, laakiin waa inaanan la ilawbin inay isla maalmahan ahaan doonaan maalmo is af garasho waa xoog leh uu dhici doono. Sheeddaanka ma ogolanayo inuu fadhiisto dhinacyada uu muujiyo in laga guuleystay oo uma sacbinayo isagoo arkayo ciidamada Ilaah oo sii guuleysanayaan. In kastoo durbaba laga guuleystay, tani macnaheedu ma ahan in xabsiga lagu tuuray oo la aamusiyey. Baybalka wuxuu noo sheegaya inuu meelaha wareegayo oo sida libaax u ciyayo oo doondoonayo mid uu liqo, waana inaan ka hor tagnaa isaga oo aan fiirina sida uu ula cararayo cabsi iyo giriir (1 Butros 5:8, 9; Yacquub 4:7). Cadawga waxa uu rabo ma ahan wax kale ee wuxuu u riyaaqaya inuu inuu arko xerta oo hubkooda iska xoorayaan, iska degan fejignaan la'aan oo iyaga uun isku mashquulsan. Bedelkii aan saa yeelin lahayn waa inaan sida ka duwan ku dhaqaano. Ruuxa Ilaah wuxuu noogu

yeedhaya dagaal ruuxiyan ah. Ma ahan dagaal aan dad la galeyno ee waxaa la dagaaltameyno boqortooyada sheeddaanka oo loo baahan yahay in la burburiyo oo dhulka la dhigo. Dadka hibada ducada qabaan iyo kuwa Injiilka wacdin ku fidiyaan waa inay wada shaqeyaan ee ma ahan inay dhexdooda dagaaltamaan.

Dhacdooyinkii Yeresaalem maalinta Bentekootega, waxay ahayeen natiijada sanado badan ee diyaarin lagu jiray ee lagu sameynayey hawlaha Ciise loogu adeegayey. Taarikhda oo dhan waxaan ka arkeyna in guul kastoo lagu gaaray wacdinta Erayga ay ku imaatay duco iyo mahad naq fara badan oo laga hor mariyey dhacdadaasi. Tani waxay burburisay mucaaradnimadii ka jirtay xagga hawada ruuxiyanka oo hadda wacdiyayaalka banaanada inay u baxaan ayey Injiilka fidinayaan oo kuwa lumay ku hogaaminayaa xarada xerta Ciise Masiix, iyagoo u hogaansamayaan Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah. Ma ahan arin lagu kala xulanayo in hal shey la qaato ama kan kale laga tegayo, dhammaantoodba waa loo baahan yahay! Waana sababta uu Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah u qabo dhinac kale oo loogu yeedhayo Ruuxa Dagaalka. Waxay la mid tahay isla Ruuxa awoodda leh ee laga sharaxayo Ishacyaah 11:2

Markuu Ruuxan ku soo duldegay Samsoon, wuxuu gemay laf dhabar dameer oo waxaa ku dhinteen 1,000 Falistiin ah (Xakiinada 15:14,15). Ruuxa Ilaah oo isku dhex muujiyey rumaysad careysan waxaana lagu helay natiijo guul leh. Isla Ruuxa noocan ah wuxuu ku jiray Kaleeb, Yooshuca, Gediyon, Yefaat, Da'uud, Samu'eel, Eliyaah…; wuxuu ahaa ruux ku jiray rumeysad careysan. Tani waa kiniisad sida ciidanka askarta u careysan oo lagu magacaabi karo jidhka xerta Ciise, waxayna ka soo sara maraysa liidasho, wareer, qalbi adeeg iyo inkiraad oo waxay ahaadeen kuwa dagaalka ku xoogeysteen oo ciidamada jaho wareeriyeen" (Cibraaniyada 11:34). Maxay tahay sababta ay habkan aan ku fasireyno Ruuxa Ilaah uu muhiim u yahay? Maxaa yeelay Rabbigeenu waa mid lagu magacaabi karo askar geesi ah (Baxniintii 15:3) cadawgana wuxuu ahanaya mid mucaarad ah oo isna xoog leh. Kiniisadda waxaa loogu yeedhay inay horay u sii socoto waxayna u baahan tahay awood ay hawlaheeda horay uga sii waddo waana lagama maarmaan inay la kulanto waxyaala kale oo dhinacyada ka ciriirinayaa oo lid ku ah hor u socodkeeda. Guusha laga adduunka lagaga gaaray xagga dunida ruuxa ayaa bedeleysa keneysa isbedelka hawada ruuxa oo weliba waxay dhalineysa marxaladaha xidhiidhka Ilaah iyo u adeegiddiisa cusbooneysinayaan. Ruux dagaalama ayaa macaarad ku ah kana hor imanaya Injiilka. Rumaysadka xarbiga ku jira wuxuu nolosha shaqsiga ku dhalinaya xornimo, oo isla markaasna awoodda Ruuxa Ilaah waxay ku muuqaneysa bogsiinta la dareemayo, dib u soo celinta waxyaalihii burbureen iyo cusbooneysinta nolosha uu sheeddaanka horey u duleyey. Waa inaad fahantid hab noocan Ruuxa Quduuska ah. Way ku xoojineysa oo waxaad awoodi doontaa inaad shuqulada kan sharka leh ka baabi'isid agagaarkaaga. Waxaad ahaaneysa askariga Rabbiga waana tan uu Ilaah kugu tallo galay. Waad awoodi doontaa inaad ku tartantid tartanka ku hor yaala, waxaadna ku sameyn doontaa farxad iyo guul inta aad sii dagaaleysid dagaalka wanaagsan (1 Timoteyos 6:12).

Runtii wax kaloo ku qancin karo ma jiraan ka badan marka aad dagaal galeysid oo aad guuleysaneysid, waxaadna ogaaneysa inaad xarbi gashay farxadna ku soo baxday, waxaadna og tahay inaad xarbi gashay kuna guuleysatay waxaad u xarbineysay, waxaadna jirtay ahayd kan weeraraya waxaadna aragtay cadawga oo cagahiisa wax ka deyaya (Muujintii 2:7,11,17,26; 3:5,12,21). *Rabbiga ayaa kula jira, geesiga awoodda badanaw!* (Xakiinada 6:12). Haddaba horey u sii soco! Dib ha u noqonin! Ha cabsanin! Dibu isugu cusbooneysi Erayga nool ee Ilaah! Xusuuso halka aad ka taagan tahay guusha, laakiin ha gamin amaba ha ogolaanin in lagu khiyaaneyo. Horey ugu sii soco farxad iyo awood adigoo og in Ilaah durbaba ku siiyey guusha!

22

Qiroshada Wanaagsan

Kitaabka Quduuska ah wuxuu ka hadlaya noocya kala duwan oo qirashada ka mid ah. Waxaan aad u naqanaa qaarkood, sida tan gefka lagu qiranayo, laakiin tan loo baahan yahay inay nolosheena maalin waliba ka muuqato waa qiroshada iimaanka, amaba iimaanka aan ku noolnahay ee aan afkana ka sheegano, isla sida ay ku dhigan tahay Cibraaniyada 4:14. Qiroshada waa wax uu shaqsiga afkiisa ka sheegayo. Waa wax lagu muujinayo waxyaala ku jiran qalbiga. Butaaca waxyaalaha qalbiga ku jiraan ayuu afka ku dhawaqa sida ku dhigan Matayos 12:34. Waxaa Rooma 10:10 nagula yidhi, waxaad ku rumeysaneysa qalbigaaga oo xaq lagaaga dhigaya, oo waa afkaaga kan aad ku qiraneysid kuna badbaadeysid. Aayaddan waxaa nooga cad in waxa aad ku hadalkno ay aad muhiim u tahay!

Si aan u fahanno muhiimadda Erayga waa inaan xusuusano in nagula uumay u ekaanta Ilaah. Awoodda hadalka ayaa dadka ka duweysa xayawaanka. Waa calaamad calaamadaha ugu weyn ee muujineysa in nagula uumay u ekaanta Ilaah.

Ilaah wuu hadlaa oo markuu hadlaya wax buu uuma. *Ilaahna wuxuu yidhi, iftiin ha ahaado, iftiin ayaana ahaaday.* Eraygan aad buu uga dhex muuqdaa qaybta Baybalka ee uumista ka hadleysa (Bilawgii 1:3,6,9,11,14, 20,24,26). Ilaah wuxuu wax ku uuma erayo – isla awooddaasna wuu siiyey dadka. Annagu nafteena waxaan wax ku sameyna erayo. Bal ka feker sida daran uu wax u burburiyo markay is af garasho la'aan jirto oo weliba waxaan aragna inay erayada lagu hadlo marxaladda saxda ah ay dhiiranaan iyo niyad dhis keenaan.

Matayos 12:36 waxaan ka arkeyna in Ciise uu sheegay inaan ka xisaab bixin doono eray kastoo aan si ka fiirsasho la'aan ah aan ku hadalnay. Ilaah aad buu waxaan ku hadalno. Yacquub 3:1-12 waxay si xoog leh u sharaxeysa hawsha uu carabka qabto, isagoo u muujinaya inuu yahay sida qalabka yar ee lagu hogaamiyo doonta weyninka badan ee loo yaqaano istaarinka ama rudder, amaba sida ay dhimbil yar oo dab ah u awoodda inay duur dhan dab ku baabi'iso.

Maahmaahyadii 18:21 waxay noo sheegeysa inuu carabka leeyahay awood uu noolol ku keeno ama uu dhimasho ku keeno, oo kuwa jacaylna ama istecmaala way ka miro goosan doonaan natiijada ka soo baxeysa sida ay u istecmaleen. Waxaan arkayna inuu Ilaah tixgelinayo carabka iyo wuxuu ku hadlayo. Tan waa dhab markii la eego habka qaldan ama saxsan ee aan u istecmaalno erayadeena. Wax alla waxaan iimaankeena ku qiraneyno waa inay ka muuqdaan nolosheena.

Haddii aan xisaab celin ka sameyno waxyaalaha caadiga ah ee aan maalin waliba ku hadalno, waan niyad jabeyna maxaa yeelay inta badan waxaan ku hadalnaa waxyaala aan wanaagsaneyn sida, xamashada, iska fogeyn iyo dabiicad rumeysad darro ay ka muuqato sida "arintan ma shaqayn doonto," "maya aniga ma ahan," "ma awoodi iyo wixii la mid ah. Markaan hadalada noocan ah la xarbineyno, qiroshada iimaankeena ayaa soo dhax gelaya oo na barayo inaan caddeyno oo aan qirano waxyaalaha uu Ilaah nagu leeyahay.

"Qiroshada" ('Qirasho' afka Griigga) waxaa lagu yidhaahdaa "isla waxaas ku hadal." Markuu Ilaah nagula talinayo inaan ku adkeysano oo aan inaba ka leexanin qiroshada wanaagsan, macnaha wuxuu ka wada inaan isla waxaas nolosheena ka nidhaahno, oo aan weliba marxalad kastoo aan la kulanno kaga qirano waxyaalaha uu Eraygiisa nagu leeyahay.

Markuu Ruuxa Quduuska ah noo caddeeyo dembi nolosheena ku jira iyo rumeysasho la'aan waa inaan qirano dembiyadeena; waa inaan isla waxa uu Ilaah naga leeyahay ka nidhaahno marxaladda aan ku sugannahay. Gacan baan siineyna wuxuu ku hadlay, waan qiraneyna dembiga aan galnay waxaanna heleyna cafis.

Rumeysadku Wuxuu ku Hadla Erayo Qalbiga dhisa

Dembiyadeena oo keliya ka mahan wuxuu Ilaah rabo inaan qirano, saa ay tahayna, Ilaah wuxuu

rabaa inaan qirano. Wuxuu leeyahay waxyaala kaloo wanaagsan uu nagula hadli rabo Eraygiisa, oo markaan qirano iimaankeena, waxaan ku hadleyna isla waxyaalahaasi uu marxaladahaas ka yidhi. Laakiin meeqaa inaga mid ah oo aan ku guuleysanin arintan? Aad baan ula qabsanay qirashada dembiyadeena iyo waxyaalaha aan ku dhaqano ee aan xaqa ahayn oo taasi waxay nagu sii gudbisay inaan qirano oo keliya waxyaalaha aan umaleyno inaynan wanaagsaneyn ee aan nolsheena kaga dhaqano. Markaan sameyno waxaan ku ficiltameyna sida kuwa aanan Xerta Ciise ka mid ahayn; isla sida kuwa aanan qabin Ruuxa Ilaah oo aan wax rajo ah lahayn, kuwaasi oo uu hadalkooda yahay mid darran, qalbi dhis lahayn oo shaqsiga burburiya. Waa inaan qirano waxyaalaha uu Ilaah naga dhaadhiciyey oo dhan marxalad kastoo aan ku jirnaba.

Nebi Ibraahim ayaan ka heleyna tusaalaha ugu wanaagsan ee lagula macaamiltamo arinta noocan ah. *Ballankii Ilaah rumaysaddarro kagama uu shakiyin, laakiinse rumaysad buu ku xoogaystay, isagoo Ilaah ammaanaya oo aad u huba in wixii uu u ballanqaaday uu samayn karo* (Rooma 4:20-21). Ibraahim wuxuu helay ballantii, “Waxaad dhali doontaa wiil.” Wuu ogaa inaynan caadi ahaan suurtagal ahayn. Marxaladaha waxay ahaayeen kuwa aanan isaga gacan siineynin – isla sida ay la ahaan lahaydba qof kasta oo marxalad sidaas ah ku jira. Taas oo keliya ma ahayn, waxaa dhacday in wakhti dheer laga soo wareego intuusan Ilaah ballantiisa oofinin. Saa ay tahayna, Ibraahim kama ligliganin iimaankiisa. Inaba ma cuskanin dhibatooyinka uu ku jiray sida dhalma la’aanta, shakiga laakiin wuxuu cuskaday awoodda Ilaah iyo ballanta laga ballanqaaday. Aad bay uga dhaadhacsaneyd inuu Ilaah ficilgelin doono wax alla wuxuu ballanqaado. *Rumaysadku waa hubaasha waxyaalaha la rajeeyo, iyo xaqiiqaynta waxyaalaha aan la arkin* (Cibraaniyada 11:1). *Waayo waxaynu ku soconnaa rumaysadka ee ma aha aragga* (2 Kor 5:7). Ma ahan inaan ku ficiltanno oo keliya waxyaalaha aan maqalno, aragno ama aan hadda dareensannahay. Waa inaan cuskano ballamada Ilaah. Isla sida ay nebi Ibraahim u ahayd, waxaan qironeyna wuxuu Ilaah nagu yidhi, xataa haddii aanan arkeynin isla marka aan u baahan nahay amaba ay marxaladaha waxyaala kael muujinayaan.

Markaan afka wax ka qiraneyno waxaan ku adkeysaneyna waxyaalaha uu Ilaah naga ballanqaaday oo waxaan ka baryeyna inuu nooga dhigo waxyaala nolosheena laga dareemo. *Rumaysadka wuxuu ku yimadaa maqlidda Erayga Ilaah* (Rooma 10:17) waxaana lagu caddeynaya qirashada afka laga qiranayo. Haddaan akhrino 2 Korintos 4:13 waxay leedahay, *Waxaannu leennahay isku ruuxa ee rumaysadka, sida qoran, waan rumaysatay, taas aawadeed ayaan u hadlay; annaguna waan rumaysannaa, taas aawaddeedna waannu u hadallaa.* Tan waxay noo caddeyneysa in erayada aan ku hadalno ay ka xoog badan yihiin sida aan weligeen u maleynay. Aayadahan waxay naga waaninayaan inaanan carabkeena waxyaalaha sharka ah ku istecmaalin oo aan kheyrka ku fidino oo weliba waxay nagu dhiirigelinayaa inaan ku hadalno erayada iimaanka. Markaan Erayga Ilaah ee nagala ballanqaaday kaga dhawaaqeyno marxalad na haysato, waxaan ahaaneyna kuwa uumista kala qayb qataan Isaga, oo doonistiisa ayaa ka dhex muujineyna marxaladahaas. Erayadeena waa sida “weel,” weelkaasi oo lagu shubayo qashinka ama lagu asturayo doonista iyo awoodda Ilaah, waxannu nahay kuwa isaga la shaqeynayaan.

Haddaba, waa maxay waxa aan qiraneyno?

1. Waxyaalaha uu Ilaah noogu deeqay Masiixa ee aan ku helnay badbaadada.
2. Waxyaalaha uu Ilaah nagu adeegasaday xagga Eraygiisa iyo Ruuxiisa ee nagu beermay ka bilaabato markaan cusboonaanay uu nagu buuxiyey Ruuxiisa Quduuska ah.
3. Kuwa aan nahay markaan ka hadleyno xidhiidhka aan la leenahay Masiixa.
4. Wuxuu Ciise hadda nooga sameynayo Isagoo fadhiya gacanta midigta ah ee Ilaaha Aabbaha Qaadirka ah, meesha uu ku nool yahay ee uu si joogta ah noogu duceynayo.
5. Waxyaalaha uu Ilaah nagu oofin karo iyo waxyaalaha ay sameyn doonaan Erayadiisa aan bushumaheena ka soo bixineyno.

Waa waxyaalahan kuwa aan qirashada iimaankeena ku lifaaqeyno. Erayga Ilaah akhriso oo ka raadi ballamada aad saldhig uga dhigi kartid.
Samee liis aayadaha Kitaabka Quduuska ah ku saleysan ee aad xafideysid subax waliba. Waxay dareenkaaga ka bedeleysa waxyaala badan, maxaa yeelay waxaad maalintaada ku bilaabeysa adigoo sida muraayad aad isku eegeysid dunidana ku eegeysid isha Ilaah ama sida uu Ilaah wax kasta u arko. Ilaah ayaa rabaa inaad arintan sameysid waadna awooddaa maxaa yeelay waxaad Masiixa la fadhidaa gacanta midigta ah ee Ilaah xagga samada (Efesos 2:6) oo haddaba sababtaas awgeed ku reyrey oo ku farax inaad ku nooshahay marxalad ka duwan tan caadiga ah iyo weliba fekerad ka duwan tan aad iisu haysatay oo aad uga duwan waxyaalaha uu jidhka rabo inuu kaa dhaadhiciyo ama u ogolaatid.
Erayga Ilaah akhri oo ku ficil geli adigoo marxalad ku saleysineysid oo qiro waxaad xaq u leedahay ee uu kugu deeqay Ciise Masiix bedelkii aad wakhtiga isaga lumin lahayd waxyaalaha aad dareensantahay ama marxaladda aad hadda ku sugan tahay. Waadna arki doontaa sida ay u bedeleyso waxyaala badan oo noloshaada ku jira, waxaad ahaaneysa qof ogolaaday in doonista Ilaah la yeelo oo ay boqortooyadiisa noloshaada ku badato.

Markhaatifur ku saabsan Ballamada uu Ilaah Hergeliyey
Haddaba aan eegno sida ay “qiroshada wanaagsan” u ficilgasho: Wakhti dheer ayaan iisu diyaarinayey inaan wax barasho u aado jaamacad ku taala Ameerika oo lacag ayaan keedsaday taasi oo aan istecmaali lahaa inta aan halkaasi waxbarashada ka wado. Lacagta diyaaradda durbaba waa la bixiyey.
Maalmaha ugu dambeyey ee ka horeyeen tegitaankeyga, waxaa igu soo baxeen qarash waweyn oo lacagtooda ay ahayd in sida ugu degdegta badan loo bixiyo. Kaddib markaan wada bixiyey lacagta laygu lahaa isla markiiba waxaan fahmay inaysan jirin wax lacag ah oo ii haray oo aan safarkeyga ku aadi lahaa. Haddii aan baniaadmi ahaan ka hadlo ma aanay jirin hab aan sida ugu degdegta badan ku heli lahaa lacagta aan u baahnaa ee ku filan safarkeyga. Waxayna ila ahaatay qalad inaan deensado, isla markiiba waan fadhiistay oo waan duceystay, oo arintan waxaan hor gacanta u geliyey Ilaah. Waan hubay inuu Ilaah raali ka ahaa inaan wax barashadan aado. Waxaan soo xigsaday ballamada ku dhigan Filiboy 4:19 iyo 4:6, 7 waxaan Ilaah ku mahadiyaa inuu qoraaladaasi ay marxaladdeyda ku hadlayeen oo xaaladdeyda ayaa ku dhawaaqay si ay aayadahan saldhig iigu ahadaan.
Baahida aan qabay way caddied, laakiin waxaan iimaankeyga u qirtay Ilaah iyo maalkiisa aan dhumaneynin iyo ballamadiisa “sida ay la tahay nimcadiisa aan dhumaneynin wuu I siin doonaa wax alla waxaan uga baahanahay.” Haddaba waxaan dareemay in wax alla waxaan u baahnaa aan helay oo ay sax ahayn inaan mar dambe waxyaalahan ka welwelo waxay ahaataba.
Saacado ka bacdi, qof aan inaba waxba ka ogeyn xaaladda aan ku sugnaa ayaa ii yimid oo ii dhiibay qarash aan ku bixin lahaa dhawr shey oo ka mid ah deenta laygu lahaa, isagoo umaleynayo inaan u baahnaan karo. Runtii waan aamini wayey sida ay wax u dhacayeen. Isla maalintaasi aan duceystay ayey jawaab ii timid oo waxaa ii caddaatay in wax alla waxaan u baahanahay oo dhan aan heli doono. Bal eeg sida ay ballamada Ilaah uga wanaagsan yihiin erayada quruxsan! Waa farxadda ugu weyn ee istaahisha inaan waxyaalahan oo dhan ku nidhaahno “Haah!” iyo “Aamiin!” Tani waa qiroshada wanaagsan!

23

Awoodda Erayada lagu Hadlo

Waxaad xoog u yeeshay afka ilmaha yaryar iyo caanonuugga, waana cadaawayaashaada daraaddood, si aad u aamusiisid cadawga iyo aardoonka (Sabuurradii 8:2).

Ilaah wuxuu caleemo saaray inaan cadawgeena kaga xoog badino erayada afkeena. Erayada afkeena aad bey u qiima badan yihiin oo waxtar weyn ayey leeyihiin ka badan inta aan umaleyno. Waana sababta ay aad muhiim u yihiin. Maraha qaarkood waan yasna natiijada ka soo bixi karta erayada aan ku hadalno oo waxaan nidhaahna, "Waa uun wax aan afka ka idhi, macnaha dhab igama ahayn." Niyad jab, abaabulka wax aanan ahayn, erayo fara badan oo dhinac kasta ka wareemayo, telefishanada, wargeysyada iyo waxyaalaha la midka ah oo dhan ximin ayey ka ciyareen qiima tirka erayada. Saa ay tahayna, Ilaah wuxuu erayadeena oo dhan u eega hab qaas ah.

Ciise wuxuu Matayos 12:36 ka sheegay in aan ka jawaab bixin doonno eray kasta oo aan si macna darro ah ama ka fiirsasho la'aan aan ku hadalno. Eray kasta waa u muhiim Ciise. Waa maxay sababta? Maxaa yeelay adduunkan aan arkeyno oo dhan iyo waxa aan arkeynin oo dhan waxay ku aasaasmeen oo ay ilaa maanta ku jiraan erayada. Ilaah markuu dunida uumayey wuxuu ku uumay iimaan iyo isku halayn uu erayada cuskanayey. Wuxuu lahaa aragti dheer, qorsha oo qalbigiisa ku jireen oo uu rabay inuu arko adduunka uu uumay iyo aadanaha araggiisa lagu sameyey. Waxay ahayd inuu qofka la uumay dunida xukumo, oo weliba wuxuu ahaa inuu ahaado mid Ilaah la shaqeya oo muujiya sharafta Ilaah.

Riyada iy qorshaha uu qoyskiisa u lahaa wuxuu hergelay markuu Ilaah ballamadaasi jiritaankooda ku hadlay. Erayadiisa ayuu ku uumay samada iyo dhulka. Sabuurrada 33:9 waxay leedahay, *Waayo, isagu wuu hadlay, wayna noqotay, oo wuu amray, wayna ahaatay.* Aayadda 6aad way sii socota oo waxay leedahay *Samooyinka waxaa lagu sameeyey Rabbiga eraygiisa, oo guutooyinkooda oo dhanna waxaa lagu uumay neefta afkiisa.* Erayada Ilaah waa ruux waana noolol, mar alla markuu ku hadlona, noolol ayaa aasaasmeysa.

Erayada Ilaah waa waxa ay ku jirto awooddiisa. Cibraaniyada 1:3 waxay sheegeysa in Ciise, kan ah Wiilka Ilaah, wuu ku barbaarinayo eraygiisa awoodda badan. Baybalka wuxuu sheegaya inuu Ilaah baniaadmiga ku uumay araggiisa, ee weliba u ekaantiisa. Inta uu xukumayo oo uu u talinayo uunka, baniaadmigu waa inuu u ahaado mid Ilaah dunida uga muuqanayo. Sidee buu Ilaah wax u hogaamiya? Erayadiisa ayuu ku hogaamiya! Sidee buu baniaadmigu muddo hogaanka u haynaya? Erayada! Sababtan awgeed erayadeena aad iyo aad bey u awood badan yihiin – sida sahlan oo aan u qaadanno si ka weyn ayey ku qiimo badan yihiin. Korintooska 2aad 4:13 waxay leedahay: *"Waan rumeysanahay sababtaas awgeed waan hadlay."Isla ruuxaas lagu rumaystay ayaan annaguna aaminsannahay oo waan ku hadleyna.* Waxa aad ku hadleysid waxay ku xidhiidhsan yihiin iimaankaaga ka badan inta ay ku xidhiidhsan yihiin waxyaalaha aad fahmeysid qaarkood. Intaan dunida ku noolnahay waxaan jawaab u heleyna ducooyinkeena, muucjisooyin ayaan heleyna, marxaladaha oo bedelma iyo guul aan ku guuleysaneyno weerarka uu cadawga na weerarayo, iimaankeena ayaa weynanaya (Rooma 12:3). Laakiin iimaanku ama rumeysadku si joogta ah uma fejigno. Markuu rumeysadka ahaado mid ficil gala, waxaa ka soo baxaya awoodda Ilaah oo muucjisooyin ayaa dhacayaan.

Masuuliyadda joogtada ah ee Qiroshadeena

Inta aad afkaaga ku qiraneysid ayaa awoodda Ilaah la sii daynaya, rumeysad iyo qalbigaaga oo si daacad ah Ilaah u go'o ayey waxyaalahaas ku ahanayaa oo wax alla wuxuu Ilaah marxalad ka sheegay isla sidaas ayey ahanayaan xataa intaanan waxaasi la arkin. Markuu Erayga Ilaah qalbigaada ka taabto arin ku saabsan marxalad qaas ah, dhibaato ama baahi kastoo ay tahayba,

waxa aad qalbigaada ka dareentay ee uu Erayga Ilaah kugu dhaliyey isla sidaas ayey ku dhamaan doontaa.
Nebi Ibraahim xaqiiqda noocan ah ayuu lahaa. In kastoo ay jidhkiisa, marxaladahiisa, saaxibadiisa, xaaskiisa ay dhammaan la wada hadleen, oo ay ku yidhaahdeen sida ay u suurtoobeynin inuu dhallo wiil, laakiin isagu wuu hubay inuu heli doono wiil. Qumaati ayey uga dhaadhacsaneyd inay ahaan doonto isla sida uu Ilaah ku hadlay, in kastoo ay marxaladaha ku hareersanaa ay tilmaan kale muujinayeen. *Ballankii Ilaah rumaysaddarro kagama uu shakiyin, laakiinse rumaysad buu ku xoogaystay, isagoo Ilaah ammaanaya oo **aad u huba** in wixii uu u ballanqaaday uu samayn karo* (Rooma 4:20, 21).
Markuu Ilaah hadlo, rumeysadka ballamadiisa ku jira wuu barbaara. Rumeysadka qalbiga ku jira wuxuu ahanaya mid ay qumaati uga dhaadhacsan tahay inay ahaan doonto isla sida uu Ilaah yidhi. Afka wuxuu ku hadli doonaa waxyaalaha ka soo butaceen qalbiga. Waana sababta uu Bawlos Korintooska 2aad 4:13 uga leeyahay, *Waan rumeysanahay sababtaas awgeed waan hadlay.* Waa maxay waxyaalaha aan ka hadleyno? Butrooska 1aad 4:11 waxay na leedahay, *Hadduu qof hadlayo waa inuu u hadlo sida isagoo ku hadlayo erayada Ilaah.* Waxaan ku hadleyna wuxuu Erayga Ilaah leeyahay markaan sidaa sameynana ballamada Ilaah ee ku saabsan marxaladdaas waxaa lagu ficil gelinaya ama lagu oofinaya awood. Markuu erayga Ilaah carabka noo saaran yahay, awooddiisa aan leexashada lahayn waxay sameyneysa muucjisooyin. Rooma 10:10 waxay leedahay, *Waayo, qalbiga wax baa laga rumaystaa xagga xaqnimada, afkana wax baa laga qirtaa xagga badbaadinta.* Isla sida aad ku gashay boqortooyada Ilaah ayaad noloshana kaga dhaqmeysa. Qiroshada bushumahaaga waxay butaacinayaan awoodda Ilaah ee ku saleysan badbaadada, waxaana kaloo ka ku jiraan xorneynta dadka laga xoreynayo sheeddaanka, difaacidda, asturidda, bogsiinta iyo maskax deganansho leh. Waana waxyaalaha lagu macnayn karo badbaadada.
Midkeen waliba wuxuu qaba dhibatooyin uu nolosha kala kulmo. Falaaraha ololayaan ee ibliiska waxaa lagu gemaya cid waliba. Markay dhibatooyin nala soo dersaan, waxaa inta badan sabab u ah ibliiska ayaa ina jecleysiyey inaan ku hadalno waxyaalaha uu ka hadlo dhibatooyinkeena, bedelkii aan ka hadli lahayn waxyaalaha uu Ilaah yidhi, taas oo ah xalka keliya ee aan ku ceebeyn karno ibliiska.
Ibliiska wuxuu og yahay inaan muddo xukumaadda ku haysan doonno sida boqor oo weliba wuxuu og yahay inaan marxaladaha oo dhan kaga guuleysan doonno erayada Ilaah. Waana sababta uu ugu degdegayo inuu afkaada ka buuxiyo erayada shakiga iyo rumeysad darroda, niyad jabka, cabsida, cudurrada, nacaybka, hinaaska iyo dul ka xagashada. Haddii aad waxyaalahan si joogta ah ugu dhaqantid noloshaada, awoodda Ilaah way ka xirmeysa noloshaada oo waxaad fursad u baneysay sheeddaanka waadna u fasaxday inuu kaa dhigto warshadda uu waxyaalahaasi sharka ah ku sameynayo hareerahaaga oo dhanna ka buuxinayo. Wuu garanaya erayada uunka cusub iyo sharaxaadda leh iyo awoodda ku jirta markaad ku hadashid kheyrka. Wuxuuna erayadaasi sharka ah saldhig uga dhiganaya kuwa uu ku fidiyo boqortooyadiisa si uu u sii balaariyo hawlihiisa sharka ah.

Erayada waxay leeyihiin Awood ay ku Bedelaan Marxaladaha

Carabka wuxuu leeyahay awoodda nolosha iyo dhimashada, kuwa jacaylna (ama istecmaala) way ka midho goosan doonaa sida ku dhigan Maahmaahyadii 18:21.
Erayada waa “weelal” ay ku jiraan nolosha ama dhimashada waana annaga kuwa go’aanka kama dambeysta ah leh oo waxay rabaan bushumahooda marin karaan. Ilaah wuxuu rabaa afkaaga inuu ka buuxsamo erayadiisa si ay u ahadaan awood la xigsan karo *si loo aamusiyo cadawga iyo kuwa*

aargudashada leh (Sabuurrada 8:2). Inta uu Erayga Ilaah afkaaga ka soo baxayo wuxuu sii bedelaya marxaladaha ku haysta. Dad badan ayaa ka xanaaqa arinta oo waxay yidhaahdaan, "sidee buu eray keliya wax u bedelaya? Lama sameyn karo mise maxay kula tahay?" Haah waa la sameyn kara, maxaa yeelay "ma ahan oo keliya erayo caadi ah" afkaaga ka soo baxayaan. Erayada Ilaah ee awoodda badan ayaa ah kuwa afkaaga ka soo baxayaan inta aad rumeysad mise iimaan ku hadleysid oo aad kheyrka Rabbiga sheegeysid. Waxaa la siiyey isla awoodda ku jirtay erayga uu Ilaah wax kasta ku uumay markuu Asaga naftiisa hadlayey.

Markos 11:23, Ciise wuxuu ka hadlaya awoodda erayada lagu hadlo. Haddii ay marxaladaha aad nolosha kala xarbineysid kula weyn yihiin sida "buurta" haddii ay jiraan dhibatooyin aad ula liidatay, Ciise wuxuu kugu leeyahay, *Runtii waxaan idinku leeyahay, hadduu qof uun* (macnaha qof kastay ahaan karta ee ma ahan dad qaas ah) *uu buurtan ku* ***yidhaahdo*** (haddaba aad u fiirso Ciise wuxuu leeyahay *ku* ee ma *ka* inta badan waxaan ognahay inaan dhibatooyinkeena ka hadalno ee kuma hadalno). "*Kac oo badda isku tuur," oo uu qalbigiisa ka shakinin laakiin uu rumeysto in wax kastoo ku hadlo ay noqonayan, qofkaasi waa loo yeeli doonaa.* Fasiraadda qaarkiis waxay yidhaahdaan ama ay ku fasireen erayadaas, "wuu heli doonaa wax alla wuxuu yidhaahdo".

Aayad tan garab socota ee laga helo Luukos 17:6, Ciise wuxuu ka hadlaya geedka Khardal oo masaalka kagama hadlayo buur. Laakiin wuxuu istecmalaya isla habkii isagoo leh waa inaan geedka ku *amarno* in lagu beero badda dhexdeeda *ilaa uu naga amar qaato*. Waa maxay wuxuu Ciise ka hadlayo? Wuxuu noo sheegaya arima dhab ah oo aa nolosha kala kulanno sida buurta, geedka iyo wixii la midka ah ee lagu macnayn karo marxaladaha lidka nagu ah *way naga amar qaadan doonaan.* Haddii aan si kale u sharaxno, marxaladaha waa inay bedelmaan markaan ku hadalno erayada Ilaah ee awoodda leh "buuraha" nolosheena ku jira way naga amar qaadan doonaan. Awoodda Ilaah ayaa la sii daynaya si uu muucjisooyin u sameyo markaad ballamadiisa ku dul hadashid marxalad kastoo lid kugu ah.

Waxaan u baranay inay marxaladaha lidka nagu ah "nagula hadlaan" oo ay noo muujiyan sida ay suurtagalka u ahayn in marxaladdaasi la bedelo. Waan addeecnay codadkaasi oo ka dhiganay habka aan noolol maalmeydkeena kaga noolnahay. Laakiin Ciise wuxuu kugu casuumaya inaad marxaladaha kugu hareersan ku hadashid Erayga Ilaah wuxuuna kuu xaqiijinaya inay marxaladahaasi addeeci doonaan codkas. Waa maxay sababtu? Maxaa yeelay arliga oo dhan waxaa lagu uumay oo ilaa maanta lagu ilaalinaya Eraygii uu Ilaah ku hadlay. Erayga Ilaah waxaa ku jirta awood wax kasta bedeleyso.

Noloshaada ku hogaami Erayada Ilaah

Haddii aan si degdeg ah kor meyr ku sameyno, Baybalka wuxuu nagu dhiirigelinaya inaanan rumaysadkeena jilcinin ee aan ku adkeysano kuna maragfurno – "qiroshada wanaagsan" (Cibraaniyada 10:23,4:14; 1 Timoteyos 6:13). *Qiroshada* macnaheedu waxaa weyaan *ku celcelinta isla shey.* Waa inaan ku hadalno isla waxa uu Ilaah ku hadlayo marxaladaha si kastoo ay xaaladda guud u muujineynin waxaas iyo wax la mid ah toona. Isla sida aan sameyneyno, waxaan dhibka na haysto ku hadleyna xal Ilaahna wuu awoodaa inuu muucjiso sameyo. Markaan qiraneyno wuxuu Ilaah ka sheegay dhib kastoo jira bedelkii aan xoogga saari lahayn wuxuu ibliiska nagu dhego hadlayo, oo aan ku adkeysano hadalka Ilaah, annagoo og in kan ballanta na siiyey uu yahay aamin, erayga Ilaah ee afkeena ka soo baxaya ayaa aamusinaya cadawga. Awoodda Ilaah ayaa la sii deyn doonaa "buurta" ina hor taalana way naga hor dhaqaaqi doontaa. Sababtaas awgeed, qof kastoo xerta Ciise ka mid ah waa inuu dhawro carabkiisa asturana daahirsanaantiisa. Yacquub 3:2 waxay qoreysa, *Waayo, dhammaanteen wax badan baynu ku gafnaa. Haddii nin* ***ku gafi waayo*** *hadalka, kaasu waa nin kaamil ah, wuuna xakamayn karaa*

jidhka o dhan. Adigaa ah ninka diyaaradda wada, carabkaaguna, qaybtaasi yar e jidhkaaga ka tirsan waa qaybta diyaaradda hogaamineysa ee aad istecmaaleysid.
Erayada aad ku hadleysid waxay wax ku dhalinayaan dadka iyo adiguba oo weliba inta aad ku khiyaaseysid in ka badan. Sababtaas awgeed, si taxadir leh ku hadal! Qofna si macno darro ah ha uga hadlin. Iska ilaali xamashada, hinaaska, iyo waxyaalaha kale ee la midka ah ee adiga iyo dadka kale ka dhigayaan kuwa uu ibliiska adeegsado oo noloshiina ku burburiyo. Erayga Ilaah si rumeysad leh uu jacayl ku jiro ku hadal, awooddiisana waa lagu xoreyn doonaa noloshaada iyo agagaarkaaguba oo waxaad ahaan doontaa qof dadka kale barako u ah meel alla meeshaad aaddibba.
"Rumaysadka wuxuu ku yimadaa maqlidda farriinta." Macnaha rumeysadu wuu barbaaraya xataa markaad is maqashid adigoo erayga Ilaah cod sare ku dhawaaqeysid. Marka ugu horeyso sheeddaanka wuxuu tan kaaga dhigaya mid adag, in loo hawl galo ay tahay oo aan ahayn wax uu Ilaah raali ka yahay. Haba ahaate ee, inta aad si aamin ah ku dhawaaqeysid Erayga Ilaah, rumeysadka wuu ku butaacaya qalbigaaga ilaa aad ka fahantid inay wax kasta ahaan doonaan isla sida uu Ilaah ku hadlay adna aad ku hadashay. *Marka ugu horeysa waxaad "kuk hadleysa iimaan" dabadeetana waxay "ku ficil galeysa iimaan."* Runta dhuuxa Erayga Ilaah ku jirta ayaa ka soo butaaci doonaa ruuxaaga oo dhali doonaa natiyooyin aan caadi ahayn. Erayga Ilaah ayaa fahan iyo ogolaansho kugu beeri doonaa doonista qalbigaaga si aa ku fahantid kan aad ku tahay xidhiidhka aa la leedahay Ciise, waxa aad ku heshay Asaga, waxa aad ku sameyn kartid xidhiidhka aad Asaga la leedahay. Baniaadminimada kugu jirta waxay ahaaneysa mid firfircoon, kan awoodda badan ee kugu jira ayaa hogaanka la wareegayo oo kan dunida ku jirana wuu carari doonaa!

Prayer
Waayo, innagu lama legdanno bini-aadan, laakiinse waxaynu la legdannaa kuwa madaxda ah iyo kuwa amarka leh iyo taliyayaasha dunida gudcurka ah iyo ruuxyada sharka ah oo samooyinka ku jira(Ephesians 6:12).

24
Awoodda ku jirta Magaca Ciise
Ciise markuu dunida joogay dadka way la yaabeen wax bariddiisa maxaa yeelay wuxuu wax ubarayey sida mid awood leh wuu ka duwanaa macalinka sharciga sida ay ku dhigan tahay Markos 1:22.
Erayga halkan lagu macneyey ee u dhigma awood ee afka griigga waa *exousia*. Ciise wuxuu la yimid awood wuxuuna ku hadlayey hadal awood wata. Maxay ahayd awoodda la siiyey? Awoodda xil saarka! Waxaa Asaga u xilsaaray inuu hadlo Aabbaha oo weliba wuxuu ku ficiltamayey magaca Aabbaha iyo magaciisaba.
Aabbaha wuxuu isku muujiyey Wiilka oo wax kastoo uu Wiilka sameyey kuna hadlay waxay ahayeen isla waxyaalaha uu Aabbaha raali ka haa (Cibraaniyada 10:7). Ciise isagoo ah danjiraha Ilaah awood buu leeyahay uu ugu doodo waddankiisa, sababtaas awgeed Ciise wuxuu lahaa awood uu ugu hadlo Boqortooyada Ilaah.
Haba ahaato ee, ma ahan oo keliya inuu si awood leh ku hadlay; wuxuu ku ficiltamay hab awood leh. Waxaa jirtay mar uu macbudka galay uu weerar kala kulmay ibliiska. Nin ruuxaani wasakh ah qabay ayaa qayliyey oo yidhi, *Maxaa inoo dhexaya, Ciise reer Naasaredow? Ma waxaad u*

timid inaad na baabbi'iso? Anigu waa ku garanayaa kii aad tahay Kan Quduuska ah ee Ilaah. Ciise baa canaantay oo ku yidhi, Aamus oo ka soo bax. Goortii jinnigii wasakhda lahaa gilgilay oo cod weyn ku qayliyey, ayuu ka soo baxay (Markos 1:24-26).
Dhacdadan noogula muujiyey ninka jinniyada wasakhda ah qabay iyo sida uu Ilaah isaga u badbaadiyey waxay ahayd mid ka dhex dhacday "kiniisadda," oo *Kulligoodba ayay la wada yaabeen, sidaa aawadeed iyaga dhexdooda way isweyddiiyeen oo yidhaahdeen, waa maxay waxani? Ma wax barid cusub baa? Xataa jinniyadii wasakhda lahayd amar buu ku amraa, wayna yeelaan"* (Markos 1:27).

Erayada Awoodda leh
Matayos 8:5-10, Ciise ayaa la kulmay boqol utaliye wiilkiisa bukay. Boqol utaliyihii ayaa Ciise ka codsaday inuu wiilkiisa ku bogsiiyo *hale ray oo afkiisa ka soo baxa.* Boqol utaliyahan wuxuu ka tirsanaa ciidanka marka wuu garanayey awoodda ku jirta hadalka afka laga yidhaahdo. Erayada noocaas ah waa amar bixin, amaraduna waa la addeecaa. Wuxuu ogaa in hadduu Ciise amarkaas bixiyo, ay durbaba jiradaasi ka dhaqaaqi doonto kana amar qaadan doonto Ciise. Ciise wuxuu taasi ugu yeedhay rumeysad heer sare ah (Matayos 8:10).

Maalintaas makhribkii intuu Ciise duceynayey oo uu dadka jinniyada wasakhda ah ka saarayey, *wuxuu ruuxyadaas ku saarayey eray* (Matayos 8:16). Awood ayaa ku jirtay erayadiisa maxaa yeelay waxay ahayeen kuwa Ilaah. Jirrooyinka iyo jinniyada waxay ku qasbanayeen inay ka amar qataan Asaga markuu ku amro inay joojiyaan hawlaha ay ka dhex hayaan weelkan Ilaah maxaa yeelay wuxuu xagga samada kala yimid amar la soo siiyey.
Boqortooyada Ilaah ayaa soo degatay oo dadkiina way daremeen markay arkeen jinniyada oo cararayaan. Faarisiinta way aamin wayee inuu Ciise awood sare kala yimid xagga samada taasi uu ka helay Aabbihiis. Waxay ku murmayeen inuu ahaa Belsebuul, kan ah midka ugu wada weyn jinniyada, kaasi uu ku fiijinayey jinniyada iyo ruuxyada wasakhda leh. Tan Ciise wuxuu ugu jawaabay: *Laakiin haddaan jinniyada ku saaro farta Ilaah, waxaa idiin timid boqortooyada Ilaah* (Lukos 11:20). Meesha ay boqortooyada Ilaah ka jirto waxaad kala kulmeysa awood iyo amar sare – iyo awoodaha kale oo dhan, kuwa sharka leh iyo ruuxyada wasakhda leh waa inay jilciyaan amaradooda.
Inta uu Ciise barayey oo si bayaan ah dadka u tusinayey boqortooyada Ilaah, isla markaana wuxuu xerta sii barayey una caleemo saarayey inay sameyaan isla waxyaalahaas uu sameynayey. Wuu u yeedhay iyaga oo *wuxuu iyaga siiyey amar ay ruuxyada wasakhda leh ku bixiyaan oo ay weliba ku bogsiyaan cudur kasta iyo weliba jirro kasta* (Matayos 10:1).
Ciise wuxuu xertiisa ku amray inay sameyaan isla waxyaalahaas uu Asaguba sameyey. Wuxuu iyaga u caleemo saaray ma ahan keliya inay sii fidiyaan waxyaalaha barakada leh ee uu sameeyey Sayidkooda , oo weliba ma ahayn inay dadka u sheegaan inuu dadka xaggiisa ugu wada yeedhayo; laakiin wuxuu diray iyagoo awood qabaan iyo amar ay Asaga ka heleen inay ku ficil geliyaan wax kastoo uu Asagu sameyey.
Luukos 10 waxaan ka arkeyna Ciise inuusan dirin oo keliya 12ka xerta ahayeen laakiin waxaa kaloo uu adeejiyey toddobaatan kale. Iyagoo si farxad leh hawlahooda kaga soo laabanayaan waxay yidhaahdeen, *Rabbiyow, xataa ibliiska ayaa magacaada nagu addeecaya* (Luukos 10:17). Waxay fahmeen in markay baxeen oo ay hawl galeen iyagoo amarka iyo awoodda Ciise ku socdaan, isla waxyaalihii ayaa dheceen sida iyadoo uu Ciise naftiisa halkaa joogay. Markuu Ciise jinniyada ku saaray Eray oo keliya, durbaba way cararayeen. Markay xertiina magaca Ciise ku amreen inay jinniyada ka baxaan dadka ay duleysanayeen oo cararaanna way addeecayeen. Waxay ku qasbanayeen inay addeecaan awoodda sare ee ay istaxmili wayeen. Xerta awooddan uma ahayn mid ay iska sameysteen ama ay ku kibri kareen. Waxay ahayd wax uu Ciise iyaga ku

deeqay, maxaa yeelay wuxuu iyaga siiyey awood iyo xaq ay magaciisa ku istecmalaan.
Isla sida laguu siini karo waraaq amar ku siineysa ama awoodda wakiilka aad qof uga heli karti (tusaale ahaan uu kugu amray inaad akaunka uu baanka ku leeyahay wax uga hawl gelisid), isla sidaas ayey xerta amarkaas uga heleen Ciise. Amarka lagu siiyey waa qoraal la saxiisay oo amar iyo awood kasta ku siinaya adiga wadatid inaad wax kasta ku fulin kartid. Waxay la mid tahay in qofka saxiisay uu jidh ahaan halkaas joogo oo wax kastoo uu leeyahay ama uu yahay waxaa metelayaan magaciisa.

Magaca Ciise macnahiisa waa Badbaado

Axdige Hore waxaa ku jiraan wax barid fara badan oo ku saleysan magacda Ilaah. Magaciisa wuxuu ku saleysan yahay awoodahiisa. Tusaale ahaan, markuu iisu muujiyey inuu yahay Rabbiga bogsiintaada, macnaha diyaar buu u yahay wuuna awooda inuu ku bogsiiyo. Habkiisa iyo doonistiisa waxaa lagu muujinaya Magaciisa. Magacda kala duwan ee Ilaah oo dhan eek u jiran Axdiga Hore waxaa lagu soo koobay hal magac oo Axdiga Cusub ku jira oo ah, *Magaca Ciise.*
Magaca Ciise (Yeshuuca) waxaa afka Cibraaniga lagu macnayn kara, “Badbaado.” Badbaadadan waxaa ka mid ah wax alla wuxuu Ilaah ku muujiyey Axdiga magacdiisa. Waxaa kaloo ku jiraan wax alla wuxuu Ciise ku hadlay iyo waxyaalaha uu ku ficiltamay oo dhan. Waa badbaado kaamilan oo taabaneysa qayb kastoo nolosha ka mid ah. Badbaadadan waxay ku saleysan tahay Magaca Ciise, oo sababtaas awgeed mid alla kii ku dhawaaqa magaca Rabbiga waa la badbaadin doonaa (Rooma 10:13). Magaca Ciise wuxuu muujinaya in Ilaah nala jiro; waa Ilaah naftiisa ka ka dambeya magacaasi oo awoodda siinayo. Markaad istecmaashid, waxaad meteleysa Ciise, kaasi oo weligiisba kula jira oo kaaga dhex shaqeynayo magaciisa.
Intay xerta iyagoo farxad leh soo laabanayeen ayuu Ciise iyaga ku yidhi, *waxaan idin siiyey amar aad masaska iyo daba qalooca kaga istaagtaan, kana awoodda cadawga; ma jiraan wax dhib idiin geysan doonaan* (Lukos 10:19). Ciise wuxuu xerta u xilsaaray inay amar kasta iyo awood kasta u lahadaan ka guuleysashada cadawga. Erayga luuqadda Griigta lagu yidhaahdo *dynamis* kaasi oo la mid ah awood ama wax tar, waa isla erayga laga istecmaalay Faalimaha Rasuullada 1:8 meesha uu Ciise ka leeyahay, *Laakiinse waxaad heli doontaan xoog markii Ruuxa Quduuska ahi idinku soo dego; oo markhaatiyaal ayaad iiga noqon doontaan Yeruusaalem, iyo Yahuudiya oo dhan, iyo Samaariya, iyo meesha dunida ugu fog.*
Si kale markaan u eegno Ciise wuxuu leeyahay, “waxaan idin siiyey awood aad kaga guuleysataan awood kasta iyo wax tar kastoo uu leeyahay sheeddaanka. Saa ay tahayna awood aad u sii weynna wuxuu geliyey difaaca lagaaga difaacayo weerarka uu kugu hayo, waxaa kuu sii dheer inaad awood u leedahay oo aad amarkaas lagu siiyey sii gudbin kartid.” Amar aad u sareyo ayaan ka helnay Ciise, kaasi oo na siinayo faa’ido weyn oo aan kaga awood badan nahay cadawga – laakiin amarkaas waa inaan ku hergelina Magaciisa.
Haddaanan istecmaalin Magaca Ciise, sheeddaanka ayaa guuleysanaya, isla sida uu Bawlos ka leeyahay Korintoska 2aad 2:11 *Si uusan sheeddaanka* ***nooga faa’ideysanin.*** Ilaah ma rabo inuu sheeddaanka kaa faa’ideysto mana rabo inuu ku khiyaano oo noloshaada burburiyo.
Runtan ku saabsan amarkan uu Ciise magaciisa nagu siiyey waa shey uu sheeddaanka isku deyay inuu naga qariyo awliyadihiisa si uu uga adkaado iyaga oo uu hawlaha Ilaah ee dunida ka jiraan habka xaqa ah uga leexiyo. Waana sababta ay markay xerta soo laabteen oo ay ka war bixiyeen waxyaalaha la yaabka leh ee ay Magaca Ciise ku sameyeen sida ku dhigan Lukos 10:21 waxay leedahay, *Saacaddaas qudheeda ayuu Ruuxa Quduuska ah ku reyreeyey oo yidhi, Waan kugu mahadnaqayaa, Aabbow, Rabbiga samada iyo dhulkow, waayo, waxyaalahan ayaad kuwa caqliga iyo garashada leh ka qarisay, oo waxaad u muujisay ilmo yaryar. Haah, Aabbow, waayo,*

sidaas ayaa kaa farxisay.
Tani waa maxay micnaheedu? *Waxay Ciise siineysa farxad badan markuu ogyahay inay awooddeena ku imaatay magaciisa oo aan ku burburineyno boqortooyada sheeddaanka oo aan weliba kaga guuleysaneyno awooddiisa.* Tani waa run lagama maarmaan ah waajibna ku ah in mid kastoo Xerta Ciise ka tirsan uu ogaado. Waa uun kuwa xagga iimaankooda carruur ka ah kuwa sidaa yeeli karaan. Waa uun kuwa qalbigooda oo dhan ugu hogaansamayaan Ciise oo is hooseysinayaan kuwa amarakan iyo awooddan heli karaan. Kuwa kibraan oo umaleynayaan inay awooddooda iyo amarkooda ku guuleysanayaan ma helayaan. Waxay ahanayaan sida Faarrisiinta iyo kuwa kale oo soo xigtaan kuna doodaan qoraalka, ee aan laakiin wax awood ah lahayn amaba aanan inaba caawin karin dadka.

Amar La siiyey Mid kastoo Xerta ka mid
Intuusan samada ku laabanin, Ciise wuxuu amarkiisa iyo awooddiisa oo dhan ku deeqay xmid kastoo rumeystay. Ma ahayn wax loogu talagalay kuwa qaas ah oo xerta ka mid ah laakiin midkood waliba wuu helay. Markos 16:17,18, Ciise wuxuu ka leeyahay sida tan, *ACalaamooyinkanna **ayaa** la socon doona **kuwa rumaysta**. Magacayga ayay jinniyo ku saari doonaan, afaf cuscusubna ayay ku hadli doonaan, abeesooyin ayay qaadi doonaan, oo hadday cabbaan wax lagu dhimanayo waxba ma yeeli doono, gacmo ayay kuwii buka dul saari doonaan, wayna bogsan doonaan.*
Kuwani waxay ahayeen erayada ugu dambeyey uu Ciise xertiisa kula hadlay sadaas awgeed aad ayay u qiimeynayeen. Tan waa amarka iyo caleema saarka ugu heerka sareyey oo looga baahan yahay inuu mid kastoo xerta Ciise ka mid ah addeeco.
Farriintan waxaan ka fahmeyna inuu Ciise na siiyey hubka aan u baahannahay ee aan ku fidineyno Injiilka oo aan dadka ku hogaamineyno Boqortooyada Ilaah: Magaciisa, Magaca Ciise Masiix waa mid la siiyey mid kastoo ka mid ah Xerta. Waa inaan fahanno in Magaca Ciise uu leeyahay macna ka weyn in ducooyinka lagu soo kobo. Waa lacag midda ugu xoogga badan ee uu Aabbaha ku hayo xagga samada waana magaca ay ka cabsanayaan amarada iyo awoodaha ugu sareyaan oo dhan. Waa magaca inoo caddeynayo inuu Ilaah nala jiro. Waa magaca sheeddaanka xusuusinayo ficilkii ka dhacay iskutallaabta; sida uu Ciise dhimashadiisa iyo sara kaciisa uga guuleystay sheeddaanka ugana qaaday hubka uu haystay oo dhan. Waa Magaca ka sareyo magac kasta; waa magaca keliya ee uu Aabbaha maqlo oo ducooyinkaaga looga jawaabo. Magacan wax kastoo jinniyada ku lifaaqan oo noloshaada ku jiraan way ka cararayaan, marxaladaha aan wanaagsanayn waa la saxaya, guulaha waa lagu helaya.
Istecmaal amarka iyo awoodda uu Ciise ku siiyey. Cararsii cadawga! Markaad aragtid wuxuu magaca Ciise sameyn karo, rumeysadkaaga wuu xoogeysanaya oo si xoog leh oo dhiiranaan ku jirto ayuu u istecmaali doonaa magaca Ciise marxalad kastoo lagu jiraba. La yaab male markuu Yooxanaa nagu dhiiri gelinayo erayada ah, *Oo kanu waa qaynuunkiisa, kaasoo ah inaynu rumaysanno magaca Wiilkiisa Ciise Masiix ah, oo aynu isjeclaanno, siduu qaynuunka inoo siiyey.* (1 Yooxanaa 3:23).

25
Ducada Rumaysadka leh
Oo rumaysad la’aan way adag tahay ka farxinta Ilaah, sababtoo ah mid kastoo Asaga u yimaada waa inuu horta rumaysan yahay inuu Ilaah jiro oo weliba fahansan yahay inuu Ilaah u abaal marinayo qof kastoo Asaga addeeca oo qalbigiisa oo dhan ku doondoona (Cibraaniyada 11:6).

Rumaysadku waa *aasaaska* nolosha qof kastoo xerta Ciise ah sidaas daraaddeed waa in mid kastoo xerta Ciise ku soo biira la baro wax ku saabsan rumaysadka. Ilaah wuxuu sheegay inuu rumaysadku Asaga ka farxiyo. Wuxuu rabaa in ducooyinkaaga iyo baryooyinkaaga laga wada jawaabo. Ma rabo inaad uun si joogta ah u duceysatid jawaab la'aan, hase yeeshee, wuxuu rabaa inaad ku duceysatid hab uu kaga jawaabi karo ducooyinkaaga. Waana sababta ay ducadu u ahayn sheyga wax kasta ugu muhiimsan ama loogu yeedhi karo dhuuxa nolosha xerta Ciise. Markaad eegtid ducooyinka aad duceysato, iyo weliba kuwa ay dadka kale duceystaan, waxaad shaahid ka ahaan karta in ducooyinkaas badankood laga jawaabin. Waxaa suurtagal ah inaad maqashay boqolaal qof oo duceysanayaan oo aad laakiin aragtay natiijooyin faro ku tiris ah. Bal haddana dib u eeg waxay aayaddan leedahay; *Oo rumaysad la'aan suurtagal ma ahan in Ilaah laga farxiyo, maxaa yeelay mid kastoo Asaga u yimaada waa inuu rumaysanyahay inuu Ilaah jiro.* Macnaha arinta way ka weyntahay in la rumaysto uun "in Ilaah uu jiro." Waxa muhiimka ah waxaa weyaan in la ogaado kan uu yahay, waan fahansanahay inuu yahay midka ugu awoodda badan. Magaciisu waa "Waxaan Ahay Kan aan Ahay." Markaan *fahmo* kan uu yahay Ilaah, waxaan fahmaya inuu awoodda ugu sareyso leeyahay, Isagu wuu jacayl badan yahay waana Aabbahay. Madaama aan garanayo dabiicadahiisa, ducaan ugu tegi karaa Asaga maxaa yeelay waan hubaa inuu iiga jawaabi doono. Haba ahaato ee, haddii aan duco ugu tago Isaga anigoo aan rumaysnayn inuu iiga jawaabayo, ima caawin doonto xataa haddii aan u duceysto sida mashiinta, maxaa yeelay dhiiranaan kuma qabi inuu iga abaal marin doono iigana jawaabi doono ducooyinkeyga. Dareenka noocan ah ma ahan mid ka farxinayo Ilaah. Ducada waxay kusaleysan tahay riiqista ama hergelinta wax waajib nagu ah. Waxaa saldhig u ah *dareenka* Ilaah loo qabo oo ah mid Ilaah nagu sii dhaweynayo adigoo xaqiiq u leh kan uu yahay iyo wuxuu ballanqaaday. Markaad Asaga sidaas ugu imaatid, waad hubtaa inuu ducadaada ka jawaabayo. Wuuna farxaya maxaa yeelay aad buu u jacayl yahay dareenkaasi ay ku jirto aaminaadda aad aamintay Asaga sababtaas awgeedna wuu ka jawaabaya ducooyinkaaga.

Ilaah marnaba wax si qaldan uma sameyo. Haddii ay wax meel ka qaldamaan xageena unbay ka qaldamaan. "Mawjad xariirinta" Ilaah waxba kama qaldano. Haddii ay wax qaldan yihiin waa qalabka farriinta heli lahaa, waxaana loo baahan yahay in lagu toosiyo jahada mawjadda ay ku toosan tahay. Inaba waxba ha xanaaqin ama waxba niyadjab yaanay kugu dhicin. Haddii uu raadiyahaaga xumaaday, maskaxgal ma ahan inaad wacdo oo aad ku qaylisid kuna eedeysid kaambuniga iska leh idaacadda aad dhageysan lahayd. Waxaad u baahan tahay inaad raadiyahaaga ku toosisid mawjadda saxda ah. Waxba haka xumaanin hadduu qalabka aad wax ku dhageysan lahayd uusan shaqeyneynin, waxaad u baahan tahay oo keliya inaad sida saxda ah ugu toosisid mawjadda saxda ah.

Kani ayaa ah dareenka lagaaga baahan yahay inaa ka qabtid xidhiidhka aad Ilaah la leedahay, waa haddii aad rabtid inaad ku noolaatid nolosha Xerta Ciise taasi uu Ilaah raali ka yahay. Ma ahan in waxyaalaha noloshaada ka qaldameen aad ku eedeysid Ilaah. Marnaba ha isku deyin inaad Ilaah eedeysid. Meelba ma gaareysid haddii aad saa sameysid amaba wax xal ah kuma heleysid. Waxaa jiraan laba qalad oo ah inaad weligaaba iska ilaalisid: Midda ugu horeysa waa eedeynta Ilaah iyo weliba xanaaqa Ilaah lagu xanaaqo marxaladda aad ku sugan tahay awgeed. Tani ma ahan rumaysad waxayna kaa hor istaageysa inaad heshid waxyaalaha uu Ilaah doonayo inuu kugu barakeyo.

Sheyga labaad ee aad iska ilaalineysid waa kan aad isku ciqaabeysid oo aad leedahay, "haddii ay tahay rumaysad la'aan, de anigaa qaladka oo dhan iska leh. Ma rumaysan kari. Anaa hoogay. Waan isku deyay waanna ku guuleysan la'ahay". Waxaad fahmeysa inaysan ahayn qaladka Ilaah oo adigoo ganuunaceysa ayaad eedda isasareysa adoo leh, "waa yahay ma ahan qaladka Ilaah ee waa qaladkeyga, waan ogahay taas. Waxba ma sameyn kari, waxaan ahay mid aan macna lahayn,

sida aan ahayna kama wanaagsanaan dooni."
Dareenka noocan ah ma ahan ka aad ka qabtid raadiyahaaga markuu mawjadda ku toosneyn. Waxa keliya ee lagaaga baahan yahay waxay tahay inaad mawjadda saxda ah ku toosisid. Habkan haddaba ayaa ah sida uu Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah u rabo inaad noloshaada mawjadda si fiican ugu toosisid taasi oo ah xidhiidhka aah la leedahay Ilaah. Haddii ay jiraan waxyaala noloshaada ka qaldan Asagu diyaar buu u yahay inuu ku kaalmeyo oo Eraygiisa nool kugu barbaariyio si aad mawjadda ah xidhiidhka aad Asaga la leedahay u hagaajisid si ay noloshaada u wanaagsanaato. *Kuwa xaqa ah waxay ku noolanayaa rumaysad* (Rooma 1:17).

Ha Rajo Dhigin!
Markaad tahay curudka waxaa kaloo aad ahaaneysa cunug yar oo Ilaah Aabba u yahay. Maxaa dhacaya markuu cunugga yar bilabayo inuu socdo? Wuu kufaa, miyeysan ahayn? Markuu cunugga kufo, waalidkiisa kuma eedeynayo tabardarroda uu qabo ee uu ku socon la'yahay oo kuma hadlo hadalada sida, "Waalidiinteyda ayaa sababeen inaan kufo oo aan si fiican u socon waayo." Ma jiro cunug sidaas ku fekera. Xataa markuu kufo oo dhaco, meeshaas ma sii jiifayo oo ma calaancalayo ee wuu kacaya oo sii dadaalaya. Ma rajo dhigayo oo ma dhahayo, "hal mar baan isku deyey waanna ku guuleysan wayey. Ma rabi inaan mar dambe isku deyo inaan socdo." Ma jiro cunug sidaas sameynayo. Laakiin inta badan annaga ka tirsan xerta Ciise, waxaan ku eedeysannahay waxyaalahan. Dhinacna waxaan ku calaancaleyna Ilaah dhinac kalena waxaan ka leenahay erayada sida, "Hadda waxaan isku deyey rumaysad waanna ku guuleysan wayey ee mar dambe wakhti isagama dhuminayi." Laakiin waxa uu Ilaah rabo inaad ku hadashid waa sidan, "Waa yahay, waan kufay. Ilaah ma sababin inaan kufo. Waxaan ahay cunug socod barad ah. Waxaan baranaya sida aan tallaabo tallaabada kale ugu xajin lahaa una socon lahaa sida dadka waweyn. Waan dadaalayaa mar kale oo haddii aan kufana waan kacaya oo soconaya mar kale. Arintan ma ahaneyso mid I niyad jebisa. Waan sara kacaya oo dadaalaya."
Waa inaan fahanno inta aan sii baraneyno wax rumaysadka ku saabsan, waa inaan ilawbin inuu ibliiska xerta Ciise ugu dhego hadlayo inaysan lahayn wax rumaysad ah! Kan waa khiyaanadiisa caadiga ah uu ummadda ku baabi'iyo. Waxaa jirta fekerad qaldan oo ay dadka intooda badan haystaan oo ah inay dad yar oo qaas ay rumaysad leeyihiin; kuwa ugu nasiibka badan, kuwa uu Ilaah adeegsan doono. Laakiin annaga kale ee ah dadka caadiga ah ma qabno rumaysad sababtaas awgeed Ilaah nama adeegsan doono. Fekeraddan waa been cad. Baybalka wuxuu qoraya in mid kastoo xerta Ciise ka tirsan uu rumaysad qabo. Midkeen waliba waxaa lagu deeqay khiyaas rumaysad ah isla marka aan dembiyadeena ka toobadkeennay ama aan cusboonaanay. Waxaad ku cusboonaatay rumaysad. Saacaddaas wixii ka dambeeyey rumaysad ayaa kugu jiray. Noloshaada oo dhan waad lahaan doontaa rumaysadkaas, laakiin waa la xanaaneyo oo la barbaariyo. Isla sida uu cunuga kufid badan socod ku baranayo, adiguna waa inaad si tartiib ah ku ficil gelisid istecmaalka rumaysadka. Cunugga wuu socda, wuu kufaa, wuu kaca dadaalkaas ayuu ugu dambeysta ku fahmaya kuna dhiiranaanaya inay lugahiisa jidhkiisa qaadi karaan. Tallaabooyinka ugu horeyey uu qaaday waxay ahayeen kuwa qarqar uu ku jiro oo aan la hubin laakiin dadaalka badan iyo rajada badan waxay dhalineysa socod dhiiranaan ah. Waxaad arkeysa sida uu Ilaah ducooyinkaaga uga jawaabayo kuuna adeegsanayo. Buuraha waxaa lagu tuuri doonaa badda moolkeeda oo waxyaalaha dhibaaatada kugu hayey mar dambe dhib kuuguma ahaan doonaan maxaa yeelay waxaad ku socotay sida uu Ilaah raali ka yahay oo waxaad noqotay sida uu qoraalka leeyahay, "rumaysadka ku adag" oo "ku barbaaridda nimcada Ilaah." Waa sidan sida ay wax u shaqeynayan ee inaba ha ogolaanin eedeynta qayba kala duwan oo noloshaada ka tirsan lagu weerarayo. Dhammanteenba waan u simannahay taasi. Dhammaanteenba waa inaan horey ugu sii socono tallaababa mid kale kaga sii gudubno.

Rumaysad ku Duceyso – Hana shakinin

Haddii uu jiro mid idinka mid ah oo xigmad u baahan, waa inuu weydista Ilaah, kaasi oo si deeqsi ah ku siiyo dadka oo dhan Asagoo aan wax qalad ah ka fiirineynin, qofkaasna waa la siin doonaa. Laakiin markuu weydisanayo waa inuu rumaysta uusanna inaba shaki qabin, sababtoo ah kan shakiya waa sida hirka badda oo dabeyshu kaxayso oo rogrogto (Yacquub 1:5,6).

Haddii aad xigmad u baahan tahay, ama wax kastoo aad nolosha uga baahan tahay, heerka aayaddahan laga sheegay ayaa saldhig u wada ah. Haddii aad u baahantahay hogaamin iyo xigmad ku saabsan mustaqbalkaaga, tusaale ahaan Erayga Ilaah wuxuu leeyahay ka duceyso. Aayadda aan kor ka akhrinay waxay sheegeysa inuu Ilaah qof kastoo duceysta ama wax ka barya uu siin doono Asagoo aan qaladaad eegeynin. Ilaah ayaa na siiyey ballantan. Haddii aad xigmad la'dahay, Ilaah ka bari wuuna kugu deeqi doona ee. Macnaha arinta halkan xoogga laga saarayo waa *ducada.* Laakiin aayadda lixaad wuxuu ka leeyahay(taasi oo muujineysa inay jirto sharuud ah inaad ka soo baxdid haddii waxa aad baryeysid aad rabto inay ahaato mid aad lahaaneysid), *laakiin markuu weydisto waa inuu rumaysta uunsanna shakinin.* Waa Ilaah kan hadlayo. Hadduu sidaa u hadlay, de xaaladdu isla sida uu ku hadlay ayey ahaaneysa, wax kastoo aan adiga iyo aniga ku fikireynaba, xataa haddii ay jirto wax barid aan horey u maqalnay oo fikiraddan ka soo hor jeeddo, amaba xataa waayaragnimada dadka kale. Wuxuu Ilaah ku hadlayo waa run. Waad heleysa xigmad, ama wax alla waxaad duca ku weydisatay, waa laakiin haddii aad ku weydisatay rumaysad oo aad shakinin. *Haddii uu jiro mid idinka mid ah oo xigmad u baahan, waa inuu weydista Ilaah, kaasi oo si deeqsi ah ku siiyo dadka oo dhan Asagoo aan wax qalad ah ka fiirineynin, qofkaasna waa la siin doonaa. Laakiin markuu weydisanayo waa inuu rumaysta uusanna inaba shaki qabin, sababtoo ah kan shakiya waa sida hirka badda oo dabeyshu kaxayso oo rogrogto. Ninkaasu yuusan umaleynin inuu Rabbiga wax ka heli doono. Labaqalbiiluhu wuu ka rogrogmadaa scodkiisa oo dhan* (Yacquub 1:6-8).

Waxaa jira hab ay tahay inaad u duceysatid si aad ducooyinkaada jawaab uga heshid. Cibraaniyada 11:6 waxay leedahay, *Oo rumaysadla'aantiis ma suurtowdo in isaga laga farxiyo, taas aawadeed kan Ilaah u yimaadaa waa inuu rumaysto inuu jiro oo uu yahay kan u abaalguda kuwa Isaga doondoona.* Haddii uu qofka duceysanayo aaminsanayn tan, haddaba macna darro ayuu ku duceysanaya, Yacquub wuxuu qoray, *sababtoo ah kan shakiya waa sida hirka badda oo dabeyshu kaxayso oo rogrogto.* Mid kastoo duceysta oo aan rumaysanin ee laakiin shakiya, amaba ku duceysta isagoo maanka ku hayo inuu sharuud gudayo, oo aan rajeyneynin in looga jawaabo wuxuu weydisanayo, ducadiisa lagama jawaabayo.

Ma ahan in wacdiye rumaysadka ka wacdinayey farriintan soo jeediyey ee waa Ilaah kan Eraygiisa nagula hadlayo. Wuxuu suurta geliyey in Eraygiisa aan qoraal ku haysano si aan aniga iyo adiga rumaysadka ugu barbaarno oo aan ducooyinkeena jawaab u helno. Ilaah qofna ma edbiyo! Waa diinta tan dadka eedeyneyso oo dadka xukumeyso. Ilaah xor buu naga dhigay si aan u helno wax kastoo uu Ciise iskutallaabta ugu dhintay inaan helno. Waa inaan hogaankiisa ka kala socono Eraygiisa: rumaysad ku duceyso adigoo aan shakinin, dabadeetana waan heleyna jawaabta ducooyinkeena.

Ha ku *Xarbinin* inaad Rumaysato – Ku noolaw Erayga Ilaah!

Haddii aad wax shaki ah qabtid, waxaa suurtagal ah inaan la yaaban tahay inuu ilaah ducadaada kaaga jawaabi doono iyo in kale. Dareenkan ma ahan mid Ilaah ku arkayo rumaysadka dhabta ah ee noo muujinayo kan uu dhabti yahay. Tusaale ku soo qaado bogsiinta. Markaad baratid wuxuu Baybalka ka barayo bogsiinta, dabadeetana waxaad ku duceysaneysa inuu Ilaah bogsiin ku siiyo

markaad u baahan tahay. Markaa ka bacdi maxaa dhacaya? Waxaad heleysa bogsiinta aad codsatay. Haba ahaato ee Baybalka waxaa kaloo uu noo sheegaya in inta aan duceysaneyno ay suurtagal tahay inay wax dhacaan wuuna noo sheegaya waxyaalaha ay suurtagalka tahay inay dhacayan. Haddii aad inta aad duceysaneysid ku fikirtid fikiradda sida, "Waxaan la yaabanahay inay ducadan wax natiijo ah ka soo bixi doonaan? Weli waan dareensanahay xanuunka." *Ninkaasi* Erayga Ilaah wuxuu leeyahay, *yuusan umaleynin inuu wax ka heli doono xagga Rabbiga; isagu waa labo qalbiile, wax kastoo uu sameyana kuma dhiiranaado* (Yacquub 1:7,8). Ilaah miyuu yahay mid aan garasho lahayn markuu leeyahay, "Ninkaasi yuusan umaleynin inuu wax ka heli doono xagga Rabbiga?" "Sababta waxay tahay adigu waad rumeysan waysay." Ibliiska wuxuu rabaa inuu kaa dhaadhiciyo fikiraddaa qaldan ee Ilaah lagu eedeynayo laakiin inaba sidaa ha u qaadanin. Arintu ma taagno oo keliya inaad "rumaysan kari waysay." Maba ahan xataa inaad ku xarbisid inaad rumaysatid. Waxaa waajib kugu ah inaad ku noolaatid wax alla wuxuu Erayga Ilaah kuu farayo dabadeetana xarbi la'aan ayaad rumaysad heleysa. Isla sida aad u sii akhrineysid ayuu rumaysadkaaga sii barbaaraya sida mir dhulka ka soo baxaysa, waa Erayga aad akhrisay waa mir laguugu beeray. Ilaah kaama ceshanayo barakooyinkiisa. Wuxuu rabaa inuu ku barakeeyo. Ilaah wuxuu leeyahay, "Duceyso oo bari, waxaad Ilaah ka baridayna waad heli doontaa ee."

Markos 11:22-24 waxaan ka akhrineyna erayadan, *"Ciise baa u jawaabay oo ku kyidhi, Ilaah rumaysta. Runtii waxaan idinku leeyahay, ku alla kii buurtan ku yidhaahda, Ruq, baddana isku tuur, oo aan qalbigiisana ka shakiyin laakiin rumaysta in wuxuu yidhi ay noqonayso, waa u ahaan doontaa. Sidaa darted, waxaan idinku leeyahay, wax kasta oo aad tukasho ku baridaan, rumaysta inaan hesheen oo way idiin ahaan doontaa." "Wax kastoo* tukasho ku baridaan…way idiin ahaan doontaa," ayuu yidhi Ciise. Barakooyinka Ilaah xad ma leh. Wax kastoo aad tukasho ku weydisatid waa suurtagal inaad heshid ee laakiin waxaa jirta sharuud lagu xidhay oo ah tan aan ka akhrineyno aayadda 24aad, *Waxaan idinku leeyahay wax kastoo aad* ***tukasho*** *ku baridaan.*

Haddaba Erayga halkan lagu xoojinayo waa tukasho oo luuqadda Griigga lagu yidhaahdo, *aiteo* oo la mid ah weydis, rabid, jacayl u qab – eraygan waa eray aad u xoog badan. Waxyaalaha kaloo lagu macnayn karoba waxaan ku sii adkeyn karna inay la sii mid tahay u doodid. Ciise wuxuu noo sheegaya inaan Ilaah uga doodi karno. "Laakiin in kastoo saa aan leenahay, wax kasta Ilaah si xoog leh kagama weydisan karno," ayey dhihi karaan qaar dadka ka mid ah. Waa maxay sababta aan si xoog leh Ilaah wax weydisano? Haddii aad arkhrisid aayadda, waxaad arkeysa in tani ay tahay shayga dhabta ah ee uu Ciise nagu dhiiri gelinayo inaan ku ficiltanno. Ma ahan inaad weydisaneysid sababtoo madaama aad dadka kale ka qiima badan tahay. Maya! Waxaad weydisaneysa wuxuu Ciise kuu sameyey. Waxaan xaq ku ahaaday wuxuu Ciise ii sameyey. Xaq ayaanna u leeyahay inaan si dhiiranaan ah aan Ilaah ugu imaado si aan uga helo nimca macaawino ii ahaato wakhtiga aan u baahanahay. Xaq ayaan u leeyahay inaan si dhiiranaan ah ku weydisto Ilaah ayeyna ka farxineysa markaan leeyahay, "Ilaahayow, sheygan iyo kaas ayaan u baahnahay, adigaan ku weydisanaya waxaanna ku codsanaya si dhiiranaan ah."

Tukashada aan Dhiiranayn ma lahaneyso Natiijo

Haddaadan labo qalbiila ahaanin oo aad niyaddaada oo dhan Ilaah isugu dhiibtid, waxaad ka faalo bixin doontaa sida la yaabka leh uu tukashadaada kaaga jawaabi doono. Laakiin haddii aad tidhaahdo, "Ilaahay sheygan I sii," adigoo ku fikiraysid "baankana arintan waa iga caawin kara," mise "Ciisow, sheygan igu caawi," oo isla markaana waxaad ku fikireysa, "Laakiin waxaan qabaa saaxib asaguna arinta iga caawin karo," taasi Ilaah kama farxineyso. Waxay Asaga ka farxineysa markaad leedahay, "Ilaahayow, haddaan kuu baahanahay." Tukashada sidaas loo

macneyey xadad ma leh. Wax kastoo aad tukasho ku weydisato Ciise wuxuu leeyahay, *Durbaba rumayso inaad heshay, waadna lahaan doontaa.* Goormaad heshay waxaad rabtay? Markaad tukasho ku weydisatay. Goormaad rumaysaneysa? Markaad tukatid. Goormaad rumeysaneysa inaad heshay waxaad u baahneyd? Ma ahan markaad heshay ee aad isha saartid, laakiin isla markaasi aad tukaneysid.

Sidee baad haddaba u rabtaa in tukashadaada lagaaga jawaabo? Yacquub 1:7 waxaan ku leenahay, *Ninkaasi yuusan umaleynin in Rabbiga wax ka heli doono.* Haddii aan tukashadeyda laba qalbiila ku ahay, waa inaanan wax jawaab ah rajeynin. Haddii aan laba qalbiila ahay waxaa noqonaya mid rogrogmada. Waxaanna ku tukanaya anigoo aan waxba jawaab rajeyneynin. Waxaan u tukanaya inuu Ilaah xigmad I siiyo haddana ka calaancalaya inaanan wax xigmad ah qabin. “Ninkaasi” yuusan in nacasnimo ku falaadid isagoo umaleynayo inuu dareenkaas uu qabo wax kaga helayo Ilaah.

Dareenkaasi uu Ciise kaga hadlayo Markos cutubka 11aad aad bay uga duwan tahay tan. Haddii aad tukasho wax weydisato, rumayso inaad durbaba heshay *inta aad tukashada ku jirtid* taada ayeyna ahaan doonta. Tukashada noocan ah wax labo qalbiilonimo ah kuma jiraan. Marxaladda xagga Ilaah wax kastaba si joogta ah ayey ku bedelmaan – waxna wanaagga ayey u sii bataan waxyaalaha qaarkoodna xagga xumaanta ayey ku sii bedelmaan. Marxaladaha wey is bedelaan. Haddii aad marxaladaha aad ku jirtid ama kuugu hareersan eegtid waxaad u dhaqmeysa sida kan labo qalbiilaha ah kaasi oo Ilaah aaminsan in yar oo weliba in kalena marxaladaha aaminsan. Saa ay tahayna Ciise wuxuu na leeyayahay inaan markaan tukaneyno aan rumaysano inaan durbaba helnay jawaabta. Laakiin sidee buu qofka ku ogaan kara inuu jawaabta durbaba helay inta uu duceysanayo? Waa inuu horta wakhti dheer ku lahaaday akhriska Erayga Ilaah.

Tukashada noocan ah ee ah tukashada rumaysadka ayuu Yacquub noo sheegaya inay taha isla tan uu tukaday Eliyaah. Eliyaah wuxuu ahaa nin xaq ah oo *Ducada ninka xaqa ah way awood badan tahay waxayna leedahay mirodhal* (Yacquub 5:16). Ducada rumaysadka leh waxay ku saleysan tahay wuxuu Ilaah kugu yidhi. *Rumaysadku wuxuu ku yimadaa maqlidda farriinta, farriintuna waxaa lagu maqlaa Erayga Masiixa* (Rooma 10:17).

Markaad fahantid wuxuu Baybalka ka sheegayo qayb kastoo baahida noloshaada ku jirta waxaad Ilaah ugu imaan karta hubniin iyo dhiiranaan sida ku dhigan Cibraaniyada 11:6, wuuna kugu farxi doonaa. Waxaad rumaysan tahay inuu jiro una abaal marinayo kuwa Asaga qalbi daacad ah ku doondoonaan. *Ee haddaba si xarbi leh ha ku doceysanin* haddii aadan hubin wax ku qoran Kitaabka Quduuska ah. Horta tag oo akhriso waxa ku qoran Baybalka dabadeetana oo baro waxyaalaha uu kaagala hadlayo tukashadaada *Intaadan* duceysanin. Haddii aadan sidaa yeelin ibliiska wuu kuu imanaya, duco kastoo aad duceysatidba, oo marxaladaha aad ku jirtid ayuu istecmalaya si uu kaaga sii fogeyo jawaabta aad heli lahayd. Maraha qaarkood markaad duceysatid, waxaad arkeysa marxaladda oo ka sii xumaaneyso waxaad rajeyneysay. Waxaan markhaati ka ahay mar aarin ka tukaday inay wanaagsanaato ee laakiin siday ahayd si ka daran ayey noqotay. Laakiin madaama aan fahansanaa wuxuu Ilaah Eraygiisa iiga ballanqaaday, waan ku adkeystay ballantaas oo maankeyga ma bedelin, “wax alla waxaad tukasho ku weydisato…waxay ahaaneysa taada.” Ibliiska arintan ayuu inta badan nagu weeraraya; Haddii aanan Erayga Rabbiga si fiican u akhrisanin ka hore intaanan tukanin, waxaan ahaaneyna kuwa dhiiranaan la’aan ku duceysanayaan oo xaqiiqda waxyaalaha aan xaq u leenahay uu Ilaah naga ballanqaaday ma haysano oo niyad degan kuma duceysaneyno.

Markaan cabsi iyo welwel ku duceysaneyno, way u sahlan tahay ibliiska inuu na jaho wareeriyo. Waan duceysaneyna oo ducadeena waxaan raacineyna erayada ah inaan helnay waxaan tukashada ku weydisanay, laakiin waxaan ku darreyna: “Waxaan aad u rajeynaya inay waxyaalahan oo dhan jawaabteena ku heli doonno.” Haddii aan qaska iyo arimaha niyajabka leh

ee ay dunideean ku sugan tahay, oo aan eegno dhibatooyinka suurtagal la'aanta baniaadmiga, waxaan wada lumin karna waxyaalaha uu Ilaah naga ballanqaaday oo dhan. Laakiin tani ma tilmaameyso inuu Ilaah naga ceshtay barakooyinka uu horaan noogu tallagalay.
Bogsiin ayaa la heli kara. Ma ahan inaan meelaha wareegano oo aan nidhaahno, "Anigu waxba xanuun ka qabi." Waa been in sidaa lagu dhawaaqo haddii aanan wax xanuun ah la qabin. Saa ay tahayna waxaa kugu jira wax xanuunka jidhka ka weyn. Waxaad haysata Erayga Ilaah ee kaa ballanqaaday inuu Ilaah ku bogsiin doono. Rumaysad ayaad ku heshay adiga ayaana lahaan doona. Waxaad aad ugu dheganataa waxyaalaha uu Ilaah kaa ballanqaaday ee xoogga ha saarin waxyaalaha aad hadda dareensan tahay. *Wax allaate waxaad tukasho ku weydisato, rumayso inaad durbaba heshay, waxayna ahaan doontaa taada (*Markos 11:24).

Tukashada Rumaysadka waxay ku Saleysan tahay Xaqiiqda
Tani waa xaqiiqda aan leenahay ee aan Ilaah tukasho ugu tageyno: taasi oo ah in haddii aan wax alla waxaan rabno ku weydisano doonistiisa, (Doonistiisa waxaa laga helaya Eraygiisa qoran) *Wuu ina maqlaya. Oo haddii aan garaneynana* (Waxaan ku rumaysaneyna waxyaalaha uu Ilaah nagula hadlay Eraygiisa) *taasi oo ah inuu ina maqlayo – wax alla waxaan weydisano waxaan ognahay inaan wada haysano wax alla waxaan tukasho uga weydisanay* (1 Yooxanaa 5:14,15). Sidee baad ku heleysa? Xagga Ruuxa ayaad ka haysata oo laasim ma ahan inaad indhahaaga ku aragtid. Ciise wuxuu yidhi, *Rumayso inaad heshay waadna lahaan doontaa.* Markaan Ilaah tukasho baahideyda uga codsanayo inuu I baahi tirro, Waxaan helaya waxyaalaha uu hadda iiga ballanqaadayo Eraygiisa. Waanna *haysta* waxaasi. Waxaan ku tukaday sida doonistiisa ay tahay, sababtaas awgeedna waxaan hubaa inaan haysto wuxuu iga ballanqaaday. Laakiin markaan ka jilba joogsado meesha aan ku duceysanayey, waxaan ku dhex dhumaya dunida oo waxyaala badan ayaan kala kulmaya. Ibliiska wuxuu igu soo gemaya wax allate wuxuu haysto oo uu igu niyad jebin karo, si ay jawaabta sida aan rabo uu Ilaah raali ka yahay ii soo gaarin iyo weliba si uu maskaxdeyda shaki iiga geliyo, si aan u rogmado oo aan uga leexdo jahoda iimaanka aan ku socday.
Dadka qaarkiis waxay rumaysan yihiin inay wax ku kala garan karaan markay guul jirto iyo markay guuldarro jirto. Ma ahan in guul iyo guul darro ay noqdaan waxa keliya ee ku hogaaminayo. Waxaa ku hogaaminaya Ruuxa Quduuska ah ee ILaah. Adigoo uu Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah ku hogaaminayo ayaa waxaad arkeysa inaad guul darro kala kulantid meel waliba. Ma ahan wakhtigaasi marka aad cidda inaad iska fadhiisatid aad oohin la barooran lahayd. Waa inaad ku *socotid wuxuu Ilaah kugu yidhaahdo.* Waad hubtaa inaad heshay waxaad u baahneyd maxaa yeelay Ciise ayaa kaa ballanqaaday inaad lahaan doontid. Ma ahid mid ka mid ah dadka aan wax alla waxay gacanta saraanba aanay jirin wax ay ku guuleysanayan maxaa yeelay tukashadaada waxay ku salaysan tahay Erayga Ilaah. Ma tihid qof ay dabeesha iyo hirarka badda dhinac kasta u dhaqaajinayaan. Waxaa kugu waajib ah inaad wax ka duwan ku fikirtid oo aad Ciise sidan ku mahadisid: "Waan helay jawaabta ducadeyda. Waad ku mahadsan tahay Ciisow sida aad ii siisay waxaan u baahnaa oo waxaad ii caddeysay in mar dhaw waxaan niyad ku hayey ee aa rumaystay ay run ahaan doonto." Isla markiina waxaad heleysa xigmaddii aad u baahnayd. Waad fahmaysa waxa saxda ah ee lagaaga baahan yahay inaad sameysid oo kuwa qabaan xigmadda ilaahiyanka ah iyo waayaaragnimada way kula yaabi doonaan. Waxay la yaabin doonaan oo ay odhan doonaan, "Oo sidee bay ku dhacday inuu qabo xigmad intaa la eg." "Isagu waa uun hal sano jir aniguna waxaan hawshan ku so jiray soddon sano…" Sidaa haba ahaatee, arintu kuma xirno inta sanno ee aad hawsha ku jirtay, su'aashu waxay tahay maxaad ku sameysay wuxuu Ilaah kugu deeqay?
Buugga Ayuub waxaan ka akhrineyna inay xigmaddu ku xirneyn da'da weynaatay ee laakiin

waxay ku xiran tahay xidhiidhka uu qofka Ilaah la leeyahay ama xagga ruuxa (Ayuub 32:7-9). Ruuxa qofka ku jira wuxuu ku barbaaraya isla sida uu qofka Ilaah xidhiidh ula leeyahay, Erayga Ilaah u akhrisanayo, oo marxalad kasta ku sameynayo doonista Ilaah oo inaba ma cuskado waxyaalaha ay dadka sheegayan. Wuxuu leeyahay, “Waan rumaysanahay wuxuu Ilaah leeyahay waxaanna ku qaadanaya rumaysad. Hadda waan haysta Ilaahna waan ku mahadinaya wuxuu I siiyey, Aabbow.” Hadduu hadda qof iska key weydin lahaa si kaftan ah waxa aad dareensan tahay, Waad ku mahadineysa Ilaah waadna ku mahadineysa Asaga, taasi oo caddeyneysa in wax alla wuxuu kaa ballanqaaday awood u leeyahay uu ku hergeliyo. Waad hubtaa taasi. Waad heshay waxaadna hubtaa in waxa uu kaa ballanqaaday uu hergelin doono. Haddii aad sidan ku socotid waad ka guuleysan doontaa ibliiska, Ilaah ayaa la sareysiin doonaa miro badanna waad dhali doontaa.

26
Dhaxalkaaga Saldhig ka Dhigo

Mudda dhawr sanno laga joogo waxaan dareennay inuu Ilaah hawla waweyn ka hayey Waddanka Swiden. Wuxuu saldhig adag u dhigay nolosha rag iyo dumar fara badan taasi oo lala barbardhig karo waxyaalaha dhawaaqan taarikhda ka dhaceen. Erayga Rumaysadka wuxuu kuwa badan ku dhiirigelinaya inay xerta Ciise ku noladaan dhaxalka aan ka helnay Ciise Masiix. Waayihii hore ee la soo dhaafay xerta badankood ma aqooni jirin dhaxalka ay xaqa u leeyihiin. Mana garaneynin xataa sida ay ku weydisan lahayeen. Waddan ahaan waxaan muddo dheer ku baaba’nay xaqdarro ay inoo keentay cabsi aan ku wedisan waynay xaqeena oo dhaqamada diinta ee caadiga ah ayaan ku dhaqmeynay. Waxay taasi naga reebtay inaan si dhiiranaan ah gacanta ugu dhigno carshiga nimcada Ilaah, si aan ku helnay naxariis iyo inaan helno nimco aan macaawino ku helno markaan dhibeysannahay (Cibraaniyada 4:16). Ibliiska wuxuu naga hor istaagay inaan si dhiiranaan ah ku hor istaagno Aabbaheena wuxuuna xuub saaray indhaheena ruuxyanka ah si aanan u arkin jacaylka uu Ilaah noo qabo iyo sida uu noo xanaaneynayo.

Ilaah wuxuu noo haya dhaxal layaab leh ee aan ku helnay Ciise Masiix. Waxaan nahay kuwa xaq u leh inay Asaga wax kasta la dhaxlaan sida ay wiilasha wax u dhaxlaan (Galatiya 4:6,7). Dhaxalkan waa mid aan iska leenahay oo xataa intaan adduunka joogna ayey tahay inaa ka faa’ideysano. Waa halkan adduunka meesha aan baahi ku qabno. Sababtaas awgeed ayuu Bawlos ugu duceyey inay indhaha qalbiyadeena furmaan si aan u *aragno taajirnimada ku jirta sharaftiisa uu ku asturay awliyadaha* (Efesos 1:18). Bal eeg markuu ka hadlayo waxyaalaha Samada ku saabsan wuxuu uga hadlaya sida wax hadda dhacayo, ee ma ahan wax mustaqbalka ku saleysan. Samada waxay nagula sugeysa sharafteeda oo dhan, laakiin Ilaah wuxuu noo sii haya dhaxal sharfeysan oo ay tahay inaan kaga faa’idno intaan dunida joogno. *Waxaan nagula barakadeyey* xagga samooyinka oo barakooyinkaasi waa kuwa aan ku helnay Masiixa!

Markaan annaga xerta Ciise ka tirsan fahanno waxyaalaha dhaxalkeena ah oo aan istecmaalno xaqnimadeena, waxaan sharfeyna Aabbaheena. Inta badan waxaan xagga maskaxda xidhiidh kala yeelaneyna “sharafta” iyo Samada isku mar. Laakiin “sharaf” ay macnaheedu rasmiga ah tahay nuur iyo dhaldhalaal, waxaa laga helaya meel alla meeshuu Ilaah ka jiro ama laga sharfayo lagana addeecayo. Sharaftiisa waa jirintaankiisa oo lanoo muujiyey. Markaad fahmeysid taajirnimada ku jirta dhaxalka oo aad ka faa’ideysato, nalajiritaanka Ilaah ayaa muuqaneysa. Ibliska wuu inkiraya runtan cad. Wuxuu xerta Ciise ka dhaadhiciyey beetna ah inaysan waxba qiima ah lahayn, oo weliba wuxuu ka dhaadhiciyey inaysan inaba waxba sameyn karin – intaanay samada gelin. Laakiin tan waa been socota waana fikirad qaldan. Waxaan halkan *hadda* ku

haysana dhaxalka sharafta leh uu Ilaah nagu deeqay Ciise Masiix. Dabiicadaha Ilaah ayaan kaga dhaqmeyna halkan *hadda.* Kan aanay jirin wax ka weyn ayaa nagu dhex nool *hadda. Hadda* waxaan isugu yeedhi karna oo aan nahay guuleystayaal. *Maanta* waxaan ka guuleysaneyna dunida.
Markaan tan fahanno oo aan bilawno inaan kaga ficilgelino nolosheena annago dhaxalka ka ag dhawaneyno, sharafta Ilaah waa naloo muujin doonaa. Nala jiritaankiisa waa naloo caddeyn doonaa Asagoo isukey muujinayo kuwa ay sharaftiis ka dhex ifeyso. Waxaana loo fahmi doonaa inuu yahay Ilaaha ballamadiisa hergeliya ee ka jawaabaya ducada. Wuxuu ahaan doonaa ari jirkeyga I hogaamin doono. Wuxuu ahaan doonaa dhagaxeyga saldhiga ee aan cuskan karo iskuna aamini karo. Wuxuu ii ahaan doonaa qof dhab ah oo aan arki doono ee ma ahaan doono wax aan afka ka aaminayo. Ka gadaalna waxaan weji ka weji ula kulmi doonaa Ilaaha keliya ee nolosheyda jiritaankeeda haya. Muuqaalkiisana wuxuu ii ahaanaya mid qaali ah oo ee aan taaban karo.

Ilaah wuu na Siiyey Wax kasta uu Ciise Siiyey!
Dunida waxaa soo jeedanaya muuqaalka Ilaah. Hadda ka hore dunida sida ay hadda muuqaalka diinta uga dhex arkeyso Ilaah ma aanay arkin hadda ka hore. Dunida waxay u baahantahay wax caddeyn leh, wax la taaban karo oo shaqeynayo, saa ay tahayna aad ayey ugu ooman tahay inay fahanto waxyaalaha ilaahiyanka ah. Haddii aanan dunida u muujinin muuqaalka dhabta ah ee Ilaah iyo wanaaggiisa, sheeddaanka ayaa bedelkeeda wax kale ugu buuxin doono oo ah beentiisa iyo noloshiisa sharka miiran ah. Mar alla markaan arkeyno inuu sheeddaanka hawla waweyn ku jiro waxaa sababtay kiniisadda oo hawsheeda ka soo bixi waysay oo muujin waysay muuqaalka dhabta ah ee Ilaah. Waxay muujin waysay muuqaalka dhabta ah eek u jirta awliyada Ilaah ku beeray.
Markay dadka dunida arkeynin Ilaah, waxaa durbaba duufsanaya oo baahidaasi iska dhigaya inuu buuxiyey sharka sheeddaanka. Ibliiska wuxuu xerta Ciise ka dhigay kuwa aan isku takhluujinin inay fahmaan oo ay ficilgeliyaan dhaxalka uu Ilaah iyaga u diyaariyey iyo xaqooda ay ku leeyihiin Ciise Masiix. Rooma 8:32 waxay leedahay, *Kan aan Wiilkiisa keliya inaga lexjecleysanin, ee laakiin sadaqo noogu bixiyey – sidee buu isla sidaas uu noola siineysin Asaga* ***wax kasta****?* Ilaah si iib la'aan ah ayuu ***wax kasta*** nala siiyey Ciise. Waxba nagama ceshanin maxaa yeelay wuxuu rabay sharaftiisa, muuqaalkiisa la yaabka leh, ay naga dhex muqdaan. Dhaxalka aan Ciise ku haysano maxaa ka tirsan? Galatiya 3:29 Waxaa ku qoran, *Haddii aad tahay kan Masiixa, waxaad tahay mirta Ibraahim, iyo kuwa wax la* ***dhaxla*** *isaga sida ay ballantu tahay.* Waxaan nahay kuwa dhaxal ku leh barakooyinka Ilaah siiyey Ibraahim. Aayadaha 13 iyo 14 ee ku yaala isla cutubkaas waxay noo sheegayaan inuu Masiixa inoo ahaaday inkaar si aanay barakooyinka Ibraahim noo soo gaarin. Inkaarta aan lahaan lahayn uu Ciise garbaha u dhigtay waa tan dembiga, dhimashada aan kala dhimaneyno xidhiidhka aan Ilaah la leenahay, kelinimada, maskinimada, cudurrada iyo xidhiidhka aan Ilaah la leenahay oo si weligeed ah u baaba'ayo. Ciise ayaa waxyaalahan oo dhan garbaha u dhigtay. Ilaah Asaga nagama lex jecleysanin ee wuxuu u bixiyey dhammaanteen (Rooma 8:32).
Marku Ciise inkaarteena oo dhan garbaha u dhigtay, waxay Ilaah suurtagal uga dhigtay inuu Ciise nagu siiyo nimcadiisa xambaarsan wax kasta. "Wax kasta" waa maxay macnaheedu? Waa barakooyinka Ibraahim! Waa maxay waxyaalaha ka tirsan barakooyinkaasi Ibraahim? Dhaxalkaaga ey ku lifaaqan yihiin nolosha weligeed ah ee ay jirin wax ka maqan, xaqnimada, nabadda, bogsiinta, hormarka xagga dhaqaalaha iyo waxyaala kale oo fara badan. Ilaah magac buu ugu yeedhaya baahi kastoo aan qabno, wuxuuna durbaba ku xaliyey dhaxalka uu nala siiyey Ciise Masiix. Wuxuu rabaa inaad fiiro dheer u lahaano dhaxalkaasi aan leenahay – waxay Asaga

ku qaadatay beeca ugu sareya ee aan loo malayn karin. Wuxuu rabaa inaan weydisano oo aan aragno taajirnimada ku jirta dhaxalka sharafta leh ee uu noogu talagalay awliyada sida ku dhigan Efesos 1:18). Asaguna waa la sharfi doonaa oo muuqaalkiisa heerka sare ah ayaa inaga dhex muuqan doona.

Sanadahan oo dhan, Rabbigga farriintan ayuu xerta Ciise ka dhex dhawaajinayey si ay ku fahmaan hantida ay ku leeyihiin Ciise Masiix. Dabadeetana isla sida Butros ayey kuwa cuuriyaanka ah ku odhan karaan, *Waxaan ku siinaya waxa aan haysto. Magaca Ciisihii reer Naasareed ku istaag oo cagahaaga ku soco* (Faalimaha Rasuullada 3:6).

Waayihii hore ma aanan arkeynin muucjisooyin iyo yaabab caddeyn u ah calaamooyinka awoodda Ilaah maxaa yeelay ibliiska ayaa isku deyayey inuu nakhiyaneyo naguna indho tiro beenta ay diimaha barayaan. Wuu naga dhaadhicinayey inaanan wax dhaxal ah oo aan weydisan karno aanay jirin. Sababtaas awgeed ma jiraan wax dhaxal ah oo aan Ilaah tukasho kaga weydisanay – oo waxyaalahaasi aan weydisanin ayaan jawaabteeda helnay! Laakiin hadda, Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah ayaa aad u shaqeynaya oo waxaan fahmeyna waxyaalaha aan xaq u leenahay ee aan wedisan karno, waan rumaysannahay, waan ficil gelinayna oo waxaan weliba fahmeyna awoodda sare ee aan waxba lala barbardhigi karin ee uu nagu deeqay annaga rumaysan (Efesos 1:19). Awoodda Ilaah ayaa laga dhex arkaya inuu ka shaqeynayo dunida oo qalbiyada dadka lagu beerayo muuqaalka Ilaah. Intay ka sii farro qabsanayaan dhaxalka ay xaqa u leeyihiin, waxay rajeynayan awoodda dhaxalkaasi oo noloshooda ka muuqanayo!

Shaqada awoodda leh ee Rabbiga waxaa durbaba laga dareemaya waddamo qaarkood, laakiin weli waxaa soo bixi doonaan oo la dareemi doonaa waxyaala ka sii waweyn — Beer goyska ugu weyn ee hawlahaasi oo dhan. Awoodda Ilaah ayaa si xoog leh uga dul sahqayn doontaa sida hirka badda, oo kuwa badan ayaa heli doonaan Badbaadada Rabbigg. Erayga Ilaah waxaa lagu beeray qalbiyada shaqsiyada oo waxaan hadda diyaar u nahay in miro dhalka hawshaasi naloo muujiyo. Mirta way bislaaneysa waxaana muuqan doonaa hawlahaasi oo si balaaran awooddiisa iyo muuqaalkiisa looga dareemi meelo badan. Jidhka Ciise ee ah dadka Asaga raacsan, oo markii hore lagu tilmaami karay inuu yahay xoog weyn ee jiifa, ayaa kor u istaagi doonaa oo wax kasta ka dul muuqan doona. Waxyaala waweyn ka sug Rabbiga!

27
Weydiso oo Waa Lagu siin Doonaye

Haddii aad aniga igu jirtaan Eraygayguna idinku jiro, weydista wax alla waxaad u baahan tihiin, waana laydiin siin doonaye (Yooxanaa 15:7).

Waa maxay macnaheedu “igu jira”? Waa jacaylka la jeclaanayo Ciise. Ma ahan oo keliya inaad Asaga u imaneysid markaad wax u baahan tahay. Ilaah ma rabo inuu kaaga jawaabo baahidaada oo keliya. Waxaa kale uu rabaa inuu jaalnimo kula yeesho. Wuxuu rabaa inuu kula sheekeysto si ay dabiicaddaada iyo muuqaalkaaga kiisa ugu ekadaan. Marka aad sii barbaarineysid xidhiidhka aad Ilaah la leedahay, ma garaneysa waxa dhici doono? Duco kastoo aad duceysato iyo codsi kastoo aad Ilaah Tukasho kaga codsatid waa laga jawaabaya. Ilaah wuxuu rabaa inuu jawaab kaa siiyio duco kastoo aad duceysatid – waana lagaaga wada jawaabi doonaa haddii aad Asaga jaalnimo joogta ah la yeelatid, oo aad si joogta ah Eraygiisa u akhrisatid, oo aad ku fikirtid fikir kiisa u eg oo aad boqortooyadiisa doontoontid bedelkii aad si joogta ah ugu mushquuli lahayd baahidaada iyo waxyaalaha maankaaga iyo fikirka baniaadmi ku saleysan. Ilaah ma rabo in waxyaalaha maankaaga ku jira ay noqdan kuwa ku hareersan oo keliya “aniga” “waxayga.” Wuxuu rabaa inaad qalbigaaga oo dhan ku duceysatid, “Boqortooyadaada ha timaaddo.”

Damiirkaaga oo dhan waa inuu yahay mid huwan “boqortooyadaadu ha timaaddo.” Faraq weyn ayaa u dhaxeya gunuunaca, calaancalka, iyo damiirka uu qofka nafsaddiisa oo keliya kaga fikirayo iyo tan uu qofka marxalad kastoo uu ku jiraba uu ku degdegayo inuu Aabbaha duco kula ordo uguna duceeyo baahida dadka agagaarkiisa ku safan. Ilaah qofka sidaas ay meel kasta iyo marxalad kasta ayuu ku istecmaali kara. Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah si joogta ah ayuu kuu wehliya Asagaana kugu hogaaminaya waxa aad ku hadli lahayd, waa haddii aad si joogta ah ugu jirtid Masiixa. Haddii aad nolosha noocan ah ku noolaatid una ogolaatid in Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah hogaamiyo noloshaada oo dhan, welwelkaaga, culeyska ku saaran iyo shakiga kaaga jiro ducada way kaa cararayaan oo garbahaaga fudeyd ayaad ka dareemi doontaa. Waxaad arki doonta sida ay barakooyinka Ilaah kugu badanayaan. Ilaahna wuxuu xaqiijinaya inuu ducooyinkaaga oo dhan sida ugu degdegta badan uga jawaabo maxaa yeelay waxaad hor marisay inaad horta doondoontid Boqortooyadiisa marka hore.

Waxa aad tahay oo dhan Ilaah u xilsaar oo horta doondoon Boqortooyadiisa. Tani waa tallaabada ugu horeysa ee aad ku garan kartid inaad ku socotid jahoda saxda ah. Inaba haka xishoonin inaad ammaantid Ilaaha Nool. Ku farax – Ilaah wuxuu aad u jacayl yahay dadka Asaga sareysinayaan oo ammaanayaan. Haddii aad fursad kastoo aad leedahay sidaas ku sameysid, wuxuu kugu jawaabaya, “Aamiin. Waa waxa aan aad u sugayey. Waan ku jeclahay uunkeygiyow. Waan kugu faraxsanahay. Waan kugu raynraynaya” (Sefanyaah 3:17).

Haddii aad xiriirka noocan ah la leedahay Aabbahaa, wax dhib ah ma kala kulmeysid ducooyinkaaga – waa lagaaga wada jawaabaya. Inteena badan ducooyinkeena jawaab uma helin maxaa yeelay maxaa yeelay waxaan ducooyinkeena ku saleysinay baahideena oo keliya, kuma saleysinin xidhiidhka aan Ilaah la leenahay. Ilaah wuxuu aad uga dan leeyahay *adiga.*

Erayga Ilaah ha Kuugu jiro

Haddii aad rabtid inaad jawaab u heshid ducooyinkaaga oo dhan, sharuudda ugu horeyso waxay tahay inaad ku jirtid Masiixa. Tan labaad, Ciise wuxuu leeyahay waa inaad ogolaatid inuu Eraygiisa kugu jiro. Kuma filno oo keliya inaad Asaga ku jirtid. Erayga Ilaah waa in lagu adeego, waa inuu qayb ma guurto ah ka leeyahay qalbigaaga oo hoy u ah. Waa in Erayga Ilaah uu si joogta ah kugu jiro, ma ahan uun inaad mararka qaarkood ku dhaqantid. Waa in Eraygu uu kugu dhex noolaado. Markay welwelka, jahor wareerka iyo dhibatooyinka kaa bataan, Erayga waa inuu kaa soo dhex kaco, waa haddii ay tahay in doonista Ciise la yeelo oo ballamadisana la oofinayo. Markaad arkeysid inay wax kasta macaarad kugu yihiin, waxaad cuskataa Erayga oo farxaddaaduna yaanay ka jilcin Rabbiga. Tan waa doonista Rabbigga kuu leeyahay ee laguu muujiyey. Dabadeetana waxaad *fahmeysa* waxa aad ku duceysan lahayd iyo sida aad ku duceysan lahayd. Haddii Eraygiisa sidan kugu dhex noolnahay, wax kastoo aad rabtid ayaad weydisan karta.

Ma nihiin masixiin uu Ilaah rimood ku hogaaminayo oo dhinac kasta loo leexinayo. Waxaa nagula uumay u ekaantiisa, waxaan nahay kuwa Asaga kala dhex shaqaynayaan Boqortooyadiisa. Wuxuu ku weydinaya su’aalada sida, “Sidee baad rabi lahayd inuu sheygaas ahaado?” Wuxuu kugu uumay oo kugu jira, akhtiyaar, maan, maskax, shan dareemo si aad u wada istecmaashid. Ma qaldami kartid markuu Ruuxiisa kugu hogaaminayo maxaa yeelay maankaaga si joogta ah ayaa loo cusbooneysinaya. Oo waxaad umaleysay inuu Ilaah rabo inuu nagu hogaamiyo oo keliya waxuu nala rabo uu Asaga go’aansado? Waa maya. Ducooyinkaada iska ma ahan wax Ilaah laysku tusinayo, laakiin waa hadalo ay ka buuxdo awood. Waxba haka fikirin sida daran ee aad iisu dareensantahay inaad tahay qof aan qiima lahayn markaad duceysaneysid ee aad ku duceysaneysid magaca Ciise. Waa magac ka sareyo magac kasta, waana magac inta badan looga cabsado saddex meelood; Samada, dunida iyo dunida hoosteeda. Xataa ruuxyada wasakhda ah

way u jilba joogsanayaan magacaasi. Wax kasta adiga kuguma xirno ee waxay ku xiran yihiin *magaca* aad ku dhawaaqeysid markaad duceysaneysid. Wax kastoo mucaarad ku ahaado ducadaada waa inay u sujuudaan magacaas – Magaca Ciise!
Ma doonista Ilaah baa inaad ku noolaatid niyad jab iyo welwel? Yeysan noqon ee waa MAYA. Erayga Ilaah wuxuu sheegaya inuu Ilaah nabad waarta, xigmad iyo farxad dhan oo aad ku hor joogi doontiid meesha uu muuqaalkiisa ka jiro. Haddaba barro wuxuu Erayga Ilaah ka sheegayo qaby kastoo ka tirsan noloshaada. |Baybalka wuxuu na baraya in dadka ay ku baaba'aan aqoon la'aan daraaddeed. Macnaha waxaa weeye in waxa aan ku fikirno aanay sidaa macna u sii lahayn ee waxaa macna weyn mudan wuxuu *Ilaah nooga waramayo Eraygiisa nool*, ee haddaba waa inaan fahanno wuxuu nagu leeyahay waana inaan ku noolaano wuxuu noo farayo.
Ilaah wuu xajiya ballantiisa oo sidaa awgeed ma ahan inaan ka welwelo waxyaalaha khatarta ah ee igu soo food hayaan. Wuxuu Eraygiisa iigu caddeyey inuu I maqlayo, kana jawaabayo ducooyinkeyga ina siinayo wax alla waxaan duco kaga weydisto Magaca Ciise Masiix oo weliba waxay waxyaalahan sii hergelayaan haddii aan Asaga ku jiro Eraygiisuna igu jiro. Markaan duceysanayo waxaan ku hadlaya Eraygiisa awoodda badan ee ay jirin qof ama wax ka hor imaan karaan. Waa Eraygaasi kan lagu uumay samada iyo dhulka. Ka hor imaadka keliya ee uu Erayga la kulmi karo waa uun waxa igu jira – haddii aanan dulqaad lahayn adkeysina aan lahayn, rumaysad lahayn oo aan weliba lahayn aaminimo amaba fahanka aan Ilaah ka qabo ay wax si ka yihiin. Laakiin haddii aan Ilaah arkay oo aan la kulmay Asaga, haddii aan garanayo kan uu yahay iyo wuxuu ii damacsan yahay, dadka agagaarkeyga joogaan waxay arki doonaan *inuu noolyahay* wuxuuna rabaa inuu baahidooda uga jawaabo. Markaas ka dambena, Boqortooyada Ilaah waxay ku sii fidi doontaa meela fog Asagoo is istecmaalayo.

28
Dabiicad Tukasho oo Habeysan

Xerta Ciise badankood way ogolyihiin inay tukashadu muhiim tahay, laakiin kuwa kaloo badanna fikiraddaas unbay haystaan laakiin waxba uma raacsano. Haba ahaato ee Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah wuxuu xerta ku dhiirig gelinaya inay arkaan muhiimadda ku jirta inay tukashado siday ay u tukaan jireen si ka weyn u jilba joogsadaan waxayna hadda si joogta ah u tukanayaan hab ay waagii hore dhib u arki jireen, amaba suurtagal aan loo arki jirin.
Tukashada qofka xaqa ah waa mid awood leh oo mirodhal leh sida aan uga akhrineyno Yacquub 5:16.
Waxbarid subkan iyo xaqnimo ayaa ah sheyga uu Ruuxa Quduuska ah dhawaanahan si xoog badan looga arkayo dunida oo dhan. Annaga xerta ah waan ka dhisannahay xagga xaqnimada aan ku leenahay Ciise, sidaa darted dareenkii hore ee aan u arki jirnay in nala inkaaray wuu ka baaba'ay nolosheena.
Dhiigga uu Ciise iskutallaabta noogu daadiyey ayaan ku galnay hab nooleyd cusub ee aan ku noolnahay Aabbaheena ku jira Samada. Waxaan fahannay inuusan naga soo horjeedin ee uu laakiin nala jiro. Ruuxa Quduuska ah ayaa nooga muujiyey Erayga Ilaah waxyaalaha uu Ilaah no ohayo – dhaxalkeena dhabta ah iyo fursadaha ku lifaaqsan ee ku jiraan Axdiga Cusub. Waxaan fahannay in Rumaysadku uu Ilaah ka farxiyo oo "kuwa xaqa ahna" waxay ku noolyihiin rumaysad – iyagoo buuro dhaqaajinayaan oo marxalado adadag bedelayaan.
Waxyaalahan oo dhan waxay na siiyeen hab cusub oo aan nolosha ku aragno oo aan xidhiidh cusub kula yeelano Aabbaheena si mar alla markaan Asaga u imaneyno waxaan ku muujineyna inuu ina maqli doono oo weliba nooga jawaabi doono ducooyinkeena. Wuuna yeela sidaas.

Cibraaniyada 11:6 waxay leedahay, *Oo rumaysadla'aantiis ma suurtowdo in Isaga laga farxiyo, taas aawadeed kan Ilaah u yimaadaa waa inuu rumaysto inuu jiro oo uu yahay kan uu abaalguda kuwa isaga doondoona.* Ilaah naftiisa ayaa hadlay oo naga ballanqaaday inuu na abaal marin doono markaan Asaga qalbi daacad ah ku doondoonno Asaga. Haddii aan duceysano annagoo aan waxba jawaab ah filaneynin, sidaasi ugama farxineyno Asaga. Haddii ay sidaa tahay ka ka fikir inta ducooyin ee aan saldhig wanaagsan lahayn ee si macno darro ah Ilaah lagu horgeyey. Bal ka waran inta dadka tirade badan ee malaayiin eray ku hadleen iyagoo aan inaba tixgelinin tallaabooyinka tukashada loo maro oo waxay isaga daldalmayeen erayo diimaha ay habeyeen oo xataa wax jawaab ah oo ay filanayeen ma jirin.
Rabbiga wuxuu caleemo saaray barridda rumaysadka si waxyaalahan oo dhan iyo fahan darrodan looga leexdo. Dadka markay fahmaan tilmaanta ay ku leeyihiin Masiixa, sida ay ku dhigan tahay Erayga Eebbe, iyo weliba markay sii fahmaan waxyaalaha ay hastaan iyo waxyaalaha ay awood u leeyihiin iyo waxay ku sameyn karaan Asaga, rajada ay Ilaah ka leeyihiin way sii badaneysa. Mar dambe kuma hoos noolanayaan eedeyn ama dareen guud oo ay dareemayaan inuu Ilaah iyaga la jirin. Maya, waxay ahanayaan kuwa ku barbaareen xaqnimada, nolosha rajo weyn ee rumaysadka ku dhisan horey uga sii socdaan si buuxdana waa loogu xaqiijiyey inuu Ilaah si joogta ah ula jiri doono iyaga, isla sida uu yidhayba.

Jawaabta la Hubo waxay dhiirigelisa Tukashada

Waxaad xaq ku ahaaneysa Ciise Masiix. Sababtaas awgeed, Yacquub 5:6 waxay leedahay, *Tukashada qofka xaqa ah waa mid awood leh oo mirodhal leh.* Fahmidda dhabtan iyo natiijada la rajeynayo iyo rajada weyn ee la leeyahay ee an inay tukashadeena miro dhal dhab ah leedahay ayaa xerta Ciise Masiix dunida oo dhan ka wada saameyneysa maanta. Markuu Ruuxa Quduuska ah ka farxiyo ruuxeena, si aan u bilawno *inaan rumaysano inuu Ilaah si la yaab leh marxalad kasta u bedeli karo markaan tukaneyno, waxaa la jooga wakhti aan si daacadnimo ah ku duceysan lahayn.*
Markaan aragno awoodda Ilaah oo shaqeyneysa oo tukashadeena ka jawaabeyso, waxaan heleyna dhiiranaan cusub oo aan ku sii tukaneyno. Laakiin kuwa badan oo xerta ka mid ah way ku adkaatay inay tukadaan. Waa maxay sababta? Maxaa yeelay waxay xaqiiqsan wayeen jawaab dhiirigelisa tukashadooda. Mar waxaa la gaaray laga faano in Ilaah jawaab laga sugo oo waxay go'aansadeena inaynan marnaba tukasho kaga weydisanin Ilaah. Laakiin mahadi waxaa leh Ilaah waayo, maalmaha sidaas lagu fikiri jiray way dhammadeen! Waxaa dunida oo dhan maanta nooga cad inuu Ilaah aad u rabo inuu ka jawaabo ducooyinkeena. Ciise wuxuu Yooxanaa 15 ka yidhi, *Haddii aad aniga igu jirtaan Eraygeygana idinku jiro,* ***weydista wax alla waxaad u baahan tihiin waana laydiin siin doonaaye.*** Haddana haddii aan Yooxanaa sii akhrino waxaa Yooxanaa 16:24 ku qoran, *Ilaa hadda ma jiraan wax aad ku weydisateen magacayga.* ***Weydista waadna heli doontaan oo farxaddiinuna way buuxsami doontaa.***
Waxaan aragnay inay tahay arin maskaxda Ilaah ku jirta inuu nooga jawaabo ducooyinkeena oo dhan. Markuu Ruuxa Quduuska ah Eraygiisa nooga saxayo waxyaalaha qaldan ee dareemadeena ku jiraan, waxaa naga dhex bilaabanayaan hami cusub oo aan ku rabno inaan ku duceysano hab hab cusub oo an hadda ka hore ku duceysanin. Ducada waxay dunida ku soo dejineysa doonista Ilaah, waxay hoos u soo dejineysa waxyaalahaasi ka jiraan xagga samada si aan uga dareenno ugana istecmaalno dunida. Waxaa nagala rabaa inaan ku duceysano sida ku dhigan Matayos 6:10 *oo leh, Doonistaada dhulka ha lagu yeelo sida ay Samada ka tahay.* Haddii aanan garaneynin waxa doonista Ilaah ay tahay sidee baan ugu duceysan karna inay dunida ka ahaato sida ay ka tahay samada? Doonista Ilaah waa Eraygiisa. Waa uun markaan garano wuxuu Eraygiisa naga ballanqdday, marka aan ku dhiiranaaneyno inaan ku duceysano inay ballamadiisaas dunida nagu

barakeyaan si looga dhex arko nolosheena.
Marka dhiirigelinta tukashada iyo xaqiiqda in jawaab la helayo ruuxeena lagu beero, Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah ayaa inoo imanaya oo nagu caawinaya sida aan ku duceysan lahayn. Sida aan horey uga soo xiganayba Yacquub 5:16, *Tukashada qofka xaqa ah waa mid awood leh oo mirodhal leh.* Waa maxay awooddan? Ma ahan wax sida gugac aan ku maleyno oo na ligligayoaan, ama hadal culus oo dhegaheena qumaati ugu dhacayo. *Waa hawsha Ruuxa Quduuska ah ee qalbigaaga ku jira, kugu caawinayo inaad ku duceysatid wuxuu Ilaah rabo inaad ku duceysatid.*

Tukashada uu Ruuxa Hogaamiyo jawaabteeda waa xaqiiq
Shaki kama jiro oo waad ka dareentay tukashadaada shaqsi ahaaneyd iyo wada jir ahaanba, sida ay ducooyinka qaarkood iskooduba u saxsan yihiin, laakiin waxaa suurtagal ah inuu Ruuxa Quduuska ah ka dambeynin. Maraha qaarkood, hogaanka Ilaah, amarkiisa iyo awooddiisa ayaa si bayaan ah dhahaya, "Waa kan sheyga waajib kuugu ah inaad ku duceysatid hadda!" Ducada noocaas ah markii la tukado kaddib waxaa la dareemaya nabad iyo xasiloon iyo filnaansho kuu xaqiijineyso oo leh, "Waa kan sheyga uu Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah rabbay inaan ku duceysano." Rooma 8:26 waxay leedahay, *Isla sidaasna Ruuxa wuxuu naga caawiya itaaldarrodeena. Ma garaneyno waxyaalaha aan ku duceysan lahayn, laakiin Ruuxa naftiisa ayaa inoo duceynaya oo wuxuu noogu duceynaya cod la yaab leh oo aan erayadeena ku fasiri karin.*
Ruuxa Quduuska ah ee nagu jira wuu garanaya waxyaalaha aan ku duceysaneyno ama aan u duceyneyno, markaan u ogolaano inuu ina hogaamiyana wuu nagu toosinaya waxyaalaha uu rabo inaan u duceyno awoodna wuu na siinaya inta aan sii duceysaneyno. Wuxuuna taas dabadeed u hawl gelaya inuu ficilgeliyo waxyaalaha aan ka duceysaney oo wuxuu noo xaqiijinaya jawaabta. Waa inaan mar kasta ku duceysano awooddan. Ducooyinka noocaas ah uu Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah nagu hogaaminayo "waa awood badan yihiin miro dhalna way leehihiin." Ducooyinka noocan ah ma ahan wax maskaxdeena ka soo aasaasmay. Ma ahan wax lagu dhaliyey maskaxdeena, laakiin waa wax uu Ilaah raali ka yahay oo qalbigeena lagu beeray. Waxay ka imanayan ruuxeen iyagoo jaalnimo la wadaaga Ilaah. *Waxaa lagu uureystay ruuxeena baniaadmiyeed oo lagu codeyey erayada afkeena.*
Yooxanaa 4:23 Ciise wuxuu leeyahay, *Laakiin saacaddii baa imanaysa, waana joogtaa imminkada, markii caabudayaasha runta ihi ay Aabbaha ku caabudi oonaan ruuxa iyo runta, waayo, Aabbuhu wuxuu doonayaa caabudayaashaas oo kale.* Ilaah wuxuu u dan leeyahay caabudayaasha dhabta ah. Wuxuu u haraadsan yahay dad aan erayo eber ah iska daldalmeynin (Matayos 6:5-7) ama dad ay ducooyinkooda ahayn mid lagu buunbuuniyey sharaxaadda diimaha oo ay ka buxaan rumaysad darro kuwaasi oo ah kuwa uusan ka jawaabi doonin (Yacquub 1:6-8). Wuxuu mudda sugayey dad ku duceysanayaan doonistiisa, kuwaasi oo baryadooda ay qalbiyadooda ka soo butaaceyso, oo u hogaansan Ruuxa Quduuska ah. Waa kuwan kuwa lagu tilmaami karo caabudayaasha dhabta ah oo doonista Ilaah samada ka soo dejin karaan oo dhulka kneenayaan oo dunida oo ku fidinayaan dunida.
Dunida oo dhan waxaan arkeyna inuu Ilaah diyaarinayo caabudayaasha noocaas ah. Waana sababta uu Ruuxa Quduuska ah xerta Ciise isugu keenayo tukashada meela kala duwan oo dunida ka tirsan. Markaan barano sida aan sikeena u duceysan lahayn, Ilaah wuu noo ogolanaya inaan dadka kale la tukano. Markaan barano sida aan ururadeena tukashada ula tukano, wuxuu na baraya sida ugu dhex tukan lahayn kiniisadda. Markay kiniisadda fahanto sida laysugu yimaado oo loo duceysto oo wejiga Ilaah loo dondoono, awoodaha sheeddaanka ee agagaarkooda mugdiga sheeddaanka ku fidiyeen way baabi'I doonaan. Markaas ka bacdi awoodda Ilaah ee aan la celin

karin ayaa la muujin doonaa oo wuxuu u shaqeyn doonaa hab aanan weligeed la arkin lana maqli ama mid aan welig dhug iyo dhaaya loo lahaanin sida ay Soomaalida ku maahmaahdo – waxaana dilaaci doonaa cusbooneysin nolosha dadka dib loo cusbooneysinayo oo ay awood cusub iyo muuqaal cusub ugu adeegi doonaan Ilaah.

Tukashada Quruumaha lagu Guuleysto

Aan ku siiyo markhaatifur shaqsi ahaaneyd oo ku saabsan waddankeyga, Swiden. Sababta aan kuula qaybsanayo waxay tahay inay niyadda kuu dhisto waddankaaga uga dhigto mid uu rajadiisa jirto. Arin aad u adag ayey nala tahay inaan quruunteena tusaala u soo qaadano – laakiin Ilaah ayaa nagu wacyooday inay Swiden ahaan doonto mid uu Ilaah badbaadiyey. Wuxuu naga ballanqaaday inaad Badbaadada Rabbiga gaarsino oo aan ku barbaarino waddankan waanna sameyn doonnaa. Midda ugu horeyso oo la sameynayo waa *ducada.* Markaan rumeysano wuxuu Ilaah yidhi oo aan ku adkeysano nolosha ku saleysan ducada, awooddiisa waa la muujin doonaa, calaamooyin iyo yaabab ayaa dhici doonaan oo dumar iyo ragba way badbaadi doonaan. Swiden waxaa ligligi doontaa awoodda Ilaah.

Taarikhdii 2aad 16:9 waxay dhigeysa sida tan, *Waayo, Rabbiga indhihiisu waxay hor iyo dib u fiirinayaan dunida oo dhan inuu isu adkeeyo kuwa qalbigoodu isaga xaggiisa ku qumman yahay.* Haddii aan Ilaah isku taxluujinno, rumaysano wuxuu naga ballanqaaday oo dhan oo aan isla sidaas ku duceysano, *Wuu na caawin doona oo nagu xoojin doonaa* awooddiisa oo dunida lagu butaacin doono si ka weyn sida ay weligeed ahayd. Falalka sharka ah way ka baabi'I doonaan meel alla meesha ay kiniisadda sal ku yeelato oo ay Ilaah ku caabudeyso, waxaa kiniisadda hogaamin doonaa Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah oo ducooyinkeeda joogtada ay ayaa baabi'in doonaa awoodda ibliiska.

Ilaah wuxuu xoojinaya kuwa badan oo ducaynta xil iska sareen oo kiniisadaha ku jiraan waxayna taasi dhali doontaa kiniisado si xoog leh xilka masuuliyad ka dhigato oo dhulka oo dhan ka muujiso muuqaalka Ilaah. Ma jiro mid mucaarad ah oo hawsha Rabbiga ka hor imaani karo. Dadka meel walboo ay ku sugan yihiin waxay si dhiiranaan ah diyaar u yihiin inay u adegaan Rabbiga, waxay ku duceysanayaan ducooyinka guusha leh oo ay awoodda Ilaah ku ligligayaan boqortooyada ibliiska oo kuwa uu addoonsadayna xor bay ka dhigayaan.

Taarikhdii 2aad 7:14 waxay leedahay, *Haddii dadkayga oo ah kuwa magacayga lagu yeedhay ay* ***is-hoosaysiiyaan****, oo I* ***baryaan****, oo* ***wejigayga doondoonaan****, oo jidadkoodii xumaa* ***ka soo noqdaan****, de markaasaan samada ka mali doonaa, oo demigoodana waan ka cafiyi doonaa, oo dalkoodana waan bogsiin doonaa.*

Si fiican u maqal wuxuu Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah kugu leeyahay oo ku talagal inaad wakhti u qoondeysid qaas ah mar kastaba. Dabadeetana waxaad ahaaneysa mid ka tirsan oo ximin muhiim ah ka ciyarayo bogsiinta dhulka, dib u soo habeynta wixii la burburiyey iyo badbaadada wixii la lumiyey.

Ha ogolaanin inuu ibliiska kaa dhaadhiciyo inaadan duceysan karin, amaba inaadan lahayn wakhti aad ku duceysatid, ama inaadan wax jawaab ah heleynin si kastoo aad u duceysatid. Tan waa beenta sheeddaanka oo uu doonayo inuu kaa hor istaago istecmaalka hubka ugu awoodda badan ee aad haysatid – *Magaca magacda ka weyn ee Ciise Masiix.* Waxaad ka mid tahay xertiisa. Waxaad wadata magaca Ciise waayo waxaa laguugu yeedhaya masiixi. Waad duceysan karta. Ilaah wuu maqlaya ducadaada si weynna wuu kaaga jawaabaya oo weliba wuxuu kugu jawaabaya wax ka weyn waxaad codsatay (Efesos 3:20). Ha ogolaanin ibliiska inuu ku mariyo inaadan haysanin wakhti aad ku duceysato. Dhabta jirta ayaa waxay tahay inaba ma awoodi doontid inaad wakhti heshid marba haddii ay ducada wakhti heli karin. Ilaah si weyn ayuu kugu abaal marinaya wakhtiga khaaska ah ee aad shaqsi ahaantaada Asaga duco ula tagtay. Taa keliya

ma ahan ee sida aad ahayd wuu kaa sii xoog badninaya Rabbiga. Waa xili ay nagu waajib tahay inaan duceysano. Haddaba meesha gooniga ah ee aad ku duceysatid u bax, sida aad u duceysan jirtay si ka sii balaaran u duceyso, waxaadna arki doontaa calamooyin iyo yaabab la xidhiidha jawaabta ducooyinkaaga.

29
Rabbigu waa Geesi

Markaad qofka si aad ah iisu barataan, waxaad fahmeysa dabiicadahiisa. Waxa uu yahay ayaa si bayaan ah kugu muuqanayaan waxaadna la qabsaneysa hababka kala duwan ee uu ku dhaqmo. In lala qabsado, laguna mahadiyo dabiicadaha kala duwan ee qofka iyo waxyaalaha qofkaasi uu qaas ku yahay waa muhiimadda kuwa ugu muhimsan ee laga helo jaalnimada la leeyahay. Isla sidaas ayuu Ilaaha Aabbahaaga ah u rabaa inaad fahantid dabiicadaha kala duwan ee Asaga lagu tilmaami karo. Taasna waxay kaa dhigeysa inaad Asaga qumaati u fahantid kuna mahadisid mar kastaba.

Dabiicadaha Ilaah waa kuwa aad u wanaagsan! Yooxanaha 1aad 4:8 waxay dhigeysa inuu Ilaah jacayl yahay. Rooma 3:26 waxay dhigeysa inuu Ilaah xaq yahay. Ishacyaah 6:3 waxay dhigeysa inuu Ilaah yahay Quduus. Bilawgii 17:1 waxay dhigeysa inuu Ilaah yahay mid meel kasta hal mar ka jira. Asagu waxaa kale uu yahay mid awood badan ama mid wax kasta ka awood badan. Ilaaheena waa Ilaah la yaab leh oo wuxuu leeyahay dabiicado waweyn oo ay cid kale kula tartami karin waxaana nagu waajib ah inaan kaga deyano Asaga kuna dhaqanno.

Baybalka ma sheegayo oo keliya inuu Ilaah yahay jacayl, xaq iyo Quduus ee waxaa kaloo uu dhigaya inuu Ilaah geesi yahay. Baxniintii 15:3 waxay ku dhawaaqeysa, Ma ahan oo keliya inuu Baybalka sheegayo in Ilaah ina jacayl yahay, xaq yahay, quduus yahay laakiin waxaa kaloo uu sheegaya in Ilaah yahay geesi guuleyste ah. Exodus 15:3 declares, *Rabbigu waa geesi; Rabbiga ayaa ah magaciisa.* Ilaaha jacaylka ah isla markaana waa geesi, kaasi oo ah ciidan. Ilaah waa Ilaah dagaaltama; dabiicaddan waxay ka mid tahay dabiicadaha ugu waweyn ee lagu tilmaamo Asaga. Geesiga waa midka dagaaltan oo keliya aan ku jirin. Geesiga waa qof loo tababaray xirfad. Waa wax uu ku noolykahay geesinimada habbeen iyo dharaarba. Efesos 6:12 waxay leedahay, *Waayo, innagu lama legdanno bini-aadan, laakiinse waxaynu la legdannaa kuwa madaxda ah iyo kuwa amarka leh iyo taliyayaasha dunnida gudcurka ah iyo ruuxyada sharka ah oo samooyinka ku jira.* Markuu Erayga Ilaah ka hadlayo dagaal, hubab, amar iyo guul, dadka aan si fiican u fahmin qoraalada Baybalka si xun ayey u fasiraan. Waxay aaminsan yihiin inay qalad tahay in erayo noocaas ah Baybalka lagu dhigo amaba looga hadlo xerta Ciise dhexdooda maxaa yeelay Ilaah waa jacayl. Laakiin kuwa fasiraadda noocan ah haystaan si qaldan ayey u fahansan yihiin Injiilka.

Dagaalka waa mid Ruuxiyan ah

Injiilka waa farriin jacayl taasi oo noo sheegeysa in Ilaah dunida jacayl u qabay ayuu inoo soo diray Wiilkiisa keliya (Yooxanaa 3:16). Wiilka muxuu sameyey? Ciise naftiisa ayaa nooga sheegaya Luukos 11:22, *Laakiin mid ka xoog badan* (Ciise) *goortuu ku soo baxo oo ka adkaado* (ibliiska), *wuxuu ka qaadaa hubkiisii uu isku halleeyey, oo wuu qaybiyaa wuxuu ka dhacay.* Ciise wuu weeraray, wuu ka adkaaday, hubkana wuu ka riday ibliska wuuna burburiyey hawlahiisa oo dhan. *Asagoo uu jacayl riixayo ayuu Ilaah soo diray Wiilkiisa si uu u dagaatamo una guugleysto.* Efesos 6:12 waxay noo sheegeysa inaan dagaaltanno ee laakiin dagaalkaasi ma ahan midka jidhka iyo xoogga baniaadmiga lagu dagaaltamo *taliyayaasha dunnida gudcurka ah iyo ruuxyada*

sharka ah oo samooyinka ku jira.
Haddaba Bawlos wuxuu Korintooska 2aad 10:13 ka leeyahay, *In kastoo aan ku noolnahay dunida, weerar dagaal umaqaadno sida ay dunida u qaaddo.* Jidh ahaan ayaan dunida ku joogna, laakiin uma dagaatanno sida ay caadi ahaan dadka u dagaaltamaan, *saa ay tahayna waan dagaaltannaa!*
Baybalka oo dhan waxaan ka akhrineyna khilaaf iyo dagaalo. Qof kastoo xirta ka mid ah dagaal ayuu ku jira oo inta aan noolnahay oo dhan waan ku jireyna dagaalkaas. Waxaa jira dagaal aad u wanaagsan oo ka socda xagga xidhiidhka aan la leenahay Ilaah waanna ka tirsannahay kuwa dagaaltamayaan. Waa macno darro in layska indha tirro dhabta jirta oo aan iska dhaadhicino dhibka inuu iska dhamaan doono. Dhibka ma dhamaan doono ilaa guusha kama dambaysta ah laga gaaro.
Bawlos wuxuu Korintooska 2aad 10:4 ka leeyahay, *Hubka aan ku dagaaltameyno ma ahan kan ay ku dagaaltameyso dunida.* (Kuma dagaaltameyno dagaalka jidhka laysku laynayo dhiigga la daadinayo, dhaqaalaha lagu burburinayo, dadka lagu silcinayo, doorashada ku saleysan nacaybka, sheegidda sheeko baraaleyda, beenta, khiyaanada iwm.) Laakiin sida tan ka duwan waxay tahay inay hubabkeena leeyihiin karaamada iyo awoodda Ilaah ay ku burburinayaan hawlaha ibliiska. Kuwani waa hubabka ruuxiga ee awoodda Ilaah hogaamineyso si ay ku burburiyaan wax kastoo uu Ilaah raali ka noqday in la burburiyo sida ku dhigan 2 Korintoos 10:5. Hubkan haddii aan la istecmaalin waxay noqonayaan kuwa aan macno lahayn. Dabadeetana cadawga ee ah ibliiska ee ma ahan dadka, ayaa xilka la wareegi doona oo awoodda Injiilka ka hor istaagi doonaa inuu xoreyo dadka.

Guul ma Jirto Dagaal la'aantiis
Qofka Xerta Ciise ka tirsan ee hubka haysta ee aan istecmaaleynin wuxuu la mid yahay sida qof lama degaan jooga; wuxuu faa'ido u yahay cadawga. Sababtaas awgeed waxaa cad inuu ibliiska saacado siyaado ah shaqeyey si uu xerta Ciise ku boqon gooyo waxyaalaha Ilaah oo shaki ka gelinayo. Wuxuu iyaga ku khiyaneyey uguna shekeyey inaysan waxba hub ruuxiyan ah haysanin amaba awoodda ay ku istecmaali lahayeen. Laakiin maalmahaasi khiyaanadaas laga rumeysan jiray way idlaadeen! Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah si xoog leh ayuu kiniisadda ula hadlaya kuna dhiiri gelinaya inay hubkeeda aad u istecmaasho oo ay hab aanay weligeed u dagaalamin u dagaalanto.
Buugga Nexemyaah, Israa'iliinta way daleen markay dib u dhisayeen derbiga Yerusaalem. Waxaa si joogta ah iyaga u cadaadinayey cadawgooda (Nexemyaah 4:10). Waxaa hareerahooda joogeen kuwa shaki badan oo weliba afkooda kheyr aan laga maqlin oo ka niyad jebinayeen inay hawsha dhisidda derbiga wadaan (Nexemyaah 4:12). Nexemyaah wuxuu arkay sida ay dadka u niyadjabsanayeen. Wuxuu fahmay in dagaalka cadawga ay la kulmeen ka dhigtay iyaga inay marxaladahooda ku mushquulaan oo sababtaas awgeed jidhku wuu daalay diyaarna wuu u ahaan inuu rajo beelo.
Kuwa badan oo xerta ka mid ah marxaladaas ayey ku sugan yihiin maanta. Diyaar ayey u yihiin inay rajeyaan barakooyinka Ilaah, laakiin diyaar uma ahan inay dhibka lagala kulmayo u adkeystaan. Waxay diyaar u yihiin inay guusha helaan haddii uun ay suurtagal tahay inaysan dagaal gelin. *Haba ahaatee, guul ma jirto dagaal la'aantis.* Sharaf ma jireyso is dhiibid la'aan iyo dulqaad la'aan. Waa inaad dhex martid cadaw fara badan iyo ka ho rimaad culus iyo dagaalo si aad dhinaca kale guul wade ahaan u gaartid. Ciise wuxuu dagaalka uu go'aansaday ibliiska kaga reeyey iskutallaabta, madaama uu Ciise guuleystayna. Adiguna waad guuleysaneysa. Asagu waa xooggaaga.
Nexemyaah wuxuu Israa'iliinta tan ku fahansiyey markuu iyaga ku yidhi, *Haka cabsanina iayga.*

Xusuusta Ilaaha iyaga ka awood badan ee sharafta mudan, una dagaaltama walaalihiina, wiilashiina, gabdhahiina, dumarkiina iyo guryahiina (Nexemyaah 4:14).

Geesiga adiguu kugu dhex noolyahay

Markay dadka rabeen inay rajo beelaan oo cararaan; markay go'aansadeen inay dhegta u dhigaan beenta cadawga sida ay u suurtoobin inay derbiyada dib u dhisaan iyo sida aanay weligood xornimadooda u soo ceshan doonin, Nexemyaah wuxuu iyaga ku dhiiri geliyey oo ku yidhi, *Xusuusta Ilaah kan awoodda leh ee sharafta badan.* Wa'ayo kaasi? Waa Rabbiga Ciidankeena ah. Kan annaga noo dagaaltamayo. Baxniintii 14:14 waxay leedahay, *Rabbiga ayaa idiin dagaaltami doonaa.* Nexemyaah wuxuu dadka ku yidhi, *walaalahiina u dagaaltama.* Markaad go'aansataan inaad dagaalantaan, oo aad qaadataan hubabka ruuxiyanka ah ee uu Ilaah idin siiyey, oo aad diiddaan inaad carartaan ama isdhiibtaan, waxaad faa'ido u tihiin walaallihiina. *Guushaasi waxaa ka miro goosan doonaan kuwa badan.* Waxa aad sameyneysid waxay faa'ideysa kumanaan kun oo dad ah.

Tixgeli Rabbiga! Isagu waa ciidanka ciidamada. Ishacyaah 42:13 waxay leedahay, *Rabbigu wuxuu u soo bixi doonaa sida nin xoog badan, oo qiirona wuxuu u soo kicin doonaa sida nin dagaalyahan ah. Wuu qaylin doonaa, oo aad buu u dhawaaqi doonaa, oo xoog buuna cadowyadikaga adkaan doonaa.* Ilaah inuu dhinac iska fadhiisto ma fiirinayo Asagoo arkayo cadawgiisa oo guusha ku sii socdo oo wax burburinayo. Mayah! Awooddiisa ayuu kula dagaalaya cadawga. Waana waxa uu maanta ka sameynayo dunida oo dhan maanta. Wuxuu muujinaya inuu sameyn karo wuxuu rabo, markuu rabo, sida uu rabo iyo weliba inuu ku sameyo qofkuu rabo. Awood sare ayuu u leeyahay uu waddankaaga waddada saxda ah ku tuusin karo – wuuna sameyn doonaa durbaba!

Rabbigu waa geesigeena. Waa madaxa Ciidankiisa oo dhan ama dhamaha guud. Goliyaad markuu Israa'iliinta dhib u geystay, nebi Daa'uud wuxuu Samu'eelka 1aad 17:36 ku sheegay inuu Goliyad dhib u geysanayey ciidanka Ilaaha nool. Ilaah ma jeclaysanayo markii Asaga shirk lagu sameynayo ama markii ciidankiisa oo hadda u dhigan kiniisadda dhib loo geysanayo. Markay xerta Ciise la cadaadinayo oo magacyo xun xun loogu yeedhayo oo lagu jesjeesayo, waa suurtagal in difaac lagu galo habka jidhka ama maskaxda baniaamiga ku dhisan, iyadoo qofka xanimada baniaadmi ama cabsi ay hogaamineyso, sida askartii ka cabsi qabtay inay weerarto Goliyad. Saa ay tahayna, Rumaysta haddaad tahay waxaa kugu jirta dabiicadda Ciise, Asagu ma kala qaadin afkiisa. Markaad diiddid inaaf awoodda jirkaaga hub ahaan u istecmaashid, Rabbiga naftiisa ayaa kuu hiilinayo oo kuu dagaalaya.

Ishacyaah 31:4 waxay leedahay, *Waayo, Rabbigu wuxuu igu leeyahay, sida aar libaax iyo libaax yar oo raq ku kor guuxa, oo markii adkhijirro badan loogu yeedho aan codkooda ka baqin ama aan qayladooda ka cabsan ayaa Rabbiga ciidamadu u soo degi doonaa inuu Buur Siyoon iyoo kurteeda korkood ku diriro.*

Rabbigu waa sida libaax. Ciise waa libaaxa qabiilka Yuuda. Ma ahan oo keliya in lagu misaalay ilmaha idaha; waxaa kale uu yahay libaax. Markaad mar labaad dhalatay, libaaxa Yuuda ayaa qalbigaaga soo gahay oo noloshaada la wareegay. Libaaxa ugaarsi ayuu galaa cuntadiisa. Ciise waa madaxa ciidamada Rabbiga. Asagaa hogaaminaya, ciidamada dagaalka gelayaan, laakiin waa ciidanka kuwa dagaalka gelayaan. Ilaah wuxuu rabaa inuu ku garab joogo oo dagaalka kula galo!

Waa Wakhti Dagaal – Hubkaaga qabso!

Rabbigu waa geesiga jira ee kugu dhex nool wuxuuna rabaa inaad isaga kala kaashatid oo aad dagaalka la gashid. Waxaad tahay askari ka tirsan ciidanka Rabbiga. Hubkaaga ha xirxirin ee

qaado oo u feyignaw inuu Ilaah kugu istecmaalo dagaalka aad Asaga u guuleysaneysid.
Xakiinada cutubka 6aad, waxaan arkayna in ninka Gediyon la yidhaahdo iisu arkay inuu yahay ximinta ugu yar ee laakiin muhiimka ah ee ka tirsan qabiilka Manaase. Wuxuu umaleyey inuusan waxba qiima ah lahayn, oo aan waxba haysanin, mana iisu maleynin inuu weligiis nin waxtar leh ahaan doono. Waxaa suurtagal ah inaad adiguna iisu aragtid inaadan waxba haysanin oo cadawga yahay kan dhinac kastaba kaga badiyey, laakiin Ilaah sidaas kuuma arkayo. Wuxuu kugu leeyahay isla sida uu Gediyon ku yidhi sida ku dhigan Xakiinada 6:12, 16 oo leh, *Markaasaa malaggii Rabbigu u muuqday, oo wuxuu ku yidhi, Rabbigu waa kula jiraa, nin yahow xoogga lahu. Markaasaa Rabbigu wuxuu ku yidhi, Hubaal waan kula jirayaa, oo waxaad reer mMidyaan u layn doontaa sida nin keliya.*
Ilaah wuu bedelay habka uu Gediyon iisu arkayey ee ahayd inuu yahay nin aan qiima lahayn oo waxaa loo bedelay geesiyiinta mid ka mid ah – isla sidaas ayuu Ilaah maanta ku sameynaya dadkiisa. Wuxuu kugu yeedhaya kiisa geesiga ahaw, in kastoo aadan iisu arkeynin inaad geesigaas laguugu yeedhayo tahay oo aad xusuusaneysid inta goor oo aad dagaal gashay oo lagaa reyey. Wuxu ololonaya dabka kugu jira ee aad ku jeclaanaysid xaqnimada oo aad kaga carareysid wax kastoo shar ah sida ku dhigan Cibraaniyada 1:9. Waad sara kici doontaa oo waa ka hor imaant doontaa weerarka ibliiska oo waxaad istecmaali doontaa hubabka Rabbiga si aad isugu difaacdid una difaacdid walaalahaaga.
Efesos 5:1 waxay nagu dhiiri gelineysa inaan ahaano kuwa ku deyoshada Ilaah ku dadala sida carruur la jecayl yahay. Hadduu Rabbigu geesi yahay, waa inaan Asaga kaga deyano geesinimada.
Wakhtiga la joogo ma ahan mid la nasan lahaa, ma ahan wakhti la carari lahaa. Ma ahan wakhti la rajo dhigi lahaa oo waxyaala aan macna lahayn lagu mashquuli lahaa. Markaad la kulmeysid weerar ka daran weerarada aad horey ula kulantay, waa marka aad sii adkeysan lahayd, weerarkaaga xooji oo horey u sii soco oo dadaalkaaga badi.
Dunida waxay u baahan tahay Injiilka. Injiilka la'aantis ma jiri doonto Badbaado. Haddii aad carartid yaa iyaga siini doono nolosha? Ha beeline geesinimadaada. Rabbiga wuu kula jira, ninkaadan weyn ee dhiiranaw!
Guul heer sare ah ayaan kala kulmeyna Ilaah oo libaaxa Yuuda wuxuu burburin doonaa cadawgeeda! Ibliiska wuu welwelsan yahay wuuna cararaya. Waana sababta uu go'aan u qabin. Asagu wax awood ah uu hadda ku leeyahay ma jirto waddankaaga ee haddaba hubabkaaga qaado oo guuleyso!

Bogsiin
Asagaa qaatay bukaankeennii, cudurradeenniina wuu isku raray.
Matayos 8:17

30
Toddoba Sabab Oo caddeynaya inaad Bogsiinta xaq u Leedahay

1. Wax kasta uu Ilaah uumay way wanaagsanayeen
Markuu Ilaah uumay dhulka iyo wax kastoo ku jira Wuu ku qancay wax kasta u uumay. Asagoo dabiicadahiisa oo dhan isku xidhan yihiin ayuu wanaagiisa, sharaftiis iyo muuqaalkiisa ku uumay xayawaano, geedo kala nooc ah, macdanta dhulka ku aasan iwm. Ugu dambeystii, wuxuu uumay

Aadan si uu u maamulo wax kastoo uu Ilaah uumay. Oo Baybalka wuxuu leeyahay, Oo Ilaah wuxuu arkay wx kasta oo uu sameeyey =, oo bal eeg, aad bay u wanaagsanaayeen (Bilawgii 1:31. Ma jirin wax la'aan, wax hakat ah, wax qalad ah oo wax kasta oo uunka ka tirsanaa waxaa loo sameyey heerka ugu sareysa. Aadan laakiin waxaa lagu uumay u ekaanta Ilaah si uu u ahaado mid Asaga u eg (Bilawgii 1:26-27). Ma jirin dembi, cudurro, wax la'aan, maskiinimo amaba dhimasho dadka haysatay.

Ilaah wuxuu naga doonaya inaan xushmeyno uunkiisa. Marka aad tusaala ahaan jidhkaaga fiirineysid, ha is yasin amaba ha qiima tiring jidhkaaga. Sida tilmaantaas ka soo hor jeeddo same. Jidhkaagu waa macbudka Ruuxa Quduuska ah (1 Korintos 6:19) sababtaas awgeed aad buu muhiim u yahay jidhkaagu. Waa in si heer sare ah loo qiimeyo – waa shey aad u qiimo badan uu Ilaah rabo inuu isku sareysiyo (1 Korintos 6:20). Jidhka waxaa ku jiraan difaac lagu dhex uumay oo cudurada iyo waxyaalo kale iskiiga difaacayo. Inaba jidhka uma soo dhaweyo amaba uma arko inay yihiin waxyaalo la soo dhaweyo oo barako lagu tiring karo, laakiin wax kastoo difaac ah uu haysto ayuu istecmalaya si uu u fiijiyo waxyaalaha soo weerareen ee ay ka mid yihiin jarmsiga iwm.

2. Cudurka wuxuu Dunida soo galay kaddib markii la dembaabay

Dembigu wuxuu dunida ku soo galay hal nin, isla sidaasna dhimashada waxay dunida ku soo gashay dembiga, waana sidaas sida ay dhimashadu dadka oo dhan u saameysay, sababtoo ah dhammaan way dembaabeen (Rooma 5:12).

Gefkii uu Aadan galay daraadeed, waxaa furantay albaabka dembiga iyo wax kastoo xuma ah oo dembiga la socda oo laga arki karo uunka. Ruuxa baniaadmiga ku jira wuu dhintay oo xidhiidhka uu Aabbaha la lahaa wuu burburay. Nafsaddiisa waxaa si tartiib tartiib ah u gashay cabsi, isla weyni ama kibir, nacayb iyo cuqdad. Jidhka dadka wuxuu u bananaaday daciifnimo iyo cudurro; waa hab burbur leh oo haddii sidaa lagu daayo oo aan waxba laga qabanin, natiijada waxay ahaan doontaa dhimasho. Maalinta uu Aadan Ilaah ku caasiyey iyo inta dhexdooda, waxaa dunida laga dareemaya dembi, cudurro iyo dhimasho. Qof kasta way saameysay arintan oo waxayna ka wada aasaasmeen isku il oo ah aabbahooda – ibliiska. Waxyaalahan dhibka nagu hayaan ma ahan wax ka yimideen xagga Aabbaha. Ciise wuxuu Yooxanaa 10:10 ka leeyahay, *Tuuggu wax kale uma yimaado inuu wax xado oo dilo oo halleeyo* ***mooyaane*** *aniguse waxaan u imid inay nolosha haystaan oo ay badnaan u haystaan.*

Dadka qaarkiis kuma faraxsano fikiradda ah inay cudurrada iyo waxyaalaha la midka ah ay ka soo aasaasmeen ibliiska, in kastoo ay tani tahay mid si bayaan ah uga muuqato baridda Baybalka. Haba ahaato ee runta jirta ayaa waxay tahay in maraha qaarkood xataa hadduu qofka ku dhaco hargab in la yidhaahdo inuu ruuxaani wasakh ah qabo amaba xidhiidhka uu Ilaah la leeyahay ahayn mid sugan. Kuwa aan Ilaah qumaati ugu xirneyn way ku wareeri karaan arintan oo xataa dadkay ku eedeyaan laakiin xerta Ciise oo aasaaska rumaysadkooda sugan yahay, waa inaan qoraalada Baybalka qumaati ula soconno si aanan u gelin dabanka ay ku dhacayaan kuwa aan fahansaneyn qoraalada si aanan u saarin eed uusan lahayn annagoo og inay waxyaalahaasi ka soo aasaasmeen ibliiska. Inkiraadda la inkirayo jiritaanka iyo hawlaha ibliiska taasi oo ay nagu sababtay cabsi aan ka qabno waxay dadka odhan doonaan, waxay badineysa uun hawlihiisa inay sii balaartaan oo uu dad badan khiyaano isagoo burburinayo uunka Ilaah. Markaan leenahay ibliiska ayaa ah aasaaska cudurrada oo dhan macnaha taasi la mid ma ahan inaan leenahay in qof kastoo buka uu yahay mid dembiga saldhig u ah ama ay jinniyo ka buuxaan.

Siduu warqadihiisii oo dhan waxyaalahan ugaga hadlay. Kuwaas waxaa ku jira wax in la gartaa ay dhib tahay, oo jaahiliinta iyo kuwaan adkayn ayaa qallloociya, siday Qorniinka kaleba u qalloociyaan oo ay u halligmaan (2 Butros 3:16). Waxaa si bayaan ah inoogu muuqata in Ciise

meel kastoo uu aaday wanaag sameyey oo wuxuu bogsiiyey kuwa ku hoos bukeen awoodda ibliiska, maxaa yeelay Ilaah baa Asaga la jiray (Faalimaha Rasuullada 10:38. Jiradu waa nooc weerar oo nooga imanayo cadawga (weeraradaas ayuu dhammaanteenba nagu haya), laakiin Ilaah ayaa mahad, Ciso iyo sharafba mudan oo weeraradaas oo dhan wuu ka guuleystay. Ciise wuu bogsiiyey kuwa bukaan oo dhan.
Luukos 13:10-17 waxaa nooga muuqata inuu bogsiiyey naag mudda saddeed iyo toban sanno ah curiyaan ahayd, marku bogsiinayey wuxuu ku hadlay erayadan, *Miyey gabadhan oo ah mid ka soo farcantay Ibraahim oo sheeddaanka muddo 18 sanno ah addoonsaday u wanaagsaneyn in addoonsigaasi laga xoreyo maalin Sabdi ah.* Ciise marxaladeedaas uguma yeedhin barako, wuxuu ugu yeedhay *addoonsi.* Mana xataa dhihin inay arintaasi ahayd mid xagga Ilaah ka timid ee wuxuu ugu yeedhay inay ahayd mid xagga sheeddaanka ka timid. Mana ku sii adkeynin inay marxaladdaas ku sii jirto, laakiin wuxuu ku dhawaaqay in *laga fakiyo* xaaladda ay ku jirto. Xaaladdan qaaska ah waxaa lagu sheegaya naag uu ibliiska muddo dheer ku guumeystay cudurro (Luukos 13:11) Ciisena wuu xoreyey iyada. Cudurrada qaarkood waxaa sababaan jinniyada cudurrada, laakiin ma ahan dhammaantood. Haba ahaato ee ibliiska ayaa siba tilmaan ku lahanaya dhammaantood.
Dadka qaarkiis fikirad xun ayey ka fahansan yihiin dhabta uu Ilaah nagula hadlo ee Eraygiisa ku dhigan oo inta badan markay dareemaan inuu Erayga toos iyaga u canaananayo, difaac ayey gelayan oo way leeyihiin erayada kuwan la mid ah, “Maxaa dhacay! Miyey igu caddeyn karta inaan dembi leeyahay haddii aan jiranahay?” Waxay kugu eegayan indho muujinayaan inay ku eedeynayaan, iyagoo rajeynayaan in la raali geliyo, maxaa yeelay waxay u haystaan inaad adiga ka dambeysay canaantaasi culus oo farta ku fiiqeyso dembiga ay galeen. Haba ataato ee dhabta jirta ayaa waxay tahay oo ay inta badan xerta Ciise qaarkood jaclayn inay maqlaan – qof kasta waa dembiile oo waa loo wada baahan yahay nimcada Ilaah, cafiskiisa iyo weliba Badbaadadiisa. Hase ahaate ee, waxaa jiraan jirooyinka qaarkood oo aan ka aasaasmin dembi uu shaqsiga qaba galay. Marxaladda waxay la mid ahaan karta tan ninkii indhoolaha ahaa ee aan ka akhrineyno Yooxanaa 9:3 meesha uu Ciise ka yidhi, *Ciise ayaa ugu jawaabay, Ninkan iyo waalidkiis midna ma dembaabin, laakiin waa in shuqullada Ilaah lagu muujiyo isaga.* Wakhtiga Ciise waxaa jiray minaarad ku taalay Siloom oo duntay, burburkaas wuxuu layey ilaa iyo 18 qof wuxuuna ka yidhi sida ku dhigan Lukos 13:4 inaysan dadkaasi sidaas ku dhinteen aanay ahayn kuwa ka dembi badnayeen dadka kale, waxaa lagu sii daba qaban kara aayadda 5aad oo leh, *Waxaan idinku leeyahay, Maya! Laakiin idinkuna haddii aadan toobadkeenin waad baabi’I doontaan*
Cuddurro iyo xanuuno kala duwan ayaa lagala kulmaya adduunka, oo hadduu qof waliba yahay carruurta dunida, difaac yar ayey leeyihiin oo ay waxyaalahan iskiiga difacaan, taasi oo aan ka wareeganeynin xataa kuwa aan iinta lahayn. Saa ay tahayna waxay ka sii daran tahay markay dadka ogolaneynin inay Ilaah hortiisa dembiilayaal ku yihiin, oo ay diidayan inay helaan cafiskiisa iyo Badbaado oo ay awooddooda iyo maskaxdooda isku haleynayaan bedelkey tallo saaran lahayeen Ilaah.

3. Bogsiinta waa Laga tixgeliyey Axdiga Hore
Markuu Ilaah iisukey muujiyey dadkiisa reer bani-Israa’iil, wuxuu isku muujiyey inuu yahay *Rabbiga Badbaadada eek u badbaadinayo* wuxuuna ka ballanqaaday inuu cudur iyo xanuun kasta ka dheereyn doono iyaga (Baxniintii 15:26). Baxniintii 23:25 wuxuu sii leeyahay, *Caabuda Rabbiga Ilaahiina ah oo barakooyinkiisana waxay dul joogi doonaan cuntooyinkiina iyo biyahiinaba.* ***Waan idinka dhex saaraya cudurrada.***
Difaaca nagala difaacayo jirooyinka waxay ku jirtay dhiigga axdiga ee “uu Rabbiga bogsiiyaheena ah” la sameyey dadkiisa. Markay Asaga addeecayeen, Eraygiisa rumaysanayeen,

wuxuu iyaga u sameyey “shabaq amaan” oo iyaga ku hareersanaa, kaasi oo iyaga ka difaacayey jirooyinka ka soo gaaray dembiyadooda. Sharciga Kunoqoshadiisa cutubka 28, Ilaah wuu barakadeyey dadka oo wuxuu ka ballanqaaday inuu iyaga ka difaaci doono jiro oo dhan waxayna ahayd mid ka mid ah axdiyada uu dadkiisa la galay.

4. Ciise wuxuu Bogsiiyey Mid kastoo Asaga u yimid

Ciise wuxuu adduunka ku yimid sida qoran, *Oo isagu waa dhalaalka ammaantiisa iyo u-ekaanta ahaantiisa* (Cibraaniyada 1:3). *Wax kasta* uu Ciise yidhi iyo *wuxuu* sameyey oo dhan, waxay ahayd, oo ay weli tahay, doonista Ilaaha Aabbaha ah. Wuxuu dunida u yimid inuu ku ficiltamo rabtitaanka Ilaah (Cibraaniyada 10:7). Ciise wuxuu sheegay sida ku dhigan Yooxanaa 5:19 oo ah in *cuntadiisa* ay tahay *sameynta doonista kan isoo soo diray oo waxaan u riyaaqaya inaan kaamilo hawshaasi;* ***wuxuu sameynaya oo keliya wuxuu arko Aabbaha oo sameynayo,*** *maxaa yeelay wax alla wuxuu Aabbaha sameynayo ayaa ah waxa uu Wiilka sameynayo.*

Tan macnaheedu waxay tahay in mar alla markuu Ciise qof bogsiinayey, waxay ahayd doonista Ilaah in qofkaasi bogsado. Su’aasha xigta ayaa waxay tahay, “Ciise miyuu qof bogsiiyey?” Haah, Wuu bogsiiyey. *Wuu bogsiiyey kuwa Asaga u yimideen oo* dhan. Ma ahan in cisbitaalada Israa’iil ku yaaleen oo dhan ay dadka bukay sariiraha ka wada kaceen oo galbadeen, laakiin waxay ahayd markuu qof buka gogsiin ugu yimaado oo keliya ayuu bogsiinayey.

Dad badan ayaa agagaarkiisa imanayeen kuwaasi oo ay ka mid ahayeen…*kuwo jinniyo wasakh leh derdereenna waa la bogsiyey. Dadkii badnaa oo dhan waxay doonayeen inay taabtaan isaga, waayo, xoog baa ka soo baxay oo wada bogsiiyey* (Luukos 6:18,19).

Luukos 9:11 waxaan akhrineyna, *Laakiin dadkii badnaa, goortay ogadeen, way soo raaceen. Markaasuuna iyaga soo dhoweeyey, oo wuxuu kala hadlay wax ku saabsan boqortooyadii. Ilaah,* ***oo kuwii u baahnaa in la bogsiiyona wuu bogsiiyey****.* Mar alla markuu qof bogsiin u *bahnaa*, Ciise wuu bogsiinayey iyaga! Meela badan ayaa jirta uu Baybalka sheegayo inuu wada bogsiiyey kuwa Asaga u yimideen oo dhan. (Akhri Matayos 8:16,17, 9:35, 12:15, 14:14,35,36, 15:30,31 iyo Markos 6:56.)

Ciise qofna dib iskiigama celinin Asagoo aan u fulinin wuxuu ugu yimid. Weligiis qofna kuma dhihin, “Ma sameyn kari,” ma rabi inaan sameyo,” ama “Wakhti kuuma hayo.” Maya! Mar uu qof Asaga wax weydistay wuxuu ugu jawaabay, *Waan doonaya…ee bogso!* (Matayos 8:3). Ma jiro qof Ciise u yimid oo Asagoo niyadjabsan laabtay.

5. Ciise wuxuu cudurradeena ku Bogsiyey Iskutallaabta

Ciise ma bogsiinin oo keliya kuwa jogeen meesha uu joogay iyo wakhtiga uu joogay. Isagu waa “Rabbiga na bogsiinayo” fac kastoo aan ku noolnahayba. Isagu waa Rabbigeena iyo Badbaadiyaheena maanta, isla sida uu u ahaa dadka wakhtigiisa jireen. Haddaba wuu badbaadiya isla sida uu u badbaadin jiray wakhtiyadaasi, maxaa yeelay wuu u dhintay xataa dadka qarnigeena ku nool. Wuxuu iskutallaabta ku bixiyey beeca ugu sareya si uu ku badbaadiyo aadanaha. Hal mar ayuu dhintay si aan nolosheena oo dhan u noolaano. Isaga naftiisa ayaa garbaha u dhigtay dembiyadeena iyo deenta nagula lahaa oo iskutallaabta kula ceeboobay oo xataa la gaaray heer dhimasho qabrina kula jiray saddex maalmood oo laakiin dhimashada wuu ka sara kacay. Wuxuu bixiyey beeca ugu qiimaha badnaa ee lagu xaliyey iinteena oo dhan. Qoraalka Quduuska ah wuxuu sii sheegaya in *isla sidaas* garbaha ugu dhigtay dembiyadeena ayuu xanuunadeenana u xaliyey. Ishacyaah 53:4,5, waxay dhigeysa oo ay leedahay, *sida runta ah wuxuu xambaartay xanuunyadeennii, wuxuuna qaatay murugadeennii, laakiinse waxaynu ku tirinnay mid belaayo ku dhacday, oo Ilaah dilay, oo dhibaataysan. Laakiinse waxaa isaga loo dhaawacay xadgudubyadeenna, waxaana loo nabareeyey xumaatooyinkeenna, edbintii nabaadiinadeennana dushiisay ku dhacday, dildillacisisiina waynu ku bogsannay.*

Alla maxay dhabta jirta tahay tani! Ciise wuxuu beec sare ku ammaantay baniaadminimadaada

oo dhan – xataa jidhkaaga waa la dammiintay. Si buuxda ayuu kuu dammiintay oo nabaradiisana waa ku bogsatay!
Dadka qaarkiis waxay beeneynayan qoraalka Ishacyaah 53 oo waxay ka dhigayan inay tahay mid ku saleysan gabay ama waxa oo dhan ayey ku fasirayaan inay tahay arin ruuxiyan ah oo aan waxba lagula barbaridhigi karin noolol maalmeydkeena in kastoo aan caddeyn weyn ku haysano Matayos 8:16,17, taasi oo caddeyneyso inay ahayd jirro caadi ah tan uu Ciise nagaga bogsiiyey silaca uu ku silcay iskutallaabta.

6. Ciise Xerta ayuu adeejiyey si ay Dadka bogsiyan

Ciise iskiisa uma bogsiineynin dadka bukaan. Wuxuu u caleemo saaray xertiisa inay iyaguna isla sida uu sameyey u bogsiyaan dadka bukaan. Marka ugu horeysay wuxuu diray laba iyo tobankii xertiisa ahaa Isagoo farriin kaga farayo sida ku dhigan Matayos 10:1-8 iyo Luukos 9:1-6 taasi oo ahayd inay ku wacdiyaan boqortooyada Ilaah, awoodna siiyey ee ay kaga guuleystaan jinniyada wasakhda ah oo ay weliba ku amraan inay jirro iyo cudur kastaba ka baxaan dadka ay guumeysanayeen (Matayos 10:1), wuxuu iyaga kula taliyey inay sameyaan labo shey; inay wacdiyaan oo ay bogsiyaan (Matayos 10:7,8; Luukos 9:2).
Xertii *way baxeen oo tuulaba tan ku xigta ayey kaga sii gudbeen, iyagoo injiilka wacdinayaan oo dadka ku bogsinayaan meel waliba (*Luukos 9:6). Meel kastoo ay tageenba kuwa bukaan waa la bogsiiyey. Marka labaadna Ciise wuxuu laba iyo tobbanka ka dabba diray 70tan kale xerta ku biirtay – wuxuuna ku yidhi, *Haddii aad cid gashaan oo laydin soo dhaweyo, cuna wax alla wixii ladiin siiyo. Bogsiiya kuwa bukaan ee halkas jogaan oo waxaad ku tidhaahdaan, "Boqortooyada Ilaah way dhawdahay"* (Luukos 10:8,9).
Sara kacii kaddib, Ciise wuxuu u muuqday xertiisa oo wuxuu u sheegay iyaga in kuwa rumaysan doonaan oo dhan waajib saaran yahay inay dunida oo dhan garaan oo ay wacdiyaan warka cusub ee ku wacdiyaan uunka oo dhan. Ciise wuxuu sheegay inay xerta jinniyada dadka ka saaraan, ku hadlaan afaf cusub, oo markay gacmahooda dadka buka saaraanna waxy bogsan doonaan (Markos 16:17-20). Adiga iyo aniga waxaan nahay kuwa ka tirsan xerta Ciise oo rumaystayaal ah ee lagu amray inay baxaan wacdiyaan oo ay waliba bogsiyaan kuwa bukaan. Waa maxay sababta? Maxaa yeelay Ciise wuxuu weli rabaa inuu dadka badbaadiyo oo bogsiiyo. Isagu waa uun kii *shallay iyo maanta iyo weligeedba* (Cibraaniyada 13:8). Wuxuu rabaa inuu dadka u muujiyo inuu noolyahay maantaba; wuu jacayl yahay iyaga wuuna awoodaa diyaarna wuu u yahay inuu yaabab ku sameyo noloshooda.

7. Ciise ayaa Amray Kiniisadda awoodna siiyey ay ku bogsiiso kuwa buka

Amarka dadka lagu bogsiinayo waxay ka tirsan tahay farriinta caleemo saarka ugu weyna ee xerta lagu adeejinayey sida ku dhigan Markos 16:17-20). Ciise wuxuu furaha Boqortooyada Sama ku wareejiyey Kiniisadda (Matayos 16:16-19) oo markaan fureyno waxaan barako u ahaaneyna quruumaha. Ciise inama weydinayo inaan sameyno wax aanan awood u lahayn. Wuxuu na siiyey amar aan ku bogsiino bukaanada.
Markuu Ruuxa Quduuska ah ku soo duldegay xerta, waxay heleen awood ay ku ahadaan marag furayaasha Ciise u marag furayaan (Faalimaha Rassuullada 1:8). Wax kastoo ay u baahnayeen oo ay dadka ku bogsiin lahayeen waa lagu deeqay madaama ay ku wada jireen awooddaas Ruuxa Quduuska ee iyaga awood siiyey, waxayna ku saleysinayeen Magaca Ciise Masiix. Ilaah wuxuu dadkiisa ku deeqay habab badan oo bogsiintan lagu sameyn karo oo ay awooddaasi u sii fiddo. Bogsiinta waxay ku hergeleysa gamo saaridda kuwa loo duceynayo gacmaha la saarayo marka loo duceynayo (Markos 16:18), iyagoo rumaysad ku duceynayaan (Yacquub 5:15-18) iyo weliba wadaagidda cashada Rabbiga (1 Korintos 11:29,30). Waxay tani ku hergeli karta hibada Ruuxa Quduuska ah (1 Korintos 12:8-10) amaba Eray uu Ilaah qofka ama kuwa uu adeegsanayo kula hadlay, sida ku dhigan Matayos 8:8, *Hal Eray uun ku hadal oo addoonkeyguna wuu bogsanaya.*

Bogsiinta waxay ku imataa magaca Ciise (Faalimaha Rasuullada 3:16, 4:10) iyo ducooyinka lagu sameyo dharka, karaanka diifka layskiiga bixiyo ama dhididka layskiiga tirtiro iwm ee la barakadeyey (Faalimaha Rasuullada 19:12).
Ilaah wuxuu qabaa habab badan oo kugu bogsiin karo. Wuxuu u riyaaqaya inuu kula kulmo waxaana Asaga ka buuxa jacayl iyo naxariis. Adiguu kuu jira. Wuxuu ogolaaday inuu Ciise dhinto si ay u suurtowdo inaad heshid bogsiinta. Wuxuu soo diray Ruuxiisa Quduuska ah iyo Eraygiisa si uu kugu keeno awooddiisa muucjisada iyo bogsiinta leh ee lagugu talagalay. Wuu ku jacaylyahay wuxuuna rabaa inuu bogsiiyo baahi kastoo aad qabtid nooc kastoo ay tahayba. Waxaa kale uu rabaa inuu kaa dhigo qalabka uu ku fidayo Injiilka, bogsiintiisa, iyo awooddiisa dib u qurxineyso nolosha baniaadmiga si aad adiga u ahaatid qalabka ay ku arki doonaan kuna fahmi doonaan inuu Ciise yahay Rabbiga.
Ilaah wuxuu rabaa inay kiniisaddiisa cagaheeda ku istaagto, iskana gilisho shakiga iyo cabsida ay ka cabsaneyso Eraygiisa, istecmaal hubka uu durbaba bixiyey oo bax si aad u xoreysid kuwa la addoonsanayo. Maanta waxaa jiraan kumanaan Eraygiisa ku ficilgelinayaan isla sida uu u dhigan yahay, cagahooda ayey ku taagan yihiin oo waxay la hawlgelayaan kuna lug darsanayaan Rabbiga!

31
Bogsiinta ku jirta Samato bixinta

Ilaaheena waa Ilaah wanaagsan oo ay jirin wax lala barbardhigi karo! Jacaylka uu noo qabo waa mid xaqiiq weligeed ah ay ku jirto. Isma bedelo, Wuxuu yidhaahdo wuu ku taagan yahay weligiis. Doonistiisa naloo muujiyey waa la habeynaya weligeedna ma qiimo beleyso. *Ilaah ma ahan baniaadan, oo beenalaw ma ahan, mana ahan wiil baniaadmi ka dhashay oo bedelayo maankiisa* (Tirintii 23:19). Ilaaheena ma qaldamo mana ahan mid aan go'aan lahayn. Wuxuu yahay wuxuu sheegayo inuu yahay wuxuu ballanqaadana wuu oofinaya. Waxxaa u maankiisa noogu hayo ayuu noogu muujiyey Ciise iyo qoraalada quduuska ah, waana halkaasi meesha aan ka arkeyno waxa ay tahay doonista Ilaah.
Waa I kan – kan waxyaalihiisa lagu dhigay qoraalada – waxaan u imid inaan yeelo doonistaada, Eebbow (Cibraaniyada 10:7). Ciise wuxuu u yimid ayuu Baybalka noo sheegaya inuu yeelo doonista Ilaah. Markaad Isaga eegtid waxaad runtii noloshiisa ka arkeysa waxyaalaha dhabtii lagu macneyn karo doonista Ilaah, sababtoo ah wax kastoo uu Ciise ku hadlay ama sameyey oo dhan waa wada doonista Ilaah. Wuxuu sameyey oo keliya waxyaalaha uu arkay Aabbahiisa sameynayo (Yooxanaa 5:19), wuxuuna ku hadlay oo keliya waxyaalaha uu maqlay Aabbihiisa oo ku hadlayo (Yooxanaa 8:26,28).
Waana habka kugu waajiban inaad ku deyatid intaad nolosha kaga deyaneysid Rabbiga. Waa inaan ogaatid in doonistiisa la muujiyey ballamadiisana waa wuxuu ku dhawaaqay. Ilaah ma jiraan wax kaloo uu nala rabo oo aan ka ahayn waxyaalaha uu ballamadiisa nooga muujiyey. Wax alla wuxuu ku hadlay isla sidaas ayuu ku oofinaya. Ballamada Ilaah waa axdiyo uu kula galayo *dhammaan* kuwa Isaga axdi la galeen. Isagu dadka ma kala jecleysto. Haddii aad mar labaad dhallatay, Ciisena noloshaada oo dhan kaga deyaneysid una arkeysid inuu yahay badbaadiyahaaga iyo Rabbigaaga, si buuxdana u go'aansatay inaad ku dhaqantid wax alla wuxuu noo farayo, haddaba ballamadiisa oo dhan waad wada leedahay. Waxaa laguugu qiimeyey Axdiga Cusub oo ku saleysan ficilka badbaadinta ee uu Ciise noogu huray dhimashadiisa. Kuwa ballamada Ciise ka faa'ideysanayaan waad ka tirsan tahay shakina kama jiro oo waad heli karta. Wax kasta wuu kuu diyaariyey waana kuu wada diyaar dhammaan waxyaalahaasi la

ballanqaaday oo dhan. Markaad aragtid, waad asmici karta oo farxad weyn ayaad ku raynrayn karta mahadnaqna ku lahaan karta Rabbiga oo rumaysad ayaad ku wada heleysa wax alla wuxu kaa ballanqaaday – ballamada waxaa kaloo ku jiraan bogsiinta lagu bogsinayo. Ballanta bogsiinta uu Ilaah ka ballanqaaday dadka ma ahan mid aad u aragtid inay tahay mid dadka kale loogu tallagalay, maya si kastoo aad u aragtid inay adiga kaa istaahilan. Dadka badankood waxay fadhiyaan afka ceelka bogsiinta laga heli lahaa oo ma dhex galaan ceelka ay biyihiisa ku bogsan lahaayeen sida ninkii fadhiyey "ceelkii ku yaalay meesha la yidhaahdo Bedsayda," isagoo hoosta u eegayo biyaha sugayana *Malaa'ig xagga Ilaah ka timid oo isaga biyaha u walaaqdo kuna riddo* (Yooxanaa 5:1-3), xaaladdaas ayey dadka badankiis ku jiraan oo waxay sugayaan inay goortooda gaarto oo ay bogsiin uga timaaddo samada.
Sidaasi ay dadka filanayaan ma ahan mid ku jirta doonista Eebbe. Ma rabo inaad sugtid bogsiin suurtagal ah ee aan laakiin wax caddeyn ah loo haynin inaad sugtid. Bedelkeeda, wuxuu rabaa inaad Ciise ka deyatid wuxuu kuu hayo; kan uu yahay iyo waxyaalaha uu durbaba kuu sameyey *dhammaanteenna* noo wada sameyey. Aragga aad Isaga arkeysid ayaa kuu caddeyneysa in lahaatid caddeemo aad saldhig uga dhigi kartid rumaysadkaaga ah inuu Ilaah kuu hergelin doono baahidaada oo dhan Isagoo kugu deeqayo muucjisooyinkiisa kuu qaaska ah si aad isbedel uga aragtid noloshaada. Ilaah aad buu Ciise noogu caddeyey waxay doonistiisa tahay. Waxyaalaha uu hergeliyey markuu adduunka ku dul socday iyo waxyaalaha uu ku sameyey iskutallaabta dhammaan waxay wada ahayeen doonista Eebbe.

Iskutallaabta – Waa saldhigga Dhammaan Waxyaalaha uu Ilaah rabo inuu ku siiyo
Iskutallaabta waa dhammaan aasaask iyo saldhiga waxyaalaha uu Ilaah rabo inuu ku siiyo iyo weliba sida uu rabo inuu noloshaada kaala socdo kulana sameyo waxyaalaha aad sameyneysid maanta. Waa iskutallaabta halka uu Ciise kaga badbaadiyey dembiyadaada kuna bixiyey deentii laguugu lahaa. Iskutallaabta ayuu bedelkaaga ugu dhintay. Waxyaalaha dhammaan uu Axdiga cusub ku deeqayo nolosha, nabadda, addeecista Ilaah ku ku dhaqashada xaqnimada waad wada haysata madaama aad isku huwisay Ciise Masiix. Laakiin kuwa keliya ee ay waxyaalahan u hergalayaan waa kuwa aaminay iskuna dhiibay hawsha lagu kaamilay iskutallaabta.
Jawaab kastoo ducada la duceystay laga sugayo, barako kasta oo qofka shaqsiga ah loogu talagay ee aad nolosha kaga farxi kartid, dhammaan waxaad ku heleysa dhimashada waaqdhaca ah ee uu Ciise iskutallaabta kugu dhintay. Iskutallaabta la'aanteed ma jiro si Aabbaha lagu gaari karo ama nolosha looga deyan karo. Haddii aanay iskutallaabta jirin ma jiri lahayn noolol weligeed ah ama noolol buuxda. Iskutallaabta la'aanteed ma jiri lahayn cafiska dembiga, ma jiri lahayn samatobixin iyo weliba ma jirteen muucjisooyin.
Dhimashada Ciise ee aan badbaadada ku helnay waa sharuud noo muujineysa xaqiiqna noo ah inaan heleyno barakooyinka la helay inaad adiguna xaq u leedahay ee aad ka faa'ideysid. Ee haddaba waa inaad fahantid waxyaalaha ku jiraan samatobixinta uu na siiyey. Waxyaalaha uu ku kaamilay markuu iskutallaabta ku dhimanayey ee aan kaga faa'idi karno nolosheena maanta. Matayos 8:16,17, waxay dhigeysa, *Markuu wakhtiga galab ahaa ayaa waxaa Isaga loo keenay kuwa badan oo bukeen oo ay jinniyo ka buxeen, Eray ayuuna ku hadlay kagana bixiyey jinniyada* ***dhammaantood*** *kuwa bukeen. Tani waxay ahayd mid lagu oofinayo waxyaalihii uu nebi Ishacyaah horey uga hadlay ee leh: "Garbaha ayuu ku qaatay xadgudubyadeena oo weliba wuxuu xambaartay cuduradeena."* Halkani, Ruuxa Quduuska ah ayaa caddeynayo in waxyaalaha uu Ciise sameyey ee ay ka mid ahayd in uu bogsiiyey dhammaan kuwa bukeen sida aan uga aragnay Matayos ay tahay mid horey looga hadlay Ishacyaah cutubka 53, taasi oo sii caddeyneysa in markuu Ciise ummadda jinniyada ka saarayey ay ahayd mi lagu hergelinayey wuxuu Ishacyaah ku sii sheegay nebinimadiisa.

Badbaadada uu Ciise iskutallaabta nagu siiyeyna waa mid horey loo sii sheegay sida ku dhigan Ishacyaah 53:2, 3 oo leh, 2 *Waayo, isagu hortiisuu ku koray sidii geed curdan ah, iyo sidii xidid dhul engegan ka soo baxay oo kale. Isagu suurad iyo qurux aynu ku fiirinno toona ma leh, oo qurux aynu ku jeclaanno laguma arko.*
3 Isaga waa la quudhsaday, waana la diiday, oo wuxuu ahaa nin murugeed, oo xanuun bartay, waana la quudhsaday sida mid dadku wejiga ka qarsado, mana aynaan xurmayn.
Qoraalkan wuxuu ku saleysan yahay iskutallaabta. Ciise la lagu jesjeesay, la yasay, lagu ciyaaray, la karbaashay lana inkiray. Dadka waxay Isaga u arkaan mid kerahiyo ah, mid heer sare ku xadgudbay anshax wanaagga, wuxuu ahaa mid faasuqan bulshaduna burbur u keenay. Laakiin Ishacyaah wuxuu arkay waxyaala waweyn oo ka muhiimsan aragtida kana baxsan aragtida baniaadmiga oo ku jireen Ciise, wuxuu arkay sida uu Ilaah carshigiisa sharafta leh uga soo arkayey Ciise – labadan fikiradna kala duwanaanshahoodu waxay kala yihiin cir iyo dhul.
Dhabtii wuxuu qaatay xadgudubyadeeni, wuxuuna xambaartay murugadeena, wuxuuna iisu qaatay inuu yahay mid uu silciyey Ilaah, mid uu Isagu jacayl sare u qabay oo la dhibay (Ishacyaah 53:4).
Dunida waxay waxyaalahaasi Ciise ku dheceen u aragtaa inay ahayd edbin weyn uu Ilaah Isaga edbinayey. Laakiin sidaa ma ahayn! Waxay ahayd *dhibatooyinkeena* kuwa uu dushiisa ku qaatay. Ciise wuxuu iskutallaabta ku ugu dul silcay gef uusan Isagu gelin. Isagaa iskiisa iisu dhiibay inaan ahaano kuwa xor ah, si aan *aniga iyo adigu* gefkaasi uga xorawno. Wuxuu noqday mid waxyaalihii aan sameyn lahayn noo sameyey, bedelkeena ayuu is dhibay, si aan annagu u ahaano kuwa uga badbaadno carada Ilaah. Alla maxay barako heer sare ah ahayd ficilkaas uu Ciise iskiisa noo sameyey!
5 Laakiinse waxaa isaga loo dhaawacay xadgudubyadeenna, waxaana loo nabareeyey xumaatooyinkeenna, edbintii nabaadiinadeennana dushiisay ku dhacday, dildillaaciisiina waynu ku bogsannay.
6 Dhammaanteen sidii ido baynu u hallownay, midkeen waluba jidkiisuu u leexday, oo Rabbigu wuxuu isaga dul saaray xumaanteenna oo dhan (Ishacyaah 53:5,6).

Bogsiinta Cudurrada Jidhka
Waa maxay ficilka ka dhacay iskutallaabta? Ilaah ayaa wuxuu halkaas ku sababay in dembiyadeena iyo natiijadooda ay noqdaan kuwa uu wada xambaarto Ciise. Waxaa loo wareemay loona nabareyey dembiyadeena awgood, wuxuu dushiisa ku xambaartay dembiyadeena iyo gefkeena oo dhan; taa oo keliya ma aha nee waxaa kaloo uu xambaartay xaqdarrodeena oo dhan iyo weliba cudurradeena. Annaguu noo sameyey. Edbinta nabadda ina siisay waxaan ku helnay jacaylkiisa uu iskutallaabta noogu dhintay. Waxaa loo ganaaxay awgeen, waana la nabareyey maxaa yeelay waa la wareemay lana nabareyey lana riiqay si aan ku kaga bogsano xadgudubyadeena.
Inta badan waxaan xoogga sareynay inuu Ciise iskutallaabta ku tirtiray dembiyadeena, Ilaah ayaanna ku mahadina ficilkaasi uu Ciise ogolaaday in lagu fuliyo Isasga! Laakiinse waxyaala dheraad ah ayaan jiran uu sameyey Ciise oo ah inaan ka hadalno. Waxuu weliba iskutallaabta kula dhintay dembiyadeena. Runta marar badan ayaan laga hadlin oo laga leexda, haddii ay saa noqotana dadka looma diyaarinin hab ay rumaysadkooda kaga qaybqataan sida ay ku heli lahayeen bogsiintooda. *Marka saldhiga la burburiyo, kuwa xaqa ah maxay sameyn doonaan?* (Sabuurrada 11:3). Iskutallaabta waa saldhigga uu ay ku saleysan tahay noloshaada Masiixinimo oo dhan. haddii aadan qumaati u fahansaneyn micnaha guud ee Ciise iskutallaabta ku ficiltamay, haddaba noloshaada masiixinimo waxay ahaneysa mid aan la fahmeynin oo aa kaamilneyn. Fursad uma lahaaneysid inaad ku istareexdo waxyaalaha tirada badan ee uu Ciise kugu talagalay.

Qaar wayba ka sii dareen oo waxay inkirayaan in Ciise uu iskutallaabta nagaga bogsiiyey cudurradeena oo waxay aaminsan yihiin in cudurrada la bogsiyey ay yihiin kuwa dembiyada la sameyey oo keliya ku saleysan. Fikiraddan dhabti waa mid aan sax ahayn.
Ishacyaah 53:4 waxay shegeysa in Ciise murugadeena iyio xaqdarrooyinkeena oo dhan xambaartay. Erayga ficilkaasi luuqadda Cibraaniga lagaga macneyn karo wuxuu yahay *kholee* taasi oo ay macnaheedu tahay jiradda jidhka waana isla eraygaasi ka lagaga istecmaalay Sharciga Kunoqoshadiisa 7:15 meesha ay nooga shegeyso *Rabbiga wuu idinka xoreyn doonaa jirro kasta.* Jiradu waa midda jidhka. Markuu Ciise bogsiiyey cudurka jirada ee aan ka akhrineyno Matayos 8:16,17, wuxuu qoraalka sheegey in taasi ay ahayd arin laga soo xigtay ama lagu buuxinayey wixii uu nebi Ishacyaah horey uga sii wacyooday sida ku dhigan Ishacyaah 53:4 taasi oo leh, *Wuxuu qaatay jirradeena.*
Isla sidaasna Ciise wuxuu wada xambaartay dhammaan dembiyadeena iyo xanuunadeena. Butrooska 1aad 2:24 waxay qoraalka ku dhigan ka soo xiganeysa Ishacyaah 53:5aad taasi oo leh, *Nabaradiisa ayaa ku bogsanay.* Erayga "bogsiyey," waa eray laga soo xigtay luuqadda Griigga oo asalkiisa yahay *iaomai,* micnihiisuna yahay "bogsiinta jirrada laga bogsanayo." Waxaa isla sidan loo istecmaalay ilaa iyo 28 goor markaan eegno Axdiga Cusub.
Waa inaanan qiima tiring amaba aanan inkirin waxyaalaha uu Ciise ku kaamilay iskutallaabta. Wuxuu iskutallaabta noogu bixiyey beeca ugu weynaa ee loo bixiyey badbaadadeena oo inaba xaq uma lihin inaan war xumo tashiil ku baabi'ino waxyaalaha uu sameyey.
Ishacyaah 53:4 waxay leedahay, sheegeysa *inuu xanuunadeena* ***garbaha u dhigtay***. Erayga cibraaniga ee tan saldhig loogu dhigi karo waa *nasa.* Ishacyaah 53:12 waxaan ka akhrineyna inuu ***garbaha u dhigtay*** *dembiyada kuwa badan.* Isla eraygas, "nasa," ayaa aayaddan laga istecmaalay. Haddii aan si kale u sharaxno, waxaa cad in Ciise uu garbaha u wada dhigtay dembiyadeena iyo weliba xanuunadeena oo dhan isku xal ayuu ku wada xaliyey.
Waxaan haddana si dheraad ah u akhrineyna wax kale oo ku dhigan aayadda 4aad oo leh, *Wuxuu* ***xambaartay murugadeena.*** Ficilkan waxaa afka Cibraaniga lagu yidhaahdaa *saba,* oo isla eraygas ayaa laga istecmalaya aayadda 11aad, *wuuna xambaarsan doonaa* (sabal) sick *jirrooyinkooda.*

Ciise wuxuu wada Xambaartay dhammaan Dembiyada iyo Jirrooyinka

Ciise wuxuu xambaartay oo iskutallaabta kula silcay dembiyadeena iyo jirrooyinkeena. Suurtagal ma ahan in mid la ogolaado oo aan tan kale la ogolaanin. "Saa ay tahayna dhabtii," waxaad ku dhawaaqi karta "in dembiga ayaa ahaa sheyga ugu weyna uu la silcay." Waa runta, dhabtii markii loo kaco xagga badbaadada, badbaadintaas la'aanteed Ilaah nabad lama lahaateen oo rajo uma lahaateen jannada. Dhabta jirta ee aan la inkiri karin ayaa waxay tahay in shaqsigu la badbaadin karo ugana leexan karo lumista weligeed ah. In aan inaba wax jirro ah lala kulmin ee laakiin maalinta ugu dambeysa naarta la galo wax faa'ido ah oo ay leedahay ma jirto, way ka weji xuntahay in qofka uu noloshiisa oo dhan bukoodo oo uu laakiin jannada ku dambeyo. Haddaba waa inaad ogaatid in rumaysashada aad Ciise rumaysaneysid aanay ku xirneyn sharuud ah inuu horta ku siiyo caafimaadka jidhka si aad u ahaatid mid jannada gala oo nolosha oo dhan Ilaah la noolan doono. Taasi waxay ahaaneysa rajo aan jaho lahayn! Ilaah isku si ayuu kuu qiimeynaya haddaad buktid iyo haddii aad jirantahayba. Taasi ayey kula ahaanin arinta aad xooga sareysid. Dhabta jirta ayaa waxay tahay inuu Ilaah iskutallaabta hawl ku kaamilay taasi oo xal u ahayd *dhammaan* dembiyadeena iyo jirrooyinkeena oo dhan. Wuxuu kugu deeqaya labaduba badbaadada weligeed ah iyo bogsiin aad ku heleysid samato bixinta. Wax alla wuxuu Ilaah isku rakibay yaanay jirin cid kala qaadda.
Sabuurrada 103:2 waxay leedahay, *Rabbiga ammaan nafteydow, oo ha ilawbin waxyaalaha uu*

nagu deeqay oo dhan, macnaha waxyaalaha la yaabka leh *uu* Ciise noo sameyey. Ciise muxuu noo sameyey? *Yaa cafiya dembiyadaada **oo dhan** oo bogsiiya jirrooyinkaaga **oo dhan*** (Sabuurrada 103:3).
Iskutallaabta ayuu Ciise ku xambaartay dembi kasta iyo shuqul kastoo wasakh ah uu qof sameyey ama uu sameyn lahaa. Wuxuu u dhintay dembiyada *oo dhan* wuxuuna u dhintay dadka *oo dhan*. Laakiin waxaa kale uu xambaartay jirrooyinkeena *oo dhan* iyo xaqdarrooyinkeena *oo dhan,* sababtaas awgeed waxaan og nahay inuu "bogsiinayo jirrooyinkeena *oo dhan."* Ma jirto jirro uusan Ciise iskutallaabta kaga guuleysanin, sababtaas awgeedna wuu awooda wuuna bogsiin kara jirrooyinka oo dhan nooc kastoo ay ahadaanba.
Matayos 9:35 waxay leedahay, *Ciise wuxuu ku wareegay magaalooyinka iyo tuulooyinka oo dhan, oo sunagogyadooda ayuu wax ku barayay, oo injiilka boqortooyadii ku wacdiyeyey, oo **bugto walba** iyo **cudur walba** ayuu bogsiinayay.* Matayos 8:16,17, waxay noo shegeysa inuu ***bogsiiyey kuwa buka!*** Maxay tahay sababta? Sababtoo ah *tani waxay ahayd hergelinta waxyaalihii uu horey ugu wacyooday nebi Ishacyaah isagoo leh: "Sida runta ah wuxuu xambaartay xanuuunyadeennii, wuxuuna qaatay murugadeennii."*
Haddaba, Markos Mark 2:5-12, Ciise ma ahayn inuu ninka cuuriyaanka ahaa dembiyadiisa oo keliya cafiyey ee laakiin wuxuu bogsiiyey jidhkiisa. Hawsha Ciise waxaa ku jireen laba arimood oo aad isugu xirnaa isku hawlna ahaa. Dabadeetana iskutallaabta wuxuu ugu dhintay inuu inoo bixiyo deentii qiimaha weyneyd ee aan kaga bogsaneyno jirrooyinkeena iyo dembiyadeena. Butrooska 1aad 2:24 *oo isagu dembiyadeennii wuxuu ku qaaday jidhkiisii geedka saarnaa, si innagoo dembi kala dhimannay aynu xaqnimo ugu noolaanno. Waxaad ku bogsateen xariijimihii karbaashiddiisii*. Tan waxay caddeyneysa, *nabaradiisa **ayaad** ku bogsatay*. Tan waxay noo caddeyneysa in Ciise iskutallaabta nagu bogsiiyey ku dhawaan 2,000 oo sanadood ka hore taasi oo macnaheedu lala barbardhigi karo isla sida uu nagu cafiyey naguna badbaadiyey. Wax kasta waa diyaar waana la wada kaamilay. Haddaba martiqaadka waa furan yahay Haddaba aynu carshiga nimcada dhiirranaan ugu soo dhowaanno si aynu naxariis u qaadanno oo aynu u helno nimco ina caawisa wakhtiga baahida (Cibraaniyada 4:16).
Maanta "waa maalinta badbaadada!" Cafis iyo bogsiinba diyaar ayaa noola yahay maanta, shaqada uu Ciise iskutallaabta *noogu kaamilay* awgeed. Ballanta bogsiinta ma ahan mid uu shaki ku jiro. Bogsiinta ma ahan wax ku xiran habka aan Ilaah ula macaamiltameyno ama mid aan sharuudooyinkeena ku heleyno, ee laakiin waa arin ku jirta bartamaha qalbiga Rabbiga waana wax uu horey noogu talagalay intaanan ogaanin waxa aan ku xalin lahayn jirrooyinkeena. Saldhiga bogsiinta waa mid ku saleysneyd iskutallaabta. Inta uu Wiilkiisa rabitaankiisa iskutallaabta ugu dhimanayey, Ilaahna wuxuu muujiyey inay ahayd doonistiisa ahayd Axdigiisana ku jirtay inay bogsiintu ahaato "kibista carruurta" (Matayos 15:26-28). Wuxuu bogsiinta u muujiyey inay ahayd Axdi barako u ah dadka iyo weliba mid qof kasta u uxor u ahaaday isla marka uu Ciise jidhkiisa u ogolaaday in lagu burburiyo iskutallaabta si uu dhiiggiisa Axdiga ah u daato (Matayos 26:26-28).
Guusha uu Ciise iskutallaabta ku guuleystay waa mid baniaadmi kasta guul u ah. Midkeen waliba waa qof qaas ah uu Ilaah si qaas ah u qiimeyo. Ilaah wuu inawada jacayl yaay dhammaanteenba. Mid kastoo rumeystana waa la badbaadin doonaa. Wuxuu samada ku haya taajirnimo uu ku deeqayo mid kastoo magaciisa ku dhawaaqo (Rooma 10:12,13).
Ilaah inaba ma rabo waayaaragnimada dadka kale, waxa aad adiga ka dareensantahay, amaba wax kaleto inay ahadaan waxyaalaha ay bogsiinta lagaa ballanqaaday ku saleysan tahay. Iskutallaabta ayuu bogsintaasi saldhig uga dhitay. Waana sababta uu ibliiska inta badan u rabo inaan niyadda ka qaadno iskutallaabta iyo qiimaheeda. Haba ahaato ee, markaad aragtid wuxuu Ciise kuu sameyey, Aabbaha Ilaahaaga ku uuntay ah ayaad dhiiranaan ugu tegi karta iyo weliba

adigoo ku socota xaqiiqda rumaysadka oo waxaad qaadaneysa wuxuu kugu talogalay. Ruuxa Quduuska ah ayaa kuu ahanayo macaawinadaada iyo hogaamiyahaaga. Wuu ku dhiirigelinaya kuna xoojinaya, wxuuna ku awoodsinaya inaad heshid wax kasta uu Ilaah kugu talagalay uu rabo.

32
Bogsiinta Dadka

Ciise markuu ku noolaa dunida, wuxuu wakhtigiisa inta badan ku istecmaalay bogsiinta kuwa bukaan – wuxuuna sidaa usameynayey inuu oofiyo rabitaanka Aabbaha.
Cibraaniyada 10:7 Ciise wuxuu leeyahay, *Markaasaan idhi, Bal eeg, waxaan u imid inaan sameeyo doonistaada, Ilaahow, Kitaabka duudduuban wax igu saabsan baa ku qoran.* Ciise wuxuu dunida u yimid inuu yeelo rabitaanka Aabbaha, oo inta uu sidaa sameynayey wuxuu ku hawlanaa bogsiinta ku bukaan!
Faalimaha Rasuullada 1:1 waxay leedahay, *Te'olfiloso, hadalkii hore waxaan ka qoray wax kasta oo Ciise* ***bilaabay*** *inuu sameeyo oo baro*. Waxyaalaha uu Ciise sameyey inta uu dunida joogay waxay ahayeen uun aasaask hawlahiisa dunida laga qaban doono. Wuxuu qorsheystay inuu hawlihii uu samada ka waday sii wado inta uu dunida joogo oo huwanyahay jidhka baniaadmi, isagoo waxyaalahaasi ku hergelinayo jidhkiisa ruuxa ah ee ah kiniisadda.
Cibraaniyada 13:8 waxaan akhrineyna in *Ciise Masiix isla kii yahay shallay iyo maanta iyo weligeedba.* Isagu weligiis isma bedelin. Isla waxyaalihii uu "shallay dunida ka sameyey," maantana wuu sameynaya wuuna sii sameyn doonaa ilaa iyo weligeedba.
Isagu waa Ilaah aan weligiis bedelmeynin. Isla awooddii iyo subkintii bogsiinta ee Isaga ka dhex shaqeyneysay, way shaqeyneysa haddaba. Isla sida ay waagaasi muucjisooyinka u dhacayeen, Isagoo ku shaeynayey awoodda Isaga ku jirtay, isla maantana waxba isma bedelin. Markuu dunida joogay, Wuu hadlay, afkiisa ayuu istecmalayey, gacmihiisa ayuu ku taabtay dadka amaba wuxuu u ogolanayey inay taabtaa khamiiskiisa. Isla maantana, bogsiinta isla sidaas waa lagu heli kara – ee laakiin hadda waxaa loo adeegsanaya jidhkiisa, kiniisadda.
Dad fara badan ayaa maanta bogsanayaan ka badan inta la bogsiiyey waayihii Ciise Masiix joogay. Maanta jidhkiisan – kiniisadda wuu jooga meel walboo dunida ka tirsan. Waagii uu dinida joogay Isagu hal meel unbuu hal mar joogi kari wakhtigiiba, Maanta meel walba ayuu joogaa oo kuwa magaciisa ku shaqeynayaan ku dhex shaqeynaya! Xertiisa ee meel walboo dunida ka mid ah ka tirsan ayaa dadka u duceynayaan oo waxaa la arkaya Ciise oo muucjisadiisa dadka ka dhex shaqaynayso maanta!

Bogsiinta waxay ka mid tahay Farriinta Wanaagsan

Bogsiinta waa qayb ka mid ah injiilka. Farriinta wanaagsan waxay tahay inuu Ciise cafinayo dembiyada, xoreynayo kuwa la addoonsanayo oo barakeynayo qayb kastoo nolosha ka mid ah. Ma jiro injiil kaloo la fidinayo oo kan ka gees ah. Haddii aan diidno inaan u duceyno kuwa bukaan ama aan inkirno rumaysadka bogsiinta lagu helo, waxaan ahaaneyna kuwa kharibayaan oo wax ka saarayaan farriinta Wanaagsan uu Ciise noo keenay.
Dhabta jirta ma ahan in Ciise uu mararka qaarkood dadka bogsiiyey, ee laakiin hawshiisa joogtada ah ee uu si joogta ah u sameynayey ma ahayn! Mar kastaba dadka waa bogsinayey. Mar kastaba wuu bogsinayey kuwa u yimideen oo dhan. ma arkeysid dhacdo uu Ciise bogsiinin qof bukay oo Isaga bogsiin ka soo doontay amaba ma bixinin cudurdaar sida "kuma bogsiinayi," ama "ma rabi inaan ku bogsiiyo."
Markos 6:56 waxay leedahay, ***Meel alla meeshuu*** *galayba,* ***tuulooyinka*** *ama* ***magaalooyinka***

*ama **beeraha,** waxay suuqyada dhigeen kuwa buka, oo ay ka baryeen inay faraqa maradiisa oo keliya taabtaan, oo kuwii taabtay oo dhammuna way bogsadeen.* Meelba ka meel, wakhtiba ka wakhti, Ciise wuu bogsinayey kuwa bukaan *oo dhan* ee u yimideen Isaga. Matayos 9:35 waxay leedahay *Ciise wuxuu ku wareegay magaalooyinka iyo tuulooyinka oo dhan, oo sunagogyadooda ayuu wax ku barayay, oo injiilka boqortooyadiisa ku wacdiyeyey oo bugto **walba** iyo cudur **walba** ayuu bogsiinayey.* Meel alla meeshuu Ciise aadayba waxaa tuurnayeen dad badan oo waxyaala kala duwan ka calaancalayeen. Baybalka ma odhanayo inuu bogsiiyey kuwa iyaga ka mid ah oo keliya ee cudurro qaas ah qabeen. Waxaase qoran inuu bogsiiyey "cudur kasta iyo jirro kastoo ay dadka ula yimideen." Taasi waxay haddaba noo caddeyneysa inuu bogsiiyey dhammaan kuwa Isaga u yimideen oo dhan, dhib kastoo ay qabeenba. Taasi ayaa ahayd Farriinta Wanaagsan – taasi oo ah inuu Ciise bogsiinayey dadka maantana uu bogsiinayo kuwa bukaan – cudur kastoo ay ka cabanayeenba!

Bogsiin: Waxaa lagu Muujinaya Doonista Aabbaha

Luukos 9:11 waxaan ka akhrineyna inay dadka badan daba socdeen Ciise *wuuna soo wada dhoweyey dhammaantood wuxuuna iyaga kula hadlay wax ku saabsan Boqortooyada Ilaah, **wuuna bogsiiyey kuwa bogsiin u baahnaa.*** Bal haddaba arintaas miyaad sawiri karta? Kumanaan qof ayaa daba socdeen Ciise. Kuwa Isaga daba socdeen waxaa ka mid ahayeen boqolaan bukeen. Kuwa bogsiinta u baahnaa lama tiring karin, oo "dhammaan kuwa bogsiinta u baahnayeen wuu bogsiiyey."

Miyuu jira qof qoyskiina ama reerkiina ka tirsan, amaba kiniisaddiina oo bogsiin u baahan? Hadduu jiro haddaba Ciise wuxuu rabaa inuu bogsiiyo qofkaasi.

Mar baa jirtay uu juudaale u yimid Ciise. Juudaanlaha awoodda Ciise kama shaki qabin ee wuxuu ka shaki qabay inuu Ciise diyaar u yahay inuu ficil galo iyo in kale. Wuxuuna yidhi juudaanlihii, *Rabbiyow, haddii aad dooneysid waad I daahirin karta (*Matayos 8:2). *Waan **doonaya,*** ayuu ku jawaabay Ciise. *Haddaba daahirsanaw!*

Sidaas ayuu Ciise ku jawaabay su'aashii ku saabsaneyd inuu Ilaah doonayo inuu si kaamil ah u bogsiiyo juudaanlihii. *Maxaa yeelay, Ilaah qofna uma eexdo (*Rooma 2:11). Hadduu diyaar u yahay inuu qof bogsiiyo, haddaba diyaar buu u yahay inuu bogsiiyo dhammaan kuwa rabaa in la bogsiiyo.

Ciise wuxuu u yimid inuu hawlgeliyo shaqada Aabbaha. Ma jiraan wax uu sameyey oo ka gees ah wuxuu arkay Aabbaha oo sameynao, ee haddaba markuu Ciise bogsiiyey kuwa bukaan, wuxuu ku muujinayey doonista Aabbaha oo raali ka ahaa inay bogsiintaasi hergesho. Meel alla meeshuu aadayba wuu bogsiiyey kuwa bukaan.

Faalimaha Rassuullada 10:38 waxay leedahay, …*iyo siduu Ilaah Ciisaha reer Naasared ku subkay Ruuxa Quduuska ah iyo xoogga. Isagu waa wareegi jiray, wanaagsana wuu fali jiray, oo **wuxuu bogsiin jiray kuwii** ibliisku caddibay oo dhan; **maxaa yeelay, Ilaah baa la jiray isagii***.

"Ilaah baa Isaga la jiray" maxaa yeelay Ilaah baa jeclaaday wuxuu sameynayey! Waa maxay waxyaalaha uu sameyey? Wuxuu bogsiinayey *dhammaan* kuwa ku hoos silcayeen awoodda ibliiska. Sababtaas awgeed cudurrada ma ahan wax uu Ilaah baniaadmiga u keenay amaba doonista Ilaah ah, ee laakiin waa weerar ka yimid cadawga. Doonista Ilaah waa inuu burburiyo guumeysigaasi oo dhan uu ibliska dadka ILaah ku hayo Isagoo dadka bogsinayo. Bogsiinta waa wax xagga samada ka imanaya oo aan ku helnay Ciise.

Doonista Ilaah waa bogsiinta uu rabo inuu qof waliba bogsado, wuxuuna taasi ku caddeyey inuu ogolaado inuu Ciise bogsiiyo in alla intii u timid Isaga, sida ku dhigan Luukos 6:19, *oo dadkiina dhammaantood waxay isku deyeen inay taabtaan Isaga, maxaa yeelay, awood ayaa ka soo baxaysay Isaga oo bogsiinaysay **dhammaantood.***

Bogsiiya kuwa Buka!
Waa Ximan ka Tirsan Caleemosaarka ugu Weyna
Bogsiinta maantaba way jirta isla sida ay u jirtay wakhtigii uu Ciise joogay adduunkan. Dardaarankii ugu dambeyeen uu kula hadlay xertiisa marka ugu dambeysay ee uu dunida ka tegayey, Ciise wuxuu amray xerta (Caleemo saarkii Ugu Weynaa) inay gacmahooda saraan kuwa buka ***wayna*** *bogsan doonaan* (Markos 16:18).
Xerta waxay sameyeen isla waxyaalaha uu Ciise iyaga ku amray inay sameyaan natiijooyinkana waxaa noogula dhigay qaybta Baybalka ee ah Faalimaha Rasuullada. Waxaan akhrineyna inay qorantahay, *Oo waxaa kaloo ku soo ururay dad badan oo ka yimid magaalooyinkii Yeruusaalem ku wareegsanaa, iyagoo wada dad buka iyo kuwao jinniyo wasakh lahu drdereen; oo* ***kulligood waa la wada bosiiyey*** (Faalimaha Rasuullada 5:16).
Xerta hawl caadi ah ayey u ahayd inay *Wacdiyaan Injiilka oo dadka bogsiiyan,* maxaa yeelay Ciise ayaa iyaga ku amray inay sidaa yelaan. Wuxuu iyaga u diray inay baxaan oo ay wacdiyaan Boqortooyada Ilaah oo ay bogsiyan kuwa buka (Luukos 9:2).
Wuxuu iyaga ku yidhi, *Oo intaad socotaan wacdiya, oo waxaad ku tidhaahdaan, Boqortooyadii jannadu wa dhow dahay. Kuwa bukana bogsiiya, kuwii dhintayna sara kiciya, kuwa baraska lehna nadiifiya, jinniyadana saaara, hadiyad ahaan baad ku hesheen ee hadiyad ahaanna ku siiya* (Matayos 10:7,8).
Ciise xerta kuma amrin oo keliya inay wacdiya ee waxaa kaloo u dhereed inay bogsiyan kuwa bukan!
Naguma amarteen inaan sameyno wax aanan doonistiisa ahayn. Wuxuu si bayaan ah ku hadlaya oo leeyahay *Hadiyad ahaan baad ku hesheen ee hadiyad ahaanna ku siiya.* Waxaad heshay bogsiin. Waa lagu samato bixiyey. Waa lagu barakeyey. Xaqiiji haddaba inaad waxyaalahaas oo dhan aad dad kale u sii moodisid!
Waxaa maanta nagu wada hareersan dad bukaan oo maskaxdooda ay deganeen – kiniisadduna jawaabta saxda iyadaa haysa. Waan haysana hubka iyo awoodda aan ku fulineyno – waan haysana wax kastoo aan u baahannahay! Haddii aanan sida loogu talagalay u istecmaalin, xukun ayaa korkeena ah. Haddii aan bogsiin ka reebano dadka aan ku barakadeyn lahayn, waxaan noogula yeedhi doonaa xagga xukunka. Waxba xaq haba yaraatee uma lihin oo aan ku baabi'ino Injiilka. Ciise ma jirto meel uu nooga faray inaan inkirno ama aan sharaxaad ku difaacno Eraygiisa.
Waxba xaq uma lihin oo aan ku eedeyno Ilaah, amaba xaq uma lihin oo aan ku lahaano waxyaala uu Eraygiisa noo fareynin, haddii aan sidaa yeelnana annaga unbaa is difaaceyno iyo rumaysadarrodeena.
Hawsha nalagu aaminay waa inaan awoodda bogsiinta ee Ilaah aan u geyno dadka. Awooddiisa bogsiinta waxay ka dhex ficiltameysa marxalad kasto oo ka jirta meesha ay dadka ay Ciise u rumaysan yihiin isla sida uu Erayga dhigayo. Marxaladaha ay dadka u qaadan wayeen Ciise inuu yahay bogsiiyahooda, de waa lagama maarmaan inay aad u adkaato in Ciise uu muucjisooyinkiisa bogsiinta u muujiyo qofkaasi ama ummaddaas. Laakiin, meesha laga rajeynayo in Ciise ahaado kan uu sheegay inuu yahay yahayna oo weliba wax kasta loo sameynayo isla sida uu amray in la sameyo, Muucjisooyinkiisa la yaabka leh way ka ficilgelayaan halkaasi.
Waxa uu maanta Ilaah rabo ma ahan dad badan oo isugu yimideen inay iska wada kaashadaan inay difacaan Ilaah, laakiin waxaa loo baahan yahay ciidan wada hegan oo xerta Ciise ah oo si xoog leh u rumeysan oo ku taagan ballamada Eebbe. Wuxuu rabaa xerta aan ogolaanin marxaladaha rajo la'aanta ah oo si xooggan u rajeynayan inuu Ciise muujisooyinkiisa isku

muujiyo awooddiisa ku caddeyo bogsiinta kuwa buka.
Ilaah waa Ilaah wanaagsan. Bogsiinta waxay ka mid tahay hadiyadihiisa la yaabka leh ee uu ugu talagalay inuu baniaadmiga uu aad u jelcaylyahay. Xusuuso, wuxuu ogolaaday in Wiilkiisa aan dembaabin iskutallaabta ugu dhinto si ay rag iyo dumarba u helaan nolosha ugu kaamilsan!

Noolol Guul leh
…oo kaa dhergiya waxyaalaha wanwanaagsan.
Sabuurrada 103:5

33
Ilaaheen Deeqda Badan leh

Markuu Ilaah iisu muujiyey Ibraahim uu isaga Axdi la galay (Bilawgii 17) Wuxuu iisu muujiyey inuu yahay Ilaaha Awoodda leh, amaba magac kale lagu yaqaanay “El Shaddai,” taasi oo ay macnaheedu tahay “Ilaaha deeqda badan leh,” kan “Ilaaha deeq kasta laga helo” iyo weliba “kan dadka ku deeqo nolosha.”
Ilaaha nool waa an ay ka aasaasanto nolosha oo dhan, nolosha weligeed ah. Yooxanaa 10:10, Ciise wuxuu sheegay inuu u yimid inuu na siiyo nolosha Ilaah ee ay jirin wax ay la’dahay, noloshiisa deeq kasta ayaa ka buuxda oo weliba way buux dhaafta: “Waxaad madaxayga ku subagtaa saliid, koobkeyguna wuu buux dhafaa” (Sabuurrada 23:5) oo weliba inta nagu filan in ka badan ayaa ku leenahay Isaga: “Rabbigu waa arijirkeyga, waxba u baahan mayo” (Sabuurrada 23:1).
Waxyaalaha Ilaah ma ahan wax la nasiibsado. Waxyaalihiisa oo dhan way qorsheysan yihiin. Waxyaalaha Ilaah lama nasiibsado. Deeqdiisa waa mid aan la soo koobi karin. Sharaftiisa, awooddiisa, amaradiisa dhaldhalaalka iyo wixii la midka ahba Isagaa iska leh. Waxyaalaha uu uurka noogu yahay waxaa ka buuxaan noolol iyo jacayl.
Ilaah markuu baniaadmiga abuuray wuxuu ku abuuray ukaantiisa, si uu nolosha oo dhan Ilaah oo keliya uga deydo (Bilawgii 1:27). Sida ku dhigan Sabuurrada 8:5, wuxuu baniaadmiga ku uumay hab uu wax kasta kaga sareyo wax yarna ka hooseyo malaa’igaha iyo uunka kaleeto ee samada ku jira wuxuuna ku huwiyey sharaf iyo xushmad. Ninka iyo naagtuba jaalnimo ayey Ilaa kula nolayeen, madaama loo ekeysiyey u ekaanta Ilaah, sharaf lagu huwiyey, laguna afuufay neefta Ilaah, baniaadmiga wuxuu noqday mid awoodda Ilaah ka qayb qaatay. Ilaah waa Ilaaha deeqsiga badan leh, ma jiraan wax uu la’yahay-waxayna ahayd una qorsheyey inuu baniaadmiga si joogta ah ugu nolaado noloshaasi weligeed ah ee aan waxba la wayneynin. Waxay ku nolayeen jannada. “Ceeden” afka Cibraaniga waxaa lagu macnaynaya “meel deeqsi badan leh, xaqnimo iyo raynrayn” – Ilaah ayaana aha kan deeqdaas oo dhan bixinayey.
Markuu aadanaha dembaabay, wuxuu lumiyey deeqdi joogtada ahayd oo waxaa madax u noqday ibliiska. Baniaadmiga wuxuu hoos yimid uunka sheeddaanka (Efesos 2:1-2) ruuxiisana wuu dhintay. Ibsliiska wuxuu noqday kan maamulaya dunidan iyo waxa ku jiraan oo dhan, isagoo madaxtinimadaasi ku hergelinayo tuuganimo, dil iyo burburis. Baniaadmigu wuxuu noqday mid la addoonsado. Markuu dembaabay, wuxuu sharaftii iyo deeqsigii uu Ilaah ka helay ku bedeshay - dembi, masakiinnimo, cudurro, kelinimo iyo dhimasho. Waxylaahan oo dhan midna adduunka kama jirin dembiga aadanaha ka hore, laakiin hadda noloshan uu dembiga keenay ayaa ahaatay midda uunka oo dhan caado u ahaatay. Ma jirto mid ka mid ah uu Ilaah daneyey oo maskaxdiisa ka soo aasaasantay, wax u egna weligeed ma jirin gefka ka hore.

Axdiga uu Ilaah la gelayey nebi Ibraahim wuxuu ahaa mid uu ugu talagalay inuu ku xoojiyo xidhiidhka lumay markuu baniaadmiga Ilaah ku caasiyey si uu dib u cusbooneysiyo. Ibraahim waxaa ku imanayey Masiixa oo Ciise Masiixna waxaa lagu helayey nolosha buuxda ee ay jirin wax ka maqan taasi oo jaalnimo lagula yeelanayo Aabbaha, kaasi oo ah Ilaaheena ah mid ay jirn wax uu qabin ama awoodin, waa xidhiidhkaasi midka dib loo soo cusbooneysinayo.

Ilaah Wuxuu rabay Baniaadmi

Waa maxay waxyaalaha uu baniaadmiga lumiyey markuu Ilaah ku caasiyey?

1. Baniaadmiga wuxuu lumiyey wanaaggii uu Ilaah ku hor tegi jiray. Waxaana Isaga ka soocay dembiga, baniaadmiga wuxuu noqday mid xukuman oo ka fogaaday xaqnimadii uu Ilaah ku hor tegi lahaa (Ishaacyaah 59:2).
2. Baniaadmiga wuxuu noqday mid lumiyey noloshii uu Ilaah xidhiidh kula lahaa oo wuxuu ahaaday mid xagga Ruuxa ka dhintay.
3. Baniaadmiga wuxuu lumiyey wadaninimadii uu Boqortooyada Ilaah oo wuxuu ahaaday mid wadaninimadiisa ay tahay tan boqortooyada ibliiska. Inkaartii dembiga iyo dhimasho ayaa ka tan badiyey isaga wuxuuna si buuxda u hoos tegay hogaanka sheeddaanka.

Baniaadmiga xagga ruuxa ayuu ka dhintay macnaha xidhiidhka uu Ilaah la lahaa wuu burburay. Wuxuu ahaaday mid gudaha ka eedeysan, oo u addoonsan dembiga. Isaga oo ku hoos jira inkaartan, waxaa dhacday inuu ibliiskana u sii siyaadiyo inuu ku cadaadiyo waxyaala dheraad ah sida cudurrada, maskiinimada, kelinimada iyo wareer. Baniaadmiga wuxuu ku wejahnaa nooc dhimasho weligeed ah iyo Ilaah oo si joogta ah looga sooco.

Saa ay tahayna, Ilaah qorsha aad qaas ah ayuu baniaadmiga u lahaa, oo waa qorshahaasi kan Ilaah ku hogaamisay inuu Axdi la galo Ibraahim. Waxay ahayd baniaadmiga kan marka ugu horeysay Ilaah ruqsa uga helay inuu hogaamiyo oo ay waxyaalaha adduunka oo dhan ka amar qataan (Bilawgii 1:26,28; Sbrk 8:6), laakiin isla baniaadmigaas ayaa ogolaaday inuu xilkaasi gacantiisa ka baxo oo u gacan galo ibliiska, kaasi oo ugu dambeystii ahaaday ilaaha qarnigan (Lukos 4:6). *Ninkii la uumay* ayaa ahaaday qalabka uu sheeddaanka ku hergelinayo hawlihiisa sharka ah ee lagu macneyey dhimashada oo ah xidhiidhka Ilaah lala lahaa oo burburayo, oo haddana waxaa loo baahnaan doonaa *Nin kale* inuu ahaado inuu ahaado qalabka uu Ilaah adeegsan doono kuna fidin doono Noloshiisa. Ilaah wuxuu rabay nin Isaga addeeci doono wax kastana Isaga ka sara marin doono. Ibraahim ayaa ahaaday ninkaasi Ilaah addeecay ee xaqnimo Ilaah kula socday. Taas aawadeed, Ilaah wuu awooday inuu axdigiisa dunida ka hergeliyo oo wuxuu soo diray Ciise si uu noo samato bixiyo!

Axdigu mar kasta laba hab ayuu u shaqeynaya macnaha waa inuu yahay mid u dhexeya laba qof. Qof kasta oo ka qayb qaadanayo waa inuu kan kale iisu dhiibo. Axdiga aan Ilaah la leenahay, annagaa iisu dhiibeyno Isaga, Isaguna wuxuu hergelinaya wuxuu noo yahay oo dhan iyo weliba wuxuu noo yahay.

Axdiga uu Ilaah la galay Ibraahim waxay ahayd mid Ibraahim xagiisa laga rabay inuu Ilaah jeclaado, addeeco, raaco rumaystana Ilaah – haddii si gaaban loo sharaxo macnaha waxay ahayd inuu noloshiisa oo dhan Ilaah u dhiibo. Ilaah xaggiisana waxay ahayd in uu si buuxda isku dhiibo Ibraahim, waxay ahayd inuu difaaco Isaga oo weliba hogaamiyo, niyadda u dhiso, barakeeyo una garab qabto uuna ku deeqo wax alla wuxuu nolosha uga baahan yahay. Si joogta ah ayaa inta badan nala barayey dhabtan laakiin waa muhiim in nala xusuusiyo in wax alla wuxuu Ibraahim lahaa ay wada yihiin wax uu Ilaah iska leeyahay hadda.

Annaga waxay noo tahay arin aan ugu yeedhi karno subkin naga keensineyso inaan Ilaah ka jeclaano wax kastoo aan qiimeyneyno oo dhan, “inaan wax kasta ka tagno.” Waa inaan diyaar u nahay inaan wax kasta Isaga uga tagno. Hadda wax kastoo aan leenahay Isagaa iska wada leh –

guryaha, qoyska, shaqada, wakhtiga, lacagta, reeraheena, maalkeena iwm. Waxyaalahan oo dhan mar dambe annaga ma lahaaneyno ee waxaa iska wada leh Ilaah marba haddii aan nolosheena oo dhan u xilsaarno inuu hogaamiyo. Sheyga aan inta badan fahmin ama si qaldan u fahannay waa in Axdigu uu yahay mid u dhexeyo laba. Waxaan ogolaneyna inaan wax kasta Ilaah u xilsaarno oo uu maamulo annaguna waxaad diyaar u ahaneyna inaan la qabsano natiijo kastoo ka soo baxeyso iyo weliba sharuud kasta oo Axdiga la xidhiidha qiima kastoo ay nagu fadhidaba. Haba ahaate ee tani micnaheedu ma ahan inuu Ilaah wax kasta nagala wareegayo oo ma ahan inaanan mar dambe waxyaalaha aan adduunka uga baahannahay aan ka heleynin Isaga. Maya! Macnaha Ilaah naftiisa ayaa masuuliyad ka leh Axdigaasi aan la geleyno Isaga.
Dhinaca kale ee Axdiga, ibliiska dagaal ayuu nagula jira oo ma rabo inaan fahanno arintan muhiimka ah ah ee ku saabsan Ilaaha na uuntay iyo qorshaha wanaagsan ee uu noo leeyahay. Ilaaheena ah Ilaaha deeqda bixiya diyaarna u ah kuna faraxsan inuu nagu barakeeyo barakooyinkiisa uu nagu siinayo “hadiyad kastoo wanaagsan.” Axdiga aad Ilaah la galeysid waxaa lagu macneyn kara in uu qalbigiisa oo dhan diyaar kuula yahay inuu ku barakeyo kuna adeegsado. Wuxuu amaana kaaga dhigay noloshiisa ay wax ka maqan jirin, xigmaddiisa wax ka sareya ay jirin, awooddiisa caadiyanka ah ee ay jirin wax ka awood badan, iyo la jiritaanka uu kula jiro inaad si joogta ah wax kastoo aad u baahan tahay iyo marka aad u baahan tahay aad heshid (eeg 2 Korintos 9:8). Mar alla markaad Isaga wax uga baahantahay waad waceysa wuxuuna ballanqaaday in kan Isaga ballan kula jira uu yahay mid ay wada shaqeyn ka dhexeyso sababtaas awgeed wuu u hergelinaya dooqa uu wadajirkaas ka ciyarayo. Wuxuu Luukos 15:31 iyo Rooma 8:32, nagula hadlaya oo leeyahay, *Wiilkaygiiyow, weligaa waad ila joogtaa, oo waxayga oo dhan adigaa leh…Kii aan xataa Wiilkiisa lexejeclaysan, laakiinse innaga dhammaanteen u bixiyey, sidee buusan wax walbana inoola sii doonin Isaga?*
Ilaah noolol ayuu qayb kastoo aad ku mushquulsan tahay noloshaasna waxaad ku heleysa Ciise Masiix.

Noolol Ka Jirta Qayb kasta
Ilaaheena waa Ilaaha deeqda badan ee nasiinayo noolol dhan, oo Ciise Masiix ayuu nagu siiyey noloshaasi dhan. Noloshiisa buuxda iyo uga ekaanshaha xagga damiirka iyo dabiicadda waxaan ku wada lahaanay xaqa ballamada uu na siiyey (2 Butros 1:4). Waxyaalaha noloshan dhan uu na siinayo ku jiraan way ka badan yihiin xataa wax alla waxaan nolosha uga baahnaan karno marxalad kastoo ay ahaataba.
Markuu ninkii iyo naagtii uu Ilaah uumay dembaabeen, waxaa dhacday in qayb kastoo nolosheena ka tirsan ay wada saameysay dhibaatadaasi ku saleysan dembiga aan dhaxalnay taasi oo ay ka mid tahay dhimashada aan kala dhimanay xidhiidhka aan Ilaah la lahayn. Ma jirto qayb nolosheena ka tirsan oo sharafta Ilaah ku hartay. Wax kasta way burbureen. Wax la’aan iyo iyo gefidda nolosha buuxday waxay ahadeen wax dhab u ah qof kastoo ka soo farcamay Aadan. Haba ahaatee, kuwa Ciise aaminaan waxaa u yaasha noolol aanay waxba ka maqnayn. Dhimashada uu Ciise iskutallaabta ku dhintay iyo sara kaca uu dhimashada ka soo sara kacay ayaa noo wada buuxineysa naguna deeqeysa wax alla waxaan nolosha uga baahannahay inta aan adduunka joogno iyo weliba nolosha dambe ee aan rajeyneynaba. Ciise iskutallaabta ayuu ku wada qaatay dembiyadaada deentii laguugu lahaana wuu bixiyey. Wuxuu garbaha u dhigtay silacaaga. Wuxuu baabi’iyey cudurradaada, wuxuuna cidhib tiray saboolnimadaada iyo baahida aad qabto oo dhan (Ishacyaah 53:3-6; 2 Kor 5:21, 8:9; Gal 3:13), wuxuu dhamaan ku deday xaqnimadiisa iyo noloshiisa ka sareysa noolol kasta. Tan waa war wanaagsan – Injiilka: Ilaah oo nagula hadlayo naguna deeqayo Ciise Masiix ayaa inoo hayo nolosha ay waxba ka maqnayn. Marba haddii uu Ilaah si toos ah jawaab “MAYA” ah kuu siinin qayb noloshaada ka tirsan, waad

haysata ballamada iyo dhaxalka laguugu iibiyey dhiigga uu Ciise Masiix iskutallaabta kuugu daadshay ayaa kugu dhiirigelinayaan rumaysadkaaga. Boqortooyada keliya ee uu Ilaah si aan caadi ahayn kaga waramayo waa dhimashada. Ilaa hadda dhimashada ma ahan wax Ciise lid ku ah. Dhammaanteen waan wada dhiman doonaa marba hadduu Ciise soo noqonin intaan noolnahay. Laakiin urka dhimashada, iyo amarkeeda iyo awooddeeda waa la burburiyey (1 Kor 15:50-57). Ilaah oo ah Aabbahaaga naxariista badan leh ee ku jacayl, wuxuu kugu samato bixiyey beeca ugu qiimaha badan.

Isagu waa Ilaaha deeqda badan. Markaad raacdid noloshiisa ay wax kasta ka butaacayaan oo aad u ogolaatid inuu noloshaada hogaamiyo, wuxuu kuu muujinaya jiritaankiisa iyo sharaftiisa. Ibliiska kuma faraxsano nolosha Ilaah iyo jiritaankiisa oo si joogta ah ayuu u doondoonaya inuu xerta ka xado barakooyinka la xidhiidhaan si aanay kuwa awliyada ah uga faa'idin. Wuxuu ku dadaalaya ibliiska inuu Ilaah ka dhigo mid qaldama oo aan dhameyn kaasi oo aad waxba ka hubin oo aad addoonsinimo iskiiga caabudeysid – waa fikiradda uu ibliiska rabo inuu kaa dhaadhiciyo. Ma ahan oo keliya inuu eedeyn istecmalayo ee waxaa kaloo uu istecmalaya inuu kaa qalbi dillo jacaylka aad u qabtid Ilaah oo aad rabtid inaad Isaga toos u caabuddid oo wuxuu rabaa uun inaad Ilaah macaarad ku ahaatid; isagoo isku deyayo inuu kaa gacan maroojiyo waxyaala uu durbaba Ilaah kugu deeqay. Wuxuu kaa dhigaya mid damiirkiisa kaga shaleya wax alla waxaad sameyneysid oo dhan. wuxuu kaa dhaadhicinaya inay wax kastaba sharci iyo dhaqan iska yihiin oo aad jaho wareereysid haddii aad midkood qumaati isugu dhiibtid oo aad ku faraxdid.

Laakiin Ilaah ma ahan waxyaalahas uu ibliiska sheegayo midkoodna. Waa Aabbahaaga aad kuu jacayl ee kugu iibsaday beeca kan ugu sareyo. Wax uu adiga kula barbardhigi karo ma jiraan hortiisa waxaad ku leedahay qiima sare. Maxay kula tahay sababta uu ballamadiisa kuu soo marinayo Ciise? *Wax kastoo uu Isagu leeyahay adigaa iska leh, aad ayuuna ugu farxaya markuu arkayo inaad lahaatay ballamadiisa oo aad si buuxda u ficilgelineysid.*

Hormarka laguu sheegayo waa Ilaah naftiisa waayo hormar kastoo aad haysatid haddii aanay ahayn mid uu Ilaah kugu hogaamiyey ama aad ugu adegeysid waxaada oo dhan waa sida hal bacaadda lagu lisay. Ma rabo inay carruurtiisa wax qalad ah kala kulmaan waxyaalaha noloshooda la xidhiidha xataa sida dhaqaalaha. Wuu nacayb yahay qabyo weynida iyo dadka iyaga uun wax isla rabaan. Ma rabo inay carruurtiisa wax la'aan ahadaan. Waxna kama qabo inuu taajirnimadiisa u wada fidiyo carruurtiisa. Laakiin wuxuu ku faraxsan yahay markay haystaan oo ay ku faraxsan yihiin wuxuu iyaga ku deeqay xataa xagga dhaqaalaha. Ilaah wuxuu rabaa inay carruurtiisa nolosha kaga deydaan raacaanna Isaga (Efesos 5:1), oo aan ahaano kuwa gacma furan oo u qalbi furan sida Isagu uu yahay.

Wax la'aanta waxay dunida ku soo gashay dembiga. Wax la'aantu ma ahan wax wanaagsan oo lagu faano amaba Ilaah kuu dhaweyneyso ee laakiin waa inkaar dadka Ilaah ka xayuubeyso caafimaadkooda, farxadda iyo awoodda ay deeqda ugu fidin lahayeen kuwa dhiban.

Ilaah wuxuu rabaa Injiilka – Warka Wanaagsan – inuu geero dunida meesha ugu fog. Wuxuu rabaa inuu kuu barakeeyo hab kastaba si aad adiguna u ahaatid weelka uu Ilaah adeegsan doono oo doonistiisa ku fidin doono si sharaftiisa, hormarkiisa iyo jacaylkiisa ay u gaaraan dadka kale meel alla meesha aad joogtidba.

34
Ilaah wuxuu Rabaa inaad Hormartid oo guuleysatid

Erayada “hormar” iyo “guul” waxay noqdeen kuwa si aad ah six un loo fahmay waxaana nagu waajib ah inaan si taxadir leh Baybalka uga eegno sida uu erayadan uga hadlayo.
Dadka qaarkiis erayga “hormar” wuxuu dhegahooda uga dhawaaqaya inuu yahay mid laga shaki qabo. Madaama ay hab nooleydka dunida sawir kale u yeeshay macnaha eraygan, waxaan qaadanay oo aan ku istecmaalay sida aan u fahansannahay oo aad ku saleysinay sida dunida looga istecmaalo. Waxaan ku fikirnay kuna tafsiirnay inuu erayga ka hadlayo istareexid iyo wax isla rabid iyo noolol “guul” leh oo fursad looga faa’ideysanayo waxyaalo kale, amaba hogaanka diimaha ee nagu hogaaminayaan damaca jidhka, mid uu shaqsiga dantiisa oo keliya ku oofinayo oo xataa inta badan ay ku jirto fikirad ah inuu qofka qabo dareenka ah inuu si dhaqso ah ku taajiro.
Habka uu Baybalka u arko labadan eray, “guul” iyo “hormar” aad bay u kala duwan yihiin. Ilaah ma rabo inaad inaba ku noolaatid noolol adiga uun aad dantaada oo keliya ka fikireysid amaba nolosha laga sharaxayo Yacquub 4:2-3, *Waad damacdaan, mana lihidin,; waad dishaan, waadna xaasiddaan, mana heli kartaan; waad dirirtaan, waadna dagaallantaan, mana lihidin, waayo, ma aad weyddiisataan. Waad weyddisataan, mana heshaan, waayo, six un baad u weyddiisataan inaad ku bixisaan damacyadiinna aawadood.* Waxaa jiraan labo arimood uu Ilaah aayadahan ka muujinayo: 1) In wax lagu weydisanayo damiir shaqsiga isla hunguri weynyahay si uu ugu nolaado noolol iskiisa wax u tareysa, taasi oo lagu macneyey inay tahay hab qaldan ku duceysad waana damiir qaldan iyo 2) Kan damiirkiisa waxy waxyaalahaas qaldan ku jiraan ducadiisa jawaab uma helayo. Sababtaas awgeed waxaan arkeyna inuu Ilaah dareenkeena fiirinayo markaan duceysaneyno. Haddii aan dareen qaldan qabno ama ku duceysano, naguma barakeynayo sheygaas.
Haba ahaato ee, Baybalka wuxuu ka hadlaya hormar iyo guul, ee haddaba waa inaan fahanno wuxuu Ilaah ula jeedo erayadan. Markuu baniaadmiga ugu horeyey Ilaah ku caasiyey uu dembi galay; cabsi iyo guul darro ayaa baniaadmiga u ahadeen noolol maalmeydkiisa iyo waxyaalaha uu ku fikirayo oo dhanba. Waxyaalahan weli waan daremeyna kuna dhaqmeyna xataa kaddib markaan xerta Ciise ku biirno – weliba qaas ahaan haddii aanan si sax ah wax noogala barin Erayga Ilaah. Kuwa badan oo xerta Ciise ka mid ah ayaa nabaro badan qabaan oo ay ku sababeen rumaysad darro iyo guul darro, iyagoo aan umaleyneynin oo aan rajeyneynin inay mar dambe noloshooda wax wanaagsanba ay ka dhici doonin amaba aanay kobcin doonin guul iyo hormar. Taasi ma ahan doonista Ilaah.
Ilaah ma rabo inay carruurtiisa ku guuldarreystaan wax kastoo ay sameynayaan amaba ay ahadaan kuwa noolol aan hormar lahayn ku nool. Wuxuu qoyskiisa u diyaariyey inay ku noladaan noolol hormar leh. Waana sababaha midkood uu Ciise u dhintay ugana guuleystay sheeddaanka. Ibliiska aad buu uga murugoonaya markuu arko inay xaaladdaadu wanaagsan tahay. Ma rabo inuu ku arko adiga oo faraxsan ama raynraynaysa, lagu bogsiiyey, lagu xoreyey oo barakoobay. Wuxuu ku farxaa oo keliya markuu ku arko adiga oo xabisan oo niyad jabsan oo aan awoodin inaad ku noolaatid barakooyinka uu Ilaah kugu tallogalay. Sababta keliya uu ibliiska kugu imanayo waxay tahay inuu wax ka xado, ku dillo kuna burburiyo si aad u noolaanin; laakiin Ciise wuxuu u yimid inuu ku siiyo nolosha midda ugu kaamilan (Yooxanaa 10:10).
Wareerka, niyadjabka, guuldarroda, maskiinimada, dembiga iyo inkaartuba dhammaan waxay sal ku leeyihiin dunida, laakiin Ciise wuxuu leeyahay, *Kalsoonaada, anaa ka adkaaday dunidaye* (Yooxanaa 16:33). 1 Yooxanaa 5:4 waxay iyaduna leedahay, ***Ku alla kii ka dhashay Ilaah wuxuu ka adkadaa dunida***. Adiga iyo aniga waxaan nahay carruurta Ilaah, wuxuuna nagu dhex beeray awoodda aan kaga guuleysano dunida, waana Ruuxa Ilaah kan nagu garab gelayo. Weerar kasta waan ka guuleysaneyna. Tani macnaheedu waa ku noolanshada guusha iyo hormarka.

Erayga Ilaah wuu Hormaray

Ma ahan inaan ka hadleyno noolol aan waxba dhib ah lahayn. Ma ma ahaan karto! Laakiin waxa ay arintan macneyneyso waxay tahay inaan ku noolnahay noolol si joogta ah loo weerari doono inta aan dunida ku noolnahay. Ibliiska weerar ayuu kugu bilabaya hadduu arko inaad Ilaah ku rumaysantahay sida uu Eraygiisa dhigayo. Wuxuu isku deyaya inuu wax kasta kugu sameyo si uu u burburiyo xidhiidhka aad Ilaah la leedahay – laakiin Ilaah wuu kula jiraya guulna wuu ku siinaya. *Haddaba hadduu Ilaah nala gees yahay yaa inaga gees ahaan karo?* (Rooma 8:31).

Madaama ay dad badan ka xanaaqayan erayga "guul," waxaan mar Ilaah weydiyey inuu I baro wuxuu ula jeedo erayada guul iyo hormar waxaanna helay jawaabtan, *Ninka ama naagta waxay hormareysa marka ay wax alla wuxuu Ilaah ku hadlay ee uu ballanqaaday oo ku saabsan Eraygiisa oo ka hadlayaan xerta, si toos ah uga muuqdaan noloshiisa ama nolosheeda. Tani macnaheedu waa hormar iyo weliba guul."* Waa Erayga waxa hormarayo. *Sidaas oo kaluu eraygii afkayga ka soo baxaa noqon doonaa, oo isagoo mdhan igu soo noqon mayo, laakiinse wuxuu oofinayaa wixii aan ula qasdiyey, waana ku soo liibaanayaa wixii aan u diray* (Ishacyaah 55:11).

Ilaah wuxuu rabaa Eraygiisa, Injiilka inuu hormaro. Markuu hormarona, awooddiisa waa la arkaya dadka waa la bogsiin doonaa, la barakeynaya oo waa la samato bixinaya. Eraygu wuxuu horma yeelanaya markay dad badan ay farriintaasi taabato oo ay tirada xerta badato.

Ilaah wuxuu weligiisba ku fikiraya tiroda badaneyso, hor u socod, guul iyo hormar. Eraygiisana waa isla sidaas. Wuu diraa mana ahan inay meel dhaxda ah ku hakato, laakiin waxaa laga rabaa inuu samada ku laabto kaddib markuu biyo waraabiyo dhulka kana dhigo mid barwaaqo la nuurayo si ay midho uga helaan kuwa beerta abuuranayaan kibisna kuwa cunayan (Ishaacyaah 55:10). Ilaah wuxuu Eraygiisa ku xaqiijinaya calamooyin iyo yaabab, Isagoo rabaa in kuwa tiro badan ay wada helaan barakooyinka Ilaah ee xad dhaafka ku butaacayan!

Ilaah waa raxiin, dadkana kama ceshto waxyaalaha wanaagsan. Isagu dadkiisa kama lexejecleysto waxyaalo wanaagsan sida ay u fasiraan dadka qaarkood oo doonayaan inay Erayga qaloociyan oo Ilaah ku macneynayaan inuu yahay wax uu runtii ahayn. Efesos 1:3 waxay noo sheegeysa in Ilaah Masiixa nagu siiyey *Barako **kasta** oo Ruuxa ka trimid eek u jirta meelaha jannada.*. Rooma 8:32 waxay na leedahay, *Kii aan xataa Wiilkiisa lexejeclaysan, laakiinse innaga dhammaanteen u bixiyey, sidee buusan wax walbana inoola siin doonin Isaga*. Ma jiraan wax uu Ilaah naga lexejecleysanayo. Wuu ina *siinaya* wax kastoo aan rabno uu nala rabo.

Ilaah wuxuu rabaa inaad u ahaatid adeegahiisa, markaad adeegahiisa tahayna shaki kama jiro inaad hormareysid. Sabuurrada 35:27 waxay leedahay, *Kuwa xaqnimadayda jecelu farxad ha ku dhawaaqeen, oo ha farxeen oo had iyo goorba ha yidhaahdeen, Rabbiga ha la weyneeyo, waayo, isagu wuxuu ku farxaa barwaaqada addoonkiisa.* Ilaah wuxuu rabaa inaad aragtid in ku alla kii Isaga addeeca uu u abaal marinayo – guul helayo. Waa maxay sababta? Maxaa yeelay waxaad ku jirta qorshihiisa qorshahaasi oo durbaba la barakeyey. Qorshooyinkiisa waxaa noogula caddeynaya Eraygiisa, "iguma soo noqonayo isagoo madhan" ayuu yidhi ama isagoo aan midho dhalin. Haddii aad rumaysan tahay Eraygiisa, haddaba addeec oo sii fidi, wuuna badnaan doonaa oo wuu sii butaaci doona, macnaha wuu hormaraya. Barakooyinka way idin wada saameyn doonaa dhammaan adiga iyo kuwa aad la qaybsaneysid Injiilka.

Yashuuca 1:8 Rabbigu wuxuu leeyahay, *Kitaabkan sharcigu waa inaanu afkaaga ka tegin, laakiinse waa inaad u fiirsataa habeen iyo maalinba, si aad u dhawrtid waxa alla waxa ku qoran oo dhan, waayo, markaasaad jidkaaga ku barwaaqoobi doontaa, waanad liibaani doontaa.* Waa maxay waxa uu Rabbigu halkan ku ballanqaadayo? *Waanad liibaani doontaa.* Goormaad barwaaqoobi doontaa oo aad liibaani doontaa? Waa marka aad Erayga Ilaah xajisid, rumaysatid oo aad oo aad addeecdid maxaa yeelay Erayga ayaa kugu dhex barwaqoobaya! Tani ma ahan wax

ka soo aasaasmay maskax baniaadmi oo loo malayn karo in ay yihiin uun wax loogu tallagalay kuwa xoogga badan ee wejiga leh. Maya! Waxay ku wada saabsan yihiin Erayga Ilaah oo nolosha dadka dhabta u bedelayo, oo barakeynayo oo noolol heer sare ah uu Ilaah raali ka yahay dadka gaarsinayo waxayna run u tahay kuwa qalbigooda ku qaata oo ficilgeliyaan.

Baahida Jidhka oo Raacsan Baahida dunida

Ballamada Ilaah ma ahan kuwa taabanayaan oo keliya qaybo nolosheena ka tirsan. Dad badan oo tacliinta kitaabka ku dheradeen ayaa fasiraadda qoraalka wareeriyeen oo maanta way adagtahay inay dadka qoraalka sida uu yahay ay u qataan. Laakiin Injiilka wuxuu ku hadlaya waxyaala cuslus. Barakooyinka Ilaah waa kuwa aan dunida kaga faa'ideyno oo aan weliba samaduna kaga faa'idi doonno. Hase ahaatee, samatobixinta iyo bogsiinta waa wax dunida ku eg, maxaa yeelay xagga samada ugama baahnaan doontid kuwaas. Halkan dunida oo keliya ayaad uga baahan tahay!

Sabuurrada 1:1-3 waxay shegeysa in hadduu qofka farxaddiisa ku jirto sharciyada Rabbiga uu ahanayo sida geed lagu beeray durdurada agtooda, kuwaasi oo mirahooda dhala wakhtigooda oo ay caleentooda ay engegeynin. **Wax** kastoo uu sameyo way liibanayaan. Bal eeg aayadahaasi ma sheegayan inaad ka liibaaneysid oo keliya qayb noloshaada ka tirsan, tusaale ahaan waxay ka bilaabaneysa dhalashada cusub ilaa iyo kor iyo hoosba ama dhibaato ha kuugu ahaato ama istareex ee shaki kama jiro in laga liibanayo nolosha oo dhan. maxaa yeelay qof waliba wuxuu ka faa'idaya isla xididkaasi nafaqada keenayo isla sidaas ayaan nafaqada Ruuxa uga wada heleyna hal Ilaah. Marxaladahu isku mid ma ahaan karaan! Dunidan waxay hoos joogta inkaarta dembigii aan dhaxalnay, laakiin marba haddii aad ka toobadkeentid oo ay daacad kaa tahay waxaad ahaneysa uun cusub oo waxaad dhalaneysa dhalashada cusub. Waana marka aad ahaneysid mid maqla oo ku ficiltama Erayga Eebbe noloshaaduna way barakoobeysa. Waxaad hoos mareysa ballamadii barakooyinka lagaa ballanqaaday, ma ahan inaad adiga tahay mid caqli badan ee laakiin nimcada Rabbiga ayaad ku heleysa, waxaadna isla markaasi rumeysatay Ciise Masiix kaasi oo ah kan lagu helayo xaqiiqda Axdiga. Ciise wuu barakeysan yahay adiguna Isagaad ku jirta sababtaas awgeed waad barakeysan tahay oo barako kastoo ruuxiyan ah waad ka qayb qabta sida ku dhigan Efesos 1:3 qayb kastoo noloshaada ka tirsanba.

Sabuurrada 1:3 waxaan ka akhrinay in wax alla wuxuu qofkaasi gacanta saaro ay barwaaqoobayaan. Taasi waxay macnaheeda tahay qayb kastoo noloshaada ka tirsan isla sida ay laamaha xididkoo uga wada faa'idaan, waad kaga wada faa'ideysa oo waad nuureysa oo barwaaqada Eebbe noloshaada ayaa laga arki doonaa. Noolol ayaa timid! Noolol buuxda oo ay waxba ka maqneyn (Yooxanaa 10:10) noolol xaga Ilaah ka timid oo xaddhaaf ku butaaceysa oo cid kasta barakeyneyso waa haddii la soo dhaweyo. Tani waa noolol kobcineyso, fideyso, tiraduna badnaaneyso oo sharafta Ilaah midba mid kale kaga sii gudbeyso!

Mar ayaan maqlay Ruuxa Ilaah oo igu leh, "sheyga ugu adag ee aan sameynayo waxay tahay inaan dadka ka dhaadhiciyo oo ay rumaystan inaan wada barakeyey." Waa nala khiyaanay oo maskaxdeena waa la wasakheyey oo waxaa lagu wasakheyey waxbaridda diimaha bedelkii si deganaansho ah Erayga Eebbe wax looga baran lahaa. Waa nala ceebeyey oo niyadda nagala jebiyey markaan markuu Ilaahna na barakeyey oo aan annaguna iska casileyno oo aan hawlaheena kale iska wadano oo barakadii aan helnay ma lahaaneyno oo kuma shaqeyneyno. Tani ma ahan mid Ilaah sharfeyso. Waxay Ilaah ka farxineysa markaan Eraygiisa rumaysano oo aan ka ogolaano wuxuu noogu talagalay.

Ciise wuxuu Luukos 12:15 nagu leeyahay, *Wuxuu iyaga ku yidhi, Fiiriya oo iska ilaaliya damacnimada oo dhan, waayo, qof goortuu maal badnaado, noloshiisu kama timaado maalkuu leeyahay!* Dareenkaaga aad buu muhiim yahay. Haddii aad ku fikireysid inaad dhawr shey

yeelatid si laguu sharfo ama magac u lahaatid ama aad naftaada ku qancisid, waad jaho wareersan tahay. Muhimadda waxay tahay inaad jeclaatid oo aad u adeegtid Ciise. Wax kale oo dhan macna male haddi tan lala barbardhigo.
Masixiinta badankood maanta waxay ku noolyihiin guryahooda qaaliga ah iyagoo hareerahooda ku wareegsan yihiin alaab qaali ah iyo baabruuro kuwa ugu asriyeysan, laakiin iyagu naftoodu noloshoodu ma sugno. Iyagu ma jeclo Ciise, maxaa yeelay haddii ay jeclaan lahayeen waxay ku dhaqmi lahayeen Eraygiisa (Yooxanaa 14:21). Waxay fidin lahayeen farriinta Isaga ku saabsan, waxay ku hadli lahayeen afafka, wax bey sii sheegi lahayeen, waxay u duceyn lahayeen kuwa buka, jinniyada ayey dadka ka saari lahayeen; waxay sadaqo ku bixin lahayeen shaqada Rabbiga oo nolosha dadka ayey isku takhsuusin lahayeen. Waxyaalaha adduunka waa uun wax qiimahooda aad u yaryahay. Ciise ayaa ah kan leh qiimaha ugu sareyo, laakiin Isagu ma rabo inaan ku kibirtid wuxuu kugu barakeyo.
Ilaah wuxuu dunidan u uumay carriirtiisa. Waa adduun maaleyd taasi oo aad xooga looga saarayo barakooyinka maalka adduunka oo loo arko inay wax kasta ka muhiimsan tahay. Ciise wuxuu yidhi, *Laakiin horta doondoona BoqortooyadaIlaah iyo xaqnimadiisa* ***oo waxyaalahan oo dhan waa laydinku dari doonaa*** *(*Matayos 6:33). **Waxyaalahan oo dhan** waa maxay macnaheedu? Marxaladdan Ciise wuxuu kaga hadlaya cuntada iyo dharka. Wuxuu aayadda 32 ka leeyahay, *Aabbihiina samada ku jira wuu garanaya inaad u baahantihiin waxyaalahan.* Wax uu Ilaah kaa reebanayo ma jiraan! Laakiin wuxuu barakeynaya qayb kastoo noloshaada ka tirsan maxaa yeelay wuxuu rabaa inay qayb kastoo noloshaada ka tirsan ay sugnaato.

“Midho Badan” Oo Ilaah lagu Sharfo

Yooxanaha 3aad Aayada 2aad waxay leedahay, “*Gacaliyow, waxaan kuugu duceeyaa inaad wax kasta ku liibaantid oo aad caafimaad qabtid siday naftaadu u liibaansan tahay*.” Ilaah waxa uu doonayaa inay wax waliba hagaagaan oo aad adigu barwaaqoobtid. Ereyga ‘barwaaqo’ iyo ‘guul’ xagga luuqada Giriiga micnuhu waxa weeye barako, talaabo wanaagsan iyo horumar. Ilaah waxa uu kaa doonayaa inaad talaabo wanaagsan qaadid oo horumar gaartid si boqortooyadiisa si aad ah xaggaaga looga fuliyo
U fiirso inta mas’aladood oo uu Ciise soo bandhigay oo hadlaysay barwaaqo ama wax badnaan iyo horumar wanaagsan. Tusaale ahaan, wuxuu ka hadlay xirfadaha badnaan doona. Wuxuu soo qaatay masaalka ereyga la beeray kaas oo dhalay inta u dhaxaysa 30 ilaa 100 labalaab, iyo masaal kale oo innaga inagu matalaya dabayaasha banii-aadamka. Waa maxay waxa uu raadinayo ninka wax dabta? Waa inuu wax gacanta ku dhigo!
Cutubka 15 ee Yooxana Ciise waxa uu ku sheegayaa inuu isagu yahay geedka canabka oo aynu inaguna nahay laamihii. Aayada 5aad waxa uu ku leeyahay aniga la’aatay waxba ma sameyn kartaan. Waa run, mar walibana waa la sheegaa, laakiin miyeynan ahyan wax iska caadi ah inaynu ku dheragno qaybtaas ka mid ah aayada? “Haa”, waynu isla ogol nahay in, “Ciise la’aantiis aynu waxba sameyn Karin,” oo aynu bilownaa inaynu ku dheganaano inta yar oo aynu sameyn karno iyo jawaabaha yar ee aynu arki karno. Waa inaynu akhrinaa micnaha oo dhan! Mararka qaar inaga seef la boodka ah waynu buun buuninaa micnaha aayadaha, laakiin waxaan qabaa mida taa ka soo horjeeda. Kuwa dhaqan diimeedka waaye kuwa aayadaha gooni u goosta. Halkan aayada 5aad Ciise wuxuu ku leeyahay, “Kii igu jira oo anna aan ku jiro, kaasaa midho badan dhala, maxaa yeelay, la'aantay waxba ma samayn kartaan. Inta badan waxaynu aragnaa uun dhanka xun, laakiin halkan Ciise waxa uu ku sheegayo waa wax wanaagsan. Kaasaa midho badan dhala. Maxaa loola jeedaa “midho badan?” Barwaaqo iyo horumar!
Si xooga loo saaro sida uu Ilaah ugu han-weyn yahay inaad “midho badan dhasho, Ciise wuxuu ku celcelinayaa barar badan isla cutubkaa dhexdiisa. Aayada 16aad wuxuu inoogu sheegayaa

inuu ina doortay- taas oo ah, inuu ina caleemo saaray xag qaab iyo xag qorshaba – inaynu soo saarno midho badan oo waara. Aayada 8aad wuu sii wadaa oo uu ku leeyahay, “Waxaa Aabbahay ku ammaanmaa inaad midho badan dhashaan, waxaadna noqon doontaan xertayda.” Muxuu ula jeedaa Ciise? Wuxuu ula jeedaa in Ilaah ku ammaanmo marka si wanaagsan wax waliba kuugu dhacaan oo noloshaadu midho dhasho: midho ka dhasha noolol lagu lahaado Ciise, noolol badan, taas oo gaarta xubin iyo unug waliba oo jirkaaga ka tirsan.
Waa doonista Ilaah in Ereygiisa, balan qaadyadiisa iyo barakadiisa kugu sii bataan iyaga oo ku tarmaya dhexdaada. Waa doonistiisa in qorshihiisa adiga lagaa dhex helo. Marka madaxa kor u qaad oo arag inta Ilaah ku barakadeeyey. Waxaad eegtaa mar hadii aad ku jirtid Ciise inaad tahay barako meel walba oo aad tagtid. Miro ayaad dhalaysaa oo aad koraysaa oo “wax waliba oo aad sameysid, way barwaaqoobayaan.”
Ha u ogolaanin dhicitaankaaga erayga ugu dambeeya ee arinka. Qof waliba waa sameeyaa khalad. Qof waliba waa dhacaa oo sameeyaa dhaqaaq khaldan dhinac uun, laakiin ma ahan inaad halkaa ku xirxirantid. Madaxaaga kor u qaad, eeg Ciise oo ha ku tuso isaga sida uu adiga naf ahaan kuu eego. Isla markaasi aad eegaysid qorshaha weyn ee uu adiga kuu hayo, cabsi, dhicitaan iyo fikirka ku salaysan in lagaa reeyey ayaa kaa tagaya oo waxaad arki doontaa runtii in Ilaah ku barakadeeyey!

35
Barakada Ibraahim –Taada!

Haddeer, Ruuxa Ilaah ayaa aad uga firfircoon sidii hore si ka daran. Isagu waxa uu dhex socdaa aduunka oo dhan isla markaasi oo uu jiro wakhti badan oo la isugu diyaarinayo in ammaantiisa dhulka ka buuxsanto. Jirka Masiixa ayaa kor u kacaya si uu u qaato meeshii ku haboonayd, halkaas oo uu Ciise ku iibsaday dhiigiisa.
Si kastaba arinku ha ahaadee, wax waxyaalahan ka mid ah ma dhacayaan inta uu sheydaanku si qabooban u fadhiyo. Wuxuu sameyn hayaa hawlihiisii ugu xumaa si uu isu hortaago shaqada Ruuxa Qoduska ah. Wuxuu khaas ahaan dagaal ku hayaa dhaqdhaqaaqa uu Ruuxa ku hayo raga iyo dumarka isaga oo soo maraya xagga Ereyga, maxaa yeelay waxaa ku jira awooda Ilaah ee badbaadinta. Ereyga waa seefta Ruuxa. Waxay nadiifinaysaa, dhaahirinaysaa oo sare u qaadaysaa awliyada, oo dhankeedana waxaynu ka qayb qaadanaa wax waliba oo uu Ilaah noo diyaarshay. La yaab ma ahan in Sheydaanku neceb yahay Ereyga Ilaah isaga oo ilko iyo cidiyaba kula dagaalamaya.
Mid ka mid ah xeelada uu kula dagaalamo Ereyga ayaa waxay tahay inuu ka yeelo dadka kuwa moogan axdiyaasha ereyga. Xeelad kalena waxa weeye in fakir dhaqameedka uu go’aamiyo xadiga noloshooda. Weli hab kale oo uu kula dagaalamo Ereyga ayaa waxa uu yahay in sare loo qaado fikirka banii-aadanka meelaha xukunka sare lagu hayo. Sheydaanku waxa uu waayo aragnimo u leeyahay sharaxaada qidcooyinka Baybalka, isaga oo la xiriirinaya wax hore u dhacay ama wax mustaqbalka dhici doona. Waxaa dhici kara inuu isticmaalo hab khiyaano, marba haddii ay rumeystayaashu is horkeenaynin xaadirnimada waxa uu Ciise u sameeyey iyaga, oo ayna bilaabin in Ruuxa Qoduska ah ku hogaamiyo in Injiilka xorta ah gaaro kuwa kale, isla haddeertan.
Si kastaba ha ahaatee, Ruuxa Qoduska oo ah macalinkeena ayaa waxa uu keeni hayaa isbedel maalmaheenan. Waxyi aqooneed ayaa si bayaan ah oo xoog leh uga soo dhacaya Ereyga Ilaah, kaas oo u ogolaanaya rumeystaha inuu si bayaan ah u arko micnaha madax furashada iyo natiijada hoose ee faragelintiisa. Sheydaanku ma weeraro oo keliya Ereyga Ilaah guud ahaan,

laakiin wuxuu si toos ah u weeraraa qayba gooni ah ee Injiilka. Tusaale ahaan, isagu khaasatan waxa uu weeraraa waxbarida bogsiinta. Isagu ma jecla inuu arko cid caafimaad wanaagsan leh. Laakiin waxbarida taajirnimada isagu khaas ahaan way ka farxisaa. Tani ma ahan oo keliya run aad qaali u ah laakiin waa mid aad muhiim u ah maalmaheenan iyo jiilkan. Ciise wuxuu inagu amray inaynu aduunka oo dhan ku wacdino awooda Ruuxa, laakiin weli halkaas ma aynu gaarin. Ilaah waxa uu doonayaa quruumaha oo dhan inay maqlaan warka wanaagsan ee Ciise. Laakiin weli, si kastaba ha ahaatee, ma ahan inay kulligood wada maqleen, oo Ruuxa Qoduuska ah waxa uu si adag inoogu boorinayaa inaynu dhinac waliba ka ololeyno inagoo isticmaalayna fursad kasta oo aynu haysano.

Haddaba, Sheydaanku waxa uu isku dayayaa wax waliba oo uu awoodo si uu inoo daahiyo ama uu inooga dhigo kuwa aan furfurnayn. Nasiib daro, in yar ayuu kaga guuleystay inuu bedelo oo uu biyeeyo Injiilka, isaga oo ku dhex reebaya afarta derbi ee Kaniisada kuna shubaya dhaqamo aan baybalka raacsanayn. Ujeedadiisa waxay tahay in dad yar oo keliya ay maqlaan, oo iftiinka Injiilkana lagu qariyo wax waliba oo dhaqan diimeed been ah.

Mid ka mid ah xeeladihiisa waxay tahay inuu dhiirigeliyo waxbarid khaldan oo ku saabsan lacagaha, isaga oo uga dan leh inuu Kaniisada ka yeelo lacag la'aan ama wax qabad xumo. Si kastaba xaalku ha ahaadee, Ruuxa Qoduuska ah waxa uu xooga saarayaa tusaaleyn run ah oo ku aadan horumar xagga lacagta ah si markaasi lacagta Rabbiga loo xoreeyo oo ay Kaniisada u awoodo inay hawsheedii fuliso: "Haddaba taga, oo quruumaha oo dhan xer ka dhiga, ku wacdiya in Ciise nool yahay oo uu sugayo inuu buuxsho baahida quruumaha oo dhan."

Ilaah ma maal gashado fakhrinimada

Baybalka si bayaan ah ayuu u sharaxayaa booska uu ka taagan yahay arinka ku saabsan lacagta. Lacagta waxaa isticmaali kara Ilaah ama Sheydaan. U fiirso 1 Timoteeyo 6:10 dhexdeeda ma ahan lacag waxa laga hadlayo laakiin waa jeclaanta lacagta taas oo ah "wadadda shar waliba." Dhaqanka ayaa ina baraya in wax waliba oo ku saabsan lacagta ama maalka aduunka uu yahay shar, laakiin sidaasi ma ahan sida uu Baybalku barayo. Waxbarid la oran jiray 'Gonostisim' ayaa waagii hore waxay ku fiday Kaniisada, waxayna baraysay in maalku uusan wanaagsanayn. Laakiin waxbarida ku sharaxan Gonotisimka ma ahan wax laga helayo Ilaah dhexdiis. Isaga ayaa abuuray maalka aduunka oo uu arkay inay wanaagsan yihiin (Bilowgii 1:31).

Ilaah wuxuu aduunka u abuuray carruurtiisa. Aduunka dhexdiisa wuxuu dhigay dahab, maar, dhagax muhiim ah iyo waxyaalo kale oo qiiymo badan. Taajirnimadiisa awgeed, isagu waxyaalo badan ayuu dhex dhigay aduunka. Dhibaatadu kama jirto maalka laakiin waxay ku jirtaa sharka, caasinimada, qalbiga banii-aadamka oo jecel lacagta, caabudana taajirnimada iyo awooda intii ay ku faraxsanaan lahaayeen Rabbiga iyagoo caabudaya oo amaanaya isaga.

Faqiirnimada dhaqan ahaan waxaa loo arki jiray inay tahay caqiido laakiin Ilaah weligii ma keenin iyada mana uusan maal gashan. Faqiirnimada iyo wax la'aanta waxay ka timid Dhicitaanka, taas oo ka timid markii banii-aadanku ku caasiyey Ilaah. Isla markaasina, faqiirnimada, cudurka iyo dhimashada ruuxa ayaa soo if baxay dembi awgeed.

Markii dambe oo uu Ilaah axdi la galay Ibraahim, wuu barakadeeyey isaga, oo xitaa barakadaasi waxaa ku jiray maal aduun (Bilowgii 13:2). Oo barakadan waxay sii jirtay ilaa noloshii Isxaaq (Bilowgii 26:12-14) iyo Yacquub (Bilowgii 27:28). Hase ahaatee, markii Israa'iil la haystayaal ku ahaayeen Masar, waxaa iyaga dhulka dhigtay inkaarta fakhrinimada. Laakiin markuu Ilaah baxshay iyaga wuxuu farqaha u geliyey dahab iyo maar (Sabuurka 105:37).

Kadib, markii Muuse helay sharciga, wuxuu ku dhawaaqay shuruudaha barakadeynta iyo inkaarta Israa'iil isagoo ku hadlay erayadan, "*Oo Rabbigu wuxuu ku amri doonaa inay barakadu idinku soo degto idinka, iyo maqsinnadiinna, iyo wax alla wixii aad gacanta ku qabataanba, oo wuxuu*

idinku barakayn doonaa dalka Rabbiga Ilaahiinna ahu uu idin siinayo. Oo Rabbigu wanaag buu idiinku badin doonaa midhaha jidhkiinna, iyo midhaha xoolihiinna, iyo midhaha dhulkiinna idinkoo jooga dalka Rabbigu awowayaashiin ugu dhaartay inuu idin siinayo…. Oo Rabbigu wuxuu idiin furi doonaa khasnaddiisa wanaagsan ee samada." (Sharciga kunoqoshadiisa 28:8,11,12) Barakooyinkan ayaa la jiray reer banu-Israa'iil se waxay ahayd inay dhowraan Ereyga Rabbiga oo ay adeecaan Isaga. Rooti yaraan ma aanay jirin – wax kale oo ay u baahnaayeena ma jirin (Sharciga kunoqoshadiisa 8:9). Markii ay isagu jeclaadaan oo wax waliba ay isaga ka hor mariyaan, Ilaah wuxuu siinayey awood ay ku soo saaraan maal (Sharciga kunoqoshadiisa 8:18).

Marka si kale loo eegana, inkaarta sharciga waxay keentaa faqiirnimo iyo wax la'aan (eeg Sharciga kunoqoshadiisa 28:2933,42,44). Way iman doontaa ayuu Baybalku ku leeyahay Sharciga kunoqoshadiisa 28:47, *maxaa yeelay, idinku Rabbiga Ilaahiinna ah wax kasta oo uu idinku badiyey aawadood uguguma aydaan adeegin faraxsanaan iyo qalbi reyreeya.* Inkaarta sharciga waxay keentaa faqiirnimo. Hase yeeshee, markii Ciise ku dhintay iskutallaabta, isaga inaga ayaa inkaar la inooga dhigay si markaasi barakada Ibraahim ay teena u ahaato (Galatiya 3:9,13,14).

Horumarka lacagta lagu dhisayo Kaniisada

Ciise qudhiisa ayaa dusha u dhigtay inkaarta, iskutallaabta korkeeda, si markaasi aynu xor u ahaano. Wuxuu qaaday dembigeena, jiradeena, faqiirnimadeena iyo dhimashada daa'imka ah marka waxaynu lahaan karnaa xaqnimadiisa, nabadiisa, noloshiisa buuxda, caafimaadka iyo barwaaqada. Isaga meesheena ayuu galay si ay barakadiisa u ahaato teena qayb kasta oo ka mid ah nolosheena oo Ilaahna loogu sharfo wax waliba.

2 Korintos 8:9 waxay wax ka sheegaysaa Rabbi Ciise Masiix iyadoo leh, *Waad garanaysaan nimcada Rabbigeenna Ciise Masiix in isagoo hodan ah uu aawadiin miskiin u noqday, inaad miskiinnimadiisa hodan ku noqotaan.*

Markii reer bani-israa'iil ka soo tageen Masar, dadku waxay yimaadeen iyaga oo ku raran taajirnimo (Sabuurka 105:37). Sabab? Si ay taajirnimo ugu raaxaystaan baa? Dhabtii sidaa ma ahayn! Dahabka iyo Maarta waxa loogu baahnaa in lagu dhiso taanbuuga halkaas oo ahayd in Ilaah lagu caabudo iyo halka uu ammaantiisa ku muujin doonay. Isla fikirkaa ayaa dhab ah maantana. Badnaanta hantida marnaba lama bixin si ay awliyada bakhaylnimo ugu noolaadaan. Waxaa loogu talo galay macbudka Ilaah, Kaniisada in lagu dhiso oo amaantiisana ay muuqanaato.

Tilmaanta barakada dhaqaalaha waa hab Ilaah iska leeyahay oo lagu dharjinayo rumeystayaasha laguna xoreynayo si kuwa kale ay wax u siiyaan. Marka sedan la yeelo, lacagta Ilaah ayaa la qaybinayaa oo Injiilkana waxa uu ku faafayaa aduunka oo dhan.

Ilaah waxa uu doonayaa inuu barakadeeyo noloshaada siba sida ka sii wanaagsan. Isaga waxa uu ku siinayaa jacaylkiisa – oo jacaylkaagana waxa uu diirinayaa kuwa kale. Isaga waxa uu ku siinayaa waxyi si aad u sii gudbisid. Isaga wuxuu kaa barakadeyn doonaa xagga dhaqaalaha si waxa kaa badan aad kuwa kale ugu deeqdid. Marka uu koobkaaga buuxo, wuu buux dhaafayaa oo uu barakadeynayaa kuwa adiga ku ag jooga.

Ilaah wuxuu karaa inuu nimco oo dhan idiin badiyo inaad mar walba wax kasta oo idinku filan haysataan inaad shuqul kasta oo wanaagsan ku badisaan; (2Cor 9:8).

Korintoska Labaad 9:11 Bawlos waxa uu ku leeyahay, *Wax kasta idinka waa laydinku hodansiin doonaa xagga deeqsinimada inaga dhex shaqaysa oo dhan ee aawadeed Ilaah loogu mahadnaqo.* Ilaah wuxuu doonayaa inuu si aad ah kuu barakadeeyo si markaasi aad wax u siisid shuqul kasta oo wanaagsan. Marka aad aragtid in isha wax kaa soo galaan ay tahay Ilaah, oo aysan ahayn dad,

oo uu isagana ku buuxshay baahidaada axdigiisa, isdeji oo aamin isaga. Markaa kadib wuxuu bilaabayaa inuu hogaamiyo sadaqadaada si ay u noqoto farxad taagan. Uma baahnid inaad cabsato. Ilaah ayaa adiga ku ilaalinaya. Mar dambe uma baahnid inaad dib wax u ceshato sababtoo ah ilaha barakada Ilaah ayaa adiga kuu furan. Baarinimadaada awgeed, qulqulka lacagtiissa ma ahan mid mar dambe khasaaraya – ha noqoto in dib u dhaca uu ka yimid doonis la'aanta Aabaha ama baqid laga qabo waxa ka iman kara iyada. Waxaad ku qosli doontaan baaba'a iyo abaarta (Ayuub 5:22) maxaa wacay waa Rabbiga kan gaashaankiina ah.
Wax uma bixinaysid si aad wax u hesho. Sababta aad wax u bixinaysid waxa weeye Ilaah ayaa doonaya inaad noqoto mid wax bixiya, sida uu isaguba yahay. Hase ahaatee, markaad wax bixiso adiguna waxbaad helaysaa. Ciise wuxuu leeyahay, *sii ad*iguna waa lagu siin doonaa (Luukos 6:38). Waxay ka bilaabanaysaa baarinimadaada taas oo furaysa barakada Ilaah, oo waxbaad abuurtay waadna goosan doontaa (2 Korintos 9:6).
Sidaa daraadeed adheec Ereyga. Ha ahaato hagahaaga intii aad raaci lahayd dhaqan khaldan. Qaado waxa uu Rabbiga kuu hayo oo ku noolow Axdiyadiisa. Faragelin ka timaada ruuxyada fakhriga waa laga jari doonaa noloshaada oo shaqada Ilaahay waxay u fuli doontaa si balaaran. Kuwa u shaqeeya isaga waxay awoodi doonaan inay fuliyaan wixii loogu yeedhay, isla markaasi oo ay helayaan caawimaad sax ah iyo adeecidaada awgeed, waad barakadoobeysaa, oo kuwa badan ayaa la gaarsiinayaa Injiilka. Ilaah wuu jecel yahay bixiye faraxsan oo xor ah.! (2 Korintos 9:7).

36

Rabbigu wuxuu doonayaa inuu ku siiyo waxa qalbigaagu jecel yahay

Rabbiga isku hallee oo samee waxa wanaagsan; deganow dhulka oo ku faraxsanow daaqa nabadeed. Ku faraxsanow ku jiritaanka Rabbiga oo isagu waxa uu ku siin doonaa waxa qalbigaagu doonayo (Sabuurka 37:3,4).
Rabbigu wuxuu doonayaa inuu ku siiyo waxa qalbigaagu doono. Inta badan waxaynu ku fikirnaa, "waan garanayaa runtii waxaan doonayo laakiin kama war qabo inay tahay doonista Ilaah." Cabsida aynu ka qabno in waxaynu doonayno ay tahay doonista Ilaah iyo in kale waxay naafeysaa qalbigeena oo haddii aan hubin, waxaynu Qatar ugu jirnaa shaki.
Ciise wuxuu ku leeyahay kitaabka Luukos 9:62, *Ciise ayaa ku yidhi, Ma jiro nin gacantiisa mixaraatka saara oo dib u eega, oo u qalma boqortooyada Ilaah.* Hase ahaatee, waxa la inagu jaribo inaynu sameyno waa waxaas. Waxaynu dareenaa hubsiino la'aan oo aynu dib wax u jaleecnaa. Laakiin Ilaah inalama doonayo inaynu mooganaano doonistiisa. Xagga kitaabka Rooma 12:2 wuxuu ku leeyahay Ha u ekaanina dadka ifkan, laakiinse ku beddelma cusboonaanta maankiinna inaad hubsataan waxa ay tahay doonista Ilaah oo wanaagsan oo isagu ku farxo oo kaamilka ah.
Korintoska Koowaad 2:12 wuxuu inagu leeyahay waad hesheen Ruuxa Ilaah (caawiyaheena), si aynu u fahamno waxa Ilaah noogu deeqay oo bilaashka ah. Ilaah ma lahan fakir uu ku doonayo inaynu banaanka ka joogno doonistiisa. Tan ka soo hor jeeda ayaa run ah. Wuxuu doonayaa inuu noo waxyiyo iyada si aynu u hubsano fikirkiisa ku aadan inaga iyo waxa uu bilaashka inagu siiyey.
Mararka qaar waxaynu ku daba gabanaa oraahyada sida, "Ilaah haddii uu yiraahdo" ama "Waxa keliya oo aan rabaa doonistiisa." Hubaal kuwani waa sax waana xaalado aad muhiim u ah. Waxa

la inaga doonayaa inaynu raacno Ciise oo aynu raadino marka hore boqortooyada Ilaah. Hase yeeshee, mar aad leedahay fikir noocaas oo kale ah, Ilaah isla markiiba wuxuu bilaabayaa inuu kula hadlo oo dhabtii wuxuu ku weydiinayaa waxa aad jeceshahay. Wuxuu doonayaa inuu ku siiyo waxa qalbigaagu rabo. Kitaabka Markos 10:46-52 waxaynu ku aragnaa Ciise oo ka soo socda Yerixoo. Wuxuu soo dhaafayaa Bartimaayos oo ahaa tuugsade indha la'. Bartimaayos waxa uu maqlay in Ciise dadka daweeyo. Aayada 47 waxay leedahay markii Bartimaayos maqlay in kani yahay Ciisihii reer Naasaret, wuxuu bilaabay inuu ugu yeedho cod kore. Sabab? Sababtu waxa weeye warkiisa ayuu hadda ka hore hayey! Muxuu maqlay? Waa khasab inuu maqlay in Ciise dembi dhaafo, oo bixiyo ruuxyada sharka, daweeyo kuwa buka iyo inuu baro wax ku saabsan boqortooyada Ilaah. Isaga marnaba iskuma uusan mashquuliyeen in Ciise doonayo inuu caawiyo isaga haddii uusan hadda ka hore maqal in Ciise daweeyo kuwa buka.

Waxaad maqlaysid aad ayuu muhiim u yahay. *Haddaba rumaysadku wuxuu ka yimaadaa maqlidda, maqlidduna waxay ku timaadaa ereyga Masiixa.* (Rooma 10:17) Haddii aadan maqal Injiilka dhamaantiis, waxaad filaysid waa wax yar. Ma dhici karto inaad iimaan ku qabtid waxyaalo haddii aadan garanaynin doonista Ilaah ee ku aadan meeshaas. Haddii aad in yar ka maqasho Injiilka, iimaanka aad isaga ku qabtidna sidaas ayuu u yaraanayaa. Si kastaba ha ahaatee; Ilaah uga mahad naq Injiilka aad haddeer maqlaysid. Waxa uu war wanaagsan u hayaa dhan walba oo ka mid ah noolol maalmeedkaaga.

Maxaad doonaysaa?

Bartimaayos waxa uu haddeer ka hore maqlay in Ciise bukaanka daweeyo, meel waliba ee uu tago. Isagoo cod kore ku qaylinaya ayuu u yeeray Ciise, inkasta oo ay dadkii badnaa u diidanaayeen, wuu diiday inuu aamuso. Ciise wuu maqlay Bartimaayos oo wuu u yeedhay isaga. Dabadeeto Bartimaayos wuxuu u orday dhankiisa oo Ciisana su'aal ayuu weydiiyey, maxaad rabtay inaan kuu sameeyo? Ma uusan dhihin oo keliya, "tani waa doonista Ilaah kuu hayo!" Wuxuu waydiiyey ninka waxa qalbigiisa ku jira. "Maxaad doonaysaa?" Ayuu weydiiyey. U fiirso jawaabta Bartimaayos, Rabbiyow, waxaan doonayaa inaan wax arko. Mar waliba waxaa jiraya mid ama labo macalin diimeed oo farta ku fiiqaya markii meeshaa la marayo in codsiga Bartimaayos uu ahaa Bakhaylnimo; sida uu keligiis uun isaga fikiray iyo sida laga rabay in salaadiisu ay ku qotonto Ilaah. Hadalka noocaas oo kale ah waa doqonimo. Ciise wuxuu u yimid inuu dadka caawiyo, gacan qabto kuwa dhiban, xoreeyo adoomada oo uu daweeyo bukaanka. Wuxuu ka jawaabaa baahida dadka iyo baryadooda!

Bartimaayos wuxuu lahaa codsi, wax in mudo ah u hilowsanaa – baahi; wuxuu rabay inuu wax arko. Ma uusan ku khaldanayn inuu taas isla jeclaado. Bakhaylna kuma uusan ahayn inuu aragtidiisa weydiisto. Dhabtii, Ciise wuxuu doonayey inuu siiyo isaga, laakiin intuusan sidaa sameyn, wuxuu doonayey inuu ogaado Bartimaayos waxa qalbigiisa ku jira.

Kitaabka Yooxanaa 15:7 Ciise wuxuu ku leeyahay, "Haddaad igu jirtaan, oo ay erayadayduna idinku jiraan, weyddiista waxaad doonaysaanba, waana laydiin yeeli doonaa." Isagu ma lahan, "Bari wax alla wixii aad rabto oo waa lagu siin doonaa," laakiin wax alla wixii aad doontid.. Ilaah wuxuu doonayaa inuu kuu sameeyo wixii uu qalbigaagu doonayo. Haddii aad ku jirtid Masiixa oo uu kugu nagaaday Ereygiisa, wuxuu kaa rajeynayaa inaad ka baridid wax alla wixii aad rabto maxaa yeelay maankaaga iyo maskaxdaaduba waxay nadiif ku yihiin Ilaah hortiis. Taas micnaheedu waa maxay? Kitaabka Filiboy 2:13 waxay leedahay, "waayo, waa Ilaah kan idinkaga dhex shaqeeya xagga doonista iyo xagga shuqulkaba farxaddiisa wanaagsan aawadeed." Ilaah waa uu inaga dhex shaqaynayaa, oo doonistiisa ka yeelo mid aan u soo hilowno. Bartamaayos hilowgii uu u soo hiloobay in la bogsiiyo oo uu caafimaado ma ahayn arin bakhaylnimo.Waxay ahayd wax uu Ilaah isaga geliyey. Hase yeeshee, markii ugu horeysay wuxuu ku khasbanaaday inuu garwaaqsado, ogolaado hilowga, bilaabo inuu damco oo sharaxo

xag erey iyo ficilba, intii aan loo sameyn wixii uu doonayey.

Ilaah ma ahan xasid

Ilaah gudahaaga wuxuu geliyey fikir, riyooyin, damac iyo hilow kuwaas oo uu doonayo inaad garwaaqsatid oo aad ku talaabo qaadid. Hase ahaatee, waa isla halkan meesha uu sheydaanku duluq inaga soo yiraahdo, oo inta farta inagu soo fiiqo ina dacweeya. “Bakhayl baad tahay,” ayuu inagu yidhaahdaa. “Waxaasi marnaba ma noqon karaan doonista Ilaah. Waa waxaad adiga iska soo alifatay. Kuli waxay ka yimaadeen ‘jirka’” iwm. Dhabtii waxa dhacaya waxaa weeye sheydaankii ayaa shaki ku aadan Aabahayaga Jannada inagu beeraya. Xusuuso wixii dhacay Dhicitaankii. Xaawo ayaa dembaabtay maxaa yeelay abeesadii ayaa ku guuleysatay inay iyada caqliga ka xado, lagana yeelay inay aaminto in Ilaah uu ka reebanayo wax wanaagsan.

Ilaah wuxuu kugu dhaliyey fikirado, riyooyin, damac iyo rabitaan kuwaas uu rabo inaad ogolaatid oo aad ku ficiltantid. Haba ahaato ee waa halkan meesha uu ibliiska inta badan ka faa’ideysto, farta nagaga fiiqayo oo nagu eedeynayo. Waxyaalaha uu nagu leeyahay waxaa ka mid ah, “Waxaad tahay mid wax kasta isla raba.” “Taasi marnaba ma ahaan karto doonista Ilaah. Adiga unbaa sameysanayo. Waxyaalahan oo dhan waa wada ‘damaca jidhka’,” iwm ayuu nagu eedeynaya. Arinta socota ayaa waxay tahay inuu sheeddaanka shaki kaa gelinayo xidhiidhka aad la leedahay Eebbe. Haddaba xusuuso wixii ka dhacay ficilkii ku caasinta Ilaah – Gefkii. Xaawa way dembaabtay maxaa yeelay ibliiska bahal ahaan ugu yimid ayaa ku guuleystay inuu maskaxda ka qabsado oo khiyaano kaasi uu kaga dhaadhiciyey in Ilaah uu iyada ka ceshanayo wax aad u qaalisan oo nolosheeda muhiim u ah. Bilawgii 3:5 *waayo, Ilaah wuxuu og yahay in maalinta aad cuntaan ay indhihiinnu furmi doonaa n, oo aad noqon doontaan sida Ilaah oo kale, idinkoo kala garanaya wanaagga iyo xumaanta.* Amaba haddii si kale loo sheego, “Ilaah wuxuu kaa lexjecleystay waxyaala waxyaala badan. Isagu ma rabo inaad Sidiisa ahaatidr. Waxyaa jiraan waxyaala uusan rabin inaad ka faa’idid.” Waxyaala kuwaas la mid ah ayaan dunida kala kulmeyna maanta.

Laakiin Ilaah sidaa ma ahan! Ma jiraan wax uu naga lexjeclaysanayo. Isagu waa Aabba naxariis badan ii ina jacayl. Dhabtii laakiin dad badan ayaa noloshooda kaga ku sugan isla marxaladdii Xaawa, taasi uu ibliiska khiyanayey – kuna yidhi in Ilaah yahay mid xaasid ah aan jacayl qabin Laakiin Ilaah sidaa ma ahan! Wax uu kaa ceshanayo ma jiraan. Isagu waa sida Aabba ilmihiisa jacayl. Waa nasiib darro laakiin inay weli dadka qaarkiis nolosha ugu dhibtoonayan isla sida ay Xaawa ahayd. Si guud ahaan ah kaaga soo horjeedo. Laakiin fikiraddaasi waa mid qaldan! Ilaah wuu kula jira! Rooma 8:32 waxay leedahay, *Kii aan xataa Wiilkiisa lexejeclaysan, laakiinse innaga dhammaanteen u bixiyey, sidee buusan wax walbana inoola siin doonin Isaga?*Waxaa jiraan kuwa badan oo nolosha waxyaala badan oo niyad jab ah kala kulmeen oo taasi waxay iyaga ku hogaamisay inay Ilaah ku carodaan. Ilaah wuxuu iyaga ula muqdaa inuu yahay cadawgooda. Way og yihiin in xarbi Isaga lala galay waxba lagaga heleynin, Isagu waa kan ugu awoodda badan ee istaahila in la addeeco. Saa ay tahayna wax farxad ah kuma helaan, mana ku helaan jaalnimo istareex midna xidhiidhka ay la leeyihiin Isaga. Waxay umaleynayaan inuu yahay mid u soo jeedo inuu xataa farxadda yar ee qalbigooda ku jirta uu ka saaro. *Tan waa ariin aad u xun!* Ibliiska ayaa sumeyey qalbiyadooda oo wuxuu iyaga siiyey sawir qaldan oo ku saabsan Ilaaheena ina uuntay ee noo ah sida Aabbaheena.

Qofka Baybalka tusaala ahaan arintan looga soo qabsan karo waxaa ka mid ah wiilkii curudka ahaa ee masaalka wiilka lumay lagu soo qabtay sida ay ku dhigan tahay Luukos 15:25-32. Aad buu uga xumaaday markuu arkay walaalkiis oo falaagoobay sida daran ee loo soo dhaweynayey oo weliba jacayl loogu muujiyey soo noqodkiisa. Wuxuu dareemay inuu aabbihiis xaflad taa la mid ah ka helin inta uu la noolaa oo dhan, taasi uu aabbahuna ugu jawaabay, *Markaasuu ku yidhi,*

Wiilkaygiiyow, weligaa waad ila joggtaa, oo ***waxayga oo dhan adigaa leh*** (aayadda 31aad). Maalka weligiis wuu jiray laakiin marnaba ma imaanin oo ma weydisanin in wax laga siiyo kana qaato *wuxuu rabo.* Haddaba xusuuso Erayyada Ciise ee ku dhigan Yooxanaa 15:7 ee leh, *Weydiso wax alla waxaad rabtid.*

Markaad fahantid kan dhabtii uu Ilaah yahay oo aad ogaatid inuu yahay ibliiska ka kaa hor taagan inaad Eebbe duco kaga baridid waxa uu qalbigaaga u riyaaqayo, waxaad bilabeysa inaad Ilaah si geesinimo ah ugu tagtid. Markaad aragtid inuu yahay sheeddaanka kan kaa mamnuucay inaad Aabbaha weydisatid waxyaalaha caadiga ah ee aad nolosha uga baahant ahay, waxaad bilabeysa inaad ilaah dhiiranaan ugu tagtid. Isla sida hab qaas ah laguu uumay ayaad leedahay baahi qaas ah, ee haddaba cusboonaanta aad Ciise ku cusboonaatay waxaa kuu dheeri ah inaad leedahay baahi qaas ah uu Ilaah rabo inuu kaa dherjiyo. Weligaa kama xishootid inaad oomanaatid ama haraaddid. Waa caadi inuu qofka haraado, baahdo amaba maraha qaarkood uu daalo. Waad og tahay inay waxyaalahan yihiin baahi baniaadmiga uu qabo oo caadi ah waana in la oofiyo dareemadaasi jidhka. Isla sida uu jidhkaaga qabo baahi qaas ah aadna waajib ku tahay Ilaah inuu qanciyo, naftaada iyo ruuxaaduna waxaa ku jiraan baahi uu Ilaah rabo inuu qanciyo. Ha ogolaanin inuu ibliiska ku xambaarsiy eedeyn la xidhiidhsan waxyalahaasi. U daa Aabbahaa ha kuu hergeliyo ee bedelkeeda.

Qiime Riyooyinkaaga!

Ilaah wuxuu rabaa inuu ku siiyo wax alla wixii rabitaanka qalbigaaga ah. Dad badan ayaa raba inay inkiraan damacyadooda, riyooyinkooda iyo waxyaalaha ay ku fikirayaan waxayna ku dadaalayaan inay muujiyaan "inay waxba jirin." Ha yeelin sidaa! Ogolaw wuxuu Ilaah qalbigaada ku beeray. Wuxuu rabaa inaad riyootid riyooyinkiisa, ku fikirtid wuxuu ku fikirayo, inaad qorsheysid qorshooyinkiisa wuxuuna rabaa inaad ku tallaabo qaaddid sida ay waxyaalahaasi ku hergeli lahaayeen. Waxaa waxyaalahan la dareemaya inay hergeleen markaad Ilaah duco kaga codsatid oo aad ku dhaqantid isla sida ducada aad duceysatay. Dabadeetana Ilaah wuxuu bilabaya inuu noloshaada ka shaqeyo, wuxuuna ugu horeynta kugu beeraya waxyaalaha uu og yahay inaad dunida uga baahantahay. Marka aad isal markiiba bilawdid inaad waxyaalahaasi qalbigaaga oo dhan kaga soo dhaweysid, ku duceyso inaad heshay aaminna inaad heleysid, kuna tallaabo qaad inaad ku dhaqantid sida qof la siiyey wuxuu rabay, Ilaahan run ayuu kaga dhigaya. Tan waa isla marxaladda qabsatay ninkii la odhan jiray Bartilimayos. Waxaa dhici karta inay ku bilaabatay uun fikir uu sidaas ku fikiray. Waxyaalaha uu ku fikirayna waxay ku sii balaarteen rajo. Rajadiina waxay xidid ku yeelatay rumaysad ah in mar uun hadduu maalin Ciise halkaas oo maro ay ariin dhaceyso. Dabadeetana Ciise ayaa yimid! Dareenkii, damacii qalbiga ku jiray ee uu qabay Bartilimayos aad bay u sii weynadeen oo cid Ciise ka hor istaagi kartay ma jirin dhiiranaanta iyo geesinimada uu qabay awgeed. Dadka kama aanay hor istaagi karin oo xataa indhoolanimadiisana ma ahayn mid uu jid ku mari wayey maalintaas. Wuu qayliyey oo wuxuu ku orday Ciise – maxaana dhacay? Wuxuu helay wuxuu u dhiiranaa oo qalbigiisa oo dhan kaga damacsana. Ciise ayaa Isaga ku yidhi, *Rumaysadkaaga ayaad ku bogsatay* (Markos 10:52). Ciise wuxuu codsigiisa joogsi la'aanta ah iyo dhiiranaanta uu qabay ugu yeedhay, *rumaysad* – Isla sidaas ayuu Ciise kuula dhaqmaya maantaba. Ciise wuxuu Bartilimayos siiyey wuxuu u riyaaqsana, adiguna isla sidaas ayuu kuu yeelaya maantadan. Maxayna ahayd natiijada? Bartilimayos wuxuu raacay Ciise (aayadda 52). Dadka qaarkood waxay ku fikirayaan in markii wax alla waxay u baahnayeen la siiyo ay Ilaah ka fogaan doonaan. Maya! Yaanay noqon waa sida kale ee ma ahan sidaa. Si joogta ah ayaa Ilaah jaalnimo iyo wadajir ula lahaaneyna!

Yooxanaa 15:8 waxaan arkeyna Ciise inuu yidhi, *Waxaa Aabbaha ku ammaanmaa inaad midho badan dhashaan, waxaadna noqon doontaan xertayda.* Waxay ammaan u keeneysa Aabbaha markaan maqalno midho badan oo aan helno waxaan u riyaaqeyno. Nimanka iyo dumarkuba

waxay arkayan inuu Ilaah yahay mid jira oo awood badan wuuna maqlaya kana jawaabaya ducooyinkaaga maxaa yeelay shaki kama jiro oo wuu kula jira.
Ilaah wuu ammaanmaya markuu arko dadka oo boqortooyadiisa gelayaan, oo ay qorshooyinkiisa iyo fikiraddiisa oo dhan kugu fulayaan. Wuxuu rabaa inuu arko adiga oo ka qaybqaadaneysid ballamadiisa, adigoo rumeysan inuu ka jawaabi doono ducooyinkaaga, aaminsanna inuu ku siin doono waxyaalaha aad qalbigaaga kaga riyaaqeysid. Wuxuu u riyaaqaya inuu ku arko adiga oo heer sare u sii riyaaqeysid, riyooyinkaaga, qorshooyinkaaga, iyo rajada aad xagiisa ka leedahay!

Kiniisadda
Anigu waxaan kugu leeyahay, Butros baad tahay, oo dhagaxan ayaan ka dul dhisan doonaa kiniisaddayda, oo albaabbadii Haadees kama adkaan doonaan.
Matayos 16:18

37
Xoogga Kiniisadaha Degaanka
Waxaan ku noolnahay xili uu Ruuxa Quduuska ah uu xoogga sarayo in la fahmo awoodda iyo dooqa ay kiniisadda ka leedahay bulshada. Ilaah wuxuu qorsheystay inuu dadkiisa ku gaaro kiniisaddiisa, oo weliba wuxuu awooddiisa iyo ammaantiisa u muujinaya facan.
Kiniisaddu waa jidhka ruuxiyanka ah ee Masiixa. Markuu dunidan jidh baniaadmi ku noolaa, wuxuu wax kasta ku sameyey Ciise jidhkiisa caadiga ah. Isla sidaasna, maanta, wuxuu wax kasata ku sameynaya jidhkiisa ruuxiyanka ah, kiniisadda. Jidhka Ciise meelo fara badan ayaa lagaga muujinaya kiniisadaha degaanka. Ilaah wuxuu rabaa inay kiniisadahan xoogeystan si uu u adeegsado oo uu dunida ku gaaro iyaga. Ee haddaba waa inaan indhaheena ruuxiyanka ah furna si aan u aragno waxyaalaha uu Ilaah awood u leeyahay inuu ku fuliyo kiniisadaha degaanka.
Waxaan u baahannahay inaan helno muujin xagga Rabbiga nooga timid si uu rumaysadkeena uga barbaaro xagga waxyaalahan si ay doonista Eebbe u idlaato. Waddanka Swiden waxaa jirtay mar aan si xoog leh u dareennay inuu Ilaah xoogga saarayo inaan barno wax ku saabsan rumaysad. Kuwa badan ayaa si xun u fasireen oo ka soo hor jeysteen Isaguna iisuma muujinin kuwaasi ku caasiyeen codka Ilaah. Waxaa jiraan kuwa badan oo xornimo heleen, farxad heleen, barakobeen oo ay noloshooduna bedelantay markay fahmeen in Erayga Ilaah uu leeyahay, *Kuwa xaqa ah waxay ku noolanayaan rumaysad* (Rooma 1:17).
Wax baridda rumaysadka ku saabsan waa muhiim haddi aan rabno inaan Ilaah kula socono doonistiisa, Isaga wax ka maqalno, oo aan bilaabeyno inaan ku ficiltanno wuxuu nagu amray inaan sameyno. Ruuxa Quduuska ah wuxuu caan ka dhigaya wax na barakadeynayo oo xidhiidhka aan Rabbiga la leenahay xoojinayaan, sababtaas awgeed waa muhiim inaan xoogga sii saarno baridda waxyaalaha ku saabsan rumaysadka. Faalimaha Rasuullada 2:42 waxaa qoran in rumaystayaasha ay *isku dhiirigeliyeen wax bariddii rasuullada.*
Furaha guusha ee xagga ruuxa waa ku adkeysashada ilaa guusha oo idlaatay laga arko. Inta badan waxaad arki doontaa codad sare, qaas ahaan dad iyaguba wareersan ayaad ka maqli doontaa codadkaasi iyagoo leh, “Rumaysadku ma ahan shey muhiim sii ah, hadda marxaladdu waa inay sidan tahay ama sidaas.” Laakiin fikiraddan ma ahan mid run ah! Haddaba waa muhiim inay dadka Ilaah helaan barid ku saabsan rumaysad, sida rumaysad Ilaah xidhiidh lagula lahaado, lagu nasto rumaysadka, ku guuleysashada rumaysadka iyo rumaysad wax kaga helidda ducada aan duceysano. Kuwa xaqa ah waxay ku *noolanayaan* rumaysad – noloshooda oo dhan ee ma ahan

qayb ka tirsan nolosha.

Rumaysadka Kiniisadda Degaanka

Marka uu Ruuxa Quduuska ah guul ka ballan qaaday shaqsiga xerta Ciise ka midka ah iyo barakooyin noloshiisa lagaga ballanqaaday, macnaheedu ma ahan inay dhawr kasta oo xerta ka mid ah ay noqdaan kuwa uu mid kasta dhiniciisa u roorayo, oo midkood walbaba uu isku mushquulinayo hawlihiisa gaarka ah. Waxaa jirta dan taas ka weyn oo ah ku talagalka Ilaah inta aad Isaga xidhiidh la leedahay oo ku dhameysid doonistiisa. Markaad bilawdid inaad noloshaada rumaysad kaga dhaqantid, Rabbiga ayaa kugu kaalmeynayo inaad shaqsinimadaada isku haleynin ee aad Isaga oo keliya xoog iyo hogaan ka dhigatid; taasna waxay kugu caawineysa inaad rumaysadka kaga faa'idid laba qaybood oo noloshaada ka mid ah, qofka dembiilaha ah oo la badbaadinayo iyo kiniisadda adeegeyso.

Buugga Faalimaha Rasuullada waxaan ka arkayna sida xoogga badan ee ay kiniisadda u barbaartay – waana suurtagal inaan annaguna isla xaaladdaas dareenno. Sidaa ay tahayna, waxaan u baahannahay inay kiniisadda degaanka lahaato rumaysad waayo rumaysad la'aantis weligeen ma barbaari doonno. Marka ay xerta Ciise oo kiniisadda ku jirta oo dhan ay ka dhaadhacdo oo ay ogoladaan oo ay u rajo lahadaan inay kiniisadda barbaareyso, Ilaah wuu ficiltamaya oo shey awood badan ayaa dhici doonaa.

Waa inaan kiniisadda degaanka u aragno sida uu Ilaahba u arko. Tan macnaheedu ma ahan inaan lahaan karno boqolkiiba boqol sida ku jirto fikiradda Ilaah ee aan ka arkeyno Axdiga Cusub in kastoo ay taasi muhiim tahay inaan ku dadaalno. Marka ugu horeyso waa muhiim inaad fahantid sida uu Ilaah u arko kiniisadda degaanka. Ruuxa Quduuska ah muxuu ka sheegaya kiniisaddaada? Waa maxay waxa uu Ilaah u adeegsan rabo carruurtaada? Waa maxay waxa aad u riyaaqeysid ee aad rabtid inuu Ilaah u sameyo degaankan?

Ruuxa Quduuska ah wuxuu rabaa inuu marxaladdaada wax ka qabto oo weliba wuxuu rabaa inuu kuu muujiyo sawirka iyo danta uu Ilaah u leeyahay kiniisaddaada. Haddii aad tani qalbigaada ku qaadatid oo aad rumaysatid, wax la yaab leh oo xoog badan ayaa dhici doonaan. Wuxuu Erayga Ilaah kiniisaddaada ka sheegayo ayaa kugu dhex abuurayo rumaysad in wax caadi ahaan loo arki inaynan suurtagal ahayn inay ka dhici doonaan kiniisaddaada.

Wadaad kasta wuxuu ku laasiman yahay inuu muujintan qalbigiisa ku qaato oo rumaysto oo waa inuu fahmo fikiradda uu Ilaah kiniisaddiisa ka qabo iyo sida uu rabo inuu adeegsado kiniisadda. Hadduu wadaadka arintan sidaa u qaadanin, waxaa duufsanayaan dhibatooyinka iyo qaxarka, wuxuuna ugu dambeysta ahaanaya mid niyad jabay oo raacaya fikirad kastoo loo soo jeediyo ama uu la kulmo oo waxayna ku hooban doonta inuu hawsha oo dhanba gacanta ka taago.

Haba ahaato ee, ma ahan wadaadka oo keliya kan ay ku waajiban tahay inuu muujintan Ilaah qalbigiisa ku haysto. Idahana – dadka, kuwa kiniisaddaas ka tirsan – waa inay iyaguna aaminaan oo qalbiyadooda uga riyaqaan doonista uu Rabbiiga u leeyahay kiniisaddooda. Waa uun markuu shaqsi kastoo kiniisadda ka tirsan uu rumaysto muujintan oo qalbigooda ku haystan marka ay barbaaridda kiniisadda ahaneyso wax jira.

Ilaah wuxuu rabaa inay arintan ficilgal ahaato. Waana sababta uu Ruuxa Quduuska ah aad ugu mushquulsan yahay inuu arintan kiniisadaha adduunka oo dhan ka dhaadhiciyo. Waxaa la joogaa xili aad ku waajiban tahay inaan qalbigaaga ku haystid sida ay kiniisadda ku barbaareyso. Ilaah wuxuu rabaa kiniisado waweyn, xoog leh oo barbaarayaan! Uma qorsheynin inuu hal qof oo keliya ahaado kan hawlaha oo dhan gacanta ku hayo. Hawsha Rabbiga waxaa lagu fulinaya dadka, kiniisadda degaanka.

Kiniisaddu – Agagaar Muucjisooyin

Markaan akhrino Faalimaha Rasuullada, waxaan arkeyna in kulamada xerta lagala kulmay

calaamooyin iyo yaabab. Macnaha kulanka xerta ee ah kiniisadda ayaa agagaarkaas ka dhigtay mid u suurtowda inay calaamadahaas iyo yaababkaas ka hergelaan! Maanta laakiin, sida kale ayaa run ah. Ilaah waa inuu hawshiisa hergeliya xataa haddii ay kulamada xerta diyaar wada ahayn, wuxuu ku shaqeynaya kuwa diyaarka u ah adeegidda lagu fidinayo Erayga Eebbe ee hadiyadaha kala duwan qabaan ee ka baxsan kulamada aan diyaarka ahayn. Taasi weligeed ma ahayn qorshaha Ilaah.

Marxaladda kiniisadda inta badan waa sida ay ahayd xiligii Ciise marka uu soo galay magaalada uu ku dhashay ee loo yaqaanay Nasareed, *Meeshaas shuqul xoog leh kuma samayn karin inuu dhawr buka gacmihiisii saaro oo bogsiiyo mooyaane. Wuuna ka yaabay rumaysadkla'aantooda aawadeed. Kolkaasuu tuulooyinka ku wareegay isagoo wax baraya* (Markos 6:5,6). Halkan waxaa lagala kulmay marxalad aan ogolaneynin inay calamooyin iyo yaaban dhacaan waayo wax soo dhaweyn ahba ma jirin.

Si kastoo ay ahaataba, markaan wax kulamada xerta ku saabsan ka akhrino Faalimaha Rasuullada, waxaan arkayna in calaamooyin iyo yaabab ay muuqdeen. Tan way suurtowday maxaa yeelay, xerta halkaas wada jogeen isku maan ayey ahayeen, dhammaantood way hawl galeen, dhammaantood way rumaysnayeen oo weliba dhammaantoodba isku jaho ayey u socdeen. Waa tan nooca kiniisadda uu Ilaah maanta rabo inuu ka dhex kobciyo kiniisadaha. Ilaah wuxuu rabaa kiniisado xoog badan sida tan aan ka arkeyno kulanka xerta uu hawshiisa dunida kaga hergeliyo. Ee haddaba waa muhiim inaan fahanno fikiradda uu Ilaah ka qabo kiniisadda degaanka, dabadeetana waa inaan ku socono xagga doonistaasi annagoo rumaysad leh. Hababka lala qabsaday ee caadiga ah iyo kuwa tacliinta laga aasaasay kuma saleysno Baybalka waxayna naga hor istaagtay inaan lahaano rumaysad ay kiniisadda ku barbaarto. Waana sababta uu Ilaah saldhig uga dhiganayo shaqsiga xerta ku biiray inuu ahaado aasaaska kiniisadda. Oo isla markaasna shaqsi waliba Isaguu wax ka baranaya kagana deyanaya nolosha. Isla markaana waxay noqoneysa inay arintaas ku sii fiddo rumaystayaasha kale. Kiniisadda oo dhan waxay ku noolaan doontaa agagaar rajo iyo rumaysad ku salaysan. Markaasna waxaa suurtagal ahaneysa inuu Ruuxa Quduuska ah helo agagaar uu ku sameyo calaamooyin iyo yaabab oo weliba si saa'id ah ayey u dhacayaan waxayna taasi sababeysa barbaaridda kiniisadda.

Faalimaha Rasuullada 2:41-47 waxaan ka arkayna tusaalaha kiniisadda barbaareysa:

Markaasaa kuwii hadalkiisii aqbalay la baabtiisay, oo waxaa maalintaas lagu daray iyaga abbaaraha saddex kun oo qof (Aayadda 41aad).

Oo waxay ku sii adkaysteen rasuulladu waxay bari jireen iyo xidhiidhka ka dhexeeyey iyaga, iyo kibista jebinteeda iyo tukasho (Aayadda 42aad).

Oo naf kasta cabsi baa gashay; oo rasuulladii waxay sameeyeen yaabab iyo calaamooyin badan (Aayadda 43aad).

Oo kuwii rumaystay oo dhammu waa wada jireen, wax walubana waa ka wada dhexeeyeen (Aayadda 44aad)

oo intay iibiyeen waxyaalahoodii iyo alaabtoodiiba ayay dhammaan u wada qaybiyeen sidii nin kasta baahidiisu ahayd (Aayadda 45aad).

Oo maalin walba iyagoo isku wada qalbi ah ayay macbudka ku jiri jireen, oo kibistana guryahooday ku jejebin jireen, cuntadoodana farxad iyo qalbi daacad ah ayay ku cuni jireen (aayadda 46aad).

47 Ilaah bay ammaani jireen, oo dadka oo dhammuna waa u bogay iyaga. Ilaahna maalin walba kuwa badbaadaya ayuu ku dari jiray (Aayadda 47aad).

Kiniisaddii hore waxaa ka jirtay hawl joogta ah oo weliba sii badaneysa oo ay ka qaybqaadanayeen dad fara badan, waa u suurtagal Ilaah inuu maantana isla sidaas uga ficilgeliyo kiniisaddeena!

Barbaarista iyo Awoodda oo dhan aasaaskooda waa Dhiiranaanta

Furayaasha midkood ee nolosha iyo barbaarista lagu saleysin karo waxaa laga helaya erayada qof kasta (v 43), dhamaan (v 44), wax kasta (v 44) iyo maalin waliba (v 46,47). Tani waxay muujineysa in qof waliba oo ka tirsan kiniisadda degaanka inuu ku waajiban yahay inuu ka hawlgalo kiniisadda. Ma ahan marxalad ay dad yar ahanayaan kuwa horseedka ah mar kastaba, oo kuwa kalena iyagoo gunuunacayaan ayey ogolanayaan inay addeecaan. Yaanay noqon! Qof waliba masuuliyad ayaa ka saaran oo hadiyad ayuu leeyahay ka hawl galka hawlaha kiniisadda. Kiniisaddii hore waxaan arkeyna inay dhammaantood dhiirigalsanayeen, in dhammaantood rumaysnayeen, oo weliba dhammaantood isku jaho ayey u socdeen oo dhammaantood way fejignayeen. Markay ahayd saacadda salaadda dhammaantod way salaadayeen. Markay ahayd wakhtiga wax baridda, dhammaantod way ka qaybqaadanayeen hawshana way socotay. Markay ahayd wakhtiga sadaqo bixintana ma jirin qof gadaal uga laabtay, dhammaantood way bixinayeen!

Awood la yaab leh ayaa ku jirta kiniisadda sidaas u shaqeyneyso. Hab noocan wada shaqeynta waa shey aad uga muhiimsan wax kasta. Marnaba suurtagal ma ahaneyso inaan ku midowno jidhka Ciise marba haddii aan ku mideysneyn kiniisadaheena degaanka. Midnimadani ma imaneyso haddii aan dhammaanteen ku midowno kuna wada xirnaano Ilaah annago ku wada hawl galeyna qorsha kasta oo laga hawl gelinayo kiniisadda, aan ku wada xirnaano Ciise, midkeenba midka kale ku xirnaado oo aan ku midowno inaan xerta ku soo biirino jiiraankeena. Barbaaridda iyo awoodda oo dhan waxay ka aasaasmeysa dhiiranaanta. Haddii aad rabtid inaad ka farxisid Ciise oo aad sameysid *wuxuu* rabo, haddaba wuxuu ku dhigaya meesha uu kuu diyaariyey waxaadna ahaan doontaa dadka kale u ahaan doonta barako. Dhiiranaantaada, jacaylkaaga iyo aaminimadaada waxay ku fidayaan dadka kale oo kiniisadda oo dhan ayaa ku xoogeysan doontaa Ruuxa Quduuska ah oo si xoog leh u hawl geli doontaa.

Midda kale, haddii aad dareensan tahay in wax kasta loo sameyo sida adiga kula quman oo weliba lagu fuliyo amaradaada, iyo weliba haddii aad u aragto waa qasab inaad jago haysatid oo laguugu aqoonsado inaad tahay midka ay la'aantiis waxba soconeynin, waxay taasi kuu abuureysa inaad ahaatid kan iska hortaagan bartamaha aad barakooyinka Ilaah ku heli lahayd iyo qorshahiisa. Ugu dambeysti waxaa suurtagal ah inaan uqdad qaaddid oo aad kiniisadda iska soocdid oo waxaad noqoneysa mid niyad jabsan maxaa yeelay hawlaha uma hergelin sida adiga aad rabtay – "adiga ayaan lagu qancinin." Sidaasna waxaad ku gefeysa waxyaalaha uu Ilaah kula rabay inaad sameysid oo dhan. Tan waa midda ugu weyn ee dad badan oo karti leh ka hor istaagtay hergelinta kartidooda oo dadka uma noqonin barako sida uu Ilaah ka rabay. Iyaga unbaa wax isla rabeen bedelkii ay xoogga saari lahayeen hawsha uu Ilaah u diray iyaga inay ka hawl geliyaan kiniisadda. Waxaan ku nool nahay xili ay ugu farxad badan tahay. Ilaah wuxuu aasaasi doonaa kiniisado xoog badan taasi uu ku bedeli doono marxaladda ruuxiyanka ah ee quruumaha. Waxay muhiim u tahay dhammaan kuwa u fejigan hawlaha Rabbiga iyo shaqsiyaalka xerta ka tirsan si ay meelahas dan la'aan iskiiga simbiriraxyoonin, laakiin ay isku mushquuliyan hawlaha kiniisadda degaanka oo ay dadka barako u ahadaan si ay iyaguna u barakoobaan. Ilaah ma rabo inaad ahaatid mid xidhiidhka uu Ilaah la leeyahay uusan sugneyn oo gurguuraya. Wuxuu kuu haya kiniisad dhaqdhaqaaq leh oo barbaareyso; kiniisadda taasi oo wacdineyso Injiilka oo kaamilan, oo rajeyneysa calamooyin iyo yaabab oo kuwa dembiilayaasha ah dariiqa saxda ah u soo duwayaan. Kiniisadda noocan ah ayaa durbaba laga arki doonaa meel kastoo adduunka ka

tirsan.

38
Hogaanimada Alle ka Cabsashada leh

Ilaah wuxuu hadda si taxadir leh aasaas wanaagsan u sameynaya waxyaalaha uu samey doono mustaqbalka. Qorshahiisa waweyn ee uu rabo inuu hergeliyo waxaa ka mid ah weerar xoog leh ee lagula dagaaltamayo boqortooyada cadawga, taasi oo ay la jirto ligligidda boqortooyadiisa iyo dhulkiisa si ay quruumaha u arkaan ammaantiisa.

Skandinafia iyo dhammaan waddamada Yurubta ayaa si qaas ah loo indheynaya in lagu hawl geliyo awoodda Ilaah. Isla sida ay u ahayd weerarkii Normandy ee Dagaalkii 2aad ee Adduunka ee ay kuwa Naasiga maamulkooda ku argagaxiyeen, ayuu Ilaah ku weerari doonaan Waddamada Yurubta, si uu u muujiyo awooddiisa. Weerar kasta waa inuu ahaado mid si taxadir leh loo qorsheyey loona diyaariyey. Ma jiro mucaarad si lama filaan ah kugu soo geli karo. Qorsha iyo diyaarin qoto dheer ayaa ka socota xarunta madaxda oo hawla waweyn ayey malaa'igaha wadaan si ay u diyaariyan weerarka samooyinka iyo samatabixinta "geesiyaalka waddamada Yururbta." Difaaca minaaradaha saaran iyo ururada filosoofiga waa in loo guda galo oo la baabi'iyo. Saldhigyada cadawga waa in la rujiyo si ay macaaradka u helaan fursad oo ay nimanka iyo naagaha ku helaan Injiilka.

KUmanaan kun oo askar ah iyo hubabka kuwa ugu khatarsan ayaa la keedsatay marka laysu diyaarinayey weerarka Normandy ee ka dhacay Dagaalka 2aad ee Adduunka. Askarta nafteeda xaqiiq uma lahayn waxay la kulmi lahayeen. Waxay fahansanayeen oo keliya inay wax jireen waxayna diyaar u ahayeen inay inay baxaan oo dagaalka galaan, saa ay tahayna ma ogeyn meesha ay dagaalka ka gelayaan iyo sida ay dagaalka ku geli lahayeen.

Inta ay arintaas socotay, tababar joogta ah ayaa la siinayey iyo weliba ficilgelinta waxyaalaha ay ku tababaranayeen. Kuwa badan ayaa dulqaad la'aan noqdeen, qaar kalena khatar ayey sii noqonayeen, laakiin waxyaalahaas oo dhan ma jirin wax la helayey. Waxay ku qasbanayeen inay sugaan ilaa ay isdiyaarinta ka kaamilanto, marxaladahuna ay noqdaan kuwa laysku haleyn karo, qalabka oo dhanna meesha uu ku habboon yahay la dhigo, oo askarta oo dhanna tababarkooda uu kaamilmo.

Haddaba waxaa la gaaray maalintii loo riyaaqsana, marka qaaradda Yurubka la weeraray. Xeebaha Normandy, Woqooyiga Fransiiska, waxaa ka buuxsameen diyaaradaha colka oo farro badan. Kumanaan kun oo askar ah ayaa carada ku dhex daateen, laakiin tobnaan kun ayaa ayaa xeebta madaxa ku hayeen oo si tartiib ah dhulka godad ka qodayeen ilaa ay cadawga bud ku soo dhahaan. Sanad kaddib markuu qorshahaas ficilgalay, Yurub xor bay ahayd. Weerarkii waa lagu guuleystay:

a) Qorsheyn taxadir leh.
b) Awood sareyso.
c) Maamulidda askarta – midkood waliba wuu garanayey sida uu uga qayb qaadan lahaa ee lagu amray.
d) Diyaari oo tababar waana inaad lahaatid askar ku filan.
e) Dhiirigelin weyn iyo dhiiranaan lagu dhiirana in la hawl galo laguna guuleysto, iyo ugu dambeystii,
f) Hogaannimo waxtar leh.

Qorsheyn laga shaqeyey

Haddii ay waxyaalahan oo dhan caawinayaan ciidanka caadiga ah si ay u guuleystaan, *in intee la eg ayey muhiim u yihiin ciidanka ciidamada ee uu Ilaah adeegsanayo! Kuma dagaaltamaan jidhka, hub la arkayo laakiin waxay ku dagaaltamaan kuwa ruuxiyan ah; iyagoo la dagaalayaan cadaw aan caadi ahayn, sheeddaan, kaasi oo Yurubta xabsi ku hayey qarniyo badan!*

Qorsheynta taxadirka leh waxay ka dhacdaa samad. Dabadeetana Ilaah wuxuu qorshahiisa u muujinaya Ciidamadiisa, kuwaasi oo lagu deeqay hibooyinka Ilaah loogu adeego ee ku jira kulamada xerta Ciise. *Awoodda awoodaha ka sareyso* annagaa iska leh oo waxaan ku helnay guusha uu Ciise ibliiska kaga guuleystay iskutallaabta taasi oo aan ku ficilgelineyno awoodda Ruuxa Quduuska ah. *Maamulidda askarta* waxay hergeleysa marka Ruuxa Quduuska ah loo ogolaado inuu hogaanka kala wareego nolosha qof kastoo ka mid ah xerta Ciise. Taasi waxay qofka xerta ah ka dhigeysa mid sida mindida loo afeeyey oo Rabbiga qalbi buuxa ugu adeegayo, qabweyninda uu hogaanka u qabo ka tegay si ay ammaanta Ilaah oo keliya u ahaato tan muuqata. *Qorsheynta* waxay ficilgaleysa markuu qofka Masiixiga ah wax ka barto skoolada Baybalka lagu barto iyo ka hawl galka kiniisadaha ku adeega awoodda Ilaah. *Dhiirigelinta iyo fejignaanta* lagu hubsanayo inay hawsha hergeleyso waxaa lagu heli kara oo keliya marka Erayga Ilaah loo ogolaado inuu ka shaqeyo qalbiga qof kastoo xerta Ciise ka mid ah, taasi oo qofka ku sababeyso inuu fahmo inaysan arintan ahayn uun wax “afka lagaga hadlayo” ee laakiin waa doonista Ilaah in la weeraro, la xayuubto, laga guuleysto lana xoreyo gobolada loona xoreyo Boqortooyadiisa Samada.

Ruuxa Quduuska ah iyo malaa’igaha ayaa ku hawlan waxyaalahan oo dhan, hadda xaalkan way ku hawl jiraan. Hawla waweyn ayaa si culus uga socdaan xagga samada oo ku lifaaqan waxyaalahan, oo isbedelkaasi ay hawsha samada ka socoto waddo waxaa laga dareemaya dunida. Ruuxaada iyo ruuxeyga waxaan ka daremeyna nasasho la’aan iyo rajo weyn. Isla sida askartii sugeysay maalinta dagaalka, ma garaneyno maalinta ay ahaan doonto iyo sida ay u dhici doonto, laakiin waxaan og nahay *in* weerar uu dhici doono. Ilaah wuxuu Yurubta ku weerari doonaa ammaantiisa. Silsiladaha hadda dad badan xabsiga ku hayaan qalbiyadooda waa la furfuri doonaa oo kuwa xisaab dhaaf ah ayaa badbaadi doonaan.

Wakhtiyada dagaalada ciidanka dagaalamayo wuxuu leeyahay meelo kala duwan oo hawla kala duwan loo qorsheyey sida meelaha, cuntada, nasashada, hubka iyo weliba meesha ciidanka wax lagu fahansinayo. Meelahaas muhiimka ah la’aantood, awoodda ciiddanka wax weerarayo way yaraneysa horeyna ugama socon karto hawlaheeda weerarka. *Haddaba meelahaasi hawlahaasi kala duwan lagu keedinayo ama lagu qabanayo waa kiniisadda.*

Kiniisaddu ma ahan guri ciyaaraha loogu talagalay, miseba ma ahan ay ku sugan yihiin bulsha la wada damcayo noloshooda, amaba meel uu qof kasta kan kale u sii wacyoonayo oo midkoo waliba uu ku mushquulsan yahay midka kale uu u duceynayo iyaga dhexdooda. Ma ahan meel ay bulshada isugu imaneyso oo wakhti ku lumineyso. Kiniisaddu waa meel ay askarta ka heleyso wax ay ku adegaan iyo si ay ku adegaan, si ay u awoodaan inay baxaan oo hawl galaan, weeraraan oo dhulal uga qabsadaan sheeddaanka boqortooyadiisa oo ay weliba u awooddaan inay dadka ay u tageen u sii diyaariyaan inay iyaguna meelo kale u si tallaabaan oo fidiyaan wixii lagu deeqay.

Dadka qaarkood waxay ka gunuunacayaan kiniisadaha badan ee la aasaasay, laakiin sidaa ma aha nee, runtii kiniisadaha aad bay u yaryihiin. Kiniisadaha badan ee cusub ee la aasaasayo waxay u fiican yihiin inay ahaadaan mid ka mid ah xaruumaha lagaga adeego laguna kaamilo wax alla wixii uu ciiddanka u baahan yahay sida hubka, nasashada, wargelinta iyo wixii la mid ah ay kaga helayan samada, waxaana looga baahan yahay in laga helo magaalo kasta iyo quruun kasta. Kuwa loo xulay hogaaminta Alle ka cabsashada leh waa jeneraalada hogaaminayaan ficigalka

ciidanka oo wax baraya, niyadda u dhisaya si ay u dhiiranadaan oo ay meelo cusub uga qabsadaan cadawga oo isla markaana caawiyaan kuwooda la dhaawacay si ay cagahooda ugu istagaan oo ay haddana dagaalka u sii wadaan mar kale.
Kiniisadda looma ekeynin uu ciidan. Waxaa kaloo lagu meteli kara inay tahay hoy jacayn iyo xanaano lagala kulmayo. Saa ay tahayna qoyska ma ahan oo keliya meel xanaano laga helo. Waa meel. Waa xaruun amar leh, una muhiim ah hawlgalka ximan mideysan oo waarta.

Awliyadaha ayaa Wadaan Hawsha

Ilaah wuxuu dhisaya awliyadihiisa oo Eraygiisana wuxuu u hawl gelaya si ay dhegna maqli dhaayana la saarin hadda ka hor. Isla markaana Wuxuu saxaya fikiradaha si qaldan loo fahmay eek u saabsan hogaanimada Alle ka cabsashada leh. Hogaamiyaalka hawlaha Ilaah ku jiraan waxaa lagu metelaya askarta ciidanka ku jirta. Iyagaa colka horsed u ah, iyagaa tallo bixinayaan, iyagaa hogaaminayaan, barabarayaan, xanaaneynayaan askarta. Saa ay tahayna hawsha oo dhan iyaga oo keliya ma fulin karaan. Iyagu waxay ka yihiin uun kormeyr oo waxay xaqiijinayaan inay hawsha si wanaagsan loo fuliyey. Waxay ciidanka, xerta Ciise ku caawinayaan inay ahadaan kuwa fejigan oo hawshooda ka soo baxayaan laakiin waa xerta kuwa hawsha duulanka ku jira oo dhulka qabsanayaan *awood ay sidaa ku sameyaanna way qabaan!*
Markaan dib u eegno hawlaha Rabbiga waxaan arkeyna sida uu ibliska hakat u geliyey hawlaha samato bixinta. Isagoo dadka ku dhiirigelinayo barid qaldan, wuxuu hakat geliyey qorshooyin badan uu Ilaah kheyr ugu tallo galay uu geliyey qalbiyada dadka Isaga u adeegayaan ee xerta ah oo qorhsihii oo sida loogu tallagalay u fulin ayuu ibliiska ku burburiyey aasaaska hawgalka.
Kuwa badan oo waxaa jiraan aan weligood la barin sida ay ku garan lahayeen hogaanka Ruuxa Quduuska ah. Ma aanay fahmin sida weyn uu Ilaah iyaga u jacayl yahay uu rabo inuu adeegsado iyaga si ay u hergeliyaan waxyaalo aan caadi ahayn uu iyaga awood ay ku hergeliyaan ku siin doono ammaantiisa awgeed. Sababtaas awgeed, waxay dadkan noqdeenn kuwa niyad jabay, u hogaansamay hogaamin aan jahada Ilaah ku soconin, bedelkii ay ahaan lahayeen kuwa niyadda u hisan tahay oo shaqsi walba dhiiranaan ku socdo oo Eebbe ugu adeegayo.
Wakhti la soo dhaafay Rabbiga wuxuu I fahansiyey inay jiraan kuwa badan oo safarka u adeegidda Eebbe bilaabeen oo laakiin intaanay meel fog gaarinba hawsha ka joogsadeen xagga waddanka Swiden sanadihii 1970nadii ka badan sida ay hadda qarnigan hawsha u socoto.
Sababaha midkood ee ay arintan qaloocan ku hergeshay waxaa ka mid ahayd dadka oo diideen inay addecaan Erayga Eebbe oo aasaaseen kiniisado cusub.
Cabsida dadka laga qabo iyo maskaxda oo daashay ayaa sababtay inayan dadka aasaasin kiniisado ficilgelinayaan aaminsanna difaaca lagu helo Ruuxa Quduuska ah isla markaana waxaa dhacday in shaqsiga uu helo fursad uu tan la quman ficil geliyo. Wax barid hore oo ku saabsan wadajirka hogaaminta ayaa hakat gelisay hawl gelista hogaamiyaalka daacadnimada ku shaqeynayeen iyo shaqsiga xerta Ciise ku biiray, taasina waxay sababtay inay hawla badan uu Ilaah kheyr ugu tallagay ceejisay isla marka ay bilaabanayaan. Hogaamiyaalka oo dhan ayey ahayd inay si wadajirka ah marxalad kasta go'aan kaga garaan, taasi oo ay ku muujinayeen nooc midnimo. Fikirad wanaagsan ayey u ekeyd ee laakiin waxba waa lagu fulin wayey.

Qaybinta Masuuliyadda iyo Maamulidda – Ma ahan Cadaadin

Ilaah wuxuu ku hawl gala qaybinta masuuliyadda. Qof walibaba wuxuu leeyahay jaqo loo qondeyey u masuul ka yahay iyo fursadda uu u leeyahay inuu halkaas ka adeego. Ugu dambeystina waxaa halkaas laga diwaan gelinaya dhestuur iyo kala dambeyn, sidaasna shaqaalaha ma ahanayaan kuwa wareersan ama isku kor tuban.
Meelaha qaarkood waxaa cad inay dadka gaareen heer ay "midba midka kale axdi la galo" iyagoo

iisu wada saxiixayaan heshiis muddo dheer jiri doono oo laysku aamino dhexdooda iyo hogaamintooda qaaska ah.
Kuwa badan ayaa cadaadis kala kulmeen hogaaminta noocaas ah maxaa yeelay xidhiidhka qaas ahaaneyd ee ay Ilaah la leeyihiin wuxuu ahaa mid ku dhisan hab maskaxdooda kula qumanaa ee Ilaah aasaas uma ahayn. Haddii aad ku jirtay hab shaqeynta noocan ah ee axdiyada la kala saxiixanayo, ka bax heshiiskaas oo dhan oo wada gub qoraal kasta oo arintaas ku saleysan. Ha ogolaanin in baridda noocan ah ay idiin soo xuluulato oo ay demiso wuxuu Ilaah aasaasay. Ma ahan inaan shirar galno oo aan go'aamino wuxuu Ilaah sameyn doono, sida uu ku sameyn doono goorta uu sameyn doono. *Ma ogolaaneyno hogaanimo caalami ah oo ansaxeyso waxyaala aan dhicin sida iyagoo dheceen, oo calaamo su'aal saarayan wax kastoo ku saleysan awoodda Rabbaaniga ah.* Markay xertii sida aan uga akhrineyno Markos 9:38-40 ay Ciise ku yidhaahdeen waxay isku deyeen inay nin jinniyo kaga saraan magaca Ciise ee laakiin ahayn mid ka mid iyaga ka mid ah, Wuu uga jawaabay oo wuxuu ku yidhi, 'ma jiro nin magaciisa muucjisooyin ku sameynayo oo iyaga ka gees ah. Ciise wuxuu ninkii u ogolaaday inuu xornimadiisa sii wato, saa ay tahayna xertii waxay rabtay inuu hawlahaasi ka fikiro oo uu iyaga ku soo lug darsado.
Hogaamin u baratay hab hore oo wax lagu maamulo waxay mar kastaba rabta inay wax kastoo cusub ay xukunto, laakiin Ilaah ma ogolaan doono taasi. Ruuxa Quduuska ah ayaa hawsha haya oo kala siinaya kuwa uu u arko inay istaahilan in hibadaasi qaaska ah lagu aamino si ay Rabbiga ugu adegaan. Caleemo saarka noocaas ah wuxuu awood u sii leeyahay inuu hawlaha dad u xilsaaro oo weliba habka ay ku shaqeyn lahayeenna u bandhigo; tani waxaa lagu magacaabi kara inay tahay mid xornimo u ah shaqsiga Ciise rumaystay shaqsi ahaan iyo hab shaqeyn ay kiniisadda degaanka ku shaqeyneyso si "beer goyska lagu soo darro," "si idaha loo quudiyo" oo "askartuna loo tababaro."
Haddaba Ilaah wuxuu jagooyinka ku kala qaybinaya sida loo karaama weyn yahay: xerta dhexdooda, hawlaha iyo hibooyinka kala duwan ee lagu adeego iyo kiniisadda degaanka. Wuxuu ku shaqeynaya oo la shaqeynaya xerta Ciise si ay u sameyaan isla hawshii u Ciise sameynayey markuu dunida joogay. Ciise wuu wacdiyey, wax buu baray, kuwa buka ayuu bogsiiyey, jinniyada ayuu dadka ka saaray – ummad badanna rumaysad ayey ku raaceen Isaga.
Danta uu Ilaah xerta Ciise ka leeyahay waa isla tii maantaba. Ku talagalka uu jidhkiisa u leeyahay waa midnimo uu ku maamulayo wax kastoo ay hasystaan, si ay u awoodaan inay hergeliyan hawlaha Ciise. Waa uun markaasi goorta ay dad badan badbaadi doonaan, kuwa jinniyada qabaanna laga saari doono oo kuwa sheeddaanka xabsiga ugu jiraanna la xoreyn doono.
Indhaha Ilaah adduunka oo dhan ayey wax ka arkayan. Wuxuu dadka ka dhex saaraya wax baridda qaldan si aanay hakat nooga gelinin hawsha fulinteeda ee laakiin la lahaado xornimo lagu fidiyo Injiilka oo lagu gaarsinayo quruumaha. Wuxuu xertiisa u tababaraya inay awooddiisa ku weeraraan Yurubta iyo qaaradaha kale ee adduunka ka jiraan.
Xataa haddii ay waxyaala yar yar oo dhan ah ka jiraan kuwa jagooyinka kala duwan haystaan, laakiin natiijada waa uun isku wada mid – ciidan awood badan, asli ah oo hawshoodana ka adag, qabsanayaan dhulka cadawga kana guuleysanayan. Sanadaheena ugu wanaagsan way naga horeyan!

39
Hibbooyinka Rabbaaniga ah ee lagu Adeego

Oo qaar wuxuu ka dhigay inay ahaadaan rasuullo, qaarna nebiyo, qaarna wacdiyayaal, qaarna

kuwao kiniisadda dhaqaaleeya, iyo macallimiin. Sababtuna waa kaamilidda quduusiinta xagga shuqulka adeegidda, iyo xagga dhisidda jidhka Masiixa, ilaa aynu wada gaadhno midnimada rumaysadka iyo aqoonta Wiilka Ilaah oo aynu noqonno dad waaweyn xagga qiyaasta koridda ee buuxsnaanta Masiixa (Efesos 4:11-13).

Efesos 4:8, Baybalka wuxuu noo sheegaya inuu Ciise dadka hibooyin siiyey. Bawlos wuxuu sharaxaya waxyaalaha ay hibooyinkaas yihiin markaan ka eegno aayadda 11aad, wuxuuna caddeynaya inay yihiin hawlaha uu Ilaah aasaasay una hawl geliyey xerta Ciise, taasi oo loogu yeedhayo kiniisad. Horeynta cutubka 4aad, Bawlos oo midnimada kaga dhex hadlayo jidhka Ciise, wuxuu soo jeediyey muhimmadda ku jirto in *xagga ruuxa laga midoobo* (Efesos 4:3). Dhammaanteenba waan maqalnay waxyaala waweyn oo muhiim ah oo ku lifaaqan midnimada, waanna wada og nahay inay midnimadu muhiim tahay. Laakiin midnimada uu Ruuxa Quduuska ah nagaga hadlayo waa mid nooceen? Waa tan laga sharaxayo aayadda 13aad oo leh, *Ilaa aynu wada gaadhno midnimada rumaysadka iyo aqonta Wiilka Ilaah oo aynu noqonno dad waaweyn xagga qiyaasta koridda ee buuxnaanta Masiixa.*

Midnimada noocan ah maantaba Ilaah wuu nagu deeqaya, wuxuuna nagu siinaya hawlaha ay kiniisaddu Rabbiga ugu adeegto. Hawlahooda waxaa weyey inay dadka Ilaah u diyaariyaan shaqooyinka ay Rabbiga ugu adeegi lahayeen (Efesos 4:12). Waxaa xerta ku biiriyey Ciise naftiisa. Waa Isaga ma ahan nimanka iyo naagaha Isaga rumaysan kuwa, kan doortay, u yeedhay, dhinac u soocay oo subkay. Waxaan tan si bayaan ah uga arkeyna buugga Galatiya kaasi uu Bawlos ku bilabayo erayo horudhac ah, *Waxaa warqaddan qoraya Bawlos oo ah rasuul aan xagga dadka ka iman, oo aan dadna ku iman, laakiinse ku yimid Ciise Masiix iyo Ilaahah Aabbaha ah oo Isaga ka sara kiciyey kuwii dhintay.* Bawlos Ilaah ayaa toos u hawl geliyey oo isla markiiba wuxuu bilaabay inuu u adeego Ciise, wuxuuna bilaabay inuu u hawl galo waxyaalihii uu Ciise ku hawl jiray. Galatiya 1:16, 17 ayuu ku caddeynaya taasi wuxuuna leeyahay, *Qofna ma kala tashanin. Isla markiiba waan hawlgalay…*

Hibooyinka Rabbiga loogu hawl gelayo ee ku taxan Efesos 4:11 waa kuwa uu Ilaah awooddiisa ku bixiyey lana subkay. Mana ahan kuwa isla marka la helayo wada kaamilan. Wakhti dheer ayaa ka soo wareegi karta intaanan hibooyinkaas la hawl gelinin, sidaa ay tahayna Ilaah ayaa diwaan geliyey dadkana ugu yeedhay inay ku hawlgalaan Isaga ayaana subkaya. Hibooyinka lagu hawl gelayo ee ku taxan Efesos 4:11 waa kuwan; *rasuullo, qaarna nebiyo, qaarna wacdiyayaal, qaarna kuwo kiniisadda dhaqaaleeya, iyo macallimiin.* Mid kastoo hibooyinkan ka mid ah waa kuwa Rabbaani ah looguna talagalay in loogu dhex adeego kiniisadda oo lagu balaariyo Boqortooyada Ilaah.

Isla sida uu Baybalka kiniisadda u ekeysinayo ciidan, ayaa loo ekeysinaya jidhka. Iisu ekaantan waxay ka hadleysa is dhexgalka iyo jaalnimada iyo isku xirnaashada midba uu midka kale ka faa'idayo waana isla sida ay unugyada u wada shaqeyaan si uu jidhka u jiro – sida kale oo loo fasiri karo waxay tahay in dhammaanteen aan hawlan nahay. In kastoo ay kuwan yihiin sawirada muhiimka ah ee kiniisadda, iyagu iskuma filno. Baybalka wuxuu haddana kiniisadda ku metelaya macbudka Ilaah – meesha ammaantiisa ay ka jirto. Waxaa kaloo kiniisadda lagu metelaya geedka canabka iyo laamahiisa dhallaan miro badan. Kiniisaddu waa meel laga helayo ama laga arkayo wejiyo kala duwan ee nool.

Sawirka kiniisadda ee ciidanka loo ekeysiyey waxay muujineysa dhinaceeda kale ee dagaalanka ruuxiyanka ah. Hub ayaan haysana dagaalna waan ku jirna, ee haddaba Ilaah wuxuu rabaa inaan ahaano kuwa dagaalama. Waa inaan weerarno markaan weerarnana waan guuleysaneyna. Ciidanka Rabbiga waa inuu midkood waliba fahmo meesha uu ka hawl geli lahaa iyo masuuliyaddiisa; waa in qumaati loo tababaro bartana sida uu hubabkiisa u istecmaali lahaa. Ma ahan inuu umaleyo inay askarta kale surmadiisa u qaadeyso, kabahiisa ku soconeyso oo ay

hubkiisa wax ku dileyso. Wuxuu u xilsaaran yahay qayb hordhaanta ka mid ah oo la callah haddii uu masuuliyaddiisa ka soo bixi waayo, waxaa jiri doonta il banana. Waa inuu ahaado mid edeb leh qalbigiisana ku wato guusha noloshiisa shaqsi ahaaneyd haddii uu rabo inuu waxyaalaha kale ku guuleysto. Waa inuu xor u ahaado inuu hawshiisa ka soo baxayo, waa inuu go'aankiisa leeyahay oo uusan ahaanin mid ku socda oo keliya fikiradda dadka kale.
Waa wejigan aan ka arkeyno nolosha xerta Ciise tan uu Ruuxa Quduuska ah tooshka noogu ifinayo Isagoo noo diyaarinayo dagaalka ugu dambeyo; waa ficilka kama dambeysta ah, beer goyskii hore ee sinaan wayey ayaa la raba in lagu soo wada qufo Boqortooyada Ilaah.
Hibooyinka lagu hawl gelayo waxaa naloo siiyey inaan wax ku barno, tababar ficilgal ah ku sameyno, ku canaanano, ku xoojino awliyada xagga "shaqooyinka u adeegidda Rabbiga."

Rasuulka
Rasuulka waxaa loo caleemo saaray hawl qaas ah ee ah inay aasaaska wax baridda iyo caleemo saarka dabadeetana kormeyr ku sameyo uuna dhiiri geliyo, weliba meelaha uu gacan ka geystay hawlaha la aasaasay. Sidaa ay tahayna ma ahan inuu meel kasta safar u aado oo dadka caleemo saaro bidax, midig iyo baartamahaba. Wuxuu sameyn kara inuu la talin bixiyo, laakiin waxuu keliya sameyn kara inuu ku hawl galo amarna ku lahaado meelaha uu shaqo ka aasaasay. Haddii kale hawshiisa waxay ahaneysa oo keliya mid waddanka oo dhan ku fideysa oo dabiicad lagaga deydo leh.
Nebiyo
Niga wuxuu lahaan kara hawsha safarka loo gelayo, isagoo farta ku fiiqayo waxyaalaha ka dhex jiraan jidhka Masiixa, inuu farriin Rabbaani ah dadka u keeno, wax saxo oo weliba dhiirigeliyo. Kuwa badan oo la siiyey hibooyinka lagu adeego way sameyn karaan hawsha nebiga, laakiin taasi kama dhigeyso iyaga nebiyo. Nebiga isla sida Rasuulka, wuu fahmi kara kuwa lagu deeqay karaamada hibada lagu hawl gelayo, laakiin yaanay noqonin ee, taasi ma ahan hawshiisa guud. Nebiga waa inuu xoogga saaro wacdinta Erayga, ma ahan inuu ku socdo fikiradahiisa naf badbaadinta. In kastoo ay wax wanaagsan u egtahay in meelo loo safro, oo dadka hawlaha Rabbiga loo caleemo saaro, shaqooyinkooda loogu wacyoodo, waxay nebiga ku hogaamin karta wareer hadduusan ku soconin Ruuxa Quduusak ah ee Ilaah.
Waa inaad ogaatid inuu Ilaah dadka kale oo keliya kugu ogeysineynin hawlaha uu rabo inaad ugu adeegtid. Adiguba toos ayuu kuula hadlaya Isagoo adeegsanayo Eraygiisa ku saleysan Ruuxa Quduuska ah. Waxaana taas raaci doonnaa wacyoon nebi ka imaatay si aad u xaqiiqsatid waxyaalaha aad durbaba heshay ee aad hubsanin. Hadduu qof wax kuugu wacyoodo oo natiijaduna lagu wareero, aan durba la fahmeynin, is af garasho la'aan, isla markaasba ka tallo bax wacyoontaas. Haddii ay hadleynin si aad ku faraxdid oo ay kibirkaaga kordhiso waxaad ku socotaa waddo qaldan. Haddii ay gacan siineyso waxyaala aad garaneysid, si degan ayaad hawshaada u sii wadaneysa.
Haddii aad haysatid hawl aad Rabbiga ugu adegeysid, waxaad haysata shaqo, Ilaahna wuxuu jacayl yahay shaqaalaha hawshooda ka adag (2 Korintos 3:5,6), ee dadka uu Ilaah rabo ma ahan kuwa ku faana karaamada uu Ilaah ku deeqay. Haddii aad aamin ku tahay marxaladaha aad hadda ku sugan tahay aadna ku tallo jirtid balaarinta Boqortooyada Ilaah, rumaysadka ku socotid, wacdineysid, caawineysid awliyada oo Rabbiguna u adeegeysid – Ilaah wuu ku caleemo saari doonaa, wuxuuna kugu toosinaya meesha aad karamadaas si fiican uga adeegeysid ee aad looga baahan yahay. Waxa uu Ilaah aad u jacayl yahay waxay yihiin askarta hawshooda ka adag, ee ma ahan kuwa faanka badan oo wax soo saarkooda aan la arkeynin. Wuxuu raba ciidan garanayaan sida ay hubkooda u istecmali lahayeen, ee ma ahan kuwa iska ag fadhiyaan wadajirka ururka ciidanka, ka sheekeynayaan uun guulo aan jirin. Wuxuu raba kuwa inay jacfaantooda xibnaha ku

xirtan hawsha qabanayaan, kuwa garanayaan wuxuu Rabbiga iyaga ku amray, kuwa fahansan inuu Eebbe sii dayey awooddiisa lagu fulin lahaa hawshaas kuwaasi oo bogsiinayaan kuwa bukaan, samato bixinayaan, baabtiisayaan dadka. Ilaah si caadi ah ayuu noola jira e Isagu nagama foga. Isagoo labadiisa cag dhulka ku hayo, wuxuu raba inuu arko natiijooyin aan caadi ahayn ee lagu helay Dadkiisa.

Wacdiyaha

Wacdiyaha ma ahan qof meelo badan u safrayo oo kiniisado kala duwan u tegayo oo ku wacdinayo. Si xoog leh ayuu adduunka ku barakeynaya hibodiisa, isagoo taabanaya nolosha kuwa badan oo aan horey Erayga la gaarsinin, hawlihiisa waxaa xoojinayaan muucjisooyin iyo calaamooyin xoog badan. Dad badan ayaa caadi ahaanba u yimadaan meel alla meesha uu ku wacdinayo. Farriintiisa badana waxay ku saleysan tahay Ciise Masiix iyo hawlahiisa, waxaana inta badan raacsan muucjisooyin. Maanta aad ayaa loogu baahan yahay in la gacan qabto wacdiyayaalka, waana I la xoreyo si ay hawlaha uu Eebbe hibo ku siiyey u hergeliyaan taasi oo ay Rabbig ugu soo jiidayaan kuwa badan inay galaan Boqortooyadiisa. Wacdiyayaalka waxay hor u yihiin oo ay ka shaqeyn karaan degmooyinka, gobolada, waddanka oo dhan iyo weliba waddamada kale. Waxay ku wacdinayaan dad meel wada tuuran iyo shaqsigaba. Wacdiyaha waa mid ay dadka Ciise ugu soo dhawaanayaan ama ku jeclanayaan markay uu u sheego kan uu Ciise yahay iyo Badbaadada uu ka helay Isaga.

Macalinka

Macalinka ma ahan qof isaga uun wac yaqaano oo aan waxba laga su’aali Karin. Ma ahan mid waxyaala aan nolosha lagala kulmeynin ama aan la fahansaneyn oo waxyaalaha Baybalka ku jira si qaldan u fasiro. Waa inuu ahaado mid wax alla wuxuu ku hadlayo si fiican loo fahmayo waana inuu ahaado mid wax alla wuxuu barayo noloshiisa laga arkayo.

Miyaad jaclaan lahayd in macalin ku takhsuusay gawaarida sida Ford ee jiri jiray afartameeyadi inuu afka kaaga sheego sida babuurka loo wado isagoo aan weligiis babuur jidka ku wadin? Maya ayey ila tahay, waxaadse dooraneysa dereewal ku takhsuusay wadista babuurka oo haddaba ku jira hawshaasi oo aan afka uun wax kaaga sheegeynin ee xataa ficil kugu bari karo.

Ujeeddadaada ma ahan inaad la dhacdid uun dereewalka ee laakiin waxaad rabta inaad baratid sida babuur loo wado ee dhabta ah.

Subkinta macalinka lagu subkay ayaa wax kasta kuu caddeyneysa. Wax baridda maanka baraha ka imaatay way quruxsanaan karta laakiin waa mid aan ujeeddadeeda la fahmeynin oo dadka la barayey wareerineysa. Wax baridda noocan ah ficilgalka ayaa ka maqan ardeyguna wuxuu noqonaya mid macalinka uu ku xiran bedelkii uu si xornimo ah u raaci lahaa Ciise. Tababarka wuu ka wanaagsan tahay farxadda loo qabo in wax la baro.

Wadaadka - Arijirka

Wadaadka (arijirka) wuxuu masuul ka yahay kiniisadda degaanka amarka uu leeyahayna waa hogaaminta kiniisaddaasi. Ma ahan wiil kiniisadda ka adeegayo oo raacaya wax kastoo ay iyaga rabaan. Waa loo xulay shaqadaas oo weliba Ilaah baa u subkay shaqadaas. Wuxuu hogaaminaya idaha. Ma ahan idaha kuwa isaga hogaaminayaan. Waa mid aan maskaxgal ahayn inuu arijirka idaha weydiyo meesha ay rabaan inay adaan. Bedelkeeda wuu garanaya xaaladdooda iyo baahidooda “wuuna garanaya sida taxadirka ah ee loo qumiyo kuwa neylaha leh.”

Arijirka wuxuu idaha ku deeqaya nabadgelyo iyo xasiloon. Isagu ma ahan mid mar kastaba dambeyo, cabsi badan kana cabsanaya waxyaalaha suurtagalka ah iyo waxyaalaha aan suurtagalka ahaynba taasi oo ugu dambeysta dhici doonta amaba aan dhici doonin. Isaga ayaa hor

soconaya idaha tusaala ahaan si ay u racaan isaga. Kiniisadda degaanka ee uu Ilaah xushay waa inay lahaado *hal* arijire, ma ahan shan iyo tobban. Isla sida ay kiniisadda guudba leedahay hal hogaamiye oo ah Ciise, qoyskana wuxuu leeyahay hal hogaamiye oo ah ninka guriga, isla sidaasna kiniisadda degaanka waxay leedahay hal hogaamiye oo ay ka amar qaadaneyso. Haddii ay subkinta kiniisadda ka jirto, qof kastoo kiniisadda ku jira wuu helaya jago uu hibadiisa kaga adeego, waxaana halkaasi ka jiri doontaa nidaam dhisan ammaanta Ilaahna waa la arki doonaa. Sidaas daraaddeed arijirka ma ahanayo midna ama wiil meel kasta u orda, qaxwada dadka u shubayo, laman ubax ah dadka siinayo, mana ahanayo mid dadka madaxa kaga istaaga oo rabo in wax kastoo la sameynayo uu ku lug lahaado, oo laakiin rabin in arimihiisa ay cidna soo fara geliso isagoo aan rukhsa laga dalbanin. Marxaladahaas fool xumada ah ayaa dad badan ka niyad jebiyen inay kiniisadda hogaanimada kaga dhex adegaan. Markay arinta sidaas ahaato qof walibaba waa hogaamiye haddii kale guddi ayaa go'aanka garayo, xataa haddii la sameynayo sheyga ugu yar sida qalin dukaanka laga soo iibinayo! Haddii uu ciidan jirin, ma jirto cid ka badbaadi karto markay xaaladda heerkaas mareyso. Marxaladdaas waxay gacan siineysa uun in laysku madax adkaado oo nidaamkana uu burburo.

Masuuliyadda Qofka Xerta ah

Durbaba waxaan arki doonnaa karaamadaha lagu adeego oo xambaarsan wuxuu marka hore Ilaah ugu talagalay inay ahadaan – rabbaani, subkan uu Ilaah hogaaminayo. Inta ay raga iyo dumarka lagu aaminay karamadahan sida saxda ah u hawgelinayaan, lana siiyey xornimada saxda ah, xerta waa la wacyo gelinaya, way midoobayaan wayna barbaarayaan. Saa ay tahayna, kiniisadda waxay ka dhismeysa xagga rumaysadka in garadka ay garanayaan Wiilka Ilaah (Efesos 4:13). Jidhka oo dhan, *Oo weliba waxaa kaloo aad qaadataan gaashaanka rumaysadka, kaas oo aad ku awoodaysaan inaad ku wada demisaan kan sharka leh fallaadhihiisa ololaya oo dhan* (Efesos 4:16).

Ciise wuu xoojin doonaa oo hawl gelin doonaa xerta si uu ugu hogaamiyo iyaga hab heer sare ah. Inta la sii fahmayo hibooyinka lagu hawl gelayo, nidaam ayaa la helaya, muujin fara badan ayaa soo butaaceysa, fahanka la fahansan yahay Wiilka Ilaah way sii badaneysa oo awliyaduna waxay rumaysadkooda kaga barbaarayaan tallaabo sare. Inta uu qof kasta oo xerta ka tirsan rumaysad ku socdo, wuxuu helaya nolosha guusha leh ee u muhimsan shaqsigaas. Saa ay tahayna waxaa jiraan kuwa badan oo xerta ka mid ah oo aan fahmin ama la qabsanin aragtida dheer iyo riyooyinka hawlgelayaan. Waxay isku deyayaan inay si gaar ah guul kaga helaan noolol maalmeydkooda waxay laakiin u riyaaqayaan qof u tilmaamo *sida* ay ku ficilgelin lahayeen. Inta uu qofka shaqsiga ah bilabayo safarka ku socodka rumaysadka, haba ahaatee, noloshiisa wuu ku helaya guul rumaysadkuna wuu ka shaqeynaya noloshiisa – waa haddii uu ku nolaado noolol jacayl leh (Galatiya 5:6). Sababtan awgeed, waa inuu ahaado qof dadka jacayl, hadiyadda loogu abaal marin doonana waxay ahaaneysa midnimo iyo ammaanta Ilaah oo noloshiisa ka iftiimeysa. Yooxanaa 11:40 waxay leedahay, *Ciise wuxuu ku yidhi, miyaanan kugu odan, Haddaad rumaysatid, waxaad arki lahayd ammaanta Ilaah?* Haddii uu qofka shaqsiga ah baranin sida rumaysadka loogu dhaqmo; ma arki doono midnimada ama ammaanta Ilaah.

Markay hibooyinka lagu hawl geli lahaa lagaga dhaqmo (ma ahan sida maanka baniaadmiga ay la tahay ee) laguna hawl geliyo meesha uu Ilaah ugu tallo galay, si caadi ah ayey ula midoobayaan Ruuxa Ilaah iyo hawlaha kale ee Rabbiga loogu adeegayo iyo awliyada kale ee adduunka darfahiisa ka jiraan. Midnimadu maalmahan ma ahan arin dadka dhib ku ah amaba wax dhab ahaantii lagu hawl geli lahaa. Si caadi ah ayaa loo muujinaya, isla sida ay uga jirto meelaha shaqada uu qof kasta garanayo wuxuu qaban lahaa iyo masuuliyaddiisa, taasna waxay fidineysa agagaar farxad leh oo lagu qanco.

Haddii aan awliyo nahay waxaan ku waajibannahay inaan dhammaan dadka oo dhan jacayl u muujino oo “waa inaan cid kasta nabad kula nolaano heerka noogala baahan yahay inta aan awoodno.” Ma ahan inaan tixgelino oo keliya fikiradaha aan qabno, nooca waxbaridda. Midnimada waa inay ahaato mid aasaaskeeda yahay Ciise Masiix iy Ruuxa Quduuska ah waana mid ka adaga kana muhiimsan nooc kastoo wax barid ah. Midnimada laakiin lagu aasaasay wadajirka dadka way ka duwan tahay tan aan kaga hadleyno halkan. Korintooska 2aad 6:14 waxay leedahay, *Ha noqonina kuwo ku xidhan* (ha wada shaqeynina) *kuwa aan rumaysanaynin.* Tan waxay tilmameysa kuwa aan ku soo biirin xerta Ciise laakiin waxaa kale oo ay tilmaami karta haddii xagga Rabbiga lagaaga wacyooday waad ku hergelin karta. Way adag tahay inaad wax la wadaagtid dad hawlaha uu Rabbigga kuu diiray kaa leexinayaan, daahinayaan, wax ka sheegayaan amaba hakinayaan. Saa ay tahayna, xaq uma lihid ee aad wax xun kaga sheegtid ama aad kaga aar gudatid. Waa inaad wada jeclaatid oo aad xushmeysid, adiga oo si xornimo ah gudaneysid oo hergelineysid wuxuu Rabbigga kuu diray.

Midnimada waa ficilgal. Waxay nagu caawineysa inaan si wanaagsan ku wada shaqeyno, ma ahan inaan cadaadineyno ama aan is aamineynin. Markay Yoonadan iyo Daa’uud axdi wada galeen (1 Samu’eel 18), ma ahayn in Yoonadan uu rabi inuu cadaadiyo Daa’uud. Sababta waxay ahayd wuxuu ogolaaday subkinta la subkay nolosha Daa’uud wuxuuna rabi inuu ka caawiyo si kastoo uu macaawino u baahnaan doono si uu ku hergeliyo wuxuu Ilaah Isaga u subkay. Xiligan lagu noolyahay Axdiga Cusub ma jiro heshiis noocaas ah oo la gelayo. Dhammaanteen waxaan ku wada xiran nahay Axdiga uu Ilaah nagu siiyey Ciise Masiix. Waan ku faraxsan nahay in tallo nala siiyo, midkeenba midka kale dhiirigeliyo, oo aan mid waliba u ogolaano inuu karaamadiisa u istecmaalo sida uu Ilaah raali ka yahay. Haddii aan sidaan ku noolaano waan heleyna ama waan ficilgelinayna midnimada iyo xornimada uu Ilaah nala rabo.

Waxaan ku noolnahay wakhtiya la yaab leh. Ilaah ayaa sara u qaadaya hawlihiisa, Hibooyinkiisa ayuu barakeynaya si ay quruuntiinana u barakowdo. Isagaa tabaraya ciidankiisa. Guul fara badan ayaa nagu sugeysa jiirooyinka xigaan!

40
Hibooyinka Muujinta

Korintooska 1aad 12:1, Isagoo uu Ruuxa Quduuska ah ee Ilaah u wacyooday, Bawlos wuxuu sheegaya inuu rabo inaan fahanno wax ku saabsan hibooyinka rabbaaniyaga ah. Ilaah, haddaan ku sheegno erayo kale, ma rabo inaan qiimo tirno hibooyinkaasi rabbaaniga ah. Waa nasiib darro laakiin, qarniyada la soo dhaafay oo dhan ayaan tixgelin waynay hibooyinkan rabbaaniga ah. Laakiin xaaladdu way isbedelysa! Ruuxa Quduuska ah ayaa muujinta noo siyaadinayo ee aan ku fahmeyno hibooyinkan rabbaaniga ah wax ku saabsan si looga hergeliyo qaybta ay ku leeyihiin kiniisadda.

Hibooyinka ama karaamada uu Ilaah na siiyey aad bay muhiim yihiin oo la’aantood waxba ma dhaqaajin karno! Waa awoodo sare oo aan ku burburineyno awoodaha sheeddaanka oo aan ku guuleysaneyno. Waa hubab ku jira gacmaha kuwa awliyada ah oo waxaa lagu duufsanaya dunida. Ee haddaba qoraalka Quduuska ah wuxuu nagu dhiiri gelinaya inaan damacno, helno kuna shaqeyno (Korintooska 1aad 14:1). Eraygan “riyaaqid” marka la fasiro wuxuu noqonaya dan kaa gashay, qalbiga oo dhan, dhiiran oo fejigan! Waa isla eraygii loo istecmaalay Simyoon kii reer Silood. Reer Silood waxay ahayeen kuwa riyaaq badan. Waxay aad u riyaaqsanayeen inay Roomaanka ka bixiyaan dhulkooda. Waxay ahayeen kuwa argagixiso ah kuwaasi oo toori geliyeen askarta Roomaanka oo layey si ay uga guuleystaan. Waxay ahayeen kuwa mindidiin ah.

Kani waa erayga lagu macnayn karo dareenka laga qabo hibooyinka rabaaniga ah inay ahaan lahayeen! Waa inaan ahaano kuwa waxyaalaha saxda ah mindid ku ah oo u riyaaqo inay tixgeliyaan. Ma awoodno inaan ka tallaabsano oo aan la'aantood wax kaga guuleysano nolosha. Isla sida aan mindidnimadeena iyo riyaaqeena ku raadineyno kuna istecmaaleyno, waa naloo muujin doonaa, oo kuwa badan oo naga mid ah ayaa farxad ku heli doonaan.
Taarikhda oo dhan markii la eego, waxbaridda hibooyinka rabbaaniga ah aad baa loo labay. Dadku waxay hibooyinkan u ekeysiyeen kuna qaldameen kartida caadiga ah ee lagu dhasho oo tan rabaaniga ah way macna beeshay. Sidaa ay tahayna, hibooyinka rabbaaniga ah la mid ma ahan kuwa caadiga ah ee lagu dhasho iyo kuwa lagu dhasho. Kuwa rabbaaniga ah waa kuwa aad u awood sareyaan. Korintooska 1aad 12:7 waxay leedahay, *Laakiin mid kasta waxaa muujinta Ruuxa loo siiyaa waxtar.* Erayga halkan xoogga laga saarayo waa muujinta iyo soo bandhigidda awoodaha Ilaah, ma ahan soo bandhigid caadi ah oo lagu muujinayo wuxuu baniaadmiga tari karo laguna tilmaami karo.
Marka ay kiniisadda aasaasantay maalintii uu Ruuxa Quduuska ah ee loogu yeedhay wehliye soo degay, waxay kiniisaddaasi ku dhallatay si aan caadi ahayn. Maalintaas, qof kasta waxaa lagu baabtiisay Ruuxa Quduuska ah oo waxay dhammaantood bilabeen inay afaf ku hadlaan. Rabbaanimadii waa la muujiyey. Wixii dhacdadaas ka dambeyey, waxaa la dareemay bogsiin, calaamooyin muucjiso ah, yaabab iyo dhacdooyin waweyn ayaa sii raacay. Waxay ka tirsanayeen nolosha caadiga ah ee kiniisadda isla sida ay si caadi ah xidhiidh ula lahayeen nolosha Ciise markuu ku noolaa dunida.
Calamooyinka iyo yaababka uu Ciise sameyey waxaa sababeen hibooyinka rabbaaniga ah ee lagu adeego oo noloshiisa ku jireen. Ruuxa Ilaah ayaa Isaga duljoogay. Isla ruuxaas ayaa ku soo dul degay kiniisadda maalintaasi uu wehliye soo degayey oo wuxuu muujiyey isla natiijadii la arkay waayihii Ciise. Isla Ruuxaas iyo Hibooyinkaas waan leenahay maanta, oo isla natiijadii ayey soo saarayan – calaamooyin muucjiso ah iyo yaabab. Ibliiska wuxuu ka giriiraya hibooyinka ruuxa quduuska iyo sida looga dhex arkayo dadka Ilaah ee ku ficiltamayan. Wuxuu ka cabsi qaba inaan fahanno oo aan ku ficiltanno, maxaa yeelay wuxuu hubaa inaan ka guuleysan doonno isaga. Wax aan maskaxdeena ka keennay kagama guuleysan karno ibliiska, xooggeena, waxtarkeena caadiga ah haddii ay yihiin xagga jidhka iyo xagga maskaxdaba kamagam guuleysan karno ibliiska maxaa yeelay isagu waa ruuxiyan ee ma ahan jidh la taaban karo. Laakiin haddii aan ku tallabo qaadno awoodda hibooyinka rabbaaniga ah, si joogta ah ayaan uga guuleysaneyna! Sababtan awgeed, hibooyinka rabbaaniga ah aad bey muhiim u yihiin nolosheena!

Hibooyinka aan Caadiga ahayn

Korintooska 1aad 12:7-11, Bawlos wuxuu taxaya hibooyinka lagu helo Ruuxa Quduuska ah. Waxay dhan yihiin sagaal tiro ahaan, isla tirade sagaalka waxay kala siman yihiin miraha ruuxa ee aan ka akhrineyno Galatiya 5:22, 23. *Miraha Ruuxa waxay muujinayan dabiicadda Ilaah,* ee laga fahmayo carruurtiisa. *Hibooyinka Ruuxa waa awoodaha Aabbaha,* kuwaasi oo iyaguna laga arkayo nolosha carruurtiisa.
Sagaalka hibooyinka Ruuxa ah waxay u qaybsan yihiin saddex. *Saddexda ugu horeyso waa hibooyinka muujinta,* kuwaasi oo qabaan awoodda ay wax kugu muujinayaan. Kuwani waa Erayada xigmadda, erayada aqoonta iyo hibada lagu kala garto ruuxyada. *Qaybta labaad waxay ka tirsan tahay hibooyinka awoodda.* Waxay leeyihiin awoodda ay wax ku hadli karaan, oo sababtan awgeed, waxaa haddana loogu yeedhaa hibooyinka hadalka. Waxaana ka mid ah nebinimada iyo hibada ku hadalka afafka iyo fasiraadda afafka.
Hibooyinkan oo dhan waa kuwa aan caadi ahayn, waxaana lagu deqaa xerta lagu baabtiisay Ruuxa Quduuska ah si ay dadka ugu adegaan. Hibooyinkan waxaa ku dhismaan jidhka Ciise.

Waa qalab lagu garayo dunida oo dhan, waa haddii ay ku ficilgelino sida uu Ruuxa Quduuska ah nagu hogaaminayo ee ma ahan sida nala quman (1 Korintos 12:11). Waxaana la siiyey qof kasta (1 Kor 12:7,11), sidaas awgeed midkeen walibaba waa inuu rajeyo in nalooga muujiyo nolosheena si aan ugu adeegno Rabbiga. Bawlos wuxuu Eebbe ku shukriyey in ay jirin hal hibo oo ay dadka reer Korintos la'ayeen (1 Kor 1:7)—adiguna ma ahan inaad waysid hibooyinkaas oo dhan ama kuwa ka mid ah. Bedelkeeda waa inaad rajeysid in lagaaga muujiyo noloshaada. Haddaba aan eegno hibooyinka muujinta, kuwaasi oo ah erayga xigmadda leh, erayga aqoonta iyo hibada lagu garto ruuxyada.

Erayga Aqoonta

Hibadan ma ahan in lagu fasiro in la leeyahay aqoon sare. Ma ahan hibo lagu dhashay. Erayga aqoonta waa hibo aan caadi ahayn oo nagula dhalinayo oo ku saabsan qorshooyinka, dhacdooyinka dhabta ah iyo dadka, waxayna wada taabaneysa waxyaala taarikh ah iyo kuwa aan maanta ku noolnahay. Madaama loogu yeedhay erayga aqoonta ayaa bayaan ka dhigeysa inay tahay aqoon aan kaamil ahayn ee laakiin waa uun eray aqoon ku saleysan, waa qayb yar oo ximan kaloo weyn ka tirsan. Isla sida uu erayga uga mid yahay erayo taxan oo hadal lagu sameyo, erayga aqoontana waxaa uu ka mid yahay qaybta kaamilan ee aqoonta Ilaah eek u saabsan marxalad qaas ah.

Faalimaha Rasuullada 9:10-12 waxaan arkeyna in mid xerta ka mid ah oo Ananiyas la yidhaahdo uu Ciise ka helayo eray aqoon leh oo ku saabsan Sawloskii reer Tarsas. Waxaa loo sheegay jid magaciisa – Jidka Toosan, waxaa kaloo loo sheegay magaca qofka guriga uu tegi doono iska leh – Yudas, iyo magaca qofka uu gurigaas ku booqan doono – Sawlos. Erayga aqoonta inta badan fahfaahin dheer kuma jirto ee laakiin maraha qaarkood waxaa la socda fahfaahin dheer.

Sidee buu Ananiyas ku helay eraygan? Faalimaha Rasuullada 9:10 waxay sheegeysa inuu ku helay muujin. Hibooyinkan waxaa lagu muujin kara habab kala duwan. Waxay ku iman karaan muujin, booqashada malaa'igaha, eray aad maqleysid oo laguugula hadlo, dareen aad sawir kaga heshid qalbigaada amaba cod qalbigaada ku soo dhacay ama aad dareentay. Ilaah waa Ilaah wax kasta iyo hab kasta haysta oo Ruuxiisana siduu doono ayuu wax noogu muujin kara.

Waa nasiib xumo, inta badan waxaan umaleyna inaan garaneyno *sida* uu Ilaah nagula hadli doono, sababtaas awgeed waan gefeyna Wuxuu noogu talagalay. Mar kastaba gugac kama maqalno circa. Ilaah habkan uma ahan salhdigga habka uu nagula hadlayo weliba waayahan dambe ee Axdiga Cusub. Adiga iyo aniga waxaan nahay uun cusub oo Ruuxiisa ayaa nagu dhex nool. Ruuxa Ilaah ayaa ruuxeena ku nool oo nagu jira. Ruuxa nagu jira wuxuu la hadlaya Ruuxa Ilaah. Ruuxeenana waxaa ka soo baxaya eray, fikirad amaba sawir damiirkeena ku fidayo. Dhibaatada jirta ayaa waxay tahay markaan in yar oo dareenkaas ah uu na soo galo durbaba waan ka jawaab Celina ama waan fasirna, "Tan waa uun fikiraddeyda. Waa uun aniga."

Waa run waa uun adiga laakiin ma ahan adiga "oo keliya." Waa dareenkaaga Ilaah ku xiran ee farriin helay. Dhabta jirta ayaa waxay tahay in naftaada iyo jidhkaaga ay dareemayaan kana jawaab celinayan si qaldan oo isla markiiba waad fikireysa oo awooddaada ku macneyneysa, "Tan run bay ahaan karta. Sidaas ma samayn kari", iwm. Laakiin horta yara joogso oo qumaati u dhageyso intaanad fasiraaddaada gelinin. Bilaw inaan rumaysatid waxa qalbigaada lagula hadlay waadna la yaabi doonta sida heerka sare ah ee ay arintaas run tahay, in kastoo aad fahmeynin arinta oo dhan.

Waxay ahaan karta xataa hal eray sida "kansarka," "madaxxanuun," "sanboor," ama "murug." Waxay u ekaan karta arin aad u yar ama aan la af garaneynin laakiin qofka la caawinayo waxay u tahay wax u dhexeyo noolol iyo geeri. Weligaa ha yasin maalmaha aad nolosha kala kulantay waxyaala yar yar, laakiin ku taagso aqoonta aan caadiga ahayn ee lagu siiyey si kastoo ay kuula

egtahay wax yar. Markaan addeceyno oo aan qaadaneyno waxa nala siinayo, waxtarkeena wuu balaaranaya Ilaahna wuxuu na siinaya waxyaala badan oo khaas ah iyo jahada aan kaga tooseyno. Marar badan ayaa jiraan oo aan helay erayo aan caadi ahayn, laakiin mar kastaba waxay natiijada ahayd mid run ah. Mar ayaa jirtay oo aan helay eray ii tilmaamay inuu jiray qof qalitaan lagu sameyey oo tuubo lagu dhex ilawbay caloosha taasi oo sababeysay istareex la'aan oo meeshii infekshen ayay yeelatay oo way ololeysay. Shirarka aan la qorsheynin badana kuma arkeysid dad calaancal noocaas ah sheeganayan. Mudda yar ayaa ka soo wareegatay ee laakiin wakhti kaddib, naag sheeganeysay isla dhibkii lay muujiyey ayaa isa soo shaac bixisay. Mar kale ayaa jirtay oo Rabbiga ii muujiyey inuu jiro qof gacantiisa ay bir ku jirtay iyo weliba qof kale oo boog xumaatay shafqasha ka qabay taasi oo qofkaas aad u dhibtay. Muujintaasi waxay noqotay run oo dadkiina Ilaah baa bogsiiyey. Erayga aqoonta wuxuu kordhiya rumaysadka qalbigeena, taasi oo u fududeyneyso inay muucjisooyinka Ilaah iyaga u hayo.

Erayga Xigmadda

Erayga xigmadda waa ximan ka tirsan xigmadda ku jirta waxyaalaha khusayaan maanka Ilaah, qorshooyinka iyo danaha uu ugu tallo galay mustaqbalka. Xigmaddiisa waa la talintiisa iyo qorsheyntiisa. *Erayga xigmadda waa muujinta qaybta ka tirsan, waa filiiq, ka soo filiiqmay qorhshooyinka uu Ilaah u leeyahay mustaqbalka.*

Erayga xigmadda waxaad ka dhex arkeyna wacyoon ama nebinimo. Ilaah qorshooyinkiisa oo dhan hal mar ma wada muujinayo, wuxuu muujinaya waxyaalaha hadda loo baahan yahay oo keliya. Waxaad la barbar dhigi karta la talinta laga helo wakiilka marka lagu jiro marxalad fool xun. Wuxuu ku siinaya oo keliya eray la talin ah. Kuuma soo gudbinayo aqoontiisa sharciga ku saleysan oo dhan, laakiin wuxuu kuu soo gudbinaya oo keliya waxyaalaha quseya marxaladdaada si aad u awooddid waxaad ku dhaqaaqi lahayd. *Laakiin markuu kan Ruuxa runta ahu yimaado, wuxuu idinku wadi doonaa runta oo dhan, waayo, isagu iskama hadli doono, wuxuuse ku hadli doonaa wuxuu maqlo, wuxuuna idiin sheegi doonaa waxa imanaya* (Yooxanaa 16:13).

Erayga xigmadda waa hab uu Ilaah noogu muujinayo qorshooyinkiisa. Xigmadda noocaas ah waxay inta badan noogu timaddaa farriinta nebiyada, taasi oo inta badan naga dhigeyso inaan u maleyno wacyoon. Saa ay tahayna, wacyoonta waxaa loo bixiya in wax jiray lagu xoojiyo, lagu dhiirigeliyo laguna garab qabto (1 Kor 14:3), ma ahan sii sheegidda wax imaan doona. Markuu Baybalka leeyahay dhammaanteen waan wacyoon karna macnaha ma ahan inaan mustaqbalka wax ka sheegi karno. Macnaheedu waxaa weyaan inaan leenahay karaama aan dhexdeena isku dhiiri gelino, qalbiga iisu dhisno oo is garab qabano. Nebiyoonta waxay la mid tahay sida koobka shaha ee gacanta kugu jira oo aad ku darsan kartid sokor iyo caano. Sokorta iyo caanaha waxaa lagu fasiri kara erayga aqoonta iyo erayga xigmadda. Waxay erayga xigmadda noqoneysa haddii sida saxda ah loo istecmaalo, waa barako heer sare ah taasi oo laga helayo hogaamin mustaqbalka waxa lagaga helayo.

Hibada lagu kala garto Ruuxyada

Tani ma ahan hibo loogu talagalay in wax kasta lagaga hadlo ama shey kasta iyo qof kasta lagaga calaancalo waxa aan qofka lagu jaclayn. Waa hibo loogu tallo galay in lagaga shaqeyo dunida ruuxyada. Dunida ruuxyada way furan tahay oo waxaan ku aragna ama ku dareennaa muujinta mise eray ama dareenka qalbiyadeena aan kaga dareemi karno ruuxeena waxyaalaha ka dhacayaan dunida ruuxa. Waxaa jiraan saddex nooc oo ruuxyada u kala baxaan, 1. Ruuxa Ilaah iyo malaa'igahiisa, 2. Ruuxyada xukunka iyo ibliisyada, iyo 3. ruuxyada dadka.

Hibadan waxaa kaloo la imanaya xukumaad iyo garasho. Waa inaan awood u lahaano inaan kala saarno oo aan miisaano waxaan arkeyno. Waa inaan fiirino inay yihiin wax muhiim ah

dabadeetana aan tallaabo ka qaadno. Butros hibadan ayuu ku shaqeyey markuu daaha ka qaadayey laba wejiilanimadii Ananiyas iyo Safiira sida aan uga akhrineyno Faalimaha Rasuullada 5:1-11. Natiijaduna waxay ahayd inay kiniisadda oo dhan ka cabsato wax khiyaana ah, kiraahioyonimada, sirta, ruuxyada wasakhda ah, wax mataronimada iyo shuqul aduunka oo dhan.

Hibadan ma ahayn mid ka dhex shaqeyneysay Ciise, markuu arkay waxa ku jiray qalbiga Nadani'eel uu yidhi, *Bal eeg, kanu waa mid reer Israa'iil oo run ah oo aan khiyaano lahayn* (Yooxanaa 1:47), markasuu hadalkaas maanka farisiinta geliyeyna iyagoo ka sii hadlayaan erayadiisa iyo ficiladiisa (Markos 2:6-8).

Hibada ruuxyada lagu kala garto, banaanka ayaa la soo wada dhigi doonaa wax kastoo shar ku saleysan iyo wax kastoo kheyr ku saleysanba. Waxyaalaha ibliiska waa la caddeyn doonaa, qorshooyinka sheeddaankana waa la burburin doonaa waxaana la arki doonaa jiritaanka Ilaah oo wada taabanayo rag iyo dumarba meel kastoo ay joogaanba.

Xagga Axdiga Hore tusalooyinka midkood oo kusaleysan ficilgalka hibadan waxaan ka heli karna Boqorada 2aad 6:14-17. Addoonka Elisha aad buu u cabsi qabay maxaa yeelay magaala ay ku jireen col ayaa soo galay oo waxaa qabsaday cadawga. Inta uu Elisha duceysanayey indhaha addoonkiisa ayaa furmeen, taasi oo ku deeqday inuu arko malaa'igaha Rabbiga oo dhammaantood diyaar u ah inay caawiyaan. Wuxuu araggiisa ka dhex dusay dunida ruuxa, wuxuuna arkay malaa'igaha oo ku hawl jiraan xoojinta iyo hogaaminta!

Hibooyinka muujinta masuuliyad weyn ayey ka leeyihiin kiniisadda madaama ay si xoog leh dadka ugu soo degayan oo u qalabeynayan sida ciidan aan caadi ahayn si ay sheeddaanka meel alla meeshuu isku deyo inuu madaxiisa ka soo taago.

41

Jacayl, Midnimo iyo Qiimeyn

Erayadu aad bay u xoog badan yihiin. Markay ka yimadaan xagga Ilaah, waxay wataan noolol iyo xoog, laakiin markay yihiin kuwa ka yimid xagga sheeddaanka, waxay wataan dhimasho. Isla halka eray ayaa dhawr shay macna uga ahaan karaan qofka, laakiin macna kale ayey u lahaan karaan qofka kale.

Erayada waxaa ku lifaaqan dareen. Ma ahan oo keliya inay dhabta ku jirta ee waxaa kaloo ku jiraan dareemo. Waaya aragnimadeena ayaa wax yeeli karta fasiraadda aan ku fasireyno erayada. Inta badan annagoo og ma fasirno erayada, laakiin durbaba waxaan u qaadaneyna si xun ama si wanaagsan waxyaalaha aan maqalno. Sababtaas awgeed haddaba waa muhiim inaan Ruuxa Quduuska ah hogaankeena ka dhigano si uu noo tuso runta oo nooga xoreyo yasidda aan ka qabi karno Erayada xambaarsan doonista Rabbiga.

Tusaala ahaan waxaad imtaxaantaa erayadan; jacayl, midnimo iyo miisaamid. Saddexdooduba waa isku wada dhawaaq oo waxay nagu wada abuurayaan dareen wanaagsan. Way u wanaagsan yihiin qof waliba, ma ahan xerta Ciise oo keliya oo ma jiro qof rabi lahaa in lagu eedeyo inuu noloshiisa ka la'yahay saddexdan midkood. Runtii, erayadan oo dhan waxaa jiraan saddex shey oo ay ka tilmaamayaan Erayga Ilaah.

Su'aashu waxay tahay, maxaan ula jeedna markaan erayadan istecmaleyno? Hadduu qof macna kale ula jeedo oo ka duwan wuxuu hordhaantii Ilaah ugu tallo galay, waxay noqonayaan koor laysku xidhay bedelkii ay ahaan lahayeen runta jirta ee ay ragga iyo dumarka ku xoroobayaan. Ilaah mar kastaba dadka heerar sare ayuu u qadaa. Wuu barbaariya iyaga oo wuu samato bixiya. Wuxuu dib u soo nooleynaya baniaadminimadooda iyo sharaftooda oo wuxuu iyaga u muujinaya

inay Isaga hortiisa ku yihiin kuwa aad u qiima badan. Wuxuu iyaga siinaya masuuliyad iyo shaqo wuxuuna ku sii caawinaya inay awoodaan aasaasidda barnaamijyada hawlaha Eebbe loogu adeegayo. Wuu awoodsinaya iyaga si ay u ahadaan kuwa uu hawlihiisa ku fushan doono – wuxuuna waxyaalahaas ku sameynaya Ciise Masiix.
Wax barid kasta oo natiijadeeda ay ahayn xornimada ay dadka ka xuroobayaan addoonsiga sheeddaanka ama ku cadaadineyso, way lahaan karaan isla *erayo* waxayna ahaan karan kuwa sax ah, laakiin micnahooda guud waa la qaloociyey. Erayada noocaas loo qaloociyey ma ahan kuwa ragga iyo dumarka ka xoreynayaan addoonsiga sheeddaanka, maxaa yeelay kuma dhaqmayaan runta.

Jacaylka Ilaah
Bal aan si taxadir leh u eegno erayga *jacayl. Laakiinse Masiixu waa inoo dhintay intaynu weli dembilayaal ahayn, oo sidaasuu Ilaah jacaylkiisii inoogu muujiyey* (Rooma 5:8). Yooxanaha 1aad 4:8 waxay dhigeysa in *Ilaah uu jacayl yahay.* Ilaah ma ahan oo keliya inuu jacayl qabo, oo jacayl ayuu noogu muujiyey waxyaalaha kheryka ah uu noo sameyey ee laakiin Isagu *waa* jacayl. Jiritaankiisaaba ah jacayl. Wuxuu ku hadlayo iyo wuxuu sameynayo oo dhan waa jacayl.
Ciise wuxuu nagu hogaaminaya Aabbaha. Waxyaalaha oo dhan uu Ciise ku hadlayo iyo waxyaalaha oo dhan uu Ciise sameynayo dhammaan wuxuu ku wada sameynaya jacyal iyo ficilgal. Wax alla wuxuu sameynayo waxaa ololinaya *jacayl.* Tan waa arin aad u muhimsan. Haddii aad rabto inaad ogaatid waxa jacaylka dhabta ah uu yahay, xaqiiqdaas kama heleysid aqoontaada baniaadmiyeed. Waa inaad qoraalka ka eegtid wuxuu Ciise ku hadlay uuna sameyey. Waxaan ku waajiban nahay inaan Ilaah jeclaano oo aan dhexdeenana is jeclaano. Ciise wuxuu Yooxanaa 14:21 nagu leeyahay in kan Isaga jacayl uu yahay kan haysta oo addeecayo amaradiisa. Waa uun markaan jacayl dhab ah Ciise ku jacayl nahay marka aan dhexdeena is jeclaan karno. Erayada “Ciise jeclaashada” waa maxay micnahooda? Waa garashada ammaradiisa iyo addeecista amaradaas la addeecayo. Jacaylka Ilaah loo qabo waxay ku lifaaqantahay Eraygiisa. Ma odhan kari waxaan jeclahay Ilaah amaba dadka kale haddii aanan haysanin Erayga Ilaah uusanna ii ahayn kan aan ka amar qaadanayo oo nolosheyda kaga noolahay.
Aad bay mamnuuc u tahay in la ogolaado dembiyada – galmada xaraanta ah sida gogol dhaafka, khiyaanada, “beenta cad” iwm – sida markii lagu saleysinayo “deeq bixin.”Waa jacayl darro in magaca jacaylka la istecmaalo oo sida wax loo sameyn lahaa si ka duwan loo sameyo, taasi waa ku dhaqashada waxyaalaha uu Ilaah ku tilmaamay inay yihiin jacayl darro, si kastoo uu qofka erayga u istecmaalaba. Jacaylka wuxuu ku lifaaqan yahay runta, waana runta oo keliya tan xoreyneysa dumar iyo ragba.
Korintooska 1aad 13:2 waxaa ku qoran, *Oo haddaan leeyahay hadiyadda wax sii sheegidda, oo aan garanayo waxyaalaha qarsoon oo dhan iyo aqoonta oo dhan, iyo haddaan leeyahay rumaysadka oo dhan oo aan buuraha ku dhaqaajiyo, laakiinse aanan jacayl lahayn, waxba ma ihi.* Galatiya 5:6 waxay noo sheegeysa in rumaysadku isku soo bandhigo jacaylka. Macnaha rumaysadku ma shaqeynayo jacayl la’aan. Rumaysadku waa fahan iyo xaqiiq wax loo leeyahay. Wuxuu maqla kuna dhaqma wuxuu Ilaah faro. Rumaysadku ma weydiyo waxa ay dadka ka qabaan fikiradda. Rumaysadka wuxuu kala tashta oo keliya Ilaah.
Waan ogaan kara waxa saxda ah waanna ogaan kara waxa uu Ilaah ku hadlay laakiin taasi igama dhigeyso mid xaq u leh inaan dadka ku jeesjeeso oo kaga kibro waxyaalaha aan xaqiiqda u hayo kuna dodo. Waxaa dheraad ku sii ah, fahanka ma ahan mid codkeyga oo aan sare u qaaday ku fidinayo. Waa xaqiiqda aan leeyahay ee aan ku hubsanayo inuu Ilaah hadlay, taasi oo awood igu siineyso inaan mucaaradnimo kasta geesinimo uga hor tago anigoo aan ka cabsi qabin inaan

qaldami doono. Uma baahni inaan aqoonteyda baniaadmi ku fuliyo qorshooyin iyo fikirado, ama inaan si joogta ah oo aan ligligasho lahayn isku difaaco. Waa inaan haddana tixgelino oo arinta badana la ilawbo oo ah in jacaylka iyo runta isku lifaaqan yihiin. Meelaha runta laga cadaadiyey ee aan xaqeeda la marinin, waxaa ka soo dhashaan fikirado aan hagaagsaneyn. Ruuxa Ilaah laakiin, si kastoo loo eegaba, weligeed ma tixgeliso fikiradaha dadka, waa uun Eraygiisa kan waarayo. Ee haddaba dad badan ayaa jira oo qalbigoodu deganayn oo waxyaalaha ay ku doodayan sal ma lahan. Bedelkeeda waxay go'aansadeen inay dadka u bandhigaan fikiradahooda iyagoo habka ay ku khiyaaseen ee iyaga la quman ku gudbinayan, laakiin si kastaba ha ahaato ee waxay fikiraddaas ka buuxiyeen waxyaala badan oo runta ka soo horjeedaan.
Tani waxaa loo qaatay naxariisnimo iyo jacayl laakiin, dhab ahaantii, ma ahan wax jacayl ku dhisan. Marka uu qof erayga Wunta ah dhexdooda ka sheego, oo markuu sidaa yeelayo, wuxuu khalkhal geliyey beentooda ay ku dhaqmayaan, qofka dhageysanayana wuu jawaab celinaya, isagoo qofka runta sheegayo ku eedeynayo inuu yahay mid is mahadinayo oo iska indha tirayo dhabta. Dhabtii waxay ahayd dhiirogal. Jacaylka dhabta ah wuxuu wax ka shegaya labada dhinac ee arinta – dhinaca xumaanta iyo dhinaca wanaagga runta – wuxuu ibliiska sameyey iyo wuxuu Ilaah sameyey ku saabsan runta – dhibaatada iyo xalkeeda. Rumaysadka wuxuu awood ku leeyahay inuu muujiyo waxyaalaha kheyrka ah oo wuxuu xoogga saaraya xalka.
Dhakhtar kasta marka ugu horeyso wuxuu sameynaya baaritaan intuusan daawada la qaadan lahaa sheegin. Daa'uud wuxuu ahaa tusaalooyinka tan ugu wanaagsan ee tan lagu soo qaban karo. Walaalkiis isaga ka weyn wuxuu isaga ku eedeyey inuu ahaa mid maankiisa ay wax ka dhiman yihiin maxaa yeelay, wuxuu go'aansaday inuu la dagaali doono Goliyad. Daa'uud kuma jawaabin xanaaq, wuu ku sii socday erayga uu helay ilaa laga hor keenay Boqor Sa'uul. Sa'uul wuxuu ahaa mid uu qalbigiisa ka buuxay rumaysad darro iyo cabsi xad dhaafsan. Markuu Daa'uud arkay, wax kama sheegin boqorka amaba kama noqonin wuxuu ku tallo jiray. Rumaysad uu jacayl xoojinayo ayaa ka hadleen afkiisa. Wuxuu yidhi, *Ninna yuusan u cabsan isaga aawadiis; anoo addoonkaaga ah ayaan u tegi doonaa oo la diriri doonaa midkan reer Falastiin* (1 Samu'eel 17:32).

Midnimada Xerta –
Waxay Markhaatifur u tahay Dunida

Erayga xiga oo aan si qoto dheer u eegeyno waa istecmaalka *midnimada.* Ciise wuxuu ku duceystay Yooxanaa 17:22-23, *Oo ammaantaad I siisay iyagaan siiyey, inay mid ahaadaan sidaynu mid u nahay. Iyagaan ku jiraa, adna anigaad igu jirtaa, inay mid ku dhan yihiin, in dunidu garato inaad I soo dirtay, iyo inaad iyaga u jeclaatay, isdaad ii jeclaatay.*
Ciise wuxuu ducadan ku duceystay rumaysad, isla sida dabiicaddiisa ahayd, oo sida caadada ahba Ilaah wuu ka jawaabi doonaa ducadiisa. Ciise naftiisa wuxuu yidhi, *Oo wax kasta oo aad tukasho ku baridaan idinkoo rumaysan waad heli doontaan* (Matayos 21:22). Waa niyad dhis aad u wanaagsan! Haba ahaato ee, waxaa tan ka soo baxaysa su'aasha ah: *Waa maxay* midnimadan uu Ciise ka hadlayo oo weliba *sidee baa* ficilgal looga dhigi kara? Waxaa jirta oo keliya hal jawaab: Waxay dhab ku ahaan karta oo keliya awoodda Ruuxa Quduuska ah.
Midda ugu horeysa waxay tahay in qof kasta oo xerta ka mid ah ay wada qabaan midnimada Ruuxa Quduuska ah. Midnimadan waa tan ruuxa, ee ma ahan tan nafsadda. Rooma 12:2 waxay dhigeysa, *Ha u ekaanina dadka ifkan, laakiinse ku beddelma cusboonaanta maankiinna inaad hubsataan waxa ay tahay doonista Ilaah oo wanaagsan oo isagau ku farxo oo kaamilka ah.*
Marba haddii maankeena iyo fikiradaheena ay yihiin in la cusbooneysinayo, waa lagama maarmaan inaan kala fikirado ahaan, kala aragti iyo iwm. Saa ay tahayna haddii aan mar labaad dhalano, waxaan daremeyna midnimadeena ruuxa, ujeedada Ilaahna waa inay midnimadu ahaato

tan rumaysadka iyo aqoonta aan u leenahay Wiilka Ilaah sida ku dhigan Efesos 4:13). Midnimadan waa midda aan ku barbaareyno, laakiin waa inaan fahanno inay tahay mid ku imaneyso tallaabo tallaabo. Waxaa lagu ficilgelinaya Erayga Ilaah iyo aqoonta muujinta taasi oo nafsadda ka nadiifineyso waxyaalaha adduunka iyo damaca jidhka iyo fikiradaha qaldan. Dabadeetana waxaan bilabeyna inaan ku fikirno oo ku dhaqanno waxyaalaha Ilaah. Tallaabooyinkan, tallaabooyinka quduusnimada, wakhti ayey qaadaneysa.
Inta aad nooshahay waad uun arki doontaa xerta oo aan arimo ku heshiin doonin. Waana sababta uu Bawlos noogu qalbi qaboojinayo erayadan, *idinkoo leh is-hoosaysiin iyo qalbiqaboobaan oo dhan iyo samir, oo midkiinba midka kale jacayl ugu dulqaadanayo. Ku dadaala inaad miownimada xagga Ruuxa ku xajisaan xidhiidhka nabadda* (Efesos 4:2,3). Hadduu qalbigaaga sax yahay, hadduu damiirkaaga sharaf leeyahay, jaclaw oo u adeeg Ciise; haddii aad Isaga raacdid oo aad doondoontid Boqortooyada Ilaah marka ugu horeyso, way idiin sahlanaaneysa inaad xagga ruuxa ka midowdaan iyo weliba aad lahataan nabad waarta. Sidaa ay tahayna, haddii aad damiir dembi leh qabtid oo aad u riyaqeysid uu inaad madax ahaatid; haddii aad rabtid inaad danahaada daba joogtid oo aad dadbka gacan maroojisid, way kugu adkaan doontaa. Haddii ay cabsi iyo cadaadin ku hogaaminayaan bedelkii rumaysad iyo jacayl, way kugu adkaan doontaa. Haddii Ciise iyo Erayadiisa aan la siineynin fursadda ugu horeyso, way kugu adkaaneysa inaad nabad ku wada nolataan.
Dadka nabad waad ku wada nolaan karta adigoo aan fahansaneyn waxa ay aaminsan yihiin. Waa inaad baratid sida aad u kala saari lahayd dhibatooyinka iyo qofka oo waa inaad xidhiidh wanaagsan la leedahay qof, adigoo aan xataa fikiraddiisa ku raacsanayn. Arinta aan halkan ka soo jeedineyno ayaa waxay tahay xarbiga ma ahan mid lagula xarbinayo jidhka iyo dhiigga ee laakiin waa mid lagula jiro madaxda ruuxyada iyo amarada (Efesos 6:12).
Waa inaadan weligaa qofna waxba uurka ugu haynin, xataa haddii ay kuu muujiyaan inay cadawtinimo kuu qabaan. Haddii aad qof cuqdad u qaaddid oo aad isku deydid inaad ka aar gudatid, ducooyinkaaga lagama jawaabi doono. Ciise wuxuu Markos 11:25 ku yidhi, *Oo kolkaad tukasho u taagan tihiin, **cafiya haddii aad dad wax ku ledihiin**, **si** Aabihiinna jannada ku jiraa xumaantiinna idiin cafiyo.*

Haddii aad aragtid dad Masiixiyiin ah oo leh fikrad taada ka duwan oo aan arkin runta ku jirta Ereyga Ilaah taas oo adiga aad qiiymo kuugu leh oo aad jeceshahay, weli iyaga waxaad la yeelan kartaa wehelnimo, Fiiri waxyaalaha aad adiga aaminsantahay oo isku day inaad ka hadashid. Dhiiga iyo iskutallaabta Masiixa ayaa midaynaya kuwa mar labaad dhashay. Ka hadal arinkaa! Ka hadal waxa Ilaah sameeyey iyo waxa uu sameynayo maanta. Waxaad xooga saartaa waxa Ilaah yidhi oo ku qoran Eraygiisa, intii laga hadli lahaa wax dadka kala qaybiya. Ma ahan inaad ka tagtid waxa aad aaminsan tahay, laakiin waad u baahan tahay inaad ogaato halka uu qofka kale taagan yahay.Waa shey aad looga xumaado in ereyga midnimo loo isticmaalo sida sawir meel yaala, hawo badni iyo gumeysi markaasaa wax isu keentaa ama isku haysaa intii ay wax xor ka dhigi lahayd, Waxaa taa ka dambeeya, aalaa waxaa jira qof doonaya in lala socodsiiyo wax waliba oo dhacaya isaga oo ku soo gabanaya (caawin) iyada oo ujeedada dhabta ah tahay gumeysi.

Xagga kitaabka Matayos 2:1_8. Herudos isla markiiba waxa uu noqday qof diimeed oo waxa uu ka qayb qaatay cashar Baybalka ah isaga iyo shaqaalihiisii wax qoraaga ahaa iyo la taliyaashiisii. Waxa uu maqlay cunuga cusub ee dhashay, oo aayada 3aad waxay leedahay wuu isku naxay. Cabsi, isaga oo ay ka buuxdo cabsi ka timid jacaylka uu u qabo inuu awooda sii haysto, oo waxa uu si aad ah isugu mashquuliyey warkan isaga ah in la hubiyo. Wuxuu ku amray nimankii

caaqilada ahaa, “*Kolkaasuu Beytlaxam cid u diray oo ku yidhi, Taga oo ilmaha aad u doondoona, oo goortaad heshaan i soo ogeysiiya si aan anna ugu tago oo u caabudo.”* (Matayos 2:8) Herodos wuu iska yeel yeelayey. Waxa uu ka hadlay inuu sharfayo Ciise laakiin xaqiiqdii jirtay waa inuu qorshaynayey dilida cunugan, wuuna dili lahaa midkan la subkay si subkinta loo joojiyo.

Isla markii uu Ilaah wax sameeyaba, isla markaasi uu abuuro cunug, ficilkaas waxa uu sababayaa in waxyaalo xun soo baxaan_Qof ayaa isku dayaya inuu hor istaago oo uu xiro ama joojiyo qulqulka subkida qoduuska ah.
Midnimadu kuma timaado in midba midka kale ka daba shaqeeyo. Midnimada waxaa lagu helaa marka uu qofka aqoonsado subkida iyo doorashada nolosha kuwa kale, oo uuna u ogolaado inay sameeyaan wixii Ilaah ugu yeedhay inay sameeyaan, xitaa haddii aanay si buuxda u fahmaynin. Ilaah waxa uu inooga digayaa inaynu ka qayb qaadan ‘midnimo’ aan ku salaysnayn Ereyga. ‘Midnimada’ noocaas oo kale ah waxa uun ay kugu hogaaminaysaa xabsi iyo adoonsi_adoonsigaasi oo ka hor imaanaya shuqul kasta oo iimaan leh, iyo doonista Ilaah ee ku aadan aduunka si uu u xoreeyo ragg iyo dumarba.

Inkasta oo ay Masiixiyiintu ka midaysan yihiin xagga ruuxa, micnaheedu ma ahan inay khasab tahay inay wada shaqeeyaan. Ruuxa ayaa wada xiriirinaya hawlaha rumeystayaasha iyo ujeedooyinkooda, badbaadinta iyo xoreynta nafsiyada, dhisida kaniisad awood leh iyo isu diyaarinta soo laabashada Masiixa. Hababka loo shaqaynayo iyo doorashada way kala duwanaan kartaa. Sidaa daraadeed, intaad hoos wax u jiidi lahayd ama aad sixi lahayd waxa ay kuwa kale sameeyeen, awooda saar farxada, oo xil iska saar qaybta kaaga aadan doonista! Mid walba oo inaga mid ah wuxuu leeyahay qayb uu ka ciyaaro dhismaha.

Qoduusnimo Isla dhan

Ereyga ugu dambeeya ee ay tahay in loo fiirsado waa *Isla dhan*. Waxay u muuqataa mid wanaagsan oo muhiim ah, laakiin waa nooc sidee ah oo Isla dhanaan ee aynu ka hadlayno? Marka aduunku ka hadlayo wax ku saabsan isla dhanaanta, waxay rumeystayaasha u sheegaan waxyaalo lala fajaco. Isla dhanaantu ma waxaa weeye iyada oo ay meesha ka maqan tahay bodboodid, dheel iyo cod dheer? Maya. Isla dhanaan dhab ah, waa isla sida uu Ilaah u sharaxay iyada. Adiga waxay u dhigantaa qayb ka mid ah wacdigii buurta oo ay ka buuxdo “Caqliyeyn” taas oo loola jeedo, aduunnyo iyo rumeysi la’aan.
Waa wax laga naxo in la arko Masiixiyiin fara badan oo ku sii qulqulaya inay ka waraabaan war aan biyo ceshan karin iyaga oo inkiraya isha biyaha nool. (Yeremyaah 2:13) _Rabbiga iyo Waxyiyadiisa. Marka fikirka banii_aadanka iyo kan aduunka ay bilaabaan inay maskaxda ka qabsadaan rumeystayaasha, waxay aalaa u qayshadaan Isla dhanaan iyo inay wacyigelin ku sameeyaan kuwa kale. Laakiin isla sinaantaa ma ahan mid Ilaah ka timid. Waxay ka timid Sheydaan kaas oo ka cabsi qaba in kacdoon dhasho.
Isla sinaanta ugu fiican ee mid sameyn karo waa isaga oo foolka dhulka dhigta oo ka ooya xaalada ruuxeed ee banii_aadanka, haddii ay waxaasi yihiin waxa uu Ilaah dadka ugu yeedhayo. Isla sinaantu waa iyadoo lala socdo Ilaah. Isla sinaanta nadiifta ahna waa iyadoo lagu jiro Ilaah, Isaga hogaan kuu noqdo iyo in Isagu noqdo midka kaa guuxiya. Isla dhanaanta dhabta ah wax shuqul ah kuma laha aduunkan.
Ilaah wuxuu raadinayaa maanta ragg iyo dumar doonaya inay noloshooda ugu dhiibtaan Isaga waaqdhac buuxa (Rooma 12:1) si dabkiisa uu u cuno. Kadib, isla markaasi ay kor ugu baxayaan sida holac, iyagoo huraya oo u dheelaya Isaga, waxay soo shaac bixinayaan isla sinaanta aan iinta lahayn ee laga dhex helo Rabbiga.

Isla sinaanta runta ah waa iyadoo lagu wacdiyo xigmada Ilaah oo dhan; wax waliba ee uu balan qaaday, ma ahan in qayb uun la doorto. Isla sinaantu micnaheedu waxa weeye in Ilaah loo ogolaado inuu dhameeyo xukunka intii mar waliba faragelin lagu sameyn lahaa ama la sameyn lahaa ka hor imaad. In la sinaado waa iyadoo si buuxda loo arko sababta uu Ciise adunnka u yimid.
Luukos 4:18 (Iyadoo eray eray loo eegayo Giriig ahaan) sharaxaad ka bixi sababta uu Ciise u yimid: “Ruuxii Rabbiga ayaa i dul jooga, Waayo, wuxuu ii subkay

1. inaan war wanaagsan masaakiinta ku wacdiyo,
2. inaan bogsiiyo kuwa qalbi jabsan
3. Wuxuuna ii soo diray inaan kuwa xidhan furriinnimada ogeysiiyo
4. Iyo kuwa indhaha la' soo celinta araggooda
5. Iyo inaan kuwa nabaraysan soo furfuro,
6. Iyo inaan dadka ogeysiiyo sannadda qaabbilaadda ah ee Rabbiga.”

Sababta uu u yimid Ciise ayaa waxay tahay inuu badbaadiyo, bogsiiyo oo xoreeyo ruuxyada cadaadiska ku jira. Injiilka ayaa haya jawaabta nolosha! Sidaa daraadeed, isla ekaanta dhabta ah waa iyadoo la wacdiyo wax waliba ee uu Ilaah u hayo qof kasta!

42
Hodantinimo iyo Koritaan

Hodantinimo
Waxa kale oo uu yidhi, “Wuxuuna yidhi, Sidaa weeye boqortooyadii Ilaah, sida nin abuur dhulka ku daadsha. Isagu waa hurdaa, waana kacaa maalin iyo habeenba, oo abuurku waa baxaa oo weynaadaa, laakiin si ay tahay isagu garan maayo. Dhulka keligiis ayaa midhaha bixiya, horta jirridda, dabadeed sabuulka, dabadeedna sabuulka midho ka buuxsama. Laakiin goortii midhuhu soo bislaadaan, kolkiiba ayuu mindi la galaa, waayo, wakhtigii beergooyska ayaa yimid.” (Markos 4:26_29)
Ciise waxa uu is barbardhigayaa Boqortooyada Ilaah iyo beer. Waxaynu kitaabka Markos 4:14 ku aragnay, in ninka beerayga ah uu beerayo Ereyga. Ereyga waxa uu leeyahay dabeecad Qoduusnimo. Noolol iyo ruux, awood iyo barako ayaa laga dhex helayaa. Hubaal waxa kale oo aynu garanaynaa in mirtu aanay faa’iido lahayn haddii aan la abuurin. Isla sidaas oo kale, Ereyga Ilaah waxa uu miro dhalaa oo qura marka lagu beero qalbiga, laakiin mar haddii la beero, waxaa bilaabmaya in noloshiisu kobacdo oo ay korto, oo wakhti dabadeed waxaa la helayaa sabuulkii oo midho ka buuxsameen. (Aayada 28aad)
Waxa la beero way koraan, waxay noqdaan wax muuqda_xitaa haddii ay qaadato wakhti. Marka beeraygu wax beero, oo habeeno iyo maalmo laga joogo, mirihii way soo baxaan, isaga oo aan garanaynin sababta taa keentay (aayada 27aad). Isagu ma garanayo sida beergoyska ku imanayo, waxa keliya oo uu garanayaa inay imaanayso wakhti dabadeed. Alla masaalkan muxuu dhiirogelin inoo yahay! Xitaa haddii aadan arkin natiijadii aad sugaysay, oo Ereyga Ilaah hubaal ayuu leeyahay, haddaba xaji! Ma jiro beeray soo dul meeraya beer uu beeray shalay, isagoo rajeynaya inuu arko midhihii oo bislaaday! Wakhti ayey qaadanaysaa, laakiin beergoysku wuu iman.
Isla sidan ayuu run u yahay Ereyga Ilaah xagga noloshaada. *Ilaah runlow ha ahaado in kastoo nin waluba beenlow yahay,* (Rooma 3:4). Waxaad sii wadaa inaad rumeysnaato in Ilaah yahay midka uu sheeganayo oo uu sameeyo waxa uu yiraahdo waan sameynayaa, xitaa maalmaha

marka aad soo sahminaysid dhulka oo aadan waxba ku arakaynin. Ha iska moodaan maalmo iyo habeeno. *Dhulka keligiis ayaa midhaha bixiya, horta jirridda, dabadeed sabuulka, dabadeedna sabuulka midho ka buuxsama.* (Markos 4:28). Tani waa balan. Dulku wuxuu soo bixin doonaa midho. Noloshaadu waxay lahaan doontaa natiijo, oo maalinta uu qamadigu kor u soo kici doono waxay noqon doontaa maalin cid waliba la barakadeyn doono.

Ilaah waxa uu xiiseynayaa in Ereygiisa uu taajiriyo nolosheena. Ereygiisa wuu taajiriyaa maadaama la siiyey xoriyad uu ku guto wixii loo soo diray inuu sameeyo. Kadib, balamaha Ilaah waxa ay ka dul muuqanayaan nolosheena.

Ciise waxa uu ku leeyahay kitaabka Yooxanaa 15:8, *Waxaa Aabbahay ku ammaanmaa inaad midho badan dhashaan, waxaadna noqon doontaan xertayda.* Sida uu Ciise qabo, markaynu midho saa'id ah bixino, amaan badan ayeynu u keenaynaa aabaha. "Midho" micnaheedu waa beer goys, natiijo, guul, baasid, duco laga jawaabay, calaamado iyo mucjisooyin. Midan weeye mida uu Ilaah doonayo inuu ka arko nolosheena_beer goys ku saabsan Ereyga uu inagu dhex abuuray. Isla sida uu wakhti u tago marka beertu u muuqato ma dhaleys, oo ay jirin wax cagaar ah oo soo baxay, ay jirin calaamad muujinaysa qamadigii ama badar taagan, isla sidaas oo kale waxaa jira wakhti markaas oo beer goyskii si fiican u bislaaday. Tani waxay run ku tahay noloshaada khaas ahaan, iyo Boqortooyada Ilaah guud ahaan. Waxaynu arki doonaa wakhti aad u weyn oo beer goys ah markaas oo kuwa badan la badbaadin doono, wacdiyayaal cusub ayaa soo kici doona, kaniisado cusub ayaa dhismi doona oo aynu ku kori doono Rabbiga iyo awoodiisa. Wadankaaga waxaa si joogta ah lugu ugu lahaan doona awooda Ilaah!

Koritaan

Marka Rabbigu sameeyo wax cusub, waa sida cunug yar oo dhashay. Canugu waa wax cajiib leh, oo ay qurux badan tahay in la arko oo isaga ama iyada waxay farxad weyn u keentaa waalidka. Hase ahaatee, haddii koritaanka canugu xumaado sanadba sanadka ka dambeeya, dhib ayaa jira markaa. Waxay tahay inuu koro oo qan_gaaro.

Canuga yar lama siiyo mas'uuliyad badan, waxaa la siiyaa wakhti badan oo uu ku ciyaaro. Hasa yeeshee, isla markaasi uu sii korayo, waa inuu mas'uuliyad dhabarka saartaa oo uu is edbiyaa. Marka canugu murmayo, ooyayo oo uu ku dagaalamayo sanduuqa ciida, qofku wuu iska fududaysan karaa. Laakiin intuu koro hadduu weli sii wado inuu ku ciyaaro ciida, wax ayaa si ka ah. Waxa keliya ee Ilaah doonayo inuu nolosheena ku sameeyo ama nala sameeyo, waxay salka ku haysaa fikrada ah waynu koraynaa ilaa qan gaar.

Maadaama aynu mar waliba ahaanayno carruurta Ilaah, Baybalka, Yooxanaha Koowaad 2:14, waxay sharaxaad ka bixinaysaa saddex marxaladood oo ku aadan koritaanka, 1) ilmo yar 2) qan gaar 3) qof weyn. Ilaah inagama filayo inaynu ku sugnaano uun nolosheena oo dhan marxalad ah inay xagga ruuxa carruur ama ilmo ka ahaano. Waxa uu inaga filayaa inaynu qan gaarno oo aynu noqono dad waa weyn oo masuul ah.

Ereyga Ilaah wuxuu kaa korin doonaa xagga Ruuxa, inaan maqalno oo keliya ma ahan, laakiin inaad sameysid waxa Ilaah kuu sheegayo. Mararka qaar waynu is qiyaanaa inagoo ku fikirna oo is niraahna meel dheer ayaan gaaray markaynu tagno kulan wanaagsan ama aynu cajal ka dhagaysano waxbarid cajiib leh. Dhabtii, labadaba waynu u baahanahay, laakiin naguma filna iyaga. Waa inaynu erayga ku camal falnaa oona dhagaysanaa, markaas ayeynu barakadoobeynaa (Yacquub 1:22_25).

Waxaynu ku camal falaynaa Ereyga inagoo meel fog iska dhigaya dabeecadaha jirka. Marka aad tahay Masiixi cusub, waxaa jira waxyaalo badan oo uusan Ilaah u fiirsan ama eegin, sababtuna waxaa weeye weli waxaa tahay ilmo.

Waxaan dhinac isaga dhigeyna damaca jidhka oo waxaan ku ficiltameyna oo keliya hogaanka

Erayga Ilaah. Markaad masiixinimada ku cusubtahay, waxaa jiraan waxyaalo badan uu Ilaah kaa tixgelineynin, sababtoo ah wuxuu kuu arkaya inaad iimaanka carruur ku tahay. Laakiin inta aad sii barbaareysid ee aad u riyaqeysid inaad Rabbiga daacadnimo ugu adeegtid, isla sida aad marka hore ku dhaqmi jirtay kuma dhaqmeysid. Yacquub 1:26 waxay dhigeysa, *Haddii mid isu maleeyo inuu cibaado badan yahay* (mid Ilaah u adeego), *oo uusan afkiisa xakamayn, laakiin uu qalbigiisa khiyaaneeyo, kaas cibaadadiisu waa wax aan waxtar lahayn.* Macnaha haddii aad iisu maleysid mid awood badan oo Boqortooyada Ilaah qiima ka leh, oo qaba subkid heer sare ah, iyo weliba hawlgal sbeeshel ah oo aad Rabbiga ugu adegeysid, oo aad laakiin dadka xamaneysid, xumaati ka shegeysid, been ka shegeysid, diintada waa mid aan *waxtar lahayn*.
Dadka waxay inta badan arki karan ama ay xukumi karaan waxyaalaha kore laakiin Ilaah qalbiga ayuu gudaha ka eegaya, wuxuuna qalbiyada dadka ka dhex dedeyaya waxyaalaha doonistiisa ah, quduusnimadiisa ku saleysan oo weliba xaqnimo ku saleysan.
Ilaah wuxuu naga rabaa inaan aniga iyo adiga aanan ku nolaanin noolol damaca jidhka u hogaansan. Wuxuu naga doonaya inaan carabkeena u istecmaalno hab uu kheyr ku jiro oo aan isku xamanin. Wuxuu rabaa inaan Isaga ku hor tango daacanimo, waana inaan iska leexino wax alla wixii naga hor taagan ku barbaarista Ruuxa Quduuska ah. Dadka iyo weliba wadaaddada ku socon wayaan habkan toosan waxay ku dambeynayaan inay noloshooda sii baaba'do. Saa ay tahayna markaan wax kastoo aan sameyneyno aan Ilaah isugu dhiibno sida uu Eraygiisa nagu hogaaminayo, nolosheena iyo xoogeena way barbaarayaan oo way cusboonanayaan waxaanna heleyna farxad cusub iyo barbaaris.

Calaamooyinka Muucjisada ah iyo Yaababka

Ciise wuxuu ballan qaaday inuu Eraygiisa ku caddeyn doono muucjisooyin iyo calamooyin waxaana tan hogaaminaya sharciga abuurista iyo beer goyska. Muucjisooyinka kuma dul baxaan geedaha sida tufaaxa. Waa in uu Erayga horta ku dhex beermo qalbigeena iyo rumaysadkeena waa haddii la siiyo wakhti uu ku barbaaro, intaanan arkin markhaatifurka calamooyinka iyo yaababka oo si xoog leh u muuqan doonaan. Laakiin Ilaah baa mahad iska leh oo mirtaasi si joogta ah ayey u baxdaa!
Rumaysadka wuxuu la mid yahay uureysiga. Filashada ay dadka filanayaan in Ciise isku kay caddeyn doono in runtii uu yahay kan uu isku sheegayo inuu yahay waa heer sare ka badan sida ay waa hore ahaan jirtay. Diimaha aan wax tarka lahayn way baaba'ayaan, iyo weliba "Wax baridda inkiraadda Ilaah lagu inkirayo," way sii baaba'aysa oo wax awood ah ma leh. Hubka ugu weyn ibliiska istecmaalo waxaa ka mid ah, cabsi, kibir iyo rumaysad darro laakiin dhammaantood way ka baxsadeen gacantiisa. Inta lagu sii guuleysanayo dagaalka ruuxiyanka ah, guusha waxay ku muuqaneysa dhacdooyinka dhabta ah.
Waxaan arki doonnaa muucjisooyin badan, calamooyin, iyo dhacdooyin waweyn ka badan sida ay waagii hore ahaan jirtay. Ilaah aad buu ugu riyaaqsan yahay in dumarka iyo ragga xaqiiqsadaan in inuu noolyahay! Dunida oo dhan ayaa caadi ahaanba bukta, ruux ahaanna ama xagga xidhiidhka ay Ilaah kala leedahayna way ka bukta, xidhiidhka dadka lala leeyahay oo burburaya. Dhakhtarkeena Ciise ayaa jawaab haya, wuxuuna muucjiso ka sameyn doonaa waddankaaga si aad weligaa umaleynin. Calamooyinka iyo yaababka waa barakooyinka boqortooyada jannada taasi oo noogula yeedhay inaan xarbi ku qaadano. Macnaha waa inaan xarbina ee ma ahan inaan cidda iska fadhinno oo aan rajeyno inay wax kasta iska hagagaan annagoo aan ficiltamin. Tan macnaheedu waxay tahay inaan lahaano xarbi heer sare ah ee xagga dareenka aan leenahay, yaanan iska fadhinin uun. Waa inaan ahaano sida naagtii sanado badan dhiig bax ku noleyd waana inaan u riyaaqno ku dhowaashada Ciise iyo ka faa'ideysashada wuxuu no ohayo. Muucjisadaada waa hadda halkan. Haddaba tag oo qaado!

Midnimo

Waxyaala badan ayaa laga sheegay mawduuca midnimada, waxyaala wanaag ah iyo kuwa xunba. Qaar badan waxay isku dulqariyeen ooyinta ay qabaan sida "Ilaaliya midnimada rumaysadka" bedelkii ay ficil qaadi lahayeen oo ay tallaabooyinka Ilaah kula socon lahayeen. Qaar ayaa jira oo mawduuca midnimo si qaldan u istecmalaya kuwaasi oo dadka ku laasimayo inay is hooseysiyaan. Laakiin Ilaah aad buu u tix gelinaya midnimada dhabta ah

Awoodda kiniisaddii hore sida aan uga akhrineyno Faalimaha Rasuullada, waa mid ka timid Ruuxa Quduuska ah, iyo weliba midnimada lagaga istareexo kiniisadda. Yooxanaa 17, Ciise wuxuu u duceynaya midnimada xerta dhexdooda ah, oo intuusan soo noqoninna waxaa laga dhex caddeyn doonaa kuwa *qalbi daacad ah Rabbiga kaga yedheen* (2 Timoteyos 2:22). Midnimadan la'aanteed ayaa daahineysa ama ka hor taagan soo noqoshadiisa. Midnimo dhab ah ma ficilgelin karno, laakiin waan ku duceysan karna si midnimadaasi loo helo, waxaanna xaqiijineyna inaan midnimada kaga nolano nolosheena caadiga ah iyo marxalad kastoo aan ku jirno.

Waxaan dareensannahay midnimada xidhiidhka dhabta ee qalbiga ka soo askumatay. Kuwa hawlaha Ruuxa Rabbiga ugu adeegi jireen ee aan wada shaqeyn jirin ayaa maalmahan dambe iisu yimadaan oo waxay fahmeen midnimada dhabta ah waxa ay tahay. Way fahmeen wayna soo dhaweynayaan kuwa kale uu Rabbiga hawlahiisa u subkay, laakiin waayihii hore fiiro gaar ah ayey isku eegi jireen muuqaalka kore ayey isku xukumi jireen.

Hawlaha Ilaah looga adeegayo Rabbiga naftiisa ayaa dhammaan kuwa hawlahaas ku jiraan isku soo jiidaya si ay u wada shaqeyan oo ay ujeeddadooda u wada garaan. Markay sidaa noqoto, heerka subkinta way u kordheysa dhammaan kuwa midnimadaas dhabta ah ku midobeen. Marka buunto la dhisayo waa in horta tiirarka la istaajiyo. Marka tiirarka la tiiriyo, waxaa lagu kor dadbaya tiirar jiifa. Tiirarka dadban markii la saaro tiirarka la tiiriyey lama arki doono, in kastoo uu tiir kasta hawshiisa qabanayo. Waxaa dabadeetana isha lagu haynaya babuurada buuntadaas istecmalayaan. Ciise wuxuu buundo u noqday dooxada u dhexeysay samada iyo dhulka wuxuuna sidaa ku sameyey Injiilkiisa iyo awooddiisa.

Maalmaha ugu wanaagsan way dambeyan. Wax kastoo uu ibliiska kugu dhego hadlaba, haddaba xusuuso inaad ku hawl jirtid shey muhiim ah. Waxaad ka tirsan tahay jidhka Ciise. Adiga shaqsi ahaan waa lagu hawl geliyey. Waa laguu baahan yahay, hawlgalkaaga waa muhiim qiima ayaadna u leedahay Rabbiga iyo walaalaha kale. Haddaba ha ilawbin inaad ku jirtid hawsha ugu wanaagsan ee lagu hawloodo ee aan weligeed adduunka ka jirin; waana inaad ogaatid in hawlgalkani ay ku socoto orotan aan la mid ahayn midnaba waxyaalaha taarikhda ah.

Samada ayaa weerareysa dhulka oo Boqortooyada Ilaah waxaa lagu caddeyn doonaa quruun kasta oo qoraxda hoos joogta. Beer goys heer sare ah ayaa diyaargaroobaya, ee haddaba indhahaaga kor u tag oo ammaan Ilaahaaga!

1 Sare joogso, oo dhalaal, waayo, iftiinkaagii waa yimid, oo ammaantii Rabbiguna way soo baxday oo ku iftiimisay.2 Waayo, bal ogow, dhulka gudcur baa dabooli doona, oo dadyowgana mugdi dam ah ayaa qarin doona, laakiinse Rabbigaa soo bixi doona oo ku iftiimin doona, oo ammaantiisana korkaagaa lagu arki doonaa (Ishacyaah 60:1, 2).

43

Rumaysadka Kiniisadda Guusha leh ee Degaanka

Sababtuna waxaa weeyaan in haatan madaxda iyo kuwa amarka leh oo ku jira meelaha jannada, kiniisadda lagu ogeysiiyo xigmadda Ilaah oo badan oo kala cayncaynka ah (Efesos 3:10).

14 Waxaan rajaynayaa inaan dhowaan kuu imaado, laakiin waxaan waxyaalahan kuugu soo qorayaa, 15 in, haddii aan wax badan raago, aad ogaato sida waajibka ah oo loogu camal fali lahaa guriga Ilaah dhexdiisa, oo ah kiniisadda Ilaaha nool iyo tiirka iyo aasaaska runtaa (1 Timoteyos 3:14,15).
Markuu Ilaah wax sameyn rabo, wuxuu ku hergelinaya Kiniisadda. Kiniisadda waa urur qaas ah; waa jidhka Ciise iyo weliba qalabka uu Ilaah ku gudbinayo awooddiisa iyo sharaftiisa dadka ugu muujinayo dunida.
Waxaa jiraan labo urur uu Ilaah u caleemo saaray inay difacaan oo ay jiritaanka dadka sugaan. Mid qaa qoyska kan kalena waa kiniisadda. Markuu Ilaah aasaasay, naagta wuxuu ka soo bixiyey dhinaca ninka, si uu midnimo waarta u wada geliyo oo xidhiidh weligiis ah u lahadaan. Isla sidaasna, Ilaah wuxuu Kiniisadda ka soo saaray nabarkii Ciise dhinac waran looga wareemay. Hubkaasi lagu wareemay Ciise wuxuu jidhkiisa ka keenay dhiig iyo biyo. Kiniisadda waxay ka soo askunmatay wadnaha Ciise. Tani waxay ahayd arin la yaab leh oo ku duugneyn qalbiga Aabbaha ilaa maalinta uu go'aansaday inuu muujiyo.

Kiniisadda waxay ka soo askunmatay Wadnaha Ciise

oo wuxuu ina ogeysiiyey qarsoodiga doonistiisa siduu ugu farxay oo Masiixa ugu fikiray 10 oo ugu talaggalay dhammaadka wakhtiga inuu Masiixa ku ururiyo wax kasta, waxa samooyinka ku jira iyo waxa dhulka joogaba (Efesos 1:9,10).
Muujinta Kiniisadda waxay ka soo askunmatay wadnaha Ilaah. Waxaa lagu dul dhisay samato bixinta-dhiigga-waxaana caddeyey Ruuxa Ilaah-biyaha ka soo qulquleen dhimashada waaqdhaca ahayd ee Ciise oo ku dhacday Iskutallaabta. Kiniisadda waxaa laga soo dhaliyey dhinaca Ciise si maalinta ugu dambeyso loola mideyo si ay hal jidh iyo isku hilib ula ahaato Isaga.
Sababtaas awgeed Kiniisadda si qaas ah ayey uga dhex muuqata taarikhda dunida! Xataa xerta waxay u ahayd arin sir ah ilaa markuu Ciise samada ka aaday, oo weliba in kastoo ay kiniisadda dhalatay maalinta Bentekostega, muuqaalkeeda dhabta ah iyo ujeeddadeeda waxaa la muujiyey wakhti dambe, taasi oo inta badan ku ahaatay Bawlos.
Waayihii hore Ilaah wuxuu hawlahiisa kula macaamiltamayey dadka Yuhuudda ah, laakiin maalinta Bentekostega arin cusub ayaa dhacday taasi uu Ilaah hawlahaasi ka qayb geliyey quruumaha oo dhan. Wakhtiyada dadka lagu xisaabi jiray inaysan ahayn kuwa Ilaah ayaa la gaaray. Xiligan waxaa kaloo loogu yeedhay Maalinta Ruuxa Ilaah, qarniga Kiniisadda, Qarniga nimcada iyo Axdi cusub! Wakhtigan ka hore sida ay ragga iyo dumarka u fahmeen xidhiidhka ay Ilaah la leeyihiin lama arkin. Ruuxa Quduuska ah wakhtigaas wixii ka dambeyey dadka oo dhan ayuu ku soo dul degayey ee ma ahan kuwa tiro yar – boqorada, wadaaddada iyo nebiyada dadka la doortay, Israa'iil. Cid kasta oo Magaca Ciise Masiix ku dhawaaqday wuu ku soo dul degay Ruuxa. *Ilaah wuxuu hadda u hawl gelaya dunida oo dhan. Saa ay tahayna, rag iyo dumarba waxay dhammaan heli karaan* ***qalbi cusub*** *oo mar labaad ayey dhalanayan.* Ruuxa Ilaah ee waayihii hore macbudkii Yersaleem ku ekaa, wuxuu bilaabay inuu ka dhex shaqeyo qalbiyada dhammaan kuwa ku dhawaqayaan Magaca Ciise inuu yahay Rabbigooda Kiniisadduna waxay ahaatay macbudka cusub.
Haddii aan si kale u sharaxno, Kiniisadda ayaa hadda ah meesha Axdiga Cusub ee Ilaah laga muujinayo, isla sida uu macbudka ka ahaa Axdigii Hore. Muuqaalkiisa, haba ahatee, si bayaan ah ayaa hadda loo arkaya ka badan sida uu Macbudka uga muuqan jira. Sharafta Axdiga Cusub ayaa ka awood weyn tan Axdiga Hore.
Waxaan Korintooska 2aad 3:7-11 ka akhrineyna, *7 Laakiin adeegidda dhimashada keentaa ee qorniin lagu xardhay dhagaxyo, hadday ammaan la ahaatay, si aan reer binu Israa'iil u karin*

inay Muuse wejigiisa aad u eegaan ammaanta wejigiisa aawadeed ee ah tan idlaanaysa,
8 sidaanay u ahayn adeegidda ruuxa inay la ahaan doonto ammaan?
9 Waayo, hadday adeegidda xukunka keentaa ammaan ahayd, adeegidda xaqnimada keentaa aad bay uga ammaan badan tahay. 10 Waayo, wixii ammaan lahaan jiray, ammaan kama lahayn wixii kan ku saabsan, ammaanta ka sarraysa aawadeed. 11 Waayo, haddii waxa idlaanayaa ammaan lahaan jiray, intee ka badan baa waxa hadhaa ammaan leeyahay.
Ilaah wuxuu hadda muujiyey hawlo uu marka hore ku talagalay inay qarsoodi ahaato, wuxuuna dunida ku sii dayey sharaf heer sare ah oo hadda ka hore aan la dareemin. Kiniisadda ayaanna sharaftani lagu hergeliyey. Maalinta Bentekostega, wacyoontii nebi Yo'eel uu yidhi maalmaha ugu dambeysta Ruuxa Ilaah waxaa lagu wada soo dejin doonaa dadka oo dhan, waa la hergeliyey - *Ilaah baa yidhi, Maalmaha ugu dambaysta waxyaalahanu waa noqon doonaan, Ruuxayga ayaan ku shubi doonaa dad oo dhan; Oo wiilashiinna iyo hablihiinnu wax bay sii sheegi doonaan, Raggiinna dhallinyarada ahuna wax bay arki doonaan, Odayaashiinnuna riyooyin bay ku riyoon doonaan* (Faalimaha Rasuullada 2:17). Ruuxa Ilaah waxaa lagu soo dul dejiyey dadka oo dhan. Wuxuu ku soo dul degay kuwa rumaysteen oo dhan, Kiniisadduna waxay noqotay qalabka, meesha ugu habboon joogitaanka Ilaah. Sharafta Ilaah waa jiritaanka muuqaalkiisa. Jacaylkiisa aan caadiga ahayn, aqoontiisa, xigmaddiisa iyo awooddiisa, jiritaankiisa waxaa laga dareemaya Kiniisadda maanta.
Kiniisaddu waa urur awood badan oo dunida jooga, waxayna dhib ku tahay ibliiska iyo hawlahiisa. Kiniisaddu ma ahan uun shaqsiyaal magaca Masixiixa ku midobeen. Waa urur si qaas ah loo subkay oo hawl gooni ah loo xilsaaray kuwaasi uu ibliiska ka argagaxayo. Hawlaha qaas ahaan uu ibliiska kiniisadda ku hayo waa weerarka, kala qaybinta, nugleynta waxtarka kiniisadda ay Ilaah ugu adegeyso. Hadduu ku guuleysto sharafta Ilaah way baabi'i doontaa, muuqaalka jiritaanka Ilaah way naga dheeraneysa, ibliiskuna wuu ku guuleysanaya hogaaminta dunida. Taasna waxaan ka arkeyna dagaalada lagu hayo Kiniisadda Ilaah maanta.

Nooca Guuleysiga Kiniisadda
waayo, hubka dagaalkayagu ma aha xagga jidhka, laakiin xoog bay leeyihiin Ilaah hortiisa in qalcado lagu dumiyo.
5 Waxaannu baabbi'innaa murannada, iyo wax kasta oo sarreeya oo aqoonta Ilaah iska sarraysiiya, oo fikir kasta maxbuus baannu ka dhignaa, si uu Masiix u addeeco (2 Korintos 10:4, 5) *Sababtuna waxaa weeyaan in haatan madaxda iyo kuwa amarka leh oo ku jira meelaha jannada, kiniisadda lagu ogeysiiyo xigmadda Ilaah oo badan oo kala cayncaynka ah* (Eph 3:10) si uu muuqaalkiisu noogu caddeyo calamooyinka muucjisada leh, yaababaka iyo muucjisooyinka. Kiniisadda waxaa kaloo loo xilsaaray inay miisaanto xaaladda ruuxiyanka ee quruumaha, gobolada, magaalo madaxda, magaalooyinka iyo tuulooyinka si ay dad badan u gaarsiyan Farriinta Ilaah una badiyan dadka Ilaah.
Hawl galkan oo dhan waxay soo kicinayaan hawlaha ibliiska iyo ka hor imaadka hawgalka hawlaha Eebbe, sababtaas awgeed Kiniisadda waa inuu ka buuxsamo awoodda iyo jiritaanka Ilaah, waa inay awood u leedahay inay ku socoto hogaankiisa aan caadiga ahayn. Waana in wax kastoo la sameynayo waa in saldhig looga dhigo Erayga Ilaah lana fahmo sida loo istecmaalo hubka ruuxiga ah ee Ilaah na siiyey. Maanta Ilaah wuxuu soo kobcinaya Kiniisado aan caadi ahayn oo awoodda Rabbiga ku hawl gelaya diyaarna u ah wakhtiyada aan ku wejahannahay. Weligeedba qorshaha Ilaah ayey ku jirtay in isbedelka dadka ay ku imaan doonto Kiniisadda – Kiniisadda degaanka macnaha. Kiniisadda waa jidhka Masiixa oo ay ka tirsan yihiin kuwa xerta ah oo dhan oo jogaan afarta daraf ee dunida meesha laga ficilgelinayana waa dadka ka tirsan kiniisadaheena. Ilaah wuxuu rabaa inaan rumeysano in Kiniisadda degaanka ay barbaari karto

Rabbigana si buuxda ugu adeegi karto. Ilaah wuxuu raba kiniisad xoog badan Injiilka si xoog leh u fidineyso diyaarna u ah qof kastoo u baahan hogaaminta ruuxiyanka ah meel kastoo ay joogaanba. Madaama ay Kiniisadda tahay qalabka ugu xoogga badan ee uu Ilaah adeegsado, waa sababta ay weerar ugala kulmeyso ibliiska. Ibliiska wuxuu sameyna sharka ugu daran uu Kiniisadda ku sameyn karo si uu u nugleyo hawlgalka Kiniisadda si aanay u guuleysanin oo ay boqortooyada sheeddaanka uga burburinin meelaha ay ka hawgaleyso uu Ilaah ka hawgeliyey. Hawlgabkan uu ibliiska wado ayaa sababeyso inay kiniisaddu ku jirto xarbi, uqdad, xamasho, caasinimo, ku dhaqashada shuqul aduunka taasi oo aad looga dhex arkayo kiniisadaha degaanada. Cadawga wax kasta ayuu sameynaya si uu u beero kala qaybsanaan iyo mucaaradnimo, si uu u nugleyo, dhib ugu beero kuwa kiniisadaha ka tirsan si aanay hawsha Rabbiga u barbaarinin. Maanta Ilaah wuxuu soo kobcinaya kiniisado badan oo cusub wuxuuna u qorsheyey inay wada galaan boqortooyadiisa. Saa ay tahayna, waxaa jirta hawl u taala midkood kasta inuu hergeliyo. Kiniisad kasta waxay u wajahantahay jannada laakiin taasi ma hergeleyso haddii uu qof kastoo kiniisaddaas ka tirsan uusan xilka iska saarin inuu ka qayb qaato ujeeddadaas hergeliyana. Ma ahan oo keliya inay afka ka sheegaan ee waxaa loo ga baahan yahay inay qalbiyadooda ku jirto oo ay daacad ka tahay. Qorsha kasta waa wax uu Ilaah ugu tallogalay kiniisaddaas degaanka. Qorshooyinka Ilaah way subkan yihiin, oo inta la ogolanayo oo ay kiniisadda ficil gelinayso kuwa ka tirsanna ay shaqsi ahaan xilka isaga saarayaan, subkintaas way ku soo dul degeysa iyaga si ay u hergeliyan waxyaalaha loo faray.

Barakooyinka waxay Dhaliyan Awood

Maraha qaarkood wadka way dhibsadan dhabtan, sababtaas awgeed waxay ku dhaqaaqayaan inay ficilgeliyan qorshooyinka maskaxdooda iyo garadkooda ku saleysan laakiin waxay saldhig ka dhigayan Kiniisadda. Haddii ay arintaas shaqeyninna waxay noqonayan kuwa maangag ah, waxayna sabab la'aan ku eedeynayan kuwa madaxda ah. Waxayna ku edeynayan taxadir la'aanta, iyo fahan darroda ay ku fahmi wayeen hab kale oo ay kaga hor tagaan dhibka taagan. Dhabtii waxay eedeynayaan Ilaah oo waxay ku eedeynayaan sababta uu u barakadeyn wayey qorshooyinka ay qorhseysteen oo waxay iloobeen inay waajib ku ahayd inay wax kasta cagaha Rabbiga wada dhigaan, waxay ahayd inay fahmaan qorshooyinkiisa oo ay ka ficil geliyaan Kiniisadda degaanka. Dabadeetana waxaa jiri doontaa awood sare, subkin kordheysa iyo qancid sugan. Waa inay ka guuleystaan cabsida ay ka qabaan inay lumen doonaan ujeeddada ay lahayeen ee ay ka oofin lahayeen Kiniisadda, Ilaahna wuxuu iyaga ku soo butaacin doonaa fursado heer sare ah oo wuxuu fursadahaas u istecmaali doonaa habab heer sare ah.

Ilaah qof kastoo Kiniisadda ka tirsan hawl gooni ah ayuu u qorsheyey. Ma jiro hal qof oo aan qiima lahayn. Waa suurtagal inay muddo kugu qaadato ilaa aad ka fahantid waxyaalaha uu Ilaah kuu qondeyey. Waxaana suurtagal ah in waxyaalaha ugu dambeysta aad ku hawl geli doontid aad horey ka fahmin, laakiin qof kasta si durba ah ayuu iisu dhiibi kara inuu u adeeggo Ciise Masiix. Dadka qaarkiis wuxuu umaleynaya inay kiniisadda iyaga u adeegto oo keliya oo ay iyaguna iska yihiin uun kuwa loo adeego oo aan waxba masuuliyad ka lahayn kiniisadda. Laakiin arinta sidaa ma ahan – qof waliba oo kiniisadda ku jira ama xerta Ciise ka tirsan masuuliyad ayaa ka saara u adeegidda Rabbiga. Waa run Ciise wuxuu ku wacdiya nimanka iyo dumarka Kiniisadda ku jira, laakiin Kiniisadda way ka balaaran tahay meel laysugu yimaado uun "oo laygu adeego." Xataa halkaas diyaar ayaa u ahay inaad ka adeego. Haddii aan diyaar u ahayn inaan is dhiibo oo aan dadka kale u adeego, haddaba si qaldan ayaa lay fahansiyey hawsha Kiniisadda iyo masuuliyadda iga saran. Ilaah wuxuu rabaa inuu naga tirtiro fikiradda aan Kiniisadda ka qabno oo ah inay tahay hoy loogu talagalay kuwa aad u bukaan wuxuuna ina xusuusinaya inaan nahay ciidan fejigan, qof walibana wuxuu yahay tiir aan laga maarmin oo hawlan. Haddii aan rabno inaan ka miro goosano

wax alla wuxuu Ilaah noo qorsheyey sanadaha dambe, waa muhiim inaan wax kastaba u xilsaarno Ciise kana addeecno Kiniisadda. Kiniisadda waa meesha uu noogu muuqanayo nolosheena waxaanna Asaga ku soo dhaweyneyna jacayl iyo addeecis. Jacayl iyo midnimo kama dheero meelaha laga helayo aaminimada iyo addeecista laga helayo. Awood cusub iyo xoog dhammaan waan haysana oo kiniisadduna way gaari doontaa meel ka fog meesha ay hadda ka hore gaarin.

Subkinta iyo barakeynta Ciise lagu sameyey – waxyaalaha uu kula hadlayo kana sameynayo kiniisadda degaanka – waxay keeneysa awoodda iyo midnimada loo baahan yahay oo looga hor tegi karo cadawga si uusan u kala qaybinin ama wareer u gelinin iyo daciifnimo. Bedelkeeda waxay ka barbaareysa xagga awoodda iyo ka dhaadhicinta ay dadka ka dhaadhicinayan farriinta lagu aaminay, sababtaas awgeed Ciise ayaa laga dareemi doonaa meel waliba oo agagaarka kiniisadda ah. Ilaah wuxuu rabaa kiniisadda awood leh, dadka ka dhaadhicin karto Injiilkiisa. Wuxuu rabaa Kiniisadaha inay ahadaan kuwa taabanayo qayb kastoo nolosha ka mid ah iyo baahi kastoo jirto. Wuxuu rabaa in muuqaalkiisa, awooddiisa iyo muujintiisa laga dhex dareemo noloshooda. Kiniisadaha noocaas ah ma ahan kuwa hal habeen kudaheeda lagu hergelinayo-laakiin way soo kobcaan.

Qalbigaada ku midey aragtida Ilaah, Muujintiisa uu u leeyahay Kiniisadda degaanka oo welia ogolaw qorshooyinkiisa iyo ujeeddada uu u leeyahay dadka ka tirsan kiniisadda degaanka oo iimaankaaga ku xidhiidhi doonistiisa. Isha qalbigaada ku arag waxyaalaha uu Ilaah rabo inuu ku sameyo kiniisadda degaanka wayna ahaan doontaa. Dabadeetana waxaad wax u arki doonta isla sida uu Ilaah wax u arko waadna fahmi doontaa habka uu u shaqeynayo. Waxaad arki doonta in kastoo ay dhismadu kaamilmin, laakiin waa la aasaasay. Waad joojin doontaa inaad ka hadashid sida ay u liidato iyo calaancalka aad ka qabtid qorshooyinkaaga oo waxaad bedelkeeda ku dhaqaaqi doontaa inaad ahaatid mid ficiltama, kaasi oo aad jacayl iyo midnimo aad ku fidin doontid agagaarkaaga oo dhan, Ilaah ayaa ku istecmaali doono oo qalabkiisa ayaad ahaneysa wuxuuna kugu fulin doona waxyaalaha ugu qaalisan uu ugu jacayl yahay uu garanayo – Taasi oo ah Kiniisadda.

44

Kiniisadda Mustaqbalka

Baybalka habab badan ayuu u sawiraya Kiniisadda: Kiniisaddu waa hoyga Ilaah; waa macbudka ruuxa Ilaah, quruunta dadka, Qoyska Ilaah iyo ciidankiisa. Waana jidhka Masiixa iyo caruusaddiisa. Kiniisaddu ma ahan waxyaalahan midkood laakiin waa waxyaalahaas la sheegay oo dhan. Ruuxa Quduuska ah wuxuu xoogga saaraya in waxyaalaha kala duwan ay ay kiniisadda ku hawlantahay wakhtiyo kala duwan. Taasi waxay na siineysa sawirka dhabta ah ee lagu fasiri karo Kiniisadda kaamilan ee dhabta ah, taasi oo muujineysa ujeeddadeeda iyo muuqaalkeeda iyo hawlaha kala duwan ee loo xilsaaray.

Markuu Ruuxa Quduuska ah sharaxayo fasiraad ka tirsan tilmaan qaas ah oo ku saabsan Kiniisadda, waa muhiim inaan ogolaano wuxuu xoogga saarayo; waana inaan tixgeliyo oo aan kala baxno dhuuxa faa'idada ku jirta tilmaantaas. Waa xigmad darro inaan yasno ama aan tixgelin wayno ama aanba ku wacdino wax mucaaradnimo muujinayan oo Kiniisadda ka soo horjeedo oo xumaati darran ah. Ruuxa Quduuska ah aad buu u awooda inuu waxyaalahaas oo dhan xaliyo. Laakiin Ruuxa Quduuska ah ma ficiltamayo haddii ay ragga iyo dumarka ay addeecin oo rumaysadka ku adkeysanin oo ay qalbigooda oo dhan ku qaadanin wuxuu Rabbiga rabo inuu ku deeqo iyaga.

Marka cashar ama wacyoon nebiyeed farriin nagula siinayo oo ay nooga imaneyso adeegaha Ilaah, Rabbiga wuxuu ka hadlaya waxyaalaha dhici doonaan. Haddii aan isku deyno inaan isla markaasba aan ku xalino arinta ina hor taala, ama aan qaribno oo aan ka jeedino dariiqa looga tallogalay, waxaan ahaaneyna kuwa xakiino iska dhigeen, bedelkii aan ahaan lahayn kuwa ish hooseysinayaan oo Erayga qaadanayan. Fahanka Ruuxa wax lagu fahmo ee dhabta ah ma baabi'inayo erayga laga helay nebiga.

Tan waa muhiim maxaa yeelay Ilaah dadkiisu la hadli doonaa mustaqbalka waana arin lagama maarmaan ah in farriintu lagu helo si sax ah oo hadalk cad ah waana in farriintaasi ay ku dhaxdo qalbiyada diyaarka u ah oo rabaan inay maqlaan. Markay farriinta nebinimo ka timaado xagga samada, waxaa ku jirta awood heer sare ah. Eraygaasi waa mid awood badan si soo jiidasho lehna ku imanayo. Ilaah wuxuu rabaa in Eraygiisa qumaati loo addeeco waana inay sameyaa isla sida uu Erayga dhigayo uguna talagalay. Hadda ka hore lama arkin muhimadda ku jirta in kiniisaddu ay si qumaati ah u maqasho kuna ficitanto Ruuxa Quduuska ah; ma ahan oo keliya in la maqlo ee waa muhiim in la addeeco wuxuu noo farayo.

Tani ma khuseyso oo keliya jidhka Masiixa ee laakiin waxay khuseysa kiniisad kasta iyo shaqsi kasta oo kiniisadda ka tirsan. Waa inaan Ilaah addeecno oo aan raacno wuxuu noo farayo. Waa inaanan ku dhaqmin wax uusan nagu amrin inaan sameyno, xataa haddii ay u eg tahay wax sax ah oo wanaagsan. Wuxuu qorsheyey in qof kale uu sameyn doono waxyalahaas kale, ee haddaba waa inaan haysano waxyaalaha uu Ilaah noo faray oo keliya. Markaan fahanno qofka aan nahay oo aan hubsano inaan ku nabad galeyno, diyaar ayaan u nahay inaan door ka qaadano Boqortooyada Ilaah oo markaasi Ilaah waan ugu adeegi karna qalbigeena iyo waxa aan nahay oo dhan. Waxaa nagula amray inaan ku dhaqanno oo keliya waxyaalaha uu Ilaah noo faray ee ma ahan inaan raacno waxyaalaha ay dadka noo farayan ama naga farayaan. Markaan addeceyno wax alla wixii naloo faray oo aan arkayno inay kuwa kalena waxyaalahooda sameynayaan, si bayaan ah ayaan ku wada shaqeyn karna. Tan waxaa lagu gaari karaya oo keliya marka la dhageysto farriinta nebinimada ee naloo farrayo. Kuma filno oo keliya in fikirado "nebinimo" oo sharaxaad gooni ah wadato lagu fasiro waxyaalaha ruuxiga ah ee ah marxalad hadda haysato shaqsiga kuwa ka yimideen qof iskiisaba daawade iska ahaa.

70baatemeeyadii muujinta jidhka Ciise barako ayey u ahayd Kiniisadda, laakiin madaama ay jireen waxyaala injiilka lid ku ahayeen, ma ahan inaan nidhaahno ma ahan in muujinta la xooro ama lagu ekeysiyo oo keliya 70baatemeeyadii. Farriinta Ilaah xili kastoo la bixiyeyba ma duqowdo oo xili kastaba way ku habboontahay, saa ay tahayna muujin kastoo la dareemo marxalado kala duwan ayey wakhtiyo kala duwan fasiri karta.

Rumaysadku wuxuu leeyahay Dhinac Militarinimo

80tameyadii baridda ku saabsan rumaysadka waxtar weyn iyo dhiirrigal xagga Rabbiga ka timid ayey u ahayd cid kasta. Baybalka oo dhan waxaan ka cad in ay ku jirto barid xoogga saareyso rumaysadka. *Kuwa xaqa ah waxay ku nolanayaan rumaysad* (Habaquuq 2:4; Rooma 1:17; Galatiya 3:11; Cib 10:38). *Oo rumaysadla'aantiis ma suurtowdo in isaga laga farxiyo, taas aawadeed kan Ilaah u yimaadaa waa inuu rumaysto inuu jiro oo uu yahay kan u abaalguda kuwa isaga doondoona* (Cib 11:6). Rumaystayaasha waxay u baahan yihiin inay maqlaan runta weligeed jireysa weliba marka loo kaco xagga rumaysadka, bogsiinta iyo xaqnimada. Waa inay fahmaan amarka ay Ilaah ka haystan iyo macnaynta samato bixinta. Aqoonta noocaas ah la'aanteed waxay ahanayaan kuwa wareersan oo aan waxtar lahayn uu sheeddaanka duufsanayo. Rumaystayaasha daciifka ah waxay aasaasayaan kiniisad daciif ah taasi oo runta kula gorgortameyso waxyaalaha adduunka taasi oo suurtagal u dhaw inuu cadawga ka faa'ideysto. Sidaas awgeed, Ruuxa Quduuska ah waa inuu si joogta ah u hogaamiyo xerta kuna hogaamiyo

runta oo dhan oo ku saleysan Erayga Ilaah Asagoo u caddeynayo masuuliyadda ay ka leeyihiin iyo fursadaha uu u soo bandhigay Ciise Masiix.
Rumaysadka ah in hadda ay kiniisadda rumaysadka ka maaranto, waxay fasireysa inay tahay sida is ceejinta ruuxiyanka ah amaba waxay la mid tahay dib ugu laabashada “Masar.” Sida tan ka soo horjeeddo ayaa loo baahan yahay. Ruuxa Ilaah waa inuu xerta ku hogaamiyo muhimadda ku jirta rumaysadka uu qofka Ilaah rumaysanayo. Tan habab badan ayaa lagu heli kara, sidaas ay tahayna, madaama Ilaahba uu habab badan ku ficiltamayo.
Mid ka mid ah calaamadaha rumaysadka waa *marxaladda xarbiga.* Waxaa jirta dhinaca militarinimada markii la eego macnaynta rumaysadka uu Ruuxa Ilaah xoogga saarayey sanado badan. Kuwa badan ayaa si qaldan u fahmeen, dadka qaarkiisna cabsi weyn ayaa ka gashay oo laakiin weliba waxaa jiraan kuwa badan oo fahmeen dhabta ku jirta in la ahaado askariga Ciise wayna bilabeen istecmaalka hubka ruuxiga ah kaasi oo ay ku fiijinayaan cadawga. Inta ay xerta talaabadan sii qaadayaan, Boqortooyada Ilaah si xoog leh ayaa loo muujinaya oo waa la sii fidinaya.
Waa inaan fahanno runtan muhiimka ah – waxaan nahay askarta ku jirta ciidanka Ilaah. Waa inaanan inkirin tan. Maanta waxaan u baahannahay ciidan ruuxiyan ahaan xoog leh, oo weliba Ilaah u hogaansan wuxuuna xoreynaya askarta laga haysto, burburinayo degaanka cadawgiisa, oo wuxuu soo fakisanaya askarta laga qabsaday.
Ruuxa Quduuska ah wuxuu xooga saaraya inay Kiniisadda tahay ciidanka Ilaah loogana baahan yahay inay fejignaato. Mid kasta oo xerta ka mid ah waa inuu fahansanyahay doorka uu ka ciyarayo ciidankan, waa inuu garanayo hubka loo diyaariyey, waana inuu dhamman ku wada xafido awoodda Ruuxa Quduuska ah. Nacas ayaan ahanaya haddii aan inkiro inuu cadaw jiro ama aan ka hadli waayo cadawgaasi anigoo isleh magaciisa ayaa ku weynanayo. Ma jiro ciidan dagaal iisu diyaarinayo oo tababar xun laga siinayo taasi oo sababeyso inuu diido inuu baaritaan ku sameyo cadawgiisa; awooddiisa, kartidiisa iwm. Waa isla sidaas ciidanka Ilaah; waxa keliya oo aan ku kala duwannahay waxay tahay inaan guusha durbaba helnay maxaa yeelay Ciise Masiix ayaa iskutallaabta guushaas ku helay. Runtan waa mid aad muhiim ah waana inaanan ogolaanin inuu cadawga na khiyaano oo dhib noogu hogaamiyo. Dhinaca kale haddii aan ka eegno, waa inaan sii socono, baabi’ino asaga oo aan ku xabsigiisa ku jiraan xoreyno.

Kiniisadda – Caruusadda Daacadda ah ee Masiixa
Waan aaminsanahay inuu Rabbiga rabo inuu durbaba na fahansiyo run kale – sawirka kiniisaddiisa oo ah caruusadda Masiixa, qaybaha kale ee Kiniisadda ee uu Ruuxa Quduuska ah xoogga saaray, taasi waxay ugu dambeysta sameyneysa dhismo sugan. Wax kasta waxay si caadi ah ku idlaan doonaan meesha ugu habboon oo jidhka Ciisena wuu muuqan doonaa.
Inta uu Ruuxa Quduuska ah jiritaankiisa sii muujinayo, macnaha wakhtiga soo noqoshada Ciise wuu dhaw yahay; waxaanna taasi ku fahmeyna afar shey oo qaas ah kuwaasi oo kiniisadda ku caddeynayo inay tahay caruusadda uu Masiixa sugayo:
1) *Addeecnimo*. Caruusadda la rajeynayo waxay hal qalbi iyo hal il u leedahay oo keliya hal qof – Ninka guursanayo. Isla sidaasna, Ciise ayaa ahanaya kan keliya oo ay kiniisadda qalbiga ku hayso oo soo jiidashada heerka sare leh oo adduunka oo dhan ay ka dooratay oo wax alla wixii dabiicad fikir ahna waxaa lagu burburiyey go’aankan kama dambeysta ah iyo xidhiidhkan cusub. Tani waxay ahaan doontaa sida duufaan hirka badda ka soo dilaacayo oo ka imanayo awliyadaha oo ku hawleysan soo noqoshada Masiixa. Isla sida ay caruusadda iisu diyaarineyso maalinta guurka oo si farxad leh ayey iisu diyaarineysa maalintan kama dambeysta ah, kiniisadda wax kasta oo ay ku hawlantahay ayey dhinac u dhigeysa oo waxay ku hawlananeysa oo keliya ujeeddada keliya – inay la midawdo Masiixa.

2) *Daahirnimada*. Iisu diyaarinta heerka sare ee ay dadka sheeddaanka ka leexan doonaan oo ay Ilaah u leexan doonaan waa mid ku imaneyso isdaahirinta iyo daahirnimada nafteeda. Nuurka iyo dhaldhalaalka caruusadda waxay ahaan doontaa daahirsanaanteeda iyo bikironimadeeda. Xor ayey ka tahay xidhiidh kale iyo fikirado ka gaar ah daahirnimada iyo waxyaalaha uu Ilaah raali ka yahay. Caruusadda jacayl ayey guur u galeysa oo sababtaas awgeed ayey bikironimodeeda dhawrtay si ay hal nin oo keliya aamin ugu ahaato. Isla sidaas ayey u tahay Kiniisadda. Damiirka aan daahirka ahayn, u hunguri weynida awoodda iyo sharaf aan jirin, lacag jacaylka, ku istareexidda dunida waxyaalahan oo dhan waa la xaaqaya oo dariiqa looga leexinaya si ay caruusadda u guursato ninka keliya ee ay dunida oo dhan ka dooratay.
3) *Habeysan.* Markay caruusadda diyaar u tahay maalinta arooska, wax kasta waa la habeynaya oo sida istaahisha ayaa loo dhigaya. Dharka ay gashan doonto, dahabka iyo luulkeeda shab iyo shalalax lagu siin lahaa dhammaan waa inay soo saraan nuuradda loogu talagalay. Isla sidaas ayey u tahay Kiniisadda. Muujinta, baridda iyo nooca baridda doorkooda iyo ficilgalkooda ayey lahaan doonaan, iyadoo uu jacayl yahay kan heerka ugu sareyso loo qondeyey.
Hadiyadaha la bixinayo isla sida loogu talagalay ayaa loo soo bandhigaya waxaana lagu soo bandhigaya weel daahirsan. Nimcooyinka, hibooyinka Rabbiga loogu adeegayo, iyaguna doorka loo qondeyey ayey ka hawl gali doonaan oo waxaa la siiyey xornimo ay ku hawl galaan lid la'aan iyagoo ku shaqeynayan subkinta lagu subkay, iyagoo aan waxba ka cabsi qabin inay jiri doonaan waxyaala ka hor istaagi doonaan hawl gelintaas. Waxaa jiri doontaa muujin habeysan oo ay ku shaqeyn doonto Kiniisadda, waxayna amaan iyo nabad sugan ku deqeysa kuwa ka hawl gali doonaan hooskeeda. Ku xarbinta hogaanimada, hinaaska, damiirka lagu rabo in dadka madaxa lagaga istaago, iyo waxyaalaha uu shasqsiga qondeystay oo dhan way ka hor leexan doonaan oo waxaa waddada loo baneynaya runta Ruuxa Quduuska ah.
4) *Qurux*. Ma jiro qof ka qurux badan caruusadda maalinta arooska dadka hor fadhido. Xataa dadka maangagga ah maalinta arooska way jilcinayan qalbiyadooda oo qalbiyadooda ayey iisu furaya oo isku dhiibayan Ilaah hortiisa. Sawirkanna wuxuu ahaan doonaa ay dunida arki doonto iyagoo arkayan quruxda iyo sharafta Kiniisadda iyo soo jiidashada Injiilkeeda. Kiniisadda way u adeegi doonta dadka intooda badan, kuwaasi oo qalbiyadooda Ilaah ku dondoonayey, iyagoo yaaban meesha ay Ilaah kula kulmi lahayeen.
Ficilkan wuxuu soo jiidanaya isbedel heer sare ah oo kumaan kun u soo jeedsanayan markay arkan Alla caabudka, daahirsanaanta habeynta heerka sare ah iyo midnimada ka jirta Kiniisadda dadka Ilaah taasi uu Asaga naftiisa ka dhigay sida ay tahay oo weliba Asaga oo keliya ayaa istaahila in lagu mahadiyo laguna sharfo. Ciise ayaa xoojin doonaa oo qurxin doonaa Kiniisaddiisa, caruusaddiisa oo xataa irdaha naartana kama hor istaagi doonaan falka daahirnimada. Ma ahaan doonto mid nugul, midabyo leh ama xishood badan ee laakiin waxay ahaan doontaa Kiniisad aad u xoog badan oo jacayl waxyaalaha ay Rabbiga ugu adegeyso oona muujineyso muuqaalka mustaqbalka Ilaah lagu arki doono ilaa uu Ciise ka soo laabto!

Dib u eegidda waxyaalaha muhiimka ah
Cawsku wuu engegaa, ubaxuna wuu dhacaa, laakiinse erayga Ilaaheennu weligiisba wuu waari doonaa. Isaiah 40:8

45

Baybalka Erayga Ilaah Baa Runtii?

Ilaah wuxuu dunida u soo diray Wiilkiisa madiga ah, Ciise. Yooxanaa 1:14 waxay dhigeysa, Ereyguna jidh buu noqday, oo waa ina dhex joogay, oo waxaannu aragnay ammaantiisii, taas oo ahayd ammaantii u ekayd tan Wiilka keliya ee Aabbaha, ee nimco iyo run ka buuxa. Ciise waxaa loogu yeedhaya "Erayga" maxaa yeelay waa habka uu Ilaah doortay inuu nagula hadlo. Eray la'aantiis ma wada hadli karno eraygana waa Ciise kaasi uu Ilaah kula hadlayo dadka.

Erayada waa u muhiim Ilaah oo Eraygiisa waxaa ku jirta awood aan waxba lala barbardhigi Karin. Eraygiisa ayuu ku uumay dunida (Bilawgii cutubka 1aad). Uunka oo dhan waxaa lagu maamulaya Erayga Ciise (Cibraaniyada 1:3). Erayada xagga samada laga soo hadlay waxaa ku jirta awood heer sare ah. Waxaan ku cusboonaneyna ama mar labaad ku dhalaneyna Erayga Ilaah (1 Butros 1:23). Markuu Ciise Eray ku hadlay, wiilkii uu dhalay boqol u taliyihii oo bukay wuu bogsaday. Markuu Ciise yidhi *"Ephphatha,"* dhegaha nin dhagoola ahaa ayaa furmeen (Markos 7:34). Erayada Ilaah way bogsinaya, dadkay xor ka dhigayan dib ayuu u soo asturaya qofka rajada beelay. Way barakeynaya wayna hogaaminayan.

Waa run erayadu aad bay muhiim u yihiin weliba markay yihiin kuwa Rabbaani ah ama xagga samada ka yimid. Cibraaniyada 1:1 waxay dhigeysa, *Ilaah wuxuu waagii hore siyaalo badan oo kala duduwan awowayaasheen kula hadlay nebiyadii.* Ilaah wuxuu dadka kula hadli jiray nebiyada. Way qorayeen wax kastoo ay xagga samada ka maqlaan oo maanta waxaan ku haysana Baybalka.

Baybalka waa buug la yaab leh. Dadka badankiis wuxuu u yahay uun buug caadi ah, laakiin Masixiinta meel kastoo ay joogaan iyo qarni kastoo ay ku noolyihiinba wuxuu u yahay Erayga Ilaah. Ilaah wuxuu dadka hortooda isku muujinaya erayada ku dhigan baalalka Baybalka. Wuxuu dadka baraya wax iyaga ku saabsan iyo sida ay ku heli lahayeen badbaadada dembiga lagaga badbaadayo taasi oo ku imaneysa Ciise Masiix. Tan waa mid aan weligeed wax dood ah laga soo jeedinin laakiin maalmahan ugu dambeysa wax la yaab leh ayaa dhacay. Waxyaalo badan oo fikirado lagu kala duwan yahay ayey dad kala duwan oo Masixiinta dhexdooda ah ka soo jeediyeen Baybalka. Tan way ku cusub tahay taarikhda Kiniisadda waana arin aan ku waajibanahay inaan taxadir kula ficiltanno.

Dadka fikirado kala duwan ayey kaga hadlaan Baybalka. Waxay umaleynayan inay u furantahay inay sida ay rabaan uga fahmi karaan ugana hadli karaan iyagoo dooranayaan "aragtida" iyaga la quman shaqsiga. Saa ay tahayna, Baybalka waxaa jirta aragti uu naftiisa iska qabo una gaar ah. Ma ahan inaad u akhrisid sida aad adiga rabtid, adigoo ka qaadaneysid waxaad doontid. Waa run waxaa jiraan fikiradaha diinta ee waayihii hore lagu shaqayn jiray oo aayadaha qaarkoodna istecmalayaan qaarka ay shaqsi ahaantooda rabinna ka tegayan oona xataa kuwa ay qaadanayaan si qaldan u fasirayaan; laakiin dhammaantood way wada fir go'I doonaan madaama ay ka leexanayaan dhabta Baybalka amaba sida maamul xumada ah ee loola macaamiltamayo Baybalka.

Khatarta maanta jirta ayaa waxay tahay inkiraadda ay xataa Masixiinta dhexdooda inkirayaan dhabta ku saabsan Erayga Ilaah qaas ahaan iimaankeena. Aaminaadda Baybalka loo aaminsan yahay inuu yahay Erayga Ilaah wuu daciifay oo hadda madhabyada qaarkood waxay wacdinayan wax ka gees ah Injiilka dhabta ah oo weliba waxay isku deyayaan inay Ciise iyo Baybalka kala saraan iyagoo dadka Baybalka akhriyaan ku eedeynayaan kuwa aan fahansaneyn qoraalka. Taas waa been cad! Waa nacasnimo!

Ilaah ayaa ilaalinaya Eraygiisa oo xaqiijinaya Tixgelintiisa

Qof kastoo xerta ka tirsan ee Baybalka aaminsan wuxuu *Masiixa ku rumaysan isla sida uu Baybalka u macneynayo Isaga*. Sababtaas awgeed, wax baridda Baybalka aad buu u muhiimsan

yahay. Haddii uu Baybalka Erayga Ilaah ahayn, ma haysanno taswiirka dhabta ah ee waxa uu qofka uu Masiixa yahay, waxyaalaha uu sameyey amaba waxyaalaha uu sameynayo maanta, oo weliba ma garan karno sida aan si dhab ah ku caabudi lahayn Isaga. Laakiin Ilaah baa mahad iska leh oo Baybalka wuxuu isagaa iisu ah tafsiir dhan. Ma ahan qoraalo dhacdooyin taarikh ah ka sheekeynayaan oo laysku soo aruuriyey oo ay qaybo ka maqan yihiin ama aan kaamil ahayn, oo aan wax macna ah u lahayn qarnigeenan! *Markaasaa Rabbigu igu yidhi, Si fiican baad wax u aragtay, waayo, eraygaygaan ka fiirsadaa si aan u oofiyo* (Jer 1:12).
Second Peter 1:21 declares, *Waayo, wixii nebiyadii sii sheegeen weligood kuma ay iman dadka doonistiisa, laakiinse dad Ruuxa Quduuska ahu waday ayaa xagga Ilaah kaga hadlay.* In Yeremyaah 1:12 Rabbigu wuxuu leeyahay, *Markaasaa Rabbigu igu yidhi, Si fiican baad wax u aragtay,* ***waayo, eraygaygaan ka fiirsadaa si aan u oofiyo.*** Ruuxa Quduuska ah ayaa hogaaminayey nebiyada inay ku hadlaan qoraanna isla waxyaalaha ay xaga Rabbiga.
Daa'uud wuxuu Samu'eelka 2aad 23:2 ka leeyahay, *Rabbiga ruuxiisii baa iga dhex hadlay, Oo eraygiisiina carrabkayguu saarnaa.* Yeremyaah 30:2 Rabbigu wuxuu nebiga ku leeyahay, *Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay,* ***Erayadii aan kugula hadlay oo dhan kitaab ku qor.***
Waxaan Baybalka si joogta ah uga arkeyna inuu Rabbiga nebiga ku amray inuu qoro isla sida uu ku hadlay. Macnaha waxay tahay in nebiyada ay qoraal ka dhigeen waxyaalaha ay Ilaah ka maqleen – ma jiraan wax kale, ma jirto bedelaan lagu sameyey qoraalada, ee laakiin isla sida asliga ah ee marka hore lagu helay ayuu ku qoran yahay.
Haddaan akhrino Faalimaha Rasuullada 28:25 Bawlos wuxuu leeyahay, *Oo intay dhexdooda ka heshiin waayeen, ayay kala tageen, Bawlos se wax keliya ayuu ku hadlay, isagoo leh, Ruuxa Quduuska ah si hagaagsan ayuu uga dhex hadlay nebi Isayos markuu awowayaashiin la hadlay* Runtuu ku hadlay oo natiijaduna isla sida uu yidhi ayey noqotay maxaa yeelay Ilaah ayaa hogaaminayey wuxuu ku hadlayey oo weliba ka dambeyey fulinteeda.

Ciise oo Xaqiijinayo Macnaha Taariqeyd ee Qoraalada

Maanta, qarnigeenan loogu yeedhay mid ku hormaray xagga teknolojiyadda iyo sayniska, waxaa soo tiro batay cilmiga adduunka oo dadka ku hogaaminayo inay didaan Baybalka iyagoo adeegsanayaan dooda aan la soo koobi Karin iyo caddeyn ku saleysan maanka baniaadmiga. Baybalka waxaa loo haysta inuu yahay buug sida buugagta kale ee caadiga ah, qaladaad ka buxaan, is af garasho la'aanna ay ka caddahay, oo ay qoreen dad noloshooda dhibatooyin badan lagu tilmamayo. Runtii kuqa loo wacyooday ee qoraaladan laga helay ma ahan dad boqolkiiba boqol xaqnimada ku dhaqmayeen, sababtaas awgeed waana sababta ay ugu baahnayeen caawiye, Ruuxa Quduuska ah, kaasi oo kormeyr ku sameynayey hawsha oo dhan, kaasi oo xaqiijinayey in wax kastoo qoraalkan ku jira inay ahadaan run, aasaas wacan leh oo ka yimideen Ilaah.
Ciise wuxuu wax Yooxanaa 17:17 kaga hadlaya erayada Aabbihiis isagoo leh, *Iyaga quduus kaga dhig runta, ereygaagu waa rune.* Erayada Aabbaha ayaa ku jiraa Baybalka waana kuwa run ah. Waa suurtagal inay fahan darro iyo wareer geliyaan maskaxda yar ee baniaadmiga markii loo kaco xagga fikirka dareemada baniaadmiga lagaga shaqeyo, anshaxa, laakiin taasi kama dhigeyso erayga mid been ah. Diidmada la diidayo qoraalka Baybalka ma ahan mid lagu saleysin karo maanka baniaadmiga wuxuu diidayo ee waxaa lagu xukumi kara dhaqamada ka hor imanayaan diwaangelinta Ergayga. Nolosha faasuqa jacayl waxay u baahan tahay inay maqasho fasiraadda erayga Ilaah oo gacan siineysa noloshooda xaqnimada ka baxsan. Dhammaantood way diidayaan oo inkirayaan Erayga Ilaah.
Waa mid la yaab leh markaan aragno sida uu Ciise ula dhaqmay Qoraalada! Dadka inta badan waxay weydinayaan, "Fikiradda skoolka baybalka ee aad raacsan tahay waa tee?" Waxaan ku

jawaaba, “Isla kan Ciise!” Isagu waa Wiilka Ilaah fikirkiisana mid ka sareyo ma jiro. Waa mid maskaxgal ah inuu qofka xerta ah lahaado isla mooqoufka uu Ciise Qoraalka Quduuska ah ka lahaa. Isagu naftiisa ayaa ah dhuuxa Qoraalka, baartamaha iyo goolka. Haddaba fahan inuu Ciise sheegay inuu ka duwanayn Eraygiisa. Sida ku dhigan Luukos 9:26, *Maxaa yeelay, ku alla kii ka* ***xishooda aniga iyo ereygaygaba****, Wiilka Aadanaha ayaa ka xishoon doona isaga, goortuu ku yimaado ammaantiisa iyo ammaanta Aabbihiis iyo tan malaa'igaha quduuska ah.*
Ciise inta badan wuxuu soo xiganayey Axdiga Hore. Qoraaladan xiga waxaan ka arkeyna In:
1. Aadan iyo Xaawa mar dunida caadi ugu nolayeen (Matayos 19:4; Markos 10:6),
2. Nuux jiray doonina dhisay (Lukos 17:26),
3. Kaluunka Yoonis laqay uu ahaa mid dhab ah (Matayos 12:40),
4. Sodom iyo Gomoora yihiin kuwa jiri jiray (Matayos 11:24),
5. Muuse uu qoray shanta buug ee Baybalka ugu horeya (Markos 10:4,5; Yooxanaa 5:46,47), iyo
6. Danyeel uu qoray buugga Danyeel! (Matayos 24:15).

Waxyaalahan oo dhan iyo kuwa kale caadi ayey u ahayeen Ciise. Wuu wada rumeysnaa, in kastoo mid kastoo calaamadahan kore laga sheegay uu sameyey waxyaala maanta ay noloshooda dood kaga taagan tahay xagga wadaaddada iyo dadka Cilmiga Baybalka ku dhereyaan. Ciise waa Wiilka Ilaah wax kastoo run ahna wuu naga wada yaqana; oo marba hadduuba Isagu rumaystay, aniguna waan rumaysanahay. Aqoontiisa way ka sareysa qof kastoo Cilmiga Baybalka si kasta ku dhereya. Waxaa lay qaatay inaan la dhinac ahaado Ciise bedelkii aan la dhinac ahaan lahaa qof cilmiga adduun uu bartay ku inkirayo Badbaadiyaheyga.
Bawlos wuxuu Faalimaha Rasuullada 24:14 ka leeyahay, *Laakiin tan baan kuu qiranayaa, inaan Ilaaha awowayaashayo ugu adeego sida Jidka ay yidhaahdaan dariiqo bidcinimo ah,* ***anigoo rumaysan waxyaalaha sharcigu leeyahay oo dhan*** *iyo waxyaalaha lagu qoray kitaabbadii nebiyada.* Bawlos wuu wada aaminsan yahay qoaalka Baybalka oo dhan, isagoo ku xisaabayo in Ilaah uu isaga masuuliyad uga dhigay inuu aamino – Ilaahna isla sidaas ayuu nooga baahan yahay annaga maanta. Wuxuu rabaa inaan si buuxda u addeecno Eraygiisa, si aan ugu nolaano wax kastoo uu halkaas nooga faray.

Rumaysadkii Hore ee Baybalka ayaa dib u soo noqonaya

Maalmahan dambe aad ayey u kala duwan madhabyada Masixiinta ah ee qoraalada Baybalka aan ku dhaqmeynin iyo Ilaaha Erayadas aasaaskooda ahaa.
Hawada noocaas ah ayaa maalmahan aad u sii balaaraneysa oo fikirado kala duwan fidineyso oo inkiraadda qoraalka Eebbe ansaxay la inkirayo ka dambeyso. Madaxda kiniisadaha iyo wadaaddada waxay la soo baxeen habab la yaab leh oo nooc wax barid, oo dhinac kastoo ay dabeesha u buubisho ayey ula buubayaan meel kastoo ay ka joogaan dunida. Laakiin habkan dadka habsaaminayo wuu fir go’aya. Rumaysadkii hore ee Baybalka ayaa dib u soo noqonaya. Rag iyo dumarba meel kastoo ay bulshada kaga jiraanba, qalbiyadooda ayey u jilcinayan Ciiseoo waxay fahmayaan sida ay u sahlantahay in la rumeysto Eraygiisa!
Diidmada ay dad cilmi adduunka ku takhsuseen ay ku diidayeen Qoraalka Eebbe way wada burburayaan oo waxay noqonayan sida hal bacaad lagu lisay. *Wax awood ah oo diidmadooda ku jiraan ma leh! Awoodda ugu sareysa waxay ku jirta Erayga Ilaah!* Awoodda waxay ku jirta Ilaaha! Oo weliba awoodda waxay ku jirta Masiixa soo sara kacay kaasi oo maanta ah isla sida uu ahaa markuu dunidan joogay. Isla sidii ayuu muucjisooyin iyo calaamooyin iyo yaabab u sameynaya. Maanta Ciise wuxuu sameynaya waxyaalaha uu Baybalka sheegayo inuu sameyey markuu dunida ku nolaa oo beritona wuu sameyn doonaa!
Waad ku tiirsan karta Erayga Ilaah! Waxba haka cabsanin hadduu qof kaaga su’aalo rumaysadkaaga. Eraygiisa waa sida libax. Waxba ha ku doodin jiritaankiisa iyo qiimahiisa heerka

sare ah. Si dibacsan u qaado! Awoodda Ilaah waxay ku jirta Eraygiisa:
sidaas oo kaluu ereygii afkayga ka soo baxaa noqon doonaa, oo isagoo madhan igu soo noqon maayo, laakiinse wuxuu oofinayaa wixii aan ula qasdiyey, waana ku soo liibaanayaa wixii aan u diray (Ishacyaah 55:11).
Ballmada Ilaah isma bedelaan! Isagu wuu ku adkeysta wuxuu yidhaahdo! Awooddiisa waa mid dhab ah, wuxuuna jacaylyahay inuu muucjisooyin sameyo! Mid ka mid ah waa Eraygiisa – Baybalka – wuuna jiri doonaa ilaa dhamaad, ilaa wakhtiga uu Ciise soo noqonayo!

46
Xuduudyada Waa la Caddeyey

Wakhtiyo wareer leh ayaa ku jirna. Hadda ka hore Masiixinimada uma ekaanin mid adag ama su'aal qiimaheeda su'aaleysana lagama soo jeedinin.
Ilaah wuxuu rabaa inuu sharaftiis si heer sare ah ku muujiyo waana muhiim inay Masixiinta si qumaati ah u addecaan Eraygiisa oo ay weliba si heer sare ah u addecaan Ciise.
Sanadahan ugu dameyan, inta badan waxaa muuqata inay kiniisadaha ku sii balaaranayan ku barbaarista Erayga Eebbe. Badankooduna way daremeen oo Ilaah ayey ugu mahad celiyen dhacdadaas, kuwa kalena wayba ka jeesteen dhabta. Waxaa jireen wada hadallo fara badan, ku tiri kuteen iyo musuqmaasuq la wareejinayo. Miyey suurtagal tahay inuu Ilaah ku jiro wareerkan iyo is af garasho la'aantan oo dhan? Haah, waa suurtagal, kama jiro shaki!
Meelaha aan Ilaah laga filan karin oo laakiin ay dadka qaarkood kala kulmaan waxaa ka mid ah waxyaalaha ay ilaahnimada ka muuqanin ka shaqeynta dadka rumaysadka ka laabteen, dareemada iyo hab nooleydka. Wuxuu go'aansaday inuu dadka isku kaya muujiyo marxaladaha ay nolosha kaga jiraan sida qoran *Dadka Israa'iilow, Rabbiga eraygiisa maqla, waayo, Rabbigu dacwad buu la leeyahay dadka dalka deggan, maxaa yeelay, dalka dhexdiisa laguma arko run, ama naxariis, ama aqoonta Ilaah toona.* (Hoosheeca 4:1). Marka ugu horeyso wuxuu ahanaya xakiinka xaqa ah dabadeetana wuxuu noqonaya barako.
Tan ma ahan sida maxakamadda caadiga ah ee qofna, kiniisad ama urur dembi lagu oodayo mid kalena dembi laa'aan. Taasi waa mid iskaba sahlanaan lahayd. Maya, waxa la kala dooranayo waa ku dhaqashada ficilo diimeyd ee labo wejinimada leh iyo caasinimada Ilaah lagu caasiyo oo oo dhanaca kale taala, iyo weliba Erayga Ilaah iyo shaqada Ruuxa oo dhanac kale laguy hayo. Macnaha waxaa weyaan laba shey kuwa Ilaah iyo kuwa ka soo horjeedo Ilaah.
Waa kuwan qaybaha hadda dhismaya waana sababta kala qaybsanaanta xoogga leh ee socota iyo is af garasho la'aanta. Sanado badan ayaa injiilka habkan lagu waday anagoo arkayno inay da'nimada sii jirto bulshadeena dhexdeeda Ilaahna amarkaas ayuu u jeediyey dadka inay Ciise ku adkeystaan, kuna wareegtaan iskutallaabtiisa oo ay xagga ruuxa uga dagaaltamaan si aan guusha u helno una dagaalno Rabbiga. Haddii aan maqalno oo addeecno farriintiisa, waxaan la kulmeyna guul heer sare ah oo wax lala barbardhigi karo ay jirin!
Sababtas awgeed xaaladdu ma fiicno markay wacdiyaha iyo dadka ay go'aansanayan inay dunida kula gorgortamaan Runta Ilaah. Fikirka baniaadmiyeed ee la rabo in dadka la qanciyo si ay kuu ogoladaan in kastoo ay waxay rabaan ilaahiyan ahayn, ma ahan mid Ilaah raali ka ahaan doono oo boqortooyadiisana laguma gelyo.
Inta uu Injiilka soo maray taarikhda, weligeedba is af garasho la'aan, silcin iyo diidmo injiilka la diidayo way jiri jirtay. Haba ahaate ee, haddii aan diyaar u nahay inaan u xurno wax kastoo ay nagu qaadanayso marka si qaldan naloo fahmayo ama si qaldan wax noogala sheegayo, oo weliba xataa aan gareyno heer si bayaan ah nagula nacayo addeecista aan addeeceyno Ciise kuna

addeeceyno isla sida ku qoran Eraygiisa, haddaba waxaan la kulmi doonnaa guul la yaab leh sharafta Rabbiguna way muuqan doontaa!

Masiixinimada Baybalka way sii lacifeysa

Sanado badan ayuu sheeddaanka dunida u soo diyaarinayey inay raacdo waddadiisa iyo hogaankiisa. Isla sidaasna kiniisadda waxaa la jecleysiyey oo lagu jiitay ceeb iyo inkiraad ay kiniisadda soo martay qarniyada la soo dhaafay. Fikiradda Baybalka laga qabi jiray way sii baaba'aysa oo dadkii kiniisadda aasaasay haddii ay maanta yimadaan waxaa loo arki doonaa inay yihiin kuwa qariib ku ah kiniisadda.

Si tartiib ah ayaa looga foganaya hogaanka Erayga Eebbe oo maalmahan waxa inta badan lagu hawleysan yahay oo la maqlaya in iska hor imaadyo fara badan ka jiraan waxyaalaha la wacdiyo. Fikiradda Ilaah laga qabo, sida uu Ciise bikrad uga dhashay iyo shaqada uu iskutallaabta ku qabtay aad bay uga duwan yihiin sida ay horaan wax ahaan jireen. Waxyaalaha ugu muhimsana oo rumaysadka xoojinayey oo ay dadka kiniisadda ay ku aasaasantay xoogga saari jireen maanta waa la wada inkiraya.

Waxaan si bayaan ah u aragnaa dadka oo rumaysadka inkiraya. Isla dadkaas waxay soo sarayan qoraalo gacan siinaya oo ay ku difacayan diidmada ay rumaysadka ku diidayan. Madaxda madhabyada qaarkood way ka fejigan yihiin meelahan oo waxay culumadooda tacliinta Baybalka ku dhereyaan ku boorinayan inay dadka kiniisadahooda ka tirsan dacwo ku furan, badankooduna waa kuwa ka mid ah oo weliba gacan ka geystan hormarka kiniisadahooda. Kuwa badan oo awliyadahan ka tirsan afka ma kala qaadi karaan madaama ay ka baqayan in madaxdooda ay ku tiriyan dadka loo haysto inay si qaldan Baybalka u fasirayan oo weliba waxay ka cabsanayan in si bayaan ah loo canaanto oo kiniisadda looga saaro. Tani waa mid lagu tiring karo xumeynta xuquuqda kumanaanka kun ee qof oo rumaysadkooda lagu xad gudbayo. Saa ay tahayna, Ilaah ayaa mahad iska leh oo waxaa jiraan kumanaan kun oo rumaystayaasha dhabta ah oo ay indhahooda furmeen oo arken waxyaalaha daran ee agagaarkooda ka dhacaya oo weliba fahmeen dagaalka socdo wuxuu ku saabsan yahay.

Waxyaalaha soo butaceen sida "wacdiyayaalka caanka ah," "hormarka maalqabeenka," "ha'yadaha kiniisadaha ka soo jeedo" iwm kama duwano dadka ama ururada deminayaan kana soo horjedaan shaqada Ruuxa Quduuska ah. Nacay ka weyn ma jiro nacaybka kiniisadda hawsha Rabbiga dib uga laabatay. Qofka ama ururka dib u laabtay waa kan dhedhemiyey oo garanayo kan uu Ilaah yahay iyo wuxuu naga doonayo oo dabadeetana dib uga laabtay. Laguma tiring karo dadka Ilaah ka fog oo aan garaneynin inay ka fog yihiin amaba ay cabsi u geysatay. Wuu garanaya waxyaalaha loo yaqaano hibooyinka iyo karaamada Ilaah laga helo maxaa yeelay wuxuu ka mid yahay kuwa *dhadhamiyey eraygii wanaagsanaa ee Ilaah iyo xoogagga wakhtiga iman doona* (Cibraaniyada 6:5), saa ay tahayna wuu diiday inuu addeeco Rabbiga runtana ugu adeego. Natiijadeeduna waxay tahay, marka ay kuwa kale kulama xoog leh la yeelanayan Ilaah, wuxuu dareemaya hinaas oo wuxuu ku fikiraya sida uu iyaga ku boqon goyn lahaa. Wuxuu dareemaya inuu ku laasiman yahay inuu burburiyo wax uu isaguba horey u dareemay uu gadaal dambena ka diiday.

Waxay u egtahay inay la yaab tahay laakiin waa arin jirta, oo jagooyinka ka jiraan kiniisadaha heerka sare ah maanta waxaa haystan dadka noocaas ah. Waxay xoogga saarayan injiil wata hab maamulka adduunka taasi oo laga tirtiray hogaanka Ilaahnimo iyo Alle ka cabsasho.

Waa meelahan iyo hab dhaqankan meesha dembiga lagu dedo oo Erayga Ilaah iyo hogaankiisana daaqadda laga tuurayo. Markii uu Wadaad Swiden caan ku ahaa barnaamijyada uu raadiyo ka soo daayo, oo ka soo laabtay booqasho uu ku sameyey gobolka la yidhaahdo Easter Island, mid ka mid ah joornaalada kuwa ugu caanka ah ayaa qoray in garbihiisa lagu arkay uun yar, aan isha

lagu arki karin oo isaga ku hogaaminayey wuxuu ku hadli lahaa! (Afonbladet, 17 Abriil 1988). Dadku waxba kama dhihin qoraalkaas, laakiin marka dhinaca kale laga eego, waxyaala badan iyo doodo badan ayey ka soo jeedinayan markay Masixiinta ka hadlaan wax ku saabsan ibliiska!

Hal Injiil oo Keliya!

Kala qaybsanaantii madhabyada Kiniisadaha u dhaxayn jirtay iyo doodihii ay ku doodi jireen hadda waa laga baxay. Hadda waxyaalo kale oo aad muhiim ah ayaa lagu mushquulsan yahay, waana muhiim in dagaalkan cusub la xoojiyo. Waa qiimeynta hawlaha Rabbiga iyo hogaanka Ruuxa Quduuska ah tan aan ku ogaan karno meesha lagu kala duwanaan lahaa maanta.

Su'aasha muhiimka ah oo aad is weydin lahayd waxay tahay inay wacdiyayaalka ku wacdiyaan Runta Baybalka ku saleysan mise injiil kale. Midda kale miyey rumaysan yihiin hawsha Ruuxa Quduuska ah sida aan uga arkeyno nolosha Ciise Masiix iyo Faalimaha Rasuullada? Injiilka waa farriin wanaagsan oo rabbaani ah uu Ciise ballanqaaday inuu ku fullin doono muucjisooyin, calaamado iyo yaabab.

Qaar ayaa jira oo afka aad uga faaniyo hadalada Baybalka laakiin ficiladooda ma dhamo. Ma rajeyaan muucjisooyin, uma duceyaan kuwa buka mana tix geliyaan huwinta ama baabtiiska Ruuxa Quduuska ah. Way yasaan ku hadalka afafka kale, waxayna xoreen qibradaha rabbaaniga ah kuwaasi oo ah mid ka mid ah tiirarka iyo awoodda tiirinayo injiilka. Dunida iyo awooddeeda iyo cilmigeeda ayey macaawino ka weydistan bedelkii ay Ilaah iyo kheyrka Ruuxiisa lagu helo.

Kan ayaa ah meesha arinta uu dagaalka ka taagan yahay maanta. Su'aaladan ayaa ka mid ah kuwa ay dadka jagooyin uga helaan heerka iyo fikiradaha ay ka qabaan awgood natiijadeeduna waxay ahaaneysa kiniisad caasisay. Arinta oo dhanba waxay ku xiran tahay waxa loogu yeedhay *Christendom* ama boqortooyada fikiradaha masiixinimo oo waddada saxda ah ee wax baridda ka leexatay oo u leexatay wax baridda qaldan; dib u laabasho diininimo, hab aduun ku dhaqasho iyo muran ka keenidda waxbaridda taasi oo lagu doonayo in lagu wada midoobo hal fikirad oo adduunka ka jirto, qaybta kalena waxay ku xarbineysa inay ku laabato injiilka dhabta ah, Ciise Masiix, iskutallaabta, rumaysadka ku saleysan Baybalka iyo shaqada Ruuxa Quduuska ah.

Qaar kalena waxay umaleynayaan inay haddii ay dabiicadaha kor laga arko maamulaan ay keneyso midnimo. Maya, seefta Erayga Ilaah waa inay si adag u sii guda gashaa, iyagoo kala sooceyso ruuxa iyo nafta, runta iyo waxyaalaha beenta ah iyo weliba inay iftiinka ka soocdo mugdiga.

Kiniisaddu Way Sare Joogsaneysa

Maanta, iftiinka Ilaah wuxuu caddeynaya waxyaalaha dadka bedelayaan ee ka yimado ruuxa kuwa mucaaradka ku ah Masiixa iyo kiniisadda si ay kiniisadda Axdiga cusub ugu sara joogsado sharafteeda, iyadoo xor ka ah hab nooleydka dunida iyo la gorgortanka runta oo ay ahaato wax alla wuxuu Ciise ka rabo inay ahaato.

Waxaan markhaati u ahaan doonnaa kiniisadda oo iska hurgufeyso "xabsigii Baabilon" oo ku noqoneyso Sayoon. Sababtaas awgeed Rabbigu wuxuu ku leeyahay iyada, *Sare joogso, oo dhalaal, waayo, iftiinkaagii waa yimid, oo ammaantii Rabbiguna way soo baxday oo ku iftiimisay. 2 Waayo, bal ogow, dhulka gudcur baa dabooli doona, oo dadyowgana mugdi dam ah ayaa qarin doona, laakiinse Rabbigaa soo bixi doona oo ku iftiimin doona, oo ammaantiisana korkaagaa lagu arki doonaa.* (Ishacyaah 60:1,2).

Waxyaalaha waddamadeena ka dhacayaan ma xumo ee waa waxyaalo wanaagsan! Way wanaagsan tahay markaan go'aan adag ka qaadaneyno waxyaalaha aan doonista Ilaah ahayn markaan joogno meelaha ay ka dhacayaan, haddii ay ka jirto kiniisadda ama dunida. Way wanaagsan tahay markay kumanaan kun u socdaalayaan xornimada, farxadda iyo awoodda

maxaa yeelay waxay go’aansadeen inay Ciise ku rumaystan isla sida uu Baybalka ku macneynayo Isaga. Way wanaagsan tahay in jiritaanka Ruuxa Quduuska ah iyo muujinta Rabbaaniga ah ay ka dhex muuqanayaan Kiniisadda.
Way wanaagsan tahay in Masixiinta meel alla meeshay adduunka kaga sugan yihiinba ay qalbigood ka dhiiranadaan oo ay afkooda ka qiraan inay awood u leeyihiin inay bedelaan xaaladda hawada ee xidhiidhka Ilaah lala leeyahay ee dhulkooda. Way wanaagsan tahay markay awliyadaha aaminsan yihiin inay hadduu Ciise ku garab galo hawlaha ay wadaan ay waddamadooda ku badbaadin doonaan!
La yaab ma leh ibliisku waa argagaxsan yahay oo wax kastuu cadaadinaya. Isla sida uu Farcuun yeelay, wuxuu istecmalaya caga jugleyn, af lagaaddo si uu carruurta Ilaah uga reebo xornimada ay helayan oo ay weliba Rabbiga ugu adeegin sida doonistiisa ay tahay. Laakiin isla sida uu Muuse uga leexanin dantiisa ama uu ogolaanin inuu u adeego kan lidka ku ahaa, annaguna waa inaanan u nuglaanin waxyaalaha aan doonista Eebbe ahayn. Xornimada iyo farxadda, iyo jiritaanka uu Ilaah nagula jiro awooddiisa ku jirta nolosheena, aad bey uga sareyan beeca ugu sareyo oo lagu iibsan karo baaquli mishaari ah amaba wax kaleeto oo aad qiimeyn kartid sida taarikhda Masar lagu sheegayo.
Ilaah wax aad u weyn ayuu nagu deeqaya, deeqdaasi naga indho tireyso inaan u nuglaano wax kastoo lid nagu ah. Waxaan ku noolnahay xiliyo la yaab leh; oo waa la kala saaraya sharka iyo wanaagga si aan u awoodno inaan barakooyinka iyo xornimada noogu talagalay ku helno.

47
Saddeed Calaamo oo lagu garto Cusboonaanta

Masixiinta dhabta ah oo dhan waxay u riyaqayaan in la cusbooneysiyo nafsaddooda. Waa riyaaq heer sare ah oo lafahooda ku jira, oo rabo inuu ku dilaaco sida dab ololayo.
Cusbooneysinta ayaa ah waxa keliya oo lagu xalin karo dhibatooyinka ku wejaxan shaqsiga iyo bulshada. Ciise wuxuu Yooxanaa 15:5 kuk yidhi, xalka keliya oo dhammaan shaqsiga iyo bulshada loo yahoo. Ciise wuxuu ka leeyahay Yooxanaa 15:5, *la'aantay waxba ma samayn kartaan.* Shaqsi kasta ama bulsho kasta oo aan Ciise hogaamiyaheeda ka dhiganin way hoogtay maxaa yeelay ma jiro midkood oo ku noolaan karo “anshaxa masiixinimada” oo keliya. Waxaan u baahannahay inuu dab nooga soo dego samada, dembigeenana nagala dhaadhiciyo badbaaduna u helno. Waxaa loo baahan yahay rag iyo dumar Ilaah ku hor sujuudi doonaan oo naxariis ka baryayaan Isaga, xaqnimo iyo macaawino, waana inay si joogta ah ku sameyaan ilaa ay dabkaasi lagu metelay awoodda Ilaah ku liqo *waayo, Ilaaheennu waa dab wax baabbi'iya* (Cib 12:29). Markuu dabkaasi na na dhuunjiyo, waxaan si buuxda ugu hogaansameyna ruuxa, annago nolosheena oo dhan la daahiriyey, oo ku dhiiran wax kastoo aan sameyneyno. Waxaan dab u ahaaneyna Rabbiga!
Hadda Ruuxa Quduuska ah aad buu u fejigan yahay si ka weyn sida uu weligiis iisu diyaarin jiray, wuxuuna si xoog leh ugu hawl jira cusbooneysinta dadka. Dunida way u baahan tahay ficilkaas, kiniisadduna way u baahan tahay Ilaahna raali ayuu ka yahay. Mid ala kii cusbooneysin u baahan wuu helaya. Inta badan waxaan umaleyna in cusbooneysinta uu Ilaah na cusbooneysinayo ay tahay wax uun samada nooga soo dhacayo annagoo aan wax masuuliyad ah qaadin – laakiin ma ahan sidaas. Xataa maalintii Bentekostega, Ruuxa waxaa la soo dejiyey uun markay xerta duceysteen kadib. Waa run waa doonista Ilaah inaan si joogta ah u haysano cusbooneysinta. Haddii aan doonistiisa ku socono oo aan sharuudooyinkiisa cusbooneysinta lagu helayo ku ficiltano, si dhaqso ah oo caadi ay ayey cusbooneysintaasi nolosheena ugu butaaceysa

kiniisadahuna isla sidaas ayey uga faa'idayaan waayo waa doonista Ilaah. Maanta, durbaba waxaan arkeyna calamooyin badan oo caddeyn u ah cusbooneysinta imaneysa.

1. Baraarujin iyo Dib u Habeyn Xerta dhexdooda ah

Ilaah xanaaneyn layaab leh ayuu ku xanaaneynaya mid kastoo xerta Ciise ka tirsan. Ururka waxaa ka tirsan shaqsiyaal. Kiniisadda waxaa ka tirsan shaqsiyaal. Silsilada waxay ka sameysan tahay xibno oo ximin kasto hawl muhiim ah ayey leedahay. Hawlaha kiniisadaha, ururrada iyo dawladda waa inay ujeeddadooda ahaato inay kobcinayaan shaqsiyaal. Ujeeddooyinka kale oo dhan waxay ku soo baxayaan uun madaxtinimo laysku taxayo jaraanjaro lagu kala sareyo, oo noolol maskaxdooda laga abaabulay ku dhisan oo la xarbineyso dhibatooyinkooda, iyagoo aan inaba waxba ka war qabin baahida dadka ama shaqsiga. Maanta Ilaah wuxuu qof kasta oo xerta Ciise ka tirsan ka dhigaya mid Isaga ku xooggan. Wuxuu u muujinaya shaqsiga doorka uu ka leeyahay xagga xidhiidhka Ilaah, xaqa uu leeyahay iyo fursadaha, shaqadiisa iyo masuuliyadaha iyo qalabkiisa iyo xifradaha. Ruuxa Quduuska ah aad buu u hawlan yahay, oo wuxuu qalabeynaya ciidanka Ilaah iyo askari kastoo ku jira ciidanka.

2. Cusbooneysinta Wax Baridda

Ruuxa Quduuska ah waa caawiyeheena oo wuxuu nagu hogaaminaya runta oo dhan. Waa Isaga ka soo dejiyey Erayga Ilaah oo tafsiirkeeduna na siini karo. Qarnigii 1900 aad ayaa loo weeraray Baybalka. Oo xataa wax barid kastana lama dhaafin oo aad baa loo dacaadiyey. Waxaana fursaddas istecmaalay kuwa fasiraadda adduunka iyo cilmi adduunka xoogga saarayaan kuwaasi oo duufsadeen rag iyo dumar badan oo Ilaah u adeegayeen oo ka xayubeen awoodda Ilaah si ay wax bariddooda u bedelaan ulana socda tafsiirka iyo baridda ay dunida gacanta siineyso.

Sheyga ugu horeyey ee aan fahannay wuxuu ahaa inay shaki geliyeen Erayga Ilaah. Bilawgii 3:1 wuxuu Xaawa markay Beerta Ceeden joogtay ku yidhi, *Ilaah miyuu kugu yidhi…?* Wakhtigaas wixii ka dambeyeyna shaki faafintaas way socota oo maantaba Erayga Ilaah isla sidaas ayaa loo su'aalaya. Bawlos waano ayuu ka bixinaya markaan ka arkhrino Korintooska 2aad 11:3 oo leh, *Laakiin waxaan ka baqayaa in maankiinna laga halleeyo lillaahinimada iyo daahirnimada xagga Masiix, sidii abeesadii xeeladdeedii Xaawa ugu khiyaanaysay oo kale.*Ibliiska si fiican ayuu u fahansan yahay in awood, Badbaado iyo xornimo ay ku jiraan Erayga Ilaah. Marba hadduu shaki kugu beero waxaan ahaaneyna kuwa tabar daran, laga guuleystay oo daciif ka ahaadeen dunida noogala baahnaa inaan dhedhen cusbo ka lahaano. Sababtaas awgeed ayaan Ilaah ku mahadineyna awoodda Ruuxa Quduuska ah kaasi oo dhiiranaan nagu siinayo fahanka qoraalka Eebbe oo ku dhigan qalbiyada dadka.

Markuu shaqsiga Ciise Rabbigiisa ka dhigto, Baybalka si caadi ah ayuu uga ahanaya hogaanka noloshiisa. Mar dambe iskuma haleynayo maskaxdiisa iyo awooddiisa liidata inuu ku cabiyo ama ku xukumo waxyaalaha uu Ilaah ku hadlayo ama sameynayo, laakiin isagoo ah adeege aamin ah oo Rabbiga u hogaansan, wuxuu dhahaya, ***Wax kastuu*** *idinku yidhaahdo, yeela* (Yooxanaa 2:5). Calamooyinka iyo yaababka lama adko qofka u hogaansan Rabbigiisa. Wuu og yahay inuu Ilaah yahay la taliyaha ugu weyn, uguna jacaylka badan. Wuuu fahansan yahay dabiicadahiisa wuuna garanaya inuu oofin doono wax alla wuxuu ballanqaaday. Markuu qofka badbaado, awooddiisa iskuma hogaaminayo mar dambe oo ilaah iskuma ahaanayo. Mana joojin doono inuu istecmaalo hadiyadda uu Ilaah ka helay ee xagga maskaxda, amaba iskuma haleyn doono waayaragnimadiisa xaddadan laakiin wuxuu oganaya inuusan waxba isku deeqi karin. Marka aqoonta uu qofka leeyahay iyo muujinta ama doonista Ilaah iyo Eraygiisa isqilaafayaan, markaasi waa Erayga Ilaah kan wax lagu xukumayo. Ciise waa Rabbiga noloshiisa iyo maskaxdiida, waana marka ay dhiiranaanta iyo isku haleynta Erayga Eebbe ay ficilgal ahaneyso. Shaki, muran iyo iska hor imaadka maanka baniaadminimo ee lagu hayo Erayga Ilaah waa inay baaba'do. Mar dambe ma

jiri doonto ku fikirka iyo ku dhaqashada dembiga.
Qofka qalbigiisa sidaas u jilcay, kaasi oo ruuxiisa fejigan yahay oo addeecayo amarada Rabbigiisa, ee aan isku haleyneynin aqoontiisa baniaadmig, wuxuu bilabaya inuu qoraalada ka barto Ruuxa Quduuska ah. Ilaah waxyaala badan ayuu u haya qofka uu rabo inuu barto si uu u ahaado mid si joogta ah guuleysta. Xaqnimaduna waxay ahaneysa arin u dhisan isaga oo xakameyntuna way baaba'aysa. Rumaysadkiisa mar dambe iskama ahanayo mid anshax diini ku dhisan. Laakiin hadda rumaysadku wuxuu ahanaya mid ay noloshiisa oo dhan ku saleysan tahay. Ciise wuxuu isaga u yahay mid dhab ah, Isagoo dadka dhabta ah ka caawinayo marxaladaha dhabta ah ee nolosha lagala kulmo maalin waliba Isagoo sameynayo yaabab dhab ah iyo muucjisooyinka maxaa yeelay Isagu ma bedelmin, *Ciise Masiix waa isku mid shalay iyo maanta iyo weligiiba* (Cib. 13:8).

3. Calamooyinka Hibooyinka Ruuxa

Kiniisadda waxay ka aasaasantay awood Rabbaani ah taasi oo ay kaga waajiban tahay inay ku noolaato kuna qulqusho. Waa uun xagga Ruuxa meesha aan kaga awood badineyno ibliiska. Waa inaan doonista Ruuxa ku hadalno (Galatiya 5:16) maxaa yeelay xarbigeenu ma ahan mid ku saleysan hilibka iyo dhiiga, laakiin waa mid aan kula dagaaleyno awoodaha iyo amarada (Efesos 6:12), oo hubab keenana ma ahan kuwa caadiga ah ee laakiin waa kuwa ku imanayo Ruuxa (2 Korintos 10:3-5).
Ibliiska hadduu awoodo inuu naga saarno heerka ku dhaqashada ruuxa oo uu naga dhigi karo kuwa sida damiirkooda la quman ku dhaqmayaan, wuu naga guuleysan kara. Aqligeena aan inta badan ku socono, doonisteena ama dareenkeena heerka sare ah kuma heli kagama guuleysan karon ibliiska. Waa rumaysadka aan Ciise rumaysannahay iyo awoodda Ruuxa Quduuska ah, waa baabtiiska lagu helo Ruuxa Quduuska ah, iyo hibooyinka Rabbaaniga ah kuwa guusha ugu heerka sareyso lagu helayo.
Guusha waxaa uun lagu go'aamin kara ku tiirsashada Ruuxa Quduuska ah iyo istecmaalka aan awooddiisa kaga adeegsaneyno nolosheena. Waxaan si buuxda nolosheena uga adeegsaneyno hibada Ruuxa Quduuska ah haddii aan rabno inaan tixgelino Caleemo saarka Ugu sareyo. Waxyaalahan la'aantood, waxaan nahay sida booyad shidaal la'aan ah – weyninkiisa, isha u roon – laakiin waa eber. Ilaah wuxuu rabaa in qof kastoo xerta Ciise ka mid ah lagu baabtiiso Ruuxa Quduuska ah, kuna socdaan waxyaalaha caadiga ah oo Ilaah aasaasay.
Masixiinta badankood cabsi ayaa ku jirta, Many Christians have been fearful, amaba si fiiro dheer ayey kaga sugan yihiin markay imaato waxyaalaha ku saabsan muujinta ruuxa. Sidan ayey weligeedba wax ahaan jireen laakiin cusboonaan weligeed ma hergelin iyadoo aan Ruuxa Quduuska ah loo ogolaanin inuu si buuxda u hogaamiyo nolosha dadka. Waa inuu iyaga ku hogaamiyo toobadkeen iyo cusboonaan, si ay nadiif ku ahadaan, quduusiin ku ahadaan, awood helaan, oo weliba xigmaddiisa iyo joogistiisa ay noloshooda si buuxda uga dul muuqato carruurtiisa.
Waa inaanan dunida ama aqoonta baniaadmiga loo istecmaalin joojinta muujinta Ruuxa. Ducooyinka runta iyo daacadnimada lagu duceysto waxaa lagu helaya natiijo awoodda Ilaah ku jirto.

4. Caddeynta Dembiga iyo Toobadkeenka

Mar alla markuu markay cusbooneysin jirto Ilaah wuxuu ku bilabaya Kiniisadda. Waa in horta la baraarujiya haddii ay hurudday. (Dunida way dhimatay waxayna u baahantahay in dib loo cusbooneysiyo, ma ahan uun in la baraarujiyo oo keliya.) Dib u laabashada, daneysi la'aanta, kibirka, iyo isku haleynta waxyaalaha hadda ka hor lagu guuleystay waa in la baabi'iyo. Dabadeetana awliyadaha waxay si xoog leh u hawl gelayan inay ku shaqeyan hogaanka Ruuxa Ilaah oo Rabbigooduna wuu adeejin doonaa iyaga si ay nafsi kale u badbaadiyan. *Cusbooneysin*

ma jirto haddaanay jirin badbaadinta nafsadda kale.
Maanta Ruuxa Quduuska ah waxaa lagu wada shubay dadka *oo dhan (*Faalimaha Rasuullada 2:17) wuxuuna ka dhex shaqeynaya quruun kasta. Waxay u baahan yihiin oo keliya inay ka maqlaan Ciise Masiix, iskutallaabta, dhiigga, dhaxalkeena, iyo awoodda iyo sharafta Ilaah. Ruuxa Quduuska ah hawl aad u weyn ayuu ka sameyey nolosha kuwa badan oo aan horey Masiixa u rumeysneyn mar kasta oo lagu tallaaba qaadayo cusbooneysin, iyagoo loo muujinayo loona sii jiidayo xagga iskutallaabta. Fursad tan ka wanaagsan weligeen lama kulmin hadda ka hore. Hadda ka hore tirada badan ee dadka rumaysanayan Masiixa waa mid aan dhicin. Doodaha diimaha kala duwan aad bay u badanayan. Dadka su'aalo badan ayey qabaan. Fursadda ka faa'ideyso oo kula kulan meel alla meesha ay ku sugan yihiin. Xambaarso su'aaladooda, fikiradaha kala duwan ee ay aaminsan yihiin iyo fahankooda oo dhammaan u wada jeedi Ciise. Ma jiro qof si qaldan u fahansan Ciise maanta. Samee isla sida uu sameyey Filiboy sida ku dhigan Faalimaha Rasuullada 8:35. Bohonkan Itoobiyaanka ahaa, isla sida ay dad badan maanta yihiinba, wuxuu akhrinayey Ishacyaah 53 isagoo aan inaba fahansaneyn wuxuu akhrinayo. Filiboy muxuu ku dhaqaaqay? Miyuu bilaabay dooda kuluun oo arimaha diimaha ka hadlayo oo bohonkii ku waalay doodo? Maya. *Filibos baa afkiisa furay, oo intuu Qorniinkan ka bilaabay ayuu isaga ku wacdiyey Ciise.*

5. Quduusnimo iyo Nadiifnimo ku jirta Dadka Ilaah

Marka kiniisadda la baraarujiyo oo dib loogu hogaamiyo Baybalka, quduusnimada dhabta ah caadi ayey ahaneysa. Meesha ay cusboonaanta ka bilaabaneyso, waxaan arkeyna jiritaanka, awoodda, xigmadda iyo ammaanta Ilaah oo loo arkayo hab aan hadda ka hore loo arkin si bayaan ah u muuqato. Cibraaniyada 12:14 waxay leedahay, *Nabad kula dadaala dadka oo dhan, iyo quduusnaanta aan la'aanteed ninna Rabbiga arki doonin.*
Ibliiska wuxuu ku dadaalaya inuu daciifiyo faraqa u dhexeyo dunida iyo kiniisadda, boqortooyada mugdiga iyo Boqortooyada Wiilka Qaaliga ah ee Ilaah. Sidaa ay tahayna, boqortooyada mugdiga ama kan sheeddaanka wuu baaba'aya maxaa yeelay faraqa u dhexeyo boqortooyada sheeddaanka iyo kan Ilaah wuu sii weynaanaya, waxaana la sii caddeynaya wasakhda dembiga, beenta, iyo laba faras ku socoshada halkaas ka cad. Waxyaalaha horey loo qariyey sida, mucaaradnimada, u hunguri weynida hogaanka, baahida kala duwan iyo hunguri weynidaba waa la soo bandhigaya.
Markay cusboonaan dheceyso, cabsida Rabbiga ayaa ku soo dul degeysa rumaystayaasha iyo wacyo gelin joogta ah ee lagu garanayo jiritaanka Ilaah oo dareenkooda ku baraarujinayo dabiicadaha qaarkood lama ogolaan doono. Daahirinta ma ahan isha lagu arki karo. Tusaalo ahaan, ma ahan dharka oo loo xiranayo sida dadkii hore ama codka oo la bedelo marka la wacdinayo. Daahirsanaanta waxay ka bilaabaneysa qalbiga si wax alla wixii ka soo baxo ay ahadaan khery iyo fail.
Daahirsanaanta waxay iga dooneysa in aan si buuxda ugu adeego ka quduuska iga dhigay. Ma ahan inaan sharka ka joogayo si aan dadka hortooda qof wanaagsan ugu ahaato, laakiin waxaan xooraya wax kastoo shar ah si aan isaga leexiyo wax kastoo lid ku ahanayo subkinta aan Ilaah ka heli lahaa. Waxaan iska dhigaya mid ka xuroobay isku haleynta maalka adduunka, maxaa yeelay Ciise ayaa wax kasta iiga qiima badan. Markay barakooyinka dhinac kastoo nolosheyda ah iiga yimadaan, uma addoonsamayey waxyaalahas barakada ii ah. Waxaan ku mahadinaya oo aan ogahay inaan ka helay kan aan u adeegayo. Wax cabsi ah ma qabi, maxaa yeelay dareemadeyda waa saxsan yihiin oo Ilaah oo keliya ayaa istaahila ammaanta oo dhan!

6. Khilaaf iyo is af garasho la'aan

Tani waa calaamad la yaab leh oo tilmaameysa cusbooninta maxaa yeelay waxaan og nahay,

inteena xerta Ciise ah waxaa nagu waajib ah inaan ka shaqeyno midnimada. Ciise wuxuu ku duceyey Yooxanaa cutubka 17 wuxuuna noogu duceyey inaan midawno. Saa ay tahayna midnimadani, taasi oo ah mid nooc ruuxnimo ah, taasi oo si bayaan ah u soo bandhigi karo Ruuxa Quduuska ah markaan ammaaneyno Ciise, Eraygiisa rumaysano oo aan sameyno wuxuu nagu amrayo. Erayga Ilaah oo la caddeeci waayo markii lagu soo qabto midnimada waxay dhalineysa oo keliya madnimo mooqufkeeda yahay mid baniaadminimo lagu raadinayo taasna doonista Ilaah ma muujineyso. Dadaalkaasi baniaadminimo natiijadeeda waxay ahaneysa maxabiisnimo. Xusuuso Daa'uud walaalkiis kaasi oo isku deyay inuu qaboojiyo rumaysadkiisa heerka sare ah isagoo qaynuunada baniaadminimo adeegsanayo waxaa suurtagal ah in Goliyaad uu iisu arkayey mid aan laga adkaan karin. Laakiin Daa'uud wuxuu aaminsanaa kuna socday hogaanka Eebbe iyo ballamadiisa. Wuxuu isku haleynayey oo keliya awoodda Ilaaha sareya kan ah Rabbiga Rabbiyada inuu u ficiltami doono.

Ruuxa Quduuska ah wuxuu keenaya midnimo taasi oo dadka u ogolaaneyso dadka inay hergeliyaan hawlaha qalbigooda lagu beeray. Marba haddii aan weli dunida joogno, suurtagal ma ahan inaan dhammaanteenba aan hal mooquf ka lahaano marxaladaha, sidaa ay tahayna waa suurtagal inaan ku wada faraxno midnimada aan kuu leenahay Ruuxa.

Markaad eegtid wuxuu Rabbiga ka sameyey nolosha shaqsiga, waxaad asaga ama iyada ku eegeysa "okiyaalaha ruuxa." Waxaa suurtagal ah inaadan ogolaanin wax kastoo nolosha shaqsigaas laga arkayo laakiin waxaad daremeysa subkinta oo waxaad shaqsiga u oglaneysa inuu ku sii hawl galo wuxuu Rabbiga u subkay.

In si joogta ah dadka isha lagu hayo, la saxo, oo dadka lagu deydo si midnimo loo helo ma ahan arin dhalineyso sawirka dhabta ah ee loo baahan yahay; laakiin bedelkeeda waxay keeneysa, cabsi iyo wax aan daacad loo ahayn in la raaco. Dadka Ilaah oo dhan way fahansan yihiin muhiimadda ku jirta midnimada oo waxay weliba rumeysan yihiin inuusan jirin qof si bayaan ah iskiisa u haysto runta jirta, laakiin taasi macnaheedu ma ahan inay sabab runta Ilaah dunida lagula gorgortamo si dadka looga farxiyo. Waa inay ogoladaan xornimo dhab ah iyo badinta tirade, iyagoo ku taagan waxay toos uga heleen Rabbiga.

Ma jiro qof masiixi ah oo rabo inuu xarbiyo, laakiin si joogta ah ayey u dhacdaa. Dhabtii murankan iyo doodahan badankood way muujinayan waxyaalaha wanaagsan ee nolosha ka dhex dhacayaan. Ciise naftiisa wuxuu Matayos 10:34 ka yidhi, *Ha u malaynina inaan u imid inaan nabad dhulka u keeno; uma aan iman inaan nabad keeno, laakiin inaan seef keeno.* Seefta uu Ciise ka hadlayo waa Erayga Ilaah. Cibraaniyada 4:12 waxay leedahay, *Waayo, hadalka Ilaah wuu nool yahay, waana shaqeeyaa, oo waa ka af badan yahay seef kasta oo laba af leh, isagoo ka dhex dusaya ilaa kala soocniinta nafta iyo ruuxa,* ***iyo xubnaha iyo dhuuxaba, waana kala gartaa fikirrada iyo waxyaalaha qalbiga ku jira.***

Erayga Ilaah mar kastaba wuxuu leeyahay awoodda wax lagu kala saaro. Ciise wuxuu ballanqaaday inuu rujin doono wax alla wuxuusan Aabbaha beerin maxaa yeelay waa uun waxyaalaha ka yimid xagga Ilaah oo Isaga ka dhasheen kuwa lagaga guuleysan karo dunida (1 Yooxanaa 5:4).

Ciise wuxuu rabaa kiniisad guuleysato ah, sababtaas awgeed wax alla wixii mucaarad ku ah Asaga iyo Eraygiisa waa in la rujiyo. Sidaa ay tahayna waa inaan kala ogaano dhibaatada iyo shaqsiga. Haddii aad Ruuxa u hogaansan tahay, waxaa suurtagal ah inaad aragtid kuna silceysid waxyaalaha badankood awoodda jidhka lagu fulinayo, laakiin taasi kuma siineyso sabab aad ku jawaab celisid awoodda jidhka adigoo dadka kale eedeyneysid ama awoodda jidhka isku difaaceysid markay arinta xuntahay. Haddii aad Ruuxa u hogaansan tahay qof kasta ayaad la saaxibi karta, qof kasta ayaad u naxariisan karta oo dadka oo dhan ayaad nabad kula noolaan karta inta adiga lagaa doonayo. Taasi macnaheedu ma ahan inaad runta dunida kula

gorgortameysid ama ma ahan inaad joojineysid u hogaansamidda Ruuxa. Macnaheedu waxaa weyaan inay muhiim tahay inaad kala soocdid shaqsiga iyo dhibka jira, si haddii ay dhacdo inaad la kulantid marxaladdii Danyeel kula kulmay hogga, rumaysadka iyo iimaanka aad Ilaah aaminsan tahay ayaa ku badbaadin doonaa oo kuu soo saari doonta xornimada dhabta ah.
Dadka badankood waxay umaleynayaan in baraarujinta iyo cusbooneysinta ay waxba ahayn oo aan ka ahayn roobab waweyn oo mar dambe di'I doona, qalbiyada istareexinayo, nasinayo oo farxad geliynayo. Maya, waa wakhti heer sare ah oo lagu jiro xarbiga iyo dagaalka ruuxiyanka ah! Waxay u yara ekaaneysa in fool xun sida guri weli dhismo ka socoto, laakiin dhamaadka waa wax la jacleysanayo, ee haddaba rumaysadka ku adkeyso intay aanay siigada deign! Xusuuso, markuu Ilaah sameynayey mid ka mid ah muucjisooyinkiisa kuwa ugu waweyna, kala qaybinta bihiyii badda caas, Fircoon iyo ciidankiisa waxay ku jireen shuqulka kan xarbiga ugu *heerka sareyey*; saa ay tahayna waa uun laga guuleystay. Ammaani Ilaah ha u ahaato!

7. Dhiiranaan iyo Barnaamijyo

Cusboonaanta waxay caddeyneysa baraarujin, walaaqid iyo *bilawga barnaamij la bilaabayo.* Maanta xerta Ciise way ka xoog badan yihiin sida ay waagi hore ahaan jireen. Durbaba waxay fahmayaan inuu Ciise *iyaga* amray, ma ahan jiiraankooda, si ay u hergeliyaan adeejintii ugu heerka sareysay. Baahida kuwa aan xerta Ciise ku biirin, iyo weliba taasi oo ay la xidhiidhto baahida ay dadka u qabaan inay helaan waxyaala badan oo ku saabsan Ilaah, waxayna ku dhiirigelinayan inay qadaan tallaabooyin badan uu Ruuxa Quduusak ah ku hogaaminayo, ruuxa xornimada, kaasi oo iyaga ku beerayo fikiradaha, qorshooyinka iyo barnaamijyada si ka weyn si aan weligeed la arkin.
Boqolaan sano, ruuxyada diinta oo si adag isku deyey inuu dadka guumeysto, gacan maroojiyo oo uu naafeeyo dadka Ilaah laakiin kuma guuleysanayaan maalmaha ay cusbooneysinta jirto. Dabadeetana Ruuxa Quduuska ah wuxuu dadka ku subkaya hawlaha Rabbiga loogu adeegayo oo awoodda Rabbiga ayey ku tallaabo qaadayaan iyagoo cabsi la'aan ah oo meela badan ayey tegayaan. Iyagu waa dadka rumaysadka u hogaansamay oo Ilaah ka arkeen waxyaala aad u cusub oo waxay leeyihiin, "Ilaah ayaa *ila jira,* Wuu awooda Wuuna *i* istecmaalaya."

8. Kiniisado Cusub

Waxaan ku noolnahay qarni cusub. Fac cusub iyo beer goys ayaa ina sugayaan. Ilaah wuxuu habeynaya qalab cusub iyo maqsiino ayuu weliba dhisaya. Taasi macnaheedu ma ahan inuu ka leexday hababkii hore uu istecmaali jiray. Wuu istecmaalaya wax kasta oo laga helayo meel waliba oo la istecmaali karo. Laakiin taasi Ilaah kama hor istaageyso inuu dhiso qalab cusub uu adeegsan doono, waana isla sidaas wuxuu sameynayo fursadna way u banaan tahay inay kuwa badan ogoladaan inuu Eebbe iyaga adeegsado.
Haddii aan aaminsannahay beer goyska, waa inaan aaminsannahay kiniisado cusub oo kobcayaan. Ilaah wuxuu rabaa kiniisadaha Erayga Ilaah laga wacdinayo oo ay raacayaan ama caddeynayaan calaamooyinka iyo yaababka awoodda Ilaah. Wuxuu rabaa dadka oo Asaga ku caabudayaan xornimo iyo hogaanka Ruuxa Quduuska ah. Wuxuu rabaa kiniisadaha ducada ay ka dhex ifeyso oo oo ay xerta Erayga Ilaah meel waliba ku fidineyso adduunka afartiisa daraf.
Wuxuu rabaa kiniisadda dadka rumeysadka ku cusub xanaano wanaagsan siineyso oo waxna sii bareyso oo iimaanka cusub ku kobcineyso iyo meesha oo xerta Ciise lagu hogaaminayo meelaha ay Erayga Ilaah si buuxda uga baranayaan ugana sii kobcayaan xagga Ruuxa.
Waxaan galnay xiliga hawlgalka ugu heerka sareyo ee Ruuxa. Ilaah wuxuu diyaarinaya beer goys uu ka diyaarinayo gees walboo adudunka korkiisa ah waanna ku ammaaneyna Isaga taasi. Sakaariyaah 10:1 waxay leedahay, *Xilliga roobka dambe roob ka barya Rabbiga, isagoo ah Rabbiga hillaaca sameeya, oo iyaguu siin doonaa roob wanaagsan, oo wuxuu qof kasta beerta ku siin doonaa doog.* Aan Ilaah ka barinno inuu Ruuxa ducada iyo cusbooneysinta ku soo

duldejiyo jidhka Ciise dabadeetana waa inaan iisu diyaarino beer goyska. *Wuxuu dadka siiya roobabka iyo abuurka dhulka.*

48
Wakhtiyada Cusbooneysinta

Markuu Yeremyaah oo ahaa nebi arkay xaaladda foosha xun ee ay ku sugneyd Yerusaalem, wuu ilimeyey. Wuxuu arkay derbiyadii oo la burburiyey, irdihii oo la riiqay, dadkiina baaba'ay. Ma jirin dad isugu yimid xafladda cadawgana amarkuu haystay.

Baroorashadii 1:6 Yeremyaah wuxuu ku qoray in *sharaftii oo dhan ay ka tagtay Inanta Siyoon.* Inta uu nebiga eegayey baabi'ii darnaa, waxaan jawaabta uu ka bixiyey ka akhrineyna Baroorashadii 2:11 oo leh, *Indhahaygii ilmay la gudheen, uurkuna waa i gubanayaa, Oo aad baan u caloolxumahay, waayo, waxaa la baabbi'iyey dadkaygii, Maxaa yeelay, carruurtii iyo naasonuugyadiiba jidadka magaalada bay ku itaal darnaadaan.*

Israa'iil iyaga ayaa dhibka iisu keentay maxaa yeelay Ilaah bay ku caasisay oo waxay iisu dhiibtay caabudaadda ilaahyo kale.

Waayo, dadkaygii laba waxyaalood oo shar ah ayay sameeyeen, way iga tageen anigoo ah isha biyaha nool, oo waxay qoteen berkedo daldaloola oo aan innaba biyo celin karin. (Yer 2:13).

Alle ku caasinta waxay masiibo u wada keentay carruurta Israa'iil.

Tan waxaa si bayaan ah looga hadlay Yeremyaah 2:19, *Haddaba xumaantaada ayaa ku edbin doonta, oo dibunoqoshadaada ayaa ku canaanan doonta. Sayidka ah Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Haddaba bal ogow oo arag inay tahay wax shar ah oo qadhaadh inaad iga tagtay anigoo Rabbiga Ilaahaaga ah, iyo inaadan iga cabsan.*

Natiijada Dembiga

Dembiga waa shey aad u xun, waana inaanan si sahlan loo qaadanin. Mar kastaba wuxuu leeyahay natiijo. *Waayo, kii jidhkiisa wax ku beertaa wuxuu jidhka ka goosan doonaa qudhun, laakiin kii Ruuxa wax ku beertaa, wuxuu Ruuxa ka goosan doonaa noolol weligeed ah* (Gal 6:8 NKJV). Saa ay tahayna Ilaah ayaa dembiga nagaga samato bixiyey beeca ugu qaalisana. Ma jiro mid naga mid ah oo fahmi karo qiima ay iskutallaabta Ilaah ku joogtay.

Natijooyinka dembiga meelo badan ayey taabanayaan oo ay ka mid yihiin shaqsiga iyo kiniisadda guud ahaan. Gefka ay Israa'iil gashay dhib uma geysanin oo keliya quruunta oo dhan ee xataa dhulkoodi. Isla sidaasna, maanta, haddii ay kiniisad Ilaah ku caasiso, amaba mahab dhan uu Ilaah ku caasiyo, natiijada aad bay u xuntahay oo dad badan ayaa ku dhibtoonaya. Kiniisaddu waa nuurka dunida sida qoran, *Idinku waxaad tihiin cusbadii dhulka, laakiin haddii cusbadu dhadhan beesho, maxaa lagu cusbaynayaa? Dabadeed waxba tari mayso in dibadda loo tuuro oo dadku ku tunto maahee* (Mat 5:13).

Ma jirto wax ka xun kiniisad dhan oo Ilaah ku caasisay, dareenka falka xun ee la galay iyo dagaalka ruuxiga ah ee lagula jiro dunida, oo rabta in ruuxa uu xodxoto iyo tusaalaha qarnigan. Qiima tirka kiniisadda dhexdeeda ah waxay inta badan dhalisay diidmada injiilka oo waxay nolosha kumanaan kun u keentay dhibaato.

Markuu Eli ahaa wadaadka Israa'iil, oo wiilashiisana wadaaddo ahayeen, waxay ku noolayeen noolol Alle ku caasin badan iyo galmo xaraan ah. Si xoog leh ayey sadaqada waaqdhaca dadka kaga qaadayeen oo danahooda ayey ku oofsanayeen oo waxay la seexanayeen dumarka ka adeegayeen Teendooyinka kulamada macbudka hortiisa (1 Samu'eel 2). Natiijada waxay ahayd mid aad u xun. Samu'eelka 1aad 2:17 waxay leedahay, *Oo raggii dhallinyarada ahaa*

dembigoodii aad buu ugu weynaa Rabbiga hortiisa; waayo, raggii waxay quudhsan jireen qurbaankii Rabbiga.
Dembiga halkaas lagu sameynayey wuxuu dadka baray inay xushmad darro kula dhaqmaan Ilaah natiijadeeduna waxay ahayd inuu Ilaahna ka ceshto iyaga ammaantiisa dadka reer Binu Israa'iil. Wiilashii Eli waxay adeen dagaal, iyagoo umaleynayan inuu macbudka iyaga badbaadin doono, laakiin waa laga guuleystay maxaa yeelay waxay ku nolayeen noolol aan daahir ahayn (1 Sam 2:17).

AWoodda Kiniisadda waxay ku jirta Ilaah

Fac kastaba, sheeddaanka wuxuu rabaa inuu kiniisadda ka xayuubo ammaanteeda isagoo ka dhigayo iyada mid addeecista Eebbe ku gorgortanta, dembaabta oo waxyaala kale caabudeyso. Kiniisadda waxaa laga aasaasay jiritaanka Ilaah waana inay xooggeeda oo dhan ka dhigato una hogaansanto Ilaah. Awoodda Ruuxa Quduuska ah iyo hababka kala duwan uu inoogu muuqanayo waa waxyaalaha ugu muhiimsan ee ay kiniisadda ku taagan tahay.
Jiritaanka kiniisadda ee caadiga ah Ruuxa Ilaah waa laga dhex arkaya, kuwa buka waa la bogsinaya, kuwa la cadaadiyey waa la xoreynaya, oo muujinta Ruuxa ayaa toos u qulquleyso iyadoo ay waxba dhibeynin oo naf badan ayaa badbaado ku heleysa. Ibliiska wuu nacayb yahay waxyaalahan oo dhan oo wuxuu ku dadaalaya inuu kiniisadda ka indho tiro waxyaalahan ay awoodda Ilaah ku jirto qaas ahaan muuqaalka Ilaah oo ah meesha keliya ay dhiiranaanta ka heleyso.
Awoodda kiniisadda lagama helo aqoonta dadka ka tirsan, dareenka sare ee ay iyo awoodda doonistooda. Waxyaalahan oo dhan waxay ku taxan yihiin nafta oo waxay uun hawlgal ahanayan haddii loo ogolaado inuu hogaamiyahooda yahay Ruuxa Quduuska ah. Awooddeena waxay ku jirtay Ilaah. Waxaan uun ku guuleysan karna oo aan kuwa badan Injiilka ku gaarsin karna kuna badbaadi karaan markaan adeegsano Ruuxa Quduuska ah. Sababtaas awgeed ujeeddada uu sheeddaanka leeyahay waa inuu mugdi naga geliyo tan. Aad buu u cabsi qaba oo khalkhal ayaa gelaya oo dhimasho ayuu ku dhawaanaya markuu arko inay kiniisadda ku shaqeyneyso awoodda Ilaah.
Wakhtiyadeenan, Alle ku caasin iyo waxyaala la mid ah ayaa fursad u heleen inay kiniisadda ka dhex adegaan. Tobnaanka sanoo la soo dhaafay kiniisadda way fahantay wayna cirib tireysa waxyaalahaasi. Oo mar dhaw waxaa la arki doonaa inay wada fir go'een oo haddaba isbedelo waweyn ayaa laga dareemaya kiniisadda. Dib uga laabashada iimaanka waxaa hadda bedelaya dib u soo cusbooneysinta iyo guusha oo lagu helayo guul. Dadka dib ayey ugu soo noqonayan rumaysadka Ilaah oo sharaftii la dheraatay ee Ilaahna dibu ayey ugu soo noqoneysa iyaga. Ilaah wuxuu soo booqanaya dhulkeena oo wuxuu muujin doonaa gacantiisa barakeysan! Qalbiga dadka oo daacanimo ku jilcay awgeed, wuxuu dadka isku kaya muujinaya inuu yahay kan ay aaminsan yihiin inuu yahay.
Sidaa ay tahayna cusboonaanta kuma imaaneyso dhib la'aan. Waa in laga toobad keeno dembi kasta oo sanam kasta oo la caabudayeyna waa in la burburiyo. Tani waxay ku ficil geli karta oo keliya Ruuxa Ilaah. Halkaasi kama saari karno midnimada Ruuxa. Waa inaan qiranno oo aan ka cararno dembiga oo aan ka leexano waddooyinka dunida.
Sanam caabudidda ma ahan oo keliya inaad mawlac u sameysid waxa aad caabudeysid, laakiin falka diiniga ah oo dhan oo Ilaah lagu caabudayo oo aan laakiin Eraygiisa lagu addeceynin sida uu u dhigan yahay. Sanamka la sheegayo mar kastaba ma ahan inuu ahaado wax la qoray. Waxay xataa ahaan karta fikirad kastoo qaloocan uu baniaadmiga Ilaah ka qabo, taasi oo aan wax gacan siin ah ka haysanin qoraalka kariimka ah. Sanam caabudidda waxay la mid tahay inuu qofka lahaado nooc ilaahnimo oo laakiin awooddiisa la inkirayo. Dadka waxay istecmaalayan erayada sida, "Ilaah," "Ciise," "samatobixin" iyo "jacayl" iyagoo macnaha ay wataan ay tahay mid aad

uga duwan sida ku dhigan Baybalka. Waxay shirciyeynayan dembiga galmada xaraanta ah, qaniisnimada, uurka layska soo ridayo iyo wixii la mid ah, iyagoo micna tirayan dhallashada uu ka dhashay bikradda, sara kiciisa, cusboonaanta, dhallashada cusub, nolosha quduuska ah, xukunka maalinta aakhiro iyo naata. Tani wax kale laguma macnayn karo oo aan ka ahayn sanam caabudid, kuwa waxyaalahan gacan siinayaanna waxaa ku dhici doontaa inkaarta Ilaah. Way sii haysan karaan xafiisyada wadaadnimada iyagoo kibrayaan sida wiilashii Eli, laakiin ma jiri doonto wax sharaf ah oo ay ku heli doonaan taasi oo natiijada dembiyadoodana waxay ahaan doonta dhimasho.

Ilaah dib ayuu u soo cusbooneysinaya Kiniisaddiisa

Waxaan ku noolnahay wakhti uu ibliiska u haysto inuu kiniisadda ka xoogay wax alla waxay haysatay. Laakiin ammaan iyo casaba Ilaah ayaa qarniba kan kale ee looga gubayo ka haysta, Ilaah ayaa naga yaqaana! Meesha ay dhibaato iyo khasaaro kala kulantay, kiniisadda dib ayaa looga dhisi doonaa mar kale.

Dib u soo cusbooneysinta Kiniisadda waa mid hadda socota. Ilaah iskama fadhinayo oo ibliiska kuma eegayo isagoo isku deyayo inuu kiniisadda ku burburiyo khiyaanadiisa. Maya, wuxuu aruurinaya oo uu ku mushquulsan yahay ciidan oo aan waxba ka cabsaneynin Ilaah mooyaane. Wuxuu dhisaya kiniisad jacayl xaqnimada oo xaqdarroda oo dhan ka nyaqnyaqsooneyso (Cib 1:9); taasi oo nacayb dembiga oo laakiin soo dhaweyneyso dembiilaha, taasi oo u riyaaqeyso muuqaalka Ilaah iyo awoodda Ruuxa Quduuska ah oo *Sida deeradu biyaha durdurka ugu harraaddo* (Sabuurrada 42:1). Kiniisaddiisa waxay qiraneysa in Ciise yahay Rabbiga, oo Eraygiisa u haysato inuu u yahay hogaanka keliya oo ay haysato oo waxay diideysa wax kastoo lagu tilmaami karo ku gorgortanka runta Eebbe, wax kastoo ay ku qaadataba.

Cusbooneysinta Ruuxa waxay u qaybsameysa saddex:

Kow—Wax baridda. Haddii aan farriin qaldan ka haysano, sida saxda ah kuma dhaqmeyno. Sanado badan ayuu ibliiska si qaldan u istecmaalay, cayey kuna weji xumeyey Erayga Ilaah oo kuwa badan oo awliyooyinka ka mid ah ayuu sababay inay ka xishoodaan Erayga istecmaalkiisa iyo ku dhaqashada. Sidaa ay tahayna, Erayga Ilaah ma bedelmin oo weli wuu taagan yahay, waa la aami kara laguna dhaqmi kara. Weli wuu shaqeynaya, awood buu leeyahay oo dadkuu xoreynaya; oo haddii aad rumaysatidna waad heleysa ballamda ku dhigan. Ilaah wuxuu Eraygiisa ka leeyahay, *sidaas oo kaluu ereygii afkayga ka soo baxaa noqon doonaa, oo isagoo madhan igu soo noqon maayo, laakiinse wuxuu oofinayaa wixii aan ula qasdiyey, waana ku soo liibaanayaa wixii aan u diray* (Isa 55:11).

Labo —Nolosha. Ruuxa Quduuska ah noolol ayuu ku soo celinaya Kiniisadda. Dadka waxay bilaabeen inay dareemaan nolosha ka soocmidda Ilaah, qoduusnimada iyo xaqnimada. Way nacayan dembiga oo si xoog leh ayey xidhiidh ula yeelanayan Ciise oo ah Rabbigooda. Macnaha ma ahan inay dhiban yihiin oo ay isku deyayaan inay xusuustaan dembi kasta si ay u buuxiyaan fursad kastoo ay horey u gefeen. Mana ahan inay uun meel iska fadhiyaan oo ay sugayaan ilaa ay "quduusiin kaamil ah ka ahadaan." Laakiin dhabta jirta ayaa waxay tahay inay si buuxda Ilaah ugu jiraan bilaabeenna safarka nolosha looga baahan yahay oo weliba xagga nolosha ay maalin waliba ku dhaqmayaan Ilaah ayaa hogaan u ah oo waxay ka leexanayaan wax kastoo u keenayo imtaxaanka ku gorgortanka runta Ilaah iyo dabiicadaha dunida. Ciise ayey u noolyihiin oo waxay oo waxay rajeynayan in sharaftiisa ay kaga dhex muuqato marxalad kastoo ay ku jiraan, iyadoo si joogta ay uu Ilaah u buuxinayo noloshooda.

Saddex— Caleemo saarka. Heerka Ilaah ee xagga qoyska, kiniisadda iyo bulshada dib ayaa loo cusbooneysinaya. Ilaah wuxuu soo kobcinaya kiniisado waweyn oo wakhtiyadeenan shaqeynayan oo kuwa badan ay ku barakoobi doonaan dunida; kiniisado uu Ilaah ka dhex

muuqdo oo dhibatooyinka ragga iyo dumarka lagu xalinayo oo waddada u baneyneyso barakooyinka Rabbiga si ay ula kulmaan xalka dhibatooyinkooda. Waxaa si heer sare ah iiga dhaadhacsan in isla sida uu ibliiska u nacay kiniisadda, inuu Ilaah ficilkiisa muujin doono. Kiniisado wadaan ololaha fidinta awoodda Ruuxa quduuska ah ayaa soo kobcayan oo waxay ligligi doonaan ma ahan oo keliya waddankooda ee laakiin xataa waddamada kale.
Maalmaha dambe waxaan arki doonnaa kiniisado uu Ruuxa hogaaminayo, loo qalabeyey inay fidiyaan muuqaalka Ilaah, awoodda, iyo muujinta Eebbe si ka weyn hababka horey loo soo dareemi jiray. Ibliiska wuu nacayb yahay kiniisadda maxaa yeelay hadda ka hore ayuu Ciise ka wacyooday Matayos 16:18 oo leh, *Anigu waxaan kugu leeyahay, Butros baad tahay, oo dhagaxan ayaan ka dul dhisan doonaa kiniisaddayda, oo albaabbadii Haadees kama adkaan doonaan.* Wakhtigana waa la joogaa hadda marka ay madaxda ruuxyada iyo awoodaha ay u jilba joogsan lahayeen Kiniisadda Ilaaha nool!

49
Da' Cusub

Markay carruurtii reer binu Israai'iil hor istaageen muucjisada tan ugu weyneyd taarikhda (gelista iyo la wareegidda Dhulka Quduuska ahaa), way caasiyeen. Muuse wuxuu adeejiyey laba iyo toban basaasiin ah oo gelayan dhulka si ay uga war kenaan muuqaalka dhulka si ay u qorsheyan sida ay ku weerari lahayeen. Markay babaasiintii soo laabteen, toban iyaga ka mid ah waxay soo jeediyen war niyad jab leh oo laakiin labo iyaga ka mid ah waxay soo jeediyen war niyad dhis leh.
Waxay sharuudooyinka ku raaceen Ilaah, oo waxay aamineen in dhulku wanaagsan yahay. *27 Oo Muuse bay u warrameen oo waxay ku yidhaahdeen, Annagu dalkii aad noo dirtay waan gaadhnay, oo hubaal wuxuu la barwaaqaysan yahay caano iyo malab, oo midhihiisiina waa kuwan. 28 Habase yeeshee dadka dalka degganu waa xoog badan yihiin, oo magaalooyinkuna deyrar bay leeyihiin, waana waaweyn yihiin, oo weliba waxaannu halkaas ku soo aragnay reer Canaaq* (Tirintii 13:27,28).
Waxay arkeen in dhulka uu Ilaah iyaga ka ballanqaaday uu wanaagsan yahay oo waxa alla wuxuu dhulka ka sheegay oo dhan ay run yihiin, sidaa ay tahayna weli af buuxa kuma ogolaanin inay qataan wixii laga ballanqaaday: "Waa run Erayga Ilaah wax been ah kuma jiraan, laakiin marxaladaha ayaa aad u weyn oona adag. Haba ahaato ee, suurtagal ma ahan in la helo wuxuu Ilaah ballanqaaday."
Dad badan ayaa isla fikiradda noocaas ah qabaan maanta oo waxay leeyihiin: "Haah, Baybalka waa run; haah, wax kastoo uu Ciise ku hadlay waa dhab – laakiin xaqiiq uma hayi inaan jawaab u helayo ducooyinkeyga. Waa run Ciise wuu ka jawabaa ducooyinka oo weliba muucjisooyin ayuu sameya, laakiin xaqiiq uma hayi inuu ii sameyn doono aniga. Haah, guul ayaa jirta laakiin kama faa'ideysan dooni."
Ar maxay niyad jab weyn ku riday Ilaah markuu arkay dadka oo ujeeddada iyo guusha ku dhawadeen oo isla markiiba dusha aaddinayaan iyagoo gorgortan ku gelayaan maankooda, oo ku ficiltamayaan rumaysad darrodooda oo ay ku waynayeen wax alla wuxuu Ilaah iyaga ugu diyaariyey.

Ruuxa Rumaysadka

Annaguba waan maqalnay injiilka oo nagula wacdinayo, isla sida ay iyaguba farriinta Ilaah u maqleen, laakiin farriinta ay heleen wax qiima ah lama lahayn iyaga, maxaa yeelay kuwa

maqleen kuma xoojinin rumaysad (Cib 4:2).
Rumaysaddaro ayaa xidid weynaaday oo hogaanka maanka ayaa la raacay oo quruun dhan ayaa ku barako beeshay. Ma ahan inaan Ilaah ku raacno wuxuu naga ballanqaaday oo aan haddana maankeena adeegsano – "marxaladeyda qaaska ah" iyo "xaaladda aan ku suganahay." Ma ahan inaan marxaladaheena eegno oo aan saldhig uga dhigano sababta uu Ilaah ducadeena uga jawaabeynin. Tan waa mid ku filan xagga doodaha guddiga tacliinta barashada Baybalka, laakiin Ilaaheena nool hortiisa taasi sabab ma ahaaneyso.
Ilaah wuu fahansan yahay wuxuu ballanqaaday. Aamin ayuu ku yahay wuxuu ballaqaaday wuuna sameynaya wuxuu go'aansaday.
Labo iyo tobankii la adeejiyey waxaa ku jireen labo oo aan ballanta Ilaah daaqadda uga tuurin erayga "laakiin" oo xarfo waweyn lagu dhigay. Ilaah uguma talagelin inaan nidhaahno, "Tani waa waxa uu Ilaah ballanqaaday, laakiin…" bedelkeeda, wuxuu rabaa inaan nidhaahno, "tani waa wuxuu Ilaah ballanqaaday, Aamiin." Ballamada Ilaah eek u jiraan Masiixa waa Haah iyo Aamiin (2 Kor 1:20).
Labada basaasi, Kaaleeb iyo Yooshuuca, waxaa hogaaminayey ruux ka duwan kan tobbanka kale hogaaminayey. Tirintii 14:24 iyo Korintooska 2aad 4:13 waxaa loogu yeedhay, *Ruuxa rumaysadka*. Ruuxan rumaysadka wuxuu ku jiray Kaaleeb markuu soo jeediyey, *Markaasaa Kaaleeb dadkii ku aamusiiyey Muuse hortiisa, oo wuxuu ku yidhi, War haddiiba ina keena, aynu dalka qabsannee, waayo, innagu waynu karaynaa inaynu ka adkaanno* (Tirintii 13:30). Laakiin tobbanka kale way ka xumadeen jawaabtaas oo waxay iyaguna yidhaahdeen, *Laakiinse nimankii isaga raacay waxay yidhaahdeen, War innagu dadkaas kuma kici karno, waayo, way inaga xoog badan yihiin* (Num 13:31).
Ruuxa Ilaah ee ku jiray Kaaleeb ayaa isaga ka dhigay inuu aamino wuxuu Ilaah ballanqaaday. Kaaleeb wuxuu ogaa in hadduuba Ilaah iyaga ka ballanqaaday waddanka, de haddaba aad buu u awoodaa inuu iyaga siiyo awoodda ay kaga guuleystan dadka dhulka ku jira iyo cadaw kasta, si ay u helaan wax alla wuxuu Ilaah ka ballanqaaday iyaga. Ilaah wax alla wuxuu qorheyo oo dhan wuu barakeynaya. Kaaleeb wuxuu ogaa sababtan awgeed inay suurtagal tahay inay helaan dhulka. Sidaa ay tahayna dadkii waxay rumaysteen rumaysad darrodii tobbanka basaasiyaal oo cabsi badan ayaa ku dhalatay iyaga, oo waxay rabbeen inay bedelkeeda hogaamiyey dhex dooda ka doortaan oo ay ku laabtaan Masar.

Da' dhan ayaa ku dhammaatay lama degaanka

Ilaah wuxuu isku daba taxay yaabab iyo muucjisooyin sidaa ay tahayna dadka waxay rabbeen uun inay dib ugu laabtaan addoonsigii Masar. Tobban goor ayuu Ilaah la hadlay dadkiisa oo tobban goor ayey maqli wayeen codkiisa, in kastoo ay arkeen ammaantiisa.
Alle ku caasintan joogtada noqotay awgeed, dadka waxay lama degaanka ku jireen afartan sano. Ilaah iyaga ma geynin karin iyaga dhulka uu ka ballanqaaday maxaa yeelay iyagaa diideen inay galaan. Waxay Asaga ku yidhaahdeen bedelkeeda waxay ku dhamanayaan lamadegaanka, isla sidaas ayeyna ahaatay: *28 Waxaad iyaga ku tidhaahdaa, Rabbigu wuxuu leeyahay, Noloshaydaan ku dhaartaaye, hubaal sidaad dhegahayga ugu hadasheen ayaan idinku samaynayaa. 29 Meydadkiinnu waxay ku dhici doonaan cidladan, oo kulli kuwiinna la tiriyey sidii tiradiinnu ahayd oo ah intii labaatan sannadood jirtay ama ka sii weynayd oo aniga ii gunuusay,* (Tirintii 14:28,29).
Fac dhan ayaa ku dhamaaday lama degaanka rumaysad la'aanta ay ku dhaqmeen iyo ku caasinta oo ballamadiisa ayey adkeyn wayeen. Ballamada Ilaah waa run oo ma ahan si alla sida aad rabtid inaad ula macaamilooto.
Ishacyaah 1:19 waxay leedahay, *Haddaad raalli tihiin oo aad dhega nugushihiin, waxaad cuni doontaan dalka barwaaqadiisa.* Ilaah wuxuu rabaa inay dadkiisa cunaan macmacaanka iyo

wanaagga dhulka. Wuxuu rabaa inaan wada helno barakooyinka uu noogu talagalay oodhan. Ciise Masiix ayaan ku helnay dhaxal ruuxiyan ah. Waxaan nagala barakeyey xagga samada kaasi oo aan ku helnay barako kastoo ruuxiyan ah ee ku jirta Masiixa (Efesos 1:3), oo waa inaan dhaxalkeena ku codsano rumaysad. Kuma filno oo keliya uun inaan rumaysanno inaan dhaxal ku leenahay dhimashada iyo sara kaca Masiixa. Ilaah wuxuu rabaa dhad dhadhaqaaq leh oo gacanta fidinayaan oo waxay xaq u leeyihiin qaadanayan oo ku lahaanayaan rumaysadka, isla sida uu Ilaah reer binu Israa'iil ula rabay inay helaan dhulka uu ka ballanqaaday.

Isla sida uu ruuxa rumaysadka ugu soo dul degay Kaaleeb iyo Yaashuca, annaguna wuu nagu soo duldegay. Waa iyaga oo keliya inta facaas hore oo dhan ka gashay dhulka laga ballanqaaday. Iyagoo rumaysad ku socdaan ayey noqdeen hogaamiyaalka dadka ku hogaamiyeen barakooyinka Ilaah.

Quruun dhan oo Rumaysadka Addeecsan

Madaama uu fac dhan Ilaah ku caasiyey oo ku socon wayeen rumaysadka, Ilaah wuxuu soo gacan qabtay mid cusub. Waxay ahayd fac ka mid ah kuwa aan lagu soo barbaarinin Masar, waa fac aan u sujuudin dibigii dahabka ahaa oo aan codka Ilaah qalbigooda ka adkeynin tobban goor. Facaan cusub diyaar ayuu u ahaa inuu addeeco Ilaah.

Kaddib markuu Muuse dhintay uu Yashuuca la wareegay hogaanka, dadku ma ahayn kuwa madax adag oo mucaaradnimo ku dhaqmayan. Waayihii hore dhibloowayaal ayey ahayeen. Way la murmeen oo ku caasiyeen Muuse ilaa uu Ilaah rabay inuu mar kale kow kaga soo bilaabo Muuse keligiis, laakiin hadda Yashuuca ayaa hogaamiye ahaaday, aad ayey isaga ula heshiyeen. *Markaasay Yashuuca ugu jawaabeen, Kulli wixii aad nagu amartay oo dhan waannu yeeli doonnaa, oo meel alla meeshii aad noo dirtoba waannu tegi doonnaa* (Yashuuca 1:16).

Waxay soo galeen heerka addeecista rumaysadka. Yashuuca wuxuu metelaya Ciise, kaasi oo ah dan jiraha badbaadadeena. Dadka waxay gareen meesha ay u hogaansameen inay addecaan wax kasta uu Ilaah iyaga ku amrayo. Mar dambe wax eray "laakiin" ah oo afkooda ku haray lama maqlin. Wax alla wixii ay gorgortanka ku sameynayeen way ka baabe'een. Ballamada Ilaah waa run wax kastoo ay dadka ka qabaan ama ay yidhaahdaanba – wax alla wuxuu Ilaah ballanqaaday qiimay leeyihiin!

Tani waxay boqolkiiba boqol ahaayeen dad cusub, waxay boqolkiiba boqol ahayeen urur cusub. Ma ahayn dad yar oo wareersan oo si qalda u fahmeen guul wada yaasha rumaysadka. Waxay ahayeen dad si buuxda u fahmeen kan uu yahay Ilaah oo rumaysteen Isaga. Si qaas ah ayey u hadlayeen, si qaas ah ayey u muuqdeen, si qaas ah ayey u heesayeen, si qaas ah ayey u duceysanayeen oo weliba si qaas ah ayey ku ficiltamayeen. Wayna tirro badnayeen! Iyagaa ahaa dadka dhulka galeen maxaa yeelay waxay ahaayeen dad wada jiraan oo Ilaah u go'een oo aan ka gees ahayn Doonistiisa. Wax alla wixii ay gacanta saaraanba way ku guuleysanayeen madaama ay Ilaah iyaga la jiray. Waxay arkeen Ilaah oo oofinayo hadaladiisa oo weliba waxay arkeen Ilaah oo muucjisooyin sameynayo. Waxay arkeen awoodda Rabbigooda oo ficiltameysa oo weliba waxay arkeen waxyaalo badan oo Rabbaani ah. Way lahaadeen dhaxalkooda oo weliba waxay heleen barakooyinka taajirnimada Rabbigeena. Waxay arken inay, *Oo waxba kama baaqan innaba wixii wanaagsanaa oo Rabbigu u sheegay reer binu Israa'iil; laakiinse kulli way wada ahaadeen* (Yashuuca 21:45).

Waa dadka noocan ah dadka uu Ilaah raadinayey. Waxay ahayeen dad diiday inay runta Ilaah ku saabsan aan waxyaalo kale kula gorgortamaan. Waxay ahayeen dad wax kastaba ha ku qaadato ee laakiin si buuxda Ilaah u addeeceen si ay uga faa'idaan barakooyinkiisa. Waxay ahaayeen dadka arkeen in runtii Ilaah uu yahay kan uu sheegayo inuu yahay sameynayana wuxuu yidhaahdo wuu sameynaya.

Ilaah dadka noocan ah ayuu rabaa inau si joogta ah u dul jogaan dunida. Maanta, wuxuu soo

gacan qabanaya dadka noocaas ah – quruun cusub oo xerta Ciise ah oo boqortooyadiisa ku fidineyso dunida oo dhan. Meelaha ay dadka rumaysad la'aan daraaddeed dib uga gurteen oo runta Ilaah ku saabsan gorgortan la galeen; dadkan cusub weligood dib uma noqonayan oo horey unbay u didayaan ilaa ay boqortooyada Ilaah ee samada ah ku qaataan xoogga uu Ilaah siiyey iyaga.

Quruun Cusub oo aan Aamusnaan doonin

Fac dhan oo dhalin yar ah ayaa soo kobcayaan. Ma ahan fac lagu maquuriyey rumaysad darroda iyo wax baridda diinta dhimatay, miseba laguma huwinin "inkiraadda barashada Kitaabka." Ma aanay baranin inay didaan hibooyinka Ruuxa Quduuska ah iyo muuqaalka Rabbaaniga ah. Weligood ma aanay maqlin in Ciise wax qalad ah sameyey markuu bogsinayey qof kasta. Weligood ma aanay maqlin inaynan jiniyada jirin. Waxay aaminsan yihiin in Ciise yahay kan uu sheegay inuu yahay, wuuna sameynaya wuxuu sheegayo inuu sameynayo. Waxay fahansan yihiin ku dhiiran yahay wax alla wuxuu sheego oo weliba wuu oofinaya wax alla wuxuu sheegay.

Facan cusub wuxuu fahansan yahay in Boqortooyada Ilaah ay ahayn hadal oo keliya ee laakiin awood. Way fahansan yihiin waxa laga wado marka la leeyahay ku hadalka afafka iyo u duceynta kuwa bukaan. Waxay fahansan yihiin inay waajib tahay inuu qof kasta badbaado oo weliba in Injiilka lagu fidin doono quruumaha oo dhan taasi oo ay raaci doonaan calaamooyin iyo yaabab. Waxay fahansan yihiin in Ciise ka guuleystay cadawga, sheeddaanka, oo way fahmeen inay amar oo dhan kaga badan yihiin sheeddaanka amarkaasi ay ku heleen magaca Ciise. Waxay og yihiin in irdaha naarta ay hor istaagi doonin kiniisadda oo weliba boqortooyada Ilaah ay ku fideyso meel kasta. Waxay fahansan yihiin in Injiilka awood leeyahay uu ku barakadeynayo dadka oo dhan meel kastoo ay joogaanba, inuu xalinayo dhibatooyinkooda oo baahi kastoo ay qabaan loo hergelinayo. Fac aad u cusub ayaa soo kobcaya!

Looguma caqo jugleyn doono inay aamusaan mise ay dib uga gurtaan rumaysadka rumaysad darro daraaddeed. Meesha uu Ilaah iyaga ka rabo ayey ku adkeysanayan inay ku sugnadaan. Heerkan waa jawaabta Ilaah nagu siinayo dhibatooyinka aadanaha haystaan. Kani waa fac uu ka buuxo jacaylka iyo rayraynta Ilaah, fac xanaaneynayo kuwa dhiban kuwaasi oo ah qalabka ay awoodda Ilaah ku jirto taasi oo qumaati u bedeleyso iyaga.

Facan wuxuu ku kobcaya inuu amarkiisa oo dhan kaga adeego heerka jiritaaka ruuxa. Jidhka Masiixa ayaa u hawl gelaya shaqadiisa – si uu u ahaado qalabka ay awoodda Ilaah ku jirto uu Ilaah adeegsanayo, jiritaanka iyo muujinta Ilaah ee ku jirta dunida dhimaneyso.

Ilaah wuxuu muujinaya awooddiisa sare, dadkiisa waxay fidin doonaan wanaaggiisa ficiladiisa ku jirta sida ay u sameyn jireen si ka sii balaaran.

Dhul iyo Quruun
Dhulkow, dhulkow, dhulkow, bal erayga Rabbiga maqal
Jeremiah 22:29

50
Waddan Sidee ah ayaad Rabtaa?

Hal qof ayuu ka aasaasay ummad dhan oo quruun ku nool. Waxay ahayd inay maamulan adduunka oo dhan; waana Isaga kan u diyaariyey meesha ay ummad kasta ku noolan lahayd (Faalimaha Rasuullada 17:26).

Ilaah ayaa xuduudyo sameyey marka ugu horeysay. Isaga ayaa dadka ku deeqay dhulka iyo quruunta ay ku noolanayaan. Markuu Ilaah uumay Aadan, wuxuu u diyaariyey gobol uu maamuli doono – taasi oo ahayd beertii Ceeden. Wakhti dambena sida aan uga arkeyno Bilawgii 10:32, Ilaah wuxuu dunida u kala qaybiyey quruumaheeda. Wuxuu adiga kuu xilsaaray waddan aad maamuleysid, isla sida naloo siiyey waddankeena, … [Soomaaliya]. Mar alla markuu Ilaah dadka u xilsaarayo gobol dunida ka tirsan oo ay maamulayaan, Wuxuu ku biirinaya isla weyni. Dabadeetana, markay arinta masuuliyadda iyo dadka yihiin arimaha, qarannimo ayaa dhalaneysa. Sidaa ay tahayna, waxaa muuqata isla weyni run ah iyo mid been ah. Qaranimada beenta ah waxay isku muujineysa heerka balaarinta, kibirka, waddaninimo dhab ah, dhammaan waa arin gaar ah. Waxay isku muujineysa ku mahadinta Ilaah aan ku mahadineyno xaddadka uu na siiyey. Waa rabitaan shaqsiyeed uu qofka ku rao inuu xananeyo dhulka dhulkeena, oo aan ka difaacno wax alla wixii xumaati u geysan karo oo burburin karaan.

Ilaah wuu go'aansaday inuu tiirar subkan noo sameyo. Wuxuu dadka u subkay sharciyo ay ku dhaqmaan haddii ay ka tirsan yihiin nolosha shaqsiga, guurka, Kiniisadda, bulshada iyo quruumahaba. Tiirarkan la subkay waxay leeyihiin labbo weji oo ay ku difaacayaan shaqsiga iyo sameynta aqoonta, awoodda iyo jiritaanka Ilaah oo u banana dadka dhulka ku nool. Waa hubaal sharciyada Ilaah waxay lid ku yihiin oo ay naxdin ku ridayaan ibliiska, waana sababta uu ku dadaalayo inuu burburiyo sharicyadan si uu dadka ku gaaro.

Subkinta Rabbaaniga ah ee quruumaha lagu subkay ayuu aad u eegaya ibliiska si uu u burburiyo. Subkintaasi mid ka mid ah waa tan waddaninimada dhabta ah, ku faanid dhab ah oo lagu faanayo hogaanka Ilaah, farxad iyo masuuliyad dhab ah oo lagu xanaaneynayo dhulka. Sanado badan ayuu ibliiska ku hawl jiray burburinta masuuliyadda shaqsiga saaran iyo midnimada waddankayga. Wuxuu sameyey hab siyaasadeed oo been ah, dhaqaalo iyo weliba aragti xidhiidhka waddamada lala leeyahay la xiriirta ee waddanka Swiden, kuwaasi oo aan lagu dul dhisin salka Masiinimada. Wadaniga ku nool Boqortooyada Ilaah, waxaan leenahay walaalo rag iyo dumarba leh oo afarta gees ee dunida ku nool oo meel alla meesha ay ku noolyihiin xornimo ayey ku dareemayaan. Haba ahaato ee, Ilaah wuxuu dhammaanteen na siiyey masuuliyad ay kaga qayb qaadaneyno, waddankeena, waana sababta aan ceeb la'aan arintaas uga dhigeyno midda ugu heerka sareyso.

Ilaah wuxuu Abaabulaya Waddaninimada Dhabta ah

Bal aan waddankeyga tusaala ahaan u qaato. Ilaah wuxuu Masixiinta iyo waddaniinta kale ku deeqaya, baraarujin cusub oo ku saabsan waddanka Swiden, kaasi oo ah dhul xaquuqdiisa sugan tahay. Shaqsiga tilmaan ayuu leeyahay oo isla sidaas ayey u tahay quruuntana. Waa inaan dib u eegno una fahanno tilmaanteena aan ku leenahay waddanka Swiden. Waxaa suurtagal ah inaan xagga tirada aad u yarnahay, laakiin heerka aad adduunka ka taagan nahay waa mid sare oo sidaas iyo si ka weyn ayaan kaga tallaabo qaadi doonnaa.

Hibooyinka hawlaha Rabbiga loogu adeego waxay taabanayan masuuliyado kala duwan, laysma barbar dhigi karo amaba lama kala qaadi karo isla sidaas ayey u tahay xataa quruumaha. Waddanka Swiden waa inaan ka ogolaano masuuliyadda uu Ilaah noo saaray qaaradda Yurub iyo adduun weynaha. Hawsha uu Ilaah nagu aaminay waa inaan diyaarino oo aan adeejino dad Yurubta oo dhan gaari doonaan oo adduun weynaha kalena ku fidi doonaan, waana arinta lagama maarmaanka ah ee aan iisu diyaarineyno inaan sameyno. Ilaah wuu na siiyey waxyaalaha aan ku adeegi lahayn iyo dad uu subkay u subkay hawshiisa oo afarta daraf ee adduunka ka jiraan. Ibliiska waa fahansan yahay tan oo ma ahan oo keliya inuu dadka uu Ilaah adeegsanayo mucaarad ku yahay ee waxaa kaloo uu col ku haya quruunta oo dhan.

Xornimada waa hadiyad uu Ilaah ku deeqay qof kasta iyo quruumaha. Bawlos wuxuu Galatiya 5:1 ka leeyahay, *Xorriyad ayuu Masiixu inagu xoreeyey. Haddaba adkaada, oo mar dambe yaan laydinku qaban harqoodka addoonnimada.* Isla marka aad Ciise u ogolaatay sida ku talagalka Ilaah ahayd waxaad ahaatay qof xor ah. Ibliiska wuu weeraraya xornimada aad heshay oo wuxuu isku deaya in wax kastoo ay ku qaadataba uu ka dhigi mid aadan hergelin doono ama Rabbiga ugu adeegi doonin. Tanna isla sidaas ayey u tahay quruumaha iyo dadkuba. Ibliiska wuxuu isku deyaya inuu dadka iyo quruumaha ka weeraro xagga xornimada dhaqaalaha, siyaasadda, iyo fikiradda guud ee loogu adeegayo Rabbiga ee xornimo loogu helayo dhulka. Awoodda ruuxa ee uu ku deeqay waddankaaga dhammaan waa la dhuuqaya si dadka looga qaado xornimadooda iyo maskaxda wax abuurka iyo xormarka.

Ilaah wuxuu nagu dhiiri gelinaya inaan u duceyno boqorada iyo kuwa amarka leh oo dhan (1 Timoteyos 2:1, 2). Rooma 13:1-6 waxay noo sheegeysa in dhammaan amarada dawladda ay ka yimadaan Ilaah, kaasi oo maamul dawladeed keenay si aanay wax khilaaf ah uga jirin meel ka mid ah dhulkiisa. Wax xaq ah umalihin inaan dhexdeena is boqon goyno, calaancalno, midkeenba mid kale xanto ama aan burburino kuwa amarka leh ee sharciga hergelinayaan. Waa inaan u duceyno kuwa amarka leh oo hogaanka iyo awoodda waddanka gacanta ku hayaan, qaas ahaan si ay dadka saxda ah uu Ilaah cabsidiisa ku beeray ee xaqa ku dhaqmaan u ahadaan kuwa jagooyinkan helayaan. Haddii aan tallaabo qaadi wayno oo aan masuuliyaddaas xilka iska saari wayno, qof kale oo mooquf kale qaba ayaa noo ficil qaadaya.

51
Rumaysadka nool iyo Baniaadminimada

Qof baa mar yidhi, waxyaalaha ay filosofiinta umaleyaan inay noqonayaan hab nooleydka tiro yar oo ka mid ah faca dambe. Waxyaalaha waayihii hore iska ahaan jireen muuqaal filoosofinimo waayahan dambe waxay ahadeen dabiicadda hab nooleydka iyadoo ay kuwa ku noolna garaneynin sababta ay dabiicaddaas ugu noolyihiin. Si kastoo loo eegaba arintan waa mid dhab ah oo ka dhex jirta bulshadeena maanta. Waa maxay sababta ay dadka ugu dhaqmaan habka ay ku dhaqmaan, ku fikiraan ama ugu hadlaan habka ama ay guud ahaanba u sameyaan waxyaalaha ay nolosha kaga dhamaan? Inta badan dadka ku dhaqmayaan ma garanayaan sababta ay ugu dhamayaan hab nooleydkaas! Mooquf kala duwan ayaa maskaxda dadka ku soo dhacayan oo isla durbaba waxaa loo qaadanaya inay yihiin “dhabta” hormarka nolosha oo dad yar ayaa isku deyi karaan inay wax su’aal ah ka soo jeediyaan amaba baaritaan ku sameyaan halkan ama waxyaalaha habkaasi aasaaska u ah.

Waxyaala badan oo lagu xidhiidhinayo waxyaalaha ka soo askunmeen dareemada ama dareen la’aanta dadka ayaa waxyeello badan u geysanayaan nolosha iyo hab dhaqanka dadka. Inta badan ma garan karno sababta aan u haysano mooqufka aan ku dhaqmeyno. Waxaa ina duufsanayaan hab nooleydkoo amaba mid kale oo inta badan noo jiidanayaan doonisteena ka soo horjeedkeeda. Baybalka wuxuu caddeynaya in maankeena uu yahay garoonka dagaalka. *Ha u ekaanina dadka ifkan, laakiinse ku beddelma cusboonaanta maankiinna inaad hubsataan waxa ay tahay doonista Ilaah oo wanaagsan oo isagu ku farxo oo kaamilka ah* (Rooma 12:2). Macnaha haddii aan si kale ku sharaxno, maankaaga wuxuu u baahan yahay in la cusbooneysiyo. Waa maxay sababta? Maxaa yeelay waxyaala badan oo qaloocan ayaad kala kulan tahay ibliiska oo waa suurtagal in kuwaasi ay ku sababayaan inuu maankaaga jaho wareeray oo aad ku dhatatid hab isaga ka farxineysa. Haddii ay suurtowdo in fac dhan maankooda la bedelo oo lagu sababo inay ku

fikiraan, ku dhaqmaan hab qaloocan, waa suurtagal in facaas oo dhan waddada lagu toosiyo. Kan waa habka uu ibliiska istecmaalo oo uu ku duufsanayo maanka iyo fikirka dadka. Tusaalaha ugu heerka sareyo ee tan lagu soo qaban karo waxaa ka mid ah falkii ninkii la odhan jiray Hiter taasi oo nacayb iyo fasiraad qaldan ku baabi'iyey fac dhan oo ahaa dad liita. Maanta, waxaa loo arkaya in ficilkiisa uu yahay mid aad u fool xun laakiin waagi hore markuu falkaas sameynayey waxaa loo arkayey in fikiradda uu dadka ka dhaadhiciyey ay ahayd mid wanaagsan oo falkiisa gacan siineysay oo fac dhan ayaa waddada laga leexiyey. Tani kama duwano waxa aan halkan kaga sheekeyneyno falka ibliiska. Ibliiska si joogta ah ayuu maanka dadka uga buuxinaya waxyaalaha isaga la quman oo dantiisa ku oofsanayo si uu boqortooyadiisa u balaariyo. Sababtaas awgeed, waa inaan yara hakano oo aan mar kastaba ka fikirno isna weydino "waa maxay sababta aan waxan u sameynayo?" *Inta badan ma garaneyno saldhigga iyo natiijada waxyaalaha aan ku fikirno-mana jiraan wax lid nagu ah.*

Heer Joogta ah ma Jiro

Marxaladdeena maanta waa fikirado isku wada mid ah taasi oo dadka ku hogaamineyso inay ku gebagebeyaan fikiradda ah "wax kasta way iisu eg yihiin sababtaas awgeed waa inaan ogolaano ujeeddoyinka kala duwan." Waa inaan ogolaano inay jiraan aragti kala duwan iyo fikirado laakiin waa inaanan ogolaanin fikiradda ah in aragti kastaba ay wax kasta saameyn karto.

Anagga xerta Ciise ah waan jacayl nahay oo ixtaraamnaa qof waliba, xataa annagoo mooqufkooda qaadanaynin, oo taasna macnaha ma ahan in aan u haysano in mooqufka ay haystaan uu sax yahay. Marka bulsha wada aaminsan in mooquf kasta istaahilo in la tix geliyo uu ka soo muuqdo qof mooquf gaar ah run u haysto waxay ahaneysa mid loo arkayo af lagaado. Saa ay tahayna si sahal ah iskiigama qaadaneyno mooqufka dadka badankiis ay haystaan oo ah "inuu mooquf kasta saxan yahay" oo sababtaas awgeed waa mid la ogolaan karo lana istecmaali karo. Maya, sidaa ma ahan!

Aqoonta oo dhan waxaa laga helaa meel uun. Waxaan degaankeena wax kaga baraneyna istecmaalka aan istecmaaleyno dareemadeena oo dhacdooyinkan ayaan ku ficilgelinayna waaya aragnimadeena. Markaasi ayaan go'aan maskax gal ah ku dhaqaaqeyna oo muuqaal u yeeleyna dunida nagu hareersan. Dhammanteenba waa fahansan nahay in aqoonteena ay xadad leedahay. Ma jiro mid naga mid ah oo wax kasta garanayo. Xataa sayniska ku takhsuusan aruurinta caddeyn kasta, ma garanayaan wax kasta, oo waxaan inta badan mooquf keena ku bedeleyna caddeynta ugu dambeysay ee mooquf cusub noogala dhaadhicinayo. Xataa farriimaha sayniska waxaa lagu ogolanaya ama lagu diidaya saxitaanka lagu sameyo.

Dhammaanteenba waxaa wada leenahay isku aragti markay imaato mooqufka aan ka qabno dunida aan ku noolnahay. Laakiin waxay dhibaato imaneysa markuu qof yidhaahdo "dunidu waa uun waxa aan aragno oo aad dareemeyno, ma jiraan wax kale. Ilaah la mooquf ma ahaan karno, dhexdeena unbaan isku mooquf ahaan karna."

Sababtan awgeeg, madaama aan dhammaanteenba maskaxdeena wax kasta ku haynin oo aan inta badan xukunkeena waxyaala kale u soo xiganeyno oo aan maraha qaarkoodna isku wareereyno, waxaan fikiradda ku soo koobi karna "wax kastaba waa la qiima gelin kara; ma jirto run dhab ah oo heer sare loo qaadi karo." Dadka badankood habkan ayey ku fikirayan maanta, natiijaduna waxay ahaaneysa in aan annaga sharci iisu ahaano, amaba waxaan sharci ka dhiganeyna waxyaalaha ay dadka kale naga dhaadhiciyeen.

Masiixinimadu waa mid ka duwan waxyaalahan oo dhan. Baybalka wuxuu si bayaan ah u caddeynaya in Ilaah jiro. Waa runta ugu weyn ee jirta, oo madaama uu Ilaah jiro wuxuu sameyn kara waxyaalo dhab ah. Qayb taarikhda ka tirsan waxaa ka cad inuu uumay samada iyo dhulka. Qayb kaloo taarikhda ku jirtana waxaa ka cad inuu soo diray Wiilkiisa, Ciise MasiixChristianity, Waa taarikh jirta in Ciise dhintay kana sara kacay dhimashada. Ilaah wuxuu ku shaqeynaya

wakhtiga iyo wax kasta oo waxyaala qaas ah oo dhan ah ayuu u sameynaya dad dhab ah oo wuxuu ugu sameynaya meelo dhab ah.
Madaama uu Ilaah na uumay, wuxuu rabaa inuu xidhiidh nala lahaado oo uu nala hadlo. Wax kasta uu nagula hadlayo waa run maxaa yeelay Asagu waa xaq iyo caadil. Wuu hadlaa dhabtii wuxuu ku hadlayona waa run.

Erayga Ilaah – Waa Shey jira

Wax kastoo uu Ilaah taarikhda oo dhan ka sameynayey waxay maanta noogu wada qoran yihiin Baybalka. Waa cinwaankiisa barakeysan oo uu ugu talagalay qof waliba qarni kastoo uu ku nool yahayba. Baybalka waa shey run ah, cid kastana u cuntamayo maxaa yeelay waa Erayga Ilaah oo aan waxba laga bedelin.
Ilaah iyo Eraygiisa waxay nolosheena u yihiin saldhiga jira. Halkan waxaan ku heleyna runta dhabta ah oo aan ka heleyno waxyaala naga baxsan, kuwaasi uu noo caddeyey Ilaaha jira. Aqoonta noocaas ah waxaa loo yaqana aqoon la muujiyey.
Boqolaalka sanoo la soo dhaafay, dadka si guud ah ayey u rumaysan jireen inuu Ilaah jiro oo weliba ficiltamayo uuna hadlayo oo wax alla wuxuu ku hadlayona ay run tahay. Maanta laakiin, aqoonsiga dhabtan jirta aad ayaa loo daciifiyey. Malaayiin dad ah ayaa ku nool meela aan Ilaah laga aqoonsanayn, fikirado ka dambeyey aasaaska Masiixinimada, kaasi oo Ciise loo haysto inuu ka mid yahay kuwa badan oo diimo aasaaseen oo Baybalkana uu yahay uun mid ka mid ah buugagta kale ee diimaha, mana ka roono mana ka xumo. Dadkan haddii aad u sheegto rumaysashada Ilaaha wax kasta uumay ee jira waxay la tahay mooquf la yaab leh; badbaadada dembiga laga badbaadayo way u roon tahay dadka qaarkiis ee ma ahan dadka oo dhan.
Sababtaas awgeed waxaa loo arkaya in Ilaah uusan ahayn kan staahila in la caabudo ee waxaa loo haysta uun inuu yahay uun mooqufyada caadiga ah ee waliba laga hadlo – Yaanay noqon! Ilaahayow noo cafi. Tani waa fikiradda uu ibliiska ugu jacayl yahay. Xataa wuu u ogolaan kara dadka diimaha ku jiraan inay si qabooban isaga sii wataan hab caabudkooda marba haddii uu fursad u leeyahay inuu dadka badan uu maskaxda ka qabsan karo oo ka dhaadhicin karo in rumaysadkooda uu yahay mid ka mid ah kuwa kaloo fara badan oo tii la rabo hab nooleydka laga dhigan karo, waxayna xor u yihiin ayuu ka dhaadhicinaya inay tay rabaan ku dhaqmi karaan oo mooqufkooda waafaqsan. “Wax kastaba waa caadi.” “Ma jiraan wax shey kale ka wanaagsan.” Tani waa mooqufka ay qabaan dadka fidinayaan fikiraddan!
Ibliiska wuxuu maskaxda dadka ku beerayey fikiradahan si uu uga beer goosto fahan darroda dadka qarnigeenan ku nool. Mirtan mooqufka faasuqnimada hoosta ku wadato waxaa ka dambeyso “Maskaxda baniaadmiga.”

Maskaqda Baniaadmiga – Baniaadmiga ayaa Heerka Cabirka ah

Markaan ka hadleyno maskaxda baniaadmiga waa inaan dhawr shey kala caddeyno sida erayada la istecmalayo. Erayada “maskaxda baniaadmiga” waa kuwa caan ah oo reer adduunka iyo masixiintaba ay isku si u istecmaalayaan iyagoo loo arkayo mid wanaagsan oo la istecmaali karo. Markii loo kaco xagga erayga “baniaadminimo” waxay caddeyneysa inuu yahay “baniaadmiga kale ee kula midka ah. “Baniaadminimo” markaan ka hadleyno waxaan ka hadleyna erayga sida looga istecmaalo xagga tacliinta sare oo lagu kala shandheynayoee qoraalada, luuqadda, heesaha iwm kuwaasi oo laysugu dabariday awoodda baniaaminimo.
Ma jirto mid waxyaalahan ka mid ah oo aan ka soo hor jeedno. Midda aan ka soo hor jeedno waxaa weyaan “isiku haleynta maskaxda baniaadmiga” taasi oo markii loo kaco xagga doodad filosoofiyiinta lagu fasirayo in baniaadmiga uu iisu arkayo inuu isaga yahay kan wax kasta awood u leh oo weliba ah heerka wax kasta lagu qiimeynayo. Heerkan uu baniaamiga wax kasta iisu yahay waa duni iskeeda taagan, oo uu jirin Ilaah uumay. Waxay fikiraddan fursad kastaba ku diideysa in jiritaanka Ilaah oo weliba waxay si xoog leh ku inkirayan inuu Isaga yahay kan

saldhigga u ah heer kastoo nolosha anshax wanaag looga noolyahay. Mooqufkan wuxuu aaminsan yahay in baniaadmiga uu fahmai karin ka ka dheer inta heerka maskaxdiisa; ma jirto aqoon baniaadmiga uu qabo oo ka imaneyso meel kale, ama Ilaaha dabiiciga ah.
Ka bilaabato wakhtigii baniaadmiga ay maskaxda u furantahay ee loo yaqaano renaissance, baroorashada laga barooranayey in “baniaadmiga iisu yahay wax kasta,” waa la maqlayey. Waxay ahayd fikirad cusub oo bedelaad wadday, aad looma kaseynin waxaana waagaas loo arkayey inay tahay arin khatar ah. Wadaaddada waayahaas waxay ku jawaab celinayeen ka hor imaad xoog leh oo si tartiib ah oo tallaabo tallaabo ah ayey ku baabi’inayey, laakiin maanta mooqufkaas si bayaan ah oo xornimo ah ayaa lagu ficiltamaya. Dadka way ka soo hor jeysteen fikiradda ah inay jirto muujin rabbaani ah oo waxay aaminsan yihiin in qofku waxay maskaxdiisa awoodo oo *keliya* xataa haddii aysan waafaqsaneyn runta Baybalka ama anshaxa guud middoona. Sayniska wuxuu noqday nooc macalin cusub, badbaadiyey kaasi oo dadka ku badbaadinayo war gelin, aqoon iyo bislaashada maskaxda. Dhibaatada keliya ayaa waxay ahayd in sayniska naftiisa is khilaafay oo fikirad joogta ah ma jirin oo wax kastaba waxaa bedelayey wixii cusub oo gadaal ka imaado oo laysku raaco. Fikiradaha laga qabay sayniska ayaa dad badan ka dhigay inay shaki galaan, filosofinimo ku fikiraan iyagoo u kala qaybsamayaan kuwa mooquf kasta soo dhaweynayaan iyo kuwa hal mooquf ku adkeysanayaan.
Dadka waxay aad u soo dhaweyeen mooqufka maal badsiga iyagoo aaminsan inay suurtagal ahayn in aqoon kale aan la heli karin oo ka ka baxsan tan aan ka heleyno waxyaalaha agagaarkeena ka jira. Waxaa la sheegay in, “baniaadmiga aan lagu uumin muuqaalka Ilaah. Baniaadmiga ma ahan uun ruuxiyan ah, wuxuu la mid yahay uun waxyaalaha kale oo la uumay oo nagu hareersan, kamana heer sareyo kamana heer hooseyo.”
Isla sidaasna, baniaadmiga wuxuu ahaaday mid la qiimo tiray; ma ahayn mid heer sare lagu uumay laakiin wuxuu ahaa uun mid ka soo askunmay fursad loogu yeedhay “doorasho dabiici ah.” Noloshiisa wax ujeeddo ah ma lahan oo weliba taarikhdiisa iyo jiritaankiisa, gool ma leh. Baniaadmiga waa inuu maalmaha uu noolyahay dan isaga dhigo inuu ku dhaqmo wanaagga kan ugu heerka sareyo inta uu awoodo. Ma jiraan wax ogeysinayo waxa wanaagsan iyo waxa xun, (bulshada waxay hadda ku dhaqmeysa oo ay dhawreysa anshaxa heerkan ku dhisan). Baniaadmiga iyo bulshada iyagaa iisu go’aaminayaan sida ay rabaa inay ku nolanayaan. Macnaha waxay ula jedaan inuu baniaadmigu ku noolan karo si alla sida uu doono, taasi oo loogu yeedhayo xornimada doorashada. Saa ay tahay laakiin, waxaa uun waxyaalahan sababayo ujeeddo la’aan, dan la’aan, heer la’aan iyo madaama uusan jirin qof kala caddeyn karo waxa saxda ah iyo waxa qaladka ah go’aanka kuwa badan ayaa lagu dhaqmaya. Tusaale ahaan haddii ay 51% isku racaan in uurka layska soo ridayo ay tahay ficil qofkii doono uu xor u yahay oo ay 49% ka soo hor jedaan, waxaa lagu dhaqmaya go’aanka kuwa badan ee ah 51% fikiradda kuwa badan ayaa loo haysta inay tahay tan run, sax iyo sharci – xataa iyagoo aan la tixgelineynin waxyaalaha saxda ah oo runta ah maxaa yeelay waxaa la aaminsan yahay in “wax kastaba lagu dhaqmi karo.”
Tani waxay nolosha ku butaacisay anshaxa bulshada oo burburay iyo weliba nolosha Ilaah xidhiidh lagula leeyahay oo qash qash lagu geliyey madaama ay dadka waayaaragnimadooda ku noolyihiin. Dadka waxay isku deyeen inay baahida ay qabaan ku buuxiyaan waxyaalaha iyaga la quman oo noloshooda ka baxsanaa. Waa sida baabuur haantiisa lagu shubay biyo bedelkii shidaal lagu shubi lahaa, iyagoo la’ nabadgelyo sugan iyo saldhig laysku haleyn karo. Waxay iska dhigaya inay xaaladdu sugan tahay, iyagoo dareenka uu Ilaah iyaga ku beeray ka dhaadhicinayo inaysan xaaladdu deganeyn, waxayna umaleynayaa dareenkaasi ay dareemayaan inay wax la’yihiin maalin waliba inay tahay wax ay dadka oo dhan la qabaan oo ay maalin waliba ku noolyihiin.

Noolol Khilaaf leh

Nolosha noocaas ah dhibaato weyn ayey ku haysa nolosha dadka maanta jira: waxaa loo uumay inuu jaalnimo la alaado Ilaah, inuu arko in qorshaha kariimka ah uu Ilaah isaga u qondeyey kaga gaa'ideysto noloshiisa. Saa ay tahayna wuxuu ku noolyahay noolol uu ku muujinayo inuusan Ilaah jirin, sida iyadoo ay jirin runta dhabta ah oo ay noloshiisa ku tiirsanaan lahayd iyo sida iyadoo uu jirin heer u yaalo noloshiisa oo looga baahan yahay inuu ku noolaado. Bedelkii uu xoogga saari lahaa qiimeynta nafsiga, wuxuu sameysanaya shariciyadiisa, wuxuuse ku bedelada marxaladaha uu la kulmayo.

Qofka waxaa lagu uumay muuqaalka Ilaah, laakiin wuxuu ku noolyahay sida isagoo ah go' dhoobo ah oo aan macna iyo ujeeddo toona lahayn. Dareemada uu Ilaah isaga ku beeray ayaa ula hadlayan heer sare, oo waxyaalaha agaarkiisa ah oo dhan waxay yihiin kuwa maankiisa ku xiran, damac weyn ayuu u leeyahay, iyo daciifnimo heer sare ah iyo ebernimo. Wuxuu ku noolyahay isa soocid uu kaga faa'ideysanayo furasadahiisa iyo xaquuqdiisa baniaadminimo, oo uu uumay Ilaah jacaylna loo qabo.

Kumanaan kun oo qof oo dumar iyo ragba leh ayaa maanta ku baaba'ayaan kelinimo iyo walbahaar natiijada ku yimid. Waxaa lagu quudiyey been weyna laqeen beentaas, iyagoo rumaysan qofka baniaadmiga ah inuu isku filan yahay noloshiisa oo dhan. Wax kastaba way la saxsan yihiin! Baniaadmiga isagaa is badbaadinayo oo Ilaah uma jiro!

Baniaadmigu intee buu ka helay fikiraddan? Yaa ka dhaadhiciyey beenta xididka dheer ee ka xayuubtay farxaddiisa, ujeeddada loo lahaa iyo sharafta? Waa waxbaridda ibliiska oo heerkeedu in intee la eg ayuu sal weynyahay? *Kani waa filosoofiyad ku saleysan nolosha baniaadminimada, mooquf adduunkan oo lagu macneynayo jiritaanka Ilaah, in baniaadmigu dembaabay una baahan yahay in la samato bixiyo, iyo inuu Ciise Masiix yahay badbaadiyaha dadka oo dhan oo wax alla wuxuu ku hadlo waa runta kama dambeysta ah!*

Annagoo ku bilaabeyno fikiradda qaldan ee ah in baniaadmigu caadi ahaanba wanaagsan yahay, oo lagu xidhiidhiyo mooqufka ah inuu Ilaah noloshiisa qorsha u hayo jirin, baniaadmigu wuxuu iisu sameyey samato bixiye, oo xor ka ah Ilaah. Sababtaas awgeed wuxuu ku noolyahay noolol aad iyo aad uga fogaatay Ilaahii uumay isaga, isagaa sameystay xadadka noloshiisa oo isaga gooni u ah taasi oo dembiga ku sii dhex habaabineyso. Isagoo murugeysan ayuu wuxuu ku dadaalaya inuu isku qanciyo aqoontiisa iyo waayo aragnimadiisa *laakiin weligiis ma guuleysan doono maxaa yeelay si qaldan ayuu wax ku raadinaya.*

Si kastoo ay mooqufyada baniaadmiga wax maskax gal ah u eg yihiin, waxay muujinayaan ebernimo iyo cod dhebed eber. Waxay u baahan tahay in xarbi dheraad ah lala galo, midnimo jirta iyo dadaal heer sare ah, iyo in dadka la wacyo geliyo lana wargeliyo lana baro dadka, wakhti kasta iyo lacag kastoo ku baxeysaba. Ciise aad buu u qumanaa markuu yidhi, *Aniga la'aantay waxba ma sameyn kartaan* (Yooxanaa 15:5).

Tacliintu way wanaagsan tahay oo macnay leedahay, laakiin waa in lagu saleysiyo aqoonta dhabta ah waana in lagu dul dhiso muqaalka dhabta ah ee aadanaha. Mooqufka ay Masixiinta ka qabaan baniaadmiga waxay tahay in aqoonta aan la yasin, ee waa in fikirad fiican laga qabo. Masixiinta Ciise badbaadiye ayuu u yahay; kuwa aan Ilaah aqoonsaneyn aqoontooda ayey ku helayan badbaado. Laakiin haddii ay aqoontaas baabi'ineyso muujinta Rabbiga, waxay la mid ahaaneysa uu ficilkii kibirka ee Babeel iyo wax aan sal lahayn oo lagu dhisay aqoonta Ilaah la'aanteed (2 Kor 10:4, 5).

Baniaadanka awood ayuu u leeyahay uu ku kala saaro iskuna aruuriyo wararka laakiin wuxuu u baahnaanaya awood kale oo caawisa si uu ku garto waxa saxda ah uu ka ka xulan lahaa waxyaalaha badan ee hor tuuran. Waana sababta Ilaah la'aantiis aan waxba loogu guuleysan karin. Asaga la'aantiis ma xaqiiqsan karno adduunyada sida ay u taalo, ma jirto jiirad hog ku jirta

ama oo caddeyn kastoo aan umaleyneyno inaan haysano, weliba sida saxda ah kuma fasiri karno oo go'aanka saxda ah ee kama dambeysta ah kuma heleyno. Wax barasho heer sare ah iyo heer sugan waa muhiim in la helo, laakiin nolosha masiixinimo la'aanteed waa sida hal bacaadda lagu lisay. Waxay la mid ahaaneysa miis nooc kastoo cunta ah lagu taxay oo laakiin sunna ay ku jirto oo aan laakiin laguu sheegin weelka ay suntan ku jirto, oo aad qabin qof ku caawiyio, maxaa yeelay "wax kastaba waa lagu dhaqmi kara."

Runta oo keliya ayaa lagu Helaya Xornimada Doorashada

Yooxanaa 14:6, Ciise wuxuu ku hadlay hadalkan culus oo wax lala barbar dhigi karo jirin, *Markaasaa Ciise wuxuu Toomas ku yidhi, Anigu waxaan ahay jidka iyo runta iyo nolosha. Ninna Aabbaha uma yimaado, xaggayguu ku yimaado maahee.* Wuxuu leeyahay isagu *waa* Runta, Isagu *waa* jidka oo Isagu *waa* nolosha.

Ma jirto noolol Isaga la'aantis kaamilmeysa. Isaga qayb kasta oo noloshaada ku saabsan farriin u hayo, shaqsiga iyo bulshadaba wuu la hadlaya. Isagaa uumay baniaadmiga oo wuu garanaya sida saxda ah uu ku shaqeynayo shaqsiga, bulshada, meelaha shaqada, kiniisadda, dawladda, xagga siyaasadda iyo xidhiidhka caalamiga ah.

Ciise waa dhab. Isaga oo keliya ayaa fahmaya sida ugu wanaagsan oo ay dhabta uu uumay ay ku shaqeyneyso. Isagu ma ahan qayb yar oo diin subaxdii maalinta Axadda caabudeyso hogaaminayo. Eraygiisa iyo awooddiisa ayaa bedelayaan shaqsiga, qoyska, skoolada, meelaha shaqada, magaalooyinka, quruumaha, mar alla marka la siiyo fursadda uu ku ficil gelayo. *Meelaha Ciise mucaarad lagaga yahay oo Eraygiisa lagu dhaqmeynin, salka bulshadaasi waa mid ligligmayo. Wareer heer sare ah ayaa ka jira oo sharci la'aanna waa heerkeeda sare waana meel ay dadka sharci iisu noqonayan oo waxa iyaga la quman ayey dadka ku hogaaminayan. Bulshada noocaas ah waxaa looga baahan yahay inay Masixiinta u istagaan runta, xataa haddii ay mucaaradnimo heer sare ah kala kulmi doonaan.*

Runta ku jirta Ciise Masiix iyo Erayga Ilaah waa sida wan buuran. *Waayo, anigu injiilka ka xishoon maayo, maxaa yeelay, waa u xoogga Ilaah xagga badbaadinta ku alla kii rumaysta, marka hore Yuhuudda dabadeedna Gariigga* (Rom 1:16). Hawsha kiniisadda loo xilsaaray waa inay Erayga Ilaah buun ku yeedhiso. Inta aan dadka runta jacyal kula hadleyno, Ciisaha dhabta ah ayaa isu muujin doonaa dumarka iyo ragga oo siinaya iyaga fursad ay ku doortaan. Waxay arki doonaan inay wax kasta ahayn sida aan umaleyneyno inay u egyihiin. Runta waa la muujin doonaa beentana ma qarsoomi doonto. Ragga iyo dumarkuna xulashadooda ayey sameyn doonaan.

Kuwa aan Masixiinta ahayn waxay jacayl yihiin rumaystayaasha heerkooda rumaysad joogtada yahay markii lala barbar dhigo kuwa wax kasta iyo mooquf kasta raacsan oo injiilka inkirayaan. Haddii uu ibliiska dadka weeraray shaki kuma jiro inuu xataa ku weeraray habkaasi injiilka lagu qaloocinayo. Waxa uu masixiinta ku weeraray waxaa ka mid ah inay ka cabsadaan inay mooquf kan dadka badan ay qabaan ku taagnadaan, taasi oo iyaga ku sababtay inay wacdintooda ku labaan mooqufyada dadka bedelkii ay ku taagnaan lahayeen runta ku saleysan Baybalka. Ibliiska aad buu uga cabsanaya dabiicinimada wuxuuna isku deyey inuu sameyo wax alla wuxuu awoodo si uu injiilka uga qaado awooddiisa.

La yaab male oo Masixiinta hawlaha ibliiska ayey oofinayeen, oo iskuma aanay deyin inay dhaqmaan runta Baybalka ku dhigan. Waxay inkireen calaamadaha iyo yaababka, sheekada uumista, dhallashada uu Ciise bikradda ka dhashay, sara kaca Ciise iyo weliba nolosha weligeed ah. Waxyaalahaas oo dhan waa wax lagu hergeliyey maanka iyo fasiraadda baniaadmiyeed oo lagu daba qabtay silsilado aayado ah. Injiilka iyo awooddiisa way ka maqan yihiin hawlahaas. Waxa keliya oo hadda soo haray waa uun maamul diimeed iyo kuraasta kiniisadda oo ay cidka ku fadhinin.

Laakiin Ilaah ayaa ammaan mudan oo xataa in kastoo ay fasirkan maanka baniaadmiga iyo cilmi adduunkan sii butaacayo, dadka Ilaah way baraarugeen ka badan sida ay waagii hore ahaan jirtay. Ciise ayey rumaysan yihiin iyo muujintiisa, wayna ku ficiltamayaan oo waxay jagadooda ka qaadanayaan oo masuuliyaddooda ka hergelinayaan dagaalka ruuxiga ah. Waxay noqdeen dad u dagaalayo oo difaac u ahaaday waddankooda oo dhan oo way bedelayaan mustaqbalka waddankas.

Ilaah wuxuu naga dhigay cusbada dunida iyo iftiinka samada oo adduunka u ifayo. Eraygiisa lama joojin karo ee laakiin waa in lagu dhaqmo oo laga hergeliyo xagga ruuxa. Wuxuu rabaa inaan wef ka siino sida seefta ruuxiisa oo aan ku goyno cadawgiisa, sheeddaanka, si uu u kala daadto oo uu u joojiyo habaabinta uu ka wado dhulkeena. Dabadeetana xornimo ayaa wada saabeyn doonto quruunta oo dhan.

52
Saldhigyada Xornimada

Ruuxii Rabbiga ayaa i dul jooga, Waayo, wuxuu ii subkay inaan war wanaagsan masaakiinta ku wacdiyo, Wuxuuna ii soo diray inaan kuwa xidhan furriinnimada ogeysiiyo Iyo kuwa indhaha la' soo celinta araggooda Iyo inaan kuwa nabaraysanoo furfuro, 19 Iyo inaan dadka ogeysiiyo sannadda qaabbilaadda ah ee Rabbiga. (Lukose 4:18,19).

Ciise wuxuu erayadan ku hadlay Isagoo dhex taagan macbudka Naasareed ee ku yaala Galilii, isagoo ka akhrinayo qoraalka. Wuxuu u yimid inuu fidiyo Warka Wanaagsan ee lagu xoreynayo maxabiista. Bal eeg dhammaan *xornimo* iyo *deysmo* waa lagaga dhawaaqay aayaddan gaaban eek u taalo Ishacyaah Cutubka 61aad. Waa maxay sababta? Maxaa yeelay Ilaah wuxuu xornimada u arkaya inay tahay shey ugu qaalisan nolosha.

Ilaah wuxuu baniaadmiga u uumay inay xornimo lahadaan. Waxay ahayd inuu la noolaado oo la shaqeyo Ilaah laakiin wuu dembaabay. Jarrabaadda sheeddaanka ayuu ku xooray xornimadii la siiyey. Waxaa lagu jarrabay inuu ahaado sida Ilaah taasi oo uu Ilaah xor ka ahaan lahaa oo bedelkeeda, meesha uu ka heli lahaa xornimo heer sare ah, wuxuu galay xabsi kaasi oo ilaa maanta baniaadmiga haysato – waa addoonsiga dembiga.

Dembigu ma ahan uun ficil uu shaqsi sameynayo ee waa dareen qalbiga ku jira. Erayga “dembi” waa “ku xad gudbidda sharciga,” “caasinimo,” iyo “gefista shiiska.” Waa isla arintan falkii dhacay markuu baniaadmiga rabay inuu Ilaah xor ka ahaado. Wuxuu gefay danta loo uumay oo duur ayuu galay.

Tani ayaa ah muqaalka dhabta ah uu Baybalka kaga sheekeynayo baniaadmiga: Baniaadmiga waxaa uumay Ilaah wuxuuna u uumay inuu jaalnimo la lahaado, waxaana nolosha qofka lagu qancin karta xidhiidhaka Ilaah lala leeyahay.

Macnaynta Xornimada ee Baybalka ku jirta ma ahan mid la mid ah in qof waliba sida uu doono ku noolanayo. Xornimada uu Baybalka ka hadlayo waa qofka oo ku nolaado sababta uu Ilaah u uumay aadanaha. Hadduu qofka dusha aaddiyo doonista Ilaah oo waddadiisa iska qaado wuu ja jaho wareeraya xornimada Ilaah ugu talagalay. Baabuurka wuxuu ku shaqeynin kara oo keliya sida loo hagaajiyey. Hadduu qofka raaci waayo sharcigas oo uu haanta shidaalka loogu talagaly biyo ku shubo, wuu khasaaraya oo wax faa’ido ah ma lahan.

Markuu qofka dembaabay, wuxuu baabi’iyey noloshiisa iyo xidhidhka uu Ilaah la lahaa. Wuxuu ka jeestay xornimada dhabta ah oo wuxuu u jeestay xabsi – laakiin Ciise wuxuu u yimid inuu naga xoreyso xabsigaas.

Xornimada Qaldan Natiijadeedu waa Addoonsi

Habka uu Baybalka u macneynayo dadka waxaa weyaan in *dhammaan ay wada dembaabeen oo ay gaari wayeen ammaanta Ilaah* (Rooma 3:23), laakiin badbaadada, xornimada iyo cusbooneysinta waa nagula deeqay, waxaanna ku heleyna Ciise Masiix oo dhammaan inta Magaciisa rumaysan way helayan deeqdaas.

Xornimada uu baniaadmigay isgefiyey markuu dembaabay waxay dhib u geysatay nolosha oo dhan. Wuxuu galay xabsi – xaq ruuxiyan, maskaxiyan, bulsho ahaan, iyo xag dhaqaale. Isla sidaasna injiilka wuxuu taabanaya qaby kastoo nolosha ka tirsan. Badbaadada Ciise Masiix lagu helayo ma ahan mid ku kooban oo keliya ruuxa qofka, ee laakiin waxay khuseysa qayb kastoo ka tirsan ama taabaneyso noloshiisa. Waana tan xornimada uu Ciise u yimid inuu hergeliyo markuu yidhi, *Ruuxii Rabbiga ayaa i dul jooga, Waayo, wuxuu ii subkay inaan war wanaagsan masaakiinta ku wacdiyo, Wuxuuna ii soo diray inaan kuwa xidhan furriinnimada ogeysiiyo Iyo kuwa indhaha la' soo celinta araggooda Iyo inaan kuwa nabaraysan soo furfuro,*
19 Iyo inaan dadka ogeysiiyo sannadda qaabbilaadda ah ee Rabbiga. (Lukos 4:18, 19).

Erayadiisa waxaa dib loogu tilmaami karaa sanadihii Jubiliiga oo ku qoran Laawiyiintii 25:10: *Oo waa inaad sannadda kontonaad quduus ka dhigtaan, oo dhammaan dadka dalka deggan oo dhan waxaad u naadisaan xorriyad, oo sannaddaasu waxay idiin ahaan doontaa wakhti yubilii ah; oo midkiin kastaa waa inuu ku noqdaa hantidiisii, oo midkiin kastaa waa inuu ku noqdaa qoladiisii.*

Ciise wuxuu u yimid inuu wacdiyo sanadkan jubiliiga. Wuxuu u dhintay oo dhimashada uga soo sara kacay inuu hergeliyo xiligan nimcada. *Xornimada waxay ka mid tahay tiirarka Injiilka midkood.* Meel alla meeshii laga wacdiyo oo laga ogolaado, dadka xor bey ahanayaan. Ciise wuxuu yidhi: *Sidaas aawadeed haddii Wiilku idin xoreeyo, runtii xor baad ahaan doontaan* (Yooxanaa 8:36).

Xornimada qofka aan xerta Ciise ka mid ahayn waa xornimo xulasho ah, taasi oo lagu macnayn karo, awoodda lagu tijaabinayo waxyaalo badan oo mid laga dooranayo. Go’aanka waxaa lagu gaaraya qiimeynta waxa ujeeddada ay leeyihiin. Tani ma xumo markay tahay in waxa aad kala dooraneysid ay tahay daawada ilkaha iwm ee noocyada kala duwan leh! Haddii marxaladdaas camal laguu diido xornimada aad ku dooraneysid sheyga aad rabtid, taasi waxaa lagu xisaabaya inay dahay ku xadgudbidda xuquuqdad baniaadminimada. Ma jirto dawlada ama rabitaanka kuwa badan oo madaxa kaga istaagi karto xauuqda baniaadmi ee tan la midka ah.

Qofka caadiga ah wuu ka doodaya sharci xumadaas isla sida uu qofka kaga doodi karo haddii xuquuqdiisa caafimaadka lagu xad gudbo. Waxaa qof waliba xaq u leeyahay fursad dabiici ah, taasi oo ogolaneyso xornimada wixii la rabo lagu sameynayo talaabada ugu habbonna lagu qaadi karo.

Sidaa ay tahayna, xornimada aan dhammaanteen u baahannahay waa inay sal leedahay. Ujeeddada ma ahan in xornimada ugu heerka sareyso la siiyo qof kasta uu ku sameynayo wax alla wuxuu doono kuna dhex noolaado bulsho anshax xumo dabiici ka dhigatay.

Qof waliba waxaa ku jirta caadi ahaanba xornimo uu Ilaah ku deeqay. Haddii xornimadaasi aan Asaga lagu caabudin oo loo gudbiyo ibliiska oo layskiiga indha tiro doonista Eebbe oo Ilaah xor laga ahaado, taasi ma ahan mid xornimo lagu helayo, ee waxaa lagu fasiri kara addoonsi.

Dadka xuquuqda aadanaha u doodayan waxay si xoog leh ugu doodayan una difaacayan xornimo ka gooni ah tan ku cad Baybalka. Taasi waa mooquf salkeeda yahay in baniaadmiga oo dhan saxsan yahay oo wuxuu u baahan yahay oo keliya inuu is kobciyo. Sababtaas awgeed wax alla wixii ka hor taagan inuu isku kobcinayo waxaa loo arkaya wax lid ku ah qofka oo xataa dhaawac u geysan karo oo weliba burburin karaan.

Waana sababta ay dadka maanka baniaadmiga u aaminsan inuu isku filan yahay ay u aaminsan yihiin wax kasta iyo shey kastaba. Waxaa laysku raacsan yahay inay dadka go’aan iisu garaan

madaama wax kastaba ay dadka u roon yihiin, ma jiro qof sheegi karo waxa wanaagsan iyo waxa fiican. Hadduu ninka go'aansado inuu shan naagood guursado ama galm xaraan ah sameyo, waxaa loo arkaya inuu xaq u leeyahay inuu sameyo wuxuu doono waana in lagu ixtaraamo maxaa yeelay ma jiro dhestuur saldhig looga dhigi karo anshax xumo ama anshax wanaag oo falkiisa lagu xukumi karo.

Waa in naloo ogolaado inaan go'aansano waxaan rabno, ayey leeyihiin, oo waxay u haystan inay xaq u leeyihiin in wax alla waxay rabaan xor u ahadaan kuna dhaqmaan. Markay arinta sidan tahay kuwa maanka baniaadminimo ku doodayaan way ogolanayan ku dhawaan wax kasto wixii aan ka ahayn injiilka iyo rumaysadka Baybalka. Markay heerkan gaarto waa la wada ogol yahay maxaa yeelay Baybalka waxaa loo arka inuu wato farriin mid dadka u diidayo inay ku istarexaan wax alla waxay rabaan madaama uu diidayo in lagu dhaqmo dabiicadaha qaarkood. Si qaldan oo khiyaano leh ayey u fahansan yihiin Erayga Ilaah!

Xornimada iyo Runta lama kala Sooci karo

Magaaladii Sodoom oo ay dadka Alle ka cabsasho la'aan ku nolayeen oo qaniisnimo iyo waxyaalo la mid ah ku dhaqmayeen, waxay daremeen Ibraahim addeerkiis, Luut, kaasi oo ku ahaa halis iyo maskax qabsasho. In kastoo uu Luut noloshiisa xakameyn wayey, weli xaq buu ahaa sida ku dhigan 2 Butros 2:7,8, aad ayuuna uga xumaaday markuu arkay xaqdaraddii lagaga dhaqmayey maagaalada. Sidaa ay tahayna dadka Soodom waxay u arkeen inuu iyaga xukumayey oo waxay isaga ku yidhaahdeen, *Waxayna yidhaahdeen, Dib u joogso. Oo waxay kaloo yidhaahdeen, Ninkanu socdaal buu ku yimid, oo wuxuu doonayaa inuu xaakin noqdo. Haatan wax daran baannu kugu samayn, intaannu iyaga ku samayn lahayn in ka sii daran. Markaasay si xun ninkii Luud ahaa u riixeen. Waxayna ugu soo dhowaadeen inay albaabka jebiyaan!* (Bilawgii 19:9).

In kastoo uu Luut ahayn nin adkeysi qabay ama geesi ah, noloshiisa waxay iyaga dareensisay sharka ay ku dhaqmayeen ilaa ay isaga ugu yedheen inuu yahay mid iyaga xukumayo. Tani maantadaba way dhacdaa. Dunida iyo masixiinta runta sharka kula gorgortatamaan waxay codkooda sare kaga baroortaan iyagoo ka cabaadayo "xukunnimo!" "sharuudooyin sharciyeed!" "jacayl la'aan in si kulul loola dhaqmayo!" maxaa yeelay aslinimada injiilka iyo nolosha awliyada xaqa ku nool ayaa qalbiyadooda wareemayaan oo dembiyadooda xukumayaan. Durbaba, dembiilaha dhib la'aan kuma ahanayo noloshiisa. Fikir kasta oo baniaadminimo oo Erayga Ilaah ku nacayo ma ahan oo keliya inay tahay runta nool ee waxaa kaloo ay qofka u muujineysa dembigiisa iyo natiijada falka dembiga iyo Alle ku caasinta.

Xornimada uu Ciise na siiyey ma ahan mid noo baneyneyso inaan ku dhaqanno wax alla waxaan doono inaan ku sameyno meesha aan doonno. Maya! Xornimadan waxay noogu timid inaan ku fahanno kan uu yahay iyo sababta uu noo uumay si aan uga qayb qaadano qorshaha uu noogu talagalay. Waa uun marka qofka uu qalbiga ka xuroobo marka uu ahanayo baniaadmi rasmi ah oo dabadeetana uu isaguna dadka kale qalbigiisa ka xoreyn karo.

Xornimada iyo runta waa sida far iyo faraantigeeda. Xornimada dhabta ah waa adiga oo qorshada uu Ilaah kuu uumay ku jirtid. Xornimada la sheegayo ma ahan uun inaad waxaad rabtid dooran kartid ee laakiin waa awoodda aad u leedahay inaad ku dooratid waxyaalaha saxda ah si aad u gelin natiijo ka shaleyn kuu keeneyso doorashada qaladka ah ee aad dooratay awgeed.

Erayga Ilaah wuxuu abuuraya Xornimo

Timoteyoska 1aad 3:15, kiniisadda waxaa lagu magacaabay inay tahay *tiirka iyo aasaaska runta ah.* Sida aan horey loo soo sheegeyba ma jirto xornimo dhab ah marba haddii ay la xidhiidhsanayn runta. Waa runta waxa xor naga dhigayo (Yooxanaa 8:32). Hawsha kiniisadda loo xilsaaray waa ku wacdinta Injiilka runta ah – Injiilka oo dhan.

Injiilka waa in lagu wacdiyo ururada kala duwan ee dadyowga oo dhan ka tirsan yihiin: kuwa

awliyada ah inay cunaan oo ay qancaan iyo dunida, si ay u badbaaddo. Injiilka oo ah warka wanaagsan ee Ilaah, waa in haddana loogu wada wacyoodo kuwa amarka leh iyo dawlahada si ay u fahmaan wuxuu Ilaah iyaga ka ogeysinayo shaqada ay ku waajiban yihiin. Ugu dambeysta, Injiilka waa in laga caddeyo xagga ruuxa si uu ibliiska iyo hawlihiisa dad baabi'inayaan dhinac uga baxaan waddada dadka Ilaah oo isaga iyo awoodihiisa oo dhan lagu xusuusinayo inuu cagaha Ciise hoos joogto!

Runta jirta oo ah Erayga Ilaah, awood ayuu u leeyahay uu waxyaalahan oo dhan ku hergeliyo. Eraygiisa wuxuu quudinaya idahiisa ee ah xertiisa isla markaasna wuxuu ka shaqeynaya xaga ruuxyada dunida, isagoo ibliiska dhinac u dhigayo. Markay kiniisadda wacdinayso Erayga aan gorgortanka la gelinin, si kastoo ay dunida kaga jawaab celisaba, dabadeetana waxay noqoneysa tiirka iyo saldhigga runta oo waxay abuuri karta xornimada ay u baahan yihiin ragga iyo dumarka.

Markay kuwa awliyada ah fidinayaan runta Erayga Ilaah ku jirta waxay nolosha kala kulmayan mooqufyo kala duwan iyo anshaxa bulshada. Haddaba haddii ay Erayga Ilaah berxaan oo ay ka dhigan mid u macaan dunida Ilaah ka fogaatay, waxay sameynayaan qaladka ugu weyn, maxaa yeelay dhabtay waxay dhaxda ka bixinayaan saldhiga iyo tiirka Injiilka. Waxay meesha ka saarayan awooddeeda ay kaga xoreyn lahayd kuwa xabisan.

Waa uun Erayga Ilaah oo keliya kan dadka xoreyn karo. Haddii aan Erayga Ilaah dhexda ka bixino, ama aan addeeci wayno, waan ka hadli karna xornimada si alla sida ugu heerka sareyso ee laakiin oo waxaan ku ballanqaadi karna annagoo u leexineyno dhinac kasta laakiin awooddeeda dadka ma dareemi doonaan.

Butrooska 2aad 2:19 waxay ka hadlaysa nebiyada iyaga naftooda dembiga ku nool. Iyagoo hadalo jilecsan ku hadlayaan *ugu ballanqaadaan xorriyad, laakiinse iyaga qudhooduba waa addoommadii kharribaadda. Waayo, wixii ka adkaada nin ayaa isaga addoonsada.*

Laakiin haddii ay kiniisadda si xoog leh ku hadasho iyadoo leh, "Rabbiga wuxuu leeyahay!" oo kaga hadlaya qayb kastoo nolosha ka tirsan, ficilgalka ugu heerka sareyo ayaa ka hergelaya xagga ruuxa oo xornimada runta ah ayaa u muuqaneysa noloshooda kaga dareemi doonaan qof kasta. Marka ay kiniisadda si bayaan ah ku fidineyso Erayga Ilaah, isbedel xoog leh ayey ku dhalineysa xagga dunida ruuxa. Eraygiisa wax buu abuuraya oo cusbooneysinaya oo meel alla meesha laga maqlo oo laga soo dhaweyo xornimo ayaa laga dareemi doonaa, Erayga bogsiinta wuxuu ficilgelinaya bogsiinta. Erayga cafiska wuxuu ficil gelinaya cafiska iyo Erayga xornimaduna wuxuu herggelinaya xornimo ku dhalaneysa qalbiyada soo dhaweyn doonaan.

Cadawgeena sheeddaanka wuu fahansan yahay arintan oo wuxuu isku deyaya inuu dadka ka hor istaago Erayga si aanay uga xor uga ahaanin xabsigiisa dembiga. Laakiin Ilaah baa ammaan mudan oo cadawga mar dambe ma awoodi doono inuu qaloociyo ama lid ku ahaado injiilka. Erayga Ilaah wuu si xoog leh ayuu ku fidaya oo weliba dhiiranaan ayaa lagu wacdinaya si awood badan sida ay weligeed ka ahayd taarikhda. Natiijaduna waxay ahaaneysa inaan arkeyno dad badan oo laga xoreynayo awoodda sheeddaanka – weliba madaama uu Ilaah helay adeegsanayana dad aan Erayga Ilaah beenta kula gorgortameynin, kuwaasi oo xornimada lagu helayo xoogga saarayan ka badan dhibka ka soo gaarayo fidinta Erayga ama faa'idada ay helayan haddii aanay wacdinin, oo diyaar ayey u yihiin inay ku wayaan wax kastoo ay dunida faa'ido kaga helayaan. Markay xerta Ciise diidaan inay gorgortan ku baabi'iyaan xornimada ay Ciise ku helayaan, cusbooneysin ruuxiyan ah ayaa ku soo dul degeysa dhulkooda. Xornimada haddaba waxay kuu taagan tahay iridda!

53

Cusbooneysin – Weerar Bulshada lagu hayo

Cusboonaanta ma ahan waa meel gooni ah ka dhaceyso. Cusbooneysinta waxay wada saameynaysa bulshada oo dhan oo wuxuu waxay taabaneysa mid kasta oo bulshada ka tirsan, Faalimaha Rasuullada 2:6 waxay macneyneysa ciyid iyo hor u socod markaan akhrino erayadan, *Oo markii sanqadhaas la maqlay, dadkii badnaa ayaa isu yimid, wayna yaabeen, maxaa yeelay, nin kastaa wuxuu maqlay iyagoo afkiisa ku hadlaya.*

Maxaa dhacayna? Ruuxa Ilaah wuxuu ka buuxsamay dadka caadiga ah kuwaasi oo codka Ilaah ku soo dhaweyeen noloshooda. Waxay meelaha ay jogeen kala soo baxeen awoodda Ilaah oo waddooyinka ayey u soo baxeen, si kuwa aan badbaadin ula kulmaan awoodda Ilaah.

Cusbooneysinta hab heer sare ah ayey ku timid! Waxaa jireen shqulo iyo noolol taabteen dareenka dadka. Waxay ahayd wax awood leh dadka su'aalo wanaagsan ku dhaliyeen qalbiyadooda!

Haddaba, dad badan ayaa u barooranayaan nabad iyo deganaansho. Waxay rabaan in looga adeego xagga deganaanshaha iyo dhib la'aanta. Laakiin kuma noolin xiligii la istareexayey oo la shaheysanayey! Waxaa la jooga xili dunida oo dhan inay baraarugto ay tahay oo ay fahanto in Ciise noolyahay oo awooddiisa sara kaca diyaar ayuu u yahay dhammaantood.

Waxaan ku nool nahay wakhtigii ruuxiyanka ahaa iyo weliba booqashada Ruuxa iyo weji ku weji ku wada hadlid. Waa wakhti ah inaan horey uga socono uguna sii adkeysano xidhiidhka aan la leenahay Ilaah – samada ayaa weerareysa dunida. Cusbooneysinta way timid! Wax ka duwan waxa aad ku fikireysid, cusbooneysinta ruuxiyanka ah waa weerar lagu hayo bulshada, Ilaah ayaana arintan ku hawl jira! Ma jirto lama sheegin cusbooneysin ku timid xarbi la'aan.

Wakhtiyada Cusbooneysinta waa xiliyo lagu jiro dagaalo ruuxiyan ah. Ruuxa Ilaah ayaa na caddeynaya si aan uga guuleysano hab nooleydka dunida iyo ruuxa iyo maanka mucaaradka ku ah Masiixa oo weliba ku sii badanayan Kiniisadda iyo dunida agagaarkeena ah.

Mirta Cusbooneysinta ee ku jirta Kiniisadda iyo Bulshada

Cusbooneysinta waxaa lagu macnayn karaya habab badan. Waxay bedeli karta xaaladda dhan ee ka jirta quruun dhan. Ilaah si joogta ah ayuu noogu sheegayey inay suurtagal tahay in la bedelo marxaladda waddanka, waanna arki doonaa ficilkaas!

Cusbooneysinta waxay dad badan u soo jiideysa Boqortooyada Ilaah, wuxuu ka soo saaraya dhoobada dembiga oo wuxuu u soo jiidaya nolosha weligeed ah, waxayna ahanayaan kuwa laga soo badbaadiyey naarta suganeysay. Cusboonaanta waa ruux jacayl oo xoreynayo kuwa tabarta daran oo ka dhigayo inay xaflado ku wada farxaan oo niyad jabkooda ayaa laga soo saaraya oo rajo ayey helayaan.

Cusbooneysinta ruuxiyanka ah waa xil iska saarid iyo anshax wanaag edeb laga dhigtay taasi oo rumaystayaasha ka reebeyso inay ku noladaan rabitaanka jirkooda, daxadir la'aanta iyo ka fogaansha isku haleynta awoodda baniaadminidama oo noloshooda oo dhan u bandhigaan Rabbigga. Cusbooneysinta ruuxiyanka ah waa hab maamuleyd oo dembiga ka hor istaageyso inuu ku fido bulshada. Ruuxa Ilaah wuxuu bulshada ku dhalinaya ka cabsashada Eebbe si aan loogu dhaqmin nolosha sida sakhraamidda, raacista wax baridda qaloocan, daawashada sawirada qawnida, ku dhaqashada faasuqnimada iyo weliba iska soo ridista uurka oo mara qaarkood waxyaalahas way ka dhex baaba'ayaan bulshada.

Cusbooneysinta ruuxa waa dhacdo bulshada ka dhex baabi'ineyso khiyaanada noo kastoo ay ahaataba, sharci darroda iyo awoodda siyaasadda oo waxay kobcineysa xornimada lagaga nolanayo qayb kastoo ka tirsan nolosha.

Cusbooneysinta ruuxa suurta gal ma ahan Ilaah la'aantiis. Baniaadmiga inaba awood uma lahan inuu cusbooneysintaas ruuxiyanka ah isku siiyo ee laakiin waxaa awood heer sare ah u leh Ilaah.

Ilaah wuu rabaa inuu hergeliyo wuuna hergelinaya. Ammaanta Ilaah iyo jiritaankiisa amaa mar kale ifi doonaan oo arliga gilgili doonaan, inuu canaanto oo ku calaamadeyo dadka dunidan ku sugan, intuusan Ciise soo noqonin oo qaadanin caruusaddiisa, Kiniisadda, oo uu ula tegin xagga samadda si ay nolosha oo dhan halkaas Ilaah ugula noladaan.

Cusbooneysinta ruuxiga ah ku talagalka ugu weyn waa badbaadinta shaqsiga ee laakiin waxaa u dheer dib u habeynta iyo bedelidda heerka qurunka ah ee ku jira Kiniisadda. Maalmahan dambe waxaan arkeyna in hawlo badan oo sifeynta kiniisadda ah ay adduunka oo dhan ka socoto natiijaduna waxay ahaan doonta ammaanta Ilaah oo dadka soo booqaneyso. Wacdiyayaalka badankood way dareemayaan dhacdadan cusub oo wayna ficil geliyaan si dhaqso ahna fikiraddooda ayey ka dhiibanayaan oo ay ku garanayaan dhinaca uu barnaamijkan ama barnaajikaas u socdo. Waxay si joogta ah uga hadlayan “heerka cusub ee lagu dhaqmayo.”

Shaqsi ahaan, anigu iskuma mushquuliyo arintaas. Ilaah ayaa wakhtiga ay ugu habboontahay iyo sida ay ugu habboontahay ku hergelinaya iisu diyaarinta cusbooneysinta ruuxiga ah. Dib ayuu u soo habeynaya, uu dhisaya oo wuxuu raacinaya waddada ugu habboon taasi oo la hergelineyso waxyaala kala duwan. Marxalad kastana haba ahaatee, ma ahan duufaan cusub ee cusbooneysinta ku saabsan. Wax kastaba way isku lifaaqsan yihiin xidhiidhna way leeyihiin. Haddii ay qaar xoogga saarayan ammaan iyo caabudidda Rabbiga, ama heer sare oo dadka kale iyo marxaladaha kale loogu duceynayo, ama ka samato bixinta xabsiga ibliiska, haddaba dhacdooyinkani ma ahan duufan cusub oo ku saabsan cusbooneysinta Ruuxa ee laakiin waa horey u socodka muujinta Rumaysadka. Xerta Ciise waa inay wada xambaarato dhacdooyinkan kiniisadda ka dhex dhacayaan, waana inaynan kala saarin, oo ay ka dhigin ficil uu midba kan kale mucaarad kula noqonayo. Dhammaantood waa muhiim waxayna ku yimadaan sida ay u kala horeyaan.

Dib u Habeynta Nolosha iyo Awoodda

Kiniisadda waa inay sarro kacdo oo ay dib iisu habeyso si ay dunida ku badbaaddo. Waxaa jiraan saddex xibnood uu Ilaah dib uga habbeynayo kiniisadda:

1. Wax baridda. Ilaah wuxuu kiniisaddiisa ku dul dhisaya wax barid sax ah. Kiniisadda ma ahaaneyso mid dhadhaqaaq leh haddii ay xooga la saarin wax baridda ku saabsan Cusbooneysinta. Ciise wuxuu leeyahay haddii aan ku dhawreyno wax bariddiisa, waan garan doonnaa runta, oo runtana way ina xoreyn doontaa (Yooxanaa 8:31, 32).

Waa inaan fahanno in masiixinimada meelo kala duwan ku sugan ay aad uga fogadeen Erayga Ilaah oo bedelkeeda waxay addeeceen wax baridda ruuxa wasakhda ah. Adduunka waxaa aad uga muuqata in kiniisadaha adduunka ka jiraan ay si xoog leh uga dheeranayaan waxyaalaha muhiimka ah oo looga baahan yahay inay ku dhaqato. Si tartiib ah ayey arintaas noo soo gashay laakiin hadda si xoog leh ayaa loola dagaalaya, waa dagaal ruuxiyan ah oo si xoog leh loo dagaalamayo oo ibliiskana wuu ciyaya sababtoo ah wuxuu ka xun yahay ficilkan kheyrka ah oo ay kiniisadda ku ficiltameyso.

Fahan darro ayaa ka jirta xerta Ciise dhexdeeda. Dadka qaarkiis waxay leeyihiin, “Waa inaanan dood gelin. Ma jiro mid ka mid ah xerta oo rabo inuu la doodo xerta kale. Dagaalkeena ma ahan mid jidhka iyo dhiiga ku lifaaqan, laakiin waa inaan difaacno oo aan fidino runta, oo waa inaan canaan kaga hor tango rumaysad la’aanta iyo ka leexashada runta Ilaah.

Cusbooneysinta ruuxa lagu helayo suurtagal ma ahan mana xoogeysaneyso mana barbaarayso marba haddii aan layska daahirinin rumaysad la’aanta. Haddii uu qofka rabbin inuu fariintan addeeco wuxuu ahanaya mid ka farxinayo dadka ee ma aha Ilaah. Midnimada waxaa lagu heli kara oo keliya marka saldhiga nolosha laga dhigo Erayga Eebbe, dhiigga iyo Ruuxa Quduuska ah, oo Ciisaha Baybalka ku qoran ka yahay Rabbiga.

2. Noolol Quduusnimo. Cusbooneysinta nolosha suurtagal uma ahan qofka aan quduusnimada qabin, xaqnimo ku jirin oo aan ahayn weel jacayl qabo. Ma ahan inaan ka hadleyno dad quduusin

ah, ee laakiin waxaan ka hadleyna dadka daacadda ah. Qofka daacadda ah, oo uu Ilaah subkay ma daneynayo daawashada sawirada qaawanaanta iyo shileemooyinka wasakhda ah. Qofka addeeca leh kuma dhib qabo xamashada, yaska, cuqdadda iyo niyad jabka. Qofka addeecista leh kuma dhib qabo ku dhaqashada waxyaalaha aan Ilaah ka farxineynin. Kuma ficiltamayo ka leexashada bixinta canshuurta, ama khiyaano kastoo la xidhiidha hunguri weynida. Qofka addeecista leh kama xishoodo meelaha ducada laysugu yimaado, amaba inuu iskiisa Ilaah shaqsi ahaan duco ku hor tago. Qofka addeecista leh Baybalkiisa waa siigo la'aan.

Ka tabar beelidda ku dhaqashada hogaanka Ruuxa, gunuunaca iyo calaancalka, ka hadlidda dadka kale iyo wixii la mid ah ma keenayaan cusbooneysinta nolosha ee ruuxa lagu helo. Cusbooneysinta Ruuxa waxaan ku heleyna markaan qalbiyadeena oo dhan ugu oomanahay Erayga Ilaah oo aan diyaar u nahay wax alla, si kastoo ay ahaato iyo wakhti kastoo ay ahaataba inaan diyaar u nahay inaan sameyneyno. Markay dadka iska xooraan wax alla waxay gooni u qiimeynayaan, oo ay joojiyaan inay farriinta Eebbe wax ka geeska ku Ilaah ku amrayaan, goorta iyo qofka lagu fulin lahaa hawsha oo waxaa keliya oo noogala baahan yahay inaan Isaga ixtaraamno oo aan ka codsano inuu nagu soo dejiyo cusbooneysinta nolosha ee ruuxiisa lagu helayo, Ilaahna wuu sameyn doonaa wax alla waxaad qalbi saafi ah kaga codsatid.

3. Dib u soo celinta Awoodda Ilaah. Cusbooneysinta Ruuxa waa mudaharaadda lagu sameynayo awoodda Ilaah. Kuwa badan ayaa umaleynayaan inay tahay ariin si sahlan ku imaneyso ee laakiin sidaa ma ahan. Si tallaabo talaabo ah ayaa horta lagu arkaya calaamadaha iyo yaababka dabadeetada waxaa la arkaya ammaanta Ilaah oo badaneyso. Oo tallaababa tan ka dambeyso ayaan arkeyna inay dad tirro badan soo badbaadayaan.

Sababtaas awgeed, waa nacasnimo in guriga layska fadhiyo oo dadka kale arimahooda laga hadlo lagu xanto kuna eedeyneysid inaad iayga ka quduusan tahay, waxaad iisu aragtaa inaad adigu muucjisooyin badan sameyneysid oo aad si heer sare ah u duceysatid oo ducadaada dad badan ku bogsanayaan, faraxadna lagu helay! Ha ogolaanin in qof iska fadhiyo oo xamashada uun ku hawlan inuu farxadda aad Rabbiga ugu adeegeysid kaa qaado! Haddaba waa inaad fahantid in Ilaah adiga ku adeegsanayo kuguna farasan yahay madaama aad go'aansatay inaad u adeegtid Isaga.

Cusboonaanta waa Natiijada Ducada

Kuwa badan oo loogu yeedho gaashaanlayaasha ruuxa iyo kuwa mooqufkooda xakameyaan laakiin mar kastaba lagu tilmaamaya waxyaalo xun oo Ilaah raali ka ahayn. Waxba haka dhageysanin dadka noocaas ah. Ma jiraan wax ay iskooda. Hawsha aad waddid ha joojinin! Maalin waliba waxaa kuu kordhaya rumaysadka, dhiiranaanta iyo farxadda inta aad ku sii ficiltameysid wuxuu Erayga Ilaah ku siiyey adiga.

Ha ogolaanin inay cidna kaa xoogto farxaddaada! Talaabo dheer ka sii gaar! U riyaaq waxyaalo kaloo waweyn oo awoodda Rabbiga ku jiraan oo aad ku noolaatid. Waxba ha walbahaarin sababtoo ah weli ma aadan gaarin heerka Butros. Rumayso in waxyaala badan oo awoodda sara kaca ah noloshaada ku soo butacaan. Ha rajo dhigin! Ha u ogolaanin inuu sheeddaanka hortaaba ku sawiro waxyaala xoojinaya niyadjabkaaga ama hawlgabkaaga. Ciise ayaa carshiga ku fadhiya oo wuxuu kaa ballanqaaday in ammaantiisa aan xadadka lahayn uu kugu soo butaacin doono iyo weliba awooddiisa uu ku siin doono wakhtiyada ugu dambeyo. Ma wayni doontid haddii aad rabtid!

Qoraalada Baybalka oo dhan waxay noo sheegayan in Cusbooneysinta ruuxa lagu helay oo keliya ducada. Haddaba duceyso! Ha ogolaanin inuu qof lid ku ahaado ducooyinka daacadnimada qalbigaaga ka soo go'day ee aad ku codsaneysid inay cusbooneysinta ruuxa soo degto. Haddaba si buuxda waa inaad isugu dhiibtid ducada, oo ruuxa ducaduna wuu kugu soo dul degaya oo ku caawinaya inaad aasaastid hawsha cusbooneysinta Ruuxa ka imaato oo nadiifin doonto oo xaq ka

dhigi doonto waddankaaga. Ilaah wuxuu rabaa inuu istecmaalo qof kasta, oo isla sidaasna adiguna wuu ku istecmaalaya! Is habeyo, meel isugu wada imaado oo duceysta!
Haddaba joogsi la'aan ku duceysta! U duceeya kuwa amarka leh, u duceeya inay cusbooneysin iyo guul weyn lagu helo hawsha Rabbiga. Haddaba ha ku duceysanin oo keliya waxyaalaha aad u baahan tahay ee u sii gudub dadka kale iyo marxaladaha kale Ilaahan ducooyinkaas barakadooda wuu kugu soo celin doonaa! U ducee waddankaaga oo Ilaahna wuu ligligi doonaa oo saxi doonaa waxyaalaha aan caadiga ahayn, oo barakooyinka iyo faraxadda ka soo degeysa samadda ayaa ku dul sabeyn doontaa quruuntaada mar kale!

54
Waddan dib loo habeyey!

Dabadeetana Daanyeel wuxuu ammaanay Ilaaha Samada ku jira oo wuxuu yidhi: Dabadeetana Danyeel wuxuu ammaanay Ilaaha Samada oo wuxuu yidhi, "*19 Markaasaa qarsoodigii Daanyeel tusniin loogu muujiyey goor habeen ah. Daanyeelna Ilaaha samada ayuu u mahadnaqay.*
20 Daanyeelna waa jawaabay oo wuxuu yidhi, Ammaan waxaa leh magaca Ilaah weligiis iyo weligiis; waayo, isagaa leh xigmad iyo xoogba;
21 oo wakhtiyada iyo xilliyadana isagaa kala bedbeddela; isagaa boqorro dejiya oo boqorro saara. Xigmad buu siiyaa kuwa xigmadda leh, aqoonna wuu siiyaa kuwa wax garta.
22 Wuu muujiyaa waxyaalaha fog iyo qarsoodigaba; wuuna yaqaan waxa gudcurka ku jira, nuurkuna isaguu la joogaa" (Daanyeel 2:19-22).
Ilaah keliya ayaa uumay dunida. Isaga oo keliya ayaa akhtiyaar u leh inuu yeelo sida uu doono, maxaa yeelay, Isagaa eray awood leh *wax kasta jiritaankooda ka dambeya (*Cibraaniyada 1:3)
inuu isaga wax kastaba xaggiisa kula heshiiyo, isagoo kula nabday dhiiga iskutallaabtiisa; hadday yihiin waxyaalaha dhulka jooga ama hadday yihiin waxyaalaha samooyinka ku jiraba
(Kolosay 1:20).
Ilaah oo keliya ayaa awood u leh inuu samata bixiyo oo badbaadiyo dadka, ee laakiin wuxuu bedelaya heerka xagga xidhiidhka u dhexeya Ilaah iyo quruumaha. Hadda xaalkan Ilaah wuxuu ku hawl jira dib u habeynta iyo jaheynta waddamada. Iaah wuxuu rabaa inay magaalo madaxda iyo dhulka oo dhan ahadaan baartamaha lagu xoojinayo fidinta Injiilka si lagu wada gaarsiyo quruumaha dunida. Wuxuu rabaa inuu soo kiciyo ciidanka xerta Ilaah u adegeyso taasi oo injiilka gaarsin doonto baniaadmiga oo dhan meel alla meesha uu ku sugan yahayba kuwaasi oo aan weligood maqlin injiilka Ciise Masiix ee ah samata bixiyahooda, kaasi oo ah kan qaba nolosha weligeed ah ee ay wax kasta ku jiran iyo weliba barako uu iyaga u wada hayo.
Markuu qofka Ciise Masiix u qaato sida Badbaadiyahiisa iyo Rabbigiisa, barakooyinka Ilaah ayaa soo gelayaan nolosha qofkaas oo wuxuu helaya awood uu muucjisooyin ku sameyo. AWooddiisa wax kasta ka sareysa; isla tii Ciise dhimashada ka sara kicisay, ayaa ka hawl bilabeysa qofkaas noloshiisa, oo dib ayuu u soo celinaya noloshaas wuxuuna ka dhigaya waxa uu Ilaah ka rabo inay ahaato. Wuxuu huwanaya muuqaal aad u cusub. Wuxuu durbaba gelaya qorshaha Ilaah ugu tallo galay noloshiisa wuxuuna fahmaya waxa lagu fasiri karo xornimada dhabta ah. Wuxuu durbaba fahmaya in dembiga iyo awoodda shaqsiga ay sal baleen; waxaana meeshooda qatay nolosha buuxda ee Ilaah taasi oo ay ka butaacayaa barakooyinkiisa, wuuna awooda qofkaasi inuu isla sidaas barako u ahaado dadka kale.
Waxaad xor ku ahaatay Ciise Masiix ee haddaba waa inaad nolosha iyo awoodda aad Ilaah ka heshay u gudbisa dadka kale ee agagaarkaaga jogaan ee muucjisooyinka u baahan. Arinta ugu

wanaagsan waxay tahay in Ilaah; kan aad u wanaagsan, waxyaalaha wanaagsan ee uu u sameyo cid waliba. Ciise wuxuu u yimid in kuwa dembiga u xabisan xor ka dhigo: *18 Ruuxii Rabbiga ayaa i dul jooga, Waayo, wuxuu ii subkay inaan war wanaagsan masaakiinta ku wacdiyo, Wuxuuna ii soo diray inaan kuwa xidhan furriinnimada ogeysiiyo Iyo kuwa indhaha la' soo celinta araggooda Iyo inaan kuwa nabaraysan soo furfuro, 19 Iyo inaan dadka ogeysiiyo sannadda qaabbilaadda ah ee Rabbiga.* (Lukos 4:18,19).
Isla sida looga sheegay Cutubka kan ka horeyey, Ciise wuxuu ka hadlaya xornimo iyo samato bixin. Farriinta wanaagsan uu Ciise keenay waxay ahayd tan xornimada lagu xoreynayo *qayb kastoo* nolosheena ka tirsan. Waa inaan ku wacdino cabsi la'aan, marmarsiinyo la'aan, berax la'aan iyo cabir la'aan. Marka qofka xor laga dhigo, xornimadu way ka muuqaneysa noloshiisa iyo agagaarka uu ku noolyahayba. Xornimada uu helay waxay sameyneysa ruuxiisa, naftiisa iyo jidhkiisa. Xornimadiisa waxay sii sameyneysa qoyskiisa, dhaqaalahiisa, jiiraankiisa iyo waddankiisa.

Xerta – Waa qalabka uu Ilaah ku barakeyo Arliga
Ilaah wuxuu rabaa inay barakooyinkiisa wada garaan arliga oo dhan.
10 *Kuwa xaqa ahu markay barwaaqoobaan, magaaladu way rayraysaa, Laakiin kuwa sharka lahu markay halligmaan farax baa lagu dhawaaqaa. 11 Kuwa qumman ducadooda magaaladu sare bay ugu kacdaa, Laakiinse kuwa sharka leh afkoodu magaaladuu dumiyaa.* (Maahmaahyadii 11:10, 11). *Markii kuwa xaqa ahu amarka haystaan, dadku wuu reyreeyaa, Laakiinse markii kuwa sharka lahu xukunka wataan, dadku wuu taahaa.* (Maahmaahyadii 29:2). *Xaqnimadu quruun way sarraysiisaa, Laakiinse dembigu waa u ceeb dad kasta.* (Maahmaahyadii 14:34). Xerta waxay agagaarkooda ku deeqayaan barakooyinka Ciise Masiix oo inta ay raad qaadayaan Rabbigooda, waxay barako u ahanayaan arliga ay ku noolyihiin.
Wakhtiyadii Eliyaah, dadka waxaa baabi'inayey abaar. Boqorada 1aad 16:30-34 waxay ka hadleysa sida uu Boqor Axaab iyo naagtiisa ay gogol dhaaf ku sameyeen oo weliba Boqorada 1aad 17:1 waxaan ka arkeyna in natiijada falkaasi uu ahaa mid lagu roob beelay uu roob di'in "iyadoo ay ahayd xili roobeyd" (Laawiyiintii 26:4) abaar daranna waa lagala kulmay, maskiinimo, rajo la'aan iyo baaba'.
Hoosheeca 4:3, waxaan arkeyna inuu Rabbiga leeyahay, *Dadka Israa'iilow, Rabbiga eraygiisa maqla, waayo, Rabbigu dacwad buu la leeyahay dadka dalka deggan, maxaa yeelay, dalka dhexdiisa laguma arko run, ama naxariis, ama aqoonta Ilaah toona. 2 Innaba wax kale laguma arko dhaarasho been ah, iyo axdijebin, iyo dilid, iyo xadid, iyo sino mooyaane. Way soo fara baxsadaan, oo dhiiggelid baa dhiiggelid ku xigsata.* (Hoosheeca 4:1,2).
Arliga oo dhan ayaa dareemay natiijada dembiga iyo gogoldhaafka. Markay Alle ka cabsasho la'aanta noqoto dhaqanka waddanka, xaqdarroda oo dhan ayaa noqoneysa mid la sharciyeyo. Marka injiilka la inkiro ama si qaldan loo fasiro, wacdiyayaalkanala yaso lana cadaadiyo, waxaa raaci doontaa natiijo waddanka oo dhan saameyn doonto.
Ilaah wuxuu Ibraahim iyo farcankiisa ku yidhi (taasi oo ay ku jiraan xerta oo dhan ee maanta nool) *oo waan barakayn doonaa kuwa kuu duceeya, kan ku habaarana waan habaari doonaa: oo qabiilooyinka dhulka oo dhammu adigay kugu barakoobi doonaan.* (nations and generations) *on earth will be blessed through you* (Bilawgii 12:3). Waxaan qorniinkan ka fahmeyna in hogaamiyaalka iyo amarada oo dhan ay ogoladaan inay xerta u fududeyaan fidinta Injiilka, dhulkooda waxay kaga midho goosanayaan xadhaaf iyo barako.
Erayga Ilaah wuxuu si qumaati ah u cadeynaya in barakooyinkiisa ay u banaan yihiin quruumaha oo odhan, barakadaasi oo ku imaneysa xerta. Sababtaas awgeed waa muhiim inaynan xerta iska saaxanin ee ay ku hawl galaan masuuliyadda la siiyey. Haddii ay Sodom ka jiri lahayeen toban

qof oo xaq ah , Ilaah wuu u turi lahaa iyada oo badbaadin lahaa, laakiin waxaa hubaal ah inay runtii jiraan dad tobban ka badan oo xaqnimada ku dhaqmaan oo ku jira waddankaaga. Waxaa jiraan ugu yaraan kumanaanba!

Xaqnimada – Gashaanka Arliga

Muhimad weyn ayey leedahay markaad fahmeysid in xaqnimada aad Ciise Masiix ku heshay ay barako u tahay quruuntaada oo dhan. Waxaad ahaatay gashaanka waddankaaga. Ha ogolaanin inuu ibliiska kugu dhega hadlo inaad tahay qof aan macna lahayn; iyo weliba in ficilkaaga, ducooyinkaaga iyo fikiraddaaduba ay wada yihiin sida hal bacaad lagu lisay iyo wakhti lumis. Taasi waa qalad! Aad baad qiima u leedahay! Bal ee Samu'eelka 1aad 14:6-15, Jonadan iyo u adeegahiisa waxay ka guuleysteen Falistiinta oo waxay Falistiinta ku dhaliyeen wareer iyo is af garasho la'aan, *Ma jiraan wax Rabbiga ka hor istaagi karo inuu badbaado hergeliyo, haddii uu dad yar ku hergelinayo iyo haddii uu dad badan ku hergelinayaba.* Ducooyinkaaga iyo ficiladaada ma ahan wax lumay. Barako ayaad u tahay waddankaaga!

Waa suurtagal boqolkiiba qoqol Ilaah bedelo marxaladda hawada xagga xidhiidhka Ilaah ee ka jirta arliga. Aad bay muhiim tahay in dadka oo dhan ay ku dhaqmaan doonista Eebbe bedelkii ay ku socon lahayeen doonista ibliiska. Rumaystayaal badan ayaa jiraan oo ay arintan Alle addeecista gacan siineynin, waana sheyga uu cadawga aad ugu faraxsan yahay! Laakiin waa suurtagal – waa haddii aad rumaysatid.

Taarikhdii 2aad 7:14 waxay dhigeysa, *haddii dadkayga oo ah kuwa magacayga lagu yeedhay ay is-hoosaysiiyaan, oo i baryaan, oo wejigayga doondoonaan, oo jidadkoodii xumaa ka soo noqdaan, de markaasaan samada ka maqli doonaa, oo dembigoodana waan ka cafiyi doonaa, oo dalkoodana waan bogsiin doonaa.* Ilaah wuu bogsiin kara quruun dhan. Ma jiraan dad ama quruun uu kuwa kale ka qiima badinayo, laakiin wuxuu u wada haya fikirado iyo qorshooyin kala duwan. Waxaan aaminsanahay in Ilaah uu qalbigeyga si buuxda u geliyey in waddankayga uu maal gelin doono oo dad Ilaah u adeega waddamada kale u diri doono oo injiilka ku wacdin doonaan Yurubta iyo qayba kale oo ka tirsan dunida.

Waana sababta aan ku waajibannahay inaan is hoseysino oo aan u duceyno waddankeena; si aragtida Ilaah loo ficil geliyo ee ma ahan tan ibliiska. Bawlos wuxuu Timoteyoska 1aad 2:1-4 naga leeyahay, *Sidaas daraaddeed ugu horraysta* (macnaha wax kasta ka horeba, intaanan duceysanin) *waxaan kugu waaninayaa inaad Ilaah u baridid, oo aad u tukatid, oo aad u ducaysid, oo aad u mahadnaqdid dadka oo dhan,2 khusuusan boqorrada iyo kuwa amarka lehba, inaynu noolol xasilloon oo nabdaysan ku noolaanno, innagoo si walba cibaado iyo maamuus u leh.3 Taasu way wanaagsan tahay, waana mid Ilaaha Badbaadiyeheenna ahu aqbali karo.*
4 Wuxuu doonayaa in dadka oo dhammu badbaado oo ay runta gartaan.

Macnaha ma ahan inaan duceysaneyno oo aan iska fadhiisaneyno oo iska shaheysaneyno. Laakin macnaha waxa weyaan inaan ku duceysano inaan helno awood iyo jagooyin si ay ficiladooda xerta uga reebin ficil gelinta rumaysadkooda sida uu Ruuxa Quduuska ah qalbiyadooda u geliyey. Ilaah wuxuu rabaa inay xerta xor u ahaato inay Ciise u aqbalaan inuu yahay Rabbigooda oo ay ku noladaan hab xornimo ah sida ku dhigan Erayga Eebbe. Ilaah wuxuu aad rabaa in Injiilka la fidiyo, waana in injiilkan lagu fidiyo hab kastoo suurtagal ah iyadoo aan wax ka hor imaad ah jirin, si qaldan loo fasirin oo weliba aan la cadaadinin. Waa maxay sababta? Sababta waxaa weyaan Ilaah *Wuxuu doonayaa in dadka oo dhammu badbaado oo ay runta gartaan.* (v 4). Amar kastoo ka soo hor jeedo xornimada injiilka lagu gudbinayo sida uu yahay, kaasi ayaa ah xabsiyeynta ugu weyn. Waxay amaradaasi dhalinayaan xabsinimo xagga xidhiidhka Ilaah lala leeyahay ama ruuxiyan ah kaasi oo dadka ka dhigayan inay baaba'aan. Waana sababta aad ugu waajibantahay inaad u wada duceysid kuwa amarka leh oo dhan! Haddii aad u duceyn wayside

waxaad fursad siineysa inuu ibliiska awoodahiisa sharka ah ficil geliyo kuna oofiyo falalkiisa sharka ah – wuxuuna waxyaalahaas sharka ah sameynaya adigoo hurdeysid!
Baybalka wuxuu leeyahay ma wanaagsano inaan mar kastaba gunuunacyo kana calaancalno kuwa madaxda ah laakiin waa inaan barakeyno oo aan u duceyno dhammaantoodba. Waa inaan kuwa ina hogaaminayaan mar kastaba ducooyinkeena ku xusuusano si ay u garaan go'aamo xigmadda Ilaah ku jirto uu Ilaah raali ka yahay, haddii ay xaqa ku dhaqmi wayaanna, inaan duceyno si ay u dhacaan oo ay meeshooda u qataan kuwa Ilaah ka cabsanayaan. Ilaah wuxuu raali ka yahay hogaamin arliga barako u ah oo weliba ogolanayayaan in la fidiyo Injiilka. Ma ahan in kuwa hogaaminta hayaan inay xerta ka mid ahadaan laakiin waxay ahaan karaan kuwa ixtaramayaan runta asaasiga ah ee Erayga Ilaah ku saleysan ee u doodeysa xornimada iyo xaqa shaqsiga. Ilaah ku siiyey masuuliyaddaasi aad ugu duceyneysid in hogaaminta Alle ka cabsanayaan cafiisyada hogaanka qabsadan.

Istecmaal xaqnimada aad demokraasiyadda ku leedahay
Kuweena ku dhex nool bulsha ay demokraasiyad ka jirto way fahansan yihiin in tani micnaheedu ku jirto in haddii aan nahay dad qaan gaaray, aan xornimo u leenahay inaan doorano dadka aan rabno inay na hogaamiyaan. Meesha ay ka jirto bulsha dimokraasiyad ku shaqeyneyso, kuwan aan xilka saarnay – kuwa ina hogaamiyaan – waa kuwa jagooyinkaasi ka helay dadka. Waa masuuliyaddeena inaan ku ficiltanno hab dadka istaahilan lagu doorto; dadkaasi la dooranayo oo ah kuwa arliga barakeynayaan oo aan ka leexaneynin inay hergeliyaan doonista Ilaah amaba aan ka hor imaneynin fidinta Injiilka. Haddii ay dawladda tixgeliso sharci Erayga Ilaah khilaafayo, waa inay xerta Ciise ficilgalaan.
Ilaah wuxuu noo xilsaaray inaan ku dhaqqaaqno sadex hab:
1. Waa inaan is hooseysino dabadeetana u *duceyno* kuwa hogaanka hayaan. Ma ahan inaan xumeyno, yasno ama aan nacno iyaga. Waa inaan jeclaano iyaga oo aan u duceyno dhammaantood.
2. Annagoo ah adeegayaasha Ilaah, waa inaan ku hadalno Eraygiisa, si bayaan ah u *canaananno* wax alla wixii aan doonista Eebbe ahayn oo aan ugu jawaabno, "Rabbiga wuxuu leeyahay."
3. Waa inaan istecmaalno xaqnimadeena aan demookraasiyadda ku leenahay oo aan kuwa wax *dooranayaan* ka mid ahaano si aan kuwa aan istaahilin doorasho xaq ah jagada uga qaadno, kuwaasi oo habka ay ku shaqeynayaan tahay mid uu Ilaah raali ka ahayn kuwaasi oo xoogga sarayan inay bulshada ku hogaamiyaan inay ku socoto tariiq ka fogeynayso Injiilka.
Xerta Ciise ma ahan inay siyaasadda wacdiyaan. Waxaan ku waajibannahay inaan ku wacdino Injiilka-warka wanaagsan ee ku saleysan xoreynta kuwa xabisan, saa ay tahayna waa inaanan iska indha tirin dunida agagaarkeena ah. Ilaah farriin ayuu u haya qayb kastoo nolosha ka tirsan wuxuuna noo xilsaaray jiritaanka waddankeena. Markaan waddankeena u duceyneyno, wuxuu sameyn kara muucjiso oo "dadna darajada ayuu ka dejin kara oo kuwa kalena wuu darajeyn kara" (Danyeel 2:21). Marxaladda oo dhan ayuu bedeli kara si kuwa Masiixa macaaradka ku ah ay u ahadaan kuwa uu salkooda ligligma oo ay dadka xor noqdaan oo waxaa fursad lahanayo Ruuxa Quduuska ah oo dad badan u soo jiidaya rumaysadka Ciise.
Waa uun Injiilka, kan ay raacsan yihiin calamooyinka iyo yaababka, kan dumarka iyo raguba u soo jiidan karaan Ciise ee ma ahan nolosha lagu sasabayo siyaasadda iyo fikirka filosoofiyiinta. Waa uun rumaystayaasha uu Ruuxa Quduuska ah ka buuxo oo keliya kuwa dadka ku hogaamin karaan Badbaadiyaya.
Elimas kan ahaa sixiroolaha ayaa badbaadada ka hor istaagay ninkii dan jiraha Saybras ahaa. Sidaa ay tahayna, Bawlos wuu fidiyey Erayga Ilaah oo Elimas waa laga qaaday jagada. Isla

sidaasna waxaa jiraan isbaarooyin ku jira nolosheena ruuxiyanka ama xidhiidhka aan Ilaah la leenahay kuwaasi uu sheeddaanka dhex dhigay bulshooyinkeena, si ay dadka u helin badbaadada uu Ilaah ugu tallo galay. Inta aad duceysaneysid oo aad u hogaansameysid Ruuxa Quduuska ah, waxaad waddo u fureysa awoodda Rabbiga oo kuwa badan barakeyneyso si ay u arkaan in Ciise yahay Rabbigooda iyo Badbaadiyahooda dhabta ah, waxaa kaloo ay fahmayan inuu Ilaah yahay Ilaah wanaag ka buuxo kaasi oo aad u rabo inuu iyaga ka barakadeyo qayb kastoo noloshooda ka tirsan.

EE HADDABA FICIL GELI MASUULIYADDA LAGU SIIYEY OO U OGOLAW RUUXA QUDUUSKA AH EE ILAAH KU HOGAAMIYO INTA AAD U SII DUCEYNEYSID KUWA AMARADA LEH EE HOGAAMINTA HAYAAN, INTA AAD NOLOSHA KALA KULMEYSID QALADAAD IYO XAQ DARRO (WAANA TAN LAGUU XILSAARAY INAAD LA DAGAALANTID), IYO WELIBA MARKA AAD DOORASHO SAMEYNEYSIDBA. QOF KASTOO XERTA KA MID AH WAXAA KU WAAJIB AH INUU DOORASHADA KA QAYB QAATO ILAAHNA KA CODSADO HOGAAMIN UU UGU MUUJIYO QOFKA UU RABO INUU JAGADA DOORASHADA KU GUULEYSTO! ILAAH QORSHA LA YAAB LEH AYUU U LEEYAHAY DAWLADDAADA. DURBABA U RIYAAQ OO RUUXA KU ARAG INUU WADDANKAAGA YAHAY MID BARWAQOOBAY, RUMAYSO WAXA AAD ARLIGA RUUXA KU ARKEYSID, UNA DUCEE WAADNA HELI DOONTA E!